

**WAAD FAHMI KARTAA KITAABKA QUDUUSKA AH!**

***Injiilka Siduu u qoray Bawlos:***

***Rooma***

**BOB UTLEY**

**PROFESSOR KA HERMENEUTICS**

**(FASIRAADDA KITAABKA)**

***TAXANAHA BARASHADA TAFSIIRKA***

***AXDIGA CUSUB, MAJALLADKA, 5***

**BIBLE LESSONS INTERNATIONAL, MARSHAL, TEXAS**

**1998**

**Waxa dib loo hubiyay 2008**

Xuquuqda daabacaadda ©1998 waxa iska leh Bible Lessons International, Marshal, Texas (Dib loo hubiyay 2008). Qayb ka mida kitaabkan sinaba dib looguma soo saari karo siday doontaba ha ahaatee iyadoon oggolaansho laga haysanin daabacaaga.

Bible Lessons International  
P. O. Box 1289  
Marshall, TX 75671-1289  
1-800-785-1005

ISBN 978-0-9661098-3-2

Asal ahaan qoraalka aayadaha loo adeegsaday tafsiirkani waa:

New American Standard Bible (cusboonaysiinta, 1995)

Xuquuqda daabacaadda © 1960, 1962, 1963, 1968, 1971, 1972, 1973, 1975, 1977, 1995 waxa leh Lockman Foundation

P. O. Box 2279

La Habra, CA 90632-2279

Qaybinta baaragaraafyada iyo warbixihina kooban iyo sidoo kale cibaarooyinka lasoo xushay waxa lagasoo qaatay:

1. Greek New Testament, Fourth Revised Edition, xuquuqda daabacaadda © 1993 Deutsche Biblegesellschaft, O Stuttgart. Waxa lagu adeegsaday idan qaadasho. Xuquuqda oo dhammina way dhowrantahay.
2. New King James Version, xuquuqda daabacaadda ©1979, 1980, 1982 waxa leh Thomas Nelson, Inc. waxaana lagu adeegsaday idan. Xuquuqda oo dhammina way dhowrantahay.
3. New Revised Standard Version, xuquuqda daabacaadda ©1989 waxa iska leh Division of Christian Education of National Council of the Churches of Christ ee U. S. A. waxaana lagu adeegsaday idan. Xuquuqda oo dhammina way dhowran tahay.
4. Today's English Version waxa lagu adeegsaday idanka cidda xuquuqda daabacaadda iska leh, American Bible Society, ©1966, 1971. Waxa lagu adeegsaday idan. Xuquuqda oo dhammina way dhowrantahay.
5. Jerusalem Bible, xuquuqda daabacaadda ©1966 waxa leh Darton, Longman iyo Todd, Ltd. Iyo Doubleday, qaybinta Doubleday Dell Publishing Group, Inc. waxa lagu adeegsaday idan. Xuquuqda oo dhammina way dhowran tahay.

[www.BibleLessonsIntl.com](http://www.BibleLessonsIntl.com)

[www.freebiblecommentary.org](http://www.freebiblecommentary.org)

## **Dib u cusboonaysiinta New American Standard Bible -1995**

### **Waxa fudud akhrintiisa:**

- ▣ Aayadaha ku qornaa Ingiriisida hore sida “thee’s” iyo “thou’s” iwm. Waxaa lagu beddelay Ingiriisi casri ah.
- ▣ Erayada cibaaroyinka sida qaldan loo fahmi karo isla markaana ay ka midka yihiin kuwii 20 sano ee u danbeeyay waxaa iyana lagu beddelay Ingiriisida wakhti xaadirkan.
- ▣ Aayadaha erayadoodu adag yihiin iyagana waxa lagu tarjumay Ingiriisi dabacsan.
- ▣ Weedhaha ku bilaabmaya “And” iyagana waxa dib loogu tarjumay Ingiriisi ka fiican iyada la aqoonsanayo luqadihii hore iyo Ingiriisida casriga ah. Giriiggii asalka ahaa iyo Cibraaniyadu may lahayn xarako sida Ingiriisida oo kale, iyadoo xaalado badanna Ingiriisida casriga ahna xarakadu ay noqonayso mid bedesha “And” asal ahaan. Xaalado kale ayaa, “And” ayaa waxa lagu tarjumay erayo kala duwan sida “then” amaba “but” sida loogu magacaabay qoraalka, marka eraygu asal ahaan luqada ka oggolaanayo tarjumaadda.

### **Ka saxsan sidii hore:**

- ▣ Baadhitaannada wakhti xaadirkan lagu sameeyay qoraal gacmeedyadii ugu horreeyay ee ugu wanaagsanaa luqada Giriigga ee Axdiga Cusub dib ayaa loogu fiirsaday iyadoo kuwo ka mida aayadahana dib loogu cusboonaysiiyay ujeedada muhiimka ah ee ku sugan qoraal gacmeedyadii hore.
- ▣ Aayadaha siman waa la is barbar dhigay waana la muraajaceeyay.
- ▣ Falalka haysta macnayaasha badan waxa dib loogu tarjumay qoraallada ugu haboon ee loo adeegsaday qoraalka.

### **Iyadoo Ilaah haddana NASB**

- ▣ Cusboonaysiinta NASB maaha beddelitaan ah xagga tarjumaadda. NASB ga asalka ahi wuxuu tijaabinayaa wakhtiga iyada oo beddelkuna uu ku kooban yahay aqoonsashada heerka lagu saleeyay New American Standard Bible ka.
- ▣ Cusboonaysiinta NASB wuxuu sii wadaa NASB tarjumaaddiisa asalka ah ee Giriigga iyo Cibraaniga iyadoon lala kaashanayn beddelka qoraalka lagu saleeyay ujeedada Lockman Foundation’s Fourfold.
- ▣ Tarjumayaasha iyo dadka lagala tashaday cusboonaysiinta NASB waa culimmo ku takhasay Kitaabka luqadihiisa, fiqiga, amaba heerarka aqooneed ee kale, waxaanay kasoo kala jeedaan madaahiib kala duwan.

### **Sii socoshada dhaqanka**

NASB ga asalka ah waxa lagu qiimeeyay inuu yahay Ingiriisada ugu saxsan ee tarjumaadaha Baybalka. Tarjumaadaha kale ee wakhtigan jooga waxay mararka qaar sheegtaan inay yihiin kuwa ugu saxsan ee akhriska fududna leh, qof kasta oo si faahfaahsan u akhriyaa wuxuu ogaanayaa inaanay ahayn kuwo is waafaqaya. Mararka qaarna waxay adeegsadaan inay erayada ku sameeyaan kuwooda u gaarka ah iyagoo markaasina yaraynaya akhritaanka. Haddaba, erayada oo lagu cabiro kuwa aan asalka ahayni maaha mid xun dabiici ahaan, waxaanay kala saari kartaa macnaha iyo ujeedada iyadoo ay ku salaysan tahay sida tarjumaannadu u fahmaan macnaha. Ugu dambayntii adeegsiga erayada aan asalka ahayni waxa weeyi mid aad loogu adeegsado fasiraadaha Kitaabka sida tarjumaadaha loogu adeegsado oo kale. Cusboonaysiinta NASB dhaqankiisa ah inuu yahay Baybal tarjumaaddiisu saxsan tahay ayaa waxay muujinaysa waxa hubaashii ay yidhaahdeen qoraal gacmeedyada asalka ahi, mana aha waxa tarjumaanku u malaynayo in macnohoodu yahay.

*Majalladka Kitaabkan waxa nafhoodu u huray oo iga caawiyay  
Saaxiibadayda cajiibka leh, kalkaaliyaal, dadka aan wada shaqayno, iyo farxadda noloshayda,  
Oo ah xaaskayga*

**Peggy**

*Oo igu dhiirri gelisay iguna garab gashay  
Shaqada Ilaah iigu yeedhay ee hadiyadda iiga dhigay.*

# TUSMADA BUUGGA

Xarfaha Lasoo Gaabsaday Ee Lagu Dhex Adeegsaday Tafsiirkan .....	i
Rayada Qoraaga: Sidee Tafsiirkani Kuu Caawin Karaa? .....	iii
Hogaamiinta Wanaagsan Ee Kitaabka Arkhrintiisa: Xaqiiqa Raadinta Shakhsi Ahaaneed .....	v
Hordhac .....	1
Rooma 1 .....	5
Rooma 2 .....	36
Rooma 3 .....	49
Rooma 4 .....	64
Rooma 5 .....	75
Rooma 6 .....	89
Rooma 7 .....	99
Rooma 8 .....	111
Rooma 9 .....	138
Rooma 10 .....	157
Rooma 11 .....	168
Rooma 12 .....	180
Rooma 13 .....	197
Rooma 14 .....	214
Rooma 15 .....	226
Rooma 16 .....	239
Lifaaqa Kowaad: Qeexitaanka Kooban Ee Naxwaha Erayada Giriigga .....	254
Lifaaqa Labaad: Canbaaraynta Qoraal Ahaaneed .....	263
Aaqa Saddexaad: Macnaha Erayada Cusub .....	266
Lifaaqa Afraad: Odhaah Caqiido Ahaaneed .....	276

## TUSMADA MAWDUUCYADA GAARKA AH

Dirista ( <i>Apostellō</i> ), 1:1 .....	7
Wacdintii Kaniisaddii Ugu horraysay, 1:2 .....	8
Wiilka Ilaah, 1:3 .....	9
Jidh ( <i>Sarx</i> ), 1:3 .....	11
Magacyada Ilaahnimada, 1:4 .....	12
Mawduuc gaar ah: aaminis, isku hallayn, rumaysad, iyo rumaysad yeelashada axdiga hore dhexdiisa (תּוֹרָה) .....	15
Wacdinta Boobka, 1:5 .....	18
Loo yeedhay. 1:6 .....	19
Quduusiinta, 1:6 .....	20
Aabbaha, 1:7 .....	20
Xaqnimada, 1:17 .....	24
“Runta” marka la eego qoraallada Bawlos, 1: 18 .....	27
Beddelitaanka ( <i>Ptheirē</i> ), 1:23 .....	30
Qalbiga, 1:24 .....	30
Weliihiid (Erayada Giriigga), 1:25 .....	31
Aamin, 1:25 .....	31
Liwaadka, 1:26,27 .....	33
Sharka iyo khayrka, 1:28-31 .....	33
Adeegsiga Bawlos ee erayga <i>Huper</i> , 1:30 .....	34
Towbad keenka, 2:4 .....	38
Takoorka, 2:11 .....	41
Faanitaanka, 2:17 .....	45
Erayada Giriigga ah ee “Tijaabinta”, 2:18 .....	45
Burin ( <i>katargeō</i> ), 3:3 .....	51
Ammaanta, 3:23 .....	57
Cadaymaha Axdiga Cusub ee badbaadada qofka, 3:24 .....	58
Madax furashada, 3:24 .....	58
Rumaysad, 4:5 .....	67
Shaabad, 4:11 .....	69

Damaanad qaad, 4:16 .....	72
Nabad, 5:1 .....	77
Taagan (Histēmi), 5:2 .....	78
Dhibaatada, 5:3 .....	80
Ka dhex talinta boqortooyada Ilaah, 5:17,18 .....	86
Baabtiiska, 6:3-4 .....	91
Quduusnaanta, 6:4 .....	92
Caynad ( <i>Tupos</i> ), 6:17 .....	97
Ammaanta, Mahad naqista iyo Tukashada Bawlos siinayo Ilaah, 7:25 .....	109
Masiixa iyo Ruuxa, 8:9 .....	117
Saddexmidnimada, 8:11 .....	118
Dhaxalka Rumaystayaasha, 8:17 .....	122
Ilaaha Qayraadka Dabiiciga ah, 8:19 .....	124
Rajada, 8:25 .....	127
Ubaahnaanta sii socoshada, 8:25 .....	128
Shaqsi ahaanshaha Ruuxa, 8:26 .....	130
Curadka, 8:29 .....	132
Doorasho/ horay loo doortay iyo baahida isla simidda barashada wax ku saabsan jiritaanka Ilaah, 8:33 .....	133
<i>Archē</i> , 8:38 .....	136
Salaadda dhexdhexaadinta ah, 9:3 .....	141
Habaar ( <i>Anathema</i> ), 9:3 .....	144
Axdi, 9:4 .....	145
Kuwii hadhay, saddex dareen, 9:27-28 .....	153
Dhagax geeseedka, 9:33 .....	155
Isudhiibid ( <i>Hupotassō</i> ), 10:3 .....	159
Erayada Giriigga ee Falkla jooga ah ee loo isticmaalo badbaadada, 10:4 .....	160
Qirashada, 10:9 .....	162
Magacyada Rabbiiga, 10:9 .....	162
Ciisaha Naasateet, 10:13 .....	164
Marsoodiga, 11:25 .....	176

Quduus, 12:1 .....	182
Facan iyo faca iman doona, 12:2 .....	183
Dib u cusboonaan ( <i>Anakaninōsis</i> ), 12:2 .....	184
( <i>Thelēma</i> ) ILAAH Doonista Ilaah, 12:2 .....	185
Waxsii sheegidda Axdiga Cusub, 12:6 .....	187
Naxariis iyo Daacadnimo, 12:8 .....	190
<i>Koinōnia</i> , 12:13 .....	193
Dawladda Aadanaha, 13:1 .....	199
Aragtiyadii Bawlos ee Sharcigii Muuse, 13:9 .....	204
Ogaysiis ku saabsan Baxniintii, 20, 13:15,17 .....	205
Itaal yaraanta, 14:1 .....	216
Masiixiyiintu ma is xukumi karaan? 14:13 .....	220
Boqortooyada Ilaah, 14:17 .....	222
Dhisidda, 15:2 .....	228
Badan ( <i>Perissevō</i> ), 15:13 .....	231
Masiixiga iyo gaajada, 15:26 .....	236
Haweenka iyo Baybalka, 16:1 .....	241
Kaniisad (Ekklesia), 16:1 .....	243
Sharka shakhsi ahaaneed, 16:20 .....	248
Daa'im 16:26 .....	252



## **XARFAHA LASOO GAABSADAY EE LAGU DHEX ADEEGSADAY TAFSIIRKAN**

AB	Anchor Bible Commentaries, ed. William Foxwell Albright iyo David Noel Freedman
ABD	Anchor Bible Dictionary (6 vols.), ed. David Noel Freedman
AKOT	Analytical Key to the Old Testament waxa qoray John Joseph Owens
ANET	Ancient Near Eastern Texts, James B. Pritchard
BDB	A Hebrew and English Lexicon ee Axdiga Cusub, oo uu qoray F. Brown, S. R. Driver iyo C. A. Briggs
BHS	Biblia Hebraica Stuttgartensia, GBS, 1997
IDB	The Interpreter's Dictionary of The Bible (4 vol), ed. George A. Butrick
ISBE	International Standard Bible Encyclopedia (5 vol.), ed. James Orr
JB	Jerusalem Bible
JPSOA	The Holy Scriptures According to the Masoretic Text: A New Translation (The Jewish Publication Society of America)
KB	The Hebrew and Aramaic Lexicon ee Axdiga Hore oo uu qoray Ludwig Koehler iyo Walter Baumgartner
LAM	The Holy Bible From Ancient Eastern Manuscripts (the Peshitta) oo uu qoray George M. Lamsa
LXX	Septuagint (Greek-English) waxaana leh Zondervan, 1970
MOF	Tarjumaadda Cusub ee Kitaabka Quduuska ah, waxaana leh James Moffatt
MT	Masoretic Hebrew Text
NAB	New American Bible Text
NASB	New American Standard Bible
NEB	New English Bible
NET	NET Bible: New English Translation
NIDOTTE	New International Dictionary of Old Testament Theology and Exegesis (5 vols.), ed. Willem A. VanGemeren
NRSV	New Revised Standard Bible
NTV	New International Version
NJB	New Jerusalem Bible

OTPG	Old Testament Parsing Guide by Todd S. Beall, William A. Banks iyo Colin Smith
REB	Revised English Bible
RSV	Revised Standard Version
SEPT	The Septauging (Greek-English) waxaana leh Zondervan, 1970
TEV	Today's English Version from United Bible Societies
YLT	Young's Literal Translation ee Kitaabka Quduuska ah, waxaana qoray Robert Young
ZPBE	Zondervan Pictorial Bible Encyclopedia (5 vols.), ed. Merrill C. Tenney

## **RAYADA QORAAGA SIDEE TAFSIIRKANI KUU CAAWIN KARAA?**

Kitaabaka habka loo turjumo waa mid ku haboon xagga Ruuxa kn oo ah mid la fahmi karo waxaa jira qoraalo beryo hore la qoray. Sidaas aawadeed ayaa ayey fariniintani ilaahay uga timi si aan taan u fahana waa mid ku haboon xiligan xaadirka ah.

Haddaba habkan ruuxiga ah waa mid adag, oo ay adag tahay inaynu qeexno. Miyaanay ahayn inaynu u qayshano oo uu Rabbigu inoo furo tan. Waxaa waajiba inaan u gaajoono (1) Isaga (2) Inaan isaga garanayno iyo (3) Inaan Isaga u adeegno. Habkani waxa uu inoo jahaynayaa salaada, iyo qirasho si buuxdana ay nafteenu isku bedesho. Haddaba wax sahlan ma aha habka ruuxyada loo macnaynaayo, laakiin waa maxay daacadnimada, ay ka fahan san yihiin Kirstaanka aan Ilaah aaminsanayn inuu Kitaabku yahay mucjiso la fahmi karo. waa arrin caadiya hab ahaan in si fudud looga faaloodo tan. Waxa inagu waajiba inaan ku kalsoonaano oo aynaan ka cabsan qoraalada mana aha inay saamayn inagu samayso shiqsiyadeenu amaba hadhabta aan haysano inaan ku salayno. Inagu dhammaanteen waxa aan leenay taariikh . Ma jir mid inaga mid ah oo diidan, ama dhex dhexaad ka ah sida wax loo turjumo. Qoraaladani waxa ay inoo ogolaanayaan inaan si tacadar leh u eegno xaalada ahaan iyo hab ahaanba waxaana jira saddex ghab oo wax loo turjumo tiirar ahaan taasi waxa ay dhisaysaa ama inaga caawinaysaa sidii aan uga guulaysan lahayn waxa inaga inagu salaysan.

### **Qodobka Ugu Horeeya**

Qodobka ugu horeeyaa waxa weeye inaan garanayno taariikh ahaan xiligii la qoray buugaas ka mid ahaa Kitaabka . iyo weliba meeshii khaaska ahayd taariikh ahaan ee qoraagu xiligaa wax ka qoray. Asal ahaan qoraagu waxa uu leeyahay ujeedo. Fariinta uu gudbinayaa. Qoraaladu inaga inoolama macno aha inaynu ula jeedno waxyaabihii asalka ahaa. Ee ay qoreen qoraayaashii xiligii hore, Isaga ujeedadiisu –ma aha inaga sheekadeena, dareenkeena, dhaqankeena iyo shiqsiyadeena ama waxyaabaha ay u baahan yihiin madhabteenu. –kani waa furaha. Qoraaladu waa inay ku salaysnaadaan wada shaqayn sida wax loo turjumayo. Laakiin turjumaadaha sax ahi waa inay had iyo goorba ay ku habaysan yihiin qoraalkeena. Sida waajibka ah waa inay xidhiidh leeyihiin mid walba oo ka mid ah Kitaabka inay qoraaladaasi isku mid yihiin oo ay leeyihiin hal macne . tani waxa ay la macna tahay wixii asal ahaan uu ka qoray Kitaabka qoraagaasi ee uu u muujiyey Ruuxu hogaamintu ee uu ula xidhiidhay isaga maalmihiisii. Tani waxaa laga yaabaa inay hal macne waxaana suuro gal ah inay jiraan kuwo faro badan oo ay suuro gal tahay qoraaladaasi inay ku kala duwan yihiin, dhaqanka iyo marxalada. Hadaba waxaa waajiba inay qoraaladaasi la xidhiidhaan udub dhexaadka runta ah asal ahaan wixii uu qoray qoraagu. Hadaba sababtaas daraadeed, wax barashadani waxa ay inagu hogaaminaysaa inay qoraaladu ay yihiin kuwo la qaabeeyey waxayna ina siinayaan horu dhaca mid walba oo ka mid ah buugaagta Kitaabka Quduuska ah.

### **Qodobka Labaad**

Qodobka labaadna waa sidii loo cadayn lahaa qoraaladu waxa ay ka kooban yihiin. Mid walba oo ka mid ah buugaagta kitaabku waa qoraal hubaala. Kuwa turjumayaa awood uma laha inay ka jaraan hal arrin tan oo ah run oo qabka ah kuwan kale. Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan si cad u fahno ujeedada laga leeyahay guud ahaanba Kitaabka buugaagtiisa ka hor inta aynaan tujumaado ka bixiin si shiqsiyaada qoraalada qaybahooda. Sida qaybaha khaaska ah-Cutubada iyo sadarada , amaba aayadaha – tan ugalama jeedno waxa uu dhamaan cutubka macnihiisu yahay. Waxaa waajiba dhamaan turjumaadaha inay u socdaan hab sax ah ina eegahyna macnaha ay qabaha kale leeyihiin. Sidaas daraadeed, Wax barashadani waxa ay inagu hogaaminaysaa baadhitaanadu inay yihiin kuwo qaabaysan oo ka caawinaaya ardaydu sidii ay u aqoonsan lahaayeen baadhitaana ugu samayn lahaayeen qaab dhismeedka mid walba oo ka mid ah qoraalada cutub iyo sadarba. Safarada iyo cutubada kala qaybintoodu maha loo muujiyey. Laakiin waxa ay inaga caawinayaan inaga sidii aan u aqoon san lahayn qaybaha.

Turjumaadaha waa isku mid sadar ahaan. –ma aha weedh , erayo, ama habka erayga – kuwani soo socdaa furaha qoraaga Kitaabku uu micne ahaan ula jeedo. Sadaradu waxa ay ku salaysan yihiin in lagu aqoonsado mawduuca. Inta badana kuwaas waxaa loogu yeedhaa qaybo ka mid ah mawduuca. Eray kasta, weedh, ama jumlad ba waxa ay la xidhiidhaan si kastaba oo ay tahay sidii aynu kuwan ugu aqoonsan lahayn. Waa ay xadidan

yihiin, kana weyn yihiin, sharaxaadahooda, a maba su, aalahooda. Furaha runta ah ee si quman wax loo sharxi karo waa in la raacaa wixii uu asal ahaan qoray qoraagu iyada oo la fiirinaay sadarka ka sadar kuwan oo ku salaysan waxa ay qoraaladu leeyihiin cutubada kuwaas ayaa waxa ay ka dhigayaan Kitaabka buugiisa. Waxbarashadani waxa ay inagu sidii ay inoogu sahli lahayd una qaabayn lahayd inay ardayda ka caawiso marka ay is bar bar dhiga samaynaayan Ingiriisiga casriga ah turjumidiisa . hadaba turjumaadahaas waa la doortay sababta oo ah waxaa ka shaqeyey tujumayaal kala duwan xagga fekeradaha isla markaasna waxay xambaarsan yihiin aragtiyo kala duwan:

1. United Bible Society's Greek qoraadalani waxa ay u dhowan yihiin daabacaadii afraad (**UBS**) Qoraaladaasi waxa ay ahaayeen sadaro kuwaas oo ahaa qaar casriya oo ay qoreen culumo.
2. New King James Version (NKJV) waxa uu ahaa eray -ka eray qoraaladaas oo ay turjumaadahoodu ku salaysanaayeen Greek kuwaas oo gacanta lagu qoray sida dhaqanku ahaa qoraalkaasna sidaas lagu aqbalay. Kuwani waxa ay ahaayeen sadaro la qaybiyey aan kuwana kuwa kale la xidhiidhin turjumaadahoodu. Hadaba in badan inagama caawin doonaan ardayda inay arkaan ama aqoonsadaan mawduucyadan.
3. New Revision Standard Version (NRSV) waxa uu u cadaynayaa erayba –eray turjumaadihiisa. Tani waxa ay tahay hab kaas oo tilaamaya faraqa u dhexeeya labadan casiriga ah ee qoraaladan. Iyada oo aad u tahay mid aad faa,iido u leh sidii aan u aqoonsan lahayn qaybta.
4. Today English Version (TEV) Waxa weeye mid aad u la yaab leh oo ku haboon tujumaada oo lagu daabay United Bible Society. Tani waxa ay cadaynaysaa in Kitaabka sidaasi loo turjumay marka aan eegno Ingiriisiga casriga ah oo la akhriyi karo . amaba ka hadlaaya uu fahami karo macnaha qoraalada Greek. In badan, oo khaas ah sida Injiilada waxa loo qabyiyaa sadaro mark la eego ka akhinaaya halkii loo eegi lahaa qayb. Waxa jir hab cusub kaasna waa NVI. Ujeedooyinka laga leedahay turjumadaha , kuwami ma aha kuwo ina caawin kara. Waa arin xiiso leh inaan ogaano labadaba UBS iyo TEV inay yihiin kuwo si isku mid ah loo daabacay, ilaa iyo hadana sadaradu waa ay kala duwan yihiin.
5. Jerusalem Bible (JB) waxa weeye wax tar ah oo ku hoon oo lagu turjumay afka Franch Catholic . waxa weeye mid aad inooga caawinaaya marka aan bar bar dhino marka la fiiriydo sadarada kuwaas oo ka yimi fekeradaha European ka.
6. Waxa la daabacay qoraaladan sannadii 1995 iyada oo ay ku habaysnaayeen New American Standard Bible (NASB). Kaas oo ahaa mid eray eray loo turjumay. Iyada oo ay ahaayeen aayada aayad sida loo turjumayo sadaradan.

### **Qodobka Saddexaad**

Qodobka saddexaad waxa weeye akhinta Kitaabka iyo turjumaadaha kala duwan si aynu ugu dhegno sida u ugu balaadhna ee suuro galka ah ee aan u helayno micnaha (luqad jirta oo hore) Taas oo laga helaayo erayada Kitaabka ama sadarada dhuqoodu leeyihiin. In ta badan erayga Greek waa la fahami karaa iyada oo siyaabo kala duwan loo fiirinaayo. Kala duwanaasha turjumaadahani waxa ay ina siinayaan fekerado iyo inay inaga caawiyaan inaan aqoonsano sharaxnana Greek qaybaha qoraalada. Kuwaas oo aan ka hor imanayn madhabta. Laakin waxa ay inaga caawinayaan inaga inaan isku dayno inaynu dib ugu laabano qoraaladii asalka ahaa ee ay qalin kooda ku qoreen wixii loo waxyooday qoraayada.

Haddaba fekeradahani waxa ay si deg dega inta badan jid u furayaan sidii ay ardaydu u eegi lahaayeen turjumaadaha. Tan ugalama jeedno inay inoo kala soocayaan, laakiin waxa ay ina siinayaan inaa helo fekerada –aynaan ku wareerin , badanaaba, waxa kale oo jira turjumaado ay suuro gal tahay kuwaas oo aan inaga caawinayn inay yihiin kuwo lagu kalsoonaan karo, wax tarna leh, hadhab ahaan. Tujumaadaha waxaa looga baahan yahay inay lahaadaan macno balaadhan oo isku durbo ridan marka aan eegno kala duwanaanshaha. Inaga oo fiirinayna inaa la ga shakiyin sidii ay ahaayeen qoraaladii hore. Tani waxa ay ina gelinaysa argagax sida ay halkaas in yar oo heshiisa laga helayo kuwa Masiixiyiinta ah kuwaas oo ku doodaaya inuu yahay Kitaabku isha runta.

Qodobadaas oo dhammi waa I caawinayaan inaga si aan uga guulayso in badan inaga sheekadaydii xaalada ahaan I qasbaysay inaan la dagaalamo wax ku saabsan qoraaladii hore. Waxa aan rajaynayaa inay taasi ku caawin doonto barakano ay kuu noqon doonto adiga.

Bob Utley  
East Texas Baptist University  
June 27, 1996

## **HOGAAMIINTA WANAAGSAN EE KITAABKA ARKHRINTIISA XAQIIQA RAADINTA SHAKHSI AHAANEED**

Inagu miyaan awoodnaa inaan runta ogaano? Xaggee ayaynu se ka helaynaa? Miyeynu inagu si caqli gal ah cadanayn karaynaa tan? Misyeey se jirtaa waad cayimani oo ina xadaynaysa? Miyey se carqadalaahaasi ka hor imanayaan nolosheena, iyo caalamkaba? Kuwaasi se nolosheena macno ma u leeyihiin? Maxaynu inagu halakan u joognaa? Xaggee ayaynu se aadaynaa? Su,aalahaasi-Saalahaas waxa is weydiinayo oo dhan dadka waana ta ay ka fekerayaan. Bani-aadanku bilowgiiba waxa ay ahaayeen kuwo caqilileh marka alga soo bilaabo ilaa iyo xiligoodii. (Wacdiyaha 1:13-18; 3\_9-11). Waxa aan xusuusan karaa marii anigu si khiqsi ah aan u sameeyey baadhitaan. Inay tani udub dhexaad u noqotay naftayda. Waxa aan noqday Mid rumaysad ku leh Masiixa markii aan yaraa-waxaana taa saas aas u ahaa calaamadihii markaati kicida oo kuwa kale oo ka mid ahaa qolyskaga. Haddba sidii aan u koray ee aan u noqonaayey qaar gaadh-su,ashan ayaan naftayda weydiinaayey, xitaa sida ay dunidu u korayso. Dhaqan fudud iyo waxyaabaha ay diinahu farayaan ilama siianyo macno marka aan eego waayo aragnimadaydii iyo waxyaabihii aan akhriyey kuwaas oo ku saabsanaa dareenkayga. Xiligaasi waxa uu ahaa xili aad wareersanaa, oo aan keli ahaan baadhitaan ku samaynaayey. Inta badana aan ahaa mid rajo la,aan ah wijigayguna waxa uu ahaa mid xaas xaasiya. Dunidan adage e aan ku noolahay.

Qaar ayaa waxa ay sheeganayaan inay su,aalahaas adag jawaab u ahayaan. Laakin marki aan sameeyey baadhitaan waxa aan helay inay jawaabahoodu ku salaysan yihiin isaga. (1) qof filosofiya (2) kuwii hore dhaqamadoodii (3) waayo aragnimda shiqsiyaadka. Maba (4)Maskax ahaan kuwa daalan. Dad faro badan waxa ay markaati ka yihiin kuwaas oo si jooto ah halkaas ugu noolaa inay bedeshay iyaga qoraalada kitaabku. Hadaba Masiixiyadu, waxa weeye hab cadaymeed rumaydka iyo aaminaada . ma leenahay awood taas oo aan kaga hadli karo su,aalaha aad ku u adag ee ay bani-aadanku is weydiinayaan noloshooda. Ma aha oo kleiya tani inay tahay tan ina siinaysa inaan lahaano qaab wada shaqayn. Laakiin waayo aragnimadu nooca aan u rumaysan nahay Kitaabka kaas ayaa inaga waxa uu ii keenay degenaansho iyo weliba farxad inaga dereenkagaygii.

Waxa aan ka fekeraayey inaan ahaa mid helay udub dhexaadka noloshayda –inuu yahay Masiixa. Sidii aan uga fahmay qoraalada waxa ay ii ahayd farxad. Iyo angia oo dareen aahaan muujiey wixii qalbigu dareemaayey. Hadaba si kastaba ha ahaatee, Ilaa iyo hada waxa aan xusuustaa argagax iyo xanuun markii ay qalbigayga ku soo dhaceen waxyaabo badan oo ku saabsan buugan iyo sidii loo turjumi lahaa iyo kala duwanaantooda . xilyada qaar ayaa Kaniisadaha kuwaas oo isku mid ah ayay xitaa culumadoodu fekeraan . Cadaymaha iyo muujintuba waa kuwo si xoogan loo rumaysan karo inuunu Kitaabku lahayn meel uu ku dhamaado. Laakiin uu yahay uu mid bilow ah . sidee ayaan u kala sooci karaa amba inta aan diido u cadaynayaa is ka hor imaadyada kuwaas oo ku saabsan kala duwaanshaha turjumaadaha iyada oo ay jiraan fariimo kala duwan oo qoraalada ka mid ah. Kuwaas oo ay qaar ku doodayaan inay leedahay xoog lehna in si buuxda loo rumaysto?

Hadaba shaqadan ayaa u noqotay noloshayda hadaf iyo weliba fursadii rumaysadkayga. Waxa aan ogaa inaan rumaysad ku qabay Ciise (1) wuxuuna is siiyey farxad weyn iyo nabad. Aniga naftayda waxaa ku jiray waxoogaa turunturooyina kuwaas oo xidhiidh la lahaa dhaqnkagii (shaqadayda Casriga ah) (2) ka koox ahan shaha iyo iska soo hor jeedida qaabka diimaha ee dunidan (Diiamha dunida), (3) isnacaybka madhabaha. Haddaba inaga baadhitaankaygii waxaa ku jiray daneeno kuwaas oo aan ku guul daraystay sidii aan u turjumi lahaa wax ku saabsan qoraaladii hore. Waxa aan aad ula yaabay markii aan shaaca ka qaday waxyaabo badan oo ku saabsan iniga taariikhdaydii iyo feradaydii. Taasna waxa aan u isticmaalay sidii hanti ianga oo qaybaha kale ku weeraray aniga oo cadaynaaya waxa aan anigu rumaysnahay iskuna qancinaaya. Sidee ayay taasi iigu xanuun badnayd markii aan aniga sidan dareemaayey!

In kasta oo aanan weligay diidin guud ahaanba. Waxa aan noqaday mid awooda inuu si wanaagsan u akhriyo Kitaabka. Waxa aan xadeeyey fekeradahaygii ku was oo aan ku cadaynaayey dadka kale waxa ay aqoon ahaan ka qabaan xiligaas markaas la joogay. Ilaa iyo hadana taas kama aanan madax banaanayn, laakin waxa aan ogsoonaa godolooyinka aan leeyahay. Kuwa turjumaanka ahi inta badan waxa ay yihiin cadowga ugu daran marka la eego inay akhriyaan Kitaabka!

Bal aan halkan idiinku tuso qaar ka mid ahaa waxyaabihii aan ka shakisnaa kuwaas oo igu ka liifay inaan bilaabo akhriska Kitaabka si aad adiguna u akhrido, waxaaba laga yaabaa inaad idiguna tan ila imtixaanto aniga.

## **I. Run kasoo qaadista**

- A. Waxa aan rumaysnaa Kitaabku inuu yahay kan keliya ee la inoo muujiyey xagga muujinta nafta ka inoo miijinayna ee uu ka yimina uu yahay Ilaaha runta ah. Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan ku turjuno iftiinka iyo asal ahaan waxii ay cadeeyeen qoraagu (Waa Ruuxa) in kasta oo bani-aadanka wax qoraa ay leeyihiin sheekooyin kaas ah taariikh ahaan.
- B. Waxa aan rumaysnahay inuu qoray Kitaabka qof isku mid ah-dhaammaan dadkaas! Ilaahay ayaa waxa uu inoo cadeeyey inuu inaga inla hadlay si cad marka aan eegno wax ku saabsan taariikhihii iyo dhaqamada qoraaladoodii. Ilaahay runta ma qariyo-waxa uu doonayaa inaynu fahano! Sidaas daraadeed, waxaa inagu waajiba inaan sida iftiinka maalinta wax u sharaxno sida ay u iftiinto, maha sideena, Kitaabku kama wado inaga wax aan mano u lahayn kuwa aan weli akhriyin amaba aan maqlin. Waxa weeye wax ay fahmi karayaan marka la isku cel celiyo maskada bani-aadanka sida caadiga ah ee ay u isticmaalaan bani-aadanku xidhiidhka hab ahaan iyo xirfad ahaanba.
- C. Waxa aan rumaysnahay Kitaabku inuu cadaynaayo fariinta ujeedada uu ka leeyahay. Ma ha mid isagu is burinaya ama iska hor imanaya qudhisu. In kasta oo aanu ka koobnayn fariimo adag oo aan la fahmi karayn. Ka keliya ee sida wanaagsan Kitaabka u turjumaa waa isla Kitaabka qudhiisa.
- D. Waxa aan rumaysnahay mid walba oo ka mid ah fariimaha (xitaa marka lagu daro wax siisheegida). In ay tahay hal mid ayna leedahay hal fariin oo ay ku salaysan tahay iyada oo la fiirinaayo asal nimadeeda, iyo wixii loo muujiyey qoraaga. In kasta oo aynaan garanayn sida runtii ah sida xaqiiqada ah waxyaabo badan oo ay qoreen kuwii qorayaasha ahaa asal ahaan qoraaladoodii. Waxayaabo badan oo cadaymo ah ayaa halkan la inagu siinayaa.
  - 1. Nooca (nooca qoraalada) xulashada iyo soo jeedinta fariinta.
  - 2. Sheekooyinka iyo qaabkooda ama meelihii khaaska ahaa ee ay ka dhacday wax qoridu.
  - 3. Qoraalada iyo ciwaanada uu buugaasi ka koban yahay sida ugu wanaagsan mid walba qoraalka qaybihiisa.
  - 4. Qoraalada iyo isku dubaridooda (kormarida) iyo sida ay qoraaladu qayba ahaan u xidhiidhaan marka aan fiirino sida ay isula xidhiidhaan dhamaan fariimahani.
  - 5. Waxyaabaha aas aasiga ah naxwaha mustaqbalka ku shaqaynaya ee ay kula xidhiidhayaan fariintooda.
  - 6. Erayada xiligaas la joogo lagu doortay fariinta
  - 7. Hadhxidhaalayaasha fariimaha.


Markii aan soo baranay mid walba gaara ahaan soo aragnay ayaan waxa ujeedada laga leeyahay inga wixii aan ka baranay fariinta. Ka hor inta aan anigu idiin sharxing sida wanaagsan ee loo akhriyo Kitaabka. Bal ii ogalaada inaan kor maro qar ka mid ah habkeena kaas oo maanta la isticmaalo. Taas oo in badan suuro ka dhigtayu habka tujaumaadaha iyada oo tan aan awoodi karo.

## **II. Qaababka aan haboonayn**


- A. Hadii aan iska indho tiro waxa ay qoraladu leeyihiin ee Kitaabka oo aan isticmaalo mid walba oo ka mid ah sadaradiisa, qayb amaba erayo kaas ah sida odhaahtaa oo ah mid runa oo aan la xidhiidhin waxyaabihii uu qoray qoraagu aan u jeedadiisa ahayn.ama ay yihiin xoqaalo dhaadheer. Kuwan in ta badan waxaa loogu yeedhaa “Cadayn qoraalada”
- B. InAga oo iska indho tirayna taariikhda iyo habakeeda xiliyadaas oo buugaas la helay ka soo qaad kaasi inuu ka hadlaayo taariikh wax yarna uu ka sheegaayo amaba aanay jiran waxa taageeraaya qoraalkaas laxftiisa.
- C. Inga oo iska indho tirayna waxayaabaha taariikhiga ah ee buugaagtaas isla markaasna aan akhrino waxa ay ahayd maalin magaaladii uu ku dhasay lagu qoray wargeys. Kaas oo ka hadlaayey Masiixiyiinta casriga ah ee maanta.
- D. Inaga oo iska indho tirayna waxayabaha buugaas ku qoran qoraaladaas oo ah filosooyiyada iyo wax ku saabsan barashada Ilaah. Fariin taasi guud ahaanba lama xidhiidho kuwa mark hore maqla taasina ay tahay asal ahaan wax qayb ka ah wixii uu qoray qoraagu.

E. Inaga oo iska indho tirayna asal ahaan fariintii taas khusaysa sida mid hab uu leeyahay sida uu Ilaah u yaqaan, ama doorasho Mahdab ama. Qoraalo kuwaas oo loo isticmaalo sababo la xidhiidha aawadeed asal ahaan ujeedadii uu lahaayeen qorayaashu si loo tijaabiyo faraiinta. Tani waa qaab inta badan ay raacayaan sida tilamaayo ,marka aad akhrinayso Kitaabka. Taasna waxa ay la micne tahay inaan abuur kuwa ka hadlaaya ee awooda u leh. kuwani inta badan waxa ay la xidhiidhaan sida aan inagu “marka aan akhrino u dareeno ” (Maxay-qoraaladu-aniga macne inoo leeyihiin turjumaadaha).

Ugu yaraan waxaa jira saddex la xidhiidha shaxdan oo laga yaabao inaan ka holeo waxa kasta oo ay qoreen bani-aadanku ayna ku xidhiidheen.



Haddaba markii hore, waxa aan akhrinaynay kuwo kala duwan farsamo ahaan kuwaas oo ay ka halayeen saddexdii arrimood. Laakiin waxa runta ahi waxa ay tahay inay iska cadahay inuu Kitaabku yahay mid la muujiyey, waxana la inoogu cadaynayaa jaantuuskan kaas oo in badan la xidhiidha.



Sida runtii ah dhammaanba saddexdaas arrimoodba waxaa waajiba in ay ka mid yihiin habka wax loo turjumaayo. Iyada oo ay ujeedduna tahay sidii aan u cadayn lahayn. Aniga turjumaadahaygu waxa ay ku cabiran yihiin laba ugu horeeya tusaalayaashii: Asal ahaan wixii uu qoray qoraagu. Angu sida badan waxa aan gaadhy inaan iugu jwaabo aniga oo dhaleecaynaya wixii aan inagu hore baadhitaanka ugu sameeyey. (1) Iswaafajinta ama Ruuxiyanka iyo qoraalada (2) “mid qoraaya ayaa waxa uu ku jawaabay” turjumaadahan (maxay ainga macane ii leedahay). Inaan ku guulaysto talaabo kasta. Waxaa inag inagu waajiba inaan fiirino waxa ay ujeedooyinkeenu yihiin, ee ay ku salaysan yihiin, habka ahaan iyo qoraalada. Laakiin sidee ayaan u fiirin karaa iayga hadii aanay lahayn wax xuduuda inaga turjumaadaheenu, malaha xad, malaha wax u khaas a? Tani waxa weeye hala ay awoodu ka imayso ujeedada qoraalada qaabka u u dhisan yihiin ayaa inaga waxa ay I siinayaan waxoogaa haba kuwaas oo aniga I xadaynaaya sida aan u turjumi laha hadii ay suuro gal tahay turjuuadii dhacday.

Waxaa jira waxyaabo inoo ifiynaaya sida aan wax u sharaxnay marka aan eegno xirfadaheena. Maxay yihiin qaar ka mid waxa wanaagsan ee Kitaabka aan ka akhrino iyo sida ay tujumaaduhu ina tusayaan un badan cadaymaha iyo cawaaqibka.

### III. Qaababka wanaagsan ee suurto galka loona akhrin karo Kitaabka

Haddaba marka aan tan eegno inagu ka ma hadlaayo habka midaysan taas oo loo turjumo qayba ha guud ahaan kuwa isku caynka ah iskuna tiirarka ah kuwaasi waxa ay yihiin dhamamaanba qaar aan laga helayn Kitaabka. Buugga wanaagsani waxa uu si khaas ah waxa ee ugu dhow waa. *How To Read the Bible For All Its Worthy*, by Gorden Fee and Dougl Stuart, aas oo ay daabaceen by Zondervan.

Aniga habkaygu waxa uu ku xooga saarayaa ujeedad akhriyaha marka uu u ogalaado Ruuxa Quduuska ahi kaas ayaa inoo cadaynaya Kitaabka runtiisa. Sida marka ay afar qof akhriyayaan si koox ah. Kan ayaa waxa uu samaynayaa Ruuxa , aas aaskana waxa la akhriyayaa qoraalada, ma aha waxa sare. Tani xitaa waxa ay ka caawinaysaa ka wax akhriyaaya in ta badan waxa ay saamayn ku yeelanaysaa ujeedadeena. Waxa aan malay iyada oo la leeyahay “Kitaanka waxaa laga saaray wax badan oo iftiina ujeedooyinkiisa” n “tan anigu ugala ma jeedno inaynu waxa ka bedelayno ujeedada taas oo ku saabsan sidii ay inooga caawin lahayd waxa barashadeena. Laakiin sidii aan u codsan lahayn xiliga ku quman sida aan iyaga u isticmaalayno.

Waxaa inagu waajiba inaan awoodno sidii aan u taageer lahayn inaga kuwa wax inoo turjuma gaar ahaan kuwaas ah qoraalada laftooda sida loo isticmaalo.

1. Asal ahaan wixii ay qoreen qorayaashu.
  - a-Dhacdiiyinka taariikhda
  - b-Qoraalada iyo juladahooda
2. Asal ahaan Qorayaashu doorashadoodii
  - a. Naxwa ahaan qaabka ay u dhisan yihiin (luqad)
  - b. Ujeedada shaqada laga leeyahay.
  - c. Nooca
3. Inagu qaabka aan u fahano
  - a. Muhiimada tusaalayaasha fariimaha

Waxa la inooga baahan yahay inaynu awoodno keenana sababo iyo feradaha caqli gala inay yihiin waxa aan turjumaynaa. Kitaabku waxa uu yahay isha keliya ee rumaysadkeena sidii aan ugu dhaqmi lahayn. Badanaaba, in ta badan Masiixiyiintu iskuma raacsana waxyaabaha kuwaas oo ah wax aan la baranayo ama ba waa ay ku kala duwan yihiin. Tani waxa ay tahay iyada oo ay naftoodu iska hor imanayaan marka laga hadlaayo muujinta waxa Kitaabka leeyahay. Markaas ka dib kuwa rumaysadka lihi ma awoodayaan inay tan isku raacaan waxa ay ina barayaan iyo waxa ay inaga codsanayaan!

Waxa jirta afar wax oo aan soo akhriyay kuwaas oo inaga siinaya arag ku saabsan turjumaadahan soo socda.

- A. Akhriska ugu horeeya ee wareega.
  1. Marka aad fariin keliyga ka akhrido buug. Mar labaad akhri adiga oo isticmaalaaya turjumaad kala duwan fekerad ahaan.
    - a. Eray-eray (NKJV, NABS NRSV)
    - b. Nooyada kala duwanaanshaha
    - c. Sadarada (Living Bible, Amplified Bible)
  2. Waxa aad eegtaa udub dhexaadka ujeedada marka la bilaabay qoritaanka, iyada oo kuwaas lagu aqoonsanaayo
  3. La diiday (Haddii ay suuro gal tahay) Qyabaha qoraalada, Sida cutubka, sadarka, ama, weedha, taas oo si cad inoogu sheegysa udub dhexaadka ujeedooyinkooda.
  4. Aqoonsiga Qoraalada iyo noocooda.
    - a. Axdiga Hore
      - (1)Sheekada Cibraaniyada
      - (2) Cibraaniyada gabayadoodii (Xigmada iyo qoraalada, Sabuurrada)
      - (3) Gabaydii iyo wax sii sheegidii (ujeedada gabayada)
      - (4) Sharciga iyo furahiisa .
    - b. Axdiga Cusub.
      - (1) Ujeedooyinka (Injiilka sida Falimaha rasuullada)
      - (2) Tusaalayaasha (Injiilka).
      - (3) Waraaqihii
      - (4) apocalyptic-Qoraaladii

B. Akhriska labaad koox ahaan.



1. Waxa aan mar labaad akhriyey buug, inaga oo ka raadinaaya inaan aqoonsado qodobada muhiimka ah ama mawduuca.
  2. Marka aan fiirino inta badan kormarida ee aan si caadiya qoraada u tijaabino si fudud.
  3. Waxa aad fiirisaa ujeedada weydiinta iyo ciwaanka kor marida kuwaas ka baranayno caawinta.
- C. Marka saddexaad ee aan wax akhrinayno koox ahaan.
1. Waxa aad mar labaad akhridaa buuga aad hayso adiga oo ka raadinaayo sidii aad u aqoonsan lahayn sheekooyinka noocooda, inaga oo eegayna goobo kaash ah kuwaas oo uu ku qoran Kitaabka iyo buugaagtiisa.
  2. kor mar guud ku samee badanaa mowduucyada iyo waxyaalaha ay ka hadlayaan
    - a. Qoraaga
    - b. Maalinta
    - c. La helay
    - d. Ujeedada gaar ka ah ee loo qoray
    - e. Noocyada kala duwan ee dhaqamada kuwaas oo la xidhiidha ujeedadeeba aan wax u qornay
    - f. Tiradii iyo taariikhdiid dadka iyo dhacdooyinkoodii
  3. Marka aad fidiso adiga kor maridaada saddarada noocyada qaybaha ee buugaagta aan turjunay. Had iyo goor waxa aan ku aqoonsan karaa qoraalada iyo qaybahooda. Tan waxaa laga yaabaa inaan inay jiraan noocyo badan oo cutibo ahi ama sadaro ah. Tani waxa ay suuro gal kaaga dhigaysaa inaad raacdo wixii uu qoraagu asal ahaan qoray ee suuro galka ahaa iyo qaabayntii qoraalada.
  4. Waxa aad fiirisaa taariikhdaada iyo habkii loo isticmaalay wax barashada inay inaga caawiso.
- D. Akhriskii afraad ee kooxaha
1. Waxa aad akhridaa qoraalada iyo tiradooda kuwaas oo ka soo hor jeeda noocyo badan turjumaado ah.
    - a. eray-eray (NKJV, NASB, NRSV).
    - b. Awood buuxda oo isku mid ah. (TEV. JB)
    - c. Sadarada (Living Bible, Amplified Bible).
  2. waxa aad eegtaa waxa ay leeyiin qoraadu naxwe iyo dhismahiisa .
    - a. Inaan ku celino aaydaha Efesos 1:612, 13
    - b. Ku celinta naxwe ahaan iyo dhisida rooma 8:31
    - c. Dhismaha iyo kala duwanaantooda
  3. Waxa aad taxdaa kuwan soo socda.
    - a. Calaamadaha iyo qaybahooda
    - b. xiliyada aan caadiga ahayn
    - c. Muhiimada iyo dhismaha naxwaha.
    - d. erayada adage e khaas ka ah. Sida ficilada, iyo odhaayada.
  4. Adiga oo eegaaya kuwa ku haboon tusaalooyinka iyo fariimaha
    - a. Waxa aad fiirisaa cadaynayana fariimaha iyo wax barida adigu mawduucii aad soo isticmaashay.
      - (1) (habka barsahada Ilaah) buugaagtiisa
      - (2) Tirooyinka Kitaabka
      - (3) Caalamadaha
    - b. Waxa aad eegtaa qoraalada aad ku biirinayso mawduucaaga. Kuwo faro badan oo run ah waxa ay u taagan yihiin is famid la,aan ka imanaaya kuwo badan oo Dariiqooyinka ah sidii loo cadayn lahaa -qoraalada qaar ka Kitaabka ka mida ayay ka muransan yihiin. Kitaabka guud ahaan waala inoo muujiyey. Waxaana waajiba inaan dhamaystiro fariinta si ay fariinta iyo qoraaladu ay u noqdaan kuwo isku miisaaman marka aan eegno turjumaadaheeda.
    - c. Waxa aad fiirisaa tusaalayaasha kuwaas oo ku yaal hal buug , oo mid qoraa ahi qoray, isku noocna ah. Kitaabku waa waxa ugu wanagsan ee aan turjuno sababta oo ah waxaa tan qoray hal qoraa. Xagga Ruuxa.

5. Waxa aad isticmaashaa waxbarashada taas oo kaa caawinaysa adiga baadhi taankaaga marka aan eegno taariikhaha iyo meelihii ay ka dhaceen
  - a. Barashada Kitaabka
  - b. Buuga laga baadho Kitaabka , buugaagta gacanta, iyo qabka kale qorida loo isticmaalo.
  - c. Kitaabka iyo horu dhaciisa
  - d. Kitaabka iyo qoraaladiisa (marka arrintan eegno waxa aad ka baranaysaa, taas oo u ogolaanaysa wax ay bulshadu rumaysan yihiin, xiligii hore iyo xiliga la joogo, sidii loo caawin lahaa loona saxi lahaa qof ahaan wixii aad soo baratay).

#### **IV. Dabaqida fasiraadda Baybalka**

Haddaba marka aan tan eegno waxa aan dib ugu laabanaynaa qoraaladeena. Waxayna kugu qaadanaysaa waqti sidii aad u fahmi lahayd asal ahaan waxa ay qoraaladaasi leeyihiin hab ahaan. Iminka waxaa loo baahan yahay inaad naftaadu tan ku dhaqanto. Iyo dhaqankaaga. Waxa aan cadaynkaraa awooda uu Kitaabku leeyahay “inaan fahano waxa ay leeyihiin qoraala asalka ah ee uu qoraagu yidhi maamihiisa , inaguna aan ku dhaqmano maanta runtaas ”

Qoraaladaada waxaa waajiba inay raacdo turjumaadaha kuwaas oo ahaa wixii uu asal ahaan qoray qoraagu waa inay labaduba waqtigaas wixii suuro gal ahaa. Kuma salayn karo Kitaabka fariintiisa marka aan eegno maalmahaas aan inagu jooganay. Ilaa iyo inta aan ka ogaanayno waxa ay ina leedahay inaga maanta. Fariibta Kitaabka ulama jeedno waxa aan weligeed macno lahayn!

Waxa aad war bixinka bixinaynaa kormarida, eenaga oo eegayna sadarada habkisa (akhriska koox ahaan 3) tani ma tahay hogaamintaada

Qoraaladu waxaa waajiba in la sameeyo saddaradeeda habaysan, kani ma aha erayga habkiisa. Erayadu waxa ay la micno yihiin wax keliya oo ku saabsan qoraalada. Weedhuhu waxa ay leeyihiin macne keliya qoraaladaas iyaga ah, sadarku waxa uu leeyahay macne iyada oo la eegaayo qoraaladu waxa ay leeyihiin. Qofka keliya ee kaas oo ah mid loo waxyooday kaas oo ku hawlan turjumaadaha habkii uu u qoray asal ahaan qoraalada. Waxa keliya oo aan raacaynaa isaga hogaamintiisa iyada oo uu ka buuxsamaayo Ruuxa Quduuska ahi. Laakiin ka buuxsigu ma aha muujin. Haddii aan nidhaahno “tan waxaa yidhi Sayidka” waxaa inagu waajiba inaan ku tiirsanaano asal ahaan wixii uu qoray qoraagaasi macne ahaan. Qoraaladeenu waxaa waajiba inay la xidhiidhaan aasa taas waxa ay ina leedahay ujeedada guud ee dhammaan la qoray. Habka qoraalada ku salaysan yihiin qayb ahaan iyada oo uu sadarada hab ahaan marka aan fiirino sidii loo horu mariyey.

Looma baahna inaan u ogolaano arrimaheena maabta inaan ku turjuno Kitaabka! Kiabaabka qudhiisa aan u ogolaano inuu hadlo.! Waxaa laga yaabaa inaan kaa codsano inaga oo sawir ka qaadanayna tiirarka ay qoraaladu leeyihiin. Kuwaas oo taageeraaya hadii ay dhacsan yihiin qoraaladaasi kuwaas oo taageeraaya tiirarkan. Sida runtii ah, xiliyo faro badan ayaa udubdhecaadkeena ay sidan ahaayeen “inaga” Tiirarkeena –ma aha udub dhexaadka tiirarkeena.

Inaga oo ku salaynayna Kitaabka. Waxaa aad u muhiima inaan xusuusano tan. (inaga oo aqbalayna wax sii sheegida). Hal mid oo leh hal macne kaas oo ahaa kuwo dhacay kaas oo inta badan ka mid ahaa qoraalada Kitaabka. Macnahani waxa uu la xidhiidhaa ujeedada asalka ah sidii uu ula jeeday qoraagu ee uu inoo cadeeyey. Dhibaatooyinkii xiligasi ay iyagu joogeen ayaa mihiisii. Kuwo faro badan waxaa suuro gal u ahaa in la qaybiyo qoraalada macnahooda tan ooh al macno ah lahayd. qoraaladaasi waxa ay ku salaysan yihiin kuwaas oo aan helay, baahiyahoodu waa inay la xidhiidhaan wixii uu asal ahaan qoray macne ahaan qoraagu.

#### **V. Saamaynta Ruux ahaaneed ee fasiraadda**

Marar hore ayaan waxa aan ka soo hadlay qoraalada iyo sida ay suuro gal u yihiin marka aan fiirino habka aan u turjuno qoraalada. Iminka waxa aad ii ogolaataan inaan ka hadlo waxyaabaha xagga Ruuxa ku saabsan ee turjumaadaha. Kuwan soo socda ayaa waxa ay ka fiirinaynaa shax taas oo inaga inaga caawinaysa.

- A. Waxaad weydiisataa inuu Ruuxu ku caawiyo (cf. 1 Korintos 1:26-2-16).
- B. Waxa aad u si khaas ah si dembiyaada loo cafiyo lagaagna nadiifiyo dembiyada aad garanayso (cf, 1 Yooxanaa 1:9).
- C. Waxa aad u tukataa wax weyn ee aad doonayso sidii aad u ogaan lahayd Ilaah.(cf, Sabuurka 19:7-14; 42:1 ff; 119:1ff).

- D. Waxa aad ku salaysaa arag cusub si deg dega qaab nololeedkaaga.
- E. Waxa aad ahaataa mid is hoosaysiia waxna baran kara

Aad ayay u adag tahay inaad ilaaliso isu dheeli tirka kaas oo u dhexeeya habka suuro galka ah ee Ruuxa iyo hogaamintiisa Ruuxa Quduuska ah. Kuwan soo socda ayaa aniga waxa ay iga caawinayaan inaan isu dheeli tiro labadan.

- A. Waxa aan ka soo qaadanay James Sire, *Scriptures Twisting* , pp. 17:18:

“Qirashadu waxa ay ka timaadaa Ilaahay dadkiisa ama aha waxa uu dooranaayo ruuxu. Hadaba ma jiro hogaamiye taas oo lagu kala soocaayo Masiixiyiinta marka ay eegno Kitaabka. Lama kala saari karo ma na jiraan dad kuwaas oo xaq u leh inay si sax ah u turjumaan kuwaas oo ay waajib tahay inay inoo miyaadaan. ” Haddab sidaas daraadeed, marka uu ruuxa quduuska ahi siinaayo hadyad khaas ah amaba xigmad waxa aan eegaynaa aqoonta iyo waxa ay inoo tilaamayaan ruuxyadu. Calaamadan ma uu siinin oo keliya Masiixiyiinta inay noqadaan kuwa kale ee awooda u leh inay turjumaan Isaga eraygiisa. Tani waxa ay tahay in mid walba uu dadkiisa barto. Oo ay xukumaan ay eegaan isaga qoraaladiisa Kitaabka kuwaas oo u taagan kuwii uu Ilaahay siiyey awoodiisa xitaa kuwa uu isagu siiyey doorashada khaaska ah. Inay soo koobaan odhahaas waxa aan anigu samaynayaa inaan buugan ka soo saaro. Kitaabku miyuu yahay mid sax ah oo uu Ilaahay u muujiyey bani-aadankiisa oo dhan. Taasi waa inagu awood buuxda oo aan leenahay wax kasta oo ku saabsan waxyaabahan aan ka soo hadalay. Taasi guud ahaanba ma aha wax qarsoon laakiin kuwan si cad in loo fahmi karo. mid walba oo ka mid ah dadka caadiga ah dhaqan kasta oo ay haystaan”

- B. Keirkegaard, waxa uu helay in Bernard Ramm *Protestant Biblical enterparation*, p. 75:

Marka aan fiirino Keirkegaard naxwahiisa, iyo waxyaabihii aan ka soo baranay taariikhda Kitaabka. Waxa weeye mid ay suuro gal u tahay laakiin aas aas ahaan ah in si run ah loo akhriyo Kitaabka. “U akhri inuu Kitaabku yahay *Ilaahay eraygiisa*” Waxaa waajiba inuu mid waliba u akhriyo isaga qalbigiisa iyo weliba afkiisa. isaga oo isticmaalaaya maskaxdiisa aadna ugu baahan. Isla markaasna wadahalal la yeelanaaya Ilaahiisa. Haddaba haddii aad Kitaabka u akhrido si doqon nimo ah aan danayn ma aha oo keliya inay akhriyaan erayga Ilaahay kuwa aqoonyahanada ah. Sida uu mid u akhrinaayo sidii warqad jacal ah oo kale “ayaa mid kalena waxa uu akhrinayaa sidii erayga Ilaah”.

- C. H. H Rowley *the relevance of the Bible* p.19.

Ma mid badanaa si caqliyana u fahmi kara Kitaabka, si kastaba ha ahaatee waa aan dhamaynay. Ma awoodaan dhammaan habkan. Iskama indho tiri karo fahamida caynkan ah. Tani waxa ay tahay mid khaas ah inaan ka haysano fahan dhamaystiran. Laakiin waxaa waajiba inay inagu hogaamiso qananimda xagga Ruuxa buugan isaga ah hadii uu dhamaystirmo. Isla markaasna aan ka fahano xagga Ruuxa inuu kani ka weyn yahay wax kuwa caqliga leh si lagama maarmaana u toosinaaya. Arrimaha xagga ruuxiga cadaynkaraaya. Waxa ay u baahan yihiin ardayda marxalad ay ku helayaan ruuxa. Iyo oo si kulul u raadinaaya sidii ay Ilaah u heli lahaayeen isaga oo isagu qudhiisa u qayshanaaya, haddii uu isagu dhaafo wax ka sareeya baradashadiisa . iyo qani nimadiisa hoose kani waxa uu yahay buuga buugaagta ugu sareeya”

## VI. Qaabka Tafsiirkan

*The study guide commentary* Waxa ay kuu qaabaynaysaa sidii ay kaaga caawin lahayd sidii aad u soo ban dhigi lahayd turjumaadahaaga sidan soo socota.

- A. Marka aan waxoogaa kor maro taariikhda waxa uu soo ban dhigayaa buug kastaaba. Ka dib marka aad dhamayso “*ee aad akhrido kooxda 3*” waxa aad hubisaa akhbaaraadkan
- B. Is waafajiin ayaa ifaysa ayaa laga heli lahaa halka uu ka bilaabmaayo mid kasta oo cutubada ka mid ah. Tani waxa ay kaa caawinaysaa inaad aragtol sida ay qoraadani qaybo u yihiin dhisitaankoodu.
- C. Bilowga mid kasta cutubadan badanaa qoraalada waxa ay leeyihiin qaybo sadaro kuwaas oo qaybinaaya qaoraaklda ina siinaaya turjumid kala duwan oo casri ah.
  1. The United Bible Society Greek qoraaladaas, waa daabacaadii afraad waxa ay u dhawran tahay (USB)

2. The New American Standard Bible 1995 dib loo habeeyey (NASB)
3. The New King James Version (NKJV)
4. The New Revised Standard Version (NRSV)
5. Today English version (TEV)
6. The Jerusalem Bible (JB)

Sadarada kala qaybsan ma aha qaar la waxyooday. Waa inay sida waajibka ah ay is waafaqsan yihiin qoraaladoodu. Marka la bar bar dhigaahyo turjumaadada casriga ah kuwaas oo ka imanaaya tujumaado kala duwan iyo fekarado ay leeyihiin kuwa ku xeesha dheer barshada Ilaahay. Imanaka waxa aan awoodnaa inaan baadhi taan kui samayno wax taageeraayan hab ahaan asal kii qoraaladii uu qoraagu ka fekaarayey. Mid kasta oo ka mid ah sadaradan waxa uu xambaar san yahay run aad u weyn. Tana waxa aynu ugu yeedhnaa “Maduuca weedha ama ” “udub dhexaadka farkarada qoraalada”. Kani waxa uu cadaynayaa fekerka furaha saxa ah ee sheekooyinka. Iyo naxwaha iyo sida loo turjumo. Mid ayaa waxaa laga yaabaa inaan weligii wax turjumin weligiina aan nu wax wacdiyin amaba barin wax ka yar hal sadar mooyee! Xitaa waxaa lagaaga baahan yahay sadar walba waxa uu la xidhiidhaa sadarada kale eek u wareegsan. Tani waa sababta ay sadaradu hab ahaan aynu u kor maro buug waliba bina muhiim u yahay. Waxaa iganu waajiba inaan raacno arrimaha kuwa suuro galka ah sida mawduuca kaas oo khuseeya asal ahaantii wixii loo muujiyey qoraaga.

- D. Bob Waxa uu inoo sheegay inuu raacaayey aayadaha- si aayada isaga oo ka taxadaraaya turjumaadaha. Tani waxa ay inagu hogaaminaysaa inaan raacno asal ahaan waxa uu ku fekaarayey qoraagu. Waxa kale oo aad ogaataa inaan ka helaynay akhbaaraadka meelo aad u kala duwan:
1. Maraxalada qoraalka
  2. Taariikhda, dhaqanka, muuqa shada gudaha.
  3. Naxwaha iyo akhbaaraadka.
  4. Barasahada erayga
  5. Muhiimada tusaalooyinka fariinta

E. marka aan eegno waxyaabo kala duwan oo qoraadeenan ka mid ah, kuwaas waxa ay ku daabacan yihiin qoraal ahaan New American Standard Version ( 1995) dib u habayntii kuwani waxa ay qab ka ahaayeen tujumaano faro badan oo kala degisan kuwaas oo casri ah noocyo badana leh.

1. New King James Version (NKJV) kuwaas oo raacaaya qoraalka ay bani-aadanku qoreen. “Qoraalka la helay”
2. The New Standard Version (NRSV) kaas oo ah eray ilaa - eray qoraalkaasina waxa uu ka yimi National council of churches the resaved Standard Version.
3. Today English version (TEV) kaas oo ah layaab leh kuna baon turjumaada lagan a soo turjumay American Bible Sociality.
4. Jerusalem Bible (JB) kaas oo laga soo tujumay luaqada French Catholic kaas oo ahaa mid layaab badan kuna haboon turjumaada.

F. Haddaba kuwa aan awoodin inay ku hadlaan luqada Greek marka aan bar bar dhigno turjumaada luqada Ingriisiga waxa inaga caawinaysaa sidii aan u fahmi lahayn waxa ay tahay dhibaataadu qoraaladeena.

1. Qoraadii hore
2. Inaan eegno erayga macanihiisa
3. Nax wuhu kuwa uu adag yahay qoraalada iyo habkooda
4. Qoraaladii beenta ahaa.

In kasta oo aan luqada Igriiisiga turjumdiisa aanay xalinayn dhibaataada waxa ay u tahay halis meelaha aad ka u dhaadheer ee u baahan in badan laga fekre barashadooda

G. Mid walba oo u dhow xidhiidhna la leh cutubka aya marka aan qaadanaayo go,aanka su,aalaha ayaa waxa ay ina siinayaan inaan fiirino ujeedadeena muhiimada turjumaada eek u saabsan cutubkan.

# HORDHAC

## FURITAANKA

- A. Kitaabka Rooma waa kitaab ku dhisan caqiidada Masiixiyadda oo uu qoray Rasuul Bawlos. Waxa saamayn ku leh kitaabkan dhacdooyinkii ka jiray Rooma, waxaana jirtay waxyaabo ku sababay Rasuul Bawlos inuu qoro waraaqdan. Si kastaba ha ahaatee waa kitaabka ugu dhexdhexaadsan qoraaladii Bawlos, oo waxa uu kula tacaalayaa dhibaataadii jirtay ee ahayd hinaasaha u dhexeeyay Yuhuuddii Masiixiyiinta ahayd iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn (14:1-15:13). Sidoo kalena waxa uu si cad uga hadlayaa injiilka sida loogu dabaqi karo nolol maalmeedka.
- B. Wacdinta injiilka ee Bawlos ee kitaabka Rooma dhexdiisu waxa uu ahaa mid saameeyay gebi ahaanba kaniisadda casri walba:
1. Augustine waxa Masiixi noqday markii taariikhdu ahayd 386 waana markuu akhriyay Rooma 13:13-14.
  2. Martin Luther fahankiisii ku salaysnaa badbaadadu waxa uu is bedelay markii taariikhdu ahayd 1513, waana markuu is barbar dhigay Sabuurka 31:1 iyo Rooma 1:7(Xabquuq 2:4).
  3. John Wesley, waxa uu Masiixi noqday 1738, waana markii uu maqlay wacdinta Luther ee ku saabsan kitaabka Rooma.
- C. In kitaabka Rooma la bartaa waxa ay ka dhigantahay inaan barano Masiixiyadda! Maxaa yeelay waxa uu iftiiminayaa waxbaristii iyo noloshii Ciise iyo sida ay u saamaynaso kaniisadda casri wal oo joogaba.

## QORAAGA

Bawlos waxa uu ahaa qoraaga kitaabkan Rooma. Salaantiisa uu caanka ku yahayna waxa laga helayaa 1:1. Guud ahaan waxa la isku waafaqsan yahay in Bawlos araggiisu daciif ahaa sidaasi darteedna isugu kitaabkan kumuu qorin gacantiisa, laakiinse wuxuu adeegsaday Tertiyos (16:22).

## TAARIIKHDA

- A. Wakhtiga la qoray kitaabkan Rooma waxay ahayd sanadihii u dhexeeyay 56-58, waana kitaabada Axdiga Cusub kuwa ay ugu saxsantahay taariikhda qoraalkoodu. Kitaabka Rooma waxa lagu Qoray Korintos.
- B. Taxanaha taariikh ahaaneed ee qoraallada Bawlos ayaa F. F. Bruce iyo Murry Harris waxay u dhigayaan sidan:

<u>Kitaab</u>	<u>Taariikh</u>	<u>Meesha lagu qoray</u>	<u>Xidhiidhka ka dhexeeya Fal</u>
1. Galatiya	48	Antiokh, Siiriya	14:28; 15:2
2. 1 Tesaloniika	50	Korintos	18:5
3. 2 Tesaloniika	50	Korintos	19:20
4. 1 Korintos	55	Efesos	20:2
5. 2 Korintos	56	Maqdoniya	20:3
6. Rooma	57	Korintos	
7.-10. Waraaqihii xabsiga			
Kolosay	Bilowgii 60 kii		
Efesos	Bilowgii 60 kii		
Filimon	Bilowgii 60 kii	Rooma	28:30-31
Filiboy	Dhammaadkii 62-63		
11.-13. Socdaalkii afraad			
1 Timoteyos	(63 ama kadib	Maqdoniya	
Tiitos	63 laakiin kahor	Efesos (?)	

## CIDDA LOO QORAY

Warqadda waxa ay u socotaa dadkii Rooma. Haddaba ma garanayno ciddii asaastay kaniisadda Rooma:

- A. Waxa laga yaabaa inay asaaseen kuwo ka mida dadkii reer Rooma ee soo booqday Yerusaaalem maalintii Bentekostiga, oo intay Masiixiyiin noqdeen ayay bilaabeen kaniisadda (Falimaha Rasuullada 2:10).
- B. Waxa laga yaabaa inay asaaseen Masiixiyiintii la cadaadiyay ee u qaxay Rooma markii uu dhintay Istefanos (Falimaha Rasuullada 8:4).
- C. Waxa ay noqon karaan dad adeegii Bawlos ku noqday Masiixiyiin oo kaddibna aaday Rooma. Haddaba, Bawlos isagu weligiis muu booqan Rooma (Falimaha Rasuullada 19:21), laakiin waxa uu ku lahaa saaxiibbo (Rooma 16).

Dhinaca kale qorshihiisa waxa uu ahaa inuu booqdo Rooma marka uu kusii jiro dariiqiisa uu ku aadayay Spain (Rooma 15:28). Bawlos waxa uu dareemay shaqadiisa wacdinta injiilka ee xagga barigu inay dhammays tirantay, sidaasi darteedna waxa uu raadinayay meelo kale oo cusub (15:20-23,28).

Qofka waraaqda ka qaadayay Bawlos oo joogay Giriiggu waxay u muuqataa inay ahayd Foybi oo u socdaalaysay dhinacaas (Rooma 16:1). Maxay haddaba waraaqdan lagu qoray Korintos qarnigii koobaad u ahayd mid muhiimad leh? Martin Luther ayaa wuxuu kitaabkan ku magacaabayaa “kitaabka ugu muhiimsan Axdiga Cusub isla markaasna ah injiilka aadka u cad.” Qiimaha Kitaabkani xaqiiqadii waxa uu yahay sharraxaadda injiilka ee uu bixinayo rabbaani yeeshay rumaysad, waana Sawlkii reer Tarsus, oo loogu yeedhay inuu rasuul noqdo gaadhana kuwa aan Yuhuudda ahayn. Waraaqaha Bawlos badankooda wuxuu kaga hadlayaa xaaladan ka taagan gudaha, laakiin Rooma waa ay ka duwan tahay sidaas, waxaanay ku salaysan tahay rumaysadka uu aaminsanaa Rasuulku.

Ma rumaysanaysaa Masiixiyiintu erayada ay badanaa adeegsadaan sida (“rumaysad,” “xaq ka dhigis,” iyo “quduusnaantu”) inay yihiin kuwo lagasoo qaatay Rooma? Waana koritaankii fiqi ahaaneed ee dadkii reer Galatiya. Haddaba, Ilaah aan uga tukanno inuu indheheenna u furo kitaabkan cajiibka ah inaga oo si wada jira nafeheenna ugu raadinayna doonistiisa!

## UJEEDADA

- A. Inuu helo cid ka caawisa adeeggiisa iyo socdaalka uu ku tegi doono Spain, maxaa yeelay shaqadiisa uu ka waday xagga barigu waa ay dhammaatay (15:20-23,28).
- B. Inuu xalliyo dhibaataada ka dhex taagnay kaniisadda Rooma, taasi oo ahayd dhibaato dhex taallay Yuhuuddii Masiixiyiinta ahayd iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn.
- C. Inuu is baro kaniisadda Roomaanka. Waxa jiray cadaadis Bawlos kaga imanayay Yuhuuddii Masiixiyiinta ahaa ee ku noolaa Yerusaaalem (Falimaha Rasuullada 15), kuwii kalee Yuhuudda ahaa (Galatiya iyo 2 Korintos 3, 10-13), iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn (Kolosay iyo Efesos), waxayna isku dayayeen inay Injiilka dhex geliyaan aragtiyohooda.
- D. Bawlos waxa lagu dacweeyey inuu yahay hoggaamiye khatar ah oo wax ku daraya waxbaristii Ciise. Haddaba Kitaabka Rooma ayaa waxa uu muujinayaa inuu naftiisa difaacayay oo tusinayay in injiilkiisu uu yahay sax, isla markaasna isticmaalayo Axdiga Hore iyo waxbaristii Ciise (Injiillada).

## KORMARIS GUUD AHAANEED

- A. Hordhac (1:1-17)
  1. Salaan (1:1-7)
    - a. Qoraaga (1-5)
    - b. Cidda waraaqdu u socoto (6-7a)

- c. Salaan (7b)
  - 2. Talo gal (1:8-15)
  - 3. Ujeedada (1:16-17)
- B. Baahida loo qabo xaqnimada Ilaahiga ah (1:18-3:20)
- 1. Diidmada dadka aan Yuhuudda ahayn (1:18-32)
  - 2. Labo wejiilanimada Yuhuudda amaba Jaahiliinta (2:1-16)
  - 3. Xukumitaanka Yuhuudda (2:17-3:8)
  - 4. Dadku way wada denbaabeen (3:9-20)
- C. Maxay tahay xaqnimada Ilaahiga ahi (3:21-31)
- 1. Xaqnimada xagga rumaysadka oo keliya (3:21-31)
  - 2. Asaaska xaqnimada: ballankii Ilaah (4:9-12)
    - a. Ibraahim xaqii uu ku taagnaa (4:1-5)
    - b. Daa'uud (4:6-8)
    - c. Ibraahim iyo gudniinka (4:9-12)
    - d. Ballan qaadkii Ilaah siiyay Ibraahim (4:13-25)
3. Helitaanka xaqnimada (5:1-21)
- a. Waxa rumaysadka lagu helo. Jacaylka Ilaah ee shuruud la'aanta ah (5:1-5)
  - b. Jacaylka Ilaah oo lagu garto dhimashada Masiixa (5:6-11)
  - c. Dhimashada waxa laga helay Aadan noloshana Ciise (5:12-21)
  - 4. Xaqnimada Ilaahiga ah waa inay ka timaaddo xaqnimada shakhsi ahaaneed (6:17:25)
    - a. Masiixa la midnimadiisa denbigu ma raaci karo (6:1-14)
      - (1) Kasoo horjeedsasho ama diidmo (6:1-2)
      - (2) Macnaha baabtiiska (6:3-14)
    - b. Xorriyaddaada (6:15-23)
    - c. Masaalka ku saabsan guurka (7:1-6)
    - d. Masaalka ku saabsan guurka (7:7-14)
    - e. Sharciga iyo denbiga (7:15-25)
  - 5. Nolosha ku jirta xaqnimada Ilaah (8:1-39)
    - a. Nolosha ku jirta Ruuxa (8:1-17)
    - b. Ammaanta ahaan doonta (8:18-25)
    - c. Caawimaadda Ruuxa (8:26-30)
    - d. Ilaah jacaylkiisa iyo xaqnimada lagu helo rumaysadka (8:31-39)
- D. Ujeedada Ilaah ee ku waajahan aadanaha (9:1-11:32)
- 1. Doorashada Israa'iil (9:1-33)
    - a. Faa'idada rumaysadka dhabta ah (9:1-13)
    - b. Xukunka Ilaah (9:1-13)
    - c. Qorshaha Ilaah ee dunida (9:27-33)
  - 2. Badbaadada Israa'iliyiinta (10:1-21)
    - a. Xaqnimada Ilaah iyo tan aadanaha (10:1-13)
    - b. Naxariista Ilaah iyo yeedhmada rasuullada (10:14-18)
    - c. Israa'iliyiinta oo rumaysad yeelan waayay (10:19-21)
  - 3. Guuldarrada Israa'iliyiinta (11:1-36)
    - a. Diidniinta Ilaah Israa'iil diiday ma dhamma
    - b. Hinaasaha Yuhuudda (11:11-24)
    - c. Indho la'aanta ku meel gaadha ah ee Israa'iliyiinta (11:25-32)
    - d. Bawlos ammaantiisa (11:33-36)
- E. Natiijada iyo hadiyadaha xaqnimada Ilaah (12:1-15:13)
- 1. Nolosha cusub (12:1-2)
  - 2. Adeegsiga Hadiyadaha (12:3-8)
  - 3. Xidhiidhka rumaystayaashu la leeyihiin rumaystayaasha kale (12:9-21)
  - 4. Xidhiidhka xukuumadda (13:1-7)

5. Xidhiidhka jaarka (13:8-10)
  6. Xidhiidhka Rabbigeenna (13:11-14)
  7. Xidhiidhka xubnaha kaniisadda (14:1-12)
  8. Saamaynta aan ku samayn karno dadka kale (12:13-31)
  9. Xidhiidhka ku dayashada Masiixa (15:1-13)
- F. Gebogebada (15:14-33)
1. Qorshayaashii shakhsi ahaaneed ee Bawlos (15:14-29)
  2. Codsiga ducada (15:30-33)
- G. Gebogebada qoraalka (16:1-27)
1. Salaan (16:1-24)
  2. Ammaan (16:25-27)

## **AKHRINTA TAXANAHA KOOWAAD**

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Kitaabka hal mar wada akhri oo soo saar ujeeddada guud ahaaneed ee Kitaabku ka hadlayo adigoo isticmaalaya ereyadaada kuu gaarka ah.

1. Ujeeddada guud ee kitaabka
2. Nooca uu yahay qoraalku

## **AKHRINTA TAXANA LABAAD**

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Kitaabka hal mar wada akhri oo soo saar ujeeddada guud ahaaneed ee Kitaabku ka hadlayo adigoo isticmaalaya ereyadaada kuu gaarka ah.

1. Mawduuca laga fahmi karo cutubka koowaad
2. Mawduuca laga fahmi karo cutubka labaad
3. Mawduuca laga fahmi karo cutubka saddexaad
4. IWM



# ROOMA 1

## QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH

UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Salaan	Salaamo	Salaan	Salaan	Cinwaan
1:1-7	1:1-7	1:1-6	1:1 1:2-6	1:1-2 1:3-7
		1:7a 1:7b	1:7a 1:7b	
Bawlos wuxuu ku talo jiray inuu Rooma tago	Rabitaankii tegitaanka Rooma	Mahad celin	Tukasho iyo mahad celin	Mahad celin iyo tukasho
1:8-15	1:8-15	1:8-15	1:8-12 1:13-15	1:8-15
Awoodda Injiilka	Ku noolaanshaha rumaysadka	Ujeeddada waraaqda	Awoodda Injiilka	Ujeeddada la sheegay
1:16-17	1:16-17	1:16-17	1:16-17	1:16-17
Sharka aadanaha	Cadhada Ilaah u qabo xumaan falayaasha	Xukunka Ilaah ee denbiga	Sharka aadanaha	Cadhada Ilaah u qabo xumaan falayaasha
1:18-23	1:18-32	1:18-23	1:18-23	1:18-25
1:24-32		1:24-25 1:26-27 1:28-32	1:24-25 1:26-27 1:28-32	1:26-27 1:28-32

### AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

#### *IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA*

Tani waa hage ku tiirsan tafsiiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## **FAHANKA MACNAHA GUUD**

- A. Aayadaha 1-7 waxay hordhac u yihiin warqadda, waana hordhaca ugu dheer ee waraaqaha Bawlos uu qoray. Waxa uu ka sheekaynayaa waxbaristiisa isagoo sidoo kalena is baraya kaniisadda.
- B. Aayadaha 8-12 waa duco furitaana iyo mahad naq, tanina waa qaabka ay Giriiggu ay u qori jireen waraaqaha guud ahaan. Sidoo kalena waa qaabka uu Bawlos u qori jiray waraaqaha.
- C. Aayadaha 16-17 waxay ka hadlayaan ujeeddada kitaabka.
- D. Aayadaha 18 ilaa 3:20 waxay ka hadlayaan ujeeddada ugu muhiimsan qoraallada Bawlos oo ah in aadanaha oo dhammi denbaabeen isla markaana u baahan yihiin badbaado (Bilowgii 3). Dadku waxay isugu jiraan:
  1. Jaahiliinta xumaanta sameeya
  2. Jaahiliinta wanaagsan
  3. Yuhuudda
- E. Rooma 1:18-3:20 waxay ka tarjumayaan Bilowgii 3(Waxa cajiib lahayd iyadoon qoraalkan muhiimadda la saarin, balse la saaray Bilowgii 6, iyadoo la xisaabinayo bilowgii denbiga). Aadanaha waxa loo abuuray inay dhulka xukumaan oo ku tarmaan, sidaasi darteedna Ilaah waxa uu iyaga ka sameeyay ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27). Hase ahaatee aadanuhu waxay doorteen inay Ilaah caasiyaan oo kasoo horjeestaan!

Ilaah markii uu iyaga ka sameeyay ekaanshihiisa waxa uu saaray masuuliyad, laakiinse markii ay kasoo horjeesteen Ilaah waxa timid cidhib xumo. Ilaah waxa uu go'aansaday inuu aadanaha ku kala saaro ikhtiyaarkiisa iyo kooda ay iska leeyihiin, waana xidhiidhkii ku dhisnaa axdiga. Wuxuu iyaga u oggolaaday inay masuul ka noqdaan cidhib xumada ka timaadda ficilladooda xumaanta badan. Laakiinse Ilaah markuu arkay aadanaha sharkooda badan iyo xumaantooyinkooda waa uu ka qoomamooday iyaga (Bilowgii 6:5-7). Si kastaba ha ahaatee Ilaah waxa uu iyaga siiyay xorriyad ay ku dooran karaan raacitaanka Ilaah iyo diidmadiisa. Erayada inbadan lagusoo celceliyo ee odhanaya "Ilaah wuxuu u daayay" (1:24,26,28). Haddaba ma odhan karno Ilaah iyaga waa uu wada diiday maadaama oo uu siiyay xorriyadan(Bilowgii 3:22; 6:5-7,11-13)!
- F. Macnaha kooban ee 1:18-3:20 ayaa waxa laga heli karaa 3:21-31. Kani waa warka wanaagsan ee injiilka, waxuuna yahay in aadanuhu ay denbaabeen oo u baahnaayeen cafiska Ilaah, iyadoo markaasna uu soo noqon doono xidhiidhkii ay dadku Ilaah la lahaayeen.
- G. Bawlos waxa uu injiilka dhexdiisa kusoo jeedinayaa oo wax ka tilmaamayaa aadanaha oo ka masuula dembigooda iyo mucaaradnimada ay kaga horyimaaddeen Ilaah, sidoo kale waxa aan arki karnaa isaga oo masuuliyaddan aan dusha ka saarayn shaydaanka (Rooma:18-3:20). Qaybtani waxay tilmaan ka bixinasaa Bilowgii 3, laakiinse ma tilmaamayo qof canaanta la saaro oon ka ahayn aadanaha laftooda, sidaasi darteedna Ilaah dadka denbiga ku dhacay uma oggolaanayo inay canaantaan shaydaanka (Bilowgii 3:13)

amaba Ilaah laftiisa (Bilowgii 3:12). Aadanaha wax laga sameeyay ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26; 5:1,3; 9:6). Waxayna haystaan awoodda ay ku qaadan karaan ikhtiyaarkooda. Waxa dushooda saaran denbigii dhaxalka ahaa ee ay ka dhaxleen aabohood Aadan iyo kan iyagu shakhsi ahaantooda ay u sameeyaan (Rooma 3:23).

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 1:1-6

<sup>1</sup>Waxaa warqaddan qoraya Bawlos oo ah addoonkii Ciise Masiix, oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, oo gooni looga dhigay injiilka Ilaah. <sup>2</sup>Injiilkaas ayuu Ilaah markii hore nebiyadii ku ballan qaaday xagga Qorniinka qoduska ah, <sup>3</sup>oo wuxuu ku saabsan yahay Wiilkiisa, kii ka dhashay farcankii Daa'uud xagga jidhka. <sup>4</sup>oo sarakiciddii uu ka sal-a kacay kuwii dhintay ay ku caddaysay inuu xagga ruuxa qodusnimada yahay Wiilka Ilaah oo xoog leh oo ah Rabbigeenna Ciise Masiix, <sup>5</sup>kan aannu ku hehlay nimco iyo rasuulnimo, inaannu addeecidda rumaysadka magiciisa daraaddiis ugu geeyno quruumaha oo dhan. <sup>6</sup>Idinkuna kuwaas dhexdooda aad ku jirtaan oo ah kuwii loo yeedhay oo Ciise Masiix.

1:1 Dadkii Yuhuudda ahaa ee noolaa wakhtigii Bawlos waxay lahaan jireen labo magac kuwaasoo kala ahaa magac Yuhuudeed iyo magac Roomaan ah (Falimaha Rasuullada 13:9). Haddaba, Bawlos magaciisa Yuhuudiga ahi wuxuu ahaa Sawlos. Wuxuu ahaa Israa'iili oo welibana kasoo jeeda qabiilkii reer Benyaamiin (Rooma 11:1; Filiboy 3:5). Magaciisana haddaba kasoo jeeda Giriigga ee Bawlos ayaa macnihiisu waxa uu yahay 'waxyar', waxaanay arrintani tilmaamaysaa baa laga yaabaa:

1. Dhismihiisa jidh ahaaneed sida laga xigan karo buugga, *The Acts of Paul*, waana cutubka ku saabsan Teseloniika oo la yidhaahdo "Paul iyo Thekla".
2. Dareenkiisii shakhsi ahaaneed ee ahaa inuu rasuullada ka yaraa, maxaa yeelay asal ahaantiisii wuxuu cadaadin jiray kaniisadda (1 Korintos 15:9; Efesos 3:8; 1 Timoteyos 1:15).
3. Waxa laga yaabaa in magaca ay u bixiyeen waalidiintii markii uu dhashay waana kan ugu macquulsan.

▣ **"Addoonkii Ciise Masiix"** tarjumaadaha NKJV, NRSV, TEV iyo JB ayaa waxay qorayaan "Addoon." Arrintani waxay ka tarjumi kartaa dhowr waxyaalood. (1) Waxa laga yaabaa inay tahay tixgelin uu ku tilmaamayo inuu Ciise yahay Rabbiga; (2) Wuxuu noqon karaa magac sharaf lagu isticmaali jiray Axdiga Hore (Muuse oo ahaa addoonka Rabbiga sida ku sugan Tirintii 12:7 iyo Yashuuca 1:1. Sidoo kale Yashuuca, waana sida ku sugan Yashuuca 24:29 iyo Daa'uud sida ku sugan Sabuurrada iyo sidoo kale Ishacyaah 42:1, 19; 52:13).

▣ **"Oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado"** Tani waxay ahayd doorashada Ilaah mana aha isaga doorashadiisa (Falimaha Rasuullada 9:15; Galatiya 1:15; Efesos 3:7). Bawlos waxa uu u caddaynayaa xerfaddiisa ruuxiga ah iyo awoodihiisa sida uu ku xusan 1 Korintos 1:1; 2 Korintos 1:1; Galatiya 1:1; Efesos 1:1; Kolosay 1:1; 1 Timoteyos 1:1; Tiitos 1:1, wuxuuna u sheegayaa kaniisaddan aanu hore ula kulmin. Erayga ah 'Rasuul' ayaa macnihiisu waxa uu yahay mid la diray iyada oo dushiisa la saaray masuuliyad gooni ah. Marka aan eegno Axdiga Cusub eraygan waxa loo adeegsadaa labo siyaabood: (1) labo iyo tobankii xerta ahaa iyo rasuul Bawlos; (2) Hadiyad ruuxi ah oo ka dhex socota kaniisadda (1 Korintos 12:28-29; Efesos 4:11).

### MAWDUUC GAARA AH: DIRISTA (APOSTELLŌ)

Eraygan dirista waxa luqada Giriigta lagu yidhaa (*apostellō*) waxaanu xambaarsan yahay macnayaal guud:

- A. Waxa loo adeegsaday qof ergay ah oo kuwo kale ergo u sida (2 Korintos 5:20).
- B. Injiilku wuxuu badanaa eraygan u adeegsadaa Ciise Masiix oo Aabuhu soo diray. Injiilka uu qoray Yooxanaa waxay qaadanaysaa farriinta Masiixa (Matayos 10:40; 15:24; Markos 9:37; Luukos 9:48 iyo gaar ahaan Yooxanaa 4:34; 5:24,30,36,38; 6:29,38,39,40,57; 7:29; 8:42; 10:36; 11:42; 17:3,8,18,21,23,25; 20:21). Sidoo kale waxa loo adeegsaday Ciise oo diray xerta (Yooxanaa 17:18; 20:21).

C. Axdiga Cusubi wuxuu u adeegsaday xerta:

1. Labo iyo tobankii ahaa xerta Ciise (Luukos 6:13; Falimaha Rasuullada 1:21-22).
2. Koox gaara oo ahaa caawiyayaasha Rasuullada sida:
  - a. Barnabas (Falimaha Rasuullada 14:4,14)
  - b. Andaronikos iyo Yuniyas (Rooma 16:7).
  - c. c Abolloos (I Korintos 4:6-9).
  - d. Yacquub oo ahaa Sayidka walaalkiis (Galatiya 1:19).
  - e. Silfaanoos iyo Timoteyos (1 Tesalonika 2:6).
  - f. Waxa suurto gal ah Tiitos (2 Korintos 8:23)
  - g. Waxa suurto gal ah Ebafraditos (Filiboy 2:25).
3. Hadiyad kaniisaddu leedahay oo ilaa hadda socota (1 Korintos 12:28-29; Efesos 4:11).

D. Bawlos ayaa magacan adeegsanaya waraaqihiisa badanaa marka uu qorayay, waxaanu sheegayaa in Ilaah siiyay awood uu ku matalayo Ciise Masiix ( Rooma 1:1; 1 Korintos 1:1; Galatiya 1:1; Efesos 1:1; Kolosay 1:1; 1 Timoteyos 1:1; 2 Timoteyos 1:1; Tiitos 1:1).

▣ **“Oo gooni looga dhigay”** waxa ay tilmaamaysaa in Ilaah horeba uu arrintan ugu talo galay iyadoo ilaa iminkana gooni looga dhigay (Yeremyaah 1:5 iyo Galatiya 1:15). Isagu waxa uu xagga sharciga ka tirsanaa Farrisiinta (Filiboy 3:5) waxayna ahayd intii aanu Ciise Masiix tilmaamin isaga, hase ahaatee imika waxa gooni looga dhigay injiilka.

Waxay la xidhiidhaa erayga Cibraaniga ah ee ‘quduus’ kaasi oo loogala jeedo ‘in gooni looga dhigay adeegga Ilaah’(Baxniintii 19:6; 1Butros 2:5). Erayga ‘quduus’ iyo ‘gooni looga dhigay’, waxay leeyihiin asal Giriig ah, waana (*hagios*).

▣ **“Injiilka Ilaah”** waxay tusinaysaa ujeeddada gaarka ah ee Bawlos loogu yeedhay iyadoo gooni looga dhigay Injiilka Ilaah inuu u adeego.

Erayga Injiil wuxuu ka kooban yahay oo macnihiisu yahay ‘warka (*eu*) wanaagsan (*angellos*)’, waana cibaaro lagu sheegay oo si wayn uga muuqanaysa waxbarista Axdiga Cusub (Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:22-32), oo Ilaah uu kusii ballan qaaday Masiixa (aayadaha 3-4).

Waana Injiilka Ilaah oo maaha injiil uu Bawlos iska leeyahay (Markos 1:14; 2 Korintos 11:7; 1 Tesaloonika 2:2,8,9; 1 Butros 4:17). Sidoo kalena Bawlos waxa uu dadka ku wacdinayay runta uu helay (1 Korintos 1:18-25).

**1:2 “Injiilkaas ayuu Ilaah markii hore nebiyadii ku ballan qaaday xagga Qorniinka qoduuska ah”** Injiilku maaha wax cusub oo Ilaah keenay imika, laakiinse waa mid weligiisba jiray, oo ku socday ujeeddo iyo qorshaha Ilaah (Bilowgii 3:15; Ishacyaah 53; Sabuurka 118; Markos 10:45; Luke 2:22; Falimaha Rasuullada 2:23, 3:18; 4:28; Tiitos 1:2). Qoraalladu dhamaantood waxa ay sii sheegeen Ciise Masiix, oo isaguna wuxuu ahaa mid dhammays tiray dhammaanba wixii qoraallada quduuska ahi ka sii sheegeen. Wacdiyadii wakhtiyadii hore ee Falimaha Rasuullada(*the kerygma*), ayaa iyaguna sidoo kale koobsanayay in Masiixu uu dhammays tiray ballan qaadyadii lagusii sheegay Axdiga Hore.

#### **MAWDUUC GAAR AH: WACDINTII KANIISADDII UGU HORRAYSAY**

Ballan qaadyadii Ilaah ku sameeyay Axdiga Hore waxay ku dhammays tirmeen imaatinka Ciise Masiix (Falimaha Rasuullada 2:30; 3:19,24; 10:43; 26:6-7,22; Rooma 1:2-4; 1 Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:1-2; 1 Butros 1:10-12; 2 Butros 1:18-19).

1. Ciise waxa loo doortay inuu yahay Masiixa markii la baabtiisayay (Falimaha Rasuullada 10:38).
2. Ciise shaqadiisa wuxuu ka bilaabay Galilee markii la baabtiisay dabeed (Falimaha Rasuullada 10:37).
3. Shaqadiisa waxa ku dheehnaa samaynta waxa wanaagsan iyo mucjisooyin ka tarjumaya awoodda Ilaah (Markos 10:45; Falimaha Rasuullada 2:22; 10:38).

4. Masiixa waxa isku tallaabta loogu qodbay ujeeddada Ilaah daraaddeed (Markos 10:45; Yooxanaa 3:16; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:13-15,18; 4:11; 10:39; 26:23; Rooma 8:34; 1 Korintos 1:17-18; 15-18; 15:3; Galatiya 1:4; Cibraaniyada 1:3; 1 Butros 1:2,19; 3:18; 1 Yooxanaa 4:10).
5. Waxa laga sara kiciyay dhimashada, waxaanu u muuqday xertiisii (Falimaha Rasuullada 2:24,31-31; 3:15,26; 10:40-41; 17:31; 26:23; Rooma 8:34; 10:9; 1 Korintos 15:4-7,12; 1 Tesaloniika 1:10; 1 Timoteyos 3:16; 1 Butros 1:2; 3:18,21).
6. Ciise waxa sarraysiiyay Ilaah isagoo siiyay magaca “Rabbiga” (Falimaha Rasuullada 2:25-29,33-36; 3:13; 10:36; Rooma 8:34; 10:9; 1 Timoteyos 3:16; Cibraaniyada 1:3;
7. 1 Butros 3:22).
8. 8.Wuxuu bixiyay Ruuxa Quduuska ah si uu u sameeyo dadka Ilaah ee cusub (Falimaha Rasuullada 1:8; 2:14-18,38-39; 10:44-47; 1 Butros 1:12).
9. Wuu soo laaban doonaa isagoo kama danbaysta adduunyada kala xukumi doona ( Falimaha Rasuullada 3:20-21; 10:42; 17:31; 1 Korintos 15:20-28; Tesaloniika 1:10).
10. Dhammaan kuwa helay farriintiisu waa inay towbad keenaan oo la baabtiiso (Falimaha Rasuullada 2:21,38; 3:19; 10:43,47-48; 17:30; 26:20; Rooma 1:17; 10:9; 1 Butros 3:21).

Dhammaanba waxyaalahani waxa ay ahaayeen wacdintii kaniisaddii hore, inkasta oo qorayaasha kala gedisan ee Axdiga Cusubi ay siyaabo kala gedisan ugu tilmaamayaan wacdintooda. Haddaba, gebi ahaanba injiilka uu qoray Markos ayaa waxa uu raacsan yahay wacdintan ay kaniisaddii hore samayn jirtay, waayo Markos asal ahaan waxa uu awoodda saarayaa oo qorayaa wacdinihii Butros ka sameeyay Rooma. Sidoo kale Matayos iyo Luukos ayaa iyaguna raacaya qaabka Markos ee asaasiga ah.

**1:3 “oo wuxuu ku saabsan yahay Wiilkiisa”** farriinta Warka wanaagsani waxay gebi ahaan isugu biyo shubanaysaa hal qof, waana Ciisihii reer Nasereet ee ay dhashay Maryantii bikrada ahayd. Marka aan eegno Axdiga Hore dadka, boqorka, iyo Masiixaba waxa lagu magacaabi jiray ‘wiil’ (2 Samuu’eel 7:14; Hoosheeca 11:1; Sabuurka 2:7; Matayos 2:15).

Axdiga Hore Ilaah waxa uu adeegsan jiray oo ka dhex hadli jiray adeegayaal iyo nebiyada, laakiinse Ciise isagu muu ahayn adeege oo keliya. Waxa uu ahaa xubin ka tirsan qoyska Ilaah (Cibraaniyada 1:1-2; 3:6; 5:8; 7:28). Haddaba, waxa la yaab leh Bawlos oo kitaabkan marka la eego halkan oo qudha ku tilmaamaya cidda uu yahay Masiixu.

#### **MAWDUUC GAAR AH: WIILKA ILAAH**

Kani waa magaca ugu badan ee Axdiga Cusubi ku magacaabay Ciise Masiix. Waxa hubaala in magacani uu yahay ilhaamin amaba waxyi ka yimid xagga Ilaah, oo waxa uu Ciise ku tilmaamayaa ‘Wiilka’ amaba ‘Wiilkayga’, sidoo kalena Ilaahna wuxuu ka dhigan yahay ‘Aabbaha’. Haddaba, magacani wuxuu Axdiga Cusub kusoo dhex arooray 124 jeer, oo xitaa Ciise Masiix isagu shakhsi ahaantiisa waxa uu ku tilmaamayaa ‘Wiilka Aadanaha’, waana waxyi la xidhiidha Daanyeel 7:13-14.

Marka aan eegno Axdiga Hore magaca ‘wiil’ waxa lagu magacaabi karaa afar kooxood:

1. Malaa’igaha (hadiyo goorna waa koox ahaan, Bilowgii 6:2; Ayuub 1:6; 2:1).
2. Boqorka Israa’iil (2 Samuu’eel 7: 14; Sabuurka 2:7; 89:26-27).
3. Umadda reer Israa’iil oo dhan (Baxniintii 4:22-23; Sharciga Kunoqoshadiisa 14:1; Hoosheeca 11:1; Malaakii 2:10).
4. Xaakinada Israa’iliyiinta ah (Sabuurka 82:6).

Haddaba, labo jeer ayaa Ciise Masiix loo tiiriyaa magacan, waana ‘wiilkii Daa’uud’ iyo ‘Wiilka Ilaah’ labadubana waxay la xidhiidhaan 2 Samuu’eel 7; Sabuurka 2 iyo 89. Marka aan eegno Axdiga Hore ‘Wiilka Ilaah’ si gaara looguma isticmaalin Masiixa marka laga reebo isagoo ah mid loo doortay boqornimada Israa’iil (eeg maraajicda *Dictionary of Jesus and the Gospels* p. 770). Sidoo kale “Wiilka Ilaah” waa magac la

xidhiidha Masiixa, waana marka la eego (2 Esdras 7:28; 13:32,37,52; 14:9 iyo Enoch 105:52).

Magacani wuxuu aad uga dhex muuqdaa Axdiga Cusub, waxaan ka arki karnaa meelo badan oo sigaara u tilmaamaya:

1. Jiritaankiisii hore (Yooxanaa 1:1-18).
2. Isagoo ka dhashay gabadh bikro ah oon nin arag (Matayos 1:23; Luukos 1:31-35).
3. Markii la baabtiisayay (Matayos 3:17; Markos 1:11; Luukos 3:22. Codka Ilaah ee samada ka yimid wuxuu midaynayaa boqortooyada Sabuurka 2 iyo adeegaha dhibaatoonaya ee Ishacyaah 53).
4. Jirraabadii shaydaanka (Matayos 4:111; Markos 1:12,13; Luukos 4:1-13. Wuxuu shaydaanku isku dayay inuu ka shaki geliyo inuu yahay Wiilka Ilaah amaba ugu yaraan inuu ujeedooyinkiisa ku dhammays tiro waxyaalo ka gedisan tan isku tallaabta).
5. Isagoo ay qireen kuwo kasoo horjeeday
  - a. jinniyadii iyo ruuxyadii wasakhaysnaa (Markos 1:23-25; Luukos 4:31-37; Markos 3:11-12).
  - b. Rumaysad laawayaashii ( Matayos 27:43; Markos 14:61; Yooxanaa 19:7).
6. Xertiisa oo qirtay
  - a. Matayos 14:33; 16:16
  - b. Yooxanaa 1:34,49; 6:69; 11:27
7. Isagoo naf ahaantiisa qiray
  - a. Matayos 11:25-27
  - b. Yooxanaa 10:36
8. Isagoo Ilaah kasoo qaaday Aabbihiis
  - a. Ilaah wuxuu ugu yeedhay ‘Aabbow’
    - 1) Markos 14:36
    - 2) Rooma 8:15
    - 3) Galatiya 4:6
  - b. Isagoo adeegsaday eragya Aabbe (*patēr*) si uu u tilmaamo xidhiidhka uu la leeyahay Aabbaha iyo Ilaahnimadiisa.

Marka aan soo koobno magacan ah “Wiilka Ilaah” waxa uu macne wayn u leeyahay kuwa yaqaanay Axdiga Hore iyo ballan qaadyadii lagusii sheegay, laakiin qorayaasha Axdiga Cusub, waxa ay dhibaato kasoo gaadhaysay sida ay u isticmaalaan dadka aan Yuhuudda ahayni, maxaa yeelay waxay ahaayeen jaahiliin aan waxba aqoonin.

▣ **“Kii ka dhashay farcankii Daa’uud”** waxay la xidhiidhaa wax sii sheegistii 2 Samuu’eel 7, maxaa yeelay Masiixu waxa uu noqon doonay kasoo farcamayay qoyskii boqortooyada ee Daa’uud (Ishacyaah 9:7; 11:1, 10; Yeremyaah 23:5; 30:9; 33:15), oo kasoo jeeday qabiilkii Yahuudah ( Bilowgii 49:4-12; Ishacyaah 65:9). Haddaba, injiilka uu qoray Matayos ayaa Ciise waxa uu ku magacaabayaa ina Daa’uud dhowr jeer (9:27; 12:23; 15:22; 20:30), waxaanu tilmaamayaa sidii Yuhuuddu u rajaynayeen badbaadiye iman doonay.

Waxa haddaba layaableh Bawlos oon arrintan aad uga hadal, waxaanu ku tilmaamayaa halkan iyo Timoteyos 2:8.

▣

**NASB, NKJV, NRSV** “xagga jidhka”

**TEV** “Xagga aadaninimada”

**JB** “xagga dabeecadda aadananimada”

Tani waa dhammaystirka waxsheegyada iyo qirista dhinaca aadananimada ee Ciise kaasi oo xitaa ay diideen kuwii diimaha haystay qarnigii koowaad (1 Yooxanaa 1:1-4; 4:1-3). Haddaba, aayadani waxay tusinaysaa in Bawlos aanu eraygan ‘jidh’ (*sarx*) u isticmaalin dareen xun (2:28; 9:3). Si kastaba ha ahaatee Bawlos isticmaalay ‘jidh’ isagoo muujinaya farqiga ay is dheeryihiin ‘ruuxa’ ( 6:19; 7:5,18,25; 8:3-9,12,13; 1 Korintos 1:17; 11:18; Galatiya 3:3; 5:13,16,17-19,24; 6:8; Efesos 2:3; kolosay 2:11,13,18,23).

Marka aan eegno aayaddan 4 Ciise wuxuu isugu jiraa aadane(xagga jidhka aayadda 3) iyo Ilaah(xagga Ruuxa aayadda 4). Caqiiqadani waa mid muhiimad ka leh (1 Yooxanaa 4:1-3). Sidoo kale waa middii Ciise uu sheegay isaga oo naftiisa ku tilmaamay ‘Wiilka Aadanaha’ (Sabuurka 8:4; Yexesqeel 2:1[aadane] iyo Daanyeel 7:13[ilaahi]).

### **MAWDUUCA GAARA: JIDH (SARX)**

Waxay tilmaamaysaa xikmadda aadanaha marka la eego dunida (1 Korintos 1:20; 2:6,8; 3:18). Bawlos haddaba, eraygan 'jidh' (*sarx*) siyaabo dhowra ayuu qoraalladiisa ugu isticmaalayaa:

1. jidhka aadanaha (Rooma 2:28; 1 Korintos 5:5; 7:28).
2. faraca aadanaha ( aabbe-wiil. Rooma 1:3; 4:1; 1 Korintos 10:18)
3. gebi ahaanba aadanaha (1 Korintos 1:26,29)
4. xumaanta aadanaha maadaama oo ay danbaabeen Bilowgii 3(Rooma 6; 7:8)

**1:4 “ay ku caddaysay”** Ilaah waxa uu Ciise u doortay inuu yahay “Wiilka Ilaah”, taasna macneheedu maaha in Beytlaxam ay ahayd meeshii uu Ciise ka bilaabmay amaba inuu Ilaah ka darajo hooseeyo. Eeg mawduuca gaarka ah ee: saddexnimada 8:11.

▣ **“Inuu yahay Wiilka Ilaah”** qorayaasha Axdiga Cusubi badnaa Ciise Masiix umay adeegsan jirin magaca ‘Wiilka Ilaah’(Matayos 4:3), maxaa yeelay Giriigta ayaa waxyaabo badan oo beena u isticmaali jiray. Haddaba, waxa arrintan loola dhaqmay inay ahaato “mid nooceedu gooniyahay” (*monogenes*) ( Yooxanaa 1:18; 3:16,18; 1 Yooxanaa 4:9). Tan macnehuudu waxa weeyi haddaba, ‘Ciise oo ah, Wiilka keliya oo Ilaah.’

Axdiga Cusubi waxa uu leeyahay oo Ilaah la xidhiidha, waana Aabbaha iyo Ciise Masiix oo ah wiilka. (1 iyagu waa ay simanyihiin (Yooxanaa 1:1; 5:18; 10:30; 14:9; 20:28; 2 Korintos 4:4; Filiboy 2:6; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:3), iyo (2) waa labo shakhsiyadood oo kala soocan (Markos 10:18; 14:36; 15:34).

▣ **“Ka sara kicidda kuwa dhintay”** Ilaaha Aabbaha ahi waxa uu Ciise iyo farriintiisaba ku nooleeyay sarakicista uu ka sara kiciyay kuwa dhintay (4:24; 6:4,9; 8:11). Ilaahnimadiisa (Yooxanaa 1:1-14; Kolosay 1:15-19; Filiboy 2:6-11) iyo sara kicidda Ciise Masiix (4:25; 1 Korintos 15) waa laba tiir oo mataano ah isla markaasna ay ku dhisantahay Masiixiyaddu.

▣ Aayaddan waxa loo isticmaalaa la noolaanshaha iyo in Ciise lagu abaal mariyay kor u qaadista loo kor qaaday xagga Ilaah, maxaa yeelay noloshiisu waxa ay ahayd mid addeecida tusaale u ahayd. Sidoo kale Ilaahnimadiisu waxa ay timid sida aayaddan ka muuqata markii uu dhimashada ka sara kacay kadib. Laakiinse arrintani run ma noqon karto, waayo waxa jira aayado kale oo caddaynaya sida Yooxanaa 1iyo 17, laakiinse wax cajiib leh ayaa la socday sarakicistii Ciise. Waxa adag sida loo tilmaamo Ciise Masiix iyo sida Ilaahnimada loo siiyay, laakiinse si kastaba ha ahaatee Ciise waxa uu Ilaah la wadaagay ammaantiisa. Sarakicistu waxa ay ahayd wax Ilaah oggolaaday, waxaanay tusaale u ahayd nolosha, waxbarista iyo Ciisihii reer Nasereet oo noqday waaq dhaca denbiyada. Isagu gebi ahaanba waa Ilaah dhammaystiran, bani aadam dhammays tiran, badbaadiyaha iyo Wiilka Ilaah oonu jirin wax la mid ahi!

▣

**NASB, NKJV “xagga ruuxa qoduusnimada”**

**NKJV “xagga ruuxa qoduusnimada”**

**TEV “xagga quduusnimada Ilaahnimada”**

**JB “amarka ruuxa, kan ah ruuxa quduusnimada”**

Tarjumaadaha qaarkood ayaa waxa ay xaraf wayn ka dhigaan ‘S’ Spiriti amaba Quduus, iyagoo taasna kasoo qaadaya Ruuxa Quduuska ah. sidoo kale marka la yareeyo xarafka ‘s’ ayaa iyana waxa ay tilmaamaysaa ruuxda Ciise Masiix. Haddaba, sida Ilaaha Aabaha ahi u yahay Ruux, ayaa Ciise Masiixna sidoo kale u yahay Ruux. Marka la eego qoraaladii hore ee Cibraaniga iyo Giriiggu iyagu ma samaynayaan xarfahan la yaraynayo amaba la waynaynayo, sidaasi darteedna waxa aad dareemi karnaa in tarjumayaasha Kitaabku ay sameeyeen waxyaalahan.

Waxa jira haddaba saddex aragtiyood oo ka muuqan karaya aayadaha 3 iyo 4:

1. Waa Ciise Masiix oo leh labo dabecadood. Aadanenimo iyo Ilaahnimo.
2. Labadii heer ee noloshiisii hore, oo ahayd aadane iyo Rabbi la saro kiciyay.
3. ‘Ciise Masiix oo ah Rabbigeenna’

▣ **“Ciise”** magaca Aramaatiga ah ee Ciise waxa uu la macno yahay magaca Cibraaniga ah ee Yashuuca, waxaanu ka koobanyahay labo eray oo isa saaran “YEHOWAH” iyo “badbaado.” Macnahani waxa uu ka muuqan karaa Matayos 1:21,25.

▣ **“Masiix”** magacani waa tarjumaadda Giriigga oo lagasoo qaatay magaca Cibraaniga ah ee *messiah* oo macnihiisu yahay ‘kii la subkay’. Axdiga Hore waxaa jiray kooxo kala gedisan (nebiyada, wadaaddada, iyo Boqorradii) waxaanay ahaayeen kuwo la subko. Haddaba, Ciise Masiix ayaa buuxiyay saddexdan waxyaalood intaba (Cibraaniyada 1:2-3).

Axdiga Hore waxa uu sii sheegay in Ilaah uu soo diri doonay mid gaara oo ahaa ‘kan la subkay’ amaba la doortay oo Da’da Cusub u keeni doonay xaqnidama. Haddaba, Ciise ayaa ahaa kan gaarka ah, waxaanu ahaa ‘Adeege’, ‘wiil’ iyo “Masiixa.”

▣ **“Rabbi”** marka aan eegno xagga Yuhuudda magacii Axdiga ee Ilaah lahaa waxa uu ahaa ‘YEHOWAH’, Rabbiska ayaa iyaguna magacn waxay u rogeen “Rabbi” (*Adon*) markay akhriyayaan qoraalladana waxay ka baqan jireen inay u ekaato magaca Ilaaha Rabbiga ah (Baxniintii 20:7; Sharciga Kunoqoshadiisa 5:11) iyo jebinta tobanka amar. Markii haddaba qorayaasha Axdiga Cusubi ay Ciise Masiix ugu yeedheen “Rabbi” (Kurios) waxa ay uga jeedeen Ilaahnimadiisa (Falimaha Rasuullada 2:36; Rooma 10:9-13; Filiboy 2:6-11).

## MAWDUUC GAAR AH: MAGACYADA ILAAHNIMADA

### A. El

1. Macnaha asalka ah ee erayga ilaahnimada ayaa aqoonyahanno badani waxay aaminsan yihiin inuu ka tarjumayo ‘awood badnaan’ (Bilowgii 17:1; Tirintii 23:19; Sharciga Kunoqoshadiisa 7:21; Sabuurka 50:1).
2. Kancaaniyiinta marka aan eegno ilaaha ugu sarreeya waxay ku magacaabi jireen El (qoraallada Ras Shamra).
3. Kitaabka Quduuska ah magaca El lama socdaan waxyaabo kale, tanina waxa ay tusinaysaa dabeecadda Ilaaha keliya.
  - a. *El-Elyon* (Ilaaha Sarreeya), Bilowgii 14:18-22; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8; Ishacyaah 14:14
  - b. *El-Roi* (Ilaaha wax arka) amaba (Ilaaha is muujiya), Bilowgii 16:13
  - c. *El-Shaddai* (Ilaaha awoodda leh) amma (Ilaaha Naxariista oo dhan leh) amma (Ilaaha buuraha), Bilowgii 17:1; 35:11; 43:14; 49:25; Baxniintii 6:3
  - d. *El-Olam* (Ilaaha daa’imka ah), Bilowgii 21:33. Tani waxay la xidhiidhaa ballan qaadkii Ilaah siiyay Daa’uud, 2 Samuu’eel 7:13,16
  - e. *El-Berit* (Ilaaha Axdiga), Xaakinnada 9:46
4. El waxay u dhigantaa
  - a. YEHOWAH ee Sabuurka 85:8; Ishacyaah 42:5
  - b. Elohim ee Bilowgii 46:3; Ayuub 5:8, “Anigu waxaan ahay Ilaaha ah Ilaaha aabbahaa”
  - c. Shaddai ee Bilowgii 49:25
  - d. “Xaasid” ee Baxniintii 34:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:24; 5:9; 6:15
  - e. “Ilaah naxariis badan” ee Sharciga Kunoqoshada 4:31; Nexemyaah 9:31; “Ilaaha aaminka ah” ee Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9; 32:4
  - f. “Ilaah weyn oo laga cabsado” ee Sharciga Kunoqoshadiisa 7:21; 10:17; Nexemyaah 1:5; 9:32; Daanyeel 9:4
  - g. “Ilaah wax walba yaqaan” ee 1 Samuu’eel 2:3
  - h. “Ilaah waa qalcaddayda xoogga badan” ee 2 Samuu’eel 22:33
  - i. “Ilaaha aniga ii aarguda” ee 2 Samuu’eel 22:48
  - j. “Ilaaha Quduuska ah” ee Ishacyaah 5:16
  - k. “Ilaaha xoogga badan” ee Ishacyaah 10:21
  - l. “Ilaah waa badbaadadayda” ee Ishacyaah 12:2
  - m. “Ilaaha wayn ee awoodda badan” ee Yeremyaah 32:18
  - n. “Ilaaha abaal marinta” ee Yeremyaah 51:56



5. Badanaa magacyada Ilaah ee Axdiga Hore iyagoo isku dhex jira waxa laga heli karaa Yashuuca 22:22 (El, Elohim, YEHOWAH, ..)

B. *Elyon*

1. Macneheeda caadiga ahi waa 'sarreeya' (Bilowgii 40:17; 1Boqorradii 9:8; 2 Boqorradii 18:17; Nexemyaah 3:25; Yeremyaah 20:2; 36:10; Sabuurka 18:13).
2. Waxa loo isticmaalay iyadoo labarbar dhigayo magacyo kaloo Ilaah leeyahay.
  - a. Elohim – Sabuurka 47:102; 73:11; 107:11
  - b. YEHOWAH – Bilowgii 14:22; 2 Samuu'eel 22:14
  - c. El-Shaddai – Sabuurka 91:1,9
  - d. El – Tirintii 24:16
- b. Elah – waxa lagu isticmaalay Daanyeel 2-6 iyo Cesraa 4-7, waxaanay la xidhiidhaa Ilaaha sarreeya ee Daanyeel 3:26; 4:2; 5:18,21
3. Xitaa waxa isticmaalay kuwa aan Israa'iiliyiinta ahayn
  - a. Melkisaadeq, Bilowgii 14:18-22
  - b. Balcaam, Tirintii 24:16
  - c. Muuse oo la hadlayay dadka Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8
  - d. injiilka uu qoray Luukos isagoo u qoraya kuwa aan Yuhuudda ahayn (1:32,35,76; 6:35; 8:28; Falimaha Rasuullada 7:48; 16:17).

C. Elohim (jamac), Eloah (keli), waxa lagu isticmaalay gabayada

1. Eraygan lagama helayo meel ka baxsan Axdiga Hore.
2. Eraygani waa mid loo isticmaali jiray Ilaah Israa'iil iyo ilaahyada kale ee ummada kale caabudi jireen (Baxniintii 12:12; 20:3). Qoyska Ibraahim waxay caabudi jireen sanamyoo (Yashuuca 24:2).
3. Waxa lagu tilmaami karaa xaakinnadii Israa'iil (Baxniintii 21:6; Sabuurka 28:6).
4. Waxa kaloo loo isticmaalay (malaa'igaha iyo ruuxyada jinka) sida Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8; Sabuurka 8:5; Ayuub 1:6; 38:7. Waxaana sidoo kale lagu tilmaamay xaakinnada aadanaha (Baxniintii 21:6; Sabuurka 82:6).
5. Kitaabka Quduuska ah waa magaca ugu horreeyay ee Ilaahnimada (Bilowgii 1:1). Si gaara ayaa loogu isticmaalay ilaa laga gaadho 2:4 waxayna la midowdaa YEHOWAH. Waxay tilmaamaysa Ilaaha abuuray dunida, ee nolosha socodsiiya isla markaana nooleeya oo wax siiya wax kasta oo ku dul nool dunida (Sabuurka 104).

Waxay la mid tahay El (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:15-19). Waxa kaloo ay la mid tahay YEHOWAH sida ku qoran Sabuurka 14 (elohim) oo la mida Sabuurka 53 (YEHOWAH).

6. inkasta oo jamac ahaan loogu isticmaalay ilaahyada kalee dadku caabudi jireen, hadana Ilaaha Israa'iil waxa loogu isticmaali jiray keli ahaan.
7. Erayadani waxay kasoo baxeen afka dadkii aan Israa'iiliyiinta ahayn iyadoo magaca ilaahnimada loo isticmaalyo
  - a. Milkisadaaq, Bilowgii 14:18-22
  - b. Balcaam, Tirintii 24:2
  - c. Muuse markii uu la hadlayay ummadda Sharciga Kunoqoshadiisa 32:8
8. Waxa layaab leh magacyada guud ee Ilaah oo dadka Israa'iil mararka qaar u isticmaaleen jamac ahaan ama iyagoo badan!
  - a. Luqada Cibraaniyadu waxa leedahay waxyaabo badan oo jamac ahaan amma iyagoo badan erayada loo adeegsado.
  - b. Waxa laga yaabaa inay tilmaamayso malaa'igtu marka ay la kulmayaan Ilaah (1 Boqorradii 22:19-23; Ayuub 1:6; Sabuurka 82:1; 89:5,7).
  - c. Waxa suurto gal ah inay ka tarjumasoo waxyiga Axdiga Cusub ee tilmaamaya saddexnimada. Bilowgii 1:1 Ilaah waxuu sameeya abuurka; Bilowgii 1:2 Ruuxa Ilaah wuxuu ku dul dhaqaaqay biyaha, oo sida Axdiga Cusub aan ka arki karnona Ciise bilowgiiba wuxuu la jiray Ilaah (Yooxanaa 1:3,10; Rooma 11:36; 1 Korintos 8:6; Kolosay 1:15; Cibraaniyada 1:2; 2:10).

D. YEHOWAH

1. Kani waa magaca uu Ilaah axdigiisa kula dhigtay aadanaha; dadku way jebiyaan axdiga Ilaah, hase ahaatee Ilaah waa badbaadiyaha cafiska badan ee dhowra ballan qaadkiisa (Sabuurka 103).

Magacan ugu horrayntii wuxuu la socdaa Elohim sida aan ka arki karno Bilowgii 2:4. Ma jiraan labo dhacdo oo ah abuurka dunida sida aan ka arki karno Bilowgii 1-2, laakiinse waxa jirta labo siyaabood oo loo sheegayo arrintaas: (1) Ilaah oo ah abuuraha dunida amaba caalamka iyo (2) Ilaah oo si gaara u abuuray aadanaha. Haddaba, Bilowgii 2:4 ayaa waxay si gaara uga hadlaysaa waxyiga tusinaya ujeeddada loo abuuray aadanaha iyo dhibaataada denbiga ee timid.

2. Bilowgii 4:26 waxaan ku arki karnaa “dadkii waxay bilaabeen inay Rabbiga ku baryaan magiciisa.” Haddaba, Baxniintii 6:3 ayaa waxay tilmaamasaa in dadkii hore ee axdigu ay Ilaah u yaqaaneen *El-shaddai* oo keliya. Magaca YEHOWAH ayaa haddaba waxa hal mar lagu sharaxay Baxniintii 3:13-16, gaar ahaan aayadda 14. Si kastaba ha ahaatee qoraaladii Muuse waxay macnaynayaan magacyo, laakiin maaha kuwa Ilaah (Bilowgii 17:5, 27:36; 29:13-35). Haddaba, waxa jira aragtiyo badan oo magacyadan ka tarjumaya (waxa laga soo qaatay IDB, qaybta 2, b 409-11).
  - a. Waxa laga yaaba in asalkeedu yahay Carabi, oo macnihiisuna yahay ‘muujinta jacayl diirran’
  - b. Waxa laga yaabaa in asalkeedu yahay Carabi, oo macnihiisuna yahay ‘u soconaya sida dabaysha’ (YEHOWAH sida dabaysha Ilaah oo kale)
  - c. Asalkeedu inuu yahay Kancaani ‘waxa hadla’
  - d. Ka wax asaasa amaba socodsiiya
  - e. Asal Cibraani ah ‘ka uu yahay’
  - f. Asal Cibraani ah ‘ka sababa inay wax ahaadaan’
  - g. Asal Cibraani ah ‘waxa nool’
  - h. Fahanka Baxniintii 3:13-16 “ANIGU WAXAAN AHAY KAN AHAY”. Magaca buuxa ee YEHOWAH waxa uu noqon karaa mid wax laga soo gaabsaday:
    - 1) *Yah* (tusaale ahan, Hallelu-Yah)
    - 2) *Yahu* (magac sida, Ishacyaah)
    - 3) *Yo* (magac sida, Yoo’eel)
3. Magaca axdigu waxa uu Yuhuudda dhexdooda ka ahaa magac quduusa, oo xitaa waxay ka cabsan jireen inay si beena ugu dhawaaqaan, Baxniintii 20:7; Sharciga Kunoqoshadiisa 5:11; 6:13. Marii haddaba ka akhriyeen YEHOWAH Axdiga Hore, waxay u akhriyeen ‘Rabbi’, waana sababta YEHOWAH loogu tarjumay RABBI.
4. Sida El, oo kale ayaa YEHOWAH waxa la xidhiidha erayo kale oo tilmaamaya Axdiga Ilaah la dhigtay Israa’iil. Tusaale ahaan waxa ka mida kuwan:
  - a. *YEHOWAH – Yireh* (YEHOWAH wax bixiyaha), Bilowgii 22:14
  - b. *YEHOWAH – Rophekha* (YEHOWAH ka ku bogsiya), Baxniintii 15:26
  - c. *YEHOWAH – Nissi* (YEHOWAH ) Baxniintii 17:15
  - d. *YEHOWAH – Meqaddishkem* (YEHOWAH ka ka quduus idinka dhigaya), Baxniintii 31:13
  - e. *YEHOWAH – Shalom* (YEHOWAH waa nabad), Xaakinnada 6:24
  - f. *YEHOWAH – Sabbaoth* (YEHOWAH ) 1 Samuu’eel 1:3,11; 4:4; 15:2
  - g. *YEHOWAH – Ro’I*(YEHOWAH waa adhi jirahayga), Sabuurka 23:1
  - h. *YEHOWAH – Sidqenu* (YEHOWAH Rabbiga xaqnimada ah), Yeremyaah 23:6
  - i. *YEHOWAH – Shammah* (YEHOWAH Rabbigaa halkaas jooga), Yexesqeel 48:35

**1:5 “anaku”** Bawlos cidkale kuma tibaaxaya hordhaca warqaddiisana waana sida uu waraaqihiisa oo dhami yihiin. Cibaaradan uu adeegsaday ayaa waxa ay tahay mid uu u adeegsanayo qoraalka

▣ **“kan aannu ku hehlay nimco iyo rasuulnimo,”** Bawlos ma sheegayo oo keliya hadiyadda badbaadada ee uu ku helay Ciise Masiix daraaddiis, laakiinse waxa kale oo uu sheegayaa yeedhitaanka loogu yeedhay inuu ahaado rasuul wacdiya kuwa aan ahayn Yuhuudda. Waxan oo dhanna wuxuu ku helay markii uu u socday Dimishiq (Falimaha Rasuullada 9), oo waxani waxay ahaayeen nimco ka timid xagga Rabbiga oo ujeeddo ku socotay.

▣ **“Ugu gayno”** injiilku waxa uu isu keenayaa Ilaah iyo aadanaha, oo taasina waxay ku rumoobasaa rumaysadka Ciise Masiix. Tani waxay markaas tahay ujeedadii asalka ahayd ee Ilaah, oo wuxuu muujinayaa oo keenayaa dad isaga dabeecaddiisa ka tarjuma oo warka wanaagsan la wadaaga dadka.



**NASB, JB “addeecista rumaysadka”**

**NKJV “si loo addeeco rumaysadka”**

**NRSV “inaan ugu gayno addeecidda rumaysadka”**

**TEV “in la rumayso lana addeeco”**

Waa meesha ugu horraya ee erayga ‘rumaysad’ lagu isticmaalo Kitaabka Rooma dhexdiisa, waxaana kitaabka dhexdiisa loogu isticmaalay saddex siyaabood oo kala gedisan:

1. Aayadda 5. Waxa loo isticmaalay xaqiiqada iyo caqiidada ay ku dhisantahay Masiixiyaddu, taasi oo ah rumaysadka Ciise Masiix (Falimaha Rasuullada 6:7; 13:8; 14:22; 16:5; Rooma 14:1; 16:26; Galatiya 1:23; 6:10; Yuudas 3,20).
2. Aayadda 8. Waxa loo isticmaalay dareenka shakhsi ahaaneed ee isku hallaynta (*pistis/pisteuo*) Ciise. Injiilku guud ahaan waa caqiido guud ahaaneed iyo mid shakhsi ahaaneed ( aayadda 16; Yooxanaa 1:12; 3:16).
3. Aayadda 17. Waxa hore loogu isticmaalay Axdiga Hore, oo waa kalsooni iyo addeecitaan, waana macnaha aan ka arki karno Xabaquuq 2:4. Marka aan eegno Axdiga Hore muu jirin caqiido hurumarsan oo xagga rumaysadka ah, balse waxa jiray tusaalayaal xagga nolosha iyo rumaysadkaba ah (Ibraahim Bilowgii 15:6); muu ahayn rumaysad si buuxda u wanaagsan, laakiinse waxa uu ahaa loollan lagula jiro rumaysadka (Cibraaniyada 11). Sidoo kale dabiicadda aadanuhu maaha marwalba mid si buuxda oo saxa Ilaah rumaysad ugu muujin karta, laakiin dabeecadda Ilaah waa mid leh xaqnimo buuxda oo dhammays tiran.

Waxa jira ficillo badan oo lagu tilmaami karo inay sabab u yihiin badbaadada:

- a. Toobad keenka (2:4; Markos 1:15; Luukos 13:3,5; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21)
- b. Rumaysadka (1:16; Yooxnaa 1:12; 3:16; Falimaha Rasuullada 16:31, baabtiiskuna waa qirashada qofka ee rumaysadka).
- c. Addeecitaanka (2:13; 2 Korintos 9:13; 10:5; 1 Butros 1:2,22)
- d. Isku hallaynta iyo qalbi jabis la'aanta (2:7; Luukos 18:1; 2 Korintos 4:1,16; Galatiya 6:9; 2 Tesaloniika 3:13).

Kuwani waa shuruudaha Axdiga Cusub, sidaasi darteedna waa inaan aqbalno oon qaadano waxa Ilaah innagu siiyay Masiixa aawadiis (aayadda 16; Yooxanaa 1:12).

**MAWDUUC GAAR AH: AAMINIS, ISKU HALLAYN, RUMAYSAD, IYO RUMAYSAD YEELASHADA AXDIGA HORE DHEXDIISA (ገጽ 52)**

**I. Odhaahda Furitaanka**

Waxa u baahan in la sheego adeegsiga fahankan fiqi ahaaneed oo Axdiga Cusub dhexdiisa aad muhiim uga ah, iyadoo sidaas oo kalena aan loogu dhex qeexin Axdiga Hore dhexdiisa. Waa hubaal oo waa lagu dhex sheegay, laakiinse badanaa waxay khusaysaa oo u gaartahay meelo gaara iyo shakhsiyaad mucayan ah. Axdiga Hore wuxuu isku dhex daryaa

- A. Bulshada iyo shakhsiyaadka
- B. Kulanka shakhsi ahaaneed iyo addeecitaanka axdiga

Rumaysadku haddaba wuxuu si gaara ula kulmaa shakhsiyaad sidoo kalena waa wax ku dhisan qaab nololeedka maalin walba! Iyadoo keli ahaan eraygan la qeexana waxa ka fudud iyada oo qof lagu tilmaamo. Haddaba, dhinacyada ugu wanaagsan ee shakhsiyaadka lagula xidhiidhiyay waxa aan kasoo qaadano karnaa

- A. Ibraahim iyo farcankiisa
- B. Daa'uud iyo Israa'iil

Haddaba nimankani waxa ay ahaayeen kuwo la kulmayo Ilaah iyada oo kaddibna noloshoodu is bedeshay (maaha nolol wanaageedu dhammays tiran yahay laakiin rumaysadkooda ayaa sii socday). Tijaabinta ayaa waxay u muujisay awoodda iyo taag yaraanta rumaysadkooda la kulmay Ilaah, hase ahaatee isku hallaynta iyo u dhowaanshihiisa ayaa wuxuu ahaa marba marka ka danbaysa sii socda. Way tijaabiyeen, laakiinse waa ay kusii socdeen iyada oo taasna ay cadaynaysay ducadooda iyo qaab nololeedkooda.

**II. Asalka ugu muhiimsan ee la adeegsaday**

- A. ገጽ 52 (BDB 52)

**1. FAL**

- a. *Qal* asalkeeda – taageeris, nafaqayn ( 2 Boqorradii 10:1,5; Esteer 2:7, adeegsiga aan fiqiga ahayn)
- b. *Niphal* asalkeeda – la hubiyo, la asaaso, la ansixiyo, lagu kalsoonaan karo amaba aaminimada

- (1) Niman, Ishacyaah 8:2; 53:1; Yeremyaah 40:14
  - (2) Waxyaalo, Ishacyaah 22:23
  - (3) Ilaah, Sharciga Kunoqoshadiisa 7:9,12; Ishacyaah 49:7; Yeremyaah 42:5
- c. *Hiphil* asalkeeda – in lagu taagnaado, la aamino, la talo saarto
- (1) Ibraahim Ilaah ayuu aaminay, Bilowgii 15:6
  - (2) Israa’iiliyiintii Masar ku sugnaa way rumaysteen, Baxniintii 4:31; 14:31 (inkiraad, Sharciga Kunoqoshadiisa 1:32)
  - (3) Israa’iiliyiintu YHWH waxay ku rumaysteen la hadalkii Muuse, Baxniintii 19:9; Sabuurka 106:12,24
  - (4) Axaas iskuma hallayn Ilaah, Ishacyaah 7:9
  - (5) Midkasta oo rumaysta isaga, Ishacyaah 28:16
  - (6) Aamin runta ku saabsan Ilaah, Ishacyaah 43:10-12
2. MAGAC (LAB AH) – runsheegnimada (Sharciga Kunoqoshadiisa 32:20; Ishacyaah 25:1; 26:2)
  3. FALKAABE – runtii, dhab ahaantii, waan taageersanahay, waa sidaa (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:15-26; 1 Boqorradii 1:36; 1 Taariikhii 16:36; Ishacyaah 65:16; Yeremyaah 11:5; 28:6). Waana midda ka tarjumaysa adeegsiga “Aamiin” ee Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub.
- B. אמת (BDB 54) MAGAC DHEDIG AH, ku taagni, runsheegnimo, xaqiiqada
1. Niman, Ishacyaah 10:20; 42:3; 48:1
  2. Ilaah, Baxniintii 34:6; Sabuurka 117:2; Ishacyaah 38:18,19; 61:8
  3. Xaqiiqada, Sharciga Kunoqoshadiisa 32:4; 1 Boqorradii 22:16; Sabuurka 33:4; 98:3; 100:5; 119:30; Yeremyaah 9:4; Sekaryaah 8:16
- C. אמת (BDB 53), ku taagni, u go’itaan, u hogaansanaan
1. Gacmaha, Baxniintii 17:12
  2. Wakhtiyada, Ishacyaah 33:6
  3. Aadahna, Yeremyaah 5:3; 7:28; 9:2
  4. Ilaah, Sabuurka 40:11; 88:12; 89:2,3,6,9; 119:138
- III. Bawlos iyo adeegsiisa fikraddan Axdiga Hore
- A. Bawlos fahankiisna cusub ee ku saabsan YHWH iyo Axdiga Hore waxa uu ku salaynayaa shakhsi ahaantiisa sidii uu ula kulmayo Ciise markii uu u socday Dimishiq (Falimaha Rasuullada 9; 22; 26).
- B. Wuxuu helay Axdiga Cusub oo fahankiisa ku taageeraya siyaabaha la xidhiidha asalka arrintan.
1. Bilowgii 15:6 – Ibraahim la kulankiisii shakhsi ahaaneed ee Ilaah uu la bilaabay (Bilowgii 12) waxa ka dhashay nolol ku salaysan addeecitaan iyo rumaysad (Bilowgii 12-22). Waxaanu Bawlos middani ku tibaaxayaa Rooma 4 iyo Galatiya 3.
  2. Ishacyaah 28:16 – kuwa aamina middani (tijaabada iyo ku taagnaanshaha arrintas aasaaska ah) weligood ma noqon doonaa
    - a. Rooma 9:33, “ceebooba” amaba “niyad jaba”
    - b. Rooma 10:11, kuwo ceeboobi
  3. Xabaquuq 2:4 – kuwa yaqaana Ilaah runsheegga ahi waxay ku noolaan doonaan nolol rumaysad leh (Yeremyaah 7:28). Bawlos wuxuu qoraalkan ku adeegsanayaa Rooma 1:17 iyo Galatiya 3:11 (sidoo kale u fiirso Cibraaniyada 10:38).
- IV. Butros iyo adeegsiisa fikiradan Axdiga Hore
- A. Butrus wuxuu isku xidhayaa
1. Ishacyaah 8:14 – 1 Butros 2:8 (dhagax lagu turun turroodo)
  2. Ishacyaah 28:16 – 1 Butros 2:6 (dhagax geeseed)
  3. Sabuurka 111:22 – 1 Butros 2:7 (dhagaxii kuwa wax dhisaa diideen)
- B. Wuxuu ka soo jeedinayaa luqadii gaarka ahayd ee tilmaamaysay Israa’iil, “kuwa la doortay, boqorrada wadaadnimada, ummadda quduuska ah, dadka Ilaah matalaya”
1. Sharciga Kunoqoshadiisa 10:15; Ishacyaah 43:21
  2. Ishacyaah 61:6; 66:21
  3. Baxniintii 19:6; Sharciga Kunoqoshadiisa 7:6
- Isagoo iminkana u adeegsanaya rumaysadka kaniisadda ee ku salayan Masiixa.
- V. Yooxanaa iyo adeegsiisa fikraddan Axdiga Hore
- A. Adeegsiigeeda Axdiga Cusub
- Erayga “aaminay” waxa laga soo qaatay erayga Giriigga ah ee (*pisteuō*), kaasi oo sidoo kale loo tarjumi

karo “aaminis,” “rumays,” amaba “talo saarasho.” Tusaale ahaan, MAGACU kumuu soo dhex aroorin Injiilka uu qoray Yooxanaa, laakiinse FALKA in badan ayaa lagu dhex adeegsaday. Yooxanaa 2:23-25 lama hubo in dadka soo ururay ee diyaarka u ahaa raacitaanka Ciisihii reer Nasereet. Tusaalayaasha kale ee sida aadka ah loogu adeegsaday eraygan “rumaysi” ayaa waxa aan ka arki karnaa Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13, 18:24. Haddaba, xaqiiqada rumaysadka ee kitaabiga ahi waxay ka badan tahay rumaysadka ugu horreeya oo keliya. Waxa la rabaa inay noqota wax sii socda oon kala go’aynin (Matayos 13:20-22, 31-32).

B. Adeegsigeeda marka ay la socdaan MEELEEYAYAASHU

1. *eis* oo macneheedu yahay “gudhiisa.” Qaab dhismeedkan gaarka ahi wuxuu xoojinayaa rumaystayaasha oo rumaysadkooda iyo isku hallayntooda dhex dhigay Ciise.
  - a. magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1 Yooxanaa 5:13)
  - b. Isaga (Yooxanaa 2:11; 3:15,18; 4:39; 7:5,31,39,48; 8:30; 9:36; 10:42; 11:45, 48; 17:37,42; Matayos 18:6; Falimaha Rasuullada 10:43; Filiboy 1:29; 1 Butros 1:8)
  - c. Anigu (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1,12; 16:9; 17:20)
  - d. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1 Yooxanaa 5:10)
  - e. Ciise (Yooxanaa 12:11; Falimaha Rasuullada 19:4; Galatiya 2:16)
  - f. Iftiinka (Yooxanaa 12:36)
  - g. Ilaah (Yooxanaa 14:1)
2. *en* oo macneheedu yahay “gudaha” sida ku sugan Yooxanaa 3:15; Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 5:14
3. *epi* oo macneheedu yahay “gudaha” amaba “galis” sida aan ka arki karno Matayos 27:42; Falimaha Rasuullada 9:42; 11:17; 16:31; 22:19; Rooma 4:5, 24; 9:33; 10:11; 1 Timoteyos 1:16; 1 Butros 2:6.
4. XAALADDA KU TIRINTA iyadoo aanu la soconin MEELEEYE sida aan ka arki karno Galatiya 3:6; Falimaha Rasuullada 18:8; 27:25; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10
5. *hoti* oo macneheedu yahay “rumaysanahay” oo tusinaysa waxa la rumaysanayaa wuxuu koobsanayo
  - a. Ciise waa Kan Quduuska ah ee Ilaah (Yooxanaa 6:69)
  - b. Ciise waa Isagii (Yooxanaa 8:24)
  - c. Ciise wuxuu ku dhex jiraa Aabbaha, oo Aabbuhuna isagu ku dhex jiraa (Yooxanaa 10:38)
  - d. Ciise waa Masiixa (Yooxanaa 11:27; 20:31)
  - e. Ciise waa Wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)
  - f. Ciise waxa soo diray Aabbaha (Yooxanaa 11:42; 17: 8,21)
  - g. Ciise wuxuu la mid yahay Aabbaha (Yooxanaa 14:10-11)
  - h. Ciise wuxuu ka yimid Aabbaha (Yooxanaa 16:27,30)
  - i. Ciise wuxuu naftiisa ku magacaabay magacii axdiga ee Aabbaha, “Isaga”(Yooxanaa 8:24; 13:19)
  - j. Waxaan la noolaan doonnaa Isaga (Rooma 6:8)
  - k. iise wuu dhintay waanu sarakacay ( 1 Tesaloniika 4:14)

VI. Gebogabada

Rumaysadka kitaabiga ahi waa dadka oo ka jawaab celiya erayga Waxyiga ah iyo ballan qaadkiisa. Ilaah had iyo waxbuu socodsiiyaa (Yooxanaa 6:44,65), laakiinse qaybta ka midka ah Waxyigan xidhiidhintiisa ayaa ah baahida aadanuhu u qabaan inay kaga jawaaba celiyaan

A. Isku hallayn

B. Addeecitaanka axdiga

Rumaysadka kitaabiga ahi waxa weeyi

1. Xidhiidh shakhsi ahaaneed (rumaysadka koobaad)
2. Rumaysashada xaqiiqada kitaabiga ah (rumaysashada waxyiga Ilaah)
3. In si haboon loo addeeco loogana jawaaba celiyo (rumaysadka maalin walba)

Rumaysadka kitaabiga ahi maaha tigidh lagu tago janada amaba siyaasad uu ku jiro damaanad qaad, laakiin waa xidhiidh shakhsi ahaaneed. Waa ujeedada loo abuuray aadanaha iyada oo laga sameeyay ekaanshaha (Bilowgii 1:26-27) Ilaah. Arrintu haddaba waa “xidhiidh.” Ilaah wuxuu u baahan yahay weheshi in lala yeesho, laakiinse maaha heerka laga taagan yahay fiqi ahaan! Haddaba weheshiga Ilaaha quduuska ah lala yeelanayaa waa mid dalbanaya in carruurta ay ka tarjumaan oo muujiyaan dabecadda Ilaah (quduusnimda, Laawiyaantii 19:2; Matayos 5:48; 1 Butros 1:15-16). Leexashadu (Bilowgii 3) waxay saamaysay kartideennii ahayd inaan si saxa u jawaab celino. Sidaasi darteedna, Ilaah wuxuu ka jawaab celiyay arrintaas (Yexesqeel 36:27-38), isaga oo ina siinaya “qalbi cusub” iyo “ruux cusub,” taasi oo

rumaysadka iyo toobad keenka inoogu suurto gelinaysa inaan weheshi la yeelano oo addeecno isaga!

Dhammaanba saddexdani waa kuwo muhiim ah, waana in saddexdanba la wada sameeyo. Ujeedadu waxa weeyi in la ogaado oo la garto Ilaah (macnaha ay samaynayaan Cibraaniyada iyo Giriigguba) iyo in dabecaddiisu ay ka muuqato qaab nololeedkeenna. Ujeedada rumaysadku maaha inaan maalin ku tegi doono janada. Laakiinse waa la midnimada Masiixa ee maalin walba!

Rumaysashada aadanuhu ayaa ah natiijada (Axdiga Cusub), mana aha waxyaalaha ku salaysan (Axdiga Hore) ee ah xidhiidhka lala yeelanayo Ilaah: rumaysadka aadanuhu ka qabaan runsheegnimadiisa; kalsoonida aadanuhu ka qabaan isku hallayntiisa. Aragtida halbowlaha u ah Axdiga Cusub badbaadadiisu waa in aadanuhu ay ka jawaaba celiyaan ooo kusii socdaan nimcada iyo naxariista Ilaah ee ku timid Masiixa. Wuu jeclaaday, wuu soo diray, wuu ku deeqay; inaguna waa inaan kaga jawaab celino rumaysad iyo runsheegnimo (Efesos 2:8-9 iyo 10)!

Ilaah runsheega ahi wuxuu rabaa dad runsheeg ah si uu kuwa aan rumaysadka lahayn ugu muujiyo naftiisa iyo si uu ivaga ugu keeno rumaysadkiisa.

**NASB** “magaciisa daraaddiis”  
**NKJV** “magaciisa”  
**NTSV** “magaciisa daraaddiis”  
**TEV** “Masiixa daraaddiis”  
**NJB** “tixgelinta magaciisa darteed”

Eeg mawduuca gaarka ah 10:9



**NASB, NRSV** “dhammaanba wixii aan Yuhuud ahayn”  
**NKJV** “quruumaha oo dhan”  
**TEV** “quruumaha dadka oo dhan”  
**JB** “dhammaanba quruumaha jaahilka ah”

Kani waa injiilka caalamiga ah, waana ballan qaadkii Ilaah ee cafiska denbiga Bilowgii 3:15 waxaanu koobsanayaa aadanaha oo dhan. Dhimashada Ciise waxay beddel u tahay denbigii ay ku dheceen carruurta Aadan (Yooxanaa 3:16; 4:42; Efesos 2:11-3:13; 1 Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9). Haddaba, Bawlos waxa uu arkayaa yeedhitaankiisa gaarka ah ee loogu yeedhay inuu injiilka ku wacdiyo kuwa aan Yuhuudda ahayn (Falimaha Rauullada 9:15; 22:21; 26:17; Rooma 11:13; 15:16; Galatiya 1:16; 2:29; Efesos 2:3,8; 1Timoteyos 2:7; 2 Timoteyos 4:17).

#### **MAWDUUC GAAR AH: WACDINTA BOOBKA**

Qofka akhriyayow waa inaan kuu qirto in wacdintaydu aanay ahayn mid ku tiirsan madaahib gooni ah, laakiinse waa wacdinta injiilka. Waxa aan rumaysanahay in Ilaah uu badbaadada aadanaha u lahaa qorshe weligiis ah (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 18:36:22-39; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; 13:29; Rooma 3:9-18,19-20,21-32), kuwaas oo uu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26-27). Axdiyaduna waxa ay ku midoobeen Masiixa (Galatiya 3:28-29; Kolosay 3:11). Ciisena waxa uu yahay Ilaah oo qarsoonaa balse imika is muujiyay (Efesos 2:11-3:13)!

Tani waa fahan hore oo ku sugan fasiraadaha Qorniinanada (Yoonis). Waxaan ka wada akhriyay dhammaanba qoraallodooda! Waa mid hubaashii fahirayaasha oo dhammi xiiseeyaan, laakiin Qorniin ahaan waxa lagasoo qaaday run.

**1:6 “Idinkuna kuwaas dhexdooda aad ku jirtaan”** Bawlos waa tusaale wayn oo loo soo qaadan karo naxariista iyo nimcada Ilaah, maxaa yeelay isagu markii hore kaniisadda wuu cadaadin jiray laakiin Ilaah ayaa siiyay nimco iyo naxariis. Kuwa markaas uu qoraalkan u qorayayna waxa ay tusaale u yihiin nimcada iyo naxariista Ilaah ee iyagoon mutaysan uu siinayo dadka.



**NASB, NKJV** “oo ah kuwii loo yeedhay oo Ciise Masiix.”  
**NRSV** “kuwaasoo loogu yeedhay inay u ahaadaan Ciise Masiix”  
**TEV** “kuwaasoo Ilaah ugu yeedhay inay u ahaadaan Ciise Masiix”  
**JB** “kuwaas oo yeedhitaankiisa dartiis ugu ahaaday Ciise Masiix”

Tani waxa ay noqon kartaa:

1. Waxa ay noqon kartaa kaniisadda, oo macneheedu waa “kuwii loogu yeedhay”
2. Waxay noqon kartaa doorasho Ilaahi ah (Rooma 8:29-30; 9:1; Efesos 1:4,11; 3:21; 4:1,4).
3. Tarjumaadda Revised English Bible ayaa wuxuu odhanayaa, “Kuwiinna maqlay yeedhitaaka iyo iyo inaad u ahaateen Ciise Masiix.”

Waxa sidan oo kale iyaduna xambaarsan fahanka cibaaradan lagu tarjumay ee NRSV, TEV, iyo JB ga. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

#### MAWDUUC GAAR AH: LOO YEEDHAY

Ilaah hadiyo goor isagaa dadka u yeedha oo kuwa rumaystana dhiirri geliya (Yooxanaa 6:44, 65; 15:16; 1 Korintos 1:12; Efesos 1:4-5,11). Haddaba erayga ‘yeedhmo’ waxa uu leeyahay macnoyaal dhowra:

- A. Denbiilayaasha waxa loogu yeedhaa badbaadada iyo nimcada Ilaah ee ku dhammays tirantay shaqadii Masiixa (*kelētos*, Rooma 1:6-7; 9:24, waxaanay la mid tahay 1 Korintoos 1:1-2 iyo 2 Timoteyos 1:9; 2 Butros 1:10).
- B. Denbiilayaasha waxa loogu yeedhaa magaca Rabbiga si ay u badbaadaan (*epikaleō* Falimaha Rasuullada 2:21; 22:16; Rooma 10:9-13).
- C. Rumaystayaasha waxa loogu yeedhay inay u noolaadaan sidii Ciise oo kale (*klēsis* 1 Korintos 1:26; 7:20; Efesos 4:1; Filiboy 3:14; 2 Tesaloniika 1:11; 2 Timoteyos 1:9).
- D. Rumaystayaasha waxa loogu yeedhay shaqooyinka adeegga (Falimaha Rasuullada 13:2; 1 Korintos 12:4-7; Efesos 4:1).

#### AAYADDA 1:7

**<sup>7</sup>Waxaan warqaddan u qorayaa kuwa Rooma jooga oo dhan oo uu Ilaah jeclaaday, oo loogu yeedhay qoduusiin. Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha Aabbeheen ah iyo Rabbi Ciise Masiix.**

**1:7 “oo uu Ilaah jeclaaday”** ereyadan waxa xitaa loo adeegsaday Ciise (Matayos 3:17; 17:5). Iminkana waxa loo adeegsaday kaniisadda Rooma! Arrintahi haddaba waxa ay tusinasaa jacaylka Ilaah u qabo kuwa isku halleeya ee raaca Wiilka. Arrintani sidana waxa laga arki karaa Efesos 1:20 (Waxyaalaha Ilaah u sameeyay Masiixa) iyo 2:5-6 (waxyaalaha uu Masiixu u sameeyay rumaystayaasha).

▣ **“kuwa Rooma jooga”** Bawlos muu bilaabin isagu kaniisaddan, sidoo kalena cid bilowday lama garanayo. Haddaba, warqadani waxa ay ahayd mid uu isku barayo kaniisaddii horeba uga dhisnayd Rooma, oo kitaabka Roomana waxa weeyi ku wacdinta injiilka ugu wayn ee Bawlos sameeyo

▣

**NASB “loogu yeedhay qoduusiin ahaan”**

**NKJV, NRSV, JB “oo loogu yeedhay qoduusiin”**

**TEV “loogu yeedhay inay ahaadaan dadkiisa”**

Eraygan ‘qoduusiin’ waxa ay tilmaamasaa heerka ay ka taagan yihiin Masiixa, laakiinse maaha inay yihiin denbi laawayaal. Eraygani haddaba, hadiyo goor wuxuu ahaa mid tilmaamaya dad badan, marka laga reebo Efesos 4:21, laakiinse inaad Masiixi noqoto waxa ay ka dhigantahay inaad noqotaan isku qoys iyo isku bulsho ah sidii hal jidh oo kale.

Aayadda 1 waxa ay sheegasaa Bawlos oo loogu yeedhay inuu rasuul ahaado, sidoo kalena rumaystayaasha waxa u yeedhay Ciise Masiix, waana sida aan ka arki karno aayadda 6. Waxa kale oo Masiixiyiinta lagu magacaabay ‘qoduusiin’ sida aan ka arki karno aayadda 7. Haddaba, ‘yeedhmadani’ waxa ay ahayd midda Axdiga Cusubi inoogu tilmaamayo xaqiiqada Ilaah. ma jiro qof keliya oo ka mida aadanaha kaasi oo nafsad ahaantiisa isugu yeedhi kara (3:9-13; Ishacyaah 53:6; 1 Butros 2:25). Ilaah marwalba waxa uu leeyahay qorshe (Yooxanaa 6:44,65; 15:16). Waxaanu inaga inala dhigtaa axdi, oo run ahaantiina waa badbaadadeenna, laakiinse haddana waxaan kala leenahay hadiyadaha adeegga (1 Korintos 12:7,11) iyo nolosheenna Masiixinimada.

## MAWDUUC GAAR AH: QUDUUSIINTA

Eraygan luqada Cibraaniga waxa lagu yidhaahdaa *kadash*, oo macnihiisuna waxa uu yahay qof amaba meel loo gaar yeelay Ilaah in lagu caabudo. Ilaah aadanaha waxa uu u abuuray inuu la yeesho xidhiidh, laakiinse denbiga (Bilowgii 3) ayaa sababay gebi u dhexeeya Ilaaha Quduuska ah iyo aadanaha denbiga miidhan ah. Haddaba, Ilaah waxa uu damcay inuu dib xidhiidh ula yeesho dadkiisa, sidaasi darteedna dadka waxa uu ka rabaa inay noqdaan ‘quduus’ (Laawiyiintii 11:44; 19:2; 207, 21:8). Xidhiidh ku dhisan rumaysadka Ilaah ayaa dadku ay ku noqonayaan quduusiin iyagoo dhowraya axdigiisa, laakiinse haddana waxa loogu yeedhay nolol ay ku dheehan tahay quduusnimo (Matayos 5:48).

Noloshan quduusnimadu ay ku dheehantahayi waa suurto gal, maxaa yeelay Masiixiyiintu si buuxda ayaa loo aqbalay oo lagu cafiyay nolosha Ciise Masiix iyo camalka iyo joogitaanka Ruuxa Quduuska ah oo dhex deggan qalbiyadooda. Arrintan haddaba waxa ka dhalanaya laba wax oo caqli gal ah:

1. Inay quduus ku noqdeen awoodda Masiixa iyo xaqnimadiisa
2. In loogu yeedhay inay noolaadaan nolol quduusa joogitaanka Ruuxa aawadeed.

Masiixiyiintu waa ‘quduusiin’ (*hagioi*) maxaa yeelay noloshooda waxa dhex jooga (1) Doonista Aabaha Ilaaha ah; (2) shaqada Wiilka Quduuska ah oo ah Ciise; (3) iyo Ruuxa Quduuska ah oo la jira.

Haddaba Axdiga Cusubi hadiyo jeer quduusiin waxa uu uga hadlayaa iyaga oo badan (marka laga reebo hal mar oo ku jirta Filiboy 4:12, laakiinse xitaa qoraal ahaan waxay u muuqataa wax tilmaamaya dad badan). In haddaba la badbaado macneheedu waxa weeyi inaad qoyska ka mid ahaato, ood noqoto jidh ka mida dhismaha! Waayo rumaysadka uu inoo sheegayo Kitaabka Quduuska ahi wuxuu ku bilaabmaa shakhsi ahaan, laakiinse wuxuu ku yimaaddaa iskaashi iyo in Ilaah lawada caabudo. Dhammaanteen waxaan leenahay hadiyad ahaan la inoo siiyay (1 Korintos 12:11) caafimaad, korinin, iyo inaan ka mid ahaanna jidhka Ciise Masiix oo ah kaniisadda (1 Korintos 12:7). Waxaana la inoo badbaadiyay inaan adeegno! Oo quduusnimaduna waa waxa uu qoysku ku dhisan yahay!

▣ **“Nimco ha idinla jirto iyo nabad ka timaada Ilaaha”** tani waa qaabka uu Bawlos u furayo ducada iyo salaanta, waana dhaqan ahaan ‘salaanta’ (*charein*) ay adeegsan jireen Giriigtu, laakiin waxa gaara oo la socdo eray Masiixiyiintu adeegsadaan oo ah ‘nimco’ (*charis*). Haddaba, waxa laga yaabaa Bawlos inuu isku xidhayay salaanta furitaanka ee Giriigta iyo salaana dhaqameedda Yuhuudda oo ahayd *Shalom* amaba ‘nabad.’

▣ **“ka timaada Ilaaha Aabbeheen ah iyo Rabbi Ciise Masiix.”** Bawlos hadiyo goor waxa aan arkaynaa isaga oo labadan magac is barbar dhigaya (1 Korintos 1:3; Galatiya 1:3; Efesos 1:2; Filiboy 1:2; 2 Tesalonika 1:2; 1 Timoteyos 1:1; 2 Timoteyos 1:2; Tiitos 1:4). Waana sida uu labadan magac ee saddexnimada ka mida isugu xidhayo, waxaanay tilmaamasaa ilaahnimada Ciise iyo inuu la siman yahay Ilaah.

## MAWDUUCA GAAR AH: AABBAHA

Axdiga Hore ee kitaabku waxa uu tilmaamayaa qaraabanimada Ilaah iyadoo lagasoo qaadayo Aabbe

1. Ummadda reer Israa’iil waxa lagu magacaabay inay yihiin carruurtii Ilaah (Hoosheeca 11:1; Malaakii 3:17).
2. Xitaa wakhtiyadii hore Sharciga Kunoqoshadiisa waxa Ilaah loogu yeedhay Aabbe (Sharciga Kunoqoshadiisa 1:31).
3. Sharciga Kunoqoshadiisa 32, dadka Israa’iil waxa lagu magacaabay ‘carruurtiisa’ halka Ilaahna lagaga magacaabay ‘Aabbihiiin’
4. Waxa lagu dhex sheegay Sabuurka 103:13 iyo sidoo kale Sabuurka 68:5 iyadoo lagu yeedhay Aabbaha agoomaha.
5. Waxay caan ka dhex ahayd nebiyada (Ishacyaah 1:2; 63:8; Israa’iil oo carruur ah, Ilaah oo Aabbe ah, 63:16; 64:8; Yeremyaah 3:4,19; 31:9).

Ciise Masiix waxa uu ku hadli jiray luqada Aramaatiga, sidaasi darteedna meelo badan oo ahayd ‘Aabbe’ ayaa waxa ay u muuqataa sida Giriigta waana *Pater* oo waxa laga yaabaa inay ka tarjumayso erayga Aramaatiga ah ee Abba (14:36). Haddaba, erayga ‘Aabbe’ waxa loogu isticmaalay Axdiga Hore Ilaah oo keliya, laakiin Ciise inbadan ayuu isticmaalay. Waxaanay muujinaysa xidhiidhkeenna cusub ee aan Masiixa dartiis kula veelannay Ilaah.



## AAYADAHA 1:8-15

<sup>8</sup>Marka hore waxaan Ilaahay xagga Ciise Masiix ugu mahad naqayaa kulligiin, maxaa yeelay, rumaysadkiinna waxaa lagaga warramaa dunida oo dhan. <sup>9</sup>Waayo, Ilaah, kan aan ruuxayga ugu adeego xagga injiilka Wiilkiisa, ayaa markhaati iiga ah sidaan maalin walbaba joogsi la'aan baryadayda idiinku xusuusto, <sup>10</sup>anigoo weydiisanaya inaan imminka ugu dambaysta si kastaba ku lib helo inaan Ilaah idankiisa idiinku imaado. : <sup>11</sup>Waayo, aad baan u doonayaa inaan idin arko oo idin siiyo hadiyad Ruuxa ka timaada inaad ku xoogaystaan; <sup>12</sup>taasuna waa inaan idinkula dhiiranaado rumaysadka, kiinna iyo kaygaba. <sup>13</sup>Walaalayaalow, dooni maayo inaad garan weydaan inaan marar badan damcay inaan idiin imaado inaan idinkana midho idinku dhex lahaado sida aan quruumaha kale ugu dhex leeyahay, laakiin waa layga hor joogsaday ilaa haatan. <sup>14</sup>Waxaa waajib la iigu leeyahay inaan wacdiyo Gariigta iyo Barbariyiinta, kuwa caqliga leh iyo kuwa garaadka la'ba. <sup>15</sup>Sidaas daraaddeed anigu diyaar baan u ahay inaan injiilka ku wacdiyo kuwiinna Rooma Joogana.

1:8 “Marka hore” macneheedu waxa weeyi ugu horrayn amaba ‘aan ku bilaabo’.

▣ “waxaan Ilaahay xagga Ciise Masiix ugu mahad naqayaa” sida caadiga ah Bawlos wuxuu markasta Ilaah ugu mahad celiyaa oo ugu ducaystaa isagoo usii maraya Ciise Masiix, maxaa yeelay Ciise waa dariiqa keliya een ku gaadhi karno Ilaah! eeg mawduuca gaarka ah ee 7:25.

▣ “kulligiin” markan uu isticmaalayo ‘kulligiin’ sida aayadda 7, waxa laga yaabaa inay tilmaamayso hinaasihii iyo khilaafkii ka dhexeeyay, hogaamiyayaashii Yuhuudda u dhashay ee Masiixiyiinta ahaa, isla markaasna u qaxay Rooma. Haddaba Rooma 9-11 ayaa arrintan mid la mida ka hadlaysay.

Sidoo kale waxa laga yaabaa in eraygani uu isku darayo kuwo daciifka ah iyo kuwa xooggan, sida aan ka arki karno Rooma 14:1-15:13. Maxaa yeelay Ilaah kaniisadda Rooma oo dhan dadkeeda si isku mida ayuu u wada jecelyahay!

▣ “maxaa yeelay, rumaysadkiinna waxaa lagaga warramaa dunida oo dhan” Rooma 16:19 ayaa arrintan oo kale ka hadlaysay, waxaana weeyi erayo si cad u tibaaxaya Roomaanka (1 Tesaloniika 1:8).

1:9 “Ilaah...ayaa markhaati iiga ah” Bawlos waxa uu axdi ka dhiganayay magaca Ilaah( 9:1; 2 Korintos 1:23; 11:10-11,31; 12:19; Galatiya 1:20; 1 Tesaloniika 2:5). Tanina waa arrin uu ku muujinayo dhaqan ahaan sida Yuhuuddu ay u muujin jireen inay run sheegayaan.

▣ “kan aan ruuxayga ugu adeego” tani waa tusaale wanaagsan oo muujinaysa isticmaalka ruuxa aadanaha (8:5,10,16; 12:11) ee noloshooda (breath, Hebrew *ruach*, Bilowgii 2:7).

1:10 “anigoo weydiisanaya” Bawlos isagu muu bilaabin amaba muu asaasin kaniisaddan hase ahaatee si joogto ah ayuu ugu tukanayaa iyaga (2 Korintos 11:28), sida uu kaniisadihiisaba ugu tukanayay! Si kastaba ahaatee, Bawlos wuxuu kaniisadda Rooma ku lahaa saaxiibbo iyo adeegayaal sida aan ka arki karno cutubka 16 oo arrintaas muujinaysa.

▣ “haddii” Waa eray shuruudeed uu qoraaga ku cabirayo runta hadalkiisu iyo ujeedada uu u socdo. Haddaba, Bawlos wuxuu qorsheeyay inuu tago oo booqdo Rooma marka uu u socdo Isbaniya (15: 22-24), manuu qorshaynin inuu wakhti badan halkaas ku negaado. Bawlos hadiyo jeer wuxuu rabay goobo kale oonay cidid hore uuga shaqaynin (15:20; 2 Korintos 10:15,16). Waxa suurto gal ah markaas in ujeedooyinkiisa uu waraaqda Rooma ugu qorayay inay ka mid ahayd isagoo rabay in socdaalkiisa uu u rabo dhaqaale uu ugu socdaalo Isbaaniya (15:24).

▣ “inaan Ilaah idankiisa idiinku imaado” waxay la mid tahay aayadda 13 iyo 15:31, oo Bawlos wuxuu ogsoonaa in noloshiisa iyo qorshayaashiisa aanu isagu iska lahayn, balse Ilaah iska leeyahay (Falimaha Rasuullada 18:21; 1 Korintos 4:19; 16:7). Eeg mawduuca gaarka ah 12:2

**1:11 “Waayo, aad baan u doonayaa inaan idin arko”** waxay la simantahay 15:23. Waayo Bawlos wakhti badan ayuu ku talo jiray inuu la kulmo Masiixiyiinta ku nool Rooma (Falimaha Rasuullada 19:21).

▣ **“oo idin siiyo hadiyad Ruuxa ka timaada”** cibaaradan ah ‘hadiyadda Ruuxu’ waxa loo adeegsaday fahanka ruuxiga ah amaba barakada (11:29; 15:27). Bawlos waxa uu si gooni ah naftiisa uga arkay in loogu yeedhay wacdinta amaba gaadhista dadka aan Yuhuudda ahayn (aayadda 15).

▣ **“inaad ku xoogaystaan”** eeg mawduuca *histēmi*. Gaarka ah ee 5:2.

**1:12 “taasuna waa inaan idinkula dhiiranaado rumaysadka, kiinna iyo kaygaba”** waa u jeedada ku jirta isu imaatinka iyo caabudaadda wada jirka ah ee dadka Masiixiyiinta ah. hadiyadaha waxa macnohoodu yahay midaynta iyo u adeegista dadka Masiixiyiinta ah, sidoo kale Masiixiyiinta waxa la siiyay hadiyadda waxyaalaha guud ahaan wanaagsan (1 Korintos 12:7). Dhamaanba hadiyadaha waxa bixiya Ruuxa badbaadada (I Korintos 12:11). Dhammaanba Masiixiyiinta waxa la siiyay yeedhitaan, hadiyad, iyo adeeg buuxa (Efesos 4:11-12). Haddaba, Bawlos waxa uu sheegayaa dareenkiisa ku waajahan awoodda Rasuulnimada, laakiinse haddana waxa uu sheegayaa in dadka Masiixiyiinta ah midkoodba kan kale u baahan yahay.

**1:13 “Walaalayaalow, dooni maayo inaad garan weydaan”** Wuxuu rabaa Bawlos inuu soo ban dhigo hadal muhiim ah (11:25; 1 Korintos 10:1; 12:12 Korintos 1:8; 1 Tesaloniika 4:13).

▣ **“laakiin waa layga hor joogsaday ilaa haatan”** ereyadan oo kale ayaa waxa ay kusoo arooreen 1 Tesaloniika 2:18 halkaasoo uu sheegay in shaydaanku ka hor joogsaday arrintaas. Si kastaba ha ahaatee labadan arrimoodba waa run (Ayuub 1-2; Daanyeel 10).

▣ **“inaan idinkana midho idinku dhex lahaado sida aan quruumaha kale ugu dhex leeyahay”** qoraalkan marka aan eegno erayga ‘midho’ waxa laga yaabaa inuu tilmaamayo dadka cusub ee u imanaya Masiixa, laakiin marka aan eegno Yooxanaa 15:1-8 iyo Galatiya 5:22 oo tilmaamaya hana qaadnimada Masiixinimada. Matayos 7 ‘midhohooda ayaad ku garan doontaan’ laakiin ma tilmaamayso midhuhu waxa uu yahay. Meesha keliya ee lagu tilmaami karo inay macnaha la siman tahay ayaa waxa ay tahay Filiboy 1:22.

**1:14 “Waxaa waajib la iigu leeyahay”** Bawlos dhowr jeer ayuu ereyadan ku dhex adeegsanayaa kitaabka Rooma

1. Waxa waajib looga dhigay inuu Injiilka ku wacdiyo dhammaan wixii aan ahayn Yuhuud.
2. Waxa uu sheegayaa inaan jidhka waxba loogu waajibinin (8:12).
3. Kaniisadda dadka aan Yuhuudda ahayn waxa lagu waajibiyay inay iskaashi la sameeyaan kaniisadda hooyada ah ee ku taalla Yerusaalem 15:27.

▣ **“inaan wacdiyo Gariigta”** waxay ahaayeen dadkii ugu ilbaxnimada badnaa dadka ku nool bariga dhexe sidoo kalena dadka Roomaanka ayaa waxay ahaayeen kuwo qaatay xadaaradda Giriigta.

▣ **“iyo Barbariyiinta”** (*onomatopoeia*) macnaheeda waxa loogala jeedaa dadka aan aqoonta lahayn amaba dadka aan lahayn wax dhaqana, gaar ahaan xagga woqooyiga waxa loo isticmaali jiray dadka aan ku hadli jirin luqadda Giriigga.

▣ **“kuwa caqliga leh iyo kuwa garaadka la'ba”** waxa suurto gala inay tahay Giriigta marka loo eego Barbariyiinta, laakiinse waxa laga yaabaa inay tilmaamayso dhammaanba qaybaha dadka ee kala duwan.

#### **AAYADAHA 1:16-17**

**Waayo. anigu injiilka ka xishoon maayo, maxaa yeelay. waa u xoogga Ilaah xagga badbaadinta ku alla kii rumaysta. marka hore Yuhuudda dabadeedna Gariigta 17 Waayo. dhexdiisa waxaa laga muujiyaa xaqnimada Ilaah oo rumaysad ka timaada rumaysadna u socota. sida qoran. Kii xaq ahu rumaysad buu ku noolan doonaa.**

**1:16-17** aayadaha 16-17 waxa weeyi ujeeddada kitaabkan. Sidoo kale ujeedadani waxay intan kasii wayntahay oo lagu soo koobayaa 3:21-31.

**1:16**

**NASB, NRSV** “anigu injiilka ka xishoon maayo”  
**NKJV** “anigu injiilka Masiixa ka xishoon maayo”  
**TEV** “kalsooni buuxda ayaan ku qabaa injiilka”  
**JB** “anigu warka wanaagsan ka xishoon maayo”

Waxa laga yaabaa Bawlos inuu wax kasoo xiganayo eraydii Masiixa, waana sida ku qoran Markos 8:38 iyo Luukos 9:26. Kamana xishoonayo wanaagga injiilka amaba xitaa cadaadiska lagu hayay dadka Masiixiyiinta ah (2 Temoteyos 1:12,16,18).

1 Korintos 1:23 Yuhuuddu waxay ka xishoon jireen injiilka maxaa yeelay waxa uu tilmaamayaa silicii Masiixa iyo Giriigta maxaa yeelay waxa ay sheegtay sarakicista.

▣ **“xagga badbaadinta”** Axdiga Hore, erayga Cibraaniga ah ee (*yasho*) waxa loo adeegsan jirin badbaadada la taaban karo ee jidh ahaaneed (Yacquub 5:15), laakiin Axdiga Cusub erayga (*sōzō*) waxay tilmaamaysaa badbaadada ruuxiga ah (1 Korintos 1:18,21). Eeg Robert B. Girdlestone, *Synonyms of the Old Testament*, p 124-126.

▣

**NASB** “ku alla kii rumaysta”  
**NKJV** “mid kasta oo rumaysta”  
**NRSV** “mid kasta oo rumaysad haysta”  
**TEV** “dhammaan kuwa rumaysta”  
**JB** “dhammaan kuwa haysta rumaysadka”

Injiilka waxa loogu talo galay dadka oo dhan, laakiin rumaysadku waa shuruudda ugu horraysa ee aqbalitaanka (Falimaha Rasuullada 16:30-31). Marka labaadna waa in la helo towbad keen (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21). Haddaba Ilaah dadka waxa uu kula heshiiyaa axidiga, oo markastana waxa uu leeyahay qorshayaal u dejisan (Yooxanaa 6:44, 65). Laakiinse waxa jira shuruudo arrintaas xidhiidh la leh. Eeg mawduuca gaarka ah ee 1:5.

Haddaba, eraygan rumaysad oo ah kalsooni iyo isku hallayn, ayaa waxa uu tusinayaa lahaanshaha rumaysadka iyo inuu ahaado mid joogto ah oo sii socda (1 Korintos 1:18; 15:2; 2 Korintos 2:15; 1 Tesaloniika 4:14)!

Asal ahaan eraygani waxa uu la xidhiidhaa luqadda Cibraaniyada, sidoo kalena erayga ‘rumaysad’ macnihiisa xagga luqadda Giriigta marka la eego waxa weeyi xasillooni amaba meel qofku uu cidhibta ku hayo isla markaasna ay adagtahay in laga kexeeyo. Tusaalaha tan kasoo horjeeda ee aan ka arki karno Axdiga Hore ayaa waxa uu yahay “Oo wuxuu cagaha ii saaray dhagax weyn” (Sabuurka 40:2), “Oo tallaabooyinkayguna waxay u dhowaadeen inay simbiiriixdaan” (Sabuurka 73:2). Xagga asal ahaan luqadda Cibraaniyada ayaa *emun*, *emunah*, *aman*, waxa loo adeegsaday qofka la isku hallayn karo ee iimaanka leh.

▣ **“marka hore Yuhuudda”** sababta arrintani waxa ay si faahfaahsan ugu qorantahay 2:9-10 sidoo kalena waxay ku qorantahay cutubyada 9-11. Waxa ay raacsan tahay Matayos 10:6; 15:24; Markos 7:27. Waxa laga yaabaa arrintani inay la xidhiidho hinaasihii ka dhexeeyay Yuhuuddii Masiixiyiinta ahaa iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn ee kaniisaddii Rooma.

**1:17 “xaqnimada Ilaah”** waxay la xidhiidhaa oo tilmaamaysaa (1) dabeecadda Ilaah (2) iyo sida dabeecaddaas uu u siiyo aadanaha denbiilayaasha ah. Tarjumaadda Jerusalem Bible ayaa waxay qoraysaa “tani waa midda muujinaysa xaqnimada Ilaah.” Halka haddaba ay sidoo kalena ka sheegayso qaab nololeedka rumaystayaasha, waxa la odhan karaa asal ahaan waxay ku saabsan tahay Xaqnimada Xukunka Ilaah. Ilaah xaqnimadiisa waxa uu u muujiya aadanaha denbiga badan, oo waxa aynu Masiixa aawadiis ku noqonay kuwo ku badbaada ‘xaqnimo iyo rumaysad’(2 Korintos 5:21; Filiboy 3:9). Waana aayaddii bedeshay rumaysadka Martin Luther. Haddaba, dabeecadda xaqnimada ah ee Ilaah (Rooma 8:28-29; Efesos 1:4; 2:10; Galatiya 4:19). Waa yeedhitaanka nolosha quduusnimada, maxaa yeelay sawirka Ilaah ee ku dhex jira aadanaha waan in la hagaajiyo (2 Korintos 5:21).

## MAWDUUC GAAR AH: XAQNIMADA

‘Xaqnimadu’ waa mawduuca muhiim u ah ardayga Baybalka baranaya waxaana loo baahan yahay in daraasad shakhsi ahaaneed oo dheeraada qofku uu ku sameeyo mawduucan.

Marka aan eegno Axdiga Hore waxa la tilmaamay ‘cadaalad’ amma ‘xaqnimo.’ Haddaba, Ilaah eraygan waxa uu u adeegsaday inuu ku muujiyo dabiicaddiisa, waayo isagu waa xaakinka caadilka ah ee wax walba qiimeeya. Arrintan haddaba khusaysa xaqnimada Ilaah waxa ay tusinasaa inuu yahay kan sameeya xukunka saxda ah.

Aadanaha waxa laga abuuray ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27; 5:1,3; 9:6). Sidii kale waxa aadanaha loo abuuray inay Ilaah la yeeshaan xidhiidh oo la joogaan. Ilaah waxa uu abuuray waxa ugu wayn aadanaha, sidaasi darteedna waxa uu damcay, in iyagu ay Isaga aqoonsadaan, u adeegaan oo jeclaadaan Isaga! Haddaba, waa la tijaabiyay aadanaha bal sida addeecitaankoodu yahay (Bilowgii 3) iyadoo Aadan iyo Xaawana ay ku dhaceen tijaabadaas. Arrintani haddaba waxa ay keentay kala go’itaan ku yimaadda xidhiidhkii u dhexeeyay Ilaah iyo aadanaha (Bilowgii 3; Rooma 5:12-21).

Ilaah haddaba waxa uu ballan qaaday inuu xidhiidhkaas dib usoo nooleeyo (Bilowgii 3:15). Waxaanu sidan ku samaynayaa doonistiisa iyo Isaga oo adeegsanaya Wiilkiisa. Waayo aadanuhu may awoodayn in arrintaas dib u hagaajiyaan (Rooma 1:18-3:20).

Markii aadanuhu danbaabeen, tallaabadii ugu horraysay ee Ilaah qaado isaga oo raba inuu xidhiidhkaas dib u nooleeyo ayaa waxa ay ahayd inuu axdi la dhigto aadanaha, isaga oo markaasna raba inay towbad keenaan oo addeecaan Ilaah. laakiinse way awoodi kari waayeen inay qabtaan wixii laga rabay (Rooma 3:21-31; Galatiya 3). Haddaba, Ilaah waxa uu horeba u lahaa qorshe uu dib ugu soo hagaajinayo axdigii ay jebiyeen aadanuhu, waxaanu arrintaas ku sameeyay sidan:

1. Muujinta aadanaha denbiga miidhan ah oo xaqnimadooda lagu muujiyay shaqadii Masiixa.
2. In si xorriyad leh aadanaha xaqnimo loogu siiyay shaqada Masiixa aawadeed.
3. In lasiiyay Ruuxa keenaya xaqnimada
4. Dib usoo celinta xidhiidhkii iyo la joogitaankii Ilaah ee Beer Ceeden, oo Masiixa ayaa keenay muuqaalka Ilaah (Bilowgii 1:26-27) ee ku jira Masiixiyiinta.

Si kastaba ha ahaatee, Ilaah waxa uu rabaa jawaab ku dhisan axdi. Ilaah Isaga ayaa wax walba xukuma oo aadanahana quudiyay, laakiinse aadanahuna waa inay arrintaas ka jawaaba celiyaan oo jawaabtoodana si joogta ah u wadaan.

1. Towbad keen
2. Rumaysad
3. Noloshu oo uu ku dheehnaado addeecitaan
4. Qirasho

Xaqnimada haddaba, waa axdiga isku xidhaya ee u dhexeeya Ilaah iyo wuxuu abuuray kuwan ugu sarreeya oo ah aadanaha. Waxa lagu saleeyay dabeecadda Ilaah iyo shaqadii Masiixa iyo Ruuxa oo inoo suurto gelinay inaan samayno xaqnimada, waana in qof waliba shakhsi ahaan uu sida ugu habboon uga jawaaba celiyo. Aragtida lagu magacaabo ‘xaqnimada iyo rumaysad.’ Waa aragti lagu dhex muujiyay Injiillada, mana aha mid shuruudahan oo kale wadata, laakiinse waxa qeexay Bawlos, oo erayga xaqnimada macnayaashiisa kala gedisan isticmaalaya in kabadan 100 jeer.

Bawlos wuxuu adeegsanayaa eraygan *dikaiosunē* oo asal ahaantiisa waxa uu kasoo dhegtay macnaha ay ka samaynaso luqadda Cibraaniyada *SDO* oo ah mid lagu dhex adeegsaday Septuagint ga, oo kama aanu keenin qoraallada Giriigta. Xagga Giriigta marka laga eero eraygani wuxuu la xidhiidhaa qof addeeca waxyaabaha la xidhiidha ilaahnimada iyo bulshada. Laakiinse xagga Cibraaniga waxa had iyo jeer ay ka tarjumaysaa axdi. Ilaah waa cadaali, oo waxa uu rabaa in dadkiisu ay ka tarjumaan oo muujiyaan dabeecaddiisa. Haddaba, aadanahan denbiga la daahiriye ayaa waxa ay noqonayaan abuur cusub. Noloshan cusboonaanta ah waxa ka imanaya nolol wanaagsan oo ku dheehan cibaado (Roman Katoliguna waa waa sida ay xaqnimada u arkaan). Haddaba, maadaama oo Israa’iil iyagu gaar isu arkayeen may jirin siyaabo lagu kala saaro dadka caadiga iyo kuwo qudiisiinta ah isla markaasna ku socda doonista Ilaah. Eraygan lagu dhex adeegsaday Cibraaniyada iyo Giriiggaba waxa loo tarjumay luqada Ingiriisida “xaq” (iyadoo la xidhiidha bulshada) iyo “xaqnimo” (oo la xidhiidha diinta).

Injiilka amaba warka wanaagsan ee Ciise Masiix ayaa waxa uu yahay, in aadanahaas denbaabay dib loogu cafiya si ay Ilaah ula yeeshaan xidhiidh. Arrintan waxa lagu fuliyay jacaylka Aabbaha, naxariista, nimcada; noloshu Wiilka, dhimashadiisa, iyo sara kicistiisa; iyo Ruuxa inoo muujinaya warka wanaagsan. Xaqnimadu

waa hadiyad Ilaah bixiyo, laakiin waa inay ku dheehnaato cibaado (Augustine heerka uu ka taagnaa xaqnimadu wuxuu ahaa xoojinta xornimada injiilka, halka Rooman Katoligu ka xoojinayaan beddelitaanka nolosha ku dhisan jacaylka iyo rumaysadka). Marka aan eegno mad-habka Reform (Dib u hagaajin) ‘xaqnimada Ilaah’ waxa weeyi in denbiga aadanahu uu yahay mid Ilaah aqbali karo, laakiin Catholic amaba Kaatoliga, waxa weeyi in qofku uu quduus iska dhigo oo marwalba Ilaah oo kale isu ekaysiyya. Haddaba, xaqiiqada marka la eego labadaba waa ay tahay!

Aniga fahankayga aan ka qabo Kitaabka Quduuska ah, laga bilaabo Bilowgii ilaa Muujintii waxa uu yahay dib usoo hagaajinta xidhiidhkii Ilaah ee beer Ceeden. Baybalku waxa uu ku bilaabmayaa xidhiidhkii ka dhexeeyay Ilaah iyo aadanaha markii dhulka la abuuray ( Bilowgii 1-2) waxaanu ku dhammaanayaa aragtidaas mid lamida (Muujintii 21-22). Muuqaalka Ilaah iyo ujeedadiisuba waxa ay noqon doonaan kuwo dib loo hagaajiyo!

Aniga aragtidayda gebi ahaanba ku waajahan Baybalku marka laga bilaabo Bilowgii 4 ilaa Muujintii 20, waxa weeyi Ilaah oo dib u hagaajin ugu samaynaya xidhiidhkii Beer Ceeden. Baybalku wuxuu ku bilaabmayaa Ilaah iyo aadanaha oo xidhiidh wada lahaa (Bilowgii 1-2) waxaanu ku dhammaanayaa isla arrintaas (Muujintii 21-22). Ilaah ekaanshihiisa uu ka sameeyay aadanaha iyo ujeeddadiisuba waxay noqon doonaan kuwo dib loo hagaajiyo!

Si baadhitaan aad ugu samayso falaqayntan aan kor kusoo xusnay u firso aayadahan aan kasoo xulnay Axdiga Cusub:

1. Ilaah waa mid xaqnimo leh (waxa ay la xidhiidhaa Ilaah oo ah Xaakin)
  - a. Rooma 3:26
  - b. 2 Tesaloniika 1:5-6
  - c. 2 Timoteyos 4:8
  - d. Muujintii 16:5
2. Ciise wuxuu leeyahay xaqnimo
  - a. Falimaha Rasuullada 3:14; 7:52; 22:14
  - b. Matayos 27:19
  - c. 1 Yooxanaa 2:1,29; 3:7
3. Ilaah wuxuu abuuray xaqnimo ayuu la doonayaa
  - a. Laawiyiintii 19:2
  - b. Matayos 5:48 (Rooma 5:17-20)
4. Ilaah waxa uu rabaa inuu bixiyo oo dib usoo nooleeyo xaqnimada
  - a. Rooma 3:21-31
  - b. Rooma 4
  - c. Rooma 5:6-11
  - d. Galatiya 3:6-14
  - e. Waxa bixiya Ilaah
    - 1) Rooma 3:24; 6:23
    - 2) 1 Korintos 1:30
    - 3) Efesos 2:8-9
  - f. Waxa lagu helaa rumaysad
    - 1) Rooma 1:17; 3:22.26; 4:3,5,13 9:30; 10:4,6,10
    - 2) 1 Korintos 5:21
  - g. Waxa lagu helayaa waxqabadkii Wiilka
    - 1) Rooma 5:21-31
    - 2) 2 Korintos 5:21
    - 3) Filiboy 2:6-11
5. Doonista Ilaah waa in kuwa isaga raacaa ay xaqnimo lahaadaan
  - a. Matayos 5:3-48; 7:24-27
  - b. Rooma 2:13; 5:1-5; 6:1-23
  - c. 2 Korintos 6:14
  - d. 1 Timoteyos 6:11

- e. 2 Timoteyos 2:22; 3:16
- f. 1 Yooxanaa 3:7
- g. 1 Butros 2:24
- 6. Ilaah dunida waxa uu ku kala xukumi doonaa xaqnimadooda
  - a. Faliimaha Rasuullada 17:31
  - b. 2 Timoteyos 4:8

Xaqnimada waa dabeecadda Ilaah, oo aadanaha denbaabayna waxa lagu siiyay Ciise Masiix aawadiis:

1. Waa xukunka Ilaah
2. Waa hadiyadda Ilaah
3. Waa shaqadii Masiixa

Laakiin sidoo kale in xaqnimada la yeesho waxa loo mara jid, oo maalin maalmaha ka mida ayaa la dhammays tiri doonaa, waana marka labaad ee Masiixu soo laabto.

Kuwani waa waxyaalo lagasoo qaatay *Dictionary of Paul and His Letters* (Qaamuuska Bawlas iyo Waraaqihiisii)

“Calvin, wuxuu si ka badan Luther, u sheegayaa xidhiidhka saamaynta ah ee xaqnimada Ilaah. Luther aragtida uu ka qabo xaqnimada Ilaah ayaa waxa ay tahay dhinaca xorriyadda iyo xukun la’aanta. Calvin ayaa isna waxa uu sheegayaa dabeecadda cajiibka leh ee wada xidhiidhka ku dhisan xaqnimada Ilaah ina siiyay” (p. 834).

Aniga aragtidayda, xidhiidhka Ilaah la leeyahay Masiixiyiinta waxa uu taabanayaa saddex dhinac:

1. Injiilku waa shakhsi (Kaniisadda Bari iyo fahanka Calvin).
2. Injiilku waa runta (fahanka Augustine iyo Luther).
3. Injiilku waa bedelitaanka nolosha (fahanka Kaatoliga).

Dhammaantood waa run waxaana waajib ah in la isku qabto si loo helo Masiixiyad ku dhisan Kitaabka Quduuska ah.

Waa inaan soo dhowayno Ciise!

Waa inaan rumaysano injiilka!

Waa inaan ku dayano tusaalaha Masiixa!



**NASB, NKJV** “rumaysad ka timaada rumaysadna u socota”

**NRSV** “ku timaadda rumaysad una ahaatay rumaysad”

**TEV** “ku timaada rumaysad, bilowga ilaa dhammaadka”

**JB** “waxay muujinasaa sida rumaysadku u keeno rumaysad kale”

Waxa ay tusinaysaa guuritaan amaba Horumar, qaabka sidan oo kale ahna waxa uu ku isticmaalayaa 2 Korintos 2:16 iyo 2 Korintos 3:18. Masiixiyaddu haddaba, waa hadiyad ka muuqanaysa qaab nololeedka iyo dabeecadda.

Waxa jira tafsiirro tarjumaado dhowra oo ereyadan lagu sameeyo, tusaale ahaan tarjumaadda Williams ee Axdiga Cusub ayaa waxay odhanaysaa “sida rumaysadku u keeno rumaysad kasii wayn.” Fahanka fiqi ahaaneed ee arrintan ayaa haddaba waxa uu koobsanayaa dhowr qodod (1) rumaysadku wuxuu ka yimaaddaa Ilaah; (2) aadanuhu waa inay ka jawaaba celiyaan oo jawaab celintana sii wadaan; (3) natiijada rumaysadku waa inay noqoto nolol quduusnimo.

Haddaba, rumaysadka iyo isku hallaynta Masiixa ayaa ah mid aad u muhiim ah (5:1; Filiboy 3:9). Ilaah badbaadada wuxuu ku bixiyaa shuruudda ka jawaaba celinta rumaysadka (Markos 1:15; Yooxanaa 1:12; 3:16; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21).



**NASB** “Kii xaq ahu rumaysad buu ku noolan doonaa”

**NKJV** “Ka xaq ahu rumaysad ayuu ku noolaan doonaa”

**NRSV** “Kan xaq ahi wuxuu ku noolaan doonaa rumaysad”

**TEV** “kii xaqnimadiisa ay Ilaah ku xidhnaataa wuxuu ku noolaan rumaysad”

**JB** “ka xaq ahu wuxuu heli doonaa nolosha rumaysadka”

Waxa laga soo qaatay Xabquuq 2:4. Axdiga Hore ‘rumaysadku’ waxa uu leeyahay macnaha labo jibaaran ee ‘isku hallayn.’ Rumaysadka wax badbaadinayaa wuxuu ku tiirsan yahay xaqnimada Ilaah (3:5,21,22,25,26). Si

kastaba ha ahaatee, rumaysadka aadanuhu waxa uu caddayn u yahay in qof uu isku halleeyay Ilaah. Sidoo kale qoraal la mida Axdiga Hore ayaa lagusoo qaatay Galatiya 3:11 iyo Cibraaniyada 10:38. Qaybta kale ee xigta ee Rooma 1:18-3:20, ayaa waxay muujinasaa waxa kasoo horjeeda xaqnimada Ilaah dartiis loo sameeyo.

Waxa muhiima in iyana xoogaa aan ka aragno tafsiirrada casriga ah iyo sida ay u fasirayaan weedhan.

1. Vaughan: “wuxuu ku bilaabmayaa rumaysan oo rumaysadna wuu ku dhammaanaya”
2. Hodge: “rumaysad oo keliya”
3. Barrett: “ugu horrayn rumaysad ugu danbaynna rumaysad”
4. Knox: “rumaysadka saxda ahu wuu noolaan doonaa”
5. Stagg: “rumaysadkan taagani weligiis wuu noolaan doonaa”

▣ **“iyadoo”** dhowr jeer ayaa la isticmaalay *gar* marka la eego ujeeddada aayadaha 16-17, waxaana weeyi saddex jeer. Waxay haddaba muujinasaa ujeeddada Bawlos ee ku waajahan injiilka (1:18-3:31), waxaanay tilmaamasaa awoodda Ilaah iyo badbaadadu waxa ay ku sugan tahay (1:16-17).

#### **AAAYADHA 1:18-23**

<sup>18</sup>Cadhadii Ilaah ayaa samada laga muujiyey iyadoo ka gees ah cibaadodarrada iyo xaqdarrada dadka oo dhan, kuwaasoo runta ku joojiya xaqdarro; <sup>19</sup>maxaa yeelay, wixii Ilaah laga garan karo waa ka dhex muuqataa iyaga. waayo, Ilaah waa u muujiyey iyaga. <sup>20</sup>Tan iyo abuurniinta dunida waxyaalihiiisii aan la arki karin ayaa bayaan loo arkaa. iyagoo laga garto waxyaalihii la sameeyey. xataa xooggiisa daa'imiska ah iyo ilaahnimadiisa, si ayan marmarsiinyo u lahaan. <sup>21</sup>Maxaa yeelay, iyagoo Ilaah garanaya ayayan isaga Ilaah ahaan u ammaanin. umana ay mahad naqin laakiin fikirradoodii waa xumaadeen, qalbigoodii garaadka la'aana waa madoobaaday. <sup>22</sup>Iyagoo kuwo caqli leh isku sheegaya ayay nacasooben. <sup>23</sup>Ammaantii Ilaaha aan dhimanin ayay ku beddeleen sanam u eg nin dhimanaya iyo haad iyo xayawaan iyo waxa bogga ku guruurta

**1:18 “Cadhadii Ilaah”** aayadaha 18-23 waxay tusinayaan dadkii aan Ilaah aqoonin ee noolaa wakhtigii Bawlos. Sidoo kale dabecadda uu Bawlos ku tilmaamayo jaahilinta waxa laga heli karaa qoraallada Yuhuudda (*Wisdom of Solomon 13:1. Iyo Letter of Aristeas, 134-38*) iyo xitaa kuwa Giriigga iyo Roomaanka. Kitaabka Quduuska ah ee inoo sheegaya jacaylka Ilaah ayaa haddana waxa uu inoo sheegayaa cadhada Ilaah (aayadaha 23-32; 2:5,8; 3:5; 4:15; 5:9; 9:22; 12:19; 13:4-5).

Cadhada iyo jacaylkuba waa laba waxyaalood oo aadanuhu Ilaah ku dabaqaan. Waxa ay sheegaan in runta Ilaah ku jirtaa ay tahay jidka uu ku rabo in rumaystayaashu ay ka jawaabaan si ay u noolaadaan. Haddii qof uu kasoo horjeesto doonista Ilaah (injiilka Masiixa), waxa ku imanaysa cawaaqib xumada taasi ka dhalanaysa, waana sida aan ka fahmi karno (2:5). Haddaba, xukunka qiyaamuhu waa Ilaah shaqadiisa (Ishacyaah 28:21). Sidoo kalena jacaylku waa dabecaddiisa Sharciga Kunoqoshadiisa 5:9 ilaa 5:10; 7:9. Isaga ayaa caddaalada iyo naxariista intaba gacanta ku haya, oo dadka oo dhan waa la wada xisaabin doonaa (Wacdiyaha 12:13-14; Galatiya 6:7), xitaa Masiixiyiinta (14:10-12; 2 Korintos 5:10).

▣ **“ayaa samada laga muujiyey”** sida loogu muujiyay injiilka (aayadda 17) xaqnimada oo kale ayaa cadhada Ilaahna loogu muujiyay!

▣ **“kuwaasoo runta ku joojiya xaqdarro”** waxay tilmaamaysaa doonista aadanaha ee ay ka buuxdo diidmada aan ahayn aqoon darrada (aayadaha 21,32; Yooxanaa 3:17-21). Ereyadan macnohoodu waxa uu noqon karaa (1) way ogyihiin runta laakiin way diidaan; (2) qaabka ay u nool yihiin ayaa tusinaya diidmadda ay ku diidayaan xaqiiqada; (3) noloshooda iyo waxa ay ku hadlayaan ayaa dadka kalena ku sababta inay ogaadaan xaqiiqada oo helaana runta.

#### **MAWDUUC GAAR AH: “RUNTA’ MARKA LA EEGO QORAALLADA BAWLOS**

Bawlos eraygan wuu isticmaalayaa isaga oo adeegsanaya qaabka ay ugu dhigantahay Axdiga Hore, waana *emet* oo macneheedu yahay kalsooni iyo iimaan qabid. Qoraallada Yuhuudda waxay ka tarjumaysaa in loo

isticmaali jiray kala saarista runta iyo beenta.

Bawlos ereygan wuxuu u adeegsanayaa muujinta xaqiiqada injiilka iyo Ciise Masiix:

1. Rooma 1:18,25; 2:8,20; 3:7; 15:8
2. 1 Korintos 13:6
3. 2 Korintos 4:2; 6:7; 11:10; 13:8
4. Galatiya 2:5. 14; 5:7
5. Efesos 1:13; 6:14
6. Kolosay 1:5,6
7. 2 Tesolonika 2:10,12,13
8. 1 Timoteyos 2:4; 3:15; 4:3; 6:5
9. 2 Timoteyos 2:15,18,25; 3:7,8; 4:4
10. Tiitos 1:1, 14

Bawlos wuxuu eraygan u adeegsanayaa isagoo muujinaya inuu ku hadlayo wax sax ah:

1. Falimaha Rasuullada 26:25
2. Rooma 9:1
3. 2 Korintos 7:14; 12:6
4. Efesos 4:25
5. 5.Filiboy 1:18
6. 1 Timoteyos 2:7

Waxa kaloo uu u isticmaalayaa ujeedooyinkiisa 1Korintos 5:8 iyo qaab nololeedka Efesos 4:24; 5:9; Filiboy 4:8, sidoo kalena mararka qaar wuxuu u isticmaalayaa dadka:

1. Ilaah, Rooma 3:4 (Yooxanaa 3:33; 17:17)
2. Ciise, Efesos 4:21 (sida Yooxanaa 14:6)
3. Markhaatinimada Rasuulnimada, Tiitos 1:13
4. Bawlos, 2 Korintos 6:8

Bawlos wuxuu eraygan u adeegsanayaa isagoo muujinaya inuu ku hadlayo (*alētheuō*) Ga 4:16, Efesos 4:24, *The New International Dictionary of the New Testament Theology. Vol.3, pp.784-902.*

**1:19 “wixii Ilaah laga garan karo waa ka dhex muuqataa iyaga. waayo, Ilaah waa u muujiyey iyaga.”** dhammaan aadanuhu Ilaah abuurkiisa waxbay kaga yaqaanaan (aayadda 20; Ayuub 12:7-10 iyo Sabuurka 19:1-6, 12-15, iyo xikmad ahaan). Fiqhi aan arrintan waxa loo yaqaanaa ‘waxyiga dabiiciga ah.’ Maaha mid dhammays tiran laakiin waxay asaas u tahay kuwa aan weligood helin ‘waxyiga gaarka ah ee Ilaah’ ee kitaabka Quduuska ah, amaba Ciise (Kolosay 1:15; 2:9).

Erayga ‘ogaanshaha’ waxa loo isticmaalay labo waxyaalood Axdiga Cusub dhexdiisa: (1) waa mid ka timid Axidiga Hore oo tilmaamaysa xidhiidh shakhsi ahaaneed (Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5), iyo (2) waa tilmaamista xaqiiqada shay (aayadda 21). Injiilku haddaba waa iyadoo shakhsi ahaan loo soo dhaweeyo iyo farriinta ku saabsan qofkaas oo la gudoomo lana rumaysto!

**1:20** aayaddani waxay tilmaamaysaa saddex arrimood oo khuseeya Ilaah

1. Dabeecaddiisa (Kolosay 1:15; 1 Timoteyos 1:17; Cibraaniyada 11:27)
2. Awooddiisa ka muuqata dabiicada
3. Dabeecaddiisa waxyiga (oo muujinaysa shuqulladiisa iyo ujeeddada uu ka leeyahay aadanaha).

▣ **“Tan iyo abuurniinta dunida”** weedhahan oo kale ayaa waxa laga heli karaa Markos 10:6; 13:19; 2 Butros 3:4. Ilaah waxa lagu la arkay (1) abuuritaanka dunida; (2) Qoraallada Quduuska ah; (3) Ciise Masiix.

▣ **“ilaahnimadiisa”** marka aan eegno xagga qoraallada Giriigta ayaa erayga *theiotēs* tarjumaaddeedu, Waxa ay si layaab leh uga muqatay oo muujiyay Ciise Masiix (2 Korintos 4:4; Cibraaniyada 1:13). Isagu waa muujinta Ilaah isu muujiyay aadanaha oo dhammays tiran (Kolosay 1:19; 2:9). Xaqiiqada layaabka leh ee injiilku inoo sheegayo ayaa waxa ay tahay in aadanaha denbaabay marka ay rumaystaan Ciise Masiix oo isku halleeyaan, in ay noqonayaan isaga oo kale (Cibraaniyada 12:10; 1 Yooxanaa 3:2). Waa muuqaalka Ilaah ee aadanaha dhexdooda (Bilowgii 1:26-27) dib baa loo hagaajiyay (*theios* 2 Butros 1:3-4)!





**NASB** “iyagoo laga garto waxyaalihii la sameeyey”  
**NKJV** “si muuqata ayaa looga arkay oo looga fahmay waxyaalihii la sameeyay”  
**NRSV** “waxa laga arkay oo lagu fahmay waxyaalihii uu sameeyay”  
**TEV** “Ilaah waxyaalihii uu sameeyay ayaa si cad looga arkay”  
**NJB** “Waxa caqliga lagaga fahmay waxyaalihii la abuuray”

Isku darista *noeō* (Matayos 15:17) iyo *kathoraō* ayaa waxa ay tilmaamaysaa fahanka xaqiiqadan. Ilaah waxa uu sameeyay labo waxyaalood oo lagu garan karo isaga: (1) Dabiicada ama waxyaalaha Ilaah abuuray iyo (2) Qoraallada quduuska ah. labadubana waxay aadanaha u suurto gelin karaan fahanka Ilaah lagu garan karo iyo ka jawaaba celinta.

▣ **“si ayan marmarsiinyo u lahaan.”** Faham ahaan waxa weeyi ‘ma jiro wax sharci ah oo ay isku difaaci karaan.’ Ereygan Giriigga ah ee (*a plus apologetoi*) ayaa waxa loo adeegsaday halkan iyo 2:1 Axdiga Cusub dhexdiisa. Xusuusnow ujeeddada fiqi ahaaneed ee cutubka 1:18-3:20 ayaa waxay tahay tusinta sida dadku u lumay ee ay u denbaabeen. Haddaba, aadanuhu iyagaa ka masuul ah aqoonta ay leeyihiin, oo Ilaahna masuuliyadda uu aadanaha u xanbaarinayaa waxa ay tahay, waxa ay ogsoonyihiin amaba ay awoodi karaan inay ogsoonaadaan.

**1:21 “Maxaa yeelay, iyagoo Ilaah garanaya”** aadanuhu maaha kuwo diin ahaan koraya oo huru mar samaynaya, laakiin waxay Horumar ku samaynayaan waxyaalaha sharka ah. ilaa markii aadanuhu ay ku dheceen denbiga Bilowgii 3, mugdigu waxa uu ahaa mid marwalba sii kordhaya.

▣ **“ayayan isaga Ilaah ahaan u ammaanin”** tani waa aafada ay keenayso jaahilnimada iyo sanam caabudistu ee aayadaha 23,24 (Yeremyaah 2:9-13).

▣ **“laakiin fikirradoodii waa xumaadeen, qalbigoodii garaadka la'aana waa madoobaaday.”** Nidaamyada diimaha ee aadanuhu dejisteeni waxa ay yihiin kuwo ku dhisan fikirradooda iyo ruux mucaaradnimo ku dheehantahay(aayadda 22; Kolosay 2:16-23). Sidoo kalena waxay diidaan iftiinka Ilaah siiyay ee uu iyaga isgu muujiyay (10:12-16; 2 Boqorradii 17:15; Yeremyaah 2:5; Efesos 4:17-19).

▣ **“qalbi”** waxa lagu isticmaalay Axdiga Hore, oo waxa macneheedu tusinayaa qaab fikirka qofka iyo sida uu wax u dareemo.

## 1:22

**NASB, NKJV** “Iyagoo kuwo caqli leh isku sheegaya ayay nacasoobeen.”  
**NRSV** “iyagoo sheeganaya xikmad ayay nacasoobeen”  
**TEV** “waxay sheegteen xikmad, laakiin waa nacasyo”  
**JB** “markastoo ay xikmad sheegtaan, waxa sii korodha nacasnimadooda”

Dhibaataada waxa ay tahay aadanaha oo isla wayni ka buuxdo marka loo fiirsado garaadkooda (1 Korintos 1:18-31; Kolosay 2:8-23). Waxaanay u noqonaysaa Bilowgii 3. Aqoontoodii waxay u keentay kala fogaansho iyo xukun. Macneheedu maaha in aqoonta aadanuhu ay marwalba khalad tahay, laakiin waxa weeyi iyadoon ahayn mid ogaan karta wax walba!

**1:23** Doonistoodu waxay tahay jaahilnimo, maxaa yeelay xitaa aadanuhu waxay samaysteen wax ay u haystaan inuu yahay muuqaalkii Ilaah (Bilowgii 1:26-27; 5:1,3; 9:6), oo waxay tusaale ahaan ka dhigteen:

1. Xayawaan (Masar)
2. Awoodaha dabiicada (Aasiya)
3. Sawirka dadka (Giriigga/Roomaanka) –sanamyo! Xitaa waxa sidan sameeyay dadkii Ilaah doortay (Sharciiga Kunoqoshadiisa 4:15-24).

Qaababka cusub ee denbigan hore meeshiisii galay waxa ka mida:

1. Deegaanimada
2. Fikirrada cusub ee waddama bariga

3. Cilmaaniyadda
4. Aqoonta iyo isku hallaynta caafimaadka
5. ah

▣ “**ammaanta**” Eeg mawduuc gaara ah.

▣ “**bedelitaanka**” Eeg Mawduucan Gaarka ah.

### **MAWDUUC GAAR AH: BEDELITAANKA (*PHTHEIRŌ*)**

Eraygan *phtheirō* macnihiisu waa beddelitaan amaba burburin, waxaana loo adeegsan karaa siyaabaha ay ka midka yihiin:

1. Xagga dhaqaalaha (suurto gal 2 Korintos 7:2)
2. Baabi’in la taaban karo (1 Korintos 3:17)
3. Musuqmaasuq (Rooma 1:23; 8:21; 1 Korintos 15:33,42,50; Galatiya 6:8; Muujintii 19:2)
4. Sinada (2 Korintos 11:3)
5. Baaba’a weligiis ah (2 Butros 2:12,19)
6. Bedelitaanka dhaqamada dadka (Kolasay 2:22; 1 Korintos 3:17)

Waxa loo adeegsaday kasoo horjeed (Rooma 1:23; 1 Korintos 9:25; 15:50,53).

1. La bedeli karo iyo aan la bedeli karin 1 Korintos 15:42,50.
2. Maamuus la’aan iyo ammaan 1 Korintos 15:43.
3. Itaaldarro iyo xoog, 1 Korintos 15:43.
4. Jidhka dabiiciga ah iyo jidhka ruuxiga ah, 1 Korintos 15:44.
5. Aadankii ugu horeeyay iyo Aadankii ugu danbeeyay 1 Korintos 15:45.
6. Sawirka kan camuudda ah iyo sawirka kan janada ah, 1 Korintos 15:49.

### **AAYADAHA 1:24-25**

<sup>24</sup>Taas aawadeed iyagoo qalbigooda wax xun ka damacsan, Ilaah wuxuu u daayay wasakhnimo in dhexdooda jidhkoodu ku maamuus jabo; <sup>25</sup>maxaa yeelay runtii Ilaah bay been ku beddeleen, oo waxay caabudeen oo u adeegeen ummadda intay caabudi lahaayeen kan uumay oo weligiis ammaanta leh. Aamiin.

**1:24,26,28** “**Ilaah wuxuu u daayay**” Tani waa xukunka ugu xun, waayo Ilaahbaa yidhi “waxaan u daayay inay ku, socdaan madax adayggooda” (Sabuurka 81:12; Hoosheeca 4:17; Falimaha Rasuullada 7:42). Aayadaha 23-32 waxay tilmaamayaan diidmada Ilaah ee ka timid dadka jaahiliinta ah.

### **MAWDUUC GAARA: QALBIGA**

Erayga *kardia* oo ah qalbiga ayaa waxa lagu adeegsaday Axdiga Cusub, xagga luqadda Cibraanigana waxa la yidhaahdaa *leb*. Waxa siyaabo kala duwan loogu dhex adeegsaday (Bauer, Arndt, Gingrich iyo Danker, *A Greek English Lexicon*, pp. 403-404).

1. Xaruta nolosha qofka (Falimaha Rasuullada 14:17; 2 Korintos 3:2-3; Yacquub 5:5)
2. Xarunta nolosha ruuxiga ah
  - a. Ilaah wuxuu ogyahay qalbiga (Luukos 16:15; Rooma 8:27; 1 Korintos 14:25; 1 Tesoloniika 2:4; Muujintii 2:23).
  - b. Waxa loo adeegsaday nolosha ruuxiga ah ee aadanaha (Matayos 15:18-19; 18:35; Rooma 6:17; 1 Timoteyos 1:5; 2 Timoteyos 2:22; 1 Butros 1:22).
3. Xarunta fikirka nolosha ( Matayos 13:15; 24:48; Falimaha Rasuullada 7:23; 16:14; 28:27; Rooma 1:21; 10:6; 16:18; 2 Korintos 4:6; Efesos 1:18; 4:18; Yacquub 1:26; 2 Butros 1:19; Muujintii 18:7; qalbigu wuxuu la xidhiidhaa maskaxda 2 Korintos 3:14-15 iyo Filiboy 4:7).
4. Xarunta doonitaanka (Falimaha Rasuullada 5:4; 11:23; 1 Korintos 4:5; 7:37; 2 Korintos 9:7)

5. Xarunta caadifadaha (Matayos 5:28; Falimaha Rasuullada 2:26,37; 7:54; 21:13; Rooma 1:24; 2 Korintos 2:4; 7:3; Efesos 6:22; Filiboy 1:7).
6. Meel u gaara shaqooyinka Ruuxa (Rooma 5:5; 2 Korintos 1:22; Galatiya 4:6( Masiixu qalbiyadeennu ku jiraa Efesos 3:17).
7. Waa xarunta ka tarjumaysa gebi ahaanba qofka (Matayos 22:37, oo kasoo qaadanaya Shariciga ku noqoshadiisa 6:5).

Meelo ka mida Axdiga Hore oo lagu isticmaalay eraygan

- a. Bilowgii 6:6; 8:21
- b. Sharciga Kunoqoshadiisa 4:29; 6:5
- c. Sharciga Kunoqoshadiisa 10:16
- d. Yexesqeel 18:31-32
- e. Yexesqeel 36:26

**1:25 “runtii Ilaah bay been ku beddeleen”** waxa loo fahmi karaa dhowr waxyaalood: (1) aadanuhu iyagoo been naftooda u sheegay oo iyaga laftoodu sheegta Ilaahnimo (2 Tesaloniika 2:4,11); (2) iyagoo aadanuhu caabuda wixii ay gacantooda ku samaysteen (Ishacyaah 44:20; Yeremyaah 13:25; 16:19) halkii ay ka caabudi lahaayeen Ilaah(aayadaha 18-23); (3) diidmada dhammayska tiran ee aadanuhu ku diideen runta injiilka (Yooxanaa 14:17; 1 Yooxanaa 2:21,27).

▣ **“oo waxay caabudeen oo u adeegeen”** aadanuhu waxay badanaa haystaan oo caabudaan ilaahyo, amaba waxyaalo ay u malaynayaan runta.

▣ **“oo weligiis ammaanta leh.”** Bawlos waxa u dabecad ah mar walba ammaanta Ilaah sida Yuhuudduba dhaqan ugu lahaan jireen (Rooma 9:5; 2 Korintos 11:31). Sidoo kalena marka uu wax qorayaba waxa uu ku dari jiray duco (9:5; 11:36; 15:33; 16:27).

▣ **“weligiis”** Eeg Mawduucan Gaarka ah.

#### **MAWDUUC GAAR AH: WELIGIIS (ERADA GIRIIGGA)**

Mid ka mida erayada maldahan ee Giriigga ayaa ah “weligiiba” (Luukos 1:33; Rooma 1:25; 11:36; 16:27; Galatiya 1:5; 1 Timoteyos 1:17), waxaana laga yaabaa in lagasoo dhegtay erayga Cibraaniga ah ee *'olam*. Waxaad eegtaa kitaabka uu qoray Robert B. Girdlestone ee ah, Synonyms of the Old Testament, pp. 319-321. Erayada kale ee iyaguna la xidhiidhaa waxay yihiin “weligaa” (Matayos 21:19 [Markos 11:14]; Luukos 1:55; Yooxanaa 6:58; 8:35; 12:34; 13:8; 14:16; 2 Korintos 9:9) iyo “weligiis iyo weligiisba” (Efesos 3:21). Waxay haddaba u muuqataa inaanu jirin farqi u dhexeeya ereyadan maldahan ee “weligiis.” Erayga “waayadii” ayaa jamac ahaantiisa waxa uu si maldahan rabbaaniyiintu u adeegsan jireen, waxaana laga yaabaa xagga Yuhuudda marka laga eego in loo adeegsan jiray fikradaha sida “waagii baarrinimada,” “waagii taag yaraanta,” amaba “wakhtiga xaqnimada.”

▣ **“aamiin”** Eeg Mawduucan Gaarka ah.

#### **MAWDUUC GAAR AH: AAMIIN**

##### **I. AXDIGA HORE**

- A. Erayga “Aamiin” waa eray ka yimid luqada Cibraaniga (*emeth*) oo ka tarjumaya xaqiiqada ama runsheegnimada (*emun, emunah*) iyo rumaysad yeelashada.
- B. Waa eray loo adeegsan karo xaallada qofka sagan. Kasoo horjeedkeeduna waxa uu noqon karaa waxa aan sugnayn (Sharciga Kunoqoshadiisa 28:64-67; 38:16; Sabuurrada 40:2; 73:18;

Yeremyaah 23:12) iyo (Sabuurrada 73:2). Waxay tilmaamasaa rumaysad iyo wax la isku hallayn karo (Bilowgii 15:16; Xabquuq 2:4).

C. Adeegsiyo gaara

1. tiir, 2 Boqarrada 18:16(1 Timoteyos 3:15)
2. ballan, Baxniintii 17:12
3. xakamayn, Baxniintii 17:12
4. sugnaansho, Ishacyaah 33:6; 34:5-7
5. run. 1 Boqorradii 10:6; 17:24; 22:16; Maahmaahyadii 12:22
6. adayg 2 Taariikhdi 20:20; Ishacyaah 7:9
7. caqli gal Sabuurka 119:43,142,151,168.

D. Axdiga Hore dhexdiisa labada eray ee kale ee loo adeegsaday rumaysadka shaqaynaya waxa weeyi:

1. *bathach*, talo saarasho
2. *yra*, cabsi, tixgelin, caabudis (Bilowgii 22:12).

E. Xagga talo saarashada amaba isku hallaynta (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:15-26; Nexemyaah 8:6; Sabuurka 41:13; 72:19; 89:52; 106:48).

F. Fahanka fiqi ahaaneed ee eraygani maaha xaqnimada aadanaha, laakiin waa Ilaah (Baxniinta 34:6; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:4; Sabuurka 108:4; 115:1; 117:2; 138:2).

Kuwa aqoonta u leh Ilaah waa inay isaga oo kale noqdaan (Xabquuq 2:4). Kitaabka Quduuska ahi waa taariikh diiwaan gelinasa sida Ilaah dib ugu soo noolaynayo xidhiidhkiisa uu la leeyahay aadanaha (Bilowgii 1:26-27). Badbaadada ayaa u suurto gelinasa aadanaha inay xidhiidh la yeeshan Ilaah, waana sababta la inoo abuuray.

## II. AXDIGA CUSUB

- A. waxa loo adeegsaday gebogebaynta iyo qiritaanka runta ku jirta hadalka la sheegay (1 Korintos 14:16; 2 Korintos 1:20; Muujintii 1:7; 5:14; 7:12).
- B. Adeegsiga ku xidhitaanka tukashada (Rooma 1:25; 9:5; 11:36; 16:27; Galatiya 1:5; 6:18; Efesos 3:21; Filiboy 4:20; 1 Timoteyos 1:17; 6:16; 2 Timoteyos 4:18).
- C. Ciise waa kan keliya ee isticmaalay erayga (Luukos 4:24; 12:37; 18:17,29; 21:32; 23:43)
- D. Waa magac loo isticmaalay Ciise Masiix sida aan ka arki karno Muujintii 3:14 (waxa kaloo suurto gala in loo adeegsaday Ilaah Ishacyaah 65:16).
- E. Waa erayga loo adeegsado xaqnimada oo luqadda Giriigta loo tarjumay.

### AAYADAHA 1:26-27

<sup>26</sup>Saas daraaddeed Ilaah wuxuu u daayay damacyo ceeb ah; waayo, dumarkoodu isticmaalkii loo abuuray waxay ku beddeleen mid ka gees ah kii loo abuuray. <sup>27</sup>Sidaas oo kalena raggii intay iska daayeen isticmaalkii dumarka ayay iyagoo damacoodu gubayo isu kacsadeen: rag waxay rag kale ku sameeyeen ceeb, oo waxay dhexdooda ka heleen abaalgudkii qaladkooda waajibka ku ahaa.

**1:26,27** Ilaah waxa uu kasoo hor jeeda liwaadka amaba ragga ragga fuula iyo dumarka, waana denbi iyo dhibaato dhaqan. (1) Axdiga Hore dhexdiisa (Laawiyiintii 18:22; 20:13; Sharciga Kunoqoshadiisa 23:18); (2) dunidii Roomaanka (1 Korintos 6:9; 1 Timoteyos 1:10); iyo (3) wakhtigeennan aan ku jirno.

Khaniisnimadu waxa weeyi waxyaabaha tusaalaha loogu soo qaadan karo leexashada aadanaha, oo aadanuhu inay leexdeenna waxa aan ka arki karnaa Bilowgii 1-3. Aadanahana waxa laga sameeyay ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27; 5:1,3; 9:6). Aadanaha sidoo kale waxa laga dhigay lab iyo dheddig (Bilowgii 1:27). Ilaah waxa uu iyaga ku amray inay tarmaan oo dhulka buuxiyaan (Bilowgii 1:28; 9:1,7). Leexashada aadanuhu (Bilowgii 3) waxay ka hortimid qorshaha Ilaah iyo doonistiisa, oo khaniisnimaduna waa fawdo iyo leexasho muuqata oon la diidi karin. Si kastaba ha ahaatee inay khaniisnimadu denbi tahay waxaan ka arki karnaa (aayadaha 29-31). Sidoo kale denbiyada oo dhammina waxay tusinayaan in aadanuhu ay leexdeen oo ka hor yimaaddeen qorshihii Ilaah iyaga ka lahaa, waxaanay mutaysanayaan ciqaabka.

### MAWDUUC GAARA: LIWAADKA

Wakhtigeenan casriga ah waxa jira dhaqamo cadaadinaya in la aqbalo liwaadka oo uu noqdo wax ka mida nolosha. Laakiinse Kitaabka Quduuska ahi arrintan waxa uu ka dhigayaa mid xaaraan ah oo baabi'naysa nolosha, waayo maaha qorshaha Ilaah u abuuray khalqigiisa:

1. Waxay kasoo horjeeddaa amarada Ilaah Bilowgii 1 oo ahayd inay midho dhal noqdaan oo dhulkana camiraan.
2. Waa wax ku salaysan jaahilnimo (Laawiyyintii 18:22; 20:13; Rooma 1:26-27; iyo Yuudas 7)
3. Waxay muujinasaa macsida iyo kasoo horjeedsashada Ilaah (1 Korintos 6:9-10)

Si kastaba ha ahaatee Ilaah waxa uu cafinayaa dhammaan aadanaha denbaabay ee kasoo horjeestay isaga. Haddaba, gaar ahaan dadka Masiixiyiinta ah waxa laga rabaa inaanay nacayb u muujinin dadka khaniisiinta ah, balse ay tusiyaan jacaylka Ilaah iyo in Ilaah marwalba ka cafiyayo denbiyadooda hadii ay toobad keenaan. Dhibaatan waxa keentay leexashada aadanaha, oo xitaa waxa aan arki karnaa iyadoo Ilaah ku tilmaamay kuwo kasoo horjeestay Ilaah, danaystayaal ah, raadiya waxa noloshooda ay u malaynayaan inuu raalli gelinayo (Rooma 8:1-8; Galatiya 6:7-8).

### AAAYADAHA 1:28-32

<sup>28</sup>Intay oggolaan waayeen inay Ilaah ku sii haystaan aqoon tooda. Ilaah wuxuu u daayay maan dulli ah inay sameeyaan waxyaalo aan qummanayn. <sup>29</sup>Iyagoo ay ka buuxaan xaqdarrada, iyo sharnimada. iyo damacnimada. iyo xumaanta oo dhammu: waxaa kaloo ay ka buuxaan xaasidnimada, iyo dilidda, iyo ilaaqda. iyo khiyaanada. iyo camalxumaanta. oo waxay yihiin kuwa wax xun ku faqa. <sup>30</sup>Iyo kuwa wax xanta. iyo kuwa Ilaah neceb. iyo kuwa wax caaya. iyo kuwa kibirka badan. iyo kuwa faanka badan, iyo kuwa wax shar ah hindisa. iyo kuwa waalidkood caasiga ku ah. <sup>31</sup>Iyo kuwa garaadka la'. iyo kuwa axdiga jebiya, iyo kuwa aan kalgacaylka lahayn, iyo kuwa aan naxariista lahayn. <sup>32</sup>Iyagoo garanaya qaynuunka Ilaah in kuwa waxyaalahaas sameeyaa ay dhimasho istaahilaan, ayaanay samayn waxyaalahaas oo keliya ee weliba waxay u bogaan kuwa sameeya.

1:28-31 waxa ay tilmaamasaa dabeecadda dadka kasoo horjeesta Ilaah (Rooma 13:13; 1 Korintos 5:11; 6:9; Galatiya 5:19-21; Efesos 5:5; 1 Timoteyos 1:10; Muujintii 21:8). Denbiga aadanaha ayaa waxa uu yahay iyaga oo doortay inay Ilaah ka gees ahaadaan. Haddaba, dadku waxay u baahanyihiin Ilaah, waayo way lumeen. Cadaabka amaba ciqaabka ugu wayni waxa uu yahay iyadoo dadku ay gees ka noqdaan xidhiidhka Ilaah.

### MAWDUUC GAAR AH: SHARKA IYO KHAYRKA

Sharka iyo khayrka ayaa labadooduba ah kuwo ku diiwaan gashan Axdiga Cusub dhexdiisa. Haddaba, noocyada sharka iyo khayrka ee Axdiga Cusub ayaa waxay yihiin sidan:

	<u>Sharka</u>	<u>Khayrka</u>
1. Bawlos	Rooma 1:28-32 Rooma 13:13 1 Korintos 5:9-11 6:10 2 Korintos 12:20 Galatiya 5:19-21 Efesos 4:25-32 5:3-5 ---	--- Rooma 2:9-21 --- 1 Korintos 6:6-9 2 Korintos 6:4-10 Galatiya 5:22-23 --- --- Filiboy 4:8-9 Kolosay 3:12-14 ---
2. Yacquub	1 Timoteyos 1:9-10 6:4-5 2 Timoteyos 2:22a, 23	---
3. Butros	Tiitos 1:7, 3:3 Yacquub 3:15-16 1 Butros 4:3 2 Butros 1:9	2 Timoteyos 2:22b, 24 Tiitos 1:8-9; 3:1-2 Yacquub 3: 17-18 1 Butros 4:7-11 ---
4. Yooxanaa	Muujintii 21:8; 22:15	---

**1:29 “ilaqda”** waxa aadanaha denbiga badani u arkaan xorriyadda ayaa waxa uu yahay naftooda oo hawadeeda ay raacaan oo caabudaan sida aan ka arki karno 1:24, 26,28 ayaa waxay tahay mid xidhiidh la leh Bilowgii 1-3, waana doorashada aadanaha oo iyaga laftooda dhibaataada ku keentay.

▣ **“iyagoo ay ka buuxaan”** aadanaha waxa ka buuxa xumaantooyinkaas ay naftooda u keeneen oo dhan, oo qalbiyadoodana mugdibaa kasii buuxsamay.

**1:29-31** tani waa natijada iyo calaamadaha ka dhalanaya marka dadku ay ka fogaadaan Ilaah. waxay shakhsi ahaan iyo bulsho ahaanba la dabeecad noqdaan kuwa diida Ilaah iyo Kitaabka Quduuska ahi waxa uu ina barayo. Kuwani haddaba waa denbiyada kuwa uu diiwaan gelinayo Rasuul Bawlos (1 Korintos 5:11; 6:9; 2 Korintos 12:20; Galatiya 5:19-21; Efesos 4:31; 5:3-4; Kolosay 3:5-9).

**1:30 “kibirka badan”** eeg mawduucan gaarka ah.

**MAWDUUC GAAR AH: ADEEGSIGA BAWLOS EE ERAYGA “HUPER”**

Bawlos waxa uu si gaara u adeegsanayaa erayga Giriigga ah ee *huper* kaasi oo macnihiisu yahay “badan” amaba “korreeya.” Waxa kaloo ay noqon kartaa “ku saabsan,” “khuseeya,” sida *peri* oo kale (2 Korintos 8:23; 2 Tesaloniika 2:1). Waxa kaloo ay noqon kartaa “shisheeya” (A. T. Robetson, *A Grammar of the Greek New Testament in the Light of Historical Research*, pp. 625-633). Haddaba, Bawlos eraygan iyo lakabkiisaba waxa uu u adeegsaday siyaabahan:

- A. *Hapax legomenon* (hal mar ayaa lagu adeegsaday Axdiga Cusub)
  1. *Huperakmos*, dhaafitaanka nolosha yaraanta, 1 Korintos 7:36
  2. *Huperauxanō*, in wax si xad dhaafa loo kordhiyo, 2 Tesaloniika 1:3
  3. *Huperbainō*, inaan la xadgudbin, 1 Tesaloniika 4:6
  4. *Huperkeina*, shisheeya, 2 Korintos 10:16
  5. *Huperekteina*, dhaafsiisan 2 Korintos 14
  6. *Huperentugchanō*, dhexdhexaadin, Rooma 8:26
  7. *Hupernikaō*, guulaysasho Rooma 8:37
  8. *Huperpleonazō*, badashada, 1 Timoteyos 1:14
  9. *Huperupsoō*, sarraysiin, Filiboy 2:9
  10. *Huperphroneō*, is derajayn, Rooma 12:3
- B. Erayo loo adeegsaday qoraallada Bawlos oo keliya.
  1. *Huperaimai*, is ammaanitaan amaba isa sarraysiin, 2 Korintos 12:7; 2 Tesaloniika 2:4
  2. *Huperballontōs*, si kasii badan, 2 Korintos 11:23; (falkaabe ahaan halkan, laakiin fal ahaan 2 Korintos 3:10; 9:14; Efesos 1:19; 2:7; 3:19).
  3. *Huperbolē*, aan caadi ahayn, Rooma 7:13; 1 Korintos 12:31; 2 Korintos 1:8; 4:7,17; 22:7; Galatiya 1:13.
  4. *Huperekperissou*, aad u shisheeya, Efesos 3:20; 1 Tesaloniika 3:10; 5:13
  5. *Huperlian*, meesha ugu sarraysa, 2 Korintos 11:5; 12:11
  6. *Huperochē*, wanaag, 2 Korintos 2:1; 1 Timoteyos 2:2
  7. *Huperperisseuō*, badasho, Rooma 5:20 (in la badiyo wax 2 Korintos 7:4)
- C. Erayo uu adeegsaday Bawlos oo sidoo kalena ay adeegsadeen qoraysaasha kale ee Axdiga Cusub
  1. *Huperanō*, ka sarreeya, Efesos 1:21; 4:10; iyo Cibraaniyada 9:5
  2. *Huperechō*, wanaag, Rooma 13:1; Filiboy 2:3; 3:8; 4:7; 1 Butros 2:13
  3. *Huperēphanos*, kibir badan, Rooma 1:30; 2 Timoteyos 3:2 iyo Luukos 1:51; Yacquub 4:6; 1 Butros 5:5.

Bawlos waxa uu ahaa shakhsi sabir badan, oo marka ay wax amaba dadku wanaagsanaadaan, waxay ahaayeen kuwo aad u wanaagsan, marka ay xumaadaana waxay ahaayeen kuwo aad u xun. Waxyaalahani waxay isaga u suurto geliyeen inuu soo ban dhigo dareemmada denbiga, nafta iyo Masiixa iyo injiilka intaba.

**1:32 “kuwa waxyaalahaas sameeyaa ay dhimasho istaahilaan”** odhaahdani waxay ka tarjumaysaa sharcigii la siiyay Muuse, waxaana lagusoo koobay Rooma 6:16,21,23; 8:6,13. Dhimashadu waxay kasoo horjeeddaa doonista Ilaah iyo noloshiisa (Yexesqeel 18:32; 1 Timoteyos 2:4; 2 Butros 3:9).

▣ “weliba waxay u bogaan kuwa sameeya” aadanaha denbiga miidhan ahi, waxay isticmaalaan oo adeegsadaan denbiyada kuwa kale iyogoo cudur daarna u sameeya. Dad kale iyo dhaqamo kale ayaa iyaga dembigooda kaga dayda oo kaddibna way u bogaan.

## SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Muxuu Bawlos waraaqda ugu qoray Rooma?
2. Maxay Roomaanku muhiim ugu ahaayeen fiqiga Masiixiyadda?
3. kor mar ku samee 1:18-3:20 adigoo adeegsanaya fahankaaga kuu gaarka ah.
4. Kuwa aan weligood maqal Injiilka miyaa lagu diidayaa inay isku hallayn waayaan Masiixa?
5. Sharraxaad ka bixi 'waxyiga dabiiciga ah' iyo 'waxyiga gaarka ah.'
6. Qeex nololsha aadanuhu marka ay tahay midaan Ilaah ku xidhnayn.
7. Ka hadal aayadaha 24-27 adigoo ka hadlaya mawduuca liwaadka?

## ROOMA 2

<b>QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH</b>				
<b>UBS<sup>4</sup></b>	<b>NKJV</b>	<b>NRSV</b>	<b>TEV</b>	<b>NJB</b>
Xukunka xaqa ah ee Ilaah  2:1-16	Xukunka xaqa ah ee Ilaah  2:1-16	Yuhuudda iyo xukunka Ilaah  2:1-11	Xukunka Ilaah  2:1-16	Yuhuuddu waa gardarantahay  2:1-11
Yuhuudda iyo sharciga  2:17-3:8	Yuhuuddu denbiga waxay kala simanyihiin kuwa aan Yuhuudda ahayn  2:17-24  Gudniinku faa'ido ma laha	Aasaaska xukunka  2:12-16  2:17-24	Yuhuudda iyo sharciga (2:17-3:8)  2:17-24	Sharcigu iyaga ma badbaadin doono  2:12-16  2:17-24  Gudniinku ma badaadin doono

### **AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD**

#### *IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA*

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

### **FAHANKA MACNAHA GUUD EE ROOMA 2:1-3:20**

- A. Cutubka 2 iyo 3 waxay dhammays tarayaan fahanka ujeeddada kasoo bilaabantay 1:18. Qaybtani waxay ka hadlaysaa:
  1. Lumitaanka cirqiga aadanaha;
  2. Xukunka Ilaah ee ku aaddan denbiga;
  3. Baahida aadanuhu u qabo xaqnimada Ilaah ee lagu heli karo Masiixa, taasi oo macneheedu yahay rumaysadka iyo towbad keenka.
- B. Cutubka 2 waxa jira toddoba waxyaalood oo khuseeya xukunka Ilaah:
  1. Aayadda 2, marka loo eego runta;



2. Aayadda 5, urursiga denbiga;
3. Aayadaha 6 & 7, marka loo eego camalka ama shaqada;
4. Aayadda 11, ma jiri mid tix geliya shakhsiyadaha oo dadka u kala eexda;
5. Aayadda 13, qaab nololeedka;
6. Aayadda 16, waxyaabaha ku qarsoon qalbiyada aadanaha;
7. Aayadaha 17-29, ma jiraan ummado kala sharaf badan.

- C. Waxa jira hadallo badan oo Mufasiriintu ka sheegaan cidda ay khusayso aayadahan cutubka 2:1-17, laakiinse waxa caddaan ah in 2:12-29 ay khuseeyaan dadka Yuhuudda ah. aayadaha 1-17 ayaa iyagu haddaba waxa ay la tacaalayaa guud ahaan Yuhuudda iyo dadka kale een ahayn Yuhuudda intaba.
- D. Sida aan kusoo aragnay 1:18-21, Bawlos waxa uu sheegay in gebi ahaanba aadanuhu ay Ilaah ku garan karaan marka ay u fiirsadaan abuurka dunida. Sidoo kalena 2:14-15, waxa uu Bawlos ku xusayaa, in aadanuhu dhammaantoodba ay gudaha ku haystaan dareen gaara oo Ilaah uu siiyay iyaga. Haddaba, abuurka iyo dareenka ayaa labaduba waxa ay yihiin kuwo aadanaha soo hoos gelinaya xukunka Ilaah, xitaa kuwa aan la gaadhsiinin farriinta Axdiga Hore iyo tan Axdiga Cusub labadaba, waayo aadanuhu iyagaa ka musuula arrintan oo kumay noolaanin iftiinkii loogu talo galay inay ku noolaadaan.

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 2:1-11

<sup>1</sup>Sidaas daraaddeed, nin yahow, marmarsiinyo ma lihid ku kastoo aad tahayba kaaga wax xukuma; maxaa yeelay, meeshii aad ku kale ku xukuntid, waad isku xukumaysaa, waayo, kaaga wax xukumaa, waxaad samaysaa isla wixii. <sup>2</sup>Oo waxaannu og nahay in xukunka Ilaah uu ka gees yahay kuwa waxyaalaha caynkaas ah sameeya, sida runta ah. <sup>3</sup>Nin yahow, ma waxay kula tahay, kolkaad xukuntid kuwa waxyaalaha caynkaas ah sameeya oo aad isla wixiina sameeysid, inaad xukunka Ilaah ka baxsan doonto? <sup>4</sup>Ma waxaad quudhsanaysaa hodantinimada wanaaggiisa iyo samirkiisa iyo dulqaadashadiisa? Miyaadan garanayn in wanaagga Ilaah kuu kaxeeyo xagga toobadda? <sup>5</sup>laakiin engegnaantaada iyo toobadla'aanta qalbigaaga aawadood waxaad cadho u urursanaysaa maalinta cadhada iyo muuqashada xukunka xaqa ah oo Ilaah, <sup>6</sup>kan nin kasta u siin doona sida shuulkiisu ahaa, <sup>7</sup>kuwa dulqaada shada shuulka wanaagsan ku doondoonaa ammaan iyo ciso iyo dhimashola'aan, wuxuu siin doonaa nolosha weligeed ah <sup>8</sup>laakiin kuwa iskala qaybqaybiya, oo aan runta addeecin, laakiinse xaqdarrada addeeca, waxaa u ahaan doona cadho iyo ciil, <sup>9</sup>iyo dhibaato iyo cidhiidhib, oo waxay u ahaan doonaan naf kasta oo dadka sharka sameeya, marka hore Yuhuudda, dabadeedna Gariigta. <sup>10</sup>Laakiin ammaan iyo ciso iyo nabad baa u ahaan doona ku kasta oo wanaag sameeya, marka hore Yuhuudda, dabadeedna Gariigta; <sup>11</sup>maxaa yeelay, Ilaah dadka uma kala eexdo.

### 2:1

NASB	“nin yahow, marmarsiinyo ma lihid ku kastoo aad tahayba kaaga wax xukuma”
NKJV	“nin yohow ma cudur daaran kartid, kaaga wax xukuma mid kastood tahay”
NRSV	“mid kastood tahay marmarsiinyo ma lihid, marka aad xukumayso kuwa kale”
TEV	“gebi ahaanba ma lihid marmarsiinyo, markaad xukumayso kuwa kale”
JB	“mid kaan doontaba ahaw, haddaad wax xukunto ma lihid marmarsiinyo”

Fahan ahaan waxa weeyi ma jirto siyaabo sharciya ood isku difaaci karto (1:20). Waxaanay u muuqata sida aan ka arki karno aayadaha 1-16, inay la xidhiidho dadkii Yuhuudda ahaa oo isu haystay inay yihiin kuwo xaqnimo leh Giriigtii nafsaddoodu la muhiimsanayd. Oo markay is xukumaan qolo waliba iyagaa is xukumay ayay ka dhigan tahay.

**2:2 “Oo waxaannu og nahay”** Waxay tilmaamasaa Yuhuudda sidoo kalena waxa ay noqon kartaa Masiixiyiinta. Aayadaha 2-4, ayaa Bawlos waxa uu u soo noqonayaa qaabkiisii ku dhisnaa su'aalaha iyo jawaabta. Sidoo kale waxa loo adeegsaday Xabquuq, Malaakii, waxa kaloo iyana qoraalladooda ku adeegsan jiray faylosuufyada Giriigta iyo Yuhuudda laftooda.

Weedhan haddaba ah “waxaannu og nahay” waxa dhowr jeer lagu dhex adeegsaday kitaabka Rooma guud ahaan (2:2; 3:19; 7:14; 8:22,28). Oo Bawlos waxa ay u muuqataa inuu aqoon u lahaa iyaga, taasi oo ka duwanayd kuwa jaahilka ah sida aan kusoo aragnay cutubka 1.

▣ **“xukunka Ilaah”** Kitaabka Quduuska ahi xaqiiqadan si ballaadhan ayuu uga hadlayaa, waayo gebi ahaanba aadanuhu waxay hoos iman doonaan xisaabta Ilaah (aayadaha 5-9; Matayos 25:31-46; Muujintii 20:11-15). Xitaa Masiixiyiinta ayaa iyaguna hor istaagi doona Masiixa (14:10-12; 2 Korintos 5:10).

**2:3** Xagga naxwe ahaan marka laga eego Bawlos su’aashiisa waxa laga filanayaa jawaab ah “maya.”

▣ **“ma waxay kula tahay”** waa ficilka erayada Giriigga ah ee *logizoma.i* Bawlos waxa kaloo uu si joogto ah ugu isticmaalayaa (Rooma 2:3,26; 3:28; 4:3,4,5,6,8,9,10,11,22,23,24; 6:11; 8:18,36; 9:8; 14:14; Galatiya 3:6 iyo sidoo kale toban jeeroo uu ku dhex isticmaalayo Korintooska Koowaad iyo ka Labaad iyo labo jeer oo uu ku dhex isticmaalayo Filiboy).

▣ **“Nin yahow”** Waxay la mid tahay weedha aan kusoo aragnay aayadda 1 iyo 9:20 oo tilmaamasa Yuhuudda.

**2:4** sidoo kale waa su’aal

▣ **“a waxaad quudhsanaysaa hodantinimada wanaaggiisa iyo samirkiisa iyo dulqaadashadiisa?”** Aadanuhu waxay si khalada xitaa u fahmaan nimcada Ilaah, naxariistiisa iyo samirkiisa, waxaanay u rogaan jaanis ay ku danbaabaan halkii ay ka tobad keeni lahaayeen (2 Butros 3:9).

Bawlos waxa kale oo uu sheegayaa dabeecadda Ilaah isaga oo ku tilmaamaya “hodantinimada”(9:23; 11:33; Kolosay 1:27; Efesos 1:7,18; 2:4,7; 3:8,16; Filiboy 4:19).

▣ **“Miyaadan garanayn in wanaagga Ilaah kuu kaxeeyo xagga tobadadda?”** towbad keenku wuxuu muhiim u yahay rumaysadka ku dhisan axdiga xidhiidhka ee Ilaah lala yeelan karo (Matayos 3:2; 4:17; Markos 1:15; 6:12; Luukos 13:3,5; Falimaha Rasuullada 2:38; 3:16,19; 20:21). Eraygani xagga luqadda Cibraaniyada waxa uu la macno yahay ficil iyo is beddel, halka luqadda Giriiggana ay la macno tahay beddelitaanka qaab fikirka. Haddaba, towbad keenka macnihiisu waxa weeyi, inuu qofku beddelo qaab dhaqameedka naftiisa ku gaarka ah ee kasoo horjeeda Ilaah isaga oo markaasna toos Ilaah ugu xidhmaya. Towbad keenku waa doonistay Ilaah ee uu la rabo aadane kasta oo denbaaba, isla markaasna uu ka sameeyay ekaanshihiisa (Yexesqeel 18:21,23,32 iyo 2 Butros 3:9).

Qoraallada ka midka ah Axdiga Cusub ee tilmaamaya erayada kala duwan ee la xidhiidha towbad keenka ayaa waxa ka mida 2 Korintos 7:8-12: (1) *lupeō*, ‘murugo’ aayadda 8(labo jeer), 9(saddex jeer), 10(labo jeer), 11; (2) *metamelomai*, “qoomamo” aayadda 8(labo jeer), 9; iyo (3) *metanoia* “towbad keen” aayadda 9, 10. Waxa kaloo la barbar dhigi karaa towbad keen beena (*metamelomai*) (Yuudas, Matayos 27:3 iyo Ceesaw, Cibraaniyada 12:16-17) (*metanoēō*).

Towbad keenka runta ahi fiqi ahaan waxa uu ku xidhan yahay (1) wacdinta Ciise Masiix ee ah shuruudaha Axdiga Cusub (Matayos 4:17; Markos 1:15; Luukos 13:3,5); (2) wacdinta Rasuullada sida aan ka arki karno (Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21); (3) Hadiyadda ku dhisan awoodda Ilaah (Falimaha Rasuullada 5:31; 11:18 iyo 2 Timoteyos 2:25); iyo (4) u kaadinta Ilaah (2 Butros 3:9). Haddaba, towbad keenku maaha wax ikhtiyaar lagu dooran karo!

#### **MAWDUUC GAAR AH: TOWBAD KEENKA**

Towbad keenka uu la socdo rumaysadku waa shuruudaha axdiga ee Axdiga Hore ( *Nacham*, 1 Boqorradii 8:47; *shuv*, 1 Boqorradii 8:48; Yexesqeel 14:6; 18:30; Yoo’eel 2:12-13; Sekaryaah 1:3-4) iyo Axdiga Cusub:

1. Yooxanaa Baabtiisaha (Matayos 3:2; Markos 1:4; Luukos 3:3,8).
2. Ciise (Matayos 4:17; Markos 1:15; 2:17; Luukos 5:32; 13:3,5; 15:7; 17:3).
3. Butros (Falimaha Rasuullada 2:38; 3:19; 8:22; 11:18; 2 Butros 3:9).
4. Bawlos (Falimaha Rasuullada 13:24; 17:30; 20:21; 26:20; Rooma 2:4; 2 Korintos 2:9-10).

Waa maxay haddaba towbad keenku? Waa murugo iyo denbigoo la qoomameeyo. Cutubka sida aadka ah uga hadlayay ee ka midka ah Axdiga Cusub ayaa waxa uu yahay 2 Korintos 7:8-11.

1. *lupē*, ‘murugo’ aayadda 8(labo jeer), 9(saddex jeer), 10(labo jeer), 11. Waa iyadoo laga murugooda denbiga.

2. *Metanoēō*, “towbad keen” aayadda 9, 10. Towbad kenid iyo qaab cusub oo loog fikiro arrintaas iyadoo laga fikirayo sidii fikir wanaagsan looga yeelan lahaa Ilaah.
3. *metamelomai*, “qoomamo” aayadda 8(labo jeer), 9. Qoomammayn iyo ka digtoonaan inaan mardanbe denbiga lagu dhicin. Waxa loo adeegsaday Yuudas sida aan ka arki karno Matayos 27:3 iyo Ceesaw sida aan ka arki karno Cibraaniyada 12:16-17.

Towbad keenka iyo rumaysadku waxa la rabaa inay ka muuqdaan camalka (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 2:38,41; 3:16,19; 20:21). Waxa jira kuwo ka mida qoraallada oo sheegaya in Ilaah uu yahay kan bixiya towbad keenka (Falimaha Rasuullada 5:31; 11:18; 2 Timoteyos 2:25). Laakiinse qoraallada badankoodu waxay tilmaamayaan in towbad keenku uu lagama maarmaan u yahay dhammaanba aadaha si ay u helaana badbaadada Ilaah.

Macnaynta erayada Cibraaniga iyo Giriigguba waxay ay tilmaamayaan baahida loo qabo macnaha buuxa ee towbad keenka. Cibraaniyadu waxay dalbanaysaa “fal is beddel ah,” halka Giriigguna uu ka dalbanayo “bedelitaanka maanka.” Qofka badbaaday wuxuu helayaa qabli iyo maan cusub. Wuxuu u fikirayaa oo u noolaanayaan si gaar ah. Haddaba, halkii markii hore su’aashu ka ahayd “maxaa aniga dan ii ah?” imika waxay noqonaysaa “maxay tahay doonista Ilaah?” Tawbad keenku maaha dareen keenaya denbi la’aanta, laakiinse waa xidhiidh cusub oo lala yeelanayo Ilaah Quduuska ah ee rumaystaha marwalba korinaya kana dhigaya mid quduus ah.

**2:5-9** waxay aayadahani ka hadlayaan (1) Qallafsanaanta aadanaha denbiga miidhan ah (2) Cadhada Ilaah iyo xukunkiisa.

**2:5 “engegnaantaada”** Israa’iiliyiinta ayaa sidan oo kale loogu tilmaamay Baxniintii 32:9; 33:3,5; 34:9; Sharciga Kunoqoshadiisa 9:6,13,27.

▣ **“qalbi”** eeg Mawduuca gaarka ah ee 1:24

▣ **“maalinta cadhada”** waxa loogu yeedhaa ‘Maalinta Rabbiga’ marka aan eegno Axdiga Hore gaar ahaanna (Yoo’eel iyo Caamoos). Waxaanay khusaysaa maalintaa Qiyaamaha, amma xagga Masiixiyiinta marka la eego waxa weeyi Maalinta Sara kicidda. Aadanaha waa la xisaabin doonaa (Matayos 25:31-46; Muujintii 20:11-15).

Cadhadu waa midda ay dhammaanba aadanaha oo dhami ku tilmaamaan cadhada Ilaah, waana mid isaga oo keliya u cuntanta oo la xidhiidha Ilaahnimadiisa! Waayo Ilaah waa mid daa’in waana Quduus. Laakiin aadanuhu way dhammaanayaan oo waana denbiilayaal. Ilaah maaha cadhadiisu waxa ku fushaa denbiilayaasha isaga kasoo horjeesta, laakiin haddana sida Kitaabka Quduuska ahi inoo sheegayo wuu naxariis badan yahay oo denbiilayaashana wuxuu ka rabaa inay toobad keenaan.

Marka aan eegno fahanka dhaqan ahaan aan ka haysano cadhada Ilaah ayaa waxa ay tahay sida aan ka arki karno Kitaabka Quduusk ah, mid dhacda isla wakhtigaas gudahiisa (1:24,26,28) iyo mid dhacaysa dhammaadka wakhtiga ee qiyaamaha (2:5-8). Marka aan eegno Axdiga Hore dhexdiisa, nebiyadu waxay reer Israa’iil uga digi jireen inay toobad keenaan wakhti xaadirka la joogo si ay uga baxsadaan cadhada Ilaah ee qiyaamaha, oon loo xukumin (Sharciga Kunoqoshadiisa 27:28).

**2:6** Waxa laga soo qaatay Sabuurka 62:12. Waana wax caalami ah, oo qof waliba waxa uu masuul ka yahay waxa camalkiisu yahay iyo sida uu u dhaqmo, waana lagu xisaabin doonaa Ilaah hortiiisa (Ayuub 34:11; Maahmaahyadii 24:12; Wacdiyaha 12:14; Yeremyaah 17:10; 32:19; Matayos 16:27; 25:31-46; Rooma 2:6; 14:12; 1 Korintos 3:8; Galatiya 6:7-10; 2 Timoteyos 4:14; 1 Butruso 1:17; Muujintii 2:23; 20:12; 22:12). Xitaa Masiixiyiinta waxa lagu xisaabin doonaa noloshooda iyo siday ugu adeegeen Masiixa (2 Korintos 5:10). Masiixiyiintu kuma badbaadayaan shuqulkooda, laakiin waxay ku badbaadeen shuqullada hore loogu diyaariyay (Efesos 2:8-10[iyo sidoo kale gaar ahaan 2:14-26]); Yacquub iyo 1 Yooxanaa).

**2:7 “kuwa”** Waxa jira farqi u dhexeeya dadka lagu sheegay aayadda 7 iyo kuwa lagu sheegay aayadda 8 (“laakiin kuwa”).

▣

**NABS “kuwa dulqaada shada shuqulka wanaagsan ku doondoonaa ammaan iyo ciso iyo dhimashola'aan, wuxuu siin doonaa nolosha weligeed ah”**

<b>NKJV</b>	<b>“nolosha weligeeda waxa iska leh kuwa dulqaadashada wanaagsan ku doondoona ammaan iyo ciso iyo dhimasho la’aan”</b>
<b>NRSV</b>	<b>“kuwa dulqaadashada ku raadiya wanaagga ammaanta iyo cisada waxa la siin doonaa nolosha weligeed ah”</b>
<b>TEV</b>	<b>“kuwa wanaagga sameeya, ee raadiya ammaanta iyo cisada Ilaah waxa uu siin doonaa nolosha weligeed ah”</b>
<b>JB</b>	<b>“kuwa hadiyo goorba shuqullada wanaagsan ku raadiya ammaan iyo ciso iyo dhimasho la’aan waxay dhaxli doonaan nolosha weligeed ah”</b>

Waxa ay tilmaamaysaa dadka la midka ah kuwii Korneeliosow (Falimaha Rasuullada 10:34-35). Waxayna u egtahay shaqooyinka xaqnimada, laakiin waxay noqonaysaa mid kasoo horjeedsanasa ujeedooyinka badan ee Kitaabkan Rooma. Xusuusnow aayadaha 1-16 amaba 1-11, waxa weeyi baragaraaf. Muhiimadda fiqi ahaaneed ee markaas ku jirtaana waxa weeyi, inaanu Ilaah dadka ku tix gelinin shaqsiyadooda(aayadda 11) iyo dhammaantood ay wada denbaabeen (aayadda 12). Haddii dadku ay ku noolaadaan iftiinka ay haystaan ee ah waxyiga dabiiciga ah ee loogu talo galay Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn 10:5, markaa waxa ay noqon doonaan kuwo hela xaqnimada. Si kastaba ha ahaatee, marka lasoo koobo 3:9-18,23 waxay tusinasaa inaanu qofna weligiis u helin awooddiisana aanay suurto gal ahaan lahayn inuu ku helo!

Rumaystuhu marka uu is beddelo waxa rumaysadkiis ka muuqanasa nolosha quduusnimada ah ee Ilaah, sidaasi darteedna is beddelkan ku yimid waxa uu caddayn u yahay shaqada Ruuxa Quduuska ah (aayadaha 10,13; Matayos 7; Efesos 2:8-10; Yacquub 2:14-26 iyo 1 Yooxanaa). Eeg Mawduuca gaarka ah 8:25.

▣ **“nolosha weligeed ah”** weedhahani waa kuwo hadiyo goor ka muuqda qoraallada Yooxanaa waxaana sidoo kale lagu isticmaalay Injiillada. Waxa haddaba laga yaaba in Bawlos uu weedhan kasoo qaatay Daanyeel 12:2 (Tiitos 1:2; 3:7), waxaanay ka hadlaysaa nolosha cusub, iyo xidhiidhka wada jirka ah ee lala yeelanayo Ilaah, waana nolosha sarakicista. Ugu horrayn waxa uu ku dhex adeegsanayaa Galatiya 6:8. Waana ujeedo guud oo ka muuqanaysa caqiidada uu ka hadlayo kitaabka Rooma (2:7; 5:21; 6:22,23). Sidoo kale waxay dhowr jeer kusoo aroortay (1 Timoteyos 1:16; Tiitos 1:2; 3:7).

## 2:8

<b>NASB</b>	<b>“laakiin kuwa iskala qaybqaybiya”</b>
<b>NKJV, NRSV</b>	<b>“kuwa raadiya waxay naftoodu jeceshahay”</b>
<b>TEV</b>	<b>“kuwa kale waa danaystayaal”</b>
<b>NJB</b>	<b>“kuwa hinaasaha badan”</b>

Erayadani asal ahaan macnohoodu waxa weeyi ‘u shaqeeya nafhooda’. *Greek-English Lexicon*, vol. 2, p. 104, ayaa waxa uu diiwaan gelinayaa labo wax oo loo isticmaalo ereyadan:

1. “kuwa naftooda uun u daneeya” waxaanu adeegsanayaa Rooma 2:8.
2. “daacadnimo la’aan” waxaanu adeegsanayaa Filiboy 1:17 sidoo kale (2 Korintos 12:20; Galatiya 5:20; Filiboy 2:3; Yacquub 3:14,16).

▣ **“oo aan runta addeecin”** erayga ‘runtu’(*altheia*) waxa lagu dhex adeegsaday luqada Cibraaniyada, oo waxay ka tarjumaysaa runsheegnimo iyo kalsooni. Qoraalkan dhexdiisa waxa ay tahay dareen, laakiin mana aha caqliga oo awoodda la saaro. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:18.

**2:9 “oo waxay u ahaan doonaan naf kasta”** Bawlos waxa uu adeegsaday erayga Giriigga ah ee *pas* oo loo tarjumay ‘dhammaan’ amaba gebi ahaan, haddaba furintaanka cutubyadan waxa uu ku dabaqayaa warka xun ee ah lumitaanka aadanaha iyo xukunka Ilaah. iyo warka wanaagsan ee ah in la siin doono badbaadada iyo cafiska dhammayska tiran, dhammaanba kuwa towbad ee keena ee rumaystana iskuna halleeya Masiixa.

Haddaba, qoraalku waxa uu si xooggan uga hadlayaa xukunka Ilaah iyo cidhibta ka iman doonta, waxaanay xaqiiqadani u baahan tahay sara kicista kuwa xaqnimada leh iyo kuwa xumaan falayaasha ah intaba (Daanyeel 12:2; Yooxanaa 5:28-29; Falimaha Rasuullada 24:15).

Haddii aayadaha 6-11 ay yihiin chiasms, aayadaha 8-9 waxay fure u yihiin xukimtaanka sharka.

**2:9-10 “marka hore Yuhuudda”** Yuhuuddu iyaga ayaa ugu horrayn jaaniska maxaa yeelay waxa ay haysteen waxyiga Ilaah (1:16; Matayos 10:6; 15:24; Yooxanaa 4:22; Falimaha Rasuullada 3:26; 13:46), laakiin sidoo kalena xukunka ugu horrayn (9-11), maxaa yeelay waxa ay heleen oo haysteen Waxyiga Ilaah (9:4-5).

2:11

NASB, NKJV

NRSV

TEV

NJB

“maxaa yeelay, Ilaah dadka uma kala eexdo”

“maxaa yeelay Ilaah eexasho ma muujiyo”

“maxaa yeelay Ilaah dadka isku si ayuu u xukukmaa”

“Ilaah dadka uuma kala eexdo”

“maxaa yeelay, Ilaah dadka uma kala eexdo” Kala eexasho la’aanta waxa tusaale ahaan loogu soo qaatay nidaamkii caddaaladda ee Axdiga Hore dhexdiisa (Laawiyiintii 19:15; Sharciga Kunoqoshadiisa 10:17; 2 Taariikhdi 19:7; Falimaha Rasuullada 10:34; Galatiya 2:6; Efesos 6:9; Kolosay 3:25; 1 Butros 1:17).

## MAWDUUC GAAR AH: TAKOORKA

### I. Hordhac

- A. Tani waa arrin caalami ah oo ka dhex jirta aadanaha denbiga ku dhacay. Haddaba, midab kala soocu wuxuu ku yimaaddaa siyaabo kala gedisan oo noqon kara takoor lagula dhaqaaqo qaybo ka mida dadka amaba qabiil.
- B. Kalaqaybsanka dadku waxa uu kasoo bilaabmay Baabel (Bilowgii 11), oo asal ahaanna waxa uu la xidhiidhay wiilashii Nuux ee saddexda ahaa (Bilowgii 10). Si kastaba ha ahaatee qoraallada Quduuska ahi waxay inoo sheegayaan in aadanuhu ay isku meel kasoo wada tafiirmeen (Bilowgii 1-3; Falimaha Rasuullada 17:24-26).
- C. Takoorku waxa uu ku salaysan yahay eexasho iyo caddaalad darro, waxaanu ku salaysan tusaale ahaan (1) Takoorku ku salaysan aqoonta; (2) isla weynida dhaqaalaha (3) diinta (4) siyaasadda, qabiilk iwm.

### II. Baybalku muxuu arrintan ka leeyahay

#### A. Axdiga Hore

1. Bilowgii 1:27- cirqiga aadanaha oo isugu jir lab iyo dheddig, waxa laga abuuray ekaanshaha Ilaah, oo taasina waxay ka dhigaysaa kuwo ka gaara waxyaalaha kale ee Ilaah abuuray. Waxa kale oo ay tusaynasaa sida Ilaah u sharfay iyaga (Yooxanaa 3:16).
2. Bilowgii 1:11-25- waxa kusoo noqnoqta weedhaha “..caynkooda ah..” toban jeer. Waxaana loo adeegsaday kala soocooda. Si kastaba ha ahaatee qoraalkani waxa uu gaar u yahay oo tilmaamayaa xayawaanka iyo geedaha balse ma tilmaamayso aadanaha.
3. Bilowgii 9:18-27 waxa loo adeegsaday awoodda iyo maamulka dhaqan ahaaneed. Waa in la xusuusnaado Ilaah in aanu habaarin Kancaan. Nuux oo ahaa awowgiis ayaa habaaray markii isagoo sarkhaansan maro saari waayay. Sidoo kale Kitaabka Quduuska ahi ma tilmaamayo in Ilaah uu ansixiyay habaarkaas, oo xitaa haddii uu sidaas sameeyeyna arrintani may saamayn lahayn cirqiga madawga ah ee aadanaha. Kancaan waxa uu ahaa Falastiiniyiinta iyo Masaarida aabohood, sidoo kale sawirradii hore ee Masaaridu waxa ay muujinayaan in iyaga aanay ahayn kuwo madaw.
4. Yashuua 9:23- waxa ay tusinasaa in cirqiga aadanaha mid ka mid ahi u adeegi doono kuwa kale.
5. Cesraa 9-10 waxa loo adeegsaday dareen cirqi ahaaneed, laakiin ujeedadu waxay tusinasaa in guurka waxa looga mamnuucay aanu ahayn cirqi ahaantooda, laakiinse ay tahay sabab la xidhiidha xagga diinta.

#### B. Axdiga Cusub

##### 1. Injiillada

- a. Ciise ayaa waxa uu tilmaamay nacaybka u dhexeeya Yuhuudda iyo Samaariyiinta, isaga oo tilmaamay in aanay habboonayn arrintaasi.
  - (1) Masaalka ninkii reer Samaariya ee wanaagsanaa (Luukos 10:25-37).
  - (2) Naagtii reer Samaariya ee ceelka joogtay (Yooxanaa 4)
  - (3) Adeegaha mahad celinta badan (Luukos 17:7-19).
- b. Injiilka waxa loogu talo galay dhammaanba aadanaha
  - (1) Yooxanaa 3:16
  - (2) Luukos 24:46-47
  - (3) Cibraaniyada 2:9
  - (4) Muujintii 14:6
- c. Boqortooyada Ilaah waxa soo hoos galaya aadanaha oo dhan
  - (1) Luukos 13:29
  - (2) Muujintii 5

##### 2. Falimaha Rasuullada

- a. Falimaha Rasuullada 10 waxay sheegsaa jacaylka Ilaah u qabo aadanaha oo dhan iyo injiilka oo ah farriinta loogu talo galay dhammaanba aadanaha.
- b. Butros waxa lagu weeraray waxyaalihii uu samaynayay Falimaha Rasuullada 11 oo dhibaataadanna

xal looma helin, illaa Guddigii Yerusaalem ay kulmeen oo xal la helay Falimaha Rasuullada 15. Xurguftii ka dhaxaysay Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee sanadkii koowaadi wuxuu ahaa mid awood badnaa.

3. Bawlos
  - a. Dadku ma kala xigaan Masiixa
    - (1) Galatiya 3:26-28
    - (2) Efesos 2:11-22
    - (3) Efesos 6:9
  - b. Ilaah dadka kuma tix geliyo muuqalkooda
    - (1) Rooma 2:11
    - (2) Efesos 6:9
4. Butros iyo Yacquub
  - a. Ilaah dadka uma kala eexdo 1 Butros 1:17
  - b. Waa inaan Masiixa eexasho lagu haysanin Yacquub 2:1
5. Yooxanaa
  - a. Erayada ugu xoogga badan ee ah masuuliyadda saaran rumaystayaasha waxa laga heli karaa 1 Yooxanaa 4:20.

### III. Ugu dambaynta

- A. Takoorku wuxuu koobsan karaa nooc walba oo gebi ahaanna kuma habboona carruurta Ilaah.
- B. Dhibaataadani waxay dadka Masiixiyiinta ah siin kartaa jaaniska ay ku muujin karaan jacaylka Ilaah, cafiska iyo fahanka dunidan luntay. Haddii se ay Masiixiyiintu arrintaas diidaan waxa imanaya jaaniska sharku uu ugu dhex faafiyo rumaysadka Masiixiyiinta.
- C. Waxyaalaha aad ka qaban karto takoorka waxa ay soo hoos galayaan, shakhsiyaddaada,, qoyskaaga, kaniisaddaada iyo nolol maalmeedkaaga, waxaana la rabaa gebi ahaantoodaba inaad ku dabaqdo nolosha aad kaga dheeraan karto waxna kaga qaban karto cunsuriyadda amaba takoorka.

#### “SHAKHSI AHAAN”

- ★ Qaado masuuliyadda kaa saaran xallinta dhibaatooyinka la xidhiidha takoorka.
- ★ Adigoo ka tukanaya, akhrinaya Baybalka, weheshina la samaynaya daywoga cirqigoodu kala duwan yahay waxaad ka takhalusta waxyaalaha cunsuriyadda ah ee noloshaada la xidhiidha.
- ★ Soo ban dhig kalsoonida aad ka qabto cirqiga, gaar ahaan meelaha aan nacaybka lagaga hortegin.

#### “XAGGA NOLOSHA QOYSKA”

- ★ Aqoonso muhiimadda ku jirta saamaynta qoyska dhexdiisa ee horumarinta fikirrada laga aaminsanyahay cirqiga.
- ★ Raadi si Masiixinimo ah inaad uga hadasho waxyaalaha carruurta iyo guud ahaanba qoysku kaga hadlayaan cunsuriyadda.
- ★ Waalidiintu waa inay ka taxadiraan dejinta tusaale Masiixinimo oo la xidhiidha cirqiyada kale.
- ★ Raadi jaanisada aad ku samayn karto saaxiibtinimada qoysaska kala gedisan.

#### “KANIISADDAADA DHEXDEEDA”

- ★ Ku wacdinta iyo waxbarista Kitaabiga ah ee ku saabsan cirqiga amaba takoorka, dadka kaniisadda ka tirsanina waxay tusaale u noqon karaan bulshada oo dhan.
- ★ Waxaad hubisaa in caabudaadda, is weheshiga, iyo adeegga kaniisadduba uu yahay mid u siman dadka oo dhan, xitaa sida Axdiga Cusubi ina barayana kaniisadda dhexdeeda loogama baahna kala sooc (Efesos 2:11-22; Galatiya 3:26-29).

#### “NOLOL MAALMEEDKA”

- ★ Gacan ka gayso dhammaanba kala takoorka ka jira goobta shaqadaada.
- ★ Adigoo adeegsanaya ururrada bulshada isku day inaad ilaaliso xuquuqda shakhsi ahaaneed ee qof walba, adigoo xasuusanaya in takoorka la weeraro, balse aan dadka la weerarin. Ujeedadu waxa weeyi in la horu mariyo is fahanka iyo wada noolaanshaha.
- ★ Haddii ay suurto gal tahay, abaabul guddiyo gaara oo u kuur gala bulshada iyagoo markaasina samaynaya waxbaris iyo wacyi gelin ku saabsan takoorka oo ay siinayaan bulshada kala duwan.
- ★ Taageer siyaasadda iyo sharci dejinta ku waajahan caddaaladda iyo ka fogaanshaha takoorka, sidoo kalena kasoo horjeedso dhammaanba cidda ku baaqaysa midab kala sooca iyo takoorka.
- ★ Si fiican uula hadal sharciga iyo dadka awoodda leh ee xoojin kara ka hortagga takoorka.
- ★ Ka fogow fawdada, waxaanad tix gelisaa sharciga adigoo waxkasta oo suurto gal ah u samaynaya si Masiixinimo ku jirto, isla markaasna hubinaya inaanad noqonin qalab loo adeegsado takoorka.
- ★ Xidhiidhka aad la leedahay aadanaha oo dhami waa inuu noqdo mid tusaale u ah ruuxa iyo maanka Ciise Masiix.

## AAYADAHA 2:12-16

<sup>12</sup>In alla intii sharcila'aan dembaabtay, sharcila'aan bay halligmi doonaan, oo in alla intii sharciga hoostiisa ku dembaabtayna, sharcigaa lagu xukumi doonaa; <sup>13</sup>waayo, kuwa sharciga maqlaa ma aha kuwa xaqa Ilaah hortiiis, laakiinse kuwa sharciga yeela xaq baa laga dhigi doonaa. <sup>14</sup>Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, kuwan

**2:12** “In alla intii sharcila'aan dembaabtay” dhammaan aadanuhu waxay masuul ka noqon doonaan denbiyadooda, xitaa haddii aanay maqlin Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub. Waayo dadku dhammaanba xoogaa qoona waxay ka leeyihiin Ilaah, oo waxa ay ku garanayaan abuurkiisa (1:19-20; Sabuurka 19:1-6), waxa kale oo ay leeyihiin dareen dabiici ah (2:14-15). Waxay dhammaantoodba diideen iftiinkii Ilaah siiyay ee ay haystaan (1:21-23; 3:9,19,23; 11:32; Galatiya 3:22).

▣ “sharciga” eraygan ‘sharci’ ayaa Bawlos waxa uu ku dhex adeegsanayaa kitaabka Rooma, waxaanu tilmaamayaa waxyaalo kala gedisan (1) sharciga Roomaanka; (2) Sharcigii Muuse; amaba (3) guud ahaan waxyaalaha ay aadanuhu ay qadariyaan. Fahanka aan markaas ka qaadanano aayadahan ayaa waxa uu yahay aadanaha oo dhammaantood aqoon u leh Ilaah, waxayna aqoontan ku heleen waxyiga dabiiciga ah ee uu nafsad ahaantiisa ugu muujiyay iyaga qalbiyadooda (aayadda 15).

**2:13** “waayo, kuwa sharciga maqlaa ma aha kuwa xaqa Ilaah hortiiis” erayga ‘xaq’ (*kikē*) waa eray muhiima marka loo fiirsado fiqiga Bawlos (3:4,20,24,26,28,30; 4:2,5; 5:1,9; 6:7; 8:30,33). Qoraallada Bawlos waxa aan arki karnaa in eraygan loo adeegsaday, ugu horrayn xaqnimada Ilaah uu siiyay aadanaha denbiilayaasha ah, isagoo ku siiyay Masiixa aawadiis.

Erayada “xaq” amaba “xaq ka dhigis,” “xaqnimada” waxa lagasoo dhiraan dhirriyay *dikaiois*. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:17. Xagga Cibraaniga (*tsadag*) waxaana asal ahaan lagu tilmaamay dheerar toosan (15 ilaa 20 dhudhun) kaasoo loo adeegsan jiray qiyaasta sida gidaarrada iyo waxyaalaha la hal maala. Waxay haddaba tusaale u ahayd in loo adeegsado toosnaanta xukunka Ilaah.

Qoraallada Bawlos waxa aan arki karnaa in eraygan loo adeegsaday, ugu horrayn xaqnimada Ilaah uu siiyay aadanaha denbiilayaasha ah, isagoo ku siiyay Masiixa aawadiis. Waxa middan lagu magacaabay xaq ka dhigis oo waxay tilmaamaysaa sida qof uu xaq ugu hor noqon karo Ilaah. Haddaba, middani waa ta uu asal ahaan Bawlos ku caanka ahaa “xaq kaga dhigista rumaysadka.” Marka labaadna, shaqada Ilaah uu ku rabay inuu aadanaha uu ka sameeyay ekaanshihiisa uu dib ugu hagaajiyo (Bilowgii 1:26-27), amaba haddii si kale loo dhigo si uu u keeno nolosha la midka ah tan Masiixa oo kale. Aayadahan Matayos 7:24; Luukos 8:21 iyo 11:28; Yooxanaa 13:17; Yacquub 1:22-23,25 ayaa waxa ay sheegayaan in Masiixiyiintu ay noqdaan yeela erayga oonay noqon oo keliya kuwo dhegaysta. Xaqnimada la inagu beeray waa in natiijadeedu ay noqoto mid ay ka muuqato nolosha xaqnimada. Ilaahna wuu cafiyaa oo wuu beddelaa denbiilayaasha! Axiga Cusubi haddaba aadanaha waxa uu siinayaa waxay sharci ahaan ku taagnaadaan, laakiin sidoo kale waxa uu dalbayaa nolol quduusnimo ku jirto.

▣ “laakiinse kuwa sharciga yeela” Ilaah oo la aqoonsadaa waxa ay u baahan tahay addeecitaan iyo qaab nololeed cusub (Laawiyiinta 18:5; Matayos 7:24-27; Luukos 8:21; 11:28; Yooxanaa 13:17; Yacquub 1:22-25; 2:14-28). Siyaabo badan ayaa ereygan waxa uu u yahay mid lagasoo dhegtay luqadda Cibraaniyada *shema* oo macneheedu yahay maqal oo ku dhaqan (Sharciga Kunoqoshadiisa 5:1; 6:4; 9:1; 20:3; 27:9-10).

## 2:14

NASB “Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, kuwan aan sharciga lahaynu waa isu sharci.”

NKJV “Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda ka sameeyaan sharciga, kuwan aan sharciga lahaynu waa isu sharci”

NRSV “Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, kuwan aan sharciga lahaynu waa isu sharci”

TEV “Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay iyagu ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, iyagu waa isu sharci xitaa haddaanay sharciga haysanin”

JB “Markii dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan sharciga lahaynu, ay dabiicadda ka sameeyaan waxyaalaha sharciga, kuwan aan sharciga lahaynu waa isu sharci”

Dhaqammada oo dhammi waxay leeyihiin sharci qalbiyadooda ku jira, waxaanay masuul ka yihiin iftiimintaas ay haystaan (1 Korintos 9:21). Aayaddan macnaheeda loogalama jeedo inay xaq ku noqonayaan iftiinka ay ku haystaan noloshooda iyo dhaqankooda, laakiinse waxay masuul ka yihiin aqoonta dabiiciga ah ee ay u leeyihiin Ilaah.

**2:15 “oo garashadoodu u markhaati furayso, oo fikirradoodu midba midka kale ashtakaynayo ama marmarsiinyo samaysanayo”** waxa jira garasho dadka qalbiyadooda ku jirta oo Ilaah ku saabsan, laakiin iftiinka qoraallada Quduuska ah ayaa si dhammays tiran u muujin kara oo la isugu hallayn karaa. Si kastaba ha ahaatee abuurka (1:18-20) iyo garashada sharciga ee qalbiyada ku jirta (2:14-15) ayaa waxa uu yahay aqoon dadku ay Ilaah u leeyihiin. Ma jirto eray Cibraani ah oo u dhigma erayga Greegga laga tarjumay ee ‘garasho’(syneidesis). Bawlos wuxuu ku dhowaa oo la noolaa faylosuufarradii Giriigta (wuxuu ku soo xiganaya Cleanthes Falimaha Rasuullada 17:28; Menander 1 Korintos 15:33; iyo Epimenides Tiitos 1:12).

▣ **“sida injiilkaygu leeyahay”** waxa aan ka fahmi karnaa inay tilmaamayso wacdintii Bawlos ee ku tiirsanayd waxyiga Ciise Masiix. Waxa uu tilmaamayaa injiilka amaba warka wanaagsan ee isaga looga masuul dhigay inuu dadka ku wacdiyo (16:25; 1 Korintos 15:1; Galatiya 1:11; 1 Timoteyos 1:11; 2 Timoteyos 2:8). Isaga gaar umay ahayn, laakiin waxa uu dareemay masuuliyad gaara oo ah in loogu yeedhay inuu dadka ku wacdiyo injiilka dadka aan ahayn Yuhuudda.

▣ **“maalinta Ilaah waxyaalaha qarsoon ee dadka ku xukumi doono”** Ilaah waxa uu ogsoonyahay waxa ku jira qalbiyada dadka dhammaan (1 Samuu’eel 2:7; 16:7; 1 Boqorradii 8:39; 1 Korintos 28:9; 2 Korintos 6:30; Sabuurka 7:9; 44:21; 139:1-6; Maahmaahyadii 15:11; 21:2; Yeremyaah 11:20; 17:10; 20:12; Luukos 15:16; Falimaha Rasuullada 1:24; 15:8; Rooma 8:27; Muujintii 2:23). Ilaah isaga oo adeegsanaya Wiilka ayuu keeni doonaa xukunka kama danbaysta ah (Matayos 25:31-46; Muujintii 2:11-15).

▣ **“Ciise Masiix”** Ciise markii uu yimid umuu imanin inuu noqdo xaakin dadka kala xukuma (Yooxanaa 3:17-21). Laakiinse waxa uu u yimid u muujiyo Ilaaha Aabaha ah, ugu dhinto beddelka denbiyadeenna, iyo inuu rumaystayaasha siiyo tusaalaha ay noloshooda u raaci lahaayeen. Marka haddaba dadku ay diidaan Ciise Masiix iyaga ayaa nafhooda xukuma.

Si kastaba ha ahaatee, Axdiga Cusub ayaa waxa kaloo uu ina barayaa in Ciise xagga xukunka uu yahay kan ka masuulka ah ee loo gacan geliyay (Yooxanaa 5:22,27; Falimaha Rasuullada 10:42; 17:31; 2 Timoteyos 4:1). Arrintan tilmaamaysa Ciise oo ah Xaakinka amaba Badbaadiyaha, waxa ay inooga muuqan kartaa Injiilka uu qoray Yooxanaa (3:17-21 aayadaha 9:39).

#### **AAAYADAH 2:17-24**

<sup>17</sup>laakiin adigu haddaad isku sheegtid Yuhuudi, oo sharciga isku hallaysid, oo Ilaah ku faantid, <sup>18</sup>oo doonistiisa taqaanid, oo aad u bogtid waxyaalaha aad u fiican, adigoo sharciga wax lagugu baray, <sup>19</sup>oo aad aaminsan tahay inaad tahay kan haga kuwa indhaha la', iyo kan nuurka u ah kuwa gudcurka ku jira, <sup>20</sup>iyo kan doqonnada qummaatiya, iyo macallinka carruurta, adigoo sharciga ku haysta muuqashadii aqoonta iyo runta; <sup>21</sup>haddaba kaaga kan kale wax baraa, sow wax isbari maysid? Kaaga dadka ku wacdiya, Waxba ha xadina; adigu miyaad wax xaddaa? <sup>22</sup>Kaaga yidhaahda, Yaan la sinaysan, miyaad adigu sinaysataa? Kaaga sanamyada nebeaada, miyaad macbudyo dhacdaa? <sup>23</sup>Kaaga sharciga ku faana, miyaad Ilaah ku cisa jebisaa sharciga aad gudubtay aawadiis? <sup>24</sup>Waayo, magaca Ilaaha waa lagaga caytamaa quruumaha dhexdooda idinka daraaddiin, sida qoran.

**2:17 “Haddaad”** waxay xanbaarsantahay shuruud, waxaanay fahan ahaan tilmaamaysaa qoraaga aragtidiisa iyo ujeeddada uu u socdo. Shardiigani waxa uu sii socdaa ilaa aayadda 20, laakiin ma laha dhammaad. Haddaba, Yuhuudda ayaa waxay ahaayeen kuwo ku kalsoonaa aqoontooda, dhaqankooda iyo waxyaalaha ay qabtaan oo ay u haysteen inay u keenayaan badbaadada (Matayos 3:9; Yooxanaa 8:33,37,39).

▣ **“oo Ilaah ku faantid”** Yuhuud badan ayaa waxay isku halleeyeen (1) asalkooda iyo (2) sida ay ugu dhaqmaan sharcigii Muuse taasoo macneheedu ka dhigan yahay in Ilaah iyaga aqbalay. Si kastaba ha ahaatee iyagoo iska dhigayay inay yihiin kuwa xaq ayay noqdeen kuwo ka fogaada Ilaa (Matayos 5:50; Galatiya 3).



Arrintan ku faanitaanka ayaa Bawlos waxa aad ugaga sii warramayaa I Korintos. Waxaanu waajahay kuwo Israa'iliyiin ah oo faan badan iyo Giriig rumaysan inay caqli badan yihiin. Ugu dambaynta ma jiro qof isagu ku badbaadi kara faankiisa amaba waxa uu isu haysto (Efesos 2:8-9).

## 2:18 Eeg Mawduucan Gaarka ah ee ku saabsan Tijaabinta

### MAWDUUC GAAR AH: FAANITAANKA

Eraygan oo luqadda Giriigga lagu yidhaahdo *kauchaomai*, *kauchēma*, iyo *kauchēsis* ayuu Bawlos adeegsaday ilaa shan iyo soddon jeer, iyadoo Axdiga Cusub lagu adeegsado labo jeer oo keliya (labada jeerba Yacquub). Waxaanu aad ugu adeegsaday Korintooska Koowaad iyo Korintooska Labaad.

Haddaba waxa jira laba waxyaalood oo muhiima isla markaasna la xidhiidha faanka:

- ★ Qofna Ilaah hortiisa yaanu ku faanin (1 Korintos 1:29; Efesos 2:9).
- ★ Masiixiyiintu waa inay ku faanaan Rabbiga (1 Korintos 1:31; 2 Korintos 10:17, oo u noqonaya Yeremyaah 9:23-24)

haddaba waxa jira faanitaan habboon iyo midaan habboonayn.

1. Faanka Habboon
  - a. Faanka rajada (Rooma 4:2)
  - b. Ku faanitaanka Ilaah iyadoo loo marayo Ciise (Rooma 5:11)
  - c. Ku faanitaanka isku tallaabta Ciise Masiix (muhiimadda Bawlos 1 Korintos 1:17-18; Galatiya 6:14).
  - d. Bawlos wuxuu ku faanayaa
    - 1) Shaqadiisa aanu abaal marinta dadka kaga doonayn (1 Korintos 9:15,16; 2 Korintos 10:12)
    - 2) Awooddiisa uu siiyay Masiixu (2 Korintos 10:8,12).
    - 3) Ku faanis la'aantiisa shaqooyinka dadka kale (sida ay ahaayeen kuwo ka mida reer Korintos, 2 Korintos 10:15)
    - 4) Dhaxaltooyada cirqigiisa (sida kuwo kaleba ka samaynayeen Korintos, 2 Korintos 11:17; 12:1,5,6).
    - 5) Kaniisadihiisa
      - a. Korintos (2 Korintos 7:4,14; 8:24; 9:2; 11:10)
      - b. Tesaloniika (2 Tesaloniika 1:4).
    - (6) Kalsoonidiisa uu ku qabay Ilaah (2 Korintos 1:12)
  2. Faanka aan habboonayn
    - a. Xidhiidhka amaba dhaxaltooyada Yuhuudda (Rooma 2:17,23; 3:27; Galatiya 6:13)
    - b. Kuwo ka mida kaniisaddii Korintos waxay ku faanayeen:
      - (1) Dadka (1 Korintos 3:21)
      - (2) Xikmad (1 Korintos 4:7)
      - (3) Xorriyad (1 Korintos 5:6)
    - c. Macallimiin beena ayaa isku dayay inay ku faanaan kaniisadda Korintos (2 Korintos 11:12).

### MAWDUUC GAAR AH: ERAYADA GIRIIGGA EE “TIJAABINTA”

Waxa jira labo eray ooo Giriik ah isla markaasna loo adeegsado tijaabinta qof ujeeddo laga leeyahay

#### 1. *Dokimazō*, *dokimion*, *dokimasia*

Waxa loo adeegsadaa qofka sida ay maskaxdiisu tahay. haddaba nidaamka jidh ahaaneed ee tijaabinta ayaa noqday mid awood leh oo ay adeegsadaan Ilaah iyo aadanuhuba, waxaanay ku tijaabiyaan kuwo kale. Waxa markaas loo adeegsaday eraygan aragtida ku waajahan aqbalitaanka waxaas:

- a. dibi, Luukos 14:19
- b. innaga nafehenna, 1 Korintos 11:28

- c. rumaysadkeenna, Yacquub 1:3
- d. xitaa Ilaah, Cibraaniyada 3:9

Natijoooyinka kasoo baxa tijaabooyinkan ayaa waxay u muuqdeen kuwo sax ah (Rooma 1:28; 14:22; 16:10; 2 Korintos 10:18; 13:3; Filiboy 2:27; 1 Butros 1:7). Haddaba, fikraddani waxay gudbinaysaa in qof la itixaamo oo kaddibna la ogaado.

- a. fiicnaanta
  - b. wanaagga
  - c. caqli badan
  - d. qiimo leh
  - e. faa'ido leh
2. *peirazō, peirasmōs*

Waxa weeyi in qof la itixaamo iyadoo la aqbalayo amaba la diidayo. Waxaana loo adeegsaday iyadoo lala xidhiidhinayo Ciise aqbalitaankiisa amaba diidmadiisa.

- a. Waxay gudbinaysaa jarribaadda Ciise (Matayos 4:1; 16:1; 19:3; 22:18,35; Markos 1:13; Luukos 4:2; 10:25; Cibraaniyada 2:18).
- b. Eraygan (*peirazō*) waxa loo adeegsaday magac ahaan Shaydaanka sida aan ka arki karno Matayos 4:3; 1 Tesaloniika 3:5.
- c. Waxay ka kooban tahay lakab (*ekpeirazō*) waxaana loo adeegsaday Ciise oon jarribin Ilaah (Matayos 4:7; Luukos 4:12; sidoo kale eeg 1 Korintos 10:9).
- d. Waxa loo adeegsaday jarribaadaha Masiixiyiinta dhexdooda (1 Korintos 7:5; 10:9, 13; Galatiya 6:1; 1 Tesaloniika 3:5; Cibraaniyada 2:18; Yacquub 1:2,13,14; 1 Butros 4:12; 2 Butros 2:9).

▣ **“Sharciga”** aayadda 17, waxay la hadlaysaa dadka Yuhuudda ah, sidaasi darteedna erayga ‘Sharciga’ wuxuu tilmaamayaa Sharcigii Muuse. Waxa kale oo caddaynasa aayadda 25 ee tilmaamaysa gudniinka.

**2:18-20** dadka Yuhuudda ahi waxay rumaysnayeen in iyagau ay yihiin kuwa ku taagan jidka saxda ah ee Ilaah loo mari karo. Waxay ku kalsoonaayeen, inay yihiin macallimiinta saxda ah ee diinta aqoonta u leh. Waxay rumaysnayeen in ay iyagu yihiin kuwa la doortay ee masuulka ah (Luukos 12:48).

Kalsoonidoodu waxay ahayd

1. Hagaha ka indho la'aanta ah, aayadda 19
2. Iftiinka kuwa mugdiga ku jira, aayadda 19
3. Qummiyaha doqommada, aayadda 20
4. Macallinka carruurta, aayadda 20
5. Sharci ku haystaha muuqashada aqoonta iyo runta, aayadda 20.

**2:21-24** haddii qof isku halleeyo addeecitaanka shakhsi ahaaneed, waa in addeecitaankaasi noqdaa mid dhammays tiran (Matayos 5:20,48; Galatiya 3:10 oo lagasoo qaatay Sharciga Kunoqoshadiisa 27:26 iyo Yacquub 2:10). Tani waa waxaan ka suurto galaynin aadanaha denbiilayaasha ah. Haddaba, Bawlos su'aalahan waxa uu waydiinayaa akhristayaasha iyo dhegaystayaasha Yuhuudda, waana sida aan ka arki karno aayadaha 21-23.

**2:22** Waxa adag sida lagu ogaado waxa uu Bawlos tilmaamayo marka aan u fiirsano aayadaha 22-23. Maadaama oonay arrintani tilmaamayn oonay ku habboonayn oo keliya Yuhuudda wakhtigii Bawlos, ayaa waxa suurto gala in denbiyadani ay ahaayeen kuwo dareen ahaan la mida sidii Ciise Masiix u fadiray sharciga, sida ku qoran Matayos 5:20-48.

**2:22** **“Kaaga sanamyada nebcaada”** macneheedu waxa weeyi ka fogaanshaha waxan adiga oon fahamsanayn macnaha saxda ah ee loo nacayo.

▣ **“miyaad macbudo dhacdaa?”** taariikh ahaan lama garanayo wax lagu sheego arrintan, laakiin kollay waxay la xidhiidhaa sanamyada.

**2:24** waxa lagasoo qaatay Ishacyaah 52:5. Ilaah barakadii uu siiyay reer Israa'iil ee ahayd dhowrista axdiga (Sharciga Kunoqoshadiisa 27-28), waxa u jeedadiisu ahayd inay markhaatiyaal u noqdaan dunida. Si kastaba ha ahaatee, Israa'iil weligood may dhawrin axdiga, sidaas darteedna, dunidu waxay arkeen oo keliya xukunka Ilaah (Yexesqeel 36:22-32). Israa'iiliyiintu waxa la rabay inay noqdaan boqortooyada wacdiyaasha (Sharciga Kunoqoshadiisa 19:5-6), oo dunidoo dhanna ay u keenaan erayga Ilaah (Bilowgii 12:3; Efesos 2:11-3:13).

#### **AAYADAHA 2:25-29**

**<sup>25</sup>Waayo, hubaal gudniintu wax bay tartaa, haddaad sharciga yeeshid, laakiin haddaad sharciga gudubtid, gudniintaadii waxay noqotay buuryoqabnimo. <sup>26</sup>Haddaba haddii mid buuryoqab ahu xajiyo qaynuunnada sharciga, buuryoqabnimadiisii miyaan loo tirin doonin sida gudniin? <sup>27</sup>Oo kan jinsigiisu buuryoqab yahay, hadduu sharciga dhammeeyo, miyuusan ku xukumi doonin kaaga sharciga gudba, in kastoo aad haysatid qorniinka iyo gudniinta? <sup>28</sup>Waayo, kii dadka sida Yuhuudi ugu muuqdaa, Yuhuudi ma aha; gudniinta jidhka ka muuqataana, gudniin ma aha; <sup>29</sup>laakiin waxaa Yuhuudi ah kii hoosta Yuhuudi ka ah; gudniintuna waa tan qalbiga, ee ku jirta ruuxa, oo aan ku jirin qorniinka; kaas ammaantiisu kama timaado dadka, waxayse ka timaadaa Ilaah.**

**2:25 “gudniintu”** Bawlos ilaa hadda waxa uu adeegsanayaa weerar, waxaanu weerarayaa qof odhanaya ugu yaraan annaka waa nala guday (Bilowgii 17:10-11). Oo waxaan ku taaganahay laynkii Ibraahim. Bawlos haddaba, waxa uu si cad uga hadlayaa waxyaabahan ay ku jirto Yuhuudda rajadoodu (Matayos 3:7-10; Yooxanaa 8:31-59).

Dhammaanba kuwii Israa'iiliyiinta jaarka la ahaa marka laga reebo Filistiiniyiinta waxay ahaayeen kuwo la guday. May ahyaan haddaba in falkan oo keliya la sameeyo, laakiin waxay ahayd in lasii wado rumaysadka (aayadaha 26-27) tanina waa mid haddaba laga rabo diimaha oo dhan, maxaa yeelay dadka diimaha haystaa waxay rabaan barakada Ilaah, laakiin maaha kuwo masuulayaddeeda qaadaya.

**2:25-26 “haddii...haddii...haddii”** waa saddex shuruudood oo tilmaamaya mustaqbalka waxa la samayn doono. Haddaba, addeecitaanka (Sharciga Kunoqoshadiisa 27-30) ayaa ah furaha doodka Bawlos ee cutubka 2, laakiin maaha 3:21-31 (Galatiya 3).

**2:26-27** aayadahani waxay sheegayaan rajada ay kuwo ka mida dadka aan Yuhuudda ahayni ay kaga jawaab celiyeen iftiinka ay haysteen. Tusaalaha haddaba looga soo qaadan karo Kitaabka Quduuska ah ayaa waxa uu yahay Korneeliosow sida aan ka arki karno Falimaha Rasuullada 10.

Run ahaantii aayadahani waxay yihiin kuwa la taaban karo ee Bawlos ku sheegayay in Yuhuuddu ay u baahan yihiin badbaadada. Rooma 3:23 ayaa waxa ay soo koobaysaa in aadanaha oo dhammi ay yihiin kuwo lumay haddii aanay Masiixa raacin. Haddii ay jiraan kuwo aan Yuhuud ahayn oo ka jawaab celiya iftiinka Ilaah siiyay ee ay ka arki karaan abuurka Ilaah, iyo dareenka qalbiyadooda uu Ilaah isugu muujiyay, waxa uu Ilaah iyaga siin doonaa jaaniska ay ugu jawaabi karaan Masiixa.

**2:28-29 “Waayo, kii dadka sida Yuhuudi ugu muuqdaa.... kaas ammaantiisu kama timaado dadka, waxayse ka timaadaa Ilaah.”** waa arrin run ahaantii muhiim ah, oo waxay muhiim u tahay fiqiyada casriga ah ee isku daya inay kala soocaan dadka Ilaah ee Axdiga Hore iyo kuwa Axdiga Cusub. Waxa jira axdi keliya iyo dad keliya (Rooma 9:6; Galatiya 3:7-9,29; 6:16; 1 Butros 3:6). Axdiga Cusubina waa dhammaystirka Axdigii Hore. . Dadka Ilaah waxay ahaayeen marwalba kuwo ku socda rumaysad. Waxa weeyi “halbowlaha dadka” mana aha kuwo waxyaalo kale u adeega. Waxa la rabaa in rumaysadku uu noqdo furaha oo axdiguna uu noqdo mid ku jira maanka, balse aanu noqonin calaamad.

☐ **“jidh”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

**2:29** calaamadda axdiga ee gudniinka (Bilowgii 17:14), waxay calaamad u ahayd Axdiga Hore dhexdiisa sida qofku ugu furmi doono Ilaah. Waxayna u horu maraysay siyaabo kala duwan (1) gudniinka qalbiga (Sharciga Kunoqoshadiisa 10:16; Yeremyaah 4:4); (2) gudniinka dhegta (Yeremyaah 6:10); iyo (3) gudniinka dibnaha (Baxniintii 6:12,30). Sharciga macnihiisu muu ahayn nidaam debadda ka yimid oo sharci dejin ah, laakiise muhiimaddiisu waxay ahayd bedelitaanka nololaha.

**NASB** “waa tan qalbiga, ee ku jirta ruuxa, oo aan ku jirin qorniinka”  
**NKJV** “waa tan qalbiga, ruuxuna ku jiro, kuna qornayn waraaq”  
**NRSV** “waxa qalbiga ku jiraa waa ruux mana aha qoraal”  
**TEV** “waa shaqada Ruuxa Ilaah, ee maaha Sharciga qoran”  
**JB** “qalbiga waxa ku jiraa maaha waraaqda waxa ku sugan laakiin waa ruuxa”

Erayadani waxa weeyi kuwo lagu wareerayo luqada Giriigga dhexdeeda. Tarjumaadaha qaarkood ayaa waxay ku sheegayaan ruuxiga oo kasoo horjeeda qoraalka ( NRSV, Twentieth Century New Testament, tarjumaadda Knox, tarjumaadda Lamsa ee Peshitta, tarjumaadda Williams iyo New Berkeley Version). Tarjumaado kale ayaa iyaguna waxay u arkaan farqiga u dhexeeya Ruuxa Quduusku ( 7:6; 2 Korintos 3:6, halkaasoo qaabab isku mid ahi kusoo dhex arooreen) iyo qoraalka ( NASB, NKJV, NEB, NIV, iyo TEV).

Bawlos waxa uu ka hadlayay xaqiiqada ay dad aan ahayn Yuhuuddu Ilaah ugu raalli gelinayeen iyagoo gees ka ah Sharciga. Haddii markaas ay tani run tahay carruurta Ilaah waxa ay koobsanaysaa kuwa aan jidh ahaan la gudin (Galatiya). Qoyska Ilaahna waxa uu ka wayn yahay kan cirqiga Yuhuudda (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5); Ayuub, Milkisadaaq, Yetroo, waxay dhammaantood ahaayeen kuwo aan Yuhuud ahayn. Xitaa Efrayim iyo Manaseh waxa badhkood ahaa Masriyiin (Bilowgii 41:50-52).

## SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sidee rumaysad la'aanta Yuhuuddu u saamaynasaa ballantii Ilaah (3:3-4)?
2. Ma jirtaa wax faa'iido ah ood Ilaah hortiisa kaga Helayso Yuhuudimo?
3. Waa maxay dhaleecayntu?
4. Maxay tahay ujeeddada canaanta ku sugan aayadaha 5-8?
5. Xaqnimada qofku ku helo rumaysadka ma ka gaarbaa camalka (3:8)?
6. Waa maxay gebi ahaan waxa looga la jeedo leexashada sida aan ka arki karno aayadaha (3:10-18)?
7. Waa maxay ujeeddada laga lahaa Sharciga Muuse, amaba sharciga guud ahaan (3:20; Galatiya 3:24-25)?
8. Maxay tahay sababta Shaydaanka aan loogu xusin dhammaan cutubyada 1-3 iyadoon la saarin eedda lumitaanka aadanaha?
9. Ballan qaadyadii Axdiga Hore ma shuruudbaa mise maaha?
10. Maxay tahay ujeeddada Sharciga Muuse ee (1) kuwa aan Yuhuudda ahayn; iyo (2) Yuhuudda?
11. Eraydaada kuu gaarka ah guud mar ugu samee haddalladii Bawlos ee 1:18-3:20 baaragaraafyada adigoo raacaya.

# ROOMA 3

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Yuhuudda iyo Sharciga (2:17-3:8)	Murammadii waa laga jawaabay	Faa'idada Yuhuudda	Yuhuudda iyo Sharciga	Ballannada Ilaah ma badbaadin doonaan
3:1-8	3:1-8	3:1-8	3:1-4 3:5-6 3:7-8	3:1-8
Ma jiro mid xaq ahi	Dadku way wada dambaaben	Dhammaan waa wada denbiilayaal	Ma jiro mid xaq ahi	Dhammaan waa wada denbiilayaal
3:9-20	3:9-20	3:9-18 3:19-20	3:9-18 3:19-20	3:9-18 3:19-20
Xaqnimada rumaysadka	Xaqnimada Ilaah waxa lagu helaa rumaysadka	Xaqnimada runta ah	Sida Ilaah dadka xaqnimada ku siiyo	Muujinta xaqnimada Ilaah
3:21-26	3:21-26	3:21-26	3:21-26	3:21-26
	Faanku waa reeban yahay	Faanku waa reeban yahay		Waxa rumaysadku qabto
3:27-31	3:27-31	3:27-31	3:27-31	3:27-31

## AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

### IYADOO LA RAACAYO UJEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Aayadaha 1-8 waxa jira xidhiidh ka dhexeeya, laakiin waxa adayg badan raacitanka qaab fikirka Bawlos maxaa yeelay waxa uu adeegsanayaa hadal ku dhisan qaab canaaneed.
- B. Waxay u muuqataa Bawlos oo rajaynaya sida dadka ka mida Yuhuuddu ugu jawaab celin doonaan 2:17-29, sidaas darteedna waxa uu ka jawaab celinayaa waxyaalaha ay ku dacwoonayaan (Corley, Vaughan, *Romans*, pp. 37-39).
  - 1. Su'aasha koowaad. maxay Yuhuuddu dadka kale dhaantaa? (aayadaha 1-2)
  - 2. Su'aasha labaad. Erayga Ilaah ma wuxuu u guul darraysta rumaysad darrada kuwo ka mida Yuhuudda?
  - 3. Su'aasha saddexaad. Haddii Ilaah Yuhuuddu u adeegsaday muujinta eraygiisa ilaa hadda ma waxay masuul ka yihiin xukunka? (aayadaha 5-8).
- C. Gebagabadu waxay dib ugu noqonaysaa 2:11. Ilaahna ma kala jecla dadka. Sidoo kalena dhammaanba aadanuhu waxay masuul ka yihiin ka qayb qaadashada nolosha ee ay ka helaysaan iftiinka uu isugu muujiyay iyaga (waxyiga dabiiciga ah iyo kan gaarka ah labadaba).
- D. Aayadaha 9-18 waa kuwo taxane ah oo lagasoo xigtay Axdiga Hore, waxaanay muujinayaan denbiga dadka Yuhuudda ah.
- E. Aayadaha 19-20 waxay soo koobayaan shuruudaha ruuxiga ah ee laga rabo Israa'iliyiinta iyo ujeeddada Axdiga Hore (Galatiya 3).
- F. Aayadaha 21-31 waxay soo koobayaan 1:18-3:20. Waxayna yihiin ujeeddada fiqi ahaaneedu ee ugu horraysa injiilka (eeg kormarka guud ee bilowga buuggan aan kusoo dhaafnay).

## BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 3:1-8

<sup>1</sup>Haddaba maxay Yuhuuddu dadka kale dhaantaa? Ama gudniinta waxtarkeedu waa maxay? <sup>2</sup>Si walba wuu u badan yahay; marka hore waxaa Yuhuudda lagu ammaaneeyey hadallada Ilaah. <sup>3</sup>Haddaba, maxaa jira, haddii qaar aanay rumaysad lahayn? Rumaysaddarradoodu miyey Ilaah aaminnimadiisa burin doontaa? <sup>4</sup>Ma suurtoowo! Ilaah runlow ha ahaado in kastoo nin waluba beenlow yahay, sida qoran, In xaq lagaaga dhigo hadalladaada, Oo aad liibaantid markii lagu xukumo. <sup>5</sup>laakiin haddii xaqnimo la'aanteenu muujiso xaqnimada Ilaah, maxaynu odhan doonaa? Ma xaq daran yahay Ilaaha cadhada soo dejiyaa? (Sida dad baan u hadlayaa.) <sup>6</sup>Ma suurtoowo! Hadduu xaq daran yahay, sidee baa Ilaah dunida u xukumi doonaa? <sup>7</sup>Runta Ilaah hadday beentayda ugu badatay ammaantiisa, de maxaa aniga haddana weli la iigu xukumaa sida mid dembi leh? <sup>8</sup>Maxaannu u odhan weynaa, Shar aan samayno in wanaag yimaado? sida lanoo hafro oo ay qaar naga sheegaan sidii annagoo nidhaahna. Xukunka ay kuwaasu helaan waa xaq.

**3:1 “maxay Yuhuuddu dadka kale dhaantaa?”** Bawlos waxa uu sii wadaa qaabka qoraalkiisa oo ku salaysan canaan, isagoo markaasna raba inuu farriintiisa gudbiyo. Waxa uu markaasna diiwaan gelinayayaa xuquuqda ay yeelan karaan Yuhuuddu, eeg 3:2 iyo 9:4-5.

**3:2 “marka hore”** Bawlos wuxuu adeegsanayaa erayada “ugu horrayn” marka aan eegno 1:8, laakiinse waa isaga oo wax labaad oo intaas kusii xiga aan sheegin. Bawlos qoraalladiisa ayaa haddaba ahaa kuwo xooggan, oo xitaa mararka qaar naxwe ahaan marka aad eegto la odhan karo ma dhammays tirna.

▣ **“waxaa Yuhuudda lagu ammaaneeyey hadallada Ilaah”** haysashada muujinta amaba waxyiga Ilaah waxa weeyi masuuliyad layaab leh (9:4-5). Waana hadiyadda Ilaah ( 1 Tesaloniika 2:4).

Erayga *logion* (hadallada Ilaah) waxa loogu dhex adeegsaday Septuagint ga hadallo ka yimid Ilaah ( Sharciga Kunoqoshadiisa 33:9; Sabuurka 119:67; Ishacyaah 5:24; 28:13).

▣ Haddaba si joogta ah waxa si is daba jooga loogu dhex adeegsaday Axdiga Cusub (Falimaha Rasuullada 7:38; Cibraaniyada 5:12; 1 Butros 4:11).

▣ **“Haddii”** Waa shuruudaha koobaad ee ay u muuqato inuu qoraagu hadalkiisu ka dhigay mid runa. Waxaan sidoo kale ka arki karnaa aayadaha 5 iyo 7 oo iyaguna koobsanaya weedhaha sidan ah.

▣

**NASB, NKJV**

**“qaar aanay rumaysad lahayn”**

**NRSV, JB**

**“qaarkood rumaysad ma lahayn”**

**TEV**

**“ka waran haddii qaarkood aanay lahayn rumaysad”**

Waxa laga yaabaa inay tilmaamayso Israa’iliyiinta (1) rumaysad la’aantooda (2) yaraanshaha rumaysadka shakhsi ahaaneed ee Ilaah. caqli ahaan waxa adag in arrintan lala xidhiidhiyo ballan qaadyada Ilaah ee shuruud la’aata ah (cafiska aadanaha xadgudbay) iyo ka jawaaba celinta shuruuddu ku xidhan tahay ee aadanaha. Si kastaba ha ahaatee Kitaabku arrintan wuu ka hadlayaa (3:4-5). Ilaahna waa mid marwabla xaqnimo leh xitaa haddii aadanuhu aanay rumaysad lahayn (Hoosheeca 1.3).

▣ **“burin doontaa”** eeg mawduucan gaarka ah.

#### **MAWDUUC GAAR AH: BURIN (KATARGEŌ)**

Eraygan burintu (*katargeŏ*) waxa weeyi erayada adeegsigooda uu jeclaa Bawlos, waxaanu adeegsaday ugu yaraan shan iyo labaatan jeer laakiinse waxa ay koobsanaysaa waxyaalahan:

- A. Asal ahaan waxa ay kasoo jeeddaa *argos* oo macneheedu yahay
  1. Wax aan shaqaynayn oo caddilan
  2. Aan la adeegsanin
  3. Aan la isticmaalin
  4. Aan faa’ido lahayn
  5. Aan habboonayn
- B. Marka ay wadato *kata* waxa loo adeegsaday tilmaamista
  1. Waxa aan shaqaynayn
  2. Waxa aan la isticmaalin
  3. Waxa la caddilay
  4. Waxa la iska fogeeyay
  5. Waxa gebi ahaanba aan habboonayn
- C. Mar ayaa waxa lagu dhex isticmaalay injiilka uu qoray Luukos, waxaana loo adeegsaday waxaan midho dhal ahayn, sidaasi darteedna waa geed aan faa’ido lahayn oon la isticmaali karin (Luukos 13:7).
- D. Bawlos wuxuu u adeegsanayaa labo siyaabood oo asaasi ah:
  1. Ilaah waxa uu samaynayaa waxyaabo aan ku habboonayn oonay mutaysanin aadanaha leexashada badani.
    - a. Dabiicadda denbiga ee aadanaha (Rooma 6:6)
    - b. Sharciga Muuse iyo xidhiidhka ballanka Ilaah ee “farcanka” –Rooma 4:14; Galatiya 3:17; 5:4,11; Efesos 2:15.
    - c. Awoodaha ruuxa (1 Korintos 15:24).
    - d. Ssharci darrada aadanaha 2 Tesaloniika 2:8
    - e. Dhimashada jidh ahaaneed 1 Korintos 15:26; 2 Timoteyos 1:16 (Cibraaniyada 2:14).
  2. Ilaah oo axdigii hore ku beddelaya axdiga cusub

- a. Waxyaabaha la xidhiidha Sharcigii Muuse Rooma 3:3,31; 4:14; 2 Korintos 3:7,11,13,14.
- b. Sinnaashaha guurka ee lagu dhex sheegay Sharciga – Rooma 7:2,6.
- c. Waxyaalaha wakhtigan (1 Korintos 13:8,10,11).
- d. Jidhkan 1 Korintos 6:13
- e. Hogaamiyayaasha wakhtigan 1 Korintos 1:28; 2:6

haddaba eraygan waxa loo macneeyaa siyaabo kala gedisan laakiin macnaheeda ugu muhiimsani waxa weeyi, in wax laga dhigo midaan la isticmaalin amaba la adeegsanin.

### 3:4

**NASB**

**“Ma suurtoowdo!”**

**NKJV, TEV**

**“Maaha suurto gal”**

**NRSV**

**“Taasi caqli gal ma noqon doonto”**

Waxay tilmaamaysaa in arrintaasi aanay marnaba suuto gal noqon doonin oonay dhici doonin. Ereyadan canaanta ah ee Bawlos adeegsaday waxa ay ka yaabiyeen kuwii rumaysadka aan lahayn (3:4,6,31; 6:2,15; 7:7,13; 9:14; 11:1; 1 Korintos 6:15; Galatiya 2:17; 3:21; 6:14). Waxayna ahayd oo muujinaysa sida uu u diidayo arrinta uu sheegay een marnaba suurto galka ahayn.

Siyaabaha Bawlos u diidayo su'aalihiisa ku salaysan kasoo horjeedka:

1. “Ma suurtoowdo!” aayadaha 4,6
2. “Ilaah runlow ha ahaado in kastoo nin waluba beenlow yahay,” aayadda 4.
3. “Sida dad baan u hadlayaa” aayadda 5.
4. “sida lanoo hafro oo ay qaar naga sheegaan sidii annagoo nidhaahna” aayadda 8.

▣ **“Ilaah runlow ha ahaado in kastoo nin waluba beenlow yahay”** waxa sii socda mawduucii, oo jawaabtiisuna waxa weeyi Ilaah waa runlow laakiin aadanuhu waa beenaalayaal! Waxay marjic ahaan loogu noqon karaa arrintani oo la xidhiidhaa Sabuurka 116:11 waxay la mid tahay wixii Ayuub ay ahayd inuu barto sida aan ka heli karno 32:2; 40:8.

Aadanaha dembigooda ayaa Bawlos waxa uu u adeegsanayaa *pas* (dhammaan, midwalba), waana sida aan ka arki karno aayadaha 4,9,12,19,20,23,24, laakiin Ilaahbaa ammaan leh, oo aadanaha wuxuu ugu deeqay badbaadada guud ahaaneed (3:22).

▣ **“sida qoran”** macno ahaan waxa weeyi “way qornayd oo waanay qornaan doontaa.” Waxay haddaba tilmaamasaa waxyiga amaba muujinta Ilaah ee ku sugan Qoraallada Quduuska ah (Matayos 5:17-19). Waxaana mid lagasoo xigtay Sabuurka 51:4 ee Septuagint (LXX).

**3:5-6** doodan uu Bawlos ku samaynayo aayadahan ayaa waxay tahay mid la xidhiidha doonista Ilaah ee gaarka ah iyo doorashadiisa uu ku doortay Israa'iil si dunida uu u gaadhsiiyo eraygiisa (Bilowgii 12:3; Baxniintii 19:5-6). Marka aan eegno Axdiga Hore dhexdiisa erayga ‘doorasho’ waxa uu la xidhiidhaa adeeg oo maaha ujeeddo kale oo faa'ido ah. Ilaah wuxuu iyaga la dhigtay axdi oo isagu wuxuu ahaa runlow, laakiin iyagu may ahayn (Nexemyaah 9). Haddaba, xaqiiqada ka danbaysa in Ilaah uu xukumay Israa'iliyiinta aan rumaysadka lahayn ayaa waxay caddayn u tahay Xaqnimadiisa.

Israa'iil ujeeddada laga lahaa waxay ahayd gaadhitaanka kuwa aan Yuhuudda ahayn, laakiinse way ku guul darraysteen arrintaas (3:24)! Ujeeddada Ilaah ee badbaadinta aadanaha ah (Bilowgii 3:15) may u guul darraysanin Israa'iliyiinta guul darradooda aawadeed. Haddaba, runsheegnimada Ilaah ee la xidhiidha axdigu waxa lagu sheegay Rooma 9-11, oo Israa'iliyiinta rumaysadka lihina waxay noqon doonaan kuwo Ilaah aqbal, laakiin kuwa aan lahayn rumaysadka waa la diidi doonaa. Canaanta Bawlos ee qoraalkiisa aayadaha 5-6 ayaa waxay yihiin kuwo la barbar dhigi karo aayadaha 7-8.

**3:5 “Haddii”** Waa shuruudaha koobaad ee ay u muuqato inuu qoraagu hadalkiisu ka dhigay mid runa. Aayadaha 3 iyo 7 ayaana ka tarjumaya arrintaas.

▣ **“haddii xaqnimo la'aanteenu muujiso xaqnimada Ilaah”** eragan ah la'aanteenu ayaa waxa uu yahay magac u yaal, waxaanu tilmaamayaa dhammaanba Yuhuudda. Eeg Mawduuca gaarka ah 1:17.



▣ **“maxaynu odhan doonnaa?”** Bawlos marwalba waxa uu adeegsanayaa weedhaha su’aalaha iyo canaantu ku jirto (3:5; 7:7; 8:31; 9:14,39). Waxaanu la hadlayaa kuwan isaga kasoo horjeeda (Malaakii 1:2,6,7,12,13; 2:14,17 [labo jeer]; 3:7,13,14).

▣  
NASB **“Sida dad baan u hadlayaa”**  
NKJV **“waxaan u hadlayaa sida dad”**  
NRSV **“sida dadkaan u hadlayaa”**  
TEV **“halkan waxaan ugu hadlayaa sida dadka”**  
JB **“markaan u hadlo sida dadka”**

Bawlos caqliga aadanaha ayuu u adeegsaday doodihiisa fiqi ahaaneed (6:17; 1 Korintos 9:8; Galatiya 3:15). Waxay halkan ugu muuqataa diidmada waxyaalaha ay soo jeedinayaan dadka lala hadlayo.

**3:7-8** waxa jira isu ekaansho muuqda oo u dhexeeya aayadaha 5 iyo 7. Waxa laga yaabaa in Bawlos uu (1) sii wado qaabka canaantu ku jirto (3:5,7; 7:7; 8:31; 9:14,30) amaba (2) uu muujinayo dhaleecaynta xaqnimadiisa ee ah wacdinta rumaysadka oo keliya (aayadda 8).

Bawlos ma aanu sharraxin amaba si buuxda ugammuu jawaabin waxa lagu xukumay iyo waxa lagu dacweeyey. Waxa markaas suurto gal ah in laga soo horjeeday isagoo sheegay in lagu badbaadi karo rumaysad keli ah, oo waxay ku doodayeen in arrintaasi ay keenayso iyadoon sharciga loo hoggaansamin iyo addeecis la’aan. Haddaba, Bawlos waxa uu rumaysnaa in nimcada xorta ahi ay keenaso noloshu Masiixiniimada, waana marka la helo ruuxa cusub ee lagu helayo noloshu dhabta ah! taasina maaha mid ku imanaysa in sharci loo hoggaansamo amaba la is beddelo balse waxay ka imanaysaa qalbiga cusub (Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:22-36).

**3:7** Waxay tilmaamasaa hadal shardi ku xidhan yahay (aayadda 3), taasi oo u muuqata arrin runa oo qoraagu ka hadlayo, isla markaasna ujeedadiisa uu uga socdo.

▣ **“ugu badatay”** eeg mawduuca gaarka ah ee 15:13.

▣ **“ammaantiisa”** Eeg fiirada gaarka ah ee 3:23

#### **AAAYADAHA 3:9-18**

<sup>9</sup>Waa maxay haddaba? Miyaynu dhaannaa iyaga? Maya, sinaba. Waayo, horaannu u dacweynay Yuhuudda iyo Gariigtaba inay kulligood dembi ku hoos jiraan. <sup>10</sup>Sida qoran, Mid xaq ahu ma jiro, midnaba; <sup>11</sup>Mid wax garanayaa ma jiro; Mid Ilaah doondoona ma jiro; <sup>12</sup>Dhammaantood gees bay u wada leexdeen, waxay wada noqdeen wax aan wax tar lahayn; Mid wanaag falaa ma jiro, midnaba; <sup>13</sup>Hungurigoodu waa xabaal furan; Carrabbadooda wax bay ku khiyaaneeyeen; Bushimahooda waxaa ku hoos jira sun jilbis; <sup>14</sup>Afkooda waxaa ka buuxa habaar iyo qadhaadh; <sup>15</sup>Cagahoodu waxay u dheereeyaan inay dhiig daadiyaan; <sup>16</sup>Jidalkooda waxaa yaal hoog iyo ba'; <sup>17</sup>Jidka nabaddana ma yaqaaniin; <sup>18</sup>Cabsida Ilaahna indhahooda ma hor taal.

**3:9 “miyaynu dhaannaa iyaga?”** waxa si cad halkan uga muuqata xaqiiqada muhiimka ah, taasi oo ah in dhammaanba aadanuhu yihiin kuwo u baahan Ilaah nimcadiisa (3:9,19,23; 11:32; Galatiya 3:22). Si kastaba ha ahaatee ma ogaan karno in arrintani ay gaar u tahay Yuhuudda (Bawlos iyo dadkiisa, TEV, RSV) amaba Masiixiyiinta (Bawlos iyo xertii la socday oon nimcada Ilaah gaar u ahayn). Waa run oo dadka Yuhuudda ahi waxay haysteen waxyaabo dadka kale ay dheeryihiin (aayadaha 1-2; 9:4-5), laakiin xitaa waxyaabahan ay dadka dheeryihiini waxay ka dhigayeen kuwo dushooda ay saarantahay masuuliyad dheeraad ahi! Maxaa yeelay dhammaanba aadanuhu way wada leexdeen oo waxay u baahan yihiin nimcada Ilaah.

Waxa la odhan karaa haddaba Roomaanka ayaa ahaa dadkii sida dhexdhexaadnimada ah uu ula hadlayay Bawlos marka la eego waraaqihiisa, maxaa yeelay waxay badankoodu ka hadlayaan dhibaatooyinkii iyo waxyaalaha hoos ahaaneed. Si kastaba ha ahaatee hinaasihii u dhexeeyay hogaamiyayaashii ahaa xerta Yuhuudda ah iyo kuwii hogaamiyayaasha kuwii aan Yuhuudda ahayn ee xerta ahaa. Waxa laga yaabaa arrintani inay ka muuqan karto cutubkan iyo cutubyada 9-11.

▣ **“dembi ku hoos jiraan.”** Bawlos wuxuu si gaar ahaane u sheegayaa ‘denbiga’ oo ah waxa ugu muhiimsan ee sababay leexashada aadanaha (6:16-23).

**3:10-18 “Sida qoran”** erayadani waxay sidoo kale kusoo dhex arooreen aayadda 4. Haddaba, odhaahyadan taxanaha ah waxa lagasoo xigtay Axdiga Hore, iyadoo la adeegsanayo tusaalaha jidhka aadahana si loo tusiyo leexashada aadanaha (1) aayadaha 10-12, Wacdiyaha 7:20 amaba Sabuurka 14:1-3; (2) aayadda 13, Sabuurka 5:9 amaba 140:3; (3) aayadda 14, Sabuurka 10:7; (4) aayadaha 15-17, Ishacyaah 59:7-8 iyo Maahmaahyadii 1:16, iyo (5) aayadda 18, Sabuurka 36:1. Waxaa haddaba layaab leh Bawlos oon adeegsanin Ishacyaah 53.

**AAAYADAHA 3:19-20**

**<sup>19</sup>Waannu og nahay in wax alla wixii sharcigu yidhaahdo, UU ku leeyahay kuwa sharciga ku hoos jira, in af kasta la xidho, oo dunida oo dhammu ay Ilaah ku hor gar darnaato. <sup>20</sup>Maxaa yeelay, shuqullada sharciga ninna xaq ku noqon maayo Ilaah hortiiis, waayo, sharciga ayaa lagu gartaa dembiga.**

**3:19 “Sharciga”** sida ka muuqata aayadahan waxa ay tilmaamayaan Axdiga Hore guud ahaan, maxaa yeelay waxa lagasoo xigtay aayadaha 10-18. Bawlos haddaba waxa uu magacaabayaa ‘sharciga’ sidii uu u magacaabay ‘denbiga’ oo kale, marka aan eegno aayadda 9 (6:16-23).

▣ **“kuwa sharciga ku hoos jira”** Waxay si gaara u tilmaamasaa Yuhuudda iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn ee Masiixiyiinta noqday, inkasta oo marar badan xigashooyinka Axdiga Hore ay tilmaamayso kuwa aan Yuhuudda ahayn.

▣

**NASB “in afkasta la xidho, oo dunida oo dhan Ilaah lagu hor xisaabiyo”**

**NKJV “in af kasta la xidho, oo dunida oo dhammu ay Ilaah ku hor gar darnaato”**

**NRSV “in afkasta la aammusiyo, oo dunida oo dhanna Ilaah la hor keeno”**

**TEV “in la joojiyo cudurdaarka aadanaha, oo dunidoo dhanna la horkeeno xukunka Ilaah”**

**JB “waxa looga jeedaa in la aammusiyo qofwalba, oo dunidoo dhanna la hor joojiyo xukunka Ilaah”**

Tani waa ujeeddada cutubyada 1:18-3:20 waxaana lagusoo koobay 3:23.

▣ **“in afkasta”** waxa jira dhowr weedhood oo ku jira aayadaha 19-20 isla markaasna tilmaamaya gebi ahaanba aadanaha.

1. “af kasta.” Aayadda 19.
2. “dunida oo dhan.” Aayadda 19.
3. “ninna.” aayadda 20.

**3:20 “Maxaa yeelay, shuqullada sharciga ninna xaq ku noqon maayo Ilaah hortiiis”** waxa ay tahay mid loogu noqon karo Sabuurka 143:2, laakiin waxa jirta weedh lagu daray, waana mid aad uga dhex muuqata injiilka Bawlos (Galatiya 2:16; 3:11). Maadaama oo Bawlos ahaa Farriisi, waxa uu si gaara u ogsoonaa in sharciga iyo nidaamyada diimuhu aanay qofka marnaba siinayn nabad gudahiisa uu ka dareemi karo.

▣

**NASB, NRSV “sharciga ayay ku timaaddaa garashada denbigu”**

**NKJV “sharciga ayaa lagu gartaa dembiga”**

**TEV “sharcigu wuxuu sameeyo ayaa dadka tusiya inay denbaabeen”**

**JB “sharciga wuxuu inoo sheegaa waxa ay tahay denbiilanimadu”**

Tani waxay ka mid tahay ujeeddooyinka laga lahaa Axdiga hore. Eeg mawduuca gaarka ah ee 13:9. Mana ahayn macnihiisu inuu aadanaha leexday u keeno badbaadada, laakiinse ujeeddadiisu waxay ahayd inuu muujiyo denbigu waxa uu yahay, iyo inuu aadanaha oo dhan u kexeeyo naxariista Ilaah (4:15; 5:13,20; 7L7; Galatiya 3:19-22, 23-29).

## SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagaso aragnay cutubkan.

1. Sidee rumaysad darrada Yuhuuddu u saamayn kartaa ballan qaadyada Ilaah? (3:3-4)
2. Ma jirtaa wax faa'ido ah oo Ilaah hortiiisa lagaga heli karo Yuhuudnimada? (3:1-8)
3. Maxay tahay muhiimadda ku jirta canaanta aayadaha 5-8?
4. Haddii xaqnimada nimcada ee rumaysadku ka gaar tahay camalka, sidee qofka loogu xisaabin karaa camalkiisa?
5. Qeex fikirka fiqi ahaaneed ee Calvin marka la eego gebi ahaanba leexashada (3:10-18)?
6. Maxay tahay ujeeddada Sharciga Muuse, amaba guud ahaan waa sidee (3:20; Galatiya 3:24-25)?
7. Maxay tahay sababta cutubyada 1-3 loogu sheegi waayay Shaydaanka iyo kaalinta uu kaga jiro lumitaanka aadanaha?

## FAHANKA MACNAHA GUUD AHAANEED EE ROOMA 3:21-31

- A. Rooma 3:21-31
1. Soo koobitaanka cutubyada 1:18-3:20
  2. Xoojinta amaba kordhinta 1:16-17
  3. Hordhaca cutubyada 4-8 (gaar ahaan 3:28)
- B. Soo koobitaanka caqiidada rumaysadka lagu helo xaqnimadu waxa ku dhaqmay:
1. Martin Luther “muhiimadda guud ahaaneed ee Kitaabka Quduuska ah”.
  2. John Calvin “ma jirto meelo ka mida Kitaabka Quduuska ah gebi ahaanba taasi oo sheegaysa xaqnimo ka wayn midda xaqnimada Ilaah inagu siiyay Masiixa”.
- C. Waa midda ay raacaan fiqi ahaan Masiixiyiinta evangelical ku. Haddaba, fahmitaanka aayadahani waxa ay ka dhigan tahay adigoo fahma Masiixiyadda. Waa injiilka oo lagusoo koobay labo baaragaraaf sida Yooxanaa 3:16 ay u tahay injiilka oo aayad lagusoo koobay oo kale. Waa qalbiga iyo nafta injiilka uu Bawlos ku wacdinayay dadka.
- Saddexda su'aalood ee furaha fasiritaanka u ahi waxa weeyi:
1. Erayga “shaci” muxuu yahay macnihiisu?
  2. Waa maxay macnaha weedhan ah “xaqnimada Ilaah”?
- D. Maxay yihiin macnaha erayada kala ah “rumaysad” iyo “rumaysasho”?

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 3:21-26

<sup>21</sup>laakiin haatan sharciga la'aantiis ayaa xaqnimadii Ilaah la muujiyey, waxaana u marag furay sharciga iyo nebiyadii, <sup>22</sup>waxaana weeyaan xaqnimada Ilaah ee lagu helo rumaysadka xagga Ciise Masiix oo u ah in alla inta rumaysata oo dhan, waayo, kala duwanaan ma leh. <sup>23</sup>Maxaa yeelay, dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen ammaanta Ilaah; <sup>24</sup>iyagoo hadiyad ahaan xaq lagaga dhigay nimcadiisa xagga madaxfurashada Ciise Masiix ku furtay, <sup>25</sup>kan Ilaah u soo bixiyey inuu dhiiggiisa kafaarogud ku noqdo xagga rumaysadka la rumaystay dhiiggiisa aawadiis, inuu xaqnimadiisa ku muujiyo dembidhaafka uu dembiyadii hore loo sameeyey ku dhaafay samirkii Ilaah; <sup>26</sup>waxaa weeye muujinta xaqnimadiisa ee haatan jooqta inuu isaga qudhiisu xaq ahaado iyo kan xaq ka dhiga kan Ciise rumaysan.

**3:21 “laakiin haatan”** Bawlos waxa uu halkan isku barbar dhigayaa Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub, taasi oo ka dhigan wakhtigii mucaaradnimada aadanaha iyo wakhtigan cusub oo ah ka xaqnimada. Waxa ay markaas tahay mid la siman “wakhtigan xaadirka ah” (aayadda 26; tan kale ee “laakiin haatan” 6:22; 7:6).

▣ **“haatan sharciga la'aantiis”** waxa adag in la kala saaro inuu Bawlos tilmaamayay Sharciga Muuse (NASB) amaba sharci (NRSV, TEV, NJB, NTV) guud ahaan cutubyadan. Haddaba, aayadahani waxay tilmaamayaan dooddu inay ku fulayso Sharciga Yuhuudda. Aadanuhu dhammaantood waxay khariibeen waxkasta oo wanaagsan, waxkasta oo hagi kara gudo iyo dibadba. Maadaama oon nahay haddaba aadanaha leexday dhibkeennu wuxuu yahay, inaan helno waxyaabo innaga ina haga marka gebi ahaanba laga reebo waxay nafteennu rabto, ee doonisteennu tahay (Bilowgii 3).

▣

**NASB**

**“xaqnimadii Ilaah”**

**NKJV, NRSV**

**“xaqnimadii Ilaah”**

**TEV**

**“sida Ilaah dadka ugala mid dhigo xaqnimadiisa”**

**NJB**

**“xaqnimada Ilaah ee badbaadada”**

Ma jirto qormo qeexitaan ka bixinaysa “xaqnimada.” Sidoo kalena ma tilmaamayso dabeecadda Ilaah, laakiinse waxay tilmaamaysaa sida Ilaah cafiska u bixiyo una aqbalada dadka denbiilayaasha ah. Haddaba, weedhahan waxa lagu dhex adeegsaday oo ay ka muuqanaysaa ujeeddada Rooma 1:16-17. Waxay si cad u muujinaysa rumaysadka Ciise Masiixa lagu qodbay isku tallaabta korkeeda (aayadaha 22,24-26).

Xaqiiqada eraygan xaqnimada (*dikaioisonē*) iyo macnayaasheedu, waxay yihiin kuwo aayadahan lagu dhex adeegsaday macnaheeda (1:17; 3:5,21,25,26; 4:3,5,6,9,11,13,22; 5:17,21; 6:13,16,18,19,20; 8:10; 9:28,30,31; 10:3,4,5,6,10,17). Haddaba, eraygan Giriigga ahi wuxuu ka yimid Axdiga Hore tusaale ka mida (*tsadak*) oo ah “heer” amaba “qiyaas qaadasho.” Wuxuu markaas eraygani ka tarjumayaa dabeecadda Ilaah ee sida bilaashka ah loogu siiyay aadanaha leexday iyadoo loo soo mariyay Ciise Masiix (2 Korintos 5:21). Waana iyaga oo qiraya aqbalayaan hadiyadda Ilaah siiyay, aadane faan badan, oo naftooda oo keliya ka fikira gaar ahaanna kuwa isu maleeya inay caqliga wanaagsan leeyihiin iyo kuwa raaca diimaha beenta ah. Eeg mawduuca gaarka ah ee 1:17.

▣ **“la muujiyey”** weedhahani waxay aad ula mid yihiin 1:17. Si kastaba ha ahaatee, falka halkan lagu isticmaalay ayaa waxa loo tarjumi karaa “waa la muujiyay oo si joogto ahna waa loo sii muujin doonaa.” Haddaba, Ilaah si cad ayuu isugu dhex muujiyay Axdiga Hore (cutubka 4), injiilka iyo Ciise Masiix.

▣ **“waxaana u marag furay sharciga iyo nebiyadii”** waxa lagu muujiyay saddexda qaybood ee Cibraaniyada oo kala ah (Sharciga, Nebiyada iyo Qoraallada). Labadan hore haddaba, waxa loo adeegsaday tilmaamista gebi ahaanba (3:9). Waxaanay si cad u tusinaysaa injiilku uu ka yimid Axdiga Hore (Luukos 24:27,44; Falimaha Rasuullada 10:43). Manuu ahayn wax mar danbe Ilaah ku fikiray, balse wuxuu ahaa qorshihiiisa weligiisba u dejisnaa (1:2).

**3:22 “ee lagu helo rumaysadka xagga Ciise Masiix”** fahan ahaan waxa weeyi “rumaysadka Ciise Masiix ayaa lagu helaa.” Waxa markale ay ka dhex muuqan kartaa Galatiya 2:16 iyo Filiboy 3:9, waxa kale qaab kaas mid la mida looga heli kraaa Rooma 3:6; Galatiya 2:16,20; 3:22. Waxa macneheedu markaas noqon karaa (1) rumaysadka amaba rumaysashada Ciise amaba (2) Ciise oo ah ujeeddada rumaysadkeenna. Qaab dhismeedkan naxwe ahaanee waxa iyana uu ka muuqan karaa Galatiya 2:16 oo ah kan ugu habboon.

Tani waxay haddaba tusinaysaa dhinaca ugu muhiimsan xaqnimada Ilaah. waa xaqnimada Masiixa oo ay ku dhisantahay qofka noloshiisa iyo hadiyadda bilaashka ah ee lagu bixiyay Masiixa aawadiis (4:5; 6:23), kaasoo ah mid lagu aqbali karo rumaysadka iyo isku hallaynta (Efesos 2:8-9) iyo inay ka muuqato nolol maalmeedka qofka (Efesos 2:10).

▣ **“in alla”** injiilka waxa loogu talo galay aadanaha oo dhan (aayadda 24; Ishacyaah 23:6; Yexesqeel 18:23; Yooxanaa 3:16-17; 4:42; 1 Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 4:14). Tani haddaba waa inay noqoto mid isu dheelli tiran marka la eego runta ku jirta Kitaabka Quduuska ah. Doorashada Ilaah waxay tahay mid aan lagu fahmin diinta Islaamka dhexdeeda iyo kuwo kale oo badan. Doorashada Axdiga Hore waxay ahayd mid ku dhisan adeeg iyo faa’ido. Ilaahna wuxuu ballan qaaday inuu cafiyo aadanaha xad gudbay ee leexday (Bilowgii 12:3; Baxniintii 19:5-6). Haddaba Ilaah waxa uu wax ku doortaa Masiixa rumaysadkiisa. Maxaa

yeelayIlaah hadiyo goorba wuxuu lahaa qorshe ku saabsan badbaadada (Yooxanaa 6:44,65). Efesos 1 iyo Rooma 9 ayaa waxay haddaba yihiin aayadaha ugu xooggan ee ka midka ah Kitaabka Quduuska isla markaasna fiqi ahaan ka hadlayay caqiidada ay sheegeen Augustine iyo Calvin.

Ilaah dadka rumaystayaasha ah uma doorto oo keliya badbaada (xaqnimada), laakiinse sidoo kale wuxuu ku nadiifiyay dib u noolaynta (Efesos 1:4; Kolosay 1:12). Waxay tani la xidhiidhi kartaa (1) heerka aan ka taaganahay Masiixa (2 Korintos 5:21) amaba (2) Doonista Ilaah ee ku waajahan dib usoo celinta xidhiidhka uu la leeyahay carruurtiisa (Rooma 8:28-29; Galatiya 4:19; Efesos 2:10).

Ilaah doonistiisu waxa weeyi inaanu dooranin kuwo ka mida carruurta Aadan oo kaliya balse dhammaantood! Waxayna ahayd yeedhmada dabeecadda Ilaah (1 Tesaloniika 5:23; 2 Tesaloniika 2:13). Eeg mawduuca gaarka ah ee doorashada 8:33.

▣ **“inta rumaysata”** Ciise wuxuu u dhintay dhammaanba aadanaha oo cid waloo oo isaga raacdana way badbaadi karaan. Aadanuhu iyaga ayaa ka masuula laakiinse xaqnimada Masiixu waxa ay tahay mid noloshooda ay ku dabaqi karaan (1:16; Yooxanaa 1:12; 3:16; 20:31; Rooma 10:9-13; 1 Yooxanaa 5:13). Haddaba Kitaabka Quduuska ahi wuxuu sheegayaa labada waxyaalood ee lagu heli karo xaqnimada waana: rumaysadka iyo towbad keenka (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:31). Aayadahani waxay markaas muujinayaan badbaada dunida sida lagu heli karo, laakiin dhammaan dadku ma noqon doonaan kuwo la wada badbaadiyo.

▣ **“waayo, kala duwanaan ma leh”** waxa jira jid keliya iyo Qof keliya kaasi oo aadanaha oo dhammi ku badbaadi karaan (Yooxanaa 10:1-2,7; 11:25; 14:6). Oo qof walba iyo mid kastaba waxa uu ku badbaadi karaa oo keliya Ciise Masiix (1:16; 4:11,16; 10:4,12; Galatiya 3:28; Kolosay 3:11).

### 3:23-26

NASB, NKJV

**“dhammaan way wada dembaabeen oo gaadhi waayeen”**

NRSV

**“dhammaan way wada denbaabeen oo ka fogaadeen”**

JB

**“way wada denbaabeen oo gaadhi waayeen”**

Waa iyadoo lasoo koobay 1:18-3:20. Qof walibana wuxuu u baahan yahay inuu ku badbaado Masiixa (3:9,19; 11:32; Galatiya 3:22; Ishacyaah 53:6). Waxa suurto gala in weedhahani ay tilmaamayaan leexashadii Aadan (5:12-21) iyo sidii uu u caasiyay Ilaah iyadoo farcankiisuna sii wadeen dembigaas.

Aayaddani waxay la xidhiidhaa fiqi ahaan aayadda 21 sidoo kale si aan toos ahayn ayay ula xidhiidhaa aayadda 24.

▣ **“ammaanta Ilaah”** Axdiga Hore dhexdiisa erayga inta badan ka dhex muuqdaa wuxuu yahay “ammaanta”(kbd) waxaana asal ahaanteed loo adeegsan jiray xagga ganacsiga gaar ahaan marka wax la miisaamayo, taasi oo macneheedu ka dhigan yahay “culayska.” Oo miisaanka culayska leh ayaa ahaa wax qiimo badan. Waxa kaloo eraygan loo adeegsaday tilmaamitaanka sharafta Ilaah (Baxniintii 19:16-18; 24:17; Ishacyaah 60:1-2). Isaga oo keliya ayaa wanaagsan oo sharafna mudan. Wuxuu dhowraa oo tix geliyaa aadanahan xad gudbay (Baxniintii 33:17-23; Ishacyaah 6:5). Ilaahna waxa lagu aqoonsan karaa oo keliya Masiixa (Yeremyaah 1:14; Matayos 17:2; Cibraaniyada 1:3; Yacquub 2:1).

Erayga “ammaan” waxa laga yaabaa inuu: (1) la siinnaa karo “xaqnimada Ilaah” (aayadda 21); (2) waxa kaloo laga yaabaa inay tilmaamayso raalli ahaanshaha Ilaah (Yooxanaa 12:43); (3) Waxa iyana laga yaabaa inay tilmaamayso ekaanshaha Ilaah ee laga sameeyay aadanaha (Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6), iyagoo markii danbana Ilaah caasiyay (Bilowgii 3:1-22), laakiinse haddana dib loogu badbaadiyay Masiixa (2 Korintos 3:18). Haddaba, eraygan waxa loo adeegsaday Axdiga Cusub dhexdiisa markuu Ilaah la joogay dadkiisa (Baxniintii 16:7,10; Laawiyyiintii 9:23; Tirintii 14:10), taasi oo illaa hadda ujeeddada ah.

#### **MAWDUUC GAAR AH: AMMAANTA**

Fikradda Kitaabka Quduuska ee “ammaantu” waa mid ay adag tahay in la qeexo. Ammaanta Masiixiyiintu waxa weeyi fahanka injiilka iyo inay Ilaah ammaanaan, balse maaha nafhooda (1:29-31; Yeremyaah 9:23-24).

Axdiga Hore dhexdiisa erayada caanka ah ee loo adeegsado “ammaanta”(kbd) waxay ahaayeen kuwo ganacsi oo la xidhiidhi jiray miisaanka. Oo miisaanka culayska leh ayaa ahaa wax qiimo badan. Waxa kaloo

eraygan loo adeegsaday tilmaamitaanka sharafta Ilaah (Baxniintii 19:16-18; 24:17; Ishacyaah 60:1-2). Isaga oo keliya ayaa wanaagsan oo sharafna mudan. Wuxuu dhowraa oo tix geliyaa aadanahan xad gudbay (Baxniintii 33:17-23; Ishacyaah 6:5). Ilaahna waxa lagu aqoonsan karaa oo keliya Masiixa (Yeremyaah 1:14; Matayos 17:2; Cibraaniyada 1:3; Yacquub 2:1).

Erayga “ammaan” waxa laga yaabaa inuu: (1) la siinnaa karo “xaqnimada Ilaah” (aayadda 21); (2) waxa kaloo laga yaabaa inay tilmaamayso raalli ahaanshaha Ilaah (Yooxanaa 12:43); (3) Waxa iyana laga yaabaa inay tilmaamayso ekaanshaha Ilaah ee laga sameeyay aadanaha (Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6), iyadoo markii danbana Ilaah caasiyay (Bilowgii 3:1-22), laakiinse haddana dib loogu badbaadiyay Masiixa (2 Korintos 3:18). Haddaba, eraygan waxa loo adeegsaday Axidiga Cusub dhexdiisa markuu Ilaah la joogay dadkiisa (Baxniintii 16:7,10; Laawiyiintii 9:23; Tirintii 14:10).

**3:24 “iyagoo hadiyad ahaan xaq lagaga dhigay nimcadiisa”** waa meesha uu ka bilaabmayo Injiilku, waana nimcada Ilaaha bixiya xaqnimada (5:15-17; 6:23). Erayga Giriigga ah ee “xaqnimo” (*dikaioō*). Ilaah haddaba hadiyo goorba waxa uu leeyahay qorshe(*diakaiosunē*) (Yooxanaa 6:44,65).

Aayadaha 24-25 waxa jira saddex tusaale oo loo adeegsanayo badbaada; (1) “xaq lagaga dhigay” taasi oo macneheedu yahay “denbi laga kor qaaday”; (2) “madax furasho” taasi oo asal ahaan loo isticmaali jiray addoonka marka dib loo soo xoreeyo; iyo (3) “kafaaro gudka” waxa loo adeegsaday xoolihii ammaba dhiigii loo daadin jiray kafaaro gud ahaanta (Laawiyiintii 16; Cibraaniyada 9:5).

#### **MAWDUUC GAAR AH: CADAYMAHA AXDIGA CUSUB EE BADBAADADA QOFKA**

Asaaskeedu waxa weeyi

1. Dabecadda Aabaha (Yooxanaa 3:16), shaqada Wiilka (2 Korintos 5:21), iyo shaqada Ruuxa (Rooma 8:14-16) kumanay imanin wanaagga iyo shaqada aadanaha amaba addeecitaanka.
2. Waa hadiyad (Rooma 3:24; 6:23; Efesos 2:5,8-9).
3. Waa nololsha Cusub, aragti cusub (Yacquub iyo 1 Yooxanaa).
4. Waa ogaansho (injiilka), xidhiidh la yeelasho (rumaysad iyo isku hallaynta Masiixa), iyo qaab nololeed cusub (ku dayashada Masiixa) waa saddexdan dhammaantood, oo midini keligii taagnaan

▣ **“hadiyad”** eraygan Bawlos marar badan ayuu adeegsanayaa:

1. *dōrean*, FALKAABE, “deeqitaan”
2. *dōrea*, MAGAC, “hadiyad deeq ah”
3. *dōron*, MAGAC, “hadiyad” (Efesos 2:8)
4. *charisma*, MAGAC, “amaah la’aan” (1:11; 5:15, 16; 6:23; 11:29; 12:6).
5. *charisma*, FAL, “u bixiyaya” (8:32).
6. *charis*, MAGAC, “ugu deeqay” (4:4,16; 11:5,6; Efesos 2:5,8).

▣ **“xagga madaxfurashada Ciise Masiix”** badbaadadeenna waxa keenay Ciise Masiix isaga oo dhintay isla markaana ka sara kacay dhimashada. Haddaba kitaabiyani ujeedadu mahaa in muhiimadda la saara sida uu madax furashada u bixiyay iyo qiimeheeda (Augustine), laakiin waxa weeyi xaqiiqada aadanaha lagaga daahiriyeey denbiga (Yooxanaa 1:29,36; 2 Korintos 5:21; 1 Butros 1:19).

Waxay aayaddani tusinaysaa qiimihii ku kacay waxa lagaga hadlyo Bilowgii 3:15. Ciise wuxuu korqaaday habaarkii (Bilowgii 3:13) waanu dhintay (2 Korintos 5:21) isaga oo u dhintay beddelka aadanaha. Haddaba, badbaadadu waxyay noqon kartaa mid la helo balse qiimeheedu aanu jabnayn.

#### **MAWDUUC GAAR AH: MADAX FURASHADA**

##### **I. AXDIGA HORE**

A. Waxa jira asal ahaan labo eray oo Cibraani ah isla markaasna arrintan tilmaamaya.

1. *Gaal*, taasoo macneheedu yahay “sii dayn” lagu siidaayo qiimaha la bixiyay. Waxaa badanaa loo adeegsan jiray waxyaabaha la isku bedesho sida xayawaanka dhulka iwm (Laawiyiintii 25,27),

amaba qaraabooyinka (Ruud 4:15; Ishacyaah 29:22) waxaana fiqi ahaan loo tilmaamaa furashadii Ilaah dadka Israa'iil kagasoo furtay gumaysigii Israa'iil (Baxniintii 6:6; 13:13; Sabuurka 74:2; 77:15; Yeremyaah 31:11). Wuxuuna ahaa “soo furtaha” (Ayuub 19:25; Sabuurka 19:14; 78:35; Maahmaahyadii 23:1; Ishacyaah 41:14; 43:14; 44:6,24; 47:4; 48:17; 49:7,26; 54:5,8; 59:20; 60:16; 63:16; Yeremyaah 50:34).

2. *Padah*, wuxuu yahay macneheedu “badbaadin”
  - a. Madax furashad ilmaha ugu horreeya, Baxniintii 13:13,14 iyo Tirintii 18:15-17.
  - b. Farqiga u dhexeeya madax furashada jidhka iyo tan ruuxiga ah Sabuutka 49:7,8,15.
  - c. Ilaah wuxuu Israa'iil ka badbaadin doonaa dembigooda Sabuurka 130:7-8

B. Fikirka fiqi ahaaneed wuxuu koobsanayaa saddex waxyaalood oo isla xidhiidha

1. Waxa jirta baahi
  - a. Jidh ahaaneed
  - b. Bulsho ahaaneed
  - c. Ruux ahaaneed (Sabuurka 130:8)
2. Qiimaha waa in lagu bixiyo xorriyadda
  - a. ummadda Israa'iil (Sharciga Kunoqoshadiisa 7:8)
  - b. Ta shakhsi ahaaneed (Ayuub 19:25-27; 33:28).
3. Qofku waa inuu muujiyo jawaab celin. Waxayna u dhowdahay *gaal* amaba (*go'el*).
4. Ilaah waxa uu naftiisa ku tilmaamayaa erayada qoysnimo
  - a. Aabbe
  - b. Madaxa qoyska
  - c. Xigaal

Madax furashada waxa sameeyay oo dammaanad qaaday Ilaah; qiimihiina waa la dhiibay; oo madax furashadiina waa lagu guuleystay!

II. AXDIGA CUSUB

A. Waxa jira erayo loo adeegsaday fikirka fiqi ahaaneed

1. *Agorazō* (1 Korintos 6:20; 7:23; 2 Butros 2:1; Muujintii 5:9; 14:34). Waa eray ganacsi ahaaneed oo tilmaamaya qiimaha wax lagu bixiyay. Waxaan nahay dad lagu iibsaday dhiig oon nafhooda xakamayn karin. Waxaa ina leh Ciise Masiix.
2. *Exagorazō* (Galatiya 3:13; 4:5; Efesos 5:16; Kolosay 4:5). Sidoo kale waxa loo adeegsaday ganacsiga, waxaanay ka tarjumaysaa beddelkii Ciise u dhintay innaga aawgeen. Ciise ka hor waxa lasoo dejiyay (Sharciga Muuse), hase ahaatee aadanaha leexday way dhammays tiri kari waayeen. Haddaba waxa uu ka korqaaday habaarkaas (Sharciga Kunoqoshadiisa 21:23) dhammaanteeba! Ciise Masiix ayaa Ilaah caddaaladdiisa ku oofiyay oo inagana inoogu fidiyay cafis iyo aqbalitaan!
3. *Luō* “samato bixin”
  - a. Lutron, “qiimihii la dhiibay” (Matayos 20:28; Markos 10:45). Waxa weeyi ereyo culays badan oo Ciise ku hadlay, kuwaasi oo khuseeya ujeeddada uu u yimid, iyo inuu yahay badbaadiyaha dunida ee bixinaya qaanta denbiga, isagoon isagu lahayn wax iina (Yooxanaa 1:29).
  - b. *Lutroō*, “siidayn ama samata bixin”
    - 1) inuu samata bixiyo Israa'iil, Luukos 24:21
    - 2) inuu naftiisa siiyo sidii uu ku samata bixin lahaa una daahirin lahaa dadka, Tiitos 2:14
    - 3) inuu ahaado bilaa denbi u dhinta denbiyada, 1 Butros 1:18-19.
  - c. *lutrōsis*, “madax furasho”
    - 1) Sekaryaah wax sii sheegistiisii ku saabsanay Ciise, Luukos 1:68.
    - 2) Anna oo Ilaah ammaanay markuu arkay Masiixa, Luukos 2:38.
    - 3) Ciise waxa loo bixiyay kafaaro gud ahaan Cibraaniyada 9:12.
4. *Aplytrōsis*
  - a. Madax furashada imaatinka labaad (Falimaha Rasuullada 3:19-21).
    - 1) Luukos 21:28
    - 2) Rooma 8:23
    - 3) Efesos 1:14; 4:30
    - 4) Cibraaniyada 9:15

b. Madax furashada dhimashada Ciise Masiix

- 1) Rooma 3:24
- 2) 1 Korintos 1:30
- 3) Efesos 1:7
- 4) Kolosay 1:14

5. *Antilytron* (1 Timoteyos 2:6). Waa aayado muhiim ah (sida Tiitos 2:14), waxaanay isku xidhayaan dhimashada Ciise Masiix ee beddelka noqotay, waana ka u dhintay “dhammaan” (Yooxanaa 1:29; 3:16-17; 4:42; 1 Timoteyos 2:4; 4:10; Tiitos 2:11; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 2:2; 4:14).

B. Fahanka amaba fikirka Fiqi ahaaneedee Axdiga Cusub dhexdiisa

1. Aadanaha waxa addoonsaday denbiga (Yooxanaa 8:34; Rooma 3:10-18; 6:23).
2. Denbiga aadanaha waxa lagu muujiyay Axdiga Hore Sharciga Muuse (Galatiya 3) iyo wacdintii Ciise ee buurta dusheeda (Matayos 5-7). Aadanaha waxa lagu xukumay dhimasho (Kolosay 2:14).
3. Ciise waa wanka Ilaah ee bilaa denbiga ah, ee innaga aawadeen u dhintay (Yooxanaa 1:29; 2 Korintos 5:21). Waxa la inaga iibsaday denbiga markaa waa inaan u adeegno Ilaah (Rooma 6).
4. Ilaah iyo Masiixu waa xigaal isu dhow oo innaga ina jecel.
5. Madax furashadu maaha in qiimo la siiyay Shaydaanka, laakiin waa dib ula heshiinta Ilaah oo aan ku helay jacaylka Ilaah inagu siiyay Masiixa.
6. Waxa jirta madax furashada mustaqbalka (Rooma 8:23; Efesos 1:14; 4:30), taasi oo ah marka dhimashada la inaga sara kiciyo.

**3:25**

<b>NASB</b>	<b>“kan Ilaah u soo bixiyey”</b>
<b>NKJV</b>	<b>“kan Ilaah usoo u soo diray”</b>
<b>NRSV</b>	<b>“kan Ilaah u keenay”</b>
<b>TEV</b>	<b>“kan Ilaah ka dhigay”</b>
<b>JB</b>	<b>“kan Ilaah u doortay”</b>

Macneheedu waxa weeyi Ilaah laftiisa ayaa ujeeddada qalbigiisa ku jirta ku muujiyay dhimashada Masiixa (Efesos 1:9). Qorshaha Ilaah ee cafiska waxa ku jirtay inuu Masiixu kafaaro gudka denbiga noqda (Ishacyaah 53:10; Muujintii 13:8).

Eraygan Giriigga ah ee *endeiknumai* (*endeixis*, 3:25.26) dhowr jeer ayaa lagu dhex adeegsaday Rooma (2:15; 9:17,23; LXX Baxniintii 9:16). Macneheedu waxa weeyi soo bandhigista amaba muujinta in Ilaah doonay, inay aadanuhu fahmaan ujeeddadiisa iyo xaqnimadiisa.

1. Wax ku saabsan dabeecadda Ilaah
2. Wax ku saabsan shaqada Masiixa
3. Wax ku saabsan baahida aaduhu u qabaan Ilaah
4. Wax ku saabsan ujeeddada kafaaro gudka.

Ilaah waxa uu inaga inaga rabaa inaan fahanno isagal aayadahani haddaba waxay muhiim u yihiin fahanka waxa ay tahay Masiixiyaddu. Waxa jira aayadaha qaar siyaabo kale looga fahmi karo Axdiga Cusub dhexdiisa laakiin ujeeddada muhiimka ahi waa mid cad oon qarsoonayn.



<b>NASB</b>	<b>“inuu dhiiggiisa kafaarogud ku noqdo”</b>
<b>NKJV</b>	<b>“inuu dhiiggiisa kafaarogud ka dhigo”</b>
<b>NRSV</b>	<b>“isagoo kafaaro gud ka dhigaya dhiiggiisa”</b>
<b>TEV</b>	<b>“si uu dhiiggiisa uga dhigo ka lagu cafinayo denbiyada dadka”</b>
<b>JB</b>	<b>“inuu naftiisa kafaaro gud ahaan ugu bixiyo denbiyada dadka”</b>

Dhinaca Giriigta iyo Roomaanka ayaa erayadani waxay ahaayeen kuwo xambaarsan fikirka dib u heshiisiinta iyo xidhiidh la yeelashada Ilaah inay u baahan tahay qiime lagu bixiyo. Laakiin sidan loogama dareemi karo kitaabka Septagint ga. Waxa ay ahayd mid lagu dhex adeegsaday Septuagint iyo Cibraaniyada 9:5 waxaana lagu tarjumaa “kursiga raxmadda” oo ahayd meesha quduuska ah ee lagu bixin jiray kafaaro gudka dhiigga. Waxay ahayd meesha ummadu ku bixiso kafaaro gudka dhiigga ah (Laawiyiintii 16).

Ilaah muu beddelin fikirkiisa ku saabsanaa denbiga aadanaha, balse marwalba fikirkiisa ku waajahan denbiilayaasha cafiskoodu wuxuu ahaa mid sugan oo qorshaysan. Faahfaahin dheeraada waxa laga heli karaa



buugga uu qoray James Stewart lagu magacaabo *A Man in Christ* pp. 214-224. Ujeeddada haddaba tan lagu dhammays tirayo ayaa ahayd ujeeddada Ilaah ee ahayd shaqadan Masiixa.

Dhiiggiisa ayaa waxa uu yahay beddelka ah kafaaro gudka ka imanaya wanka Ilaah een lahayn wax denbiya (Yooxanaa 1:29). Si fikiraddan si fiican aad ugu fahanto Laawiyiinta 1-7 ayaa laga heli karaa, iyo sidoo kale Maalinta Waaq dhaca ee cutubka 16. Dhiigguna waxa uu tilmaamayaa naf aan denbi lahayn oo u dhimatay mid denbiile ah (Ishacyaah 52:13-53:12).

▣ **“xagga rumaysadka”** markale (1:17; 3:22,25,26,27,28,30), ayaa ah faa’idada shakhsi ahaaneed ee lagu heli karo Masiixa oo denbiyadeenna u dhintay.

Ereyadan waxa si maldahan loogu sheegay qoraal gacmeedyadii A ee qarnigii shanaad (sidoo kale qoraalka Giriigga waxa ku adeegsaday Chrysostom) iyo qarnigii labo iyo tobnaad MS (2127). Waxa kaloo lagu daray dhammaanba qoraaladii hore Giriigga. Qaarkood waxay wataan shaqalka la socda “rumaysad” halka qaarkoodna aanay ka lahayn, hase ahaatee middani marnaba wax saamayn ah kuma yeelanayso macnaha. UBS<sup>3</sup> gu wuxuu ku qiimaynayaa sida ay ugu jirto B (waxaana la socda xoogaa shaki ah).

▣ **“inuu xaqnimadiisa ku muujiyo”** Ilaah waa runlow marka la eego dabeecaddiisa iyo eraygiisa (Malaakii 3:6). Axdiga Hore dhexdiisa waa in denbiga iyo nafuhu dhintaan (Yexesqeel 18:4,20). Ilaah waxa uu sheegay inaanu dembiilaha sii dayn doonin (Baxniintii 23:7). Hase ahaatee jacaylka Ilaah uu u fidiyay aadanaha xadgudbay ayaa ah mid aad u wayn, oo waxay doonistiisu ahayd dhammayst tirka Sharciga iyo in Masiixu beddelka denbiyada aadanaha u dhinto. Jacaylka iyo xaqnimaduna waxay isugu yimaadaan Ciise Masiix (aayadda 26).

▣

**NASB, NKJV,**

**NRSV**

**TEV**

**NJB**

**“dembidhaafka uu dembiyadii hore loo sameeyey ku dhaafay”**

**“samirkiisa wuxuu ku oga denbiyada dadka”**

**“denbiyadii hore waa la dhaafay”**

Erayga “dhaafay” ayaa waxa uu yahay *parensis* oo halkan oo keliya ayaa lagaga isticmaalay Axdiga Cusub dhexdiisa, lagumana adeegsan Septuagint ga. Hogaamiyayaashii Giriigga ayaa iyagu waxay raaceen fahananka macne ahaaneed “cafiska daynta” (Moulton iyo Milligan, p.493). si kastaba ha haatee, *pariēmi* oo ah qaabka fal ahaaneed ayaa waxa macnihiisu yahay “dhaafitaan amaba siidayn” (Luukos 11:42).

Haddaba su’aashu waxay tahay, Ilaah miyuu cafinayaa denbiyada wakhtiyadii hore oo ku dhaafayaa shaqada Masiixa? Natijadu haddaba waa isku mid. Waayo denbiga aadanaha ee wakhtigii hore, kan jooga iyo ka mustaqbalkaba waxa lagu cafiyay dhimashada Masiixa.

Waxyaabahan hore ee Ilaah sameeyay ayaa waxay ahaayeen kuwo kuwo Ilaah ugu talo galay shaqada Masiixa (Falimaha Rasuullada 17:30; Rooma 4:15; 5:13) iyo sidoo kale wakhti xaadirka (aayadda 26).

**3:26** erayga “xaqnimada” ee aayadda 25 wuxuu la xidhiidhaa erayga “caddaalad” amaba xaq ee aayadda 26. Haddaba Ilaah waxa uu rabaa oo doonistiisu tahay inuu dabeecaddiisa ka muujiyo Masiixiyiinta, iyadoo ka muuqanaysa rumaysadkooda ay ka qabaan Masiixa. Ciise ayaa ah xaqnimadeenna (2 Korintos 5:21) laakiinse Masiixiyiintu waa inay ahaadaan kuwo dhaqankooda ay ka muuqato Xaqnimadiisu (Rooma 8:29). Eeg Mawduuca gaarka ah 1:17.

#### **AAAYADAHA 3:27-30**

**<sup>27</sup>Haddaba faankii meeh? Waa reebban yahay. Sharci caynkee ah buu ku hadhay? Ma xagga shuqulladaa? Maya; laakiinse wuxuu ku hadhay sharciga rumaysadka. <sup>28</sup>Sidaas daraaddeed waxaannu ku tirinnaa in nin xaq ku noqdo rumaysadka ee uusan xaq ku noqon shuqullada sharciga. <sup>29</sup>Ama Ilaah ma Ilaaha Yuhuudda oo keliya baa? Miyuusan ahayn kan quruumaha kalena? Haah, waa yahay kan quruumaha kalena, <sup>30</sup>hadday tahay in Ilaah mid keliya yahay oo uu kuwa gudan xaq kaga dhigi doono rumaysadka, kuwa buuryoqabka ahna rumaysadka.**

**3:27 “Haddaba faankii meeh?”** waxa laga yaabaa inay tilmaamayso faankii dadka Yuhuudda ah (2:17,23). Aadanaha leexday ha ahaadaan Yuhuud iyo kuwo kaleba ee, maaha kuwo caawin kara nafhooda (Efesos 2:8-9). Eeg mawduuca gaarka ah ee Faanka 2:7.

▣ **“Waa reebban yahay”** eraygan (*ek*[bannaan] oo lagu daray *keliō*[xidh]) ayaa waxa lagu dhex adeegsaday halkan oo keliya iyo Galatiya 4:17. Macno ahaan waxa weeyi markaas “in xidho amaba la qufulo”

▣ **“sharciga rumaysadka”** Axdiga Cusub ee Ilaah isla markaasna uu sheegayo Yeremyaah 31:31-34, maaha mid ku tiirsan shaqo, laakiin wuxuu ku tiirsan yahay rumaysad amaba rumaysasho (*pistis*) ka timid dabeecaddiisa iyo ballan qaadkiisa. Haddaba, Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba ujeeddadu waxay ahayd beddelitaanka iyo soo celinta aadanaha leexday. Axdiga Hore wuxuu ku tiirsanaa sharciga; halka Axdiga Cusubina uu kaga tiirsan yahay qalbiga (Yexesqeel 36:26-27). Ujeeddaduna waxa weeyi isku mid!

**3:28 “Sidaas daraaddeed waxaannu ku tirinnaa in nin xaq ku noqdo rumaysadka ee uusan xaq ku noqon shuqullada sharciga”** waa soo koobitaanka 3:21-26 iyo kormarista cutubyada 4-8(2 Timoteyos 1:9; Tiitos 3:5). Badbaadadu waa deeq ku timaadda rumaysadka Masiixa iyo shaqadii uu dhammays tiray (3:24; 5:15,17; 6:23; Efesos 2:8-9). Waxa kaloo loo baahan yahay nolosha ay ku jirto addeecitaanka, adeegga iyo caabuditaanku (Galatiya 5:6; Efesos 2:10, Filiboy 2:12).

**3:29** Ujeedada Ilaah marwalbay waxay ahayd inuu cafiyo dhammaanba aadanaha uu ka abuuray ekaanshihiisa (Bilowgii 1:26; 5:1; 9:6). Ballan qaadka Bilowgii 3:15 wuxuu u ahaaday dhammaantood. Sidoo kalena wuxuu doortay Ibraahim halkii uu dunida oo dhan ka dooran lahaa (Bilowgii 12:31; Baxniintii 19:4-6; Yooxanaa 3:16).

Aayaddani, sida aayadda 3:9, waxa laga yaabaa inay ku saabsantahay hoggaanka Yuhuuddii rumaysadka lahaa ee Rooma ka tegay iyaga oo raacay Nero amarradiisii, iyo hoggaankii kuwii aan Yuhuudda ahayn ee iyaga bedelay. Cutubyada 9-11 ayaa iyaguna laga yaabaa inay ka hadlayaan isla xaaladdan.

**3:30**

**NASB** “hadday tahay in Ilaah mid keliya”  
**NKJV** “hadday sidaas tahay Ilaah keliyaa jira”  
**NRSV** “Ilaah waa mid keliya”  
**JB** “waxa jira hal Ilaah oo keliya”

Hadalka shuruuddu ku jirto waxay tahay midda qoraaga ku caddaynayo inuu hadalkiisu run yahay. Haddaba Ilaah waa keli oo ma jirto cid la mid ahi (Baxniintii 8:10; 9:14; Sharciga Kunoqoshadiisa 4:35,39; 6:4; 1 Samuu’eel 2:2; 2 Samuu’eel 7:22; 22:32; 1 Boqorrada 8:23; Sabuurka 86:8,10; Ishacyaah 43:11; 44:6,8; 45:6-7,14,18,21-22; 46:5,9; Yeremyaah 2:11; 5:7; 10:6; 16:20), haddaba Isagu waa Ilaaha dadka oo dhan.

▣ **“oo uu kuwa gudan xaq kaga dhigi doono rumaysadka”** erayga “xaq kaga dhigis” wuxuu asal ahaan la xidhiidhaa “xaqnimada” eeg mawduuca gaarka ah ee 1:17. Waxa jirta jid keliya oo Ilaah lagu heli karo (Rooma 9:30-32). Labo wax oo lagu helo badbaadaba waana rumaysadka iyo towbad keenka (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21). Waana mid ku rumoobaysa Yuhuudda iyo Giriigta labadaba.

#### **AAAYADAHA 3:31**

**<sup>31</sup>De miyaannu haddaba sharciga ku burinnaa rumaysadka? Yaanay noqon! Laakiin sharciga waannu taagnaa.**

**3:31**

**NASB** “De miyaannu haddaba sharciga ku burinnaa rumaysadka”  
**NKJV** “miyaynu sharciga ku baabiinaa rumaysadka”  
**NRSV** “miyaynu sharciga ku fogaynaa rumaysadkan”  
**TEV** “tan macneheedu ma inaan sharciga rumayska ku burinaa”  
**JB** “ujeedadu ma in rumaysadku sharciga burinayaa”

Axdiga Cusubi wuxuu Axdiga Hore u fasirayaa labo siyaabood:

1. Waa waxyiga Ilaah (Matayos 5:17-19; Rooma 7:12,14,16).
2. Duug ayaa laga dhigay (Cibraaniyada 8:13).

Bawlos wuxuu leeyahay waxa la ina hoos hayay sharciga rumaysadka kahor (Galatiya 3:23) iyo edbiyeheenna (Galatiya 3:24), laakiinse inama siinayo nolosha weligeed ah (Galatiya 2:16,19; 3:19). Waxa weeyi inkaarta aadanaha (Galatiya 3:13; Kolosay 2:14). Sharciga Muuse wuxuu u shaqeyay waxyi ahaan iyo tijaabo labadaba.

Waxaan la hubin waxa kuwan ka mida ee Bawlos dhab ahaan ugala jeeday “sharciga”:

1. Nidaam xaq ahaaneed oo Yuhuuddu ku shaqayso.
2. Heer badbaadada ah oo dadka aan Yuhuudda ahayni u maraan badbaadada Masiixa.

3. Heer ay aadanaha oo dhammi ka gaabiyeen oo ku dhaceen (Rooma 1:18-3:20; 7:7-25; Galatiya 3:1-29).

▣ “sharciga waannu taagnaa” iyadoo laga iftiin qaadan karo aayaddii hore, maxay tahay waxa ereyadan loogala jeedo? Waxa la odhan karaa:

1. Sharcigu maaha jidka badbaadada laakiin jiheeye wanaagsan.
2. Waxa uu ka markhaati kacay caqiidada “xaqnimada rumaysadka,” 3:21; 4:3 (Bilowgii 15:6; Sabuurka 32:1-2, 10-11).
3. Itaal darrada sharciga (leexashada aadanaha, Rooma 7; Galatiya 3) waxa lagaga kaaftoomay dhimashada Masiixa 8:3-4.
4. Ujeeddada waxyigu waxa weeyi dib u hagaajinta ekaanshaha Ilaah ee laga sameeyay aadanaha.

Sharcigu waxa weeyi kan muujin kara xaqnimada ku jirta rumaysadka. Eeg mawduuca gaarka ah ee 13:9.

Sharcigu muu keenin xaqnimada, laakiinse waxa keentay hadiyadda Ilaah ee ku dhisan rumaysadka. Waxaana taasi lagu heli karaa nimcada Ilaah iyo rumaysashada Masiixa oo ah kan denbiyadeenna beddelkooda u dhintay. Eeg mawduuca gaarka ah ee “aasaasitaanka” 5:2.

## SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Kormaris ku samee Rooma 3:21-31 adigoo adeegsanaya ereyadaada kuu gaarka ah
2. Maxay tahay sababta Ilaah u dhaafay denbiyada aadanaha ee wakhtiyadii tegay (aayadda 25)
3. Sidee rumaystaha Axdiga Hore looga badbaadiyay denbiga (3:25)?
4. Sidee rumaysadka Ciise Masiix u waafaqayaa Sharciga (3:31)?

# ROOMA 4

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ibraahim waa Masaal	Ibraahim wuxuu xaq ku noqday rumaysad	Ibraahim wuxuu xaq ku noqday rumaysad	Ibraahim waa masaal	Ibraahim wuxuu xaq ku noqday rumaysad
4:1-12	4:1-4  Daa'uudna sidan oo kale ayuu ahaa  4:5-8  Xaqnimuu helay gudniinka hortiiis  4:9-12	4:1-8	4:1-8	4:1-8  Xaqnimuu helay gudniinka hortiiis  4:9-12
Ballankii waxaa lagu helay rumaysadka	Ballanka waxa damaanaq qaaday rumaysadka	Farcanka runta ah ee Ibraahim	Ballankii Ilaah waa la helay	Xaqnimada kumuu helin addeecitaanka sharciga
4:13-25	4:13-25	4:13-15  4:16-25	4:13-15  4:16-25	4:13-17  Rumaysadkii ibraahim wuxuu tusaale u yahay rumaysadka Masiixiyadda

## AKHRINTA TAXANAHA SEDDEXAAD

### IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA EE BAARAGARAAFYADA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Wax baritii yaabka lahayed Bawlos sida ku xusan 3. 21:31 waxay carabka ku adkaynaysaa in binu aadankii denbaabay ee gaadhi waayay ammaanta Ilaah xaq lagaga dhigay hadiyada Ilaah ee bilaashka ah, taasi oo gabi ahaanba ka baxsan Sharcigii Muuse. Bawlos hadda waxaa uu isku dayayaa sidii uu u caddayn lahaa inanay tani ahayn fikrad cusub oo ka soo unkamay fikrado hore. ( 3:21) isagoo tusaale uga soo qaadanaya Axdiga cusub Ibraahim iyo Daaudba. (aayadaha 6-8).
- B. Rooma 4 waxay soo bandhigaysaa laga soo qaatay Sharciga muuse, Bilowgii, Sharciga kunoqoshadiisa kuwaasi oo ku saabsan rumaysadka lagu badbaaday. Tani waxay si kooban ugu xusantahay 3:21-31. marka la eego xigashada qoraaladii Muuse dadka Yuhuuda ah ayaa miisaan diimeed ku leh, khaasatan xidhiidhka Ibraahim, kaasii oo ay u tixgaliyaan abbahii ummada Yuhuuda. Daaud waxaa loo arkaa sidii Masiixa imaanya(2 Samuu'eel 7). Kitaabkan Rooma haddaba waxaa falaanqaynteen bartilmaameed u noqon doonta xiisada ka dhex taagan rummayteyaasha Yuhuuda ah iyo kuwa aan ahayn. Waxa laga yaabaa in hoggaamiyeyaasha Yuhuuda ahi ay dareemaan in Nero xoogay ( oo uu baabiiyay dhammaan caadooyinkoodi diimeed) meeshoodiina lagu badalay hoggaamiyeyaal Masixiyiin dadka aan Yuhuuda ahayn ah.
- C. Rooma 4 waxay ina tusaysaa in binu aadankii danbaabay markasta lagu badbaadinay rumaysad iyo toobad keen ay u noqdaan xagga Ilaah, taasi oo ku xidhiidhsan iftiinka ruuxiga ah ee la siiyay. ( Bilowgii 15:6; Rooma 4:3) haddii aad eegto dhinacyo badan, Axdiga Cusub saasi ugama sii duwana Axdigii Hore. ( Yeremyaah 31:31-34. Yexesqeel 36: 22-38).
- D. Jidkan xaqanimad lagu aqbalay rumaysad cidkasta way u furantahay, kuma koobna oo kaliya cuqaasha iyo dadka u dhashay reer Binu Israaiil toona. Halkan ayuu Bawlos doodiisa diimeed ku sii wataa isaga oo isticimaalaya Ibraahim, oo uu ku soo sheegay Galaatiya 3 Ibraahin oo ahaa aabihii umada Yuhuuda ka hor intii aan la gudin ayaa xaqnimo lagu tiriyey.

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 4:1-8

<sup>1</sup>Haddaba maxaynu nidhaahnaa inuu helay Ibraahim oo awowgeennii hore ahaa xagga jidhka?  
<sup>2</sup>Waayo, haddii Ibraahim shuqullo xaq ku noqday, wax uu ku faano buu leeyahay ee Ilaah hortiiisa ma aha. <sup>3</sup>Maxaa Qorniinku leeyahay? Ibraahimna Ilaah buu rumaystay, oo waxaa isaga loogu tiriyey xaqnimo. <sup>4</sup>Haddee kii shaqeeya abalgudkiisa looguma tiriyo sida nimco laakiinse sida qaan oo kale. <sup>5</sup>laakiin kii aan shaqayn illowse rumaysta kan xaq ka dhiga kuwa aan cibaadada lahayn, rumaysadkiisa waxaa lagu tiriyaa xaqnimo. <sup>6</sup>Sida Daa'uudna uga sheegayo barakadii ninkii Ilaah xaq u tiriyo shuqullo la'aantood, <sup>7</sup>isagoo leh, Waxaa barakadaysan kuwa xadgudubyadooda la cafiyey. Oo dembiyadooda la daboolay. <sup>8</sup>Waxaa barakadaysan ninkii Rabbigu uusan dembi u tirinayn.

**4.1 “maxaynu nidhaahnaa inuu helay Ibraahim oo awowgeennii hore ahaa xagga jidhka?”** (aayadaha 16-18) macnaha magaciisi asalka ah Abram, waxuu macnahiisu ahaa “ abbahii la saraysiiyay”

Sabata haddaba Ibraahim tusaale ahaan lagu soo qaatay Axdiga hore (Bilowgii 11:27-25:11) waa midkood (1) Yuhuuda oo saraynta nasab ahaan eek u abtirsiga asalkoodi meesha soo dhigtay ( Matayos 3:9, Yooxanaa 8: 33,37,39) (2) waayo rumaysadkiisa shakhsi ahaaneed ayaa tusaale u ah hanaanka Axdiga (Bilowgii 15:6) (3) rumaysadkiisa ayaa horseeday in sharciga Muuse la siiyo (Baxniintii 19-20); ama (4) waxaa isticimaalay macalimiin been ah.(ie Judaizers, ef Galatiya).

▣ **“jidhka”** eeg mowduuc Gaara ah 1:3

**4:2 “haddii”** WAA JUMLAD ODHAAHEED SHURUUDEED HEERKA KOWAAD AH ( cf A.T Robertson. *Word pictures*. Qaybta 4, P. 350). Tani haddaba waa suurtagal marka laga eego aragtida ujeeda qoraaga. Tani waa

tusaale fiican. JUMALAD ODHAAHEED SHURUUDEED HEERKA KOWAAD AH. waaqici ahaan taasi been, laakin waxay samaynaysaa qodob waxbaris diimeed. (aayadda 14).

Joseph A, Fitzmyer, buugiisii *The Anchor Bible*, Qaybta.33, p.372, waxa uu leeyay, tani waxa dhici karta ay isku dhex jiraan JUMALAD ODHAAHEED SHURUUD LEH oo qaybta hore ah QAYBTA LABAADN ( kasoo horjeedda) tan LABAADNA ahayd ta koowaad.

▣ **“shuqullo xaq ku noqday”** tani waxay kasoo horjeeddaa badbaadada lagu helo rumaysadka ee Masiixa. Badbaadada noocan ee lagu helo dadaalka binu aadmigu sameeyaan hadii ayba suurta gal ahaan ahayd, looma Ciise Masiixa iyo badbaadadiisa toona. Siday doontaba ha ahaa tee axdiga hore ayaa inoo sheegaya in aadamaha danbaabay ayna marnaba inay raacaan Axdiga Ilaah, shuqulka gacmahana aan lagu badbaadin. Sidaasi darteed Axdiga hore ayaa noqday habaar iyo xukun dhimasho (Galatiya 3:13, kolosay 2:14) Aqoonyahanda yuhuudu way ogsoonaayeen in Ibraahim jiray Sharciga Muuse hortii, balse waaxay rumaysnaayeen in uu filaaayay sharciga isla markaana xafiday.(Wacdiyaha 44: 20, iyo Jubilees 6. 19; 15:1-2).

▣ **“wax uu ku faano buu leeyahay”** mawduucani inta badan waxa uu ka muuqdaa qoraalada bawlos. Asalka meesha uu ka soo jeedo oo ah Faarisi ayaa xaasaasiyad galiyay dhibaatadan (3.27, 1 Korintos 1:29, Efesos 2: 8-9) ka eeg mawduuca gaarka ah ee faanka 2:17.

**4:3**

**NASB, NKJV, “Ibraahimna Ilaah buu rumaystay”**  
**NRSV, TEV “ Ibraahim waxa uu rumaysadkiisa u gashaday Ilaah”**

**JB**

Tani waa xigasho laga soo xigtay (Bilowgii 15:6) seddex jeer ayuu Bawlos cutubkan ku isticimaalay( 4: 3,9,22), waana mid muujinaysa sida ay muhiim ula tahay fahamka bawlos ka qabo badbaada. Weedha weedha “rumaysad” Kitaabka Axdiga Hore macnaheedu waxa uu yahay daacadnimo, aaminimo ama lagu kalsoonaan karo taas oo qeexaysa dabeecada Ilaah ee maaha teena. Waxa ay ka timi weedh cibraaniga ah (emun, umunah) taas oo la macno ah (hubaal). Rumaysadkaagu badbaadada waa ku waafaqid maskaxiyan ah (xaqiiq jirta) (go,aano) ka go,an, iyo hab nololeed niyad samaana (hab nololeed) iyo xidhiidh aas aasiya (soo dhoweyn qof). Waa in xooga la saaraa in aanu Ibraahin rumaysadkiisu ahayn mid ku xidhan

Masiixa mustaqbalka laakiin balanqaadkii Ilaah ee ahaa in uu dhali doono cunug faracakiisa noqda (cf Bilowgii 12:2;,15:2-5; 17:4-8, 18:14) Ibraahim isagoo ka jawaabaya balanqaadkaa ayuu Ilaah rumaystay. Walise waxa uu wali ku jiray shaki , xaqiiqatana waxa ay qaadatay 13 sanno in balanqaadkii rumoobo. Hayeeshee Ilaah waa aqbalay rumaysadkiisa aan kaamilka ahayn. Ilaah mqarkasta waa danaynayaa in uu la sii shaqeyo binu aadanka cilaysan ee u jaawaaba Isaga balanqaadkiisana si rumaysad leh u rajeeya, xataa hadii rumaysakoodu u yar yahay sida iniin qarde (cf Matayos 17:20).

**4:3,4,5,6,8,9,10,22,23,24**

**NASB, NRSV “oo waxaa isaga loogu tiriyeey xaqnimo.”**

**NKJV “ waa loo xisaabiyay”**

**TEV “ waa la aqbalay”**

**JB “ iimaankan waa la tixigaliyay”**

“waxay ku taxaluqdaa rumaysadkii Ibraahim ee balanqaadaka Ilaah”.

“Xisaabiyay” (*logizomia*) waa erey bixin xisaabeed macnaheedu yahay “qof kaydkiisa lacageed lasigu geeyay” (LXXX Bilowgii 15:6; Laawiyiintii 7:18; 17:4) isla runtan waxay si quruxbadan ugu xardhantahay 2 Korintos 5:21 iyo Galatiya 3:6. Waxaa suuragal ah in Bawlos la falgaliyay Bilowgii. 15:6 iyo Sabuurka 32:2 waayo labadooduba waxay addeegsadeen weedha “Xisaabin” isku keenida qoraaladani waa tusaale ay isticimaallyeen macalimiintii Yuhuuda.

Axdiga Hore waxaa weedhan sidaasi looma adeegsan waxa la xidhiidha kayd lacageed Daanyeel 7:10,12:1. Labadan book masaal ( xuusta Ilaah) waa

1. buuga camallada iyo xasuuaha ( Sabuurka 56:8; 139:16; Ishacyaah 65:6; Malaakii 3:16; Muujintii 20:12-13).

2. buuga nolosha (Baxniintii 32:32; Sabuurka 69:28; Ishacyaah 4:3 Daanyeel 12:1; Luukos 10:20; Filiboy 4:3 Cibraaniyada 12:23; Muujintii 3:5; 13:8; 17:8; 20:15; 21:27).

Buuga Ilaah ku qoray xaqnimada Ibraahim waa “buuga nolosha”

**4:3,5,6,10,11,13,22,25** “oo waxaa isaga loogu tiriyeey xaqnimo” tani waxay ka turjumaysaa Axdiga hore weedhan (*Tsadak*). Waa hab jidh ahaaneed masaal ah oo lagu isticimaalo dabeecada Ilaah. Ilaah waa waa qumanayahay aadamiguna markasta waa taa kasoo horjeedkeeda. Axdiga cusub waxaa loo isticmaalay sidii haayad danbi baadhis sharciya taasi oo dareen ahaan inagu riixaysa inaan ku noolaano habnololeed ku salaysan dabeecada Ilaah. Ujeedka Ilaah eek u wajahan masiixi kasta waa in uu ku noolaado dabeecaddiisa oo kale ama marka si kale loo dhigo Masiixa oo kale (8:28-29; Galatiya 4:19). Eeg mawduuca gaarka ah 1:17.

**4.5** Muhiimada rumaysadku waa in loo jawaabo Ilaah oo isu keen muujiyay, isga oo aan marnaba isku halaynayn wanaag ka yimaada aadanaha xagiisa. Tani macnaheedu ma ah in mar hadii layna badbaadiyay aynu waxa masuuliyad ahi ina saarayn. Hadaafka Masiixiyiintu ma aha oo kaliya inaan janada helo markaan dhimano balse aan ifka ugu eekaano Masiixa. Laynugu badabaadin xaqna lay nagama dhigin acmaasha gacmaha, laakin waxa laynagu cafiyay shaqulo fiican (Efesos 2:8-9 iyo 10; Yacquub iyo Yooxanaa). Isbedelka qofka noloshiisa ayaa caddaymo u ah in qof badbaaday. Badbaadadu waa inay keentaa daahirsanaan.

☐ “rumaystay” eeg mawduucan gaarka ah ee hoos ku xusan.

**MAWDUUC GAARAH: RUMAYSAD ( PISTIS [MAGAC], PISTEUŌ [ FICIL], PISTOS [SIFO]**

- A. Tani waa weer aad muhiim u ah kitaabka (Cibraaniyada 11:1, 6). waa mawduucii ugu horayntii Ciise wacdigiisa ku jirtay. (Markos 1:15) waxa jira ugu yaraan laba axdi oo cusub oo laysaga baahanyahay. Toobadkeen iyo rumaysad (1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21).
- B. Waa Cilmiga erayada iyo is bedbedalkooda (etymology)
  - 1. Weedha “rumaysad” Axdiga hore waxay ka dhigantahay daacadnimo, aaminimo, ama lagu kalsoonaan karo waaana mid qeexaysa dabeecada Ilaah, maaha tad aka.S
  - 2. Waxa ay ka timi weedh cibraaniga ah (*emun, umunah*), taas oo la macno ah (hubaal). Rumaysadkaagu badbaadada waa ku waafaqid maskaxiyan ah (xaqiiq jirta) (go,aano) ka go,an, iyo hab nololeed niyad samaana (hab nololeed) iyo xidhiidh aas aasiya (soo dhoweyn qof).
- C. Isticmaalka Rumaysad Axdiga Hore
 

Waa in xooga la saaraa in aanu Ibraahin rumaysadkiisu ahayn mid ku xidhan Masiixa mustaqbalka laakiin balanqaadkii Ilaah ee ahaa in uu dhali doono cunug faracakiisa noqda (Bilowgii 12:2; 15:2-5;17:4-8; 18.14). Ibraahim isagoo ka jawaabaya balanqaadkaa ayuu Ilaah rumaystay. Walise waxa uu wali ku jiray shaki , xaqiiqatana waxa ay qaadatay 13 sanno in balanqaadkii rumoobo. Hayeeshee Ilaah waa aqbalay rumaysadkiisa aan kaamilka ahayn. Ilaah mqarkasta waa danaynayaa in uu la sii shaqeeyo binu aadanka cilaysan ee u jaawaaba Isaga balanqaadkiisana si rumaysad leh u rajeeya, xataa hadii rumaysakoodu u yar yahay sida iniin qarde (Matayos.17.20).
- D. Isticimaalka Rumaysad Axdiga Cusub
 

Weedha “ rumayn” “believed” waxa ay ka timi eray Griig ah (*pisteuō*) taasi oo waliba loo turjumi karo “ Rumaysad” ama “ Aaminid” tusaale ahaan odhaada magaca ah marar badan lama adeegsan Injiilka, Yooxanaa ablse ereayga ficilka ah ayaa la isticimaaly Yooxanaa 2:23-25 waxa muuqatay shaki ku jira sida ay waxa uga goanyiin dadkii badnaa masiixa reer Naasereet Masiix ahan. Tusaale yaal kale oo wanagsan oo ku saabsan ereygan “rumayn” waxay ku taala Yooxanaa 8:31-59 iyo Falimaha Rasuullada 8:13; 18-24. Rumayska dhabta ah sida kitaabku sheegay way ka wayntahay jawaab kaliya. Waa in ay raacdaa hanaan geedi socod xernimo (Matayos 13:20-22; 31-32).
- E. Isticmaalka “rumaysad” xidhiidhiye ahaan.
  - 1. *eis* waxa uu macnaheedu yahay “ku” hab dhismeedkan cajiibka ahi waxa uu xooga saarayaa inay masiixiyiintu rumaystaan Ciise.
    - a. Magaciisa (Yooxanaa 1:12; 2:23; 3:18; 1Yooxanaa 5:13).
    - b. Isaga (Yooxanaa 2:11, 3:15,18 4:39; 6:40; 7:5, 31,39,48; 8:30; 9:36; 10: 42; 11: 45,48; 17:37,42; Matayos 18:6; Falimaha Rasuullada 10:43 Filiboy 1:9; 1Butros 1:18).
    - c. Aniga (Yooxanaa 6:35; 7:38; 11:25,26; 12:44,46; 14:1.12; 16:9; 17:20).
    - d. Wiilka (Yooxanaa 3:36; 9:35; 1Yooxanaa 5:10).
    - e. Ciise (Yooxanaa 12:11; Falimaha Rasuullada 19:4 Galatiya 2:16).

- f. Iftiinka (Yooxanaa 12:36).
- g. Ilaah (Yooxanaa 14:1).
- 2. *en* macnaheedu waa gudaha sida Yooxanaa qoray 3:15; Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 5:14.
- 3. *epi* waxa ay ka dhigan tahay ama kuwa gudaha ku jira Matayos 27:42; Falimaha Rasuullada 9:42; 11:17; 16:31; 22:19; Rooma 4:5,24; 9:33; 10:11; 1 Timoteyos 1:16; 1 Butros 2:6.
- 4. Xaaladda aan lahayn meelaynta sida ku sugan Galatiya 3:6; Falimaha Rasuullada 18:8; 27:25; 1 Yooxanaa 3:23; 5:10.
- 5. *hoti* waxa ay la macno tahay “rumaysad ina” siiya waxa la rumaysto.
  - a. Ciise ka Quduuska keliya ee Ilaah (Yooxanaa 6:69)
  - b. Ciise waa aan ahay (Yooxanaa 8:24)
  - c. Ciise aabaha ayuu ku jiraa isaguna aabaha ayuu ku jiraa (Yooxanaa 10:38)
  - d. Ciise waa Masiix (Yooxanaa 11:27; 20: 31)
  - e. Ciise waa wiilka Ilaah (Yooxanaa 11:27; 20:31)
  - f. Ciise aabaha ayaa soo diray (Yooxanaa 11:42; 17:8,21).
  - g. Ciise waxa uu ka mid yahay aabaha (Yooxanaa 14:10-11)
  - h. Ciise Ilaah ayuu ka yimi (Yooxanaa 16:27, 30).
  - i. Ciise waxa uu isku cadeeyey magaca Axdiga ee “waan ahay” (Yooxanaa 8:24; 13:19)
  - j. Isaga ayaan la noolahay (Rooma 6:8)
  - k. Ciise waa dhintay waana sara kacay (1 Tesaloniika 4:14) .



**NASB, NKJV**                    “**Rumaysadkiisa**”  
**NESV**                                “**Rumaysadkan oo kale**”  
**TE, NJB**                            “**waa rumaysadkan**”

Rumaysadkiisa ayaa Ibraahin loogu tiriyeey xaqnimo tani ma ay ahayn mid ku salaysan ficilka Ibraahim. Laakiin qalbigiisa weedha “la xisaabiyey” waxa kale oo lagu isticmaalay Filiboy LXX ee

Sabuurka 106:31, taas oo ka dhigan Tirintii 25:11-13. Habkan xisaabin Filiboy waxa ay ku salaysan tahay ficil laakiin sidaas ma aha Ibraahim marka la eego Bilowgii 15:6!

▣ “**laakiin kii aan shaqayn illowse rumaysta kan xaq ka dhiga kuwa aan cibaadada lahayn, rumaysadkiisa waxaa lagu tiriya xaqnimo.**” iyo kuwa aan Ilaah aqoon loogu xisaabiyaa xaqnimo tani waxa si cadtusaale ugu ah ibraahim. Aayada 3 (Bilowgii 15:6). Xaqnimadu waa hadyad Ilaah marnaba ma aha mid lagu kasbado dadaal dadku smeeyo. Eeg mawduuca Gaara ah 1:17.

▣ “**Daa’uud**” Sidii Ibraahimba aanu u ahayn mid shakhsi ahaan wada wanaagsan, balse rumaysadka Ilaah xaq ku noqday, ayaa sidoo kalena Daa’uud denbiile u ahaa (Sabuurka 32 iyo 52). Waayo Ilaah wuu jecelyahay oo wuxuu la shaqeeyaa aadanaha denbiga ku dhacay (Bilowgii 3), waana kuwa isaga rumaysta(Axdiga Hore) iyo Wiilkiisa (Axdiga Cusub).

**4:6 “shuqullo la'aantood”** Bawlos ayaa odhaayadan ama hadaladan carabka ku adkeeyey ka hore xigashadiisii Axdiga Hore (Sabuurka 32:1-2). Dadka waxaa xaq laga dhigay nimcada Ilaah ee loo soo mariyey Ciise taasi oo ka dhigtay qofka rumaysadkiisa ee ma aha ficilada diimeed ee la sameeyo.

**4:7-8** Xigashadan laga soo xigtay Sabuurka 32:1-2 “waa la cafiyey” waana la “asturay” ka waxan falay cafiyey waa Ilaah, aayada 8 waxa ay koobsanaysaa hadalo xoogan oo diidmo ah “sinaba uma ahaan doonto ” in la tix geliyo oo la xisaabiyo ogsoonow saddexda eray ficileed waxa ay tilmaamayaan garashada dembiga.

**4:7 “kuwa xadgudubyadooda la cafiyey”** tan waxaa lagu xigtay Sabuurka 32:1 fikrada “asturid waxa ay udub dhexaad u ahayd nidaamkii waaq dhaca ee caqiidadii reer Banu-Israa,iil ” asturaada Ilaah asturayo dembiga waxa weeye waxa uu ka jeediyaa in dhihiisa (Brown, Driver, Briggs p, 491). Isla fikradan “asturid” walaalow erayga Cibraaniga ahi “*chaphar*” oo ka duwan lagu isticmaalay caadadii deamed ee maalintii waaq dhaca (asturida), hakaas oo dhiig lagu dul shubi jiray (kursiga naxariista si loo asturo dembiyada reer Banu-Israa,iil. Masaalo Kitaabiya oo la xidhiidha waxa ay noqon doontaa in la masaxo ama la tirtiro qof dembigiisa.



**4:8 “Waxaa barakadaysan ninkii Rabbigu uusan dembi u tirinayn.”** tanina waa xigasho ka timi Sabuurka 32:2 waana weedhii ama eraygii “xisaab” eedayn “ku kaydin qof sanduuqiisa” laguna isticmaalay dareen diidmo ah. Ilaah dadka dusha kama saaro dunuub (laba wejiilayn) oo uguma kaydiyo sanduuqa kaydka ruuxiga ee rumaystayaasha.waxa uu kaydiyaa waa xaqnimada tana waxaa sal u ah dabeecada nimcada iyo naxariista leh ee Ilaah. Oo ah hadyad lacag la,aan ah oo aan ku imin wax qabad fiican oo ay dadku sameeyaan. Himilo gaadhid dadaal mutaysi IWM!

**AAAYADAHA 4:9-12**

<sup>9</sup>Haddaba barakadan miyaa lagaga hadlay kuwa gudan oo keliya, mise kuwa buuryoqabka ahna waa lagaga hadlay? Waayo. waxaannu nidhaahnaa. Ibraahim rumaysadkiisii waxaa loogu tiriyeey xaqnimo. <sup>10</sup>Sidee baa haddaba loogu tiriyeey? Ma markuu gudnaa, mise markuu buuryoqabka ahaa? Ma aha markuu gudnaa, laakiinse waa markuu buuryoqabka ahaa; <sup>11</sup>oo wuxuu helay calaamada gudniinta, tan ahayd shaabaddii xaqnimada oo rumaysadkii uu haystay intuu buuryoqabka ahaa; inuu noqdo aabbihii inta rumaysata oo dhan in kastoo ay buuryoqab yihiin, in xaqnimo loo tiriyo iyaga, <sup>12</sup>iyo inuu aabbaha gudniinta u noqdo kuwa aan ahayn kuwa gudan oo keliya laakiinse kuwa ku socda tallaabooyinka rumaysadka ee Aabbeheen Ibraahim haystay intuu buuryoqabka ahaa.

**4:9-12** sida ay u badan tahay Bawlos waxa uu arrintan ka gudniinta ugu daray doodiisa. Waayo culamada yuhuuda ee diina ayaa waxa ay midnimada siiyeen. Inay lagama maarmaan u tahay gudniintu badbaadada (Kitaabka Galatiya iyo Falimaha Rasuullada). Bawlos oo taba baray macalin diimeed ka hor intaanu Masiixa u iman, wuu garanaayey in labada Bilowgii 15:16 iyo Sabuurka 32:2 ficil isku mid ahi ku yaalo (Cibraaniga iyo Giriigaba). labadan curis waxa ay mideeyeen ujeedooyin ah wax baris diimeed.

**4:9** su,aasha laga filayo aayada 9 “waa maya” jawaabta Ilaah dadka oo dhan xitaa kuwa aan Yuhuuda ahayn. Waxa uu ka rajaynaayey rumaysad Bilowgii 15:6, ayaa mark kale la xiganayaa.

**4:10-11 “calaamadda gudniinka, dhowaanshaha xaqnimada rumaysadka”** Markii Ilaah u yeedhay Ibraahim ee xaqa laga dhigay, ayaa Ilaah calaamadda axdiga waxa uu uga dhigay gudniinka (Bilowgii 17:9-14). Haddaba, dhammaanba dadkii ku dhowaa Bariga ee wakhtii hore, waxay ahaayeen kuwo gudan marka laga reebo Philistiineska oo asalkooda ahaa Giriig. Xagga Yuhuudda gudniinku waxa uu ahaa calaamad diimeed, oo tusinasa in qofku uu xubin ka yahay axdiga, oo waxa la gudi jiray siddeed casho kaddib marka ilmuhu dhasho. Sidoo kale gudniinku waxa uu calaamad muuqata u ahaa dadka ku camal fala rumaysadka Ilaah. cibaaradan haddaba ah “xaqnimada rumaysadku”, waxay kusoo noq-noqonaysaa aayadda 13. Muhiimaddu waxay tahay haddaba, in xaqnimada Ilaah aan lagu helin gudniinka, balse lagu helo rumaysadka.

**4.11 “waxaa inuu noqdo aabbihii inta rumaysata oo dhan in kastoo ay buuryoqab yihiin, in xaqnimo loo tiriyo iyaga,”** Buuga Rooma waxaa la qoray ka dib buuga Galatiya Bawlos waxa uu xaas xaasiyad ka qabay dadka Yuhuuda oo u janjeedha aaminsanaanta in (1) in xidhiidhkooda xaga jinsiga abtirsiinta Matiyos 3:9, Yooxana 8:33, 37,39) iyo (2 ) wax qabadka iyo fasirka dadka yuhuuda ah ee hada nool eek u saabsan axdigii Muuse (axaadiista, iyo sunaha odayada dhaqanka taasi oo markii dambe inta la qoray loo bixiyey Talmuut). Sidaas daraadeed ayuu Ibraahin ugu isticmaalay inuu tusaale fiican u yahay. Dhamaan kuwa iimaan ahaan u rumaysta (Aabaha kuwa aan gudnayn) Galatiya 3:29.

▣ **“shaambad”** ka eeg mawduuca khaaska ah ee hoos ku qoran.

**MAWDUUC GAAR AH: SHAABAD**

Shaambada Ilaah waxaa kale oo lagu sheegay Muujintii 9:4 iyo 14:1 iyo sidoo kale 22:4 Shaydaanka shaamabiisana waxaa lagu sheegay 13:16, 14-9, 20-4 shaabadu waxaa laga yaabaa inay ahayd hab qadiimiya oo tusinaaya.

1. Runta (Yooxanaa 3:33)

2. Lahaansho (Yooxanaa 6:27; 2 Timoteyos 2:19; Muujintii 7:2-3)
3. Badbaado “Bilowgii 4:15, Matayos 27:6-6. Rooma 15:28 2Korintos 1:22 Efesos 1:13, 4:30”
4. Waxa kale oo ay noqon kartaa shaamabada run ahaanshaha Yahwe hadyadii balan qaadka (Rooma 4:11 iyo 1Korintos 9:2).

Ujeedada shaamabu waxa ay ahayd in lagu aqoonsado Yahwe dadkiisa sidaas daraadeed halaaga iyo masiibooyinku kuma dhaci doonaan dadkiisa. Shaabada shaydaanku waxa ay cadaynaysaa mid lagu aqoonsanayaayo dadkiisa kuwaas oo ah kuwa loogu talo galay halaaga Ilaah muujinta dhexdeeda. “Masiibo” *“I.e..thlipsis”* badiyaaba kuwa aan rumaysadka lahayn waxa ay cadaadiyaan kuwa rumaysadka rumaysadka leh, masiibo-Cadho (*I.e. orgē or thumos*) iyo xukunka Ilaah oo ka dhan noqda kuwa aan rumaysadka lahayn si ay u toobadkeenaan uguna laabtaan si ay ugu badbaadiyaha Ciise. Ujeedada dhinaca haboon ee xukunku dhinaca wanaagsan ee qorshaha xukunka waxa loo arki karaa habaar axdiyeed-barako. Sharciga Kunoqoshadiisa 27:28.

Odhaahda “Ilaaha nool” waa eray ciwaankiisu yahay YWH “Baxniintii 3:14 Sabuurada 42:2; 84:2 Matayos 16:16” is la eray ciwaaneedkan ayaa badanaa waxaa laga heli karaa dhaaraha Kitaabka Quduuska “Sida Sayidku u nool yahay”

**4:12 “ku socda tallaabooyinka rumaysadka”** tani waa odhaah loo adeegsado ciidamada “*Stoicgeō*” askar half al ku soconaya (Falimaha Rasuullada 21:24; Galatiya 5:25; 6:16 Filiboy 3:16). Bawlos waxa uu kula hadlaayay aayadahan dadka Yuhuuda ah (“Aabaha gudniinka”) Tani waxa ay wax ku kor dhinaysaa ferada qaab nololeedka rumaysadka.

Mana aha rumaysad hal mar ah. Rumaysadku waa xidhiidh socda, ma aha go,aan ama wax aad ikhtiyaarkaaga markaad doonto samayso.

#### **AAYADAHA 4:13-15**

<sup>13</sup>Waayo, ballankii lagula ballamay Ibraahim ama farcankiisii inuu ku noqdo kii dunida dhaxli lahaa, uguma iman sharciga. Laakiinse wuxuu ugu yimid xaqnimada rumaysadka. <sup>14</sup>Waayo, haddii kuwa sharciga leh ay noqdaan kuwa dhaxalka leh, de markaas rumaysadkii waxaa laga dhigay wax aan waxtar lahayn, ballankiina waa la buriyey, <sup>15</sup>maxaa yeelay, sharcigu wuxuu keenaa cadho, laakiinse meeshii aan sharci jirin xadgudubna ma jiro.

**4:13 “ballankii lagula ballamay Ibraahim ama farcankiisii”** Ilaah waxa uu sameeyey balan qaadka “dhulka iyo farcankiisa” Ibraahim (Bilowgii 12:1-3; 15: 1-6; 17:1-8; 22:17-18). Axdiga hore waxa uu xooga saarayaa dhulka (Falistiin) Halka Axdiga Cusub xooga ka saaro “farcanka” (Masiixa Galatiya 3:16-19). Laakiin halkan farcanka waxaa loola jeedaa dadka rumaysadka (Galatiya 3:29) balan qaad ka Ilaah ayaa sal u ah dhamaan rumaysadka rumaystayaasha (Galatiya 3:14,17,18, 19, 21, 22, 29; 4:28; Cibraaniyada 5:13 -18).

☐ **“inuu ku noqdo kii dunida dhaxli lahaa”** war mutiyeedkan caalamiga ahi waa mid muhiimad le, iftiinka Bilowgii 12:3; 18:18; 22:18 iyo Baxniintii 19:5-6. Ilaahay waxa uu u yeedhay Ibraahin si uu ugu yeedho bani-aadamiga oo dhan (Bilowgii 1:26-27; 3:15)! Ibraahin iyo farcan kiisu waxa ay ahaayeen jidka ay badbaadadu ugu timi aduunka-tani waa hab kale oo ina tusaya boqortooyada Ilaahay ee koonka gudhihiisa (Matayos 6:10).

☐ **“uguma iman sharciga”**sharcigii Muuse weli lama muujin odhaahdan ugu horayntii waxaa lagu dhigay jumlad afka giriiga ah si uu u muujiyo muhiimada arrintan. Tani waa hadaba qodob muhiimad weyn leh oo xoogana saaraaya faraqa u dhaxeeya shuqulada amaba dadaalada dadku sameeyaan iyo nimcada Rabbiga ah (Cibraaniyada 8:7,13) ka fiiri mawduuca gaarka ah. Aragtida Bawlos tan oo ku wajahan sharciga Muuse.13:9.

**4:14 “haddii”** waa JUMLAD SHURUUD AH oo laga yaabo inay dhab tahay marka la eego aragtida uu qoraagu ka hadlaayo iyo qasdiga qoraaladiisa. Halkan ka hor gaynta ah ayuu haddaba Bawlos isticmaalay si uu doodiisa ugu xoogeeyo. Shuruudan heerka oo loo isticmaalay qaab suugaaneed ayaa waxa ay tahay tusaale wanaagsan. Ma uu rumaysan jiritaanka hadalkan baise waxa uu tusaayey sida aanay wax sal ah u lahayn oo been ah (aayada 2).

Jinsiga Yuhuuda oo loo geeyey oo loo geeyey calaamada muuqata guniinta ayey ahayd inay ahaadaan kuwo dhaxla dunida. Balse juwa la yimaada rumaysadka ee doonista Ilaah sameeya ayaa ah kuwa dhaxlaya dunida.gudniin xaaga jidhka ahi ma aha calaamada runta ah, balse waa rumaysad (2:28-29).



**NASB, NKJV** “rumaysadkii waxaa laga dhigay wax aan waxtar lahayn”  
**NRSV** “rumaysadku waa been abuur ”  
**TEV** “rumaysadku dadka waxba ma tarayo”  
**JB** “rumaysadku wax qiimo ah ma leh”

Waa wax tilmaamista erayga *keno*, kaasi oo xoojinaya xaalad lagu adkeeyay fal xooggan oo ah luqada Giriigga, waxaana loogala jeedaa “wax madhan,” “tusinta waxaan asaas lahayn,” xitaa “been ah” ( 1 Korintos 1:17). Waxa sidoo kale Bawlos ku adeegsaday 1 Korintos 1:17; 9:3 iyo Filiboy 2:7.



**NASB** “ballankiina waa la buriyey”  
**NKJV** “ballankii waxa laga dhigay midaan saamayn lahayn”  
**NRSV** “ballankii waa laga baxay”  
**TEV** “ballankii Ilaah waxtar malaha”  
**JB** “ballankii wax faa’ido ah malaha”

Jumladan oo ah mid naxwe ahaan tilmaame ah erayga ficilka ah ee lagu guuriyey Giriiga waxaa macnaheedu yahay “Faruqin” “dhamayn” amaba xitaa “baabi-in amaba tirtirid” eraygan laftiisa waxa uu ku isticmaalay Bawlos Rooma 3:3,31, 6:6, 7,2,6,13:18; 15:24-26; 2Korintos 3:7; Galatiya 5:4 2 Tesaloniika 2:8. Aayad kan waxa ay sida cad yihiin qaar is bar bar yaala ah ma jiraan laba jid oo lagu badbaado. Axdiga Cusub ee nimcada ayaa Axdigii hore shuqulada gacmo ku dhisnaa ka dhigain mid aan ansax ahayn! Fiiri mawduuc kaas oo ah sharci dhacay iyo anshax la,aan.

**4:15 “sharciga..sharci”** istimaalka koowaad waxa uu wataa marka la eegaayo erayga Giriiga ah, naxwe ahaan wax la isla garanaayo. Halka kan labaad aanu wadan, waana mid halisteeda leh wadashadiisa iyo maqnaantiisuba marka la eego naxwe ahaan luqada Giriiga. Sidaas daraadeed, waxa ay u muuqataa inuu Bawlos si uu u cafiyo oo uu u tuso u isticmaalay weedhan laba micne midood (1) sharcigii Muuse iyo dhaqmdiisii oo dadka Yuhuuda ah qaar kood u aaminsanaayeen badbaadiyhooda (2) fekarada guud sharci ahaaneed mawduucan macnaha balaadhan leh. waxa uu ku jiri doonaa dadka aan Yuhuuda ahayn xaqnimo isku magacaabistooda. Kuwaas oo u hogaamsamay hogaan dhaqameedkan amaba caado diimeed yo una qaatay in lagu qaatay shuqulada gacmaha lagu sameeyo.

▣ **“sharcigu wuxuu keenaa cadho”** tani waa hadal naxdin leh (3:20; Galatiya 3:10-13; Kolosay 2:14). Sharciga Muuse keligii looguma talo gelin jid lagu badbaado. (Galatiya 3:23-29). Doodda noocan ahi waxa ay ahaan doontaa mid ku adag qof kasta oo Yuhuud ah (ama sharci yaqaan ah) inuu fahmo amaba aqbaloo laakiinse waa aas aaska dooda Bawlos ka fiiri mawduuca khaaska ah 13:9.

▣ **“laakiinse meeshii aan sharci jirin xadgudubna ma jiro.”** Muuse oo aanay weligood maqlin waxaa loogu xisaabinayaa badbaado dabiici ah. (1:19-20; 14-15). Halkan dooda Bawlos ayaa weliba sii cadaaynaysa runta ka hor intii aanu Ilaahay sharciga Muuse soo dejin Ilaahay ma uu qorayn xad gudubyadooda (3:20,25; 4:15; 5:13,20; 7,57-8; Falimaha Rasuullada 17:30; 1Korintos 15:56).

#### **AAYADAHA 4:16-25**

<sup>16</sup>Taas daraadeed waa xagga rumaysadka inay noqoto xagga nimcada, in ballanku hubaal u ahaado farcanka oo dhan; ee uusan u ahayn kan sharciga leh oo keliya. Laakiinse inuu u ahaado kan leh rumaysadkii Ibraahim. kan aabbaha inoo ah kulligeen, <sup>17</sup>(sida qoran, Quruumo badan baan aabbe kaaga dhigay) Ilaaha uu rumaystay hortiiisa, kan nooleeya kuwii dhintay oo u yeedha waxyaalaha aan jirin sida iyagoo jira. <sup>18</sup>Ibraahim rajuu wax ku rumaystay iyadoo aan rajo jirin inuu aabbe u noqdo

quruumo badan, sida waxyaalihii lagula hadlay leeyihiin, Farcankaagu sidaasuu noqon doonaa. <sup>19</sup>Isagoo aan rumaysadkii ku tabar yaraan wuxuu ka fikiray jidhkiisii sida meyd oo kale ahaa (isagoo boqol jir ku dhow) iyo meydnimadii maxalkii Saarah. <sup>20</sup>Ballankii Ilaah rumaysaddarro kagama uu shakiyin, laakiinse rumaysad buu ku xoogaystay, isagoo Ilaah ammaanaya <sup>21</sup> oo aad u huba in wixii uu u ballan qaaday uu samayn karo. <sup>22</sup>Sidaas daraaddeedna waxaa loogu tiriyeey xaqnimo. <sup>23</sup>Wixii loo tiriyeey looma qorin isaga aawadiis oo keliya, <sup>24</sup>laakiin waxaa loo qoray innaga aawadeenna. Waa loo tirin doonaa kuweenna rumaysan kii kuwii dhintay ka soo sara kiciyeey Rabbigeenna Ciise, <sup>25</sup> kii loo bixiyeey xadgudubkeenna aawadis oo loo sara kiciyeey inuu xaq inaga dhigo.

**4:16** Halkan waxaa uu Bawlos si kooban ugu soo bandhigayaa aad u habboon oo uu ka soo qaatay ayada 14 (1) binu aadanku waa inay la yimaadaan rumaysad (2)Ilaah balanqaadka nimcadiisa (3)balanqaadka wuxuu u ahaa dhammaan farcankiisa ( Yuhuuda iyo kuwa aan ahan) (4) Ibaraahim wuxuu tusaale wanaagsan u ahaa dhammaan kuwa rumaysadka leh.

☐ **“hubaal u ahaado”** ka fiiri mawduucan khaaska ah hoos.

#### **MAWDUUC GAAR AH: DAMAANQAAD**

Eraygan afka Giriiga (bebaios) waxa bixiniyaa seddex tibaaxood.

1. Waxa la huba, xaqiiq ama laysku halayn karo ( Rooma 4:16; 2 Korintos 1:7; Cibraaniyada 1:20; 3:6,14; 6:19; 2Butros 1:10,19).
2. Hananaan geedi socod oo shay ku noqonayo aamin lagu kalsoonyahay (Rooma. 15:8, Cibraaniyada 2:2, Louw and Nida *Greek-English Lexicon* ee Axdiga cusub, vol.1 pp.340,377, 670).
3. “Papyri waxaa noqdaa eray farsameed xagga sharciga. ( Moulton iyo Milligan, waa eray Giriig axdigiga cusub, pp 107-8) .  
Tani waa xaqiiqda biyo kama dhibcaan aayada. 14. Balanqaadka Ilaah waa hubaal!

☐ **“kulligeen..kulligeen”** tani waxay ku saabsantahay dhammaan rumaysteyaasha oo dhan (Yuhuuda iyo kuwa aan Yuhuuda ahayn)

**4:17-23** marlabaad bawlos wuxuu isticmaalay Ibraahim si uu u tuso mudnaanta (1) nimcada Ilaah ee ku dheehan ballan qaadyadiisa(axdiga); iyo (2) aadanaha oo laga rabo rumaysad iyagoo jidka rumaysadkana ku sii taagnaanaya (axdiga).

**4:17 “sida qoran, Quruumo badan baan aabbe kaaga dhigay”** tani waxa laga soo xigtay Bilowgii 17:5 Sedikuyiintu (LXX) waxay lahaayeen qaar aan “Yuhuud ahayn” Ilaah mar kasta waxa uu doonaayay in uu cafiyo caruurtii Aadan oo dhan ( Bilowgii 3:15), ma aha oo kaliya caruurta Ibraahim. Magaca cusub ee Ibraahim waa “abbe Quruumo badan” hadda waxaan ognahay in aan loo jeedin farcanka xagga jidhka oo kaliya balse ay ku jiraan farcanka xagga rumaysadaka.

☐ **“kan nooleeya kuwii dhintay”** tani waxay macnawiyan muujinaysaa xubnahii taranka ee Ibraahim iyo Saaray ee dib u dhalinyareeyay (ayada 19).

☐ **“oo u yeedha waxyaalaha aan jirin sida iyagoo jira”** tani waxay macnawiyan tilmaamaysaa uuraysigii ay Saara uuraysatay Issac, iyo waliba arin muhiim ah oo xagga rumaysadka ah (Cibraaniyada 11:1).

**4:18**

**NASB** “Ibraahim rajuu wax ku rumaystay iyadoo aan rajo jirin”  
**NKJV** “yaa lidi ku ah rajadii la rajaynaay”  
**NRSV** “ rajayntii ka gees ahayd wuxuu rajaynay”  
**TEV** “ Ibaraahim wuu rumaystay waanu rajeeayay, wallow ayna muuqan sabab lo rajeeeyo”  
**NJB** “ inkastoo aanay muuqan wax rajo ah haddana , waa rajeeayay oo rumaystay”

Maduuca khaaska ah “rajo” waxa laga helaa (Rooma 12:12. weedhan waxay xambaarsanatay macne wayn oo la xidhiidha Yuuhada. Harold K. Moulton aqoonyahkii Giriiga ahaa qoraaladiisii *The analytical Greek Lexican Revised* , p.133, ayaa dhawr jeer isticimaalay.

1. Macanaha aasaasiga aha ee rajo ( Rooma 5:4; Falimaha Rasuullada 24:15).
2. Ujeedada rajo (Rooma 8:24; Galatiya 5:5).
3. Qoraaga ama asalka (kolosay :.27; 1Timoteyos 1:1).
4. Aaminid, , kalsooni ( 1Butros 1:21).
5. Xagga abniga oo la damaanadqaaday (Falimaha Rasuullada 2:26; Rooma 8.20).

Macnawiyani halkaan rajo waxay sheegaysaa labo macne. Rajo awooda iyo kartida binu aadanka (ayadaha 19-21) ayaa rajo ee sheegaya balanqaadka Ilaah ( ayadaha 17).



**NASB, NKJV** “Farcankaagu sidaasuu noqon doonaa.”  
**NKJA, NRSV** “haddaba quruun badan ma ahaan doonaan farcankiisu”  
**TEV** “farcankaagu waxay ahaan doonaan quruumo badan”

**NJM**

**JB** “farcankaagu waxuu u tiro badanaan doonaa sida xiddigaha cirka”

Xiggashadan waxa laga soo xigtay Bilowgii 15.5 waxayna ka hadlaysaa xaqiijinta Ilaah u xaqiijiyay Ibraahim in uu siin doon wiilkii balanqaadaka ( Bilowgii ayadaha 19-22) xasuusnow in Isaxaaq dhashay.

1. Seddex iyo toban sano kadib balanqaadkii
2. Kadib markii Ibraahim isku dayay inuu iska daayo Saara ( laba jeer Bilowgii 12: 10-19,20:1-7).
3. Kadib markii Hagaar u dhashay Iraahim wiil, adoontii reer masar ee Sara (Bilowgii 16:1-16).
4. (4) ka dib markii sahra ( Bilowgii 18:12) iyo Ibraahimba (Bilowgii 17:17) ay ku qosleen balanqaadkii.

Rumaysadkoodu ma ahayn mid kaamil ah! Ilaah ayaa mahad leh, badbaadadu uma baahna rumaysad kaamil ah, laakiin inaan la seegin ujeedka kaliya ( Ilaah Axdiga hore iyo Wiilkiisa Axdiga cusub)

**4:20** ugu horayn ibraahim si wanaagsan uma fahmin in wiilka balanqaadku ka iman doono Saara. Sidoo kale Ibraahim ma uu lahayn rumaysad kaamilan. Ilaah ayaa aqbalay oo la sii waday xidhiidh isagoon iimaankiisu buuxin, waayo Ilaah waa uu jecelyahay dadkiisa waloow aanu rumaysadkoodu kaamil ahayn!

▣ **“Ballankii Ilaah rumaysaddarro kagama uu shakiyin”** isla eraygan af Giriiga ee Naxwe ahaan ficilka ah, *diakrinō* Matayos 21:21; Markos 11:23 iyagoo sababo muuqda wata ayuu ciise ku isticimaalay ( ayada 19) si uu u wayddiyo erayga Ilaah, sidii Ibraahim Ugu xooggaystay. Labada ficil ee ayada 20 waxay yihiin AORIST naxwe ahaan tilmaame ah, taasi oo sarbeebaysa falahu in uu yahay Ilaah, balse ay tahay in uu Ibraahim raaco awoodiisa si uu u firfircooni u helo!

▣ **“isagoo Ilaah ammaanaya”** ka eeg mawduuca gaarka ah 3:23

**4:21**

**NASB,** “oo aad u huba”  
**NKJA, NRSV** “si buuxda loogu qanacay”  
**TEV** “dhab ahaan la hubo”  
**NJB** “si buuxda loogu qanacay”

Ereygan Giriiga ah AORIST wuuxuu qeexayaay shay si buuxda loo balanqaaday ( luukos 1:1; kolosay 4:12) ama qof ( 4:21; 14:5). Waa balanqaad buuxa kolosay 2:2 iyo 1Tesoloniika 1:5. tani waa kalsooni ku timid doonista Ilaah eray, iyo awood u suurto galiya dadku inay la yimaadaan rumaysad!

▣ **“in wixii uu u ballan qaaday uu samayn karo.”** tani waa waxay macanaheedu ayahay marka la eego naxawe ahaan in ficil xili tegay dhacay uu hadda dhammaystirmay, nuxurka rumaysadna waa in qof aamino dabeecadaha iyo balanqaadyada Ilaah (16:25; Efesos, Yuudas, 24) ee ma aha marnaba waxqabad binu aadan ( Ishacyaah 55:11) rumaysad aaminaad balanqaadyada Ilaah (Ishacyaah 55:11), waxay ka dhigantay balamahiisu wuu fuliyay (Bilowgii 12:1-3 iyo 15:6, 12-21; Yexesqeel 36:22-36).

**4:22** tani waxa lagu sheegay Bilowgii 15:6 ( ayadda 3), taanina waxay u tahay laf dhabar dood diimeedka Bawlos eek u saabsan sida uu Ilaah u siiyo xaqnimadiisa dadkiisa danbiile yaahsa ah.

**4:23-25** ayadahani jumladaha Giriiga ah. Waxay ina ogaysiinaysaa

1. Ibraahim dartiis. Aayadda 23
2. rumaystayaasha dhammaantood awgood ayada 24
3. sara kicinta Masiixa darteed aayadda 24
4. Ciise wuxuu inaga kor qaaday denbiyadeenna (Yooxanaa 3:16), Ciise waxa laga sara kiciyay denbiyadeenna si la inoo cafiyo (xaqnimada), aayadda 25.

**4:24** rumaysadkii Ibraahim waxa tusaale u noqday dhammaanba farcankiisa runta ah ee raaca. Ibraahim waxa uu rumaystay Ilaah oo u ballan qaaday wiil iyo farcan badan. Haddaba, rumaystayaasha Axdiga Cusubi waxay rumaysan yihiin, inuu Masiixu ahaa dhammaystirka ballan qaadyadii Ilaah siiyay aadanaha denbiga ku dhacay.

**4:25** “**kii loo bixiyey xadgudubkeenna aawadis**” waa arrin xagga sharciga ah oo macneheedu ka dhigan yahay iyadoo in la ciqaabo loo gacan geliyay. Aayaddan 25 waa odhaah fiqi ahaaneed oo ah Septuagint (LXX), Ishacyaah 53:11-12.

▣ “**oo loo sara kiciyey inuu xaq inaga dhigo.**” Labadan waxyaalood ee ay xanbaarsantahay aayadda 25, ayaa tarjumaadda Frank Stagg ee Axdiga Cusubi (*New Testament Theology* p. 97), “waxa loo bixiyay xadgudubkeenna aawadiis oo loo sara kiciyay inuu xaq inaga dhigo”. Haddaba, Fasiraaddani waxay koobsanaysaa labo dhinac oo Bawlos u isticmaalay eraygan “xaqnimada” (1) inay xaqa ku taagnaadaa iyo (2) nolol quduusa, noloshii Masiixa oo kale! Eeg mawduuca gaarka ah ee 1:17.

## SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraaga waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Cutubkan ka midka ah kitaabka Rooma maxuu u yahay mid muhiim ah?
2. Muxuu Bawlos Ibraahim iyo Daa’uud tusaale ahaan ugu isticmaalay?
3. Qeex ereyadan uu Bawlos adeegsaday
  - a. “xaqnimada”
  - b. “fikir amaba dareen”
  - c. “rumaysad”
  - d. “ballan”
4. Muxuu gudniinku muhiim ugu ahaa Yuhuudda (aayadaha 9-12)?
5. Yaa loogala jeeda “farcanka” sida ka muuqata aayadda 13 iyo 16?

# ROOMA 5

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>d</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Waxa rumaysadka laga helo	Rumaysadku wuxuu ku guulaystaa dhibaatooyinka dhexdooda	Cidhibta xaqnimada	Xaq ku ah Ilaah	Rumaysadku wuxuu damaanad qaadaa badbaadada
5:1-11	5:1-5  Masiixa ayaa u dhintay beddelkeenna  5:6-11	5:1-5  5:6-11	5:1-5  5:6-11	5:1-11
Aadan iyo Masiixa	Dhimashaa Aadan laga helay Masiixana nolol	Farqiga u dhexeeya Aadan iyo Ciise	Aadan iyo Masiixa	Aadan iyo Ciise Masiix
5:12-14	5:12-21	5:12-14	5:12-14b  5:14-17	5:12-14
5:15-21		5:15-17  5:18-21	5:18-19	5:15-21

## AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

### İYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Aayadaha 1-11 waa weedh keliya marka la eego qoraalka Giriigga. Waxayna ka hadlayaan arrintii khusaysay “xaqnimada rumaysadka”(3:21-4:25).

B. kormarista guud ahaaneed ee suurto galka ka noqon kara aayadaha 1-11

Aayadaha 1-5	Aayadaha 6-8	Aayadaha 9-11
Faa'idooyinka badbaadada	Aasaaska badbaadada	Badbaadada la hubo ee mustaqbalka
Waxyaabaha laga helo xaqnimada	Xaqiiqooyinka xaqnimada	Xaqnimada mustaqbalka
Xaqnimada	Keenista xaqnimada	ammaanitaanka

C. Aayadaha 12-21 ayaa waxay ku saabsan yihiin Ciise oo ah Aadanka labaad (1 Korintos 15:21-22,45-49; Filiboy 2:6-8). Waxay ka hadlayaan fahanka fiqi ahaaneed ee denbiga keli ahaanta loo galo iyo kan lawada wadaago. Bawlos fiqigiisa ku saabsan xadgudubka aadanaha ayaa waxa uu ahaa mid ku cusbaa oo ka gaar ahaa rabbiyiinta. Waxay haddaba arrintani muujinaysa awooddii Bawlos ee ku dhisnayd muujinta amaba waxyiga Ilaah (Falimaha Rasuullada 22:3).

Caqiidada evangelical ka ee ku saabsan asalkii denbiga ee Bilowgii 3, ayaa waxa horumariyay Augustine iyo Calvin, waxaanay tilmaamasaa in aadanuhu ay ku dhasheen denbiga. Waxa xitaa qoraallo caddayn ahaana loo adeegsaday Sabuurka 51:5; 58:3; iyo Ayuub 15:14; 25:4. Caqiidada iyaduna ah in aadanuhu ay masuul ka yihiin ikhtiyaarkooda ayaa iyana waxa keenay Pelagius iyo Arminius. Waxaana jirta waxyaabo ay u daliishanayaan sida Sharciga Kunoqoshadiisa 1:39; Ishacyaah 7:15; iyo Yoonis 4:11; Yooxanaa 9:41; 15:22,24; Falimaha Rasuullada 17:30; Rooma 4:15. Waxay tahay markaas ujeedda in carruurta ay yihiin bilaa denbi ilaa ay ka qaan gaadhayaan (rabbisku waxay qaangaadhka ahaa 13 wiilasha iyo gabdhaha oo ahaa 12).

Waxa jirta meelo dhexdhexaada oo haddaba labada dhinac isugu imanayaan, waana masuuliyadda qaan gaadhnimada iyo shaydaanka shaqadiisa, waayo shaydaanku wuxuu dadka ku dhiirri geliyaa inay dembaabaan. Haddaba arrintu maaha xumaanta amaba leexashada aadanaha (Bilowgii 6:5,11-12,13; Rooma 3:9-18,23), laakiin waa marka ay dhashaan iyo dhimashada kadib.

D. Waxa jiray aragtiyo badan oo ku saabsan waxyaalaha ay ka hadlayso aayadda 12:

1. Dadka oo dhami way dhimanayaan maxaa yeelay waxay doorteen inay dembaabaan (Pelagius).
2. Denbigii Aadan waxa uu saameeyay waxa Ilaah abuuray oo dhan (aayadaha 18-19, Augustine).
3. Xaqiiqada marka la eego waxa isku jira denbigii asalka ahaa iyo kan gaar ahaanta loo sameeyo.

E. Bawlos isbarbar dhiggiisa uu ku adeegsanayo “sida” ee ka bilaabmaya aayadda 12 ma dhammanayo ilaa laga gaadho aayadda 18. Sidoo kale aayadaha 13-17 ayaa ah qaab caana oo ka muuqda qoraallada Bawlos.

F. Ku wacdinta injiilka ee Bawlos sida aan ka arki karno 1:18-8:39 ayaa ah dood xidhiidhsan.

G. Martin Luther ayaa cutubka 5 ka yidhi, “Baybalka oo dhan waxa adag in laga helo cutub u dhigma kan oo kale.”

**AAAYADAHA 5:1-5**

<sup>1</sup>Sidaas daraaddeed innagoo xaq laynagaga dhigay rumaysad, nabad baynu xagga Ilaah ku haysannaa Rabbigeenna Ciise Masiix; <sup>2</sup>kan xaggiisa aynu rumaysad ku galnay nimcadan aynu dhex taagan nahay, oo waxaynu ku faraxnaa rajada ammaanta Ilaah. <sup>3</sup>Oo taas oo keliya ma aha, laakiinse waxaynu ku faraxnaa dhibaatooyinkeenna, innagoo og in dhibaataadu dulqaadasho keento; <sup>4</sup>dulqaadashaduna aqoon dheer, aqoonta dheeruna rajo; <sup>5</sup>rajaduna inama ceebayso, maxaa yeelay, jacaylka Ilaah baa qalbiyadeenna ku dhex shubmay, oo waxaa ku shubay Ruuxa Qoduska ah oo layna siiyey.



**5:1 “Sidaas daraaddeed”** waxay tilmaamaysaa (1) doodda fiqi ahaaneed ee kooban halkanna ka bilaabanta; (2) gebegabada hadallada fiqi ahaaneed; iyo (3) soo jeedinta xaqiiqada cusub (5:1; 8:1; 12:1).

▣ **“innagoo xaq laynagaga dhigay”** Ilaah wuxuu xaq ka dhigay rumaystayaasha Masiixa. Waxay tani u dhigantaa (aayadaha 1-2) xagga Giriigga. Waxa jira wakhti taxane ah oo ka muuqan kara aayadaha 1-11: (1) aayadaha 1-5, khibradda hadda aan u leenahay nimcada; (2) aayadaha 6-8, shaqada Masiixu innaga daraaddeen u dhammays tiray; iyo (3) aayadaha 9-11, rajadeenna mustaqbalka ee ku saabsan badbaada.

Marka aan eegno Axdiga Hore iyo erayada “xaq la inagaga dhigay” (*dikaioō*) waxa ay ahayd “lagu riday jidka toosan.” Waxaana tusaale ahaan loogu adeegsaday Ilaah laftiisa. Eeg mawduuca gaarka ah ee xaqnimada 1:17. Ilaah dabeecaddiisa quduusnimadu waxa weeyi heerka keliya ee xukunka (LXX Laawiyiintii 24:22; iyo fiqi ahaan Matayos 5:48). Dhimashada Ciise Masiix aawadeed ayaa Masiixiyiintu ku helaysaan xaqnimada iyo hor istaagista Ilaah (eeg mawduuca gaarka ah ee 5:2). Tani maaha ujeedadeedu Masiixiyiinta oo denbi laawayeel ah, laakiin waxa jira taas beddelkeeda wax lagu bixiyay (2 Korintos 5:21). Oo Masiixiyiintana waa la cafiyay(aayadaha 9,10).

▣ **“laynagaga dhigay rumaysad”** Rumaysadku waa gacanta aqbalaysa hadiyadda Ilaah (aayadda 2; Rooma 4:1). Rumaysadku muhiimmadda ma saaro derajada qorka (Matayos 17:20), laakiise wuxuu muhiimmadda siiyaa dabeecadda iyo ballan qaadyada Ilaah (Efesos 2:8-9). Erayga “rumaysad” asal ahaan waxa lagu tilmaami jiray xasilloonida amaba deganaanshaha. Haddaba rumaysadkeennu maaha mid muhiimmadda siinaya kalsooni darradeena, laakiinse wuxuu siinayaa muhiimmadda Ilaah. eeg mawduuca gaarka ah 4:5.

▣ **“nabad baynu xagga Ilaah ku haysannaa”** qoraalkani xagga Giriigga mid ka noqanaya (*echōmen*) amaba falkiisa jooga ee shaqaynayaa waa (*echomen*). Waxa naxwe ahaan ay isku mid noqon karaan aayadaha 1,2 iyo 3. Waxay u muuqataa qoraal gacmeedyada hore ee Giriiggu inay taageerayaan (MSS N, x, A, B, C, D). Markaas sidan loo tarjumo waxay noqonaysaa “aan xidhiidhinno nabadda aan haysano.” Haddiise loo tarjumo kan kale waxay noqonaysaa “waxaan haysanaa nabad”. Waxay haddaba aayadaha 1-11 tilmaamayaan waxa ay haystaan Masiixiyiintu ee ay ku heleen Masiixa aawadiis, sidaasi darteedna falku wuxuu noqonayaa mid jooga oo ku shaqaynaya “waxaan haysanaa nabad.” Haddaba UBS<sup>4</sup> ku wuxuu ku qaadanaayaa ikhtiyaarkan “A” iyadoo lagu qiimaynayo (hubaal).

Kuwo badan oo ka mida qoraal gacmeedyadeenna Giriigga ah waxa soo saaray hal qof oo akhrinaya qoraalka iyo kuwo badan oo nuqullo ka samaynaya. Haddaba, erayada sida isku midka ah loogu dhawaaqay badanaa waa lagu wareerayaa, halkanina waa meesha qoraalka iyo mararka qaar qaabka loo qoray iyo erayada qoraagu gacan uuga gaysan karaan go’aan qaadashada fudud ee tarjumaadda.

▣ **“nabad”** eeg mawduucan gaarka ah:

#### **MAWDUUC GAAR AH: NABAD**

Eraygan macnihiisa Giriiggu asal ahaan wuxuu ahaa “dibu hagaajinta wixii xumaaday”(Yooxanaa 14:27; 16:33; Filiboy 4:7). Haddaba waxa jira saddex siyaabood oo Axdiga Cusubi uga hadlyo nabadda:

1. Iyadoo tilmaamaysa nabaddeena aan Ilaah kula haysano Ciise Masiix aawadiis (Kolosay 1:20).
2. Inaga oo haysanna xaqnimada Ilaah (Yooxanaa 14:27; 16:33; Filiboy 4:7).
3. In Ilaah inagu mideeyay jidhka Masiixa Yuhuud iyo kuwo aan Yuhuud ahayn intaba (Efesos 2:14-17; Kolosay 3:15). Marka aan haddaba haysano nabadda Ilaah, waa in dadka kalena aan nabad la lahaano!

New Man iyo Nida, oo ahaa tarjumayaasha *Handbook on Paul’s Letter* una tarjumay luqadda Roomaanka ayaa p.92, waxa uu “nabadda” kaga bixinayaa faallo wanaagsan:

“Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba, erayga nabad waxa uu leeyahay macnayaal kala geddisan. Aasaas ahaanna waxay tibaaxaysaa gebi ahaanba wanaagga uu qofku leeyahay; waxa xitaa dhaqan ahaan ay noqotay salaanta dadka Yuhuudda ah. waxa ay yeelan kartaa macno ay Yuhuuddu u adeegsadeen tilmaamista badbaadada Masiixa. Haddaba, xaqiiqadan aawadeed, waxa jirta marar loo adeegsaday ‘iyadoo xidhiidh saxa lala yeesho Ilaah.’ eraygani markaa halkan wuxuu uga muuqadaa in loo adeegsaday tilmaamista xidhiidhka aadanaha iyo Ilaah, taasi oo ku salaysan Ilaah oo shakhsi ahaantiisa xaqnimada u siiyay aadanaha”(p. 92).

▣ **“xagga Ilaah ku haysannaa Rabbigeenna Ciise Masiix;”** Ciise waa kan keenaya nabadda lala yeelan karo Ilaah. Ciise waa jidka keliya ee lagu heli karo nabadda Ilaah (Yooxanaa 10:7-8; 14:6; Falimaha Rasuullada 4:12; 1 Timoteyos 2:5). Erayada magaca Ciise Masiix wax ku saabsan eeg Mawduuca gaarka ah 1:4.

**5:2 “kan xaggiisa aynu rumaysad ku galnay”** waxay ka hadlaysaa fal tegay kaasi oo hadda natiijadiisii la haysto. Erayga “galnay” ayaa waxa uu yahay gelitaan amaba oggolaansho (*prosagōge* Efesos 2:18; 3:12). Waxa tusaale ahaan loo adeegsan karaa (1) isbarista shakhsi ahaaneed amaba (2) iyadoo nabad gelyo lagu soo gaadho dakadda marka badda laga yimaaddo.

Cibaaradan waxa laga dhex heli karaa qoraallada Girriigga, iyadoo qoraaladii hore qaarkoodna ay ku dareen “rumaysad”. Si kastaba ha ahaatee culimadaasi waxay raaceen is barbar dhigga 5:1 iyo 4:16,19 iyo 20.

▣ **“nimcadaan”** eraygan (*charis*) waxa loogala jeeda jacaylka iyo naxariista aanay aadanuhu mutaysan (Efesos 2:4-9). Waxaana si cad looga araky dhimashada Masiixu u dhintay beddelka aadanaha denbiga miidhan ah (aayadda 8).

▣ **“aynu dhex taagan nahay”** fahan aan waan dhex taagannahay oo waanu sii wadi doonnaa dhex taagnaanta nimcadaas. Waxa ay ka tarjumaysaa Masiixiyiintu meesha ay ka taagan yihiin Masiixa, iyo sida ay ugu heellan yihiin rumaysadkooda (1 Korintos 15:1) iyo doonista madaxa bannaan ee aadanaha (Efesos 6:11,13,14).

#### **MAWDUUC GAAR AHI: TAAGAN**

Eraygan ayaa waxa Axdiga Cusub dhexdiisa loogu adeegsaday siyaabo fiqi ahaaneed oo dhowra:

1. Aasaasitaan
  - a. Sharciga Axdiga Hore, Rooma 3:31
  - b. Xaqnimada shaqsi ahaaneed ee qof leeyahay, Rooma 10:3
  - c. Axdiga cusub, Cibraaniyada 10:9
  - d. Xaqiiqayn, 2 Korintos 13:1
  - e. Runta Ilaah, 2 Timoteyos 2:19
2. In wax la diido ruuxi ahaan
  - a. Shaydaanka, Efesos 6:11
  - b. Maalinta xukunka, Muujintii 6:17
3. Lataagnaanta runta
  - a. Tusaalaha ciidanka oo kale Efesos 6:14
  - b. Tusaalaha bulshada, Rooma 14:4
4. Ku taagnida runta, Yooxanaa 8:44
5. Ku taagnida nimcada
  - a. Rooma 5:2
  - b. 1 Korintos 15:1
  - c. 1 Butros 5:12
6. Ku taagnida rumaysadka
  - a. Rooma 11:20
  - b. 1 Korintos 7:37
  - c. 1 Korintos 15:1
  - d. 2 Korintos 1:24
7. ku taagnida isla weynida, 1 Korintos 10:12

Waxay soo ban dhigaysaa axdiga nimcada iyo naxariista Ilaaha awoodda leh iyo xaqiiqada rumaystayaasha oo u bahaan inay kaga jawaaba celiyaan arrintaas rumaysad. Labaduba waa kitaabi oo waa inay noqdaan kuwo wada socda!

▣ **“oo waxaynu ku faraxnaa”** qaabkan naxwe ahaan waxa loo fahmi karaa (1) wax wakhtigaas lagu dhex jiro “ku faraxnaa” amaba (2) wax jooga oo dalabna ku jiro “aan ku faraxno.” Culimadu waxay haddaba way ku qaybsanyihiin labadan siyaaboodba. Haddii midi qaato “haysanaa” sida aayadda 1 ka muuqata, waa in faserku markaas uu sidaasoo kale ahaado aayadda 3.

Asalka erayga “farxid” waa “faanitaan” (NRSV, JB). Eeg mawduuca gaarka ah ee 2:17. Rumaystayaashu kuma farxaan nafhooda (3:27), laakiinse waxay ku farxaan waxa Rabbigu iyaga u qabtay (Yeremyaah 9:23-24). Haddaba isla asal ahaan xagga Giriigta waxay isku mida oo lagusoo celceliyay aayadaha 3 iyo 11.

▣ **“rajada”** Bawlos eraygan marar badan ayuu ku adeegsaday meelo kala gedisan, laakiin waxay wada leeyihiin xidhiidh ka dhexeeya. Eeg Mawduuca gaarka ah ee 4:18. Waxay hadiyo goor la xidhiidhaa rumaysadka Masiixiyiinta, waxaana lagu sheegi karaa ammaanta, nolosha weligeed ah, badbaadada, Imaatinka Labaad ee Masiixa, iwm. Waxay xitaala xidhiidhaa “rumaysadka” iyo “jacaylka” (1 Korintos 13:13; Galatiya 5:5-6; Efesos 4:2-5; 1 Tesaloniika 1:3; 5:8). Meelaha Bawlos ku adeegsaday eraygan ayaa waxa ka mida kuwan:

1. Imaanshiyaha Labaad ee Masiixa, Galatiya 5:5; Efesos 1:18; Tiitos 2:13
2. Ciise waa rajadeenna, 1 Timoteyos 1:1
3. Rumaystuhu waa inuu Ilaah ku xidhnaado, Kolosay 1:22-23; 1 Tesaloniika 2:19
4. Rajadu waa jannada, Kolosay 1:5
5. Badbaadada kama danbaysta ah, 1 Tesaloniika 4:13
6. Ammaanta Ilaah, Rooma 5:2; 2 Korintos 3:12; Kolosay 1:27
7. Ballan qaadka badbaadada, 1 Tesaloniika 5:8-9
8. Nolosha weligeed ah, Tiitos 1:2; 3:7
9. Natiijooyinka hana qaadnimada Masiixiga, Rooma 5:2-5
10. Kafaaro gudka dhammaanba abuurka, Rooma 8:20-22
11. Magac Ilaah leeyahay, Rooma 15L13
12. Aqbalitaanka, Rooma 8:23-25
13. Axdiga Hore oo tilmaamaya Axdiga Cusub rumaystayaashiisa, Rooma 15:4.

▣ **“ammaanta Ilaah.”** ereyadan amaba weedhan waxa Adiga Hore dhexdiisa loogu adeegsaday joogitaanka shakhsi ahaaneed ee Ilaah. waxay tani markaas tilmaamaysaa rumaystaha oo Ilaah hortiisa taagan, isagoo markaas leh rumaysad iyo xaqnimo uu ku helay Ciise Masiix maalintaa Sara Kicista (2 Korintos 5:21). Xitaa waxa loo adeegsadaa eray fiqi ahaaneed oo ah “ammaanan” (aayadaha 9-10; 8:30). Masiixiyiintu waxay noloshoodu noqon doontaa tusaalaha Masiixa oo kale (1 Yooxanaa 3:2; 2 Butros 1:4). Eeg mawduuca gaarka ah: Ammaanta 3:23.

### 5:3

**NASB** “Oo tan oo keliya ma aha, laakiinse”  
**NKJV** “Oo taas oo keliya maaha, laakiinse”  
**NRSV** “oo taas oo keliya maaha, laakiinse”  
**TEV** “iska dhaafoo”  
**NJB** “taasoo keliya maaha”

Marar badan ayuu Bawlos ereyadan adeegsanayaa (5:3; 11; 8:23; 9:10 iyo 2 Korintos 8:19).

▣

**NASB** “waxaynu ku faraxnaa dhibaatooyinkeenna”  
**NKJV** “waxaynu ammaan ku helnaa dhibaatooyinkeenna”  
**NRSV** “waxaynu ku faannaa siliceenna”  
**TEV** “waxaynu ku faannaa dhibaatooyinkeenna”  
**NJB** “aan sidoo kale ku faraxno dhibaatooyinkeenna”

Haddii dunidu nacdo Ciise Masiix, sidoo kalena waxay nici doonaan kuwa isaga raaca (Matayos 10:22; 24:9; Yooxanaa 15:18-21). Ciise wuxuu ahaa mid sida aadanaha u hadla oo arkay waxyaalihii uu ku silcay (Cibraaniyada 5:8). Haddaba silica iyo dhibaataada waay soo saartaa xaqnimada, taasina waa qorshaha Ilaah ee ku waajahan Masiixi amaba rumayste kasta (8:17-19; Falimaha Rasuullada 14:22; Yacquub 1:2-4; 1 Butros 4:12-19).

▣ **“innagoo og”** waa falka jooga ee “oida” waxaanay ku shaqaynasaa qaabka falka hadda dhacaya. Rumaystayaasha waxay fahmayaan xaqiiqada iyo runta injiilka markasta oo ay arkaan silica iyo dhibaatooyinkana, waxaanay ku faraxaan kalsoonida iyo isku hallaynta ay Ilaah ka qaaan xitaa iyadoo la cadaadinayo oo la silcinayo (Filiboy 4:4; 1 Tesaloniika 5:16,18).

**5:3 “dhibaataadu”** eeg mawduucan gaarka ah.

## MAWDUUC GAAR AH: DHIBAATADA

Adeegsida Bawlos ee eraygan (*thlipsis*) iyo ka Yooxanaa:

### I. Adeegsiga Bawlos (kaasoo ka tarjumaya adeegsigii Ciise)

#### A. Dhibaatooyin, silic, sharka ibliiska iyo dunidan leexatay

1. Matayos 13:21
2. Rooma 5:3
3. 1 Korintos 7:28
4. 2 Korintos 7:4
5. Efesos 3:13

#### B. Dhibaatooyin, silic, sharka sababay rumaysad darrada

1. Rooma 5:3; 8:35; 12:12
2. 2 Korintos 1:4,8; 6:4; 7:4; 8:2,13
3. Efesos 3:13
4. Filiboy 4:14
5. 1 Tesaloniika 1:6
6. 2 Tesaloniika 1:4

#### C. Dhibaatooyin, silic, sharka iyo dhammaadka wakhtiga

1. Matayos 24:21,29
2. Markos 13:19,24
3. 2 Tesaloniika 1:6-9

### II. Adeegsiga Yooxanaa

#### A. Yooxanaa wuxuu samaynayaa farqi gaara oo u dhexeeya *thlipsis* iyo *orgē* amaba *thumos* (cadhada) Muujinta dhexdeeda.

1. *thlipsis* – Muujintii 1:9; 2:9-10,22; 7:14
2. *orgē* - Muujintii 6:16-17; 11:18; 16:19; 19:15
3. *thumos* – Muujintii 12:12; 14:8,10,19; 15:2,7; 16:1; 18:3

#### B. Sidoo kale Yooxanaa eraygan wuxuu ku dhex adeegsnayaa Injiilka isaga oo tilmaamaya dhibaataata soo food saari doonta Masiixiyiinta wakhti walba Yooxanaa 16:33.

**5:3,4 “dulqaadashaduna”** eraygan macnihiisu wuxuu koobsanayaa “mutadawacnimo,” “firfircooni,” “samir.” Waxay ahayd midda la xidhiidha samirka iyo dulqaadashada dadka iyo sidoo kale dhacdooyinka. Eeg mawduuca gaarka ah 8:25.

**5:4**

**NASB “aqoon dheer”**

**NKJV, NRSV “aqoon”**

**TEV “Aqoonta Ilaah”**

**NJB “aqoon la caddeeyay”**

Marka aan eegno LXX Bilowgii 23:16; 1 Boqorradii 10:18; Taariikhdii Kowaad:28:18 erayadan waxa loo adeegsaday tijaabinta qofka iyo xaqiiqanimada (2 Korintos 2:9; 8:2; 9:13; 13:3; Filiboy 2:22; 2 Timoteyos 2:15; Yacquub 1:12). Tijaabinta Ilaah haddaba hadiyo goor waxa weeyi xoogayn (Cibraaniyada 12:10-11)! Eeg mawduuca gaarka ah ee ku saabsan tijaabinta 2:19.

**5:5 “maxaa yeelay, jacaylka Ilaah baa qalbiyadeenna ku dhex shubmay”** macneheedu waxa weeyi jacaylka Ilaah wuxuu ku dhex shubmay qalbiyadeenna oo waanu kusii dhex shubi midaanoo. Falkan waxaa haddaba loo adeegsaday Ruuxa Quduuska ah (Falimaha Rasuullada 2:17,18,33; 10:45 iyo Tiitos 3:6), taasoo ka muuqan karta Yoo’eel 2:28-29. “jacaylka Ilaah” naxwe ahaan waxa lagu tilmaami karaa (1) jacaylkeenna aan u qabno Ilaah; amaba (2) Jacaylka Ilaah innaga inoo qabo (2 Korintos 5:14). Arrintan labaad ayaa haddaba noqon karta ta ay xanbaarsantahay macnaha aayaddu.

▣ **“Ruuxa Qoduuska ah oo layna siiyey”** waxay tilmaamaysaa Ilaah waxyaabaha uu inoogu deeqay, taasi oo la odhan karo rumaystayaasha intaa wax ka badan ugama baahna Ruuxa, waayo waxa weeyi inay haystaan Ruuxa iyo in aanay haysanin oo aanay Masiixiyiin ahayn (8:9). Siinta Ruuxa ayaa haddaba ahaa callamadda Axdiga Cusub (Yoo’eel 2:28-29), Axdiga Cusub (Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:22-32).

▣ Joogitaanka Saddexnimada ee baaragaraafkan

1. Ilaah, aayadaha 1,2,5,8,10
2. Ciise, aayadaha 1,6,8,9,10
3. Ruuxa, aayadda 5.

Eeg Mawduuca gaarka ah ee Saddex midnimada 8:11.

#### **AAAYADAHA 5:6-11**

<sup>6</sup>Waayo, innagoo weli itaal daran ayuu Masiixu wakhti qumman u dhintay kuwa aan cibaadada lahayn. <sup>7</sup>Mar dhif ah mid waa u dhintaa nin xaq ah, mindhaase qof waa ku dhici lahaa inuu nin wanaagsan u dhinto. <sup>8</sup>laakiinse Masiixu waa inoo dhintay intaynu weli dembiilayaal ahayn, oo sidaasuu Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey. <sup>9</sup>Haddaba haddaynu haatan dhiiggiisa xaq ku noqonnay, de si ka badanna isagaynu kaga badbaadi doonnaa cadhada Ilaah. <sup>10</sup>Waayo, haddii, intaynu col la ahayn, Ilaah inagula heshiiyey dhimashadii Wiilkiisa, de si ka badanna, innagoo la heshiis ah, ayaynu ku badbaadi doonnaa noloshiisa, <sup>11</sup>oo taas oo keliyana ma ahaane, weliba waxaynu ku faraxnaa Ilaah xagga Rabbigeenna Ciise Masiix, kan aynu haatan heshiiska ku helnay.

**5:6**

**NASB** “innagoo weli itaal daran”  
**NKJV** “markii aan ahayn kuwo itaal daran”  
**NRSV** “inagoo ahayn kuwo weli itaal daran”  
**TEV** “inagoo markii aan ahayn kuwo itaal daran”  
**NJB** “markii aan weli taag darnayn”

Waxay tilmaamaysaa aadanaha leexday iyagoo ah kuwo bilaa awooda xagga denbiga. Aayadaha 6 iyo 8 ayaa fahan ahaan waxa ay yihiin kuwo isku mida.

▣

**NASB, NRSV** “wakhti qumman”  
**NKJV** “wakhtigii ku habboonaa”  
**TEV** “wakhtigii Ilaah doortay”  
**JB** “wakhtigiisii uu doortay”

Taariikh ahaan arrintani waxay tilmaami kartaa (1) nabaddii Roomaanka ee suurto gelinaysa socdaalka xorta ah; (2) luqaddii Giriigta ee suurto gelinaysay dhaqammo badani inay wada xidhiidhaan; iyo (3) dhammaadkii ilaahyadii ay samaysan jireen Giriigta iyo Roomaanku (Markos 1:15; Galatiya 4:4; Efesos 1:10; Tiitos 1:3). Fiqi ahaan soo qaadashada jidhka bani aadamku waxay ahayd mid hore u qorshaysnayd (Luukos 22:22; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; Efesos 1:11).

**5:6,8,10 “u dhintay kuwa aan cibaadada lahayn”** nolosha iyo dhimashada Ciise Masiix ayaa ahayd dhacdo lagu midaysan yahay. “Ciise wuxuu u dhintay denbi aanu lahayn oo inagana waxa la inagu lahaa qaan aynaan gudi karaynin” (Galatiya 3:13; 1 Yooxanaa 4:10).

Dhimashada Masiixu waxay Bawlos u ahayd wax sheegitaankeedu caadi u yahay Bawlos oo waxay marwalba ka dhex muuqataa qoraalladiisa. Meelo badan oo kala gedisan ayuu dhimashada Masiixa ee denbiyadeenna beddelka u noqotay ku sheegayaa:

1. “dhiigga” (3:25; 5:9; 1 Korintos 11:25,27; Efesos 1:7; 2:13; Kolosay 1:20).
2. “naftiisa siiyay” (Efesos 5:2,25)
3. “loo bixiyay” (Rooma 4:25; 8:32).
4. “sadaqayn” (1 Korintos 5:7)

5. “dhintay” (Rooma 5:6; 8:34; 14:9,15; 1 korintos 8:11; 15:3; 2 Korintos 5:15; Galatiya 5:21; 1 Tesaloniika 4:14; 5:10).
6. “isku tallaabta” (1 Korintos 1:17-18; Galatiya 5:11; 6:12-14; Efesos 2:16; Filiboy 2:8; Kolosay 1:20; 2:14).
7. “qodbitaan” (1 Korintos 1:23; 2:2; 2 Korintos 13:4; Galatiya 3:1).

Huper ma waxay tahay midda looga jeedo macnaha

1. Metelid “innaga beddelkeenna”
2. Beddel “meesheenna amma beddelkeenna”

Caadi macnaha asaasiga ah ee *huper* waxa weeyi “inaga daraaddeen” (Louw iyo Nida). Waxaanay sheegaysaa faa’ido halkaas ka imanaysa una tegaysa dadka qaar (*The New International dictionary of New Testament Theology*, vol. 3, p. 1196). Fiqi ahaan haddaba waxay tilmaamaysaa beddelka kafaara gudka ah (Markos 10:45; Yooxanaa 11:50; 18:14; 2 Korintos 5:14; 1 Timoteyos 2:6). M. J. Harris (NIDOTTE. Vol, 3, p. 1197) ayaa wuxuu leeyahay, “laakiin muxuu Bawlos u odhan waayay Masiixu wuxuu u dhintay *anti hēmōn*” (1 Timoteyos 2:6) ? dabcan maxaa yeelay *huper*, lama mid aha *anti* waxay si toosa u sheegaysaa beddelka iyo metilitaanka.”

M. R. Vincent, *Word Studies*, vol. 2, wuxuu leeyahay:

“ma cadda haddii *huper* oo ah beddelka, ay la mid tahay *anti*, oo ah halkii. Macnihii asalka ahaa ee qorayaashu waxay tusaale u yihiin macnayaal isku dhow...si kastaba ha ahaatee, macnaha aayadani, waxa caddaan ah inaan lagu sheegi karin iyadoon tilmaamayn ujeeddada beddelitaanka. Badanaa waxa la isku waafaqsanyahay in inaga daraaddeen iyo beddelkeenu ay yihiin kuwo tilmaamaya ujeeddada. Xaqiiqadu waxay markaas tahay in su’aalaha la xidhiidhi kara ee tilmaamaya dhimashada Masiixa ay ka mid yihiin, Galatiya 3:13; Rooma 14:15; 1 Butros 3:18, *huper* waxay haddaba tahay midda sida tooska ah u sheegaysa macno ahaan inuu Masiixu u dhintay innaga beddelkeenna”(p. 692).

**5:7** aayaddani waxay tusinaysaa jacaylka aadanaha halka aayadda 8 ay ka tusinayso jacaylka Ilaah!



**NASB, NKJV, TEV**

**“nin xaq ah”**

**NRSV**

**“qof xaq ah”**

**JB**

**“nin wanaagsan”**

Waxay la mid tahay sidii lagu tilmaamay Nuux iyo Ayuub oo kale, maxaa yeelay waxay ahaayeen niman xaqnimo lahaa. Waxay raaceen oo fuliyeen shuruudihii xaqnimada laga rabay wakhtigoodaas, laakiinse ma tilmaamayso inay ahaayeen kuwo bilaa denbi ah. eeg mawduuca gaarka ah 1:17.

**5:8 “Ilaah jacaylkiisii inoogu muujiyey”** Aabuhu wuxuu soo diray Wiilka (8:3,32; 2 Korintos 5:19). Ilaah jacaylkiisu maaha mid ku dhisan caadifad, laakiin waa mid leh wax qabad (Yooxanaa 3:16; 1 Yooxanaa 4:10) oo joogto ah marwalba.

**5:9 “si ka badanna”** waxa weeyi mid kamida qaabka Bawlos uu wax u sheegi jiray (aayadaha 10,15,17). Haddii haddaba, Ilaah uu sidaasoo dhan u jeclaaday rumaystayaasha, iyagoo denbiilayaal ah, intee intaas kasii badan ayuu jecelyahay iyaga maadaama oo ay yihiin carruurtiisa (5:10; 8:22).

▣ **“xaq ku noqonnay”** waa xaqnimada uu dhammays tiray Ilaah, oo Bawlosna waxa uu kusoo celcelinayaa xaqiiqada ay xanbaarsantahay aayadda 1. Sidoo kale eeg is barbardhigga u dhexeeya “xaq ku noqday” iyo “inagula heshiiyay” (aayadaha 10-11).

▣ **“dhiiggiisa”** waxay tahay midda loogu noqon karo dhimashada Masiixa ee beddelka denbiyadeenna (3:5; Markos 10:45; 2 Korintos 5:21). Arrintan haddaba ah nolol bilaa denbi ah oo u dhimanaysa mid denbiile ah, ayaa waxa ay dib ugu laabanaysaa Laawiyiintii 1-7, waxa kaloo suurto gal ah Baxniintii 12, fiqi ahaanna waxa lagu dabbaqay Ciise sida aan ka arki karno Ishacyaah 53:4-6. Waxa si cad arrintan looga dhex arki karaa Kitaabka Cibraaniyada oo meelaha qaar iska barbar dhigaya Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub.

▣ **“kaga badbaadi donnaa”** waxay tilmaamaysaa badbaadada aan xadka lahayn, ee loogu magac daray “ammaannaanta”(aayadda 3; 8:30; 1 Yooxanaa 3:2).

Axdiga Cusubi badbaadada wuxuu ku sheegayaa weeho fal ahaaneed:

1. Fal la dhammays tiray, (Falimaha Rasuullada 15:11; Rooma 8:24; 2 Timoteyos 1:9; Tiitos 3:5).
2. Fal tegay oo natiijadiisu tahay wax jooga, Efesos 2:5,8.
3. Wax socda, 1 Korintos 1:18; 15:2; 2 Korintos 2:15; 1 Tesaloniika 4:14; 1 Butros 3:21.
4. Mustaqbalka wax la xidhiidha, Rooma 5:9.10; 10:9.

Eeg Mawduuca gaarka ah 10:13. Badbaadadu waxay ku bilaabantaa go'aanka ugu horreeya, laakiinse waxay samaysaa Horumar iyo xidhiidh. Waxay haddaba tani koobsanaysaa fiqi ahaan saddex waxyaalood: xaqnimada, taasoo macneheedu yahay “ka korqaadista ciqaabka denbiga”; daahirinta oo macneheedu yahay “ka daahirinta awoodda denbiga”; iyo ammaanaanta, taasoo macneheedu yahay “laga korqaaday joogitaanka denbiga.” Xaqnimada iyo ka daahirinta denbiga labaduba waxa weeyi fal Ilaah sameeyay oo qofka Masiixiga ahna lagu siiyay rumaysadkiisa uu rumaysto Masiixa.

▣ **“cadhada Ilaah”** Kitaabka Quduuska ahi wuxuu inoo sheegayaa, jacaylka Ilaah ee aadka u wayn isla markaasnay aynaan mutaysanin, sidoo kalena wuxuu inoo sheegayaa inuu Ilaah ka soo horjeedno denbiga iyo caasinimada. Ilaah waxa uu inoogu deeqay jidka badbaadada iyo cafiska aan ku heli karno oo ah Masiixa, laakiin kuwa iska diida waxa ay hoos iman doonaan cadhada Ilaah (1:18-3:20). Run ahaantii waa wax aad u daran in lagu dhaco gacanta Ilaah ee cadhaysan (Cibraaniyada 10:31).

**5:10 “haddii”** waa hadal shuruudi ku xidhantahay oo qoraagu rabo inuu ku caddeeyo ujeedadiisa. Aadanaha iyo Ilaah abuurkiisii ayaa waxay noqdeen cadaw! Ninka (Bilowgii 3:5) iyo Shaydaanka (Ishacyaah 14:14; Yexesqeel 28:2,12-17) ayaa waxay haystaan dhibaato isku mida, waxaanay rabaan madax bannaani, inay wax maamulaan iyo inay noqdaan ilaahyo.

▣ **“intaynu col la ahayn, Ilaah inagula heshiiyey”** Ilaah wuxuu inagula heshiiyay oo denbiyadeennii ku bedelay xaqnimada Ciise Masiix isago ku dul dhintay isku tallaabta (Ishacyaah 53:4-6). Nabaddiina waa lasoo celiyay (aayadda 1)!

▣ **“dhimashadii Wiilkiisa”** cafiska uu injiilku inoogu deeqayo waxa aasaas u ah (1) Jacaylka Ilaah; (2) shaqadii Masiixa; (3) ilhaaminta Ruuxa, iyo (4) rumaysadka iyo ka jawaab celinta shakhsi ahaaneed. Haddaba ma jirto si kale oo lagu heli karo xaqnimada Ilaah (Yooxanaa 14:6). Damaanad qaadka badbaadadu waa mid ku jira Ilaah saddexnimada isku muujiyay, mana ah shaqo aadanuhu ay qabteen! Camalka aadanaha ee rumaysadka ka danbeeyaa wuxuu caddayn u yahay badbaadada xorta ah (Yacquub iyo 1 Yooxanaa).

▣ **“ku badbaadi doonnaa”** Axdiga Cusubi badbaada wuxuu uga hadlayaa sidii waxy tegay, wax jooga iyo wax mustaqbalka dhici doona. Halkan haddaba waxa uu ku tilmaamayaa badbaadadeenna aan xadka lahayn ee dhammayska tiran, isla markaasna ku imanaysa Imaatinka Labaad ee Masiixa. Eeg aayadda 9 iyo mawduuca gaarka ah ee 10:13.

▣ **“noloshiisa”** erayga nolol luqadda Giriigga waxa lagu yidhaahdaa *zoa*, qoraallada Yooxanaa ayaa haddaba hadiyo goor waxa ay tilmaamaysaa, nolosha sara kicista, nolosha weligeed ah, amaba nolosha boqortooyada. Sidoo kale Bawlos ayaa isna qaabkan fiqi ahaaneed u adeegsaday. Noloshu waxay tilmaami kartaa (1) sarakicista Ciise (8:34; 1 Korintos 15); (2) shaqada Masiixa (8:34; Cibraaniyada 7:25; 1 Yooxanaa 2:1); amaba (3) Ruuxa inoo muujinaysa Masiixa (Rooma 8:29; Galatiya 4:19). Bawlos wuxuu tilmaamay noloshii Masiixu ku noolaa dhulka iyo dhimashadiisii iyadoo noloshiisa qiimaha badnaydna tahay waxyaalaha aasaaska u ah, dib ula heshiinteenna Ilaah.

**5:11 “oo taas oo keliyana ma ahaane”** eeg mawduuca gaarka ah ee aayadda 3.

▣ **“weliba waxaynu ku faraxnaa”** eeg mawduuca gaarka ah 5:2. Waa markii saddexaad ee qoraalkan dhexdiisa lagu adeegsaday erayga “farxad”

1. ku farxitaanka rajada ammaanta, aayadda 2
2. ku farxitaanka silica iyo dhibaatooyinka, aayadda 3
3. ku farxitaanka heshiiska, aayadda 11.

Ku farxitaanka amaba ku faanitaanka aan loo baahnayn waxa uu ka muuqanayaa 2:17 iyo 23!

▣ “aynu haatan heshiiska ku helnay” tani waa fal la dhammays tiray. Sidoo kalena heshiishka rumaystayaasha waxa lagaga hadlay aayadda 10 iyo 2 Korintos 5:18-21; Efesos 2:16-22; Kolosay 1:19-23. Haddaba qoraalkan dhexdiisa, erayga “heshiis” wuxuu fiqi ahaan la siman yahay “xaq kaga dhigista.”

#### **AAAYADAHHA 5:12-14**

<sup>12</sup>Haddaba sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay, dhimashaduna dembiga ugu timid. sidaasaa dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan, waayo, waa la wada dembaabay; <sup>13</sup>waayo, dembigu duniduu ku jiray intaan sharcigu iman, laakiin dembi lama tiriyo markii aan sharci jirin. <sup>14</sup>Habase ahaatee waagii Aadan ilaa Muuse dhimashadu waxay u talisay xataa kuwii aan u dembaabin sidii xadgudubkii Aadan kan ah masaalka kan iman lahaa.

**5:12 “Haddaba”** kitaabka Rooma waxa jira meelo badan oo lagu dhex adeegsaday “haddaba”(5:1; 8:1; 12:1). Waxa haddaba ay noqon kartaa inay tilmaamayso doodda Bawlos gebi ahaanba. Waxa hubaala haddaba, in midi la xidhiidho Bilowgii iyo haddabada kale oo iyana u noqonaysa Rooma 1:18-32.

▣ “sida dembigu nin keliya dunida ugu soo galay,” Aadan oo keenay dhimashada (1 Korintos 15:22). Sidoo kale dembigu wuxuu dhex yimid malaa’igaha (Bilowgii 3 iyo Muujintii 127-9). Ma cadda meesha uu ka dhacay iyo sida uu ku dhacay (Ishacyaah 14: 12-27; Yexesqeel 28:12-19; Ayuub 4:18; Matayos 25:41; Luukos 10:18; Yooxanaa 12:31; Muujintii 12:7-9).

Dembiga Aadan waxa uu koobsanayaa labo dhinac (1) Addeecis la’aanta amarada gaarka ah (Bilowgii 2:16-17), iyo (2) isla waynaan (Bilowgii 3:5-6). Fahan ahaan waxa weeyi dembigii si caddaan ah Bawlos uga leexiyay fikirkii Rabbaaniyiinta, maxaa yeelay rabbaaniyiintu may u fiirsanin Bilowgii 3; waxaanay rumaysnayeen inuu qofku haysto labo waxyaalood (*yetzers*). Waxa jirtay odhaah caan ka dhex ahayd rabbaaniyiinta “qof walba qalbigiisa waxa ku jirta laba ey oo midi cadyahay midina madawyahay. Ka aad aad wax u siiso ayaana marwalba noqonaya ka wayn.” Haddaba, Bawlos waxa uu arkay in uu jiro denbi u dhexeeya Ilaaha quduuska ah iyo dadkiisa uu abuurtay. Bawlos muu ahayn aqoonyahan ku takhasusay fiqiga ku dhisan caqli galnimada (James Steward buuggiisa uu qoray ee *Man in Christ*). laakiin waxa uu tilmaamayaa dhowr waxyaalood oo ah dembiga asalkiisa (1) leexashadii Aadan, (2) jirraabadda shaydaanka, iyo (3) aadanaha oo dembigooda kusii socda.

Farqiga fiqi ahaaneed ee u dhexeeya Aadan iyo ciise ayaa wuxuu koobsan karaa labo waxyaalood oo suurto gal ah:

1. Aadan waxa uu ahaa shakhsiyad taariikheed
2. Ciise wuxuu ahaa aadane run ah.

Haddaba, xaqiiqada labadan waxyaaloodba waxay Kitaabka Quduuska ah ka dhigayaan inuu hor istaago waxbarista beenta ah. labada siyaabood ee loo tilmaamay Aadan iyo Ciise, waxa Kitaabka dhexdeiisa lagu sheegay kow iyo toban jeer:

▣ “dhimashaduna dembiga ugu timid” Kitaabku wuxuu sheegayaa saddex heer oo dhimashada ah (1) dhimashada ruux ahaaneed (Bilowgii 2:17; 3:1-7; Efesos 2:1); (2) dhimashada jidh ahaaneed (Bilowgii 5); iyo (3) dhimashada weligeed ah (Muujintii 2:11; 20:6,14; 21:8). Ta halkan lagaga hadlayaa haddaba waxay tahay, dhimashada ruux ahaaneed ee Aadan (Bilowgii 3:14-19) taasoo natiijadeedu noqotay dhimashada jidh ahaaneed ee cirqiga aadanaha (Bilowgii 5).

▣ “dhimashadiina u gaadhay dadka oo dhan” dhammaan aadanuha denbigoodu wuxuu la xidhiidhaa Aadan, oo waxay ka dhaxleen dembiga, sababtaas daraaddeedna qof waliba waxa uu doortaa inuu shakhsi ahana dembaabo. Kitaabku wuxuu haddaba sheegayaa, in dhammaan aadanuhu ay yihiin denbiilayaal, dembiga ay ka dhaxleen Aadan iyo kooda shakhsi ahaaneed (1 Boqorradii 8:46; 2 Korintos 6:36; Sabuurka 14:1-2; 130:3; 143:2; Maahmaahyadii 20:9; Wacdiyaha 7:20; Ishacyaah 9:17; 53:6; Rooma 3:9-18,23; 5:18; 11:32; Galatiya 3:22; 1 Yooxanaa 1:8-10).

Waxa la odhan karaa fahanka aayadaha (15-19) wuxuu sheegayaa, in fal keli ahi uu sababay dhimashada(Aadan) iyo in sidoo kale falna uu sababay nolosha (Ciise). Haddaba, aadanuhu waxay marwalba kusii socdaan inay dembaabaan amaba waxay doortaan Masiixa.

Tarjumaadda “maxaa yeelay” waa mid guud, laakiin macneheedu waa mid aanu caddayn. Bawlos wuxuu ku dhex adeegsaday *eph’ho* 2 Korintos 5:4; Filiboy 3:12; iyo 4:10, waana “maxaa yeelay.” Haddaba, qofkastaa



shakhsi ahaan wuxuu doortaa inuu dembaabo oo Ilaah ka horyimaaddo. Qaarkood waxay diidaan waxyiga gaarka ah, laakiin dhammaantood waxay ka simanyihiin diidmada waxyiga amaba muujinta dabiiciga ah (1:18-3:20).

**5:13-14** xaqiiqadan oo kale ayaa waxa lagu sheegay Rooma 4:15 iyo Falimaha Rasuullada 17:30. Ilaah waa caddaali, oo aadanuhu waxay masuul ka yihiin waxa u diyaarka ah. aayaddani haddaba, gaar ahaan waxay ka hadlaysaa waxyiga amaba muujinta gaarka ah (Axiga Hore, Ciise, Axdiga Cusub), balse maaha waxyiga dabiiciga ah (Sabuurka 19; Rooma 1:18-23; 2:11-16).

Ogaysiis in NKJV wuxuu u arkaa isbarbardhigga aayadda 12 mid ka soocan (aayadaha 13-17) marka la eego dhammaadkeeda 18-21.

**5:14**

**NASB, NKJV,**

**JB**

**NRSV**

**TEV**

**“dhimashadu waxay u talisay”**

**“dhimashadu waxay samaysay talin”**

**“dhimashada xukuntay”**

Dhimashadu waxay u talisay sida boqorka oo kale (aayadaha 17 iyo 21). Waxyaalaha ku saabsan dhimashada iyo denbiga ayaa waxay soconaysaa cutubkan ilaa cutubka 6. Haddaba, dhimashada caalamiga ahi waxay ka timid, denbiga caalamiga ah ee aadanaha. Aayadaha 17 iyo 21, ayaa waxa lagu tilmaamay nimcada oo talisay! Aadanuhu waxay haystaan doorashada (marka la eego Axdiga Hore): dhimashada amaba nolosha. Haddaba, yaa u taliya noloshaada?

▣ **“xataa kuwii aan u dembaabin sidii xadgudubkii Aadan”** Aadan waxa uu kasoo horjeestay amarkii Ilaah, oo xitaa Xaawa si isaga la mida umay denbaabin. Aadan ayaa waxay ka maqashay wax ku saabsan geedka, oo Ilaah si toosa ugamay maqlin. Haddaba, dadkii jiray lagasoo bilaabo Aadan ilaa Muuse, waxa saameeyay mucaaradnimadii Aadan! Iyagu may si gaara u jebinin amarka Ilaah, laakiin 1:18-32, taasi oo fahan ahaan ina tusinaysa, iftiinka Ilaah ee ay haysteen isla markaasna kasoo horjeesteen oo sidaas denbi ku galeen. Haddaba, Aadan denbigiisa waxa ka dhaxlay dhammaanba carruurtiisa.

▣

**NASB, NKJV, NRSV**

**TEV**

**JB**

**“kan ah masaalka kan iman lahaa”**

**“Aadan wuxuu tusaale u ahaa ka iman lahaa”**

**“Aadan wuxuu tusaaleeyay ka iman lahaa”**

Waxay tilmaamaysaa meelaha ay iska shabbahayeen Aadan iyo Masiixu (1 Korintos 15:21-22, 45-49; Filiboy 2:6-8). Labadooduba ugu horraynta waxay ka muuqanayaan, asalka cirqiga (1 Korintos 15:45-49). Aadan waa qofka keliya Axdig Cusubi, Axdiga Hore dhexdiisa ugu yeedhay “nooc”. Eeg mawduuca gaarka ah 6:17.

#### **AAYADHA 5:15-17**

<sup>15</sup>Hadiyaddu ma aha sida dembiga, waayo, haddii nin keliya dembigiis kuwa badanu u dhinteen, de in ka sii badan waxaa kuwa badan u badatay nimcada Ilaah iyo hadiyadda nin nimcadiis ku timid, kan ah Ciise Masiix. <sup>16</sup>Hadiyaddu ma aha sida mid qof dembaabay ku timid, waayo, mid xukunkiis wuxuu keenay ciqaab, laakiin hadiyaddu waxay dembiyo badan ugu timid inay xaq ka dhigto kuwo badan. <sup>17</sup>Haddii mid dembigiisa aawadiis ay dhimasho ku talisay midkaas aawadiis, de si ka badanna kuwa hela badnaanta nimcada iyo hadiyadda xaqnimada, noloshay ku dhex talin doonaan kii kale aawadiis kaas oo ah Ciise Masiix.

**5:15-19** waa dood socota oo adeegsanaysa erayo isku mid ah. NASB, NRSV, iyo JB waxay u tarjumayaan si isku xidhan. Xasuusnow waxa furaha u ah fasiraadda erayada qoraaga asalka ahi, waa macnaha amaba xaqiiqada uu xambaarsan yahay baaragaraafku. Ogaysiis erayga “badan” ee aayadaha 15 iyo 19, waxa la mid tahay “oo dhan” ee aayadaha 12, iyo 18. Waxay sidoo kale ka run sheegaysaa Ishacyaah 53:11-12 iyo aayadda 6.

**5:15 “Hadiyaddu”** waxa jira labo eray oo loo adeegsado “hadiyadda” marka la eego luqadda Giriigta, iyadoo halkan lagu adeegsaday. *Charisma*, waxa lagu dhex adeegsaday aayadaha 15,16 (6:23) iyo *doreal/dorama*, oo lagu dhex adeegsaday, aayadaha 15, 16, 17 (eeg ogaysiiska 3:24). Tani run ahaantii waa warka wanaagsan ee ku

saabsan badbaadada. Waa hadiyad ka timid Ilaah oo Masiixa lasoo mariyay (3:24; 6:23; Efesos 2:8,9), waxaanay u sugnaatay dhammaanba kuwa rumaysta Masiixa.

▣ **“haddii”** waa shuruud hor dhac u ah runta uu sheegi rabo qoraaga, isagoo markaasna sheegi raba ujeeddadiisa. Aadan denbigiisu wuxuu aadanaha oo dhan u sababay dhimashada. Waxay la mid tahay aayadda 17.

▣ **“badan”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 15:13

**5:16 “mid xukunkiis ....xaq ka dhigto”** labaduba waa erago lagu dhex adeegsaday Axdiga Hore dhexdiisa, oo ku sugnayd farriintii nebiyada. Bawlosna haddaba qaabkan ayuu adeegsnayaa (Rooma 8:1, 31-34).

**5:17 “haddii”** waa shuruud hor dhac u ah runta uu sheegi rabo qoraaga, isagoo markaasna sheegi raba ujeeddadiisa. Denbigii aadan waxa uu sababay dhimashada aadana oo dhan.

▣ **“si ka badanna kuwa hela badnaanta”** aayadaha 18-19 maaha kuwo fiqi ahaan miisaaman. Weedhahan lagama saari karo Rooma 1-8, loomana isticmaali karo caddaynta arrinta khusaysa caalamnimada. Aadanu waa inay helaana (aayadda 17b) waxa Ilaah kusiiyay Masiixa. Badbaadadu waa u diyaar dhammaantood, laakiin waa in shakhsi ahaan loo aqballo (Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma 10:9-13).

Falkii Aadan ee ahaa leexashada ayaa aadanaha oo dhanna ku sababay inay leexdaan. Laakiin xaqnimada Masiixa ayaa kafaaro gud u noqotay denbiyada kuwo badan iyo denbigii dhaxaltooyada ahaaba. Markastoo haddaba in badan la sheego shaqadii Masiixa (aayadaha 9,10,15,17), nimcadu way badnaanaysaa.

▣ **5:17,18 “hadiyadda xaqnimada, noloshay ku dhex talin doonaan...in xaq laga dhigo oo ay noolaadaan.”** Ciise waa hadiyadda Ilaah, waxaanu hayaa waxyaalaha ruux ahaaneed oodhan, kuwaasoo aadanaha leexday u baahan yihiin (1 Korintos 1:30). Ereyadan siman, waxa macnohoodu noqon karaa (1) aadana leexday waxa la siiyay xaqnimo ay ku hor istaagi karaan Ilaah, waxaana taas lagu siiyay shaqadii Masiixa, ee natiijadeedu tahay nolosha ku dhisan cibaadada, amaba (2) waxay tilmaamaysaa nolosha weligeed ah. oo tan danbe ayaa u dhow macno ahaan. Eeg mawduuca gaarka ah ee xaqnimada 1:17.

#### **MAWDUUC GAAR AH: KA DHEX TALINTA BOQORTOYADA ILAAH**

Arrintan ka dhextalintu waa mawduuc fiqi ahaaneed oo aad u ballaadhan laguna magacaabo “Boqortooyada Ilaah.” waxa lagasoo qaatay Axdiga Hore iyadoo Ilaah yahay Boqorka runta ah ee Israa’iil (1 Samuu’eel 8:7). Wuu taliyay (1 Samuu’eel 8:7; 10:17-19) isagoo adeegsanaya faracankii qabiilka Yahuudah (Bilowgii 49:10) iyo qoyskii Jesse (2 Samuu’eel 7).

Ciise waa kan dhammays tiray waxyaalihii Masiixa ku saabsanaa ee ballan qaadyada Axdiga Hore. Wuxuu Boqortooyada Ilaah waday isagoo jidh bani adam soo qaatay kuna dhashay Beytalaxam. Boqortooyada Ilaahna waxay ahayd waxa udub dhexaadka u ahaa wacdinta Ciise, waayo Boqortooyada oo dhammays tirani isagay ku timid (Matayos 10:7; 11:12; 12:28; Markos 1:15; Luukos 10:9,11; 11:20; 16:16; 17:20-21).

Si kastaba ha ahaatee, sidoo kale Boqortooyadu waxay ahayd mustaqbalka, waxaanay ahayd mid joogta laakiin si buuxda aan loo dhaqan gelinin (Matayos 6:10; 8:11; 16:28; 22:1-14; 26:29; Luukos 9:27; 11:2; 13:29; 14:10-24; 22:16,18). Ciise ugu horrayntii wuxuu yimid isaga oo ah adeege silcaya (Ishacyaah 52:13-53:12); is hoosaysiinaya (Sekaryaah 9:9). Laakiinse waxa uu soo laaban doonaa isagoo Boqor ah (Matayos 2:2; 21:5; 27:11-14). Haddaba, “talintu” waxa weeyi qayb kamida boqortooyadiisa fiqi ahaan. Ilaahna boqortooyada Ciise wuxuu siiyay kuwa isaga raaca (eeg Luukos 12:32).

Ku talinta xagga Masiixu waxa la iska waydiin karaa su’aalo dhowra:

1. Aayaddu miyay sheegtay in Ilaah dadka Masiixiyiinta ah siiyay “boqortooyada” isagoo ku siiyay Masiixa “talintiisa” (Matayos 5:3,10; Luukos 12:32)?
2. Erayadii Ciise Masiix ee xertii ugu horraysay miyay tilmaamayaan rumaystayaasha oo dhan (Matayos 19:28; Luukos 22:28-30)?
3. Bawlos ma waxa uu tilmaamayaa ka talinta noloshan dhexdeeda taasi oo noqon karta aayadaha waxa laga fahmayo (Rooma 5:17; 1 Korintos 4:8)?

4. Sidee silica iyo talintu u wada shaqayn karaan(Rooma 8:17; 2 Timoteyos 2:11-12; 1 Butros 4:13; Muujintii 1:9)?
5. Ujeedadan ka dhex muuqan karta Muujintii ayaa waxay sheegaysaa talinta Maisixa
  - a. Dhul ahaaneed, 5:10
  - b. Laxukumista, 20:5,6
  - c. Weligeed, 2:26; 3:21; 22:5 iyo Daanyeel 7:14,18,27

#### **AAYADAHA 5:18-21**

<sup>18</sup>Haddaba dembiga nin keliya aawadiis waxaa dadka oo dhan ugu yimid xukun. sidaas oo kalena nin keliya xaqnimadu sameeyey aawadeed waxaa dadka oo dhan ugu timid hadiyad in xaq laga dhigo oo ay noolaadaan. <sup>19</sup>Waayo, sida nin keliya caasinimadiisii kuwa badan dembiilayaal looga dhigay, sidaas oo kalena nin keliya addeeciddiis ayaa kuwa badan xaq looga dhigi doonaa. <sup>20</sup>Sharciguna wuxuu u yimid inuu dembigu bato, laakiinse meeshii dembigu ku batay, nimcaduna way ka sii badatay aad iyo aad; <sup>21</sup>in. sida dembigu dhimashada ugu taliyey, sidaas oo kalena ay nimcadu ugu taliso xaqnimo ilaa nolosha weligeed ah ee xagga Rabbigeenna Ciise Masiix.

#### **5:18**

**NASB** “xita xaqnimada nin keliya ayaa natiijadeedu noqotay inay xaq ka dhigto nolosha aadanaha oo dhan”

**NKJV** “nin keliya xaqnimadu sameeyey aawadeed waxaa dadka oo dhan ugu timid hadiyad in xaq laga dhigo oo ay noolaadaan”

**NRSV** “nin keli ah xaqnimadiisa ayaa keenaysa xaqnimada iyo nolosha oo dhan”

**TEV** “sidoo kale xaqnimadu nin keliya sameeyay ayaa aadanaha oo dhan siisay nolosha”

**JB** “haddaba xaqnimada wanaagsan ee nin keliya ayaa mid walba u keenaysa nolosha oo ka dhigaysa xaq”

Tan macneheedu maaha in qof walba la badbaadin doono. Waayo aayaddan lagama sooci karo farrinta uu gudbinayo kitaabka Rooma. Waxay tilmaamaysaa badbaadada aadanaha oo dhammi ku heli karaan Masiixa noloshiisa/dhimashadiisa/sarakicistiisa. Haddaba, aadanuhu waa inay ka jawaab celiyaan warka wanaagsan marka ay towbad keenaan ee rumaysadka la yimaadaan (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21). Ilaah marwalba wuu lahaa qorshihiisa (Yooxanaa 6:44,65), laakiinse waxa uu doortay in qofkastaaba uu shakhsi ahaan uga jawaaba celiyo (Markos 1:15; Yooxanaa 1:12; iyo Rooma 10:9-13). Waxa uu inoogu deeqay waa caalami (1 Timoteyos 2:4,6; 2 Butros 3:9; 1 Yooxanaa 2:2), laakiin dad badani way iska diidaan.

Falka xaqnimadu wuxuu ku imanayaa (1) Ciise noloshiisa gebi ahaanba addeecista ah iyo muujinta Aabbaha (2) gaar ahaan dhimashadiisa uu u dhintay inaga daraaddeen. Iyadoo nin keli ahna noloshiisu saamaysay gebi ahaanba dadka noloshooda(gaar ahaan la xidhiidha Yuhuudda, Yashuuca 7), sidoo kalena nolol aan wax iina lahayn ayaa dhammaan saamaysay. Labadan fal way siman yihiin laakiin maaha isku mid. Dhammaantood waxa saameeyay denbigii Aadan, laakiin kii diyaarka u ah waxa noloshooda saameeyay Ciise noloshiisa.

**5:18-19 “dadka oo dhan ugu yimid xukun.. dadka oo dhan ugu timid hadiyad in xaq laga dhigo oo ay noolaadaan... kuwa badan dembiilayaal looga dhigay.. kuwa badan xaq looga dhigi doonaa”** waa weedho siman taasi oo erayga “badan” uu tilmaamayo kuwo soo galay arrintaas la sheegay. Waxa is barbar dhigga sidan oo kale ah laga heli karaa Ishacyaah 53:6 “dhammaan” iyo 53: 11.12 “badan.”

**5:19 “sida nin keliya caasinimadiisii... nin keliya addeeciddiis”** wax uu falay shakhsi keli ahi ayaa saameeyay dadka oo dhan (Caakaan, Yashuuca 7). Haddaba, addeecis la’aantii Aadan iyo Xaawa ayaa dadka oo dhan xukunka hoos keenay (Bilowgii 3). Waxa dhammaantood saameeyay cidhib xumadii ka timid caasinimada Aadan (8:18-25). Dunidu isku mid maaha, oo dadkuna maaha kuwo siman. Laakiin dhimashadu waxay noqotay dhammaadka wax waloo noole ah (Bilowgii 5).

Haddaba, sidaas si lamida ayaa falkii addeecista ahaa ee Ciise, waxay natiijadiisu noqotay sida Calvary qoray (1) da’da cusub, (2) dadka cusub, iyo (3) axdiga cusub. Haddaba, arrintan fiqi ahaaneed waxa lagu magacaaba

“Aadan-Masiixa noocyadnimadooda”(Filiboy 2:6). Ciise waa Aadanka labaad, waana bilowga cusub ee aadanaha xad-gudbay.

▣ **“xaq looga dhigi doonaa.”** Eeg mawduuca gaarka ah ee 1:17.

**5:20**

**NASB** “Sharciguna wuxuu u yimid inuu dembigu bato”

**NKJV** “markastoo sharcigu yimaaddo denbiguna wuu bataa”

**NRSV** “laakiin sharcigu wuu yimid, oo denbiguna wuu laban laabmay”

**TEV** “sharciga waxa loo keenay inay bato denbigu”

**JB** “markii sharcigu yimid, waxaa batay jaaniskii denbi ku dhicista”

Ujeeddada sharcigu weligeed may ahayn inuu badbaadiyo dadka, laakiinse waxay ahayd inuu tusiyo khaladkooda iyo dembigooda (Efesos 2:1-3), iyadoo Masiixuna yahay kan dawaynaya dhibka (3:20; 4:15; 7:5; Galatiya 3:19, 23-26). Sharciga wuu wanaagsan yahay, laakiin aadanuhu waa denbi miidhan.

▣ **“nimcadu ugu taliso xaqnimo ilaa nolosha weligeed ah”** waa ujeeddadii ugu muhiimsanayd ee qaybtan ka lahaa Bawlos qoraalkiisa. Denbigu waa wax xun, laakiin nimcada ayaa saamaysa oo tirtirta! Waxay ahayd sidii lagu dhiirri gelinayay kaniisaddii qarnigii kowaad. Denbiga waxa lagaga adkaanayay Masiixa oo keliya (5:9-11; 8:31-39; 1 Yooxanaa 5:4). Laakiinse tan ujeedadeedu maaha in lasii dembaabo! Eeg mawduuca gaarka ah: 1:30.

**5:21** denbiga iyo nimcada labadaba waxa lagu tilmaamay inay yihiin boqorro. Denbigu wuxuu ka taliyay dhimashada caalamiga ah (aayadda 14,17). Nimcada waxay ka talisay keenista xaqnimada ku dhammays tirantahay shaqada Ciise Masiix, iyo rumaysadka shakhsi ahaaneed ee qofka iyo towbad keenka uu kaga jawaaba celinayo warka wanaagsan.

Iyagoo ah dadka cusub ee Ilaah, iyagoo ah jidhka Masiixa, ayaa Masiixiyiintu sidoo kale waxay noqon doonaan kuwo la taliya amaba wax la xukuma Masiixa (Muujiintii 5:9-10; 20). Sidoo kale Kitaabka Quduuska ahi wuxuu ka hadlayaa in boqortooyada la siiyay kuwa qoduusiinta ah (Matayos 5:3,10; Luukos 12:32; Efesos 2:5-6). Eeg mawduuca gaarka ah 5:17.

## SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Qeex “xaqnima Ilaah”
2. Waamaxay fahanka fiqi ahaan u dhexeeya “quduusnaanta” iyo “lahaanshaha horu socodka leh”?
3. Ma waxaan ku badbaadnay nimco mise rumaysad (Efesos 2:8-9)?
4. Maxay u silcayaan Masiixiyiintu?
5. Miyaan badbaadnay mise waa la ina badbaadiyay mise waan badbaadi doonnaa?
6. Ma waxaan denbiilayaal ku nahay denbaabisteenna, mise waxaynu nahay asal ahaanba denbiilayaal?
7. Sidee erayada “xaq kaga dhigista” iyo “badbaadada” iyo “heshiintu” cutubkan dhexdiisa isula xidhiidhaan?
8. Muxuu Ilaah dusha iiga saarayaa denbiga ninka dhintay kumaankun sanno ka hor (aayadaha 12-21)?
9. Muxuu qof waloo u dhexeeyay Aadan iyo Muuse u dhintay, haddii denbiguba ahaa mid aan la xisaabinin wakhtigaas (aayadaha 13-14)?
10. Erayada “dhammaan” iyo “badan” ma yihiin kuwo siman (aayadaha 18-19, Ishacyaah 53:6, 11-12)?

# ROOMA 6

<b>QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH</b>				
<b>UBS<sup>4</sup></b>	<b>NKJV</b>	<b>NRSV</b>	<b>TEV</b>	<b>NJB</b>
U dhintay denbiga laakiin ku noolaaday Masiixa	U dhintay denbiga, u nool Ilaah	Dhimanaya oo la sara kacay Masiixa	U dhintay denbiga laakiin ku noolaaday Masiixa	Baabtiiska
6:1-11	6:1-14	6:1-4 6:5-11	6:1-4 6:5-11	6:1-7 6:8-11 Denbigoon loo hoggaansamin, laakiin quduusnimo
6:12-14	6:12-14	6:12-14	6:12-14	6:12-14
Addoonimada xaqnimada	Denbigu addoonsan jiray haddana Ilaah addoomo u ah	Labada addoon	Addoonimada xaqnimada	Masiixiga waxa laga xoreeyay addoonsiga denbiga
6:15-23	6:15-23	6:15-19 6:20-23	6:15-19 6:20-23	6:15-19 Abaal marinta denbiga iyo tan quduusnimada 6:20-23

## **AKHRINTA TAXANAHA SEDDEXAAD**

*IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA EE BAARAGARAAFYADA*

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## **FAHANKA MACNAHA GUUD**

- A. Cutubyada 6:1-8:39 waxay tusinayaan xidhiidhka u dhexeeya qofka Masiixiga ah iyo denbiga. Haddaba, arrintani waa mid aad muhiim u ah, maxaa yeelay injiilka waxa lagu fadhiisiiyay nimcada Ilaah, ee uu fuliyay Masiixu (3:21-5:21). haddaba, sidee buu denbigu u saamaynayaa qofka Masiixiga ah? cutubka 6

ayaa wuxuu ku salaysan yahay su'aashan jawaabteeda, waana aayadaha 1 iyo 15. Aayadda 1 waxay la xidhiidhaa 5:20, halka aayadda 15 ay iyana la xidhiidho 6:14. Ta hore waxay la xidhiidhaa denbiga iyo qaab nololeedka, halka ta labaadna ay kala xidhiidho falalka shakhsi ahaaneed ee denbiga. Waxa kaloo iyana muuqata aayadaha 1-14 oo ka hadlayay Masiixiyiinta oo xor ka ah maamulka denbiga, halka aayadaha 15-23 ay ka hadlayaan Masiixiyiinta oo xor u ah, inay Ilaah u adeegaan sidii ay horeba denbiga ay ugu adeegi jireen.

- B. Xaq ka dhigistu waxay koobsanaysaa:
1. Mid la dhammays tiray (sida xaqnimada lagu bixiyay badbaadada 3:21-5:21)
  2. Koboca la midnimada Masiixa
    - a. 6:1-8:39 fiqi ahaan xaqiiqadan ayay sheegaysaa
    - b. 12:1-15:13 si la taaban karo ayay u tilmaamaysaa (eeg Mawduuca Gaarka ah 6:4)
- C. Mufasiriintu waxay ku qaybsan yihiin fiqi ahaan mawduuca xaq ka dhigista. Laakiin xaqiiqda waxa jira nimcada (1 Korintos 1:30; 6:11). Nimcada Ilaah waxa ay ku timid nololsha iyo dhimashada Ciise Masiix, taasi oo rumaysadna lagu helo (Efesos 2:8-9).
- D. Cutubkani waxa uu barayaa wax ku saabsan hana qaadnimada dhammayska tiran (denbi la'aanta, 1 Yooxanaa 3:6,9; 5:18) ee carruurta Ilaah iyo sida ay Masiixa u rumaysan yihiin. Cutbka 7 iyo 1 Yooxanaa 1:8-2:1 waxay tusinayaan xaqiiqada ku jirta rumaystayaasha iyo dembigooda sii socda.
- E. Haddaba, waxyaabo badan oo ku saabsan khilaafka aragtida cafiska ee Bawlos, waxa uu la xidhiidhay damaca. Maxaa yeelay Yuhuuddu waxay rabeen, in la muujiyo cibaado oo la addeeco Sharcigii Muuse. Waxa haddaba laga yaabaa in cidi samaysay oo adeegsatay aragtida Bawlos ee ku salaysan caddaynta denbiga (aayadaha 1, 15; 2 Butros 3:15-16). Waxa uu markaas Bawlos rumaysnaa shaqada Ruuxu inay tahay tan ugu habboona, oo sharciga amaba qawaaniinta la raacaan aanay soo saareen cibaadada iyo la midnimada Masiixa. Run ahaantiina tani waa farqiga u dhexeeya Axdiga Hore (Sharciga Kunoqoshadiisa 27-28) iyo Axdiga Cusub (Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:26-27).
- F. Baabtiisku waa calaamadda fudud ee runnimada ruuxiga ah ee xaqnimada. Haddaba, kitaabka Rooma dhexdiisa caqiidada xaq ka dhigista iyo la midnimada Masiixa ee xagga camalku waxa weeyi kuwo aad ugu soo noq-noqda. Waxaad arki kartaa aayadda 4 inay tahay mid la siinnaan karta aayadda 6.
- G. Waxyaabaha furaha ah ee lagaga guulaysan karo jarribaadda iyo denbiga nololsha Masiixnimadu waxa weeyi:
1. Ogsoonow sida aad ku tahay Masiixa dhexdiisa. Ogsoonow waxyaalaha isagu uu kuu qabtay. Waxaad xor ka tahay denbiga!
  2. Nolol maalmeedkaaga u fiirso oo eeg xaalladdaada halka ay ka marayso la midnimada Masiixa.
  3. Innagu nolosheenna ma lihin, waana inaynu addeecno Sayidkeenna. Waa inaan u adeegno oo qalbigeenna iyo maskaxdeennaba ka jeclaanno, Kan ina jeclaaday!
  4. Nololsha Masiixnimadu waa nolol aad u heer sarraysa. Waa badbaado, waana hadiyad Ilaah inagu siiyay Masiixa. Isaga ayaa qorsheeya oo inna siiya awooddeeda, innaguna waa inaan ka jawaaba celino, oo towbad keenno kuna camal falno.
  5. Ha ka ag dhowaannin denbiga. Ka jeedso oo ka carar, sidoo kalena ha joogin meelaha jarribaaddu ay taallo.
  6. Denbigu waa balwad la iska dayn karo, laakiin sida la isaga daayaa wakhti ayay qaadanaa, waxa kaloo ay u baahan tahay tamar.

## BARASHADA EREYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 6:1-7

<sup>1</sup>Haddaba maxaynu nidhaahnaa? Miyaynu ku sii soconnaa dembiga inay nimcadu badato? <sup>2</sup>Yaanaay noqon! Innagoo dembiga kala dhimannay, sidee baynu mar dambe ugu dhex noolaanna? <sup>3</sup>Mise ma waydaan ogayn in kulli inteenna lagu baabtiisay Ciise Masiix dhexdiisa, lagu dhex baabtiisay dimashadiisa? <sup>4</sup>Haddaba waxaynu isaga kula aasannay baabtiiska dhimashada dhexdeeda, in, sidii Masiixa kuwii dhintay loogaga sara kiciyey ammaanta Aabbaha, aan innaguna sidaas oo kale cusaybka nololsha ku dhex soconno. <sup>5</sup>Haddaynu isaga kula midownay dhimasho tiisa u eg. de sidaas oo kalena sarakicid tiisa u eg waynu kula midoobi doonnaa. <sup>6</sup>Waynu og nahay in dabiicadeennii hore iskutallaabta lagula qodbay isaga, in jidhka dembigu baabba'o, si aynaan mar dambe addoommo ugu ahaan dembiga. <sup>7</sup>Waayo, kii dhintay dembi wuu ka xoroobay oo xaq baa laga dhigay.

6:1

NASB

“Miyaynu ku sii soconnaa dembiga inay nimcadu badato”

NKJV

“miyaynu sii wadnaa denbiga inay nimacadu badato”

NRSV

“miyaynu sii denbaabnaa si nimcadu u badato”

TEV

“inaan kusii dhex noolaanno denbiga inay nimcda Ilaah sii korodho”

JB

“miyanu ku sugnaanna denbiga si aan u sugno nimacada oo sii badan doonta”

Waxay waydiinasaa su’aasha ah, Masiixiyiintu ma inay denbiga ku sii sugnaadaanbaa? Waxay haddaba su’aashani dib ugu laabanaysaa 5:20. Bawlos waxa uu adeegsanayaa canaanta uu ku muujinayo nimcada Ilaah ee laga yaabo in sida khaladka ah loo fahmo (1 Yooxanaa 3:6,9; 5:18). Nimcada Ilaah iyo naxariistiisa loogalama jeedo in la sharciyaysto caasinimada iyo waxa aanu Ilaah raallida ka ahayn.

Warka wanaagsan ee Bawlos sheegayaa, waa nimcada Ilaah ee hadiyad ahaanta la inoogu siiyay Masiixa (3:24; 5:15; 6:23) ee ku dhisan qaab nololeedka xaqnimada. Haddaba, waxa la is waydiin karaa, sidee hadiyaddu u keeni kartaa ku dhaqanka camalka toosan? Xaq kaga dhigista iyo camal falka amaba la midnimada Masiixa, waa inaan la kala saarin (Matayos 7:24-27; Luukos 8:21; 11:28; Yooxanaa 13:17; Rooma 2:13; Yacquub 1:22-25; 2:14-26).

Haddaba, aan soo xigto qoraalka F. F. Bruce uu ku qoray buuggiisa *Paul: Apostle of the Heart Set Free*, “baabtiiska Masiixiyiintu wuxuu ka tarjumayaa farqiga u dhexeeya noloshoodii hore ee denbiga ku jirtay iyo nolosha cusub ee Masiixa ay ku heleen: wuxuu calaamad u yahay dhimashada amarkii hore, haddaba, rumaystaha la baabtiisay ee kusii socda denbigiisu, waa arrin xun oon la rumaysan karin, waxaanay albaabka u furaysaa inuu ku sugnaado denbigii uu horeba addoonka ugu ahaa (Rooma 6:1-4, 15-23) amaba waa sida naag carmala oo kusii hadhay ‘sharcigii ninkeeda” pp. 281-82 (Rooma 7:1-6).

Sidoo kale James S. Stewart, ayaa buuggiisa *A Man in Christ* waxa uu ku qorayaa: “*locus classicus* ka khuseeya dhinacan ee rasuullada oo dhammi, waxa laga helayaa Rooma 6. Halkaasna Bawlos, waxa uu qalbiga iyo dareenka barayaa casharka ah, sida lagu midaynayo macnaha dhimashada Masiixu u leedahay rumaystaha iyo ka fogaanshaha amaba iska dhowrista denbiga,” (pp. 187-88).

**6:2 “Yaanaay noqon!”** waa mid ka mida qaabkii Bawlos u bixin jiray jawaabta, waxaanay tusinaysaa siduu uga yaabban yahay, dabeecadda cabsida leh ee aadanaha iyo sida khaladka ugu fahmeen uguna ceebeeyeen nimcada (3:4,6).

▣ **“Innagoo dembiga kala dhimannay”** waxa weeyi ujeedadu “waxaan ku dhimannay,” waxaanay u muuqataa “dabeecadda denbiga” ee laga dhaxlay Aadan (Rooma 5:12-21; 1 Korintos 15:21-22). Waxa uu Bawlos markaas dhimashada u adeegsanayaa tusaale ahaan, si uu u tusiyo xidhiidhka cusub ee Masiixigu la yeelanayo Ciise Masiix.

▣ **“ugu dhex noolaanna?”** fahan ahaan waa ugu dhex “soconnaa.” Tusaalahan waxa markaas loo adeegsaday mid ahaan ku dhex qaab nololeedka rumaysadka (Efesos 4:1; 5:2,15) amaba qaab nololeedka denbiga (aayadda 4). Masiixiyiintuna kuma farxi karaan denbiga.

**6:3-4 “lagu baabtiisay... cusaybka nolosha”** macne ahaan, waxay tusinayaa fal la dhammays tiray oo cid kale dhammays tirtay, oo halkanna waxa loogala jeedaa waa Ruuxa.

#### MAWDUUC GAAR AH: BAABTIISKA

Curtis Vaughan, Acts, ayaa bogga 28 wuxuu ku qorayaa qormo xiiso leh:

“Erayga Giriigga ah ee ‘baabtiis’ waa mid muhiimadda saddexaad; erayga ‘towbad keenka’ waa muhiimadda labaad. Beddelkan amarka labaad ee badan lagu beddelay kan saddexaad ee yar oo ah ‘baabtiis’ waxa ka tarjumaya Butros dalabkiisii aasaaska u ahaa towbad keenka.”

Tani waxay haddaba raacsan tahay wacdintii Yooxanaa Baabtiisaha (Matayos 3:2) iyo Ciise (Matayos 4:17). Haddaba, towbad keenku waa furaha ruuxiga ah, halka baabtiiskuna ka yahay soo ban dhigista is beddelka ruux ahaaneed. Axdiga Cusubi waxba kama yaqaano rumaystayaal aan la baabtiisin oo la sheegay! Dhinaca kaniisaddii hore marka la eegana, baabtiisku wuxuu ahaa qofka oo rumaysadkiisa ku hor qirta dadka.

Waxa kaloo la xasuusan karaa in baabtiisa aan lagu sheegin, wacdintii labaad ee Butros, inkastoo towbad keenka lagu sheegay (3:19; Luukos 24:17). Haddaba, baabtiisku wuxuu ahaa tusaale uu dejiyay Ciise(Matayos 3:13-18). Sidoo kalena baabtiiska Ciise ayaa amray (Matayos 28:19). Haddaba, su'aasha casriga ah ee waxa lagama maarmaanka u yahay baabtiiska ayaan lagu dhex sheegin Axdiga Cusub, laakiinse rumaystayaasha oo dhan waxa laga rabaa in la baabtiiso.

▣ **“Ciise Masiix dhexdiisa”** adeegsiga *eis* (dhexdiisa), waxay la mid tahay Matayos 28:19, halkaasoo rumaystayaasha cusub lagu baabtiisayo *eis* (dhexdiisa) maga Aabbaha, Wiilka iyo Ruuxa Quduuska ah. sidoo kale waxa loo adeegsaday tilmaamista rumaystayaasha lagu baabtiisay Ruuxa ku jira jidhka Ciise (1 Korintos 12:13). Sidoo kale waxay u dhigantaa *en* (Masiixa dhexdiisa) sida ka muuqata aayadda 11. Rumaystayaashu waxay ku nool yihiin oo ku dhaqaaqaan jidhkooda ku dhex jira Masiixa, waxaanay tani muujinaysa xidhiidhka ku dhisan midawga iyo wada joogista. Rumaystayaashu waxay aqoonsadaan oo Masiixa kula biireen dhimashadiisa (aayadaha 6; 8:17), sara kicistiisa (aayadda 5), addeecitaankiisa iyo adeegitaanka Ilaah, iyo boqortooyadiisa.

▣ **“lagu dhex baabtiisay dhimashadiisa... isaga kula aasannay”** baabtiisku waxa uu ka dhigan yahay dhimasho iyo aasitaan (aayadda 5 iyo Kolosay 2:12). Ciise baabtiiska wuxuu tusaale ugasoo qaaday dhimashadiisa (Markos 10:38-39; Luukos 12:50). Waxa haddaba halkan innooga muuqanahay inaanu baabtiisku ahayn caqiido, laakiinse yahay cusaybnimada Masiixiga iyo xidhiidhka uu la yeelanayo Masiixa dhimashadiisa iyo aasitaankiisa.

**6:4 “waxaynu isaga kula aasannay baabtiiska dhimashada dhexdeeda”** cutubkan dhexdiisa, sida uu caankaba ku yahay Bawlos waxa uu qoraalkiisa ku adeegsanayaa in badan *sun*(kula) (Efesos 2:5-6).

1. *sun* + *thaptō*= kula aasannay, aayadda 4; Kolosay 2:12; sidoo kale ogaysiiska aayadda 8
2. *sun* + *Astauroō*= kula midownay, aayadda 5
3. *sun* + *azō*= la dhimannay, aayadda 8; 2 Timoteyos 2:11.

▣ **“aan innaguna sidaas oo kale cusaybka nolosha ku dhex soconno.”** Natiijada laga rabo badbaadadu waxa weeyi helitaanka nolosha cusub iyo ka xoroobitaanka denbiga, maxaa yeelay Masiixiyiintu waxay ogsoon yihiin nimcada Ilaah ku siiyay Masiixa daraaddiis, sidaasi darteedna noloshoodu waa inay noqoto mid uu is beddel ku yimaaddo. Innagu naf ahaanteenna uma keensan karno badbaadada, laakiinse tani waa natiijada badbaadada (aayadaha 16,19; iyo Efesos 2:8-9,10; Yacquub 2:14-26).

#### **MAWDUUC GAAR AH: QUDUUSNAANTA**

Axdiga Cusubi wuxuu inoo sheegayaa marka denbiilayaashu usoo laabtaan Ciise Masiix ee ay towbad keenaan, in markaas xaq laga dhigi doono. Waxay tan ku helaysaan Masiixa, maxaa yeelay xaqnimadiisa ayuu iyagana gelinayaa (Rooma 4). Waxa ay noqonayaan kuwo xaq ah oo quduus ah.

Laakiin sidoo kale Axdiga Cusubi waxa uu rumaystayaasha farayaa inay noqdaan kuwo camal suuban leh. Shaqada Masiixu qabtay waa mid iyaga xaq ka dhigtay, laakiin haddana fikir kooda iyo qaab nololeedkuudu waa inuu ahaado la midnimada Masiixa. Sida badbaadadu u tahay hadiyadda oo qiimahana u leedahay, ayaa qaab nololeedkuna la rabaa inuu ahaado taas oo kale.

#### **Ka jawaab bixinta asalka ah**

Falimaha Rasuullada 20:23; 26:18  
 Rooma 15:16  
 1 Korintos 1:2-3; 6:11  
 2 Tesaloniika 2:13  
 Cibraaniyada 2:11; 10:10,14; 13:12  
 1 Butros 1:1

#### **La midnimada Masiixa**

Rooma 6:19  
 2 Korintos 7:1  
 1 Tesaloniika 3:13; 4:3-4,7; 5:23  
 1 Timoteyos 2:15  
 2 Timoteyos 2:21  
 Cibraaniyada 12:14  
 1 Butros 1:15-16



▣ **“Masiixa kuwii dhintay loogaga sara kiciyey”** sida aan qoraalka ka dhex fahmaynno, aqbalitaanka Aabbahu maqlay erayada Wiilka iyo shaqadiisa, ayaa waxa lagu muujin karaa labo dhacdo oo waawayn:

1. Ciise ka sara kiciddiisa uu ka sara kacay kuwa dhintay
2. Masiixu isaga oo fadhiistay gacanta mid ee Aabbaha

▣ **“ammaanta Aabbaha”** si aad u aragto wax ku saabsan “ammaanta” eeg Mawduuca gaarka ah ee 3:23. Sidoo kale “Aabbaha” eeg Mawduuca gaarka ah ee 1:7.

**6:5 “haddii”** waa hadalka shuruuddu ku xidhantahay ee qoraaga ku cabirayo hadalkiisu, isagoo ujeeddadiisana raba inuu sheego. waxay markan u muuqataa Bawlos dhegaystayaashiisu inay ahaayeen Masiixiyiin.

▣ **“aan innaguna sidaas oo kale cusaybka nolosha ku dhex soconno”** macneheedu waxa uu ka dhigan yahay in “waanu ahayn oo waannu ahaan doonnaa kuwo wada jira marwalba”, amaba “waannu ahayn amaba waannu wada jiri doonnaa.” Fiqi ahaan tani waxay run ku noqonaysaa “sii ahaanshaha” sida ka dhex muuqanaysa Yooxanaa 15. Haddii Masiixiyiinta lagu aqoonsado Masiixa dhimashadiisa (Galatiya 2:19-20; Kolosay 2:20; 3:3-5), fiqi ahaan waa in lagu aqoonsado Sarakicistiisa (aayadda 10).

Dhinaca tusaalaha baabtiiska lagu metalayo dhimashada waxa loogala jeedaa tusinta (1) waxaan ka dhimannay noloshii hore, amaba axdigii duugoobay, (2) waxaan ku noolnahay Ruuxa, oo ah axdiga cusub. Haddaba, baabtiiska Masiixiyiintu lama mid ahi kii Yooxanaa Baabtiisaha oo ahaa kii ugu danbeeyay nebiyadii Axdiga Hore. Baabtiiska wuxuu kaniisaddii hore jaanis ugu ahaa soo bandhigista rumaysadka qofka, oo dadka oo dhan hortooda lagu qirto. Qaacidadii hore ee markaas la raaci jiray wakhtigaasi waxay ahayd, “waxaan rumaysanahay Ciise oo ah Rabbiga” (Rooma 10:9-13). Wuxuu baabtiiska calaamad u ahaa cafiska, badbaadada, amaba imaatinka Ruuxa, laakiin caadi ahaan wuxuunbuu ahaa qirasho (Falimaha Rasuullada 2:38). Si kastaba ha ahaatee may ahayn arrin ikhtiyaar ah, laakiinse waxa amray Ciise Masiix (Matayos 28:19-20), waanu tusaaleeyay, (Matayos 3; Markos 1; Luukos 3) waxaanay noqotay mid ka mida wacdintii iyo nidaamkii Rasuulladu ku dhaqmi jireen, sida inooga muuqanaysa Falimaha Rasuullada.

**6:6**

**NASB** **“Waynu og nahay in dabiicaddeennii hore iskutallaabta lagula qodbay isaga”**

**NASB** **“inagoo ogsoon, in dabiicadeheennii hore isaga lagula qodbay iskutallaabta”**

**NRSV** **“waynu ognahay in waxyaaleheennii hore isaga lagula qodbay iskutallaabta”**

**TEV** **“waxaynu ognahay sidan: in nafteennii hore ay Masiixa kula dul dhimatay iskutallaabta korkeeda”**

**JB** **“waa inaan rumaysano nafeheennii hore in isaga iskutallaabta lagula qodbay”**

Macneheedu wuxuu ka dhigan yahay “nafeheennii hore oo dhan hal mar ayaa Ruuxu ku dul qodbay iskutallaabta.” Waxay haddaba arrintani tahay mid muhiim u ah nolosha guushu ku dhisantahay ee Masiixiyadda. Oo rumaystayaashuna waa inay aqoonsadaan xidhiidhkooda cusub ee ay la leeyihiin denbiga (Galatiya 2:20; 6:14). Denbigii iyo xadgudubkii hore ee laga dhaxlay Aadan, wuxuu la dhintay Masiixa (aayadaha 7; Efesos 4:22 iyo Kolosay 3:9). Haddaba, maadaama oon nahay rumaystayaasha, waxaan haysanaa ikhtiyaarka ku saabsan denbiga, sidii ugu horrayntiiba Aadan sameeyay.

▣

**NASB, NKJV** **“in jidhka dembigu baabba’o”**

**NRSV** **“si jidhka dembigu u baaba’o”**

**TEV** **“in awoodda dembigu noqoto mid baaba’da”**

**JB** **“si loo baabiyo jidhka dembigu ka buuxo”**

Bawlos erayga “jidh” (*sama*) wuxuu ku adeegsaday meelo badan

1. Jidhka denbiga, Rooma 6:6
2. Jidhka dhimashada, Rooma 7:24
3. Jidhka aadmiga, Kolosay 2:11

Bawlos haddaba, waxa uu ka hadlayaa nolosha jidh ahaaneed ee denbiga iyo caasinimada. Sara kicista jidhka Masiixu, waxa weeyi da’da cusub ee xaqnimada (2 Korintos 5:17). Dhibaataada maaha jidhka, laakiin dhibaataada waa caasinimada iyo denbiga. Sidoo kale jidhku maaha shar. Masiixiyiintu waxay rumaysan yihiin in jidhku yahay

mid aan dhammaad lahayn (1 Korintos 15). Si kastaba ha ahaatee, jidhku waxa weeyi waxa aasaaska u ah jarribaadda, denbiga iyo nafta.

Weedha ah “loo baabiiyo” waxa loogala jeedaa “laga dhigo waxaan habboonayn” amaba “wax soo saar lahayn,” waxay ahyad haddaba, erayada uu jecelyahay Bawlos adeegsigooda, waxaanu adeegsaday in ka badan shan iyo labaatan jeer. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:3. Jidhkeenu hadiyo goor waa dhexdhexaad, hase ahaatee hadiyo goor wuxuu xarun u yahay waxyaabaha ruuxiga ah ee sika hor imanaya (aayadaha 12-13; 5:12-21; 12:1-2).

**6:7 “kii dhintay dembi wuu ka xoroobay”** macneheedu waxa weeyi “kan dhintay weligiisba wuxuu ka xoroobay oo sii wadi doonaa ka xoroobista denbiga.” Maxaa yeelay Masiixiyiintu jidhka Masiixa waxay ku yihiin abuur cusub, waxaanay noqon doonaan kuwo laga xoreeyo addoonsiga denbiga laga dhaxlay Aadan (7:1-6).

Erayga Giriigga ah ee laga tarjumay “xoroobay” waa sida midda laga tarjumay “xaq kaga dhigista” ee cutubyada bilowga (ASV). Qoraalkan “xoroobay” waxa ay aad ugu dhowdahay sida ay ugu qorantahay Falimaha Rasuullada 13:39. Laakiin xusuusnow in erayadu marwalba macnaha ku sameeyaan weedhaha ay ku jiraan.

#### **AAYDAHA 6:8-11**

**<sup>8</sup>laakiinse haddaynu Masiixa la dhimannay, waxaynu rumaysan nahay inaynu haddana isaga la noolaan doonno. <sup>9</sup>Waynu og nahay in Masiixa oo kuwii dhintay ka sara kacay uusan mar dambe dhimanayn; dhimashadu mar dambe u talin mayso. <sup>10</sup>Waayo, dhimashaduu dhintay mar keliya ayuu xagga dembiga ka dhintay, laakiin noloshuu ku nool yahay, Ilaah buu u nool yahay. <sup>11</sup>Sidaas oo kalena idinku isku tiriya inaad dembiga u tihiin kuwo dhintay, oo aad Ilaah u tihiin kuwo nool xagga Ciise Masiix.**

**6:8 “haddii”** waa eray shuruud ah oo qoraagu rabo inuu ujeeddadiisa ku caddeeyo. Baabtiiska Masiixigu wuxuu tusaale u yahay sida qofku ula dhimanayo Masiixa.

▣ **“haddana isaga la noolaan doonno”** qoraalkani wuxuu tilmaamayaa oo dalbayaa “halkan iyo imika” dhaqan (1 Yooxanaa 1:7), oo maaha wax u khaasa wakhtiga soo socda. Aayadda 5 ayaa waxay ka hadlaysaa sida aan Masiixa ula wadaagayno dhimashadiisa, halka aayadda 8 ay ka hadlayso sida aan ula wadaagayno noloshiisa. Tani haddaba, waa sida lagu dhaxlayo boqortooyada Ilaah ee kitaabku inoo sheegayo. Waana mid ka bilaabmaysa halkan iyo imika. Sidoo kale nimcada hadiyadda ahi, waa inay soo saarto is celinta nafta.

**6:9 “kuwii dhintay ka sara kacay”** waxay tan isla mid yihiin aayadda 6:4.

Axdiga Cusubi wuxuu haddaba, inoo sheegayaa in saddexda qof ee Saddexnimadu ay ka dhex shaqaynayeen sarakicidda Ciise: (1) Ruuxa (Rooma 8:11); (2) Wiilka (Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18); (3) Aabbaha (Falimaha Rasuullada 2:24,32; 3:15,26; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma 6:4,9). Shuqullada Aabbuhu waxay ahaayeen inuu ansixiyo aqbalitaanka nolosha Ciise, dhimashadiisa, iyo waxbaristiisa. Haddaba, tani waxay ahayd wixii ay ku salaysnayd wacdintii Rasuulladu. Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:2.

▣

**NASB** “dhimashadu mar dambe u talin mayso.”

**NKJV, NRSV** “dhimashadu mar dambe xukumi mayso”

**TEV** “intaas wax ka danbeeya dhimashadu uma talin doonto”

**NJB** “dhimashadu awood kuma laha mar dambe korkiisa”

Falka *kurieuō* waxay ka timid *kurios* taasoo macneheedu yahay “ka wax leh” amaba “sayid”. Haddaba, Ciise waa Sayidka ka sarreeya dhimashada (Muujintii 1:18). Waa ka ugu horreeyay ee ka adkaaday jebiyayna dhimashada (1 Korintos 15)!

**6:10 “dhimashaduu dhintay mar keliya ayuu xagga dembiga ka dhintay”** Ciise wuxuu ku noolaaday duni denbi miidhan ah isagoon weligiis denbaabin. Denbigii dunida ayaa isaga iskutallaabtaa ku qodbay (Cibraaniyada 10:10). Beddelkii Masiixu u dhintay aadanaha daraaddood ayaa waxa uu ka takhalusay Sharciga oo iyaga cidhib darro ku hayay (Galatiya 3:13; Kolosay 2:13-14).

▣ **“mar keliya”** halkan Bawlos waxa uu ku sheegayaa qodbitaankii Masiixa ee iskutallaabtaa dusheeda. Haddaba, dhimashadiisa kelida ahayd ee uu u dhintay denbiga aawadiis, ayaa waxay saamaysay kuwa isaga raaca.

Sidoo kale kitaabka Cibraaniyada ayaa tilmaamaya awoodda Masiixa iyo sida mar qudha dhimashadiisa u noqotay kafaaro gudka. Waana badbaadada iyo cafiska ugu wayn ee weligeed la sameeyay (“mar keliya” [ephapax]7:27; 9:12; 10:10 iyo “mar keliya dhammaantood” [hapax], 6:4; 9:7,26,27,28; 10:2; 12:26,27). Waa kafaara gudka la dhammays tiray.

▣ **“laakiin noloshuu ku nool yahay, Ilaah buu u nool yahay”** Masiixiyiintu waxay u nool yihiin Ilaah, Masiixa xaggiisa, sidaasi darteedna ujeeddada injiilku maaha cafiska oo keliya, laakiin waa adeegitaanka Ilaah. Masiixiyiinta waxa loo badbaadiyay adeegitaan.

**6:11 “isku tiriya inaad denbiga u tihii kuwo dhintay”** aqoonta Masiixiyiintu u leeyihiin Masiixa shaqadiisa uu iyaga daraaddood u qabtay, waxay tahay mid muhiim u ah nolol maalmeedka. Erayga “tiriya” (4:4,9), waxay ahayd eray loo adeegsado xisaabinta oo macneheedu yahay “adoo ka fiirsanayay ku dar” kaddibna fal cilmigaas amaba aqoontaasi. Aayadaha 1-11 waxay ina barayaan heerka uu qofku ka taagnaan karo Masiixa, halka 12-13 ay ka sheegayaan isaga ku dhex socoshadiisa iyo ku dayashadiisa. Eeg Mawduuca Gaarka ah aayadda 4.

#### **AAAYADHA 6:12-14**

<sup>12</sup>Sidaas daraaddeed denbigu yuusan jidhkiinna dhimanaya u talin inaad damacyadiisa xunxun addeecdaan. <sup>13</sup>Xubnihiinnana denbiga ha u siinina sida qalabka xaqdarrada, laakiin Ilaah isa siiya sida idinkoo ah kuwo ka soo noolaaday kuwii dhintay, xubnihiinnana Ilaah u siiya sida qalabka xaqnimada. <sup>14</sup>Waayo, denbigu idiinma talin doono, maxaa yeelay, sharciga kuma hoos jirtaan, laakiinse waxaad ku hoos jirtaan nimcada.

**6:12 “Sidaas daraaddeed denbigu yuusan jidhkiinna dhimanaya u talin”** macneheedu waxa weeyi joojinta falalka horeba loo samaynayay ee denbiga ah. erayga “talin” wuxuu la xidhiidhaa 5:17-21 iyo 6:23. Bawlos waxa uu dhowr waxyaabood oo fiqi ah (1) talinta dhimashada (5:14,17: 6:23); (2) nimcada oo u talisa sida boqor oo kale (3) denbigu wuxuu u taliyay sida boqor oo kale. Su’aasha dhabta ahi waxay tahay, adiga naftaada yaa kuu taliya? Qofka rumaysadka lihi wuxuu leeyahay awood uu ku doorto Ciise! Muhiimadda u taalla haddaba, kaniisadda iyo dadka rumaysadka leh waxa weeyi, inay maamulaan naftooda.

**6:13 “Xubnihiinnana denbiga ha u siinina”** waa fal hore u socday oo loo baahan yahay in la joojiyo. Waxay haddaba, arrintani tusinaysaa saamaynta uu denbigu ku yeelan karo nolosha Masiixiyiinta (7:1; 1 Yooxanaa 1:8-2:1). Laakiin denbiga waxa lagaga fogaan kara iyada oo rumaystuhu xidhiidh toosa la yeesho Masiixa, aayadaha 1-11.

▣ **“sida qalabka”** jidhku waxa weeyi xarunta jarribaadda (aayadaha 12-13; 12:1-2; 1 Korintos 6:20; Filiboy 1:20). Haddaba, nolosheenu waa inay noqoto mid soo ban dhigta warka wanaagsan.

▣ **“laakiin Ilaah isa siiya”** rumaystayaashu waxay arrintan ku samayn karaan badbaadada rumaysadka, laakiin waa inaanay joojinin oo noloshooda kusii wadaan.

Is barbar dhigga aayaddan

1. fal isku mida labadubana waa muhiim
2. tusaale dagaal
  - a. hubka xaqnimodarrada
  - b. hubka xaqnimada
3. Masiixiyiintu waxay nafhooda siin karaan denbiga amaba Ilaah

Xasuunow aayaddani waxay tilmaamaysaa Masiixiyiinta –ikhtiyaarku waa mid socda; dagaalkuna waa mid socda.

**6:14 “denbigu idiinma talin doono”** tani waa qaab mustaqbal ahaaneed (Sabuurka 19:13) una shaqaynaya qaab muhiimadi ku jirto, “denbiga waa inaanu idiin talinin!” haddaba, denbigu uma talin doono rumaystayaasha, maxaa yeelay uma taliyo Masiixa, (aayadda 9; Yooxanaa 16:33).

**AAYADAHA 6:15-19**

<sup>15</sup>Waa sidee haddaba? Sharciga kuma hoos jirno, oo waxaynu ku hoos jirnaa nimcada, sidaas daraaddeed miyaan dembaabnaa? Yaanay noqon! <sup>16</sup>Ma waydaan ogayn inaad addoommo u tihiin kii aad isu siisaan sida addoommo addeeca, oo aad addoommadiisa tihiin kii aad addeecdaan, ama ha noqoto dembiga idiin kaxeeya xagga dhimashada ama addeecidda idiin kaxaysa xagga xaqnimada? <sup>17</sup>laakiinse mahad Ilaah baa leh waayo, waxaad ahaan jirteen addoommadii dembiga, haatanse qalbigiinaad ka addeecdeen caynaddii waxbariddii laydin siiyey; <sup>18</sup>oo idinkoo dembiga laydinka xoreeyey, xaqnimada ayaad addoommo u noqoteen. Rom 6:19 Sida dadkaan u hadlayaa jidhkiinna itaaldarradiisa aawadeed. Waayo, sidii aad xubnihiinna uga dhigi jirteen addoommadii wasakhnimada iyo dembiga inaad dembi fashaan, sidaas oo kalena haatan xubnihiinna ka dhiga addoommadii xaqnimada qodusnaanta aawadeed.

**6:15** markale ayaa halkan su'aal lagu soo jeediyay, waxayna la mid tahay 6:1. Labaduba haddaba, waxay ka jawaabayaan su'aalo kala gedisan oo ku saabsan Masiixiyiintu xidhiidhka ay la leeyihiin denbiga. Aayadda 1 waxay ka hadlaysaa nimcada iyo inaan loo adeegsanin jid lagu dembaabo, halka aayadda 15 ay kaga hadlayo, in Masiixiyiintu u baahan yihiin la dagaallanka iyo iska caabinta denbiga. Sidoo kale rumaystuhu waa inuu u adeego Ilaah sidii horeba uu denbiga ugu adeegi jiray.



NASB, NKJV,

TEV

“miyaan dembaabnaa”

NRSV

“miyaan denbaabi doonnaa”

JB

“inaan denbiga xor u nahay”

Tarjumaadaha Williams iyo Phillips waxay u tarjumayaan si la mida aayadda 1. Ogsoonow tarjumaadaha kale (1) KJV, ASV, NIV waxay odhanayaan “miyaan denbaabnaa?”; (2) Centenary Translation wuxuu odhanayaa “miyaan galnaa falka denbiga?” (3) RSV “ma inaynu denbaabnaa?” haddaba, arrintani waxay ahayd qaab canaaneeed uu adeegsan jiray Bawlos, isaga oo markaasna inuu soo ban dhigo xaqiiqada.

**6:16** su'aasha waxa laga yaabaa inay filanayso jawaabta ah “haa.” Aadanuhu waxay u adeegaan wax amaba qof. Yaa haddaba noloshada u taliya, denbiga mise Ilaah? aadanuhu cidda ay addeecaan ayaa muujinaysa cidda uu yahay kan ay u adeegaan (Galatiya 6:7-8).

**6:17 “laakiinse mahad Ilaah baa leh”** Bawlos wuxuu usoo laabanayaa ammaanta Ilaah. qoraalladiisa waxa la socda ducooyin ku salaysan aqoonta uu u leeyahay injiilka. Eeg Mawduuca gaarka 7:25.

▣ “waxaad ahaan jirteen” waa falka tusinaya wixii hore dadku hore u ahaan jireen, waxaanay ahaayeen addoommada denbiga,

▣ “qalbigiinaad ka addeecdeen caynaddii waxbariddii laydin siiyey;” qoraalkani wuxuu tilmaamayaa sida rumaysadka xaqa loogaga dhigay, taasi oo la rabo inay innoo hogaamiso la midnimada Masiixa oo ka muuqanaysa nolol maalmeedkeenna. Erayga “waxbariddu” wuxuu u noqonayaa waxbaristii Rasuullada ee ku saabsanayd injiilka.

▣ “qalbi” eeg mawduuca gaarka ah 1:24.



NASB

“caynaddii waxbariddii laydin siiyey;”

NKJV

“caynaddii caqiidadii la idin siiyay”

NRSV, NIV

“nooca waxbariddii aad rabteen”

TEV

“runta ku jirta waxbariddii la idin siiyay”

NJB

“tusaalaha waxbariddii la idin baray”

## MAWDUUC GAAR AH: CAYNAD

Dhibku wuxuu ka taagan yahay erayga *tupos* oo siyaabo kala gedisan loo adeegsado:

- 1 Moulton iyo Milligan, *The Vocabulary of the Greek New Testament*, p. 645
  - a. Tusaale
  - b. qorshe
  - c. qaab amaba nooc wax loo qoro
  - d. darajo
  - e. xukun amaba go'aan
  - f. nooca jidhka aadanaha
  - g. fal loo adeegsaday xoojinta sharciyada
2. Louw iyo Nida, *Greek-English Lexicon*, vol2, p. 249
  - a. calaamad (Yooxanaa 20:25)
  - b. sawir ama muuqaal (Falimaha Rasuullada 7:43)
  - c. nooc (Cibraaniyada 8:5)
  - d. tusaale (1 Korintos 10:6; Filiboy 3:17)
  - e. asal (Rooma 5:14)
  - f. nooc (Falimaha Rasuullada 23:25)
  - g. tusmo (Falimaha Rasuullada 23:25)
3. Harold K. Moulton, *The Analytical Greek Lexicon Revised*, p. 411
  - a. calaamad (Yooxanaa 20:25)
  - b. summad
  - c. muuqaal amaba sawir (Falimaha Rasuullada 7:43)
  - d. qaacido amaba nidaam (Rooma 6:17)
  - e. caddayn (Falimaha Rasuullada 23:25)
  - f. tusaale (1 Korintos 10:6)
  - g. nooc (Rooma 5:14; 1 Korintos 10:11)
  - h. nooc tusaale (Falimaha Rasuullada 7:44; Cibraaniyada 8:5)
  - i. tusaalaha wanaagsan (Filiboy 3:17; 1 Tesaloniika 1:7; 2 Tesaloniika 3:9; 1 Timoteyos 4:12; 1 Butros 5:3).

Waxa haddaba, ugu macquulsan kan koobaad. Injiilku wuxuu isugu jiraa caqiidada iyo camal falka intaba, sidoo kale hadiyadda badbaadada ee Masiixa aan ku helnay, waxay u baahan tahay la midnimada Masiixa!

**6:18 “oo idinkoo dembiga laydinka xoreeyey”** injiilku waxa uu Masiixiyiinta ku xoreeyay adeegga Ruuxa ee xagga shaqada Masiixa. Masiixiyiinta waxa laga xoreeyay denbiga (xaq lagaga dhigay) iyo ka dhawrsanaanta denbiga (aayadaha 7 iyo 22).

▣ **“xaqnimada ayaad addoommo u noqoteen.”** Waxaad noqoteen kuwo ay addoonsato xaqnimada. Eeg mawduuca gaarka ah 1:17. Rumaystayaasha waxa laga xoreeyay denbiga si ay Ilaah ugu adeegaan (aayadaha 14,19,22; 7:4; 8:2)! Ujeeddada nimcada hadiyadda ahi waxa weeyi cibaado. Haddaba, xaq kaga dhigistu waxay isugu jirtaa tan shaqsida xaq lagaga dhigay Masiixa aawadiis iyo camal falka. Ilaahna waxa uu rabaa inuu inna badbaadiyo oo inna beddelo, si aan u gaadhno kuwa kale!

**6:19 “Sida dadkaan u hadlayaa jidhkiinna itaaldarradiisa aawadeed”** Bawlos waxa uu la hadlayaa rumaystayaasha jooga Rooma. Haddaba, ma waxa uu ka hadlayaa dhibaato dhexdooda jirta oo uu wax ka maqlay(hinaasihii u dhexeeyay Yuhuudda rumaystayaasha ah iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn) mise wuxuu ka hadlayaa xaqiiqada gebi ahaanba rumaystayaasha? Ereyadan mar hore ayuu Bawlos ku dhex adeegsaday Rooma 3:5, sida uu ugu adeegsanaya Galatiya 3:15 oo kale.

Aayadda 19 waxay la mid tahay tan 16, halkaasna Bawlos waxa uu kusoo celinayaa ujeeddada fiqi ahaaneed ee uu rabo inuu ka hadlo. Waxa kale oo la sheegaa in ujeedadiisu tahay, isagoo ka cudur daaranaya tusaalaha addoonka ee uu adeegsaday. Si kastaba ha ahaatee, “jidhkiinna itaaldarradiisa aawadeed” kuma habboona in sidaas lagu sheego. Sidoo kale adoonsiga wax xun looma arki jirin qarnigii ugu horreeyay, gaar ahaan dadka reer Rooma. Waxaanay ahayd dhaqan iska fudud maalmahaas.

▣ **“jidh”** eeg Mawduuca Gaarka ah 1:3.

▣ **“goduusnaanta aawadeed”** tani waa ujeeddada xaq kaga dhigista (aayadda 22). Axdiga Cusubi eraygan wuxuu u adeegsaday laba arrimood oo fiqi ahaaneed lana xidhiidha badbaadada (1) quduus ka dhigista sugan, taasoo ah

hadiyadda Ilaah, laguna bixiyay xaqnimada Masiixa (Falimaha Rasuullada 26:18; 1 Korintos 1:2; 6:11; Efesos 5:26-27; 1 Tesaloniika 5:23; 2 Tesaloniika 2:13; Cibraaniyada 10:10; 13:12; 1 Butros 1:2) iyo (2) quduusnimada camalka, taasoo iyana ah shaqada Ilaah ku qabanayo Ruuxa Quduuska kana dhigay nolosha rumaystahay mid is bedesha oo ka dhigta qofka camalkiisu inuu quduus ahaado (2 Korintos 7:1; 1 Tesaloniika 4:3,7; 1 Timoteyos 2:15; 2 Timoteyos 2:21; Cibraaniyada 12:10,14). Eeg Mawduuca gaarka ah: quduusnimada 6:4.

Waxay isugu jirtaa hadiyad iyo amar! Waxay isugu jirtaa mid sugan iyo camal fal! Waxay ku imanaysaa bilowga, laakiin hana qaad ma noqonayso ilaa laga gaadho dhammaadka (Filiboy 1:6; 2:12-13).

#### **AAAYADAAHA 6:20-23**

<sup>20</sup>Waayo, markaad addoommadii dembiga ahaan jirteen, xagga xaqnimada waxaad ahaydeen xor. <sup>21</sup>Haddaba wakhtigaas maxaad midho ku haysateen waxyaalaha aad haatan ka xishoonaysaan? Waayo, waxyaalahaas ugu dambaystoo waa dhimashada. <sup>22</sup>Laakiin haatan idinkoo dembi laydinka xoreeyey oo aad addoommadii Ilaah noqoteen, waxaad midho ku haysataan qoduusnaanta oo ugu dambaysteeduna waa nolosha weligeed ah. <sup>23</sup>Waayo, mushahaarada dembigu waa dhimashada, laakiinse hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed ah ee laga helo Rabbigeenna Ciise Masiix.

**6:20-21** waxay ka hadlaysaa wax kusaabsan kasoo horjeedka aayadaha 18 iyo 19. Rumaystayaashu waxay u adeegi karaan oo keliya hal sayid (Luukos 16:13).

**6:22-23** Ilaahbaan ku mahadsan inaan ka hadalno denbiga iyadoo rumaystuhuna ugu dambaynta muhiimmadda siinayo nimcada. Ugu horrayn hadiyadda badbaadada kaddibna hadiyadda nolosha ay ku dheehan tahay cibaadada iyo camalka suubani. Labadanba haddaba, waxa lagu helaa rumaysad iyo towbad keen.

**6:22** “midho ku haysataan qoduusnaanta oo ugu dambaysteeduna waa nolosha weligeed ah.” erayga “midho ku haysasho” waxa lagu dhex adeegsaday aayadda 21, si looga hadlo cidhibta danbe ee denbiga, laakiin aayadda 22 waxay ka hadlaysaa cidhibta laga dhaxli doono u adeegista Ilaah. midho helista isla markaasba laga helayaa waxay tahay nolosha rumaystaha ee ay ku dheehan tahay quduusnimadu. Faa’idada aan xadka lahaynina isaga ayay la jirtay oo waa isaga oo kale (1 Yooxanaa 3:2). Haddii natijjo degdeg ahi aanay jirin (beddelka noloshu Yacquub 2) waxa markaas la is waydiin karaa natijjada aan xadka lahayn (nolosha weligeed ah, Matayos 7). Midhona ma jiraan, xididna ma jiro!

**6:23** waa soo koobitaanka gebi ahaanba cutubkan. Bawlos waxa uu doorashada ka dhigay caddaan iyo madow, oo innaga ayaa iska leh ikhtiyaarka aan ku kala dooranayno, denbiga iyo dhimashada iyo nimcada iyo nolosha weligeeda ee lagu helayo Masiixa. Waxay aad ugu dhowdahay labada jid ee xikmadda Axdiga Hore (Sabuurka 1; Maahmaayadii 4; Matayos 7:13-14).

☐ **“mushahaarada dembigu”** Denbiga waxa lagu tilmaamay sida (1) mid addoon leh, (2) taliye ciidan, amaba (3) boqor bixiya mushahaaro (3:9; 5:21; 6:9,14,17).

☐ **“hadiyadda Ilaah waa nolosha weligeed ah”** eraygan, “hadiyad” ee laga tarjumay (*charisma*) wuxuu kasoo jeedaa nimco (*charis*, 3:24; 5:15,16,17; Efesos 2:8-9).

#### **SU’AALO FALAQAYN AH**

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

Sidee camalka wanaagsani ula xidhiidhaa badbaadada (Efesos 2:8-9,10)?

1. Sidee denbiga rumaystaha ee xidhiidhka ahi ula xidhiidhaa badbaadada (1 Yooxanaa 3:6,9)?
2. Cutubkani miyuu ina barayaa “denbi la’aan iyo quduusnimo?”
3. Sidee cutbka 6 ula xidhiidhaa cutubka 5 iyo 7?
4. Maxay tahay sababta baabtiiska halkan loogaga hadlay?
5. Masiixiyiintu miyay ku noqon karaan dabeecaddoodii horee gabowday? Waa maxay sababtu?
6. Muxuu yahay waxa taagan ee lagaga hadlayo aayadaha 1-14 iyo aayadaha 15-23?

# ROOMA 7

QAYBAHA BAARAGARAAFYADAAE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Masaal ku saabsan guurka	Ka xoroobidda Sharciga	Masaal ku saabsan guurka	Muuqaalka guurka	Masiixiga Sharciga laguma waajibin
7:1-6	7:1-6	7:1-3 7:4-6	7:1-6	7:1-6
Dhibaataada denbiga	Midhaha denbiga iyo sharciga	Sharciga iyo denbiga	Sharci iyo denbiga	Shaqada Sharciga
7:7-12	7:7-12	7:7-12	7:7-11	7:7-8 7:9-11
	Sharciga lagagama badbaadayo denbiga		7:12-13	7:12-13
7:13-25	7:13-25	7:13		
		Khilaafka gudaha	Khilaafka ku dhix jira qofka	Abaal marinta loollanka
		7:14-20	7:14-20	7:14-20
		7:21-25a	7:21-25a	7:21-23 7:24-25a
		7:25b	7:25b	7:25b

## AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

### IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-6

- A. Cutubka 7 waxa lagu tarjumay (1) iftiinka cutubka 6, gaar ahaan aayadaha 12-14 (sidoo kale, 3:20,21-31; 4:13-16; 5:20), amaba (2) waxa kaloo uu la xidhiidhi karaa kaniisaddii Rooma iyo khilaafkii dhex taagnaa Yuhuuddii iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn ee Masiixiyiinta ahaa, waana midda ka muuqanaysa cutubiyada 9-11. Haddaba, dhibaataada runta ahi waa mid aan caddayn, waxaanay noqon kartay:
1. Ku dhaqanka Sharciga Muuse,
  2. Yuhuuddu Muuse ayay ka horraasiinayeen Masiixa,
  3. Fahan darrada sida injiilka loogu dabaqi karo Yuhuudda,
  4. Fahan darrada ku saabsan xidhiidhka u dhexeeya Axdiga Hore iyo kan Axdiga Cusub,
  5. Hinaasihii hoggaankii Yuhuudda oo lagu bedelay kuwo aan Yuhuud ahayn.
- B. Rooma 7:1-6 wuxuu sii xidhiidhinayaa luqadda ku dhisan tusaalaha ee cutubka 6, taasoo ku saabsan xidhiidhka Masiixiga iyo noloshiisii hore. Tusaalayaasha la adeegsaday waa:
1. Dhimashada iyo addoonsiga oo looga xoroobayo mid kale (cutubka 6)
  2. Dhimashada iyo ka xoroobidda waajibadka guurka (cutubka 7).
- C. Cutubka 6 iyo 7 fahan ahaan way siman yihiin; cutubka 6 wuxuu ka hadlayaa xidhiidhka Masiixigu la yeelan karo “denbiga” iyo cutubka 7 oo isna ka hadlayay, xidhiidhka Masiixigu la yeelan karo “Sharciga.” Masaalka ku saabsan dhimashada iyo ka xoroobidda addoonsiga (6:12-23) waxay la siman tahay ka xoroobidda guurka marka dhimashadu timaaddo (7:1-6).

Cutubka 6	Cutubka 7
6:1 “denbi”	7:1 “sharci”
6:2 “dhimashada denbiga”	7:4 “dhimashada sharciga”
6:4 “cusaybka nolosha ku dhex soconno.”	7:6 “si aynu ugu adeegno cusaybka ruuxa”
6:7 “kii dhintay dembi wuu ka xoroobay”	7:6 “harcigii waa laynaga furay, innagoo kala dhimannay wixii aynu ka hoos xidhnayn”
6:18 “idinkoo dembiga laydinka xoreeyey”	7:3 “sharciga way ka furan tahay”

(Waxaa laga soo qaatay Anders Nygren *Tafsiirkiisii Kitaabka Rooma* ee tarjumaadda Carl C. Rassmussen, bogga. 268)

- D. Sharciga darajadiisu waxay ahayd xukun dhimasho ah. dhammaan dadku waxay hoos tegayeen Sharciga (Rooma 6:14; 7:4; Galatiya 3:13; Efesos 2:15; Kolosay 2:14). Sharcigu wuxuu ahaa inkaar.
- E. Waxa jira aragtiyo dhowra oo ku saabsan fasiraadda cutubka 7
1. Bawlos isaga ayaa isla hadlayay
  2. Bawlos wuxuu u hadlayaa sidii isagoo metalaya aadanaha oo dhan.
  3. Bawlos wuxuu ku hadlayaa khibraddii Aadan.
  4. Bawlos wuxuu ku hadlayaa khibraddii amaba waayo aragnimadii Israa’iil.
- F. Dhinacyo badan ayaa Rooma 7 wuxuu uga eeyahay Bilowgii 3. Waxa uu tusinayaa dhaxlitaanka denbiga iyo caasinimada xitaa kuwa Ilaah udhow. Haddaba garashadu maaha tan xorriyadda siin karta aadanaha leexday, laakiin waxa siin karta ookeliya nimcada Ilaah, waxaana taas samayn kara qalbiga cusub (Axdiga Cusub, Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:26-27). Laakiinse xitaa ilaa markaas waxa jira loollan soconaya.



## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 7:1-3

<sup>1</sup>Mise ma waydaan ogayn, walaalayaalow, in sharcigu nin u taliyo intuu nool yahay oo keliya? (Waxaan la hadlayaa dadka sharciga yaqaan.) <sup>2</sup>Naagtii nin luhu sharcigay ugu xidhan tahay ninkeeda intuu nool yahay, laakiinse mar haddii ninku dhinto, way ka furan tahay sharcigii ninka. <sup>3</sup>Sidaas daraaddeed inta ninkeedu nool yahay, hadday nin kale naag u noqoto, waxaa loogu yeedhi doonaa dhillo, laakiinse ninkeedu hadduu dhinto, sharciga way ka furan tahay, oo sidaas daraaddeed dhillo ma aha in kastoo ay nin kale naag u noqoto.

7:1 “(Waxaan la hadlayaa dadka sharciga yaqaan)” waxa tani ay la xidhiidhi kartaa (1) Yuhuudda rumaystayaasha ahaa oo keliya; (2) khilaafkii u dhexeeyay Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynee kaniisaddii Rooma; (3) sharciga marka la eego dareenka ay ka qabaan dadka oo dhammi (2:14-15); ama (3) kuwa cusub ee rumaystayaasha ah een Yuhuudda ahayn, isla markaasna aaminsanaa qoraallada Axdiga Hore.

▣ “sharcigu” waa muhiimmadda amaba ujeeddada uu ka hadlayo cutubku (aayadaha 1,2,4,5,6). Si kastaba ha ahaatee, Bawlos eraygan wuxuu u adeegsaday siyaabo kala gedisan, waxayna u muuqataa in hadalkiisu yahay mid ka dhalanaya 6:14. Sida uu u hadlayaa waxay la mid tahay sidan uu ugu hadlayo cutubka 6. Eeg fahanka macnaha guud ee C. Haddaba, Sharciga iyo xidhiidhka uu la leeyahay Axdiga Cusub ee Masiixa dhexdiisu, waxa uu yahay mid isna lagaga hadlayo 3:21-31 iyo 4:13-16.

▣

NASB “in sharcigu nin u taliyo intuu nool yahay oo keliya”  
NKJV “in Sharcigu haysto maamulka ninka intuu nool yahay”  
NRSV “sharciga wuxuu hoggaamiyaa oo keliya inta qofku noolyahay”  
TEV “Sharcigu wuxuu ninka u taliyaa inta uu noolyahay oo keliya”  
JB “saamaynta Sharcigu ku leeyahay qofku, waa inta uu noolyahay oo keliya”

Fahan ahaan waxa weeyi “wuu u taliyaa” (*kureuō* 6:9,14). Sharciga Muuse wuxuu isugu jiraa barako (Sabuurka 19; 119), iyo inkaar aad u xun (Galatiya 3:13; Efesos 2:15; Kolosay 2:14). Oo ah dhimasho jidh ahaaneed, iyo fulinta waajibbaadka saaran qofka guudkiisa. Tusaalahan oo kale ayaa haddaba, lagu dhex adeegsaday cutubka 6, waana dhimashada denbiga ee qofka rumaystaha ah.

7:2 “Naagtii nin luhu” waa midda uu badiyaa Bawlos kaga hadlayo aayadaha 1-6. Cutubka 6 waxa uu kusoo qaatay iyada oo dhimashadu reebayso qofka waajibbaadka saaran addoon ahaan, halkanna gurka iyo waajibbaadkiisa ayuu kusoo qaadanayaa. Tilmaanta waa la hakiyey sababtoo ah waxa dhintay waa ninka sidaas daraaddeed carmalka laga dhintay dib ayey u guursan kartaa, halkaa Bawlos tilmaantiisa la mid ahaanshuhu ay tilmaamayso, in kan dhintay uu yahay rumaystaha oo, sidaas daraaddeed, uu nolol ku helayo Ilaah.

▣ “way ka furan tahay” waa fal la mida kan ku sugan 6:6; waxaana macneheedu yahay “waxa laga dhigay waxaan shaqaynayn.” Waxay noqon doontaa mid furanta oo aan intaas kaddib sii hoos joogin sharciga. Eeg Mawduuca Gaarka ah 3:3.

7:3 “waxaa loogu yeedhi doonaa dhillo” waxay la xidhiidhaa dooddii Yuhuudda ee u dhexaysay dugsiyadii rabbaaniyiinta ee Shammi iyo Hillel ee Sharciga Kunoqoshadiisa 24:1-4; Hillel waxay ahaayeen kuwo dhexdhexaada oo qof walba u ogaanayay inuu furniin samayn karo sababta ay doontaba ha ahaatee. Shammai iyaguna waxay ahaayeen kuwo mayal adag, oo furniinka ogalaanayay haddii sino ay timaaddo oo keliya (Matayos 5:32; 19:9).

### AAYADAHA 7:4-6

<sup>4</sup>Sidaas daraaddeed, walaalahayow, jidhkii Masiixa baa meyd idinka dhigay xagga sharciga, in mid kale idin lahaado, oo ah kii kuwii dhintay laga sara kiciyey inaynu Ilaah midho u soo bixinno. <sup>5</sup>Waayo, markii aynu jidhka ku dhex jirnay, damacyadii dembiyada ee sharciga ka yimid waxay ka dhex shaqaynayeen xubnaheenna inay midho u soo bixiyaan dhimasho. <sup>6</sup>laakiinse haatan sharcigii waa laynaga furay, innagoo kala dhimannay wixii aynu ka hoos xidhnayn, si aynu ugu adeegno cusaybka ruuxa ee aynaan ugu adeegin gabowga qorniinka.

**7:4 “idinka dhigay”** muhiimadda baaragaraafkan (iyo cutubka 6) ayaa waxay uga eegtahay xagga sida Masiixiyiintu ugu dhintaan denbiga sidii Masiixa oo kale (2 Korintos 5:14-15; Galatiya 2:20). Masiixiyiintu waxay abuur cusub ku yihiin Masiixa dhexdiisa (2 Korintos 5:17).

▣ **“jidhkii Masiixa”** fiqi ahaan waxay tilmaamaysaa kaniisadda oo ah jidhka Masiixa (1 Korintos 12:12,27), laakiin jidhka Masiixa sida ku sugan 6:3-11, waxa weeyi markii Masiixu dhintay waxay u tahay mid lagu aqoonsado Masiixiyiinta xagga baabtiiska, iyadoo ka dhigan inay la dhinteen isaga. Dhimashadiisu waxay ahayd dhimashadooda (2 Korintos 5:14-15; Galatiya 2:20). Sarakiciddiisuna waxay iyaga xor uga dhigtay si ay Ilaah ugu adeegaan.

▣ **“inaynu Ilaah midho u soo bixinno”** sidoo kale waxay la simantahay cutubka 6, gaar ahaan 6:22. Masiixiyiinta waxa xor lagaga dhigay Masiixa. Waa masaal ku saabsan xagga guurka. Sida Masiixu ugu dhintay rumaystayaasha, waa inay iyaguna imika u dhintaan denbiga (2 Korintos 5:13-14; Galatiya 2:20). Sidii Masiixaba loo sara kiciyay, ayaa iyagana loogu sara kicinayaa nolosha cusub iyo inay Ilaah u adeegaan (Rooma 6:22; Efesos 2:5-6).

**7:5**

▣ **NASB** “markii aynu jidhka ku dhex jirnay”  
**NKJV** “kolkii aynu jidhka ku dhex jirnay”  
**NRSV** “markii aynu jidhka ku dhex noolayn”  
**TEV** “markii aan ku noolayn xagga dabeecadda aadanaha”  
**JB** “intii aynaan rumaysadka yeelan ka hor”

Aayaddan iyo tan 4 farqibaa u dhexeeya. Aayadda 4 waxay la xidhiidhaa khibrada rumaystaha sida aayadda 6. Aayadda 5 waxay haddaba, sheegaysaa “midhaha’ noloshu ay leedahay awoodda Ilaah la’aanteed (Galatiya 5:18-24). Sharciga rumaystayaasha wuxuu tusinayaa dembigooda (aayadaha 7-9; Galatiya 3:23-25), laakiin ma siinayo awoodda ay denbiga kaga guulaysan karaan.

Waxay tilmaamaysaa haddaba rumaystayaashu denbigii ay ka dhaxleen Aadan (6:19). Bawlos eraygan *sarx* wuxuu u tilmaamayaa laba siyaabood oo kala gedisan (1) dabiicadda denbiga, iyo (2) jidhka (1:3; 4:1; 9:3,5). Halkan waa dhinaca xun Laakiin ogaysiis Rooma 1:3; 4:1; 9:3,5; Galatiya 2:20. Jidhku (*sarx/soma*) maaha kuwo shar ah asal ahaantooda, laakiin waa xarunta jarribaadaha, waana meesha sharka iyo Ruuxuba dhex degi karaan. Bawlos waxa uu tusaalahan u adeegsanayaa hab la mid ah Septuagint-ga ee uusan ahayn qoraalka Giriigga.

▣ **“ee sharciga ka yimid”** xad gudubka aadanaha ee dabiiciga ahi waxa uu ka muuqanayaa Bilowgii 3 waxaanu ku dhex jiraa aadanaha oo dhan. Sharciga waxa uu dejiyay xuduud (aayadaha 7-8). Haddaba, xuduuddani waxay ahaayeen kuwo ilaalinaya aadanaha, laakiin waxay u arkeen silsilad iyo wax iyaga xad u dhigaya. Denbiga waxa haddaba lagu muujiyay Sharciga Ilaah, balse dhibaataada may ahayn xadaynta (sharci, aayadaha 12-13), laakiin waa doonista dadka.

**7:6 “laakiinse haatan”** waxa tafatiraad xiiso leh qoraya Newman and Nida, *A Translator’s Handbook on Paul’s Letter to the Romans*.

“waxa muhiim ah in la ogaado isu ekaanshaha ka dhexeeya aayadaha 5 iyo 6, iyo sidoo kale xidhiidhka ka dhexeeya. Aayadda 5 waxay tilmaamayaan khibradihii hore ee Masiixiyiinta, iyo sida ay isu midka u yihiin 7:7-25; aayadda 6 waxay ka hadlaysaa nolosha xadirka ah ee hoos joogta rumaysadka iyo hoggaaminta Ruuxa Ilaah, waxaanay la simantahay 8:1-11” (p.130).

▣ **“waa laynaga furay”** rumaystayaasha sharciga waxay ku barteen denbiga, laakiin hadda waxa lagu xoreeyay Ruuxa iyo warka wanaagsan ee injiilka. Erayadan kuwo u eeg waxa loo adeegsaday naagta ninkeedu dhintay, sida aan ka arki karno aayadda 2.

▣ **“innagoo kala dhimannay wixii aynu ka hoos xidhnayn”** Ilaah rumaystayaasha waxa uu kaga xoreeya Masiixa dhimashadiisa (1) inkaartii Axdiga Hore (2) nafhooda denbigii ku jiray. Waxay ahaayeen kuwo ku hoos xidhan caasinimadooda ay Ilaah kagasoo horjeedaan, iyagoo samayn jirin denbi (Efesos 2:2-3)!

▣ **“cusaybka...gabowga”** nolosha cusub ee ruuxu waxay tahay Axdiga Cusub (Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:22-32). Erayga “cusayb” oo Giriigga ku ah (*kainos - kainotēs*) waxa adeegsaday Bawlos:

1. cusboonaysiinta nolsha, Rooma 6:4
2. cusboonaysiinta Ruuxa, Rooma 7:6
3. Axdiga Cusub, 1 Korintos 11:2; 2 Korintos 3:6
4. abuurka cusub, 2 Korintos 5:17; Galatiya 6:15
5. ninka cusub, Efesos 2:15; 4:24

Erayga “gabow” waxa loo adeegsadaa Sharcigii Muuse, oo Bawlosna waxa uu kala saarayaa Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub, sida qoraaga Cibraaniyadu samaynayo oo kale (8:7 iyo 13).

▣

**NASB, NKJV** “si aynu ugu adeegno cusaybka ruuxa”

**NRSV** “si aynaan qoraaladii hore addoomo ugu noqon, laakiin ugu adeegno nolosha cusub ee Ruuxa”

**TEV** “si aan ugu adeegno jidka cusub ee Ruuxa”

**JB** “xor ugu noqonno adeegitaanka jidka cusub ee Ruuxa”

Fahan ahaan waxa weeyi “ku cusboonaanta Ruuxa.” Haddaba, ma cadda midka loogala jeedo ruuxa aadana ee la cusboonaysiiyay, iyo Ruuxa Quduuska ah ka uu yahay. Tarjumaadaha luqadda Ingiriisidu badanaa marka ay sheegayaan Ruuxa Quduuska ah waxa la xarfaha hore ayaa laga dhigaa kuwo wayn, waana ugu horraynta midka lagu sheegayo Rooma 8 (15 jeer). Erayaga “Ruux” waxa uu tilmaami karaa ruuxda jidhka ee lagu cusboonaysiiyay injiilka iyo Ruuxa sid aan ka arki karno Rooma 1:4,9; 2:29; 7:6; 8:15; 11:8; 12:11; 1 korintos 2:11; 4:21; 5:3,4,5; 7:34; 14:15,16,32; 16:18.

Qoraallada Bawlos ee ka hadlayay “jidh” iyo “ruux” waxa loo kala saari karaa labo fikir iyo nololeed (7:14; 8:4; Galatiya 3:3; 5:16,17,25; 6:8). Nolosha aan Ilaah ku xidhnayni waxa weeyi “jidh” laakiin nolosha Ilaah ku xidhani waa “ruux” amma “Ruux.” Adeegitaanka Ruuxa Quduuska ahi (8:9,11) rumaystaha wuxuu u beddelaa abuur cusub oo ku dhix jira Masiixa.

## **FAHANKA MACNAHA GUUD EE ROOMA 7:7-25**

- A. Rooma 7:7-25 wuxuu ka hadlayaa xaqiiqada Aadanaha. Dhammaanba aadanahu ha isugu jiraan kuwo badbaaday iyo kuwo lumayee, waxay tijaabiyeen denbiga, waxaanay ka dareemayaan qalbiyadooda. “Maxaa uga la jeeday Bawlos sidii fariintan loo fahmi lahaa?” waxaa waajiba inay la xidhiidho qaabka cutubyada 1:18-6:23 iyo 8:39. Qaar ayaa waxa ay u arkaan in ay ku wajahan tahay dhammaan bani-aadanka oo dhan. S ideas daraadeed, waxa aad arkaysaa waayo aragnimadii rasuul Bawlos iyo Modelkiisii, turjumaadahaasna waxaa loogu yeedhaa “ferada Qaab dhuleedkii” Rasuul Bawlos waxa u isticmaalay “Aniga” inaanay haba yaraatee ahan waxa uu qofku doonaayo 1Korintos 13:1-3 iyada oo aan tan qofna isticmaalin anigu xitaa miyaan ahaan karayaa mid la qabsada ka imaanshii Yuhuuda iyo Diintooda Rabbayga. Haddii ay tani halkan run ka tahay fariintaasi waxa ay la xidhiidhaa ban-aadanka u soo gubinaysa ka ogayn waxaba inay qirtaan badbaadada (Cutubka 8) (fekradani waxa ay wakiil ka tahay)

Haddaba si kasta oo ay tahay ba qaar kale waxa ay u arkaan aayadahan inay xidhiidh la leedahay dhibaatooyin iyo la halgan uu leeyahay kan rumaysadka lihi waxa ay tahay mid ku dhacda dabecad ahaan bani-aadanka. Qalbigoodu waa murugaysan yahay waana ay ooyayaan aayada 24 waxa ay soo bandhigayaan waxa anaga qalbigeenka ku jira. AORST INUU YAHAY FICIL SAX AH OO SOCDA lana xidhiidha aayada 14:25. Tani waxa ay u muuqataa “Fekrad juquraafiyadeed” iyada oo uu halkaas Bawlos ku qeexaayey isaga waayo aragnimadiisii markii aanu waxba baranayn. Iyo qirashadii, uu qirtay Inuu ku qanco dareenkiisuna uu ku buuxsamo wadada horu marka isla markaasna u daahiro (cf *autos egō* Aniga qudhayda aayadda, 25).

Waxaa suuro gal ah in labadaas fekradood ba ay run yihiin, aayadaha 7:13 iyo 25 Bawlos waxa uu ka hadlaayey wixii ku saabsanaa Taariikhaha inaga oo ka helayna aayada 14-25. Isaga oo ka hadlaayey isaga waayo aragnimadiisii iyo inuu xagga qalbigiisa hoose dembi uu ka buuxay Isaga oo metelaayey dhammaanba inuu madax furosho Bani-aadanimo helo. Haddaba si kastaba ha ahaateen, waxa waajiba inaan xusuusano waxa ay fariintaasi xambaarsan tahay xitaa waxaa waajiba in lagu arko inaanu mar labaad dib u noqon. sidii uu Bawlos markiisii horeba u ahaa Mid ay ka gonayd Diinta Yuhuuda iyo ku

dhaqankeeda ka hor intii aan dib loo cusboonaysiin. Haddaba Bawlos waayo Aragnimdiisii waxa ay ahayd isaga mid asal ah.

- B. Sharcigu waa uu wanaagsan yahay, wuxuuna ka yimi Ilaahay , isaga ayaana ilaalinaaya, isla markaasina waxa aan ku sii socnaynaa sidii aan ugu adeegi lahayn, Ujeedada cad ee laga leeyahay. (cf. 7,7,12, 14, 22,25). Tani ma keenayso nabad iyo badbaado, James Stewart buugiisa *A Man in Christ* ayaa tusinaya caqli galnimada Bawlos qoraalladiisa:

“Dabiici ahaan ninka adeegsanaya qaab fikirka iyo caqiidada waxa laga rajaynayaa sheego macnaha erayada uu adeegsanayo. Waxa aad ka rajaynasaa inuu si saxa u macneeyo erayada uu u adeegsanayo fikiradiisa uu qabo. Waxaad dalbanaysaa eraygaas marka uu adeegsado qoraagaagu, sida gaarka ah ee uu u adeegsaday. Laakiin Bawlos erayadiisu waa sida daadka oo kale, waxaanay mararka qaar kugu noqonayaan kuwo aan dabacsanayn... ‘Sharcigu waa quduus’ ayuu qorayaa, waana sida aan ka arki karno (Rooma 7:12-13) laakiin waxa jirta saamayn kale oo ay leedahay *nomos* oo meel kasta aan ka arki karno, ‘Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga’ (Galatiya 3:13)” (p. 26).

- C. Cadaymaha ee khuseeya su’aasha ah, “Bawlos aayadaha 14-25, ma wuxuu kaga hadlayaa qof badbaaday mise midaan badbaadin?” ayaa waxay tahay sidan:

1. Qof aan badbaadin

- a. Tani waa fasiraadda hogaamiyayaasha kaniisaddii hore ee ku hadli jirtay luqada Giriigga
- b. Erayadan soo socda ayaa taageeraya aragtidan:
  - (1) “waxaan ahay mid jidhka” aayadda 14.
  - (2) “lagu iibiyey dembiga hoostiisa” aayadda 14
  - (3) “inaan wax wanaagsanu igu dhex jirin” aayadda 18
  - (4) “maxbuus iiga dhigaya qaynuunka dembiga oo xubnahayga ku jira” aayadda 23
  - (5) “Nin belaysan baan ahay. Yaa iga furan doona jidhkan dhimashada leh?” aayadda 24.
- c. Cutubka 6 isla markaba wuxuu ku bilaabmayaa inaan denbiga xor ka nahay. Laakiin cutubka 8 wuxuu ku bilaabanaya “sidaas daraaddeed.”
- d. Maqnaanshaha meel loo raaco Ruuxa amaba Masiixa ilaa tan ugu dhow ee aayadda 25.

2. Qofka badbaaday

- a. Waa tarjumaadda Augustine, Calvin iyo Isbeddel doonkii

b. Erayadan soo socda ayaa taageeraya aragtidaas

- (1) “waxaynu og nahay in sharcigu ku saabsan yahay ruuxa,” aayadda 14
- (2) “heshiis baan kula ahay sharciga inuu wanaagsan yahay” aayadda 16
- (3) “waxa wanaagsan oo aan doonayo inaan falo” aayadda 19
- (4) “sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah.” aayadda 22

c. Qoraalka ugu badan Rooma ee ka hadlayay quduusnaatu waxa uu yahay cutubka 7

- d. Beddelka muuqda falalka aayadaha 7-13 ee isu beddelaya fal wakhti xaadirka dhacaya sida aayadaha 14-24, wuxuu tilmaamayaa farqiga iyo qaybta cusub ee nolsha Bawlos.

- D. Markasta oo qofku isku dayo inuu sameeyo la midnimada Masiixa, waxa sii kordhaysa khibradda uu u leeyahay denbigiisa gaar ahaaneed.

Hees Ilaah ammaana oo Lutheran ah oo Henry qorayo ayaa leh:

“Rabbiyow qofna daahir maaha,

Oo qofna denbigu kama madhna;

Oo kuwa taagta daraninee kuu sida fiican kuugu adeegana;

Waxay dareen sanyihiin khaladaadkooda.”(soo saaraha qasiidada iyo cinwaankeeda lama garanayo).

**AAYADAHA 7:7-12**

**<sup>7</sup>Haddaba maxaynu nidhaahnaa? Sharcigu ma dembi baa? Ma suurtoowdo! Hase ahaatee, dembi ma aanan garteen, sharcigaan ku gartay mooyaane, damaca xun ma aanan garteen haddaan sharcigu i odhan, Waa inaad wax damcin. <sup>8</sup>Dembigu, isagoo wakhti helay, ayuu amarka dhexdayda kaga falay damac xun oo kasta; waayo, sharciga la'aantiis dembigu waa meyd. <sup>9</sup>Waa baan noolaa sharciga**

la'aantiis, laakiin markii amarku yimid, dembigu waa soo noolaaday, aniguna waan dhintay. <sup>10</sup> Amarkii nolosha ii geeyn lahaa, waxaan gartay inuu dhimasho ii geeynayo. <sup>11</sup> Waayo, dembigu, isagoo wakhti helay, ayuu amarka igu khiyaaneeyey, wuuna igu dilay. <sup>12</sup> Haddabase sharcigu waa qoduus, amarkuna waa qoduus, waana xaq, wuuna wanaagsan yahay.

7:7 **“Haddaba, maxaynu nidhaahnaa?”** Pawlos waxa uu markale usoo laabanayaa adeegsigiisii hadalka kulaylku ku jiro (6:1,15; 7:1,13).

▣ **“Sharcigu ma dembi baa?”** waxyaalaha uu waxyigu sheegayo ee kala gedisan waxa ka mida, in Ilaah adeegsaday quduusnimada iyo wanaagga Sharciga isagoo ah muraayad tusinaysa denbiga, si markaas aadanaha xadgudbay u noqdaan kuwo towbad keena oo rumaysad yeesha (aayadaha 12-13; Galatiya 3). Sidoo kale waxa la yaab leh inuu Sharcigu sii wado ku shaqaynta quduusnimada, balse aanu ku shaqaynayn xaq noqoshada!

▣ **“Ma suurtoowdo”** waa qaabka Bawlos u diidi jiray waxyaalaha beenta ah (aayadaha 13; 3:4,6,31; 6:2,15; 9:14; 11:1,11; Galatiya 2:17; 3:21).

▣ **“Hase ahaatee”** Bawlos wuxuu Rooma dhexdiisa ku adeegsanayaa erayo xoog badan oo kala soocaya ujeeddadiisa (3:4,6,31; 6:2,15; 7:13; 9:14; 11:1,11).

▣ **“anigu”** waa magac u yaal in badan ka dhex muuqda aayadaha 7-25.

▣ **“dembi ma aanan garteen, sharcigaan ku gartay mooyaane”** tani waa mid kamida aayadaha furaha ah ee khuseeya Sharciga Muuse, isga oo ah muraayad muujinaysa qofka denbigiisa (3:20; 4:65; 5:20; Galatiya 3:14-29, gaar ahaan aayadda 24). Haddii Sharciga markeliya la jebiyo waxay ka dhignayd in axdigii la jebiyay, waxaana ka dhalanayay cidhib xumaan (aayadda 10 iyo Yacquub 2:10).

▣ **“sharcigaan ku gartay mooyaane”** waa weedh shuruudeed darajada labaad ah, oo tusinaysa xaqiiqada, Bawlosna wuxuu yaqaanay denbigu waxa uu yahay iyo waxa tusin kara. Waxa kaloo Bawlos sidan oo kale ku dhex adeegsanayaa Galatiya 1:10; 3:21, iyo sidoo kale 1 Korintos 2:8; 5:10; 11:31; iyo 2 Korintos 12:11.

▣ **“Waa inaad wax damcin.”** Waxa lagasoo xigtay Tobanka Amar (Baxniintii 20:17; Sharciga Kunoqoshasiisa 5:21). Wuxuu amarkani muhiimadda siinayaa fikir gooni ah, kaasi oo qof walba kasuurtoobi kara (Matayos 5-7). Sidoo kale Sharciga laftiisa ayaa lagu tilmaamay inuu yahay “amarro”(aayadaha 8,9,11,12,13). Erayga “damac” waxa macnihiisu yahay “inaad si xoog leh wax u doonto.” Ilaah haddaba dadka waxa uu siiyay waxyaabo badan oo wanaagsan markii uu abuuray, laakiin, aadanuhu waxay rabaan hadiyadaha Ilaah inay ku qaataan waxyaabo xaddidan. Damacu waa wax kharriban oon fiicnayn. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Baxniintii 20:17 ee 13:8-9.

7:8

NASB, NKJV	<b>“isagoo wakhti helay”</b>
NRSV	<b>“isagoo jaanis helay”</b>
TEV	<b>“helay fursaddiisii”</b>
JB	<b>“qaatay faa'idada”</b>

Waa erayo laga adeegsado xagga ciidammada sida hawl gallada dagaallada (aayadaha 8 iyo 11). Waxa kaloo lagu gaar yeelay (aayadaha 9,11). Denbiga waxa lagu misaalay sida howlgal ciidan (aayadda 11) oo uu hoggaminayo taliyo ciidan (aayadaha 11 iyo 17; 6:12,14,16).

▣ **“sharciga la'aantiis dembigu waa meyd.”** Denbigu wuxuu kasoo horjeedaa doonista Ilaah (Rooma 4:15; 5:13; 1 Korintos 15:56). Weedhahan kama muuqdo wax fal ahi, laakiin haddii lagu dabaqo fal dhacaya wakhti xaadirka, waxay noqonaysaa arrin caalami ah. laakiinse haddii lagu dabaqo falka AORIST, waxay tilmaamaysaa nolosha Bawlos shakhsi ahaan.

**7:9 “Waa baan noolaa”** tani waxay Bawlos ka sheegi kartaa (1) markii uu ahaa ilmaha yar ee bilaa denbiga ah; amma (2) mid ahaa Farriisi kahor intii Injiilku aanu degin qalbigiisa (Falimaha Rasuullada 23:1; Filiboy 3:6; 2 Timoteyos 1:3). Tan hore waxay markaas tilmaamaysaa “aragtita taariikh ahaaneed” ee fasiraadda cutubka 7 iyo tan labaad oo ah “aragtida metalaadda” ee fasiraadda cutubka 7.

▣ **“markii amarku yimid, dembigu waa soo noolaaday, aniguna waan dhintay.”** Leexashada aadanaha waxa lagu weheliyay loo diido oo la yidhaa ha samaynona. Sharciga Ilaahna wuxuu nafta ka dhigaa mid wax ku haga oo wax u tilmaama aadanaha faanka miidhan ah ee leexday (Bilowgii 2:16-17; 3:1-6). Ogsoonow sida dembigu usii socdo isaga oo si gaar ahaaneed loo tilmaamayo, sida 5:21 iyo 7:8,11,17,20.

**7:10 “Amarkii nolosha ii geeyn lahaa, waxaan gartay inuu dhimasho ii geeynayo”** waxay tahay mid loogu noqon karo ballan qaadkii Laawiyiintii 18:5 amaba Rooma 2:13. Sharcigu wuxuu ballan qaaday wax aanu dhammays tiri karin, sababtuna maaha inuu yahay mid denbi leh, ee waxa weeyi aadanaha oo tamar daran ahna kuwo xadgudub badan. Sharcigu wuxuu noqday xukun dhimasho (Galatiya 3:13; Efesos 2:15; Kolosay 2:14).

**7:11 “igu khiyaaneeyey, wuuna igu dilay”** ereyadan Septuagintiga dhexdiisa waxa loogu adeegsaday Xaawa, waana sida aan ka arki karno Bilowgii 3:13. Bawlosna ereyadan in badan ayuu adeegsanayaa (Rooma 16:18; 1 Korintos 3:18; 2 Korintos 11:3; 2 Tesaloniika 2:3; 1 Timoteyos 2:14). Aadan iyo Xaawa ruux ahaan way u dhinteen iyaga oo caasiyay amarkii Ilaah, sidoo kalena Bawlos ayaa sidaas sameeyay iyo aadanaha gebi ahaantooda (1:18-3:20).

**7:12** tani waa sida Bawlos u tilmaayo Sharciga wanaaggiisa, Sharciguna maaha dhibaataada. Si kastaba ha ahaatee, Bawlos waxa uu si isku mida uga hadlayaa “denbi” sida aan ka arki karno cutubka 6 iyo “sharci” sida aan ka arki karno cutubka 7, waana mid cadho gelinaysay Yuhuudda ahaa rumaystayaasha (taag darrida 14:1-15:13) ee kaniisaddii Rooma.

#### **AAAYADDA 7:13**

**<sup>13</sup>Haddaba wixii wanaagsanaa miyey dhimasho ii noqdeen? Ma suurtoowdo! Laakiin dembigu, inuu muuqdo inuu dembi yahay, ayuu wax wanaagsan igaga dhex shaqeyey oo dhimasho ii keenay, in dembigu amarka ku noqdo dembi miidhan.**

**7:13**

**NASB** “dembigu, inuu muuqdo inuu dembi yahay... in dembigu amarka ku noqdo dembi miidhan”

**NKJV** “sidaa daraaddeed denbigu u muuqdo denbi...in denbinimadiisu sii korodho”

**NRSV** “inuu denbigu u muuqdo denbi...si denbigu u noqdo midaan la qiyaasi karin”

**TEV** “si ay run u noqoto in dabecadda denbiga la muujiyo”

**JB** “denbigu si midabkiisa runta ah u muujiyo..wuxuu awooday inuu muujiyo awoodda denbinimadiisa”

Dabiicadda sharka ah ee denbigu waxay ka muuqanaysaa marka wax loo qaato sidii wax wanaagsan, oo la moodayo inay cibaado suubani ku jirto, sida Sharciga Muuse oo kale (Sabuurka 19, 119), laakiinse ah qalab marka la jebiyo fulinaya xukun iyo dhimasho (Efesos 2:15; Kolosay 2:14). Haddaba, Ilaah aadanaha leexday waxa uu siiyay hadiyad wanaagsan oo qofkii diyaarka u ah ahi qaadan karo. Fiiro gaara labada *hina* (ujeeddo) way isu dhowyihiin.

▣ **“noqdo dembi miidhan”** eeg Mawduuca gaarka ah ee Bawlos u adeegsaday *Huper* 1:30.

#### **AAAYADAHA 7:14-20**

**<sup>14</sup>Waayo, waxaynu og nahay in sharcigu ku saabsan yahay ruuxa, laakiinse anigu waxaan ahay mid jidhka raaca oo lagu iibiyey dembiga hoostiisa. <sup>15</sup>Waayo, waxaan samaynayo garan maayo, maxaa yeelay, ma sameeyo wixii aan doonayo, laakiin waxaan sameeyaa wixii aan necbahay. <sup>16</sup>Laakiin haddaan sameeyo waxa aanan doonayn, de markaas heshiis baan kula ahay sharciga inuu wanaagsan yahay.**

**<sup>17</sup>Haddabase haatan ma aha aniga kan waxaas sameeyaa, laakiinse waa dembiga igu dhex jira. <sup>18</sup>Waayo, waan ogahay inaan wax wanaagsanu igu dhex jirin, taas waxaan ula jeedaa, jidhkayga wax wanaagsanu kuma jiraan, waayo, waan ku talo jiraa inaan waxa wanaagsan sameeyo, laakiin ma sameeyo. <sup>19</sup>Waayo, waxa wanaagsan oo aan doonayo inaan falo, ma sameeyo, laakiinse waxa sharka ah oo aanan doonayn inaan falo, ayaan sameeyaa. <sup>20</sup>laakiin haddaan sameeyo wixii aanan doonayn inaan falo, de haatan ma aha aniga kan sameeyaa, laakiinse waa dembiga igu dhex jira.**

**7:14 “sharcigu ku saabsan yahay ruuxa”** Sharcigu Ilaah wuu wanaagsan yahay mana aha dhibaataada kan keenaya (aayadaha 12 iyo 16b).

▣ **“waxaan ahay mid jidhka raaca”** Eraygan jidh Pawlos wuxuu u adeegsanayaa (1) jidhka dareenka leh ee aadanaha (1:3; 2:28; 4:1; 9:3,5); iyo (2) macnaha aadanaha leexday ee dhaxlay dabeecadda Aadan (aayadda 5). Haddaba, ma cadda halkan labada waxyaalood ka loogala jeedo.

▣ **“oo lagu iibiyey dembiga hoostiisa”** waa fal tegay oo siina socda macneheeduna waxa weeyi “waxaan ahaa oo ahaan doonaa mid lagu iibiyay denbiga hoostiisa.” Sidoo kale halkan denbiga waxa lagu tilmaamay inuu yahay mid leh addoon. Cidda adeegaha u ahina ma aha mid cad oo muuqata.

Axdiga Gore dhexdiisa erayada badanaa sheegaya in aadanuhu Ilaah u noqonayaan ayaa waxay ahaayeen “rahan”. Asal ahaanna waxa weeyi “dib usoo iibsasho” (Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 3:24). Haddaba, kuwa aayaddan dhexdeeda lagu adeegsaday ee kasoo horjeedaa waxa weeyi “lagu iibiyay..”(Xaakinnada 4:2; 10:7; 1 Samuu’eel 12:9).

**7:15-24** Ilmaha Ilaah waxa uu haystaa “dabiicadda Ilaah” (2 Butros 1:4). Laakiin sidoo kalana wuxuu haystaa dabeecadda leexashada iyo caasinimada (Galatiya 5:17). Denbigu wuxuu keenay waxaan habboonayn (Rooma 6:6), laakiin khibradda aadanuhu ku bardeen waxa ay ka muuqataa cutubka 7. Yuhuuddu waxay odhan jireen qof walba qalbigiisa waxa ku jira ay madow iyo mid cad. Kan la quudiyo ayaa mar walba noqonaya kan koritaankiisu weynaado.

Marka aan anigu akhriyo aayadahan, waxaan dareemaa xanuunkii Pawlos ee tilmaamayay khilaafka maalinwalba taagan ee ka dhexeeya labadan dabeecadood. Rumaystayaasha waxa laga xoreeyay dabeecaddoodii denbiga, laakiin Ilaah ayaa inna caawinaya, waxaynuna sii wadaynaa inaan taasi ka jawaab celino. Waxa iyaduna layaab leh korodhka dagaalka ruuxiga ah oo bilaabmaya badbaadada kaddib. Haddaba, qaan gaadhnimadu waxa ay tahay mid ku imanaysa iyadoo maalin walba lagu xidhnaado, Ilaah Saddexmidnimada isku muujiyay.

**7:16,20 “haddii”** waa hadal shuruudeed qoraagu caddayn rabo hadalkiisa runta ku jirta iyo ujeeddada uu rabo inuu soo ban dhigo.

**7:18 “waan ogahay inaan wax wanaagsanu igu dhex jirin, taas waxaan ula jeedaa, jidhkayga”** Pawlos jidhka kuma sheegayo inuu yahay mid shar ah, laakiin waa meesha xarunta u ah loollanka dabeecadda leexashada iyo Ruuxa Ilaah. Giriigtu waxa ay rumaysnayeen, in jidhku kelidiis uu yahay shar, waana midda lagu sheegay (Efesos, Kolosay iyo 1 Yooxanaa). Oo Giriigtuna waxay waxyaalaha ruuxiga ah ku canaan jireen jidhka. Pawlos haddaba, denbiga wuxuu u gaar yeelay dabeecadda aadanaha oo uu ku tilmaamay, inay tahay mid kasoo horjeedda Sharciga Ilaah, taasina waxay jaanis siinaysaa sharka oo dabeecadda aadanaha soo dhex gala. Erayga “jidh” marka la eego qoraallada Pawlos waxa loo macnayn karaa (1) jidhka caadiga ah (1:3; 2:28; 4:1; 9:3,5); iyo (2) dabeecadda leexashada ah ee laga dhaxlay Aadan (aayadda 5).

**7:20 “waa dembiga igu dhex jira.”** Waxa xiiso leh kitaabka Rooma oo si cad oo muuqata uga hadlayay denbiga aadanaha, laakiin waxa layaableh iyada oo mar qudha aan Shaydaanka lagu sheegayn ilaa laga gaadho cutubka 16:20. Aadanuhu dembigooda kuma canaan karaan Shaydaanka, waayo waxa aan leenahay ikhtiyaar. Waxaanad arki kartaa iyada oo denbiga lagu sheegayo inuu yahay boqor yeelan kara cid uu addoonsado una taliyo. Wuxuu innagu tijaabinayaa inaan Ilaah madax-bannaani ka helno, oo waxay doontaba ha innagu qaadatee raacno waxa nafteenu rabto. Haddaba, Pawlos sidan denbiga uu u tilmaamayaa, waxa ay tahay mid ku xidhan doorashada aadanaha sida innooga muuqan karta Bilowgii 4:7.

Erayga “dhex jira” ayaa Pawlos waxa uu marar badan ku dhex adeegsanayaa cutubkan (aayadaha 17,18,20). Dabiicadda denbiga lagama dhigin mid laga takhalluso oo la baabiiday, laakiin waxa laga dhigay mid cadilan, oo awooddiisu yaraato marka aan iskaashiga la samayno, ee uu innagu dhex jiro Ruuxu (8:9,11). Haddaba, sida aan u aqbalnay hadiyadda Ilaah ee badbaadada ah, ayaa waxa la rabaa inaan u aqbalno saamaynta Ruuxa Quduuska ah. Maxaa yeelay badbaadada iyo qaabka nolol maalmeedka ee Masiixigu, waxa uu yahay mid ku bilaabmaya oo ku dhammaanaya go’aanka maalinlaha ah ee qofka Masiixiga ah. Ilaah waxa uu ina siiyay wax kasta oon u baahanahay: Ruuxa (Rooma 8), hubka ruuxiga ah (Efesos 6:11), waxyiga amaba muujinta (Efesos 6:17), iyo tukashada (Efesos 6:18).

Dagaalkuna waa mid culus (Rooma 7), laakiin waa lagu guuleystay (Rooma 8).

#### **AAAYADAH 7:21-25**

<sup>21</sup>Haddee waxaan arkaa qaynuunka in shar ila jiro in kastoo aan doonayo inaan waxa wanaagsan sameeyo. <sup>22</sup>Waayo, sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah. <sup>23</sup>Laakiin waxaan xubnahayga ka arkaa qaynuun kale, isagoo la dagaallamaya qaynuunka maankayga oo maxbuus iiga dhigaya qaynuunka dembiga oo xubnahayga ku jira. <sup>24</sup>Nin belaysan baan ahay. Yaa iga furan doona jidhkan dhimashada leh? <sup>25</sup>Waxaan Ilaah ugu mahad naqayaa inuu Rabbigeen Ciise Masiix igu furan doono. Sidaas daraaddeed aniga qudhaydu waxaan maankayga ugu adeegaa sharciga Ilaah; laakiinse waxaan jidhka ugu adeegaa qaynuunka dembiga.

**7:22 “sharciga Ilaah”** dhinaca Yuhuudda marka la eego waxay tilmaamaysaa Sharcigii Muuse, laakiin kuwa aan Yuhuudda ahayn tilmaamaysaa (1) markhaati furka dabiicada (Rooma 1:19-20; Sabuurka 19:1-6); (2) dareenka gudaha laga ogaan karo (Rooma 2:14-15); iyo (3) qaab dhaqameedka bulshadu wadaagto.



**NASB** “ninka gudaha ah”  
**NKJV** “marka loo eego gudaha ninka”  
**NRSV, NJB** “gudaha naftayda”  
**TEV** “gudaha jidhkayga”

Pawlos waxa uu is barbar dhigayaa bannaanka qofka oo ah jidhka iyo gudahiisa oo ah xagga ruuxda, waana sida innooga muuqan karta 2 Korintos 4:16. Qaybtan haddaba, waa erayadane waxay tilmaamayaan qaybtaas amaba aadanaha la badbaadiyay ee lagu badbaadiyay doonista Ilaah iyo Sharciga.

1. “sharcigu ku saabsan yahay ruuxa” 7:14
2. “waxaan sameeyaa” 7:15
3. “heshiis baan kula ahay sharciga inuu wanaagsan yahay” 7:16
4. “waan ku talo jiraa inaan waxa wanaagsan sameeyo,” 7:18
5. “waxa wanaagsan oo aan doonayo” 7:19
6. “waxa sharka ah oo aanan doonayn inaan falo, ayaan sameeyaa.” 7:19
7. “haddaan sameeyo wixii aanan doonayn inaan falo” 7:20
8. “in kastoo aan doonayo inaan waxa wanaagsan sameeyo.” 7:21
9. “sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah.” 7:22
10. “qaynuunka maankayga” 7:23
11. “aniga qudhaydu waxaan maankayga ugu adeegaa sharciga Ilaah” 7:25

Cutubka 7 wuxuu tusinayaa, in aqoonta loo leeyahay Ilaah iyo eraygiisa oo keli ahi aanay ahayn kuwo keligood wax taraya, laakiinse rumaystayaashu ay u baahan yihiin Ruuxa (cutubka 8)!

**7:23** waxa jira farqi u dhexeeya 6:2; 8:2 iyo 7:23. Aayaddani waxay si cad u tusinaysaa Pawlos oo adeegsaday sharci (*nomos*), si uu sheego (1) sharciga denbiga (aayadaha 21,25) iyo (2) Sharciga Ilaah (aayadaha 22,25). Sidii hore aan ugusoo aragnay aayadaha 4,5,6,7,9 iyo 12, Pawlos eraygan wuxuu u adeegsaday Axdiga Hore. Sharcigu wuxuu ahaa waxyiga Ilaah ee cajiibka leh, dhinaca kalena waxa uu ka ahaa kan muujiyay leexashada iyo denbiga aadanaha. Haddaba, muu ahayn sharcigu kelidiis muu ahayn kan lagu dhex muujiyay Axdiga Hore oo keliya, laakiise sidoo kale waxa lagu muujiyay waxyiga dabiiciga ah (Sabuurka 19; Rooma 1:18-3:31) amaba qaab dhaqameedyada dadka. Haddaba, aadanuhu waxa ay yihiin kuwo caasinnimo sameeya oo doonaya inay nafhooda xor u noqdaan waxay rabaanna sameeyaan.



7:24 hadallada aayaddani ma noqon karaan kuwo kasoo baxaya afka qof badbaaday? Qaarkood waxay yidhaahdaan maya, sidaasi darteedna, cutubkani wuxuu sheegayaa dadka aan badbaadin. Kuwo kalena waxay yidhaahdaan, waxay tilmaamaysaa usoo laabashada injiilka marka la eego nolosha dadka rumaystayaasha ah.



**NASB** “jidhkan dhimashada leh”  
**NKJV, NRSV** “jidhkan dhimashada”  
**TEV** “jidhkan ii hoggaaminaya dhimashada”  
**NJB** “jidhkan lagu xukumay dhimashada”

Jidhka iyo maanku maaha kuwo iyagu shar leh, waayo Ilaah waxa uu u abuuray inay dhulka ku noolaadaan oo caabudaan Ilaah. waxa loo abuuray si fiican (Bilowgii 1:31). Laakiin, Bilowgii 3 waxaan ka arki karnaa is beddelka ku yimid aadanaha ee ka leexday qorshihii Ilaah. Waxa yimid denbiga oo qaatay wixii wanaagsanaa, waxaanay aadanuhu isu beddeleen kuso shar miidhan ah oo naftooda ku qanacsan. Maanka iyo jidhkubana waxay noqdeen xarunta jarriibaadda iyo denbiga. Haddaba, Pawlos waxa uu dareemayaa loollankaas taagan, waxaanu ku baaqayaa da'da cusub, jidhka cusub, iyo xidhiidh la yeelashada tooska ah ee Ilaah (8:23).

7:25 waa soo koobista iyo u gudbitaanka Rooma 8. Si kastabana ha ahaatee, cutubka 8 isla arrimahan ayaa laga arki karaa aayadaha 5-11.

Su'aasha haddaba ay mufasiriintu is waydiiyaan ayaa waxay ku wareeganaysaa cidda uu Pawlos la hadlayay?

1. Shakhsi ahaantiisa iyo waayo aragnimadiisa uu ka helay Yuhuudinimada
2. Dhammaan Masiixiyiinta
3. Aadan oo tusaale u ah dadka oo dhan
4. Israa'iiliyiinta oo aqoon u leh Sharciga Ilaah laakiin ku guul-darraystay inay addeecaan.

Shakhsi ahaan, waxaan isku xidhayaa #1 (aayadaha 7-13,25b) iyo #2(aayadaha 14-25a).eeg Fahanka Macanaha guud ee Rooma 7:7-25. Xanuunka iyo silica ku sugan cutubka 7 waxa beddelay wanaagga iyo sharafta uu sheegayo cutubka 8.

▣ “Ilaah ugu mahad naqayaa” Eeg Mawduucan Gaarka ah.

**MAWDUUC GAAR AH: AMMAANTA, MAHAD NAQISTA IYO TUKASHADA PAWLOS SIINAYO ILAAH**

Pawlos waxa uu ahaa nin Ilaah ammaan is badan, waayo waxa uu yaqaanay Axdiga Hore oo afar qaybood ee ugu horreeya Sabuuradu yihiin ammaan (Sabuurka 41:13; 72:19; 89:52; 106:48). Haddaba, Pawlos marar badan ayuu Ilaah siyaabo kala geddisan u ammaanay:

1. Baaragaaafyada furitaanka u ah waraaqihiisa
  - a. Salaanta furitaanka ah (Rooma 1:7; 1 Korintos 1:3; 2 Korintos 1:2)
  - b. Ducooyinka furitaanka ah (*eulogētos* 2 Korintos 1:3-4; Efesos 1:3-14).
2. Duco gaaban
  - a. Rooma 1:25; 9:5
  - b. 2 Korintos 11:31
3. Ammaanta (qaabkeedu yahay adeegsiga (1) *doxa* (ammaan) iyo (2) “weligii iyo weligiisba”)
  - a. Rooma 11:36; 16:25-27
  - b. Efesos 3:20-21
  - c. Filiboy 4:20
  - d. 1 Timoteyos 1:17
  - e. 2 Timoteyos 4:18
4. Mahad naqis (*eucharistēo*)
  - a. Furitaanka waraaqaha (Rooma 1:8; 1 Korintos 1:4; 2 Korintos 1:11; Efesos 1:16; Filiboy 1:3; Kolosay 1:3,12; 1 Tesaloniika 1:2; 2 Tesaloniika 1:3; Filemon aayadda 4; 1 Timoteyos 1:12; 2 Timoteyos 1:3).
  - b. Yeedhitaanka mahad naqista (Efesos 5:4,20; Filiboy 4:6; Kolosay 3:15,17; 4:2; 1 Tesaloniika 5:18).

5. Mahad naqis gaaban
  - a. Rooma 6:17; 7:25
  - b. 1 Korintos 15:57
  - c. 2 Korintos 2:14; 8:16; 9:15
  - d. 1 Tesaloniika 2:13
  - e. 2 Tesaloniika 2:13
6. Ducada xidhitaanka ah
  - a. Rooma 16:20,24 (?)
  - b. 1 Korintos 16:23-24
  - c. 2 Korintos 13:14
  - d. Galatiya 6:18
  - e. Efesos 6:24

Pawlos waxa uu yaqaanay oo khibrad u lahaa Ilaaha isku muujiyay Saddexmidnimada. Qoraalladiisana waxa uu ku bilaabayaa duco iyo ammaan. Marka uu hadalkiisa badhtamaha kaga jirana waxa uu soo dhex gelinayaa ammaan iyo mahad naq. Sidoo kalena hadiyo goorba marka uusoo gebogebaynayo waraaqihiisa waxa uu xusuusanayaa duco, ammaan iyo mahad naqis.

## SU'AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su'aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sidee cutubka 6 ula xidhiidhaa cutubka 7?
2. Muxuu yahay xidhiidhka ka dhexeeya rumaystayaasha Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub? (2 Korintos 3:1-11; Cibraaniyada 8:7,13)
3. Muxuu yahay labada waxyaalood ee isku sida uu Pawlos ugaga hadlyo cutubka 6 iyo 7 isaga oo sheegaya xidhiidhka ay nolosheenna la leeyihiin?
4. Sida Masiixigu xidhiidh ula yeelan karaa Sharcigii Muuse?
5. Adigoo adeegsanaya ereyadaada kuu gaarka ah sharraxaad ka bixi farqiga u dhexeeya aragtiyaha taariikheed iyo kuwo metilitaanka ah ee fasiraadda 7:7-25.
6. Cutubka 7 ee Rooma ma waxa uu tilmaamayaa qof lunsan mise rumaystayaasha aan qaan gaadhka ahayn?

# ROOMA 8

QAYBAHA BAARAGARAAFYADAAE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Nolosha ku jirta Ruuxa	Ka xoroobida degaanka dembiga	Badbaadada Ilaah	Nolosha ku jirta Ruuxa	Nolosha Ruuxa
8:1-11	8:1-11	8:1-4  Nolosha Jidhka Iyo tan Ruuxa 8:5-8 8:9-11 Ruuxa iyo korinta	8:1-8  8:9-11	8:1-4  8:5-11
8:12-17	8:12-17	8:12-17	8:12-17	8:12-13  Carruurta Ilaah 8:14-17
Ammaanta ahaanaysa	U silcidda Ammaanta	Rajada Kaamilidda	Ammaanta Mustaqbalka	Ammaantu waa rajadeenna ugu dambaysa
8:18-25	8:18-30	8:18-25  Tabardarrada aadanuhu dhammaan ma leh	8:18-25	8:18-25
8:26-30		8:26-27  8:28-30	8:26-27  8:28-30	8:26-27  Ilaah ayaa noogu yeeray In uu amaantiisa na siiyo 8:28-30
Jacaylka Ilaah	Jacaylka Ilaah ee waara	kalsoonida aan ku qabno jacaylka Ilaah	Jacaylka Ilaah eek u jira Ciise Masiix	Qasiidooyinka Loo qaado Jacaylka Ilaah
8:31-39	8:31-39	8:31-39	8:31-39	8:31-34 8:35-37 8:38-39

## AQRINTA TAXANHA SADDEXAAD (Eeg bogga viii)

### ADIGA OO RAACAYA UJEEDEKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan midan u dhaafin in lagu tuso.

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

## FAHANKA MACNAHA GUUD

- A. Cutubkan waa meesha ugu horraysa ee dooddii Rasuul Bawlos taasoo ka bilaabmaysa 1:18. Waxa uu ku bilaabmayaa “eed la;aan” (Taagnaan sharci ah) wuxuuna ku dhammaanayaa “Kala-sooc la’aan” (Wehelnimo shaqsi ahaaneed. Marka aan eegno Cilmiga barashada cilmiga Ilaah iyo jiritaankiisa, ee Theology-ga waxa uu ka dhaqaaqayaa xaq ka dhigid soo marta Qudduus ka dhigid iyo ammaan. (cf. vv. 29-30).
- B. Middan waxaa weeyaan Wax-bariddii cilmigii barashada Ilaah ee Ilaah Ruuxa Qudduuska ah ku siiyey Bawlos kuwii rumaysadka lahaa. (cf. Khudbaddii Yooxanaa eek u jirta Yooxanaa 14:12-31; 16;7-16. Ruuxu waa wakiilka falka wax samaynaya sida ku jirta aayadda 14-aad taasoo ku xiran aasaasna u ah sida uu Injiilku wax-tarka ugu leeyahay nolosha aadanihii guuldarraystay. Ruuxa Qudduuska ah ayaa iyaga ku dhex abuurmay, oo wuxuu dhexdooda ka bilaabayaa in Ciise Masiix ku dhex abuurmo. Cutubka siddeedaad ereyga Ruux illaa koow iyo labataan jeer ayuu ku jiraa halka halka uu gebi ahaanba ka maqan yahay cutubka toddobaad (halka cutubyada 3 ilaa lix ay sidaas oo kale yihiin, halka iyana ay saddex goor uu ku jiro cutubyada koow iyo labo).
- C. Nolosha dhexdeeda waxaa ku jira labo shey oo laga fisho (aragtiyada gaar ahaaneed ee adduunka, Labo hab nololeed, labo mudnaano, labo waddo (waddada ballaaran iyo waddada ciriiriga ah) kuwaasoo ay aadanuhu raacaan, middan oo ah mid jdh ahaaneed ama mid ruux ahaaneed. Midi dhimasho ayey hor seeddaa; midda kalena nolol. Middan dhaqan ahaan waxaa loogu yeeraa “Labada waddo” ee muujinaya xigmaddii qoraalladii Axdigii Hore (cf. Sabuurrada 1 iyo Maahmaaydii. 4:10-19.) Nolosha weligeed ah, Nolol Ruuxiga ah waxa ay leedahay dabeecado si muuqata loo arki karo (Jidhka kaddib, vs. Ruuxa kaddib).  
Ogsoonoo maqnaanshaha muuqda ee shaydaanka eek u jira macnahan guud eebarashada Jiritaanka Ilaahee ku jira (cf. Rooma 1-8). Middaa laguma sheegin illaa laga soo gaaro Rooma 16:20. Waxa macnuhu tilmaamayo ama sharraxayo waa aadanaha dhicitaankiisii aadane ahaaneed. Kaas ayaa ujeedkii Bawlos ahaa in uu aadanaha ka tirtiro qiilka ay samaysteen (i.e., “Shaydaanka ayaa ii keenay in aan sameeyo!”) oo ka fog dabeecadda caadiga si ay Ilaah uga fallaagoobaan. Aadanaha ayaa masuul ka ah!
- D. Aad ayey u adag tahay in cutubkan sidiisa loo sharraxo, maxaa yeelay runta ku jirta waxa ay ku daboolan tahay wacyigii markaa jiray.
- E. Aayadaha 12-17 waxa ay qofka rumaysadka leh u muujinayaan wax ku saabsan kalsoonida hubsashada iimaanka.
  1. Marka koowaad waa muuqaalkii adduunka noloshiisii oo si Ruuxi ah isu beddeshay.
  2. Midda labaad cabsidii aan Ilaaheenna ka qabnay ayaa waxa ay noqotay mid Ruuxu uu u beddelay sidii jacayl qoys ahaaneed.
  3. Midda saddexaad waa xaqiiqsasho aan gudaheenna ka xaqiiqsanaynno in aan nahay carruur taasoo uu ruuxa Qudduuska ahu na tusayo.

4. Midda afraad waa in xitaa xaqqiqadan laga hubsan karo dhibaatooyinka adduunkan guul darraystay iyo la hardankiisa.
- F. aayadaha 31-39 waa kuwo sidii xukun oo kale ah oo marka aan so kooban isugu keenno aan ka arkaynno sida qaabkii Nebiyadii Axdigii Hore. Ilaah waa xaakinka shaydaankuna waa dilaaga iyo silciyaha; Ciise Masiixna waa qareenka, Malaa'iguhuna waa guddiga kor joogtada ah, rumaysadka aadanuhuna waxa uu ku hoos jiraa wuxuu ku hoos jiraa dacwadaha shaydaanka.
  1. Xaaladaha sharciga ah
    - a. Ka geesnoqosho (Aayadda. 31)
    - b. Ashtako (Aayadda. 33)
    - c. Xaq ka dhigid (Aayadda. 33)
    - d. Xukumid (Aayadda. 34)
    - e. U ducayn (Aayadda. 34)
  2. Silica, “Kumuu silicu ku dhici doonaa” (Aayadaha 31,33, 34 [thrice], 35)
  3. Hawshii eek u jirtay Ciise Masiix (Aayadaha. 32, 34 b)
  4. Ma jiro wax Ilaah looga go’o.
    - a. Gudniinnada dhulka (Aayadda 35)
    - b. Axdigii Hore iyada oo laga soo xiganayo sabuurka 44:22 (Aayadda. 36)
    - c. Guusha (Aayadaha 37, 39)
    - d. Gudniinka rabbaaniga ama Ilaahiga ah (Aayadaha 37-39)

## FAHANKA MACNAHA GUUD

**Sidaas daraaddeed, kuwa Ciise Masiix ku dhex jiraa, haatan xukun ma laha. 2 Waayo, qaynuunka Ruuxa nolosha ee ku dhex jira Ciise Masiix ayaa iga xoreeyey qaynuunka dembiga iyo dhimashada. 3 Waayo, wax aan sharcigu samayn karayn, maxaa yeelay, wuu itaal darnaa jidhka aawadiis, ayaa Ilaah sameeyey isagoo Wiilkiisa ku soo diraya u-ekaantii jidhka dembiga leh oo u soo diraya dembiga aawadiis, wuxuuna xukumay dembigii jidhka ku jiray, 4 in qaynuunka sharcigu inagu buuxsamo kuweenna aan sida jidhka u socon, laakiinse u socda sida Ruuxa. 5 Waayo kuwa sida jidhka u socdaa, waxay ka fikiraan waxyaalaha jidhka, laakiinse kuwa sida Ruuxa u socdaa, waxay ka fikiraan waxyaalaha laha Ruuxa. 6 Jidhka kafikiriddiisu waa dhimashada. Laakiinse Ruuxa kafikiriddiisu waa nolosha iyo nabadda, 7 maxaa yeelay, jidhka kafikiriddiisu waa la col Ilaah, waayo, ma hoos gasho sharciga Ilaah, mana hoos geli karto. 8 Kuwa jidhka ku dhex jiraana kama farxin karaan Ilaah.**

8:1

**NASB** “sidaas darteed haatan”  
**NKJV, NRSV** “sidaas darteed waxa jira haatan”  
**TEV** “waxa jira”  
**JB** “sidaas darteed, sababtu”

Tani waxa ah ku xiran tahay in dib loogu eego xaaladihii hore. Qaar waxa ay u arkaan in ay la xiriiraan 7:24-25 laakiin tan ugu wanaagsani waxaa weeyey in dib looga qaado la lagu eego 3:21-7:25.

☐ **“May”**ama MAYA way ugu horraysaa jumlada luugadda Giriigga. Waa xoojin micnaha “wax xukun ah ma laha” kuwa Ciise Masiix. (cf. Aayadaha. 1-3), iyo kuwa ku socda doonista Ruuxa (cf. Aayadaha. 4-11). Halkan waxaa ku yaal labada dhinac ee Axdiga Cusub: (1) Waa hadiyad furan xagga Ciise Masiix; iyo (2) oo ah, waxaa jirta nolol iyo jwaab axdi oo la doonayo. Xaq-ka-dhigid waxa ay noqotaa (WAX MUUJIN) iyo fal samayn (XOOJIN) ah labadaba. Labadaba waxa ay nuujinayaan qaab nololeed.

☐ **“Xukun”** Xaaladdan *Katakrima* sida badan looma isticmaalo Septuagint, laakiin waxa a dib u soo celisaa in aan lala kulmin sida inkaartii ku jirtay Sharciga Kunoqoshadiisa 27:26. Tan macnaheedu waxaa weeye “Ciqaab si xukun sharci ah u dhacaysa.” Waa sharciga sida tooska ah uga soo hor jeeda xaq ka dhigidda. Aad ayey dhif ugu tahay Qoraalka Rasuul Bawlos dhexdiisa middani, waxaad ku arkaysaa (cf. 5:16,18) meel kalena kagama qorna Axdiga Cusub.

King James version, wuxuu aayadda 1aad ku daray, “waa kuwii aan jidhka ku socon balase ku socda Ruuxa.” jumladani kama dhex muuqato qoraallo badan oo Giriigii hore ah sida uu aayadda 1aad ugu jiro. UBS<sub>4</sub> waxa uu muujinayaa oo uu siinayaa calaamad ah “A” si uu si soo ah ugu caddeeyo. Way ka muuqataa aayadda. 4. Marka Cilmiiga barashada Kitaabka Qudduuska ah loo eego kuma qummana, laakiin si toos ah ayey ugu qumman tahay aayadda. 4. Aayadaha 1-3 waxa ay la macaamilayaan booska xaq noqoshada (TUSMO), halka aayadaha 4-11 ay naga tusaalaynayaan sidii xaq loogu noqon lahaa sidii Ciise Masiix oo kale (Xoojin). Ka eego Qormo hooseedda bogga 289 ee buugga Willian R. Newell ee Rooma Aayadba aayad. (Moody 1938-dii).

Waa in aan aayadda 1 ku xidhnaa ereyada “ku jiridda Ciise Masiix,” afar sababood: (1) Caddaymaha qoraal gacmeedyada Giriigga waxa ay si aad ah ugu janjeeraan ka saaritaanka weedhahan “waa kuwii aan jidhka ku socon balase ku socda Ruuxa” aayadda 1 aad,-maaddaama caddaynta ereyadan ay ku jirto 4, (2) Sidoo kale xukunka Ruuxa ayaa la isku raacsan yahay, marka la eego is barashara ku jirta aayadda 1 aad ay samaynayso badbaadadeenna aan ah ku kalsoonaanta jidkeenna, oo aynaan ku kaqlsoonayn ruuxa Ilaah. Laakiin kuwa Ciise Masiixi ku jira way ka badbaadsan yihiin xukunka, sida aan guud ahaan ku arkaynno warqadaha rasuullada. Haddii kale, aammaankeenna ayaa ku kalsoonaanaya jidkeenna, ee kuma kalsoonaanayo booska aan ku leenahay Ciise Masiix. (3) Weedhu waxa ay si cad meel qaas ah ugu tahay dhammaadka aayadda 4,-halkaasoo dhaqanka rumaystaha socodkiisa, aan lagu qeexin ka badbaadiddiisa xukunka. (4) weedha ugu dambaysa aayadda 1 sida ku jirta King James waa *gloss* (ogaysiis aan sidaa u sii weynayn oo kuwa wax koobiyeeyay ay leeyihii) oo meesha ka muuqda, ma aha oo qudha ka saaridda qoraallada duudduuban, Aleph, A, B, C, D, F, G; A, D (corr) ama (saxooda.); ay la leeyihiin qaarka cursive-yada wanaagsan iyo qaybihii asalka ahaa (eeg Olshausen, Meyer, Alford, J. F. iyo B., iyo Darby falanqayntiisa ugu fiican eek u jirta *synopsis*, ee ku jirta *lod*); laakiin waxa ay sidoo kale u muuqataa isku ekaanta muuqan uu yahay ku kordhinno loo soo maray cabsi sharciyeed, oo laga helay cutubyo kale.

In Ilaah doortay in Ereygiisa la tarjumo oo uu weliba awood leeyahay ayaa ah tan laga arki karo adeegsiga Axdiga Cusub ee tarjumaaddii Giriigga iyo kii Cibraaniga ee Axdigii Hore, Septuagint-gii.

Waxaan Ilaah uga mahad celinaynaa nimankii u go’ay ee waqtigii noloshoodii oo dhan ku bixiyey barashadii qotoda dheerayd ee qoraalladii Ilaah noo reebay, ee tarjumaadda cajiibka ah ee kaamilan noo siiyey sida aan u haysanno. Waxaan aqoon yahannada noocan ah gebi ahaanba si abadiyan ah uga saari karnaa isla weynida “dunida ilbaxa ah” (ama, kuwii maalmihii hore, “caqabadihii sare”), kuwaasoo qaadan kara in ay noo sheegaan waxa Ilaah nagu farayo Kitaabka Qudduuska ah dhexdiisa, halkii is hoosaysiin qoto dheer oo ah doondoona ah in la helo wixii Ilaah yidhi” (Bogga. 289).

▣ **“Kuwa ku dhex jira Ciise Masiix”** jumladan oo ah mid muujinaysa (i. e., BOOSKA UU TAAGAN YAHAY) Rasuul Bawlos waxa uu la macno yahay sharraxaadaha haatan jira “Xiriir Qaas ah.” Bawlos wuxuu garanayey, jeclaa, u adeegayey oo uu farxad u qabay Ciise Masiix. Injiilku wuxuu isugu jiraa labo, farriin ay tahay in la rumeeyo iyo shaqsi ay tahay in lasoo dhaweeyo. Awoodda lagu noolaanayo waxay uga timid xiriirkii uu la lahaa Masiixii Sare kacay, ee uu kula kulmay waddadii Mimishiq. Waayo aragnimadii uu u lahaa Ciise Masiix ayaa isaga u sahashay in uu Cilmi Ilaahiyan ah u yeesho Ciise. Waayo aragnimadii uu u lahaa ma ahayn mid mucjiso ku xadaysnayd laakiin waxa uu ku helay adeeg faafinta Ereyga Ilaah ah oo uu sameeyay. In Isaga la aqoonsado waa in Isaga loo adeego. Korriimada Masiixiyadu waa farriin, qof, qaab nololeed! (Ka eeg 1:5)

**8:2 “qaynuunka Ruuxa nolosha. . . qaynuunka dembiga iyo dhimashada”** Tani waxa ay kuu kala qeexaysaa: (1) farqiga u dhexeeya sharciga dembiga (cf. Rooma 7:10,23,25) iyo sharciga cusub ee Ilaah (cf. Rooma 7:6,22,25); (2) “sharciga jacaylka” (cf. Yacquub 1:25;2:8,12) oo ku jeedda “Muuse Sharcigiisii” (cf. 7:6-12) facii hore oo ka hor jeeda faca cusub; ama (1) Axdigii Hore oo ka hor jeeda Axdigii Dambe (cf. Yeremyaah31:31-34; Buugga Axdiga Cusub ee Cibraaniyada).

Heerka iska hor imaadku wuxuu ku socdaa.

1. sharciga ruuxa Nolosha Masiixa ka hor jeedda. sharciga dembiga iyo ddimashada, aayadda 2
2. jidhka oo ka hor jeeda Ruuxa, aayadaha. 4 iyo
3. waxyaabaha jidhka oo ka hor jeeda. waxyaabaha Ruuxa, ayadda. 5
4. maskax ku wajahan waxyaabaha jidhka oo ka hor jeedda. maskax ku wajahan waxyaabaha Ruuxa, aayadda. 5
5. Vmaskax ku wajahan jidhka oo ka hor jeedda. maskax ku wajahan Ruuxa, aayadda 6
6. jidhka oo ka hor jeeda. Ruuxa, aayadda 9
7. jidh dhintay oo ka hor jeeda. Ruuca Nool, 10

8. Waa in aad dhimataa oo ka hor jeedda. Waad noolaan doontaa, aayadda 13
9. Aan ahayn ruuxa adduunnimada oo ka soo hor jeeda. Ruuxa carruur la dhalay wax ka dhiga, aayadda. 15



**NASB, NRSV, JB** “has set you free”  
**NKJV, TEV** “had made me free”

Aayadaha 2-3 waa farriinta theology-eed eek u jirta cutubka 6aad. Waxaa jira dhowr magic u yaal oo kala duwan oo ka muuqda qoraallada hore ee Giriigta; “Aniga” waxa ay ka dhex muuqataa A, D, K iyo P halka “Adiga” uuka dhex muuqdo \_\_\_ B, F iyo G. Magac u yaalka “Annaga” wuxuu mar kale ka muuqda Qoraallada uncial, \_\_\_\_\_. Raacayaasha UBS<sup>4</sup> “Adiga” waxay siiyaan “B” iyagoo xadaynaya (ugu badmaan sida dhabta ah). UBS<sup>3</sup> “D” iyagoo xadaynaya (wax aad u adag).

Newman iyo Nida, Buugga gacanta ee turjumaanka warqadihii Rasuul Bawlos u qoray Rooma, waxa ay sheegayaan, “in qoraalka Giriigga ee UBS wuxuu soo jeedinayaa :me” inkastoo uu miidan ku xadaynayo oo uu ku go’aminayo “C” isagoo ku qeexaya in shaki macquul ah uu ku jiro aqrintii rasmiga ahayd” (Bogagga 145-146).

Dhibaataada magic u yaallada “annaga, “adiga,” ama “aniga|annaga” waa kuwo ku soo noq noqonaya Qoraalladii Rasuul ee qoraalkii Giriigta.

**8:3 “wax aan sharcigu samayn karayn”** Sharcigii Muuse waa mid xaq ah oo qudduus ah, laakiin aadanaha ayaa ah kuwo liita oo dembi badan (cf. 7:12,16). Weedh faleedda halkan ku jirtaahi waa SIFE *adunaton*, taasoo sida badan macnaheedu yahay “caqli-gal ma aha” (cf. Cibraaniyada. 6:4,18,10:4; 11:6), laakiin waxa ay noqon kartaa “tabar la’aan” (falimaha Rasuullada 14:8; Rom. 15:1). Sharcigu ma ahayn mid koobsan karay in uu dib-u-soo noqosho keeno. Taas beddelkeeda, habaar, dhimasho iyo inkaar ayuu keenay!

▣ **“wuu itaal darnaa jidhka aawadiis”** tani waa doodda aasaaska ah e Bawlos ee cutubka 7 aad ku jirta. Sharciga Ilaah waa wanaagsan yahay oo waa qudduus, laakiin aadanaha dembiga badan ee dhacay, ilaahna geesta ka noqday ma fulin karaanwaxa uu rabo. Bawlos, unlike the rabbis. Emphasized the consequences of genesis 3.

▣ **“Ilaah ayaa sameeyay: isagoo w iilkiisii soo diray”** Dhicitaankii ay aadanuhu kaga soo kaban waayeen ee ay ky dhaceen ayaa Ilaah ugu kaamilay Axdiga Cususb (cf. Yeremyaah. 31:31-34; Yexesqeel. 36:22-36) iyadoo Ciise Masiix loo soo mariyey (cf. Ishacyaah 53; Yooxanaa 3:16). Halkii iyaga laga rabi jiray shardiyo kore oo xagga ficillada ah ayaa Ilaah wuxuu iyaga siiyey Ruux xagga gudaha ah iyo qalbi cusub. Ballankan cusub waxa uu ku salaysan yahay tawbadkeen iyo aaminaad ah in Ciise Masiix uu waxan oo dhan ku oofiyey shaqadiisii, oo aysan ahayn fulin banii aadan. Arrintu si kastaba ha ahaatee, labada axdiba waxaa rajo u ah qaab nololeed wanaagsan oo xagga Ilaah ka ahaada.

▣ **“U ekaanta jidhka dembiga leh”** Runtan iyada ahi waxa ay sidoo kale ku caddahay Kitaabka Filiboy 2:7-8. Ciise Masiix waxa uu lahaa jidh banii aadan (laakiin muuna lahayn dabiicadda dembiga aadanaha, cf. Filiboy 2:7-8; Cibraaniyada. 7:26). Isagu waa mid runtii inala jooga. Si kasta ayaa isaga loo jirrabay in kastaa aannu weli dembi laawayaal ku nahay isaga. (cf. Cibraaniyada 4:15). Isagu wuu ina fahmaa.

▣ **“dembiga aawadiis”** Isla fikirka noocan ah waxaa lagu sheegay 2Korintos 5:21 iyo 1Butros. 2;24. Ciise wuxuu u yimid in uu dhinto (cf. Ishacyaah 53:4-6, 10-12; Markos 10:45). Ciise noloshiisii dembi la’aanta iyo (eed la’aanta) ahayd ayaa waxay noqotay waaq dhaacii dembiga (cf. Yooxanaa 1:29).

▣ **“wuxuuna xukumay dembigii jidhka ku jiray”** dhimashadii Ciise waxa ay ka awood badatay oo ay la macaamishay dhabaatooyinkii dabciga dembiga aadanaha, ma aha shaqsi qura dembigiisa (sida ku ku jirta sharcigii Muuse). Waxay ahayd noloshiisii, dhimashadiisi iyo sare kiciddiisii ayey ahayd tii ebiday ama kaamishay qorshihii Ilaah weligiis waarayey oo ujeedkiisu ahaa furshada dembiga (cf. Falimaha Rasuullada 2:23;3:18;4:28; 13:29). Wuxuu sidoo kale noo muujiyey waxa dadku yahay iyo wixii ay ahaan lahaayeen (cf. Yooxanaa 13:15; 1 Butros. 2:21).

**8:4** aayaddani waxa ay sharraxaad ka bixinaysaa Axidga Cusub (cf. Yeremyaah. 31:33 iyo Yexesqeel 36:26-27). Waxa ay wax ka sheegaysaa labo oo ku aaddan badbaadadeenna. Marka koowaad Ciise Masiix wuxuu soo kaamilay oofintii Axdigii Hore oo lagu helo aammnaad la aammino Isaga (*Ciise Masiix*) tanoo ah tan ay

xaqnimadu ugu soo gudubtay kuwa rumaysadka leh oo ah hadiyad aan wax shuruud ah ku xidhnayn, marka laga reemo mudnaanta gaar ahaaneed ee qofka. Middan waxaan ugu yeernaa xaq ka dhigid ama Qudduus noqoshada. Ilaah wuxuu kuwa rumasadka leh siiyaa qalbi cusub iyo ruux cusub. Markan waxaannu ku dhex soconnaa Ruuxa ma aha jidhka. Tan waxaa loogu yeeraa “Qudduus noqoshada Horumarka leh.” Masiixiyaddu waa axdi cusub oo leh labada xuquuqoodba (hadiyadda badbaadada) iyo masuuliyadaha (u ekaanta Ciise Masiix, cf. 6:13). Tan la yaabka ayaa waxay tahay in kuwa rumaysadka leh qaarkood ay ku nool yihiin nolol aan u qalmin ama aan ku habboonayn (1 Korintos. cf 3:1-3).

▣ **“kuweenna aan sida jidhka u socon, laakiinse u socda sida Ruuxa”** isla farqiga noocan oo kale ah waxaa laga helayaa Galatiya. 5:16-25. Xaqnimada xukunka ah waa in ay la socotaa xaqnimo xagga nololaha ah. Qalbiga iyo maanka cusub ee Axdiga Cusub, ma aha kuwo badbaadadeenna aasaas u ah, laakiin waa natiijada laga dhaxlo. Nololaha weligeed ah waxa ay leedahay qaabab loo kuur geli karo!

**8:5** Bawlos waxa uu is barbar dhigayaa nololaha ku jirta “jidhka” iyo nololaha ku jirta “Ruuxa” sida ku jirta aayadaha. 5-8 (“camallada jidhka,” cf. Galatiya. 5:19-21 oo ay la socdaan “Miraha Ruuxa,” cf. 5:22-25).

**8:6 “maanka ku qumman”** Yuhuuddu waxa ay rumaysteen in indhaha iyo dheghu ay yihiin daaqdaha nafta. Dembigu wuxuu ka bilowdaa fakarrada nololaha. Waxaannu noqonnaa wixii aannu ku dhex noolaanno (cf. Rooma. 12:1-2; Filiboy.4:8)!

Bawlos si toos ah umuusan raacin aragtida qaddarta ama waxbaa iska dhaca ee labada “aragtiyood” (*yetzers*) ee aadanaha. Bawlos xaggiisa ku talo galkiisa wanaagsan ee uu doonayey ma ahayn maqluuqii dhacay, laakiin waxay ahayd in ay dib u dhashaan. Bawlos waxa ay u ahayd ku dhex noolaashaha Ruuxa Qudduuska ee ah kan bilaabaya qilaafka gudaha ee ruuxuga ah (cf. Yooxanaa 16:7-14).

▣ **“Nololaha”** Tani waxa ay ka hadlaysaa nololaha weligeed ah, nolol da’ cusub.

▣ **“Nabadda”** arrintan asalkeedu wuxuu macnaheedu yahay “in dib la isugu soo xiro wixii burburay” (cf. Yooxanaa 14:27; 16:33; Filiboy. 4:7). Ka eeg halkaa mawduuc: Nabadda ku jirta 5:1. Waxaa jira saddex waddo oo uu Axdiga Cusubi uga hadlo nabadda:

1. Runta ah nabadda aannu la yeelanay Ilaah ee noo soo martay Ciise Masiix (cf. Kolosay 1:20)
2. Dareenkeenna wax samaynta eek u saabsan in aan Ilaah hortiiisa xaq ku noqonno (cf. Yooxanaa 14:27; 16:33; Filiboy 4:7)
3. Ilaah oo jidh cusub oo uu Ciise Masiix soo marainaya, kula midoobaya, labdaba Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda (cf. Efesos. 2:14-17; Kolosay. 3:15).

**8:7-11** Bawlos wuxuu ku sheegay in aadanuhu ay Ilaah uga go’een dhowr arrimood: (1) Ilaah oo ay cadaw la noqdeen, aayadda. 7; (2) Ma aha wax xagga Ilaah ka yimid, aayadda. 7; ma awoodaan in ay ka farxiyaan Ilaah, aayadda. 8, iyo tan 10.

**8:7**

**NASB, NRSV** “jidhka kafikiriddiisu waa la col Ilaah”

**NKJV** “ka fikiritaanka jidhu waa cadowga Ilaah”

**TEV** “dadku waxay noqdaan cadaawayaasha Ilaah”

**NJB** “fikirka aadanuhu dabiici ahaan wuxuu kasoo horjeedaa Ilaah”

Ogsoonow jumladani waxa ay la siman tahay “the mind set on the flesh is death” oo ah aayadda 6 iyo “those who walk according to the flesh” ee aayadda 5. Sidoo kalw waxaad ogsoonaataa in dabecadda dhacday ee aadanuhu ay tahay wax maskaxdooda ka soo baxday labadaba, (Aragtida Adduunka) iyo (qaab dhismeedna nololaha)

▣ **“oo xitaa ma awoodaan in ay sidaas sameeyaan”** maaddama ay aadanuhu yihiin kuwo ku guuldarraystay in ay doortaan in ay Ilaah raacaan, awood uma lahan ay Ilaah ku raacaan. Aadanihii dhacay, haddii Ruuxa Qudduuska ahu uusan caawinayn, ma laha awood ay waxyaabaha Ruuxiga ah uga jawaabaan (cf. Ishacyaah. 53:6; 1 Butros. 2:24-25). Mar kasta kan qorshaha hayaahu waa Ilaah. (cf. Yooxanaa 6:55,46).



**8:8 “kuwa jidhka ku dhex jiraa”** Bawlos labo hab ayuu jumladan u adeegsanayaa (1) Jidhka caadiga ah ee muuqda (cf. Rooma. 1:3; 2:28; 4:1; 9:3,5); iyo (2) dadaalladii aadanaha oo Ilaah ka go’ay (cf. Rooma. 7:5; 8:4-5). Halkan waxaa ah lambar #2. Waxa uu sharraxayaa daadanaha rumaysad la’aantooda iyo fallaagonimadooda.

**NASB (UPDATED) TEXT: 8:9-11**

<sup>9</sup>laakiin idinku kuma aad dhex jirtaan jidhka, illowse waxaad ku dhex jirtaan Ruuxa, haddii Ruuxa Ilaah idinku dhex jiro. Laakiin nin hadduusan Ruuxa Masiixa lahayn, de kaasu kiisii ma aha. <sup>10</sup>Oo haddii Masiixu idinku dhex jiro, jidhku waa meyd dembiga aawadiis; laakiinse ruuxu waa nolosha xaqnimada aawadeed. <sup>11</sup>laakiin haddii Ruuxii kii Ciise kuwii dhintay ka soo sara kiciyey idinku dhex jiro, kii Ciise Masiix kuwii dhintay ka soo sara kiciyey, jidhkiinna dhimanayana wuxuu ku noolayn doonaa Ruuxiisa idinku dhex jira.

**8:9 “haddii”** waxaa jira jumlado shuruudaha ka hadlaya oo soo noqnoqonaya mar kale sida aayadaha 9, 10, 11, 13 iyo sidoo kale 17. Dhammaantood waa kuwo booska koowaad gelaya, kuwaasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeedooyinkiisii uu wax u qoray. Bawlos wuxuu qiyaasayey in kuwa markaa isaga wax ka aqrisanayey ee Macbudka Rooma ay Masiixiyiin ahaayeen. (cf. aayadda. 9a).

☐ **“Ruuxa Masiixu idinku dhex jiro”** Qofku labo uun buu noqonayaa, in uu ruuxa haysto oo sidaas rumayste ku yahay ama in aysan haysan Ruuxa oo ay ruuxi ahaan u lumeen. Ruuxa Qudduuska ah dhammaantis waxaan helaynaa badbaadada. Marka aan badbaadno, wax sidaas u badan uma sii baahanaynno isaga, laakiin isaga ayaa in badan inoo baahanaya!

Jumladaha sida “Ruuxa” eek u jira 9b, iyo “Ruuxa Masiixa” eek u jira 9c waa kuwo dhammaantood isku mid ah.

**8:10 “Oo haddii Masiixu idinku dhex jiro”ereyga’adigu” waa JAMAC.** Magaca “Christ” waxa uu la mid tahay ku dhex noolaanshaha Wiilka Ruuxa (cf. Yooxanaa 14:16-17; Kolosay. 1:27). Dadku waa in ay haystaan Wiilka iyo Ruuxa haddii kale Masiixiyiin ma aha (1 Yooxanaa 5:12). Bawlos ahaan, “Ku dhex jiridda Masiixa” waxay barasho ahaan ula mid tahay “rooxa oo lagu dhex jiro.”

**MAWDUUC GAAR AH: MASIIXA IYO RUUXA**

Waxaa kala jira isbeddello u dhexeeya shaqada Ruuxa iyo Shaqada Wiilka. G. Campbell Morgan wuxuu sheegay in magaca ugu wanaagsan ee Ruuxu uu yahay “Kan kale ee ah Masiixa.” Kuwan soo socda waxa ay sawir is barbar dhigeed ka bixinayaan shaqada iyo magaca Wiilka iyo ruuxa.

1. Ruux loogu yeeray, “Ruuxa Ciise” ama in ay isku qeexid yeeshaan (cf. Rooma. 8:9; 2 Korintos 3:17; Galatiya. 4:6; 1 Butros. 1:11).
2. Iyadoo labadaba isku qaabab loo sheegayo
  - a. “runta”
    - 1) Ciise (Yooxanaa 14:6)
    - 2) Ruuxa (Yooxanaa 14:17; 16:13)
  - b. “Qariin ama u doode”
    - 1) Ciise (1 Yooxanaa 2:1)
    - 2) Ruuxa (Yooxanaa 14:16,26; 15:26; 16:7)
  - c. “Qudduus”
    - 1) Ciise (Luukos 1:35; 4:34)
    - 2) Ruuxa (Luukos 1:25)
3. Labaduba waxay dhex deggan yihiin kuwa rumaysadka leh dhexdooda
  - a. Ciise (Matayos. 28:20; Yooxanaa. 14:20,23; 15:4-5; Rooma. 8:10; 2 Korintos. 13:5; Galatiya. 2:20; Efesos. 3:17; Kolosay. 1:27)
  - b. Ruuxa (Yooxanaa 14:16-17; Rooma. 8:9,11; 1 Korintos.3:16; 6:19; 2 Timoteyos. 1:14)

Iyo sidoo kale Aabbaha (Yooxanaa 14:23; 2 Korintos 6:16)

☐ **“jidhku waa meyd dembiga aawadiis”** sidoo kale masiixiyiintu waxa ay jidh anaa ugu dhimanayaan dembigii, dhicitaankii adduunka, iyo fallaagonimadii gaar ahayd ee Aadan sameeyay (cf. 5:12-21). Dembigu had

iyo jeeraale heerkiisa ayuu cararaa. Dhimashada Ruuxiga ahina (cf. Bilowgii 3; Efesos 2:1) waxaa dhaxalkeedii noqday dhimasho jidhka ah (Bilowgii 5, Cibraaniyada 9:27). Kuwa rumaysadka leh labadaba way ku dhex nool yihiin Ruuxa cusub (cf. Yoo'eel 2:28-29; Falimaha Rasuullada 2:16) iyo Da'dii hore ee demiga iyo fallaagonimada ahaa (cf. aayadaha. 21,35).

▣ **“laakiinse ruuxu waa nolosha xaqnimada aawadeed”** Waxaa jiray qilaafyo ah oo u dhexeeyey turjumaannada iyo faallo bixiyeyaasha taasoo ku aaddan in “ruuxu” yahay ruuxa aadanaha (cf. NASB, ASV, NIV, Williams, Jerusalem Bible), ama in yahay Ruuxa Qudduuska ah (cf. KJV, TEV, REB, Karl Barth, C. K. Barrett, John Murry, Everett Harrison). Xaaladdan weyni waxa ay ballaarinsaa fahankeenna ku aaddan rumaynta jumladan. Xitaa kuwa Ciise Masiix rumaystay weli way dhimanayaan, maxaa yeelay waxa ay ku dhex nool yihiin adduun dhacay ama qarriban. Arrintu si kastaba ha ahaatee, xaqnimada ku timaadda Ciise Masiix aawadiis ayey durba ku heleen nolol weligeed ah (cf. Efesos. 2:4-6). Tani waa ‘Durba ma aha weli’ walaaca Boqortooyada Ilaah. Facci hore iyo facan cusub hal waqti oo keliya ayey is dhex galeen oo ay meel sare tageen.

▣ **“Xaqnimada”** Arag mawduuca gaarka ah ee 1:17.

**8:11 “Haddii”** ka eeg note aayadda 9.

▣ **“laakiin haddii Ruuxii kii Ciise kuwii dhintay ka soo sara kiciyey idinku dhex jiro”** Shaqsiyad saddexmidnomo oo nooc ee ah ayaa rumaystayaasha ku dhex nool? Masiixiyiinta badankood waxay ku jawaabi lahaayeen Ruuxa. Tani xaqiiq waa wax run ah, balse hubaashii, shaqsiyadda saddexmidnimada oo ayaa masiixiyiinta ku dhex nool.

1. Ruuxa, Yooxanaa 14:16-17; Rooma. 8:11; 1 Korintos. 3:16; 6:19; 2 Timoteyos. 1:14
2. Wiilka, Matayos 28:20; Yooxanaa 14:20,23, 15:4-5; Rooma. 8:10; 2 Korintos 13:5; Galatiya 2:20; Efesos 3:17; Kolosay 1:27
3. Aabbaha, Yooxanaa 14:23; 2 Korintos 6:16

Jumladani waxay fursad aad muhiim ah u tahay in lagu muujiyo In had iyo goor uu Axdiga Cusubi isu ururiyo hawlaha badbaadada eek u jira saddex midnimada.

1. Ilaaha Aabbaha ah ayaa sare kiciyey Ciise (cf. Falimaha Rasuullada 2:24; 3:15; 4:10; 5:30; 10:40; 13:30,33,34,37; 17:31; Rooma. 6:4,9; 8:11; 10:9; 1 Korintos 6:14, 2 Korintos. 4:14; Galatiya 1:1; Efesos 1:20; Kolosay 1:12; 1 Tesaloniika 1:10)
2. Ilaaha ah Wiilka ayaa qudhiisu isa sara kiciyey (Yooxanaa 2:19-22; 10:17-18)
3. Ilaaha ah Ruuxa ayaa sare kiciyey Ciise. (Rooma 8:11  
Isla middan xoojinta saddexmidnimada ah waxaa laga arki karaa aayadaha 9-11.

#### **MAWDUUC GAAR AH: SADDEX MIDNIMADA**

Waa in aad xusuusnaataa dhammaan wax qqabadyada saddexda shaqsi ee saddex midnimada. Ereyga “Saddex midnimdo,” waxaa asal ahan laga soo qaatay Tertulian, Laakiin ma aha erey Kitaabka Qudduuska ah ku jira, ujeedkuse waa pervasive

1. Injiilka
  - a. Matayos 3:16-17; 28:19 (iyo kuwa la socda)
  - b. Yooxanaa 14:26
2. Falimaha Rasuullada – Falimaha Rasuullada 2:32-33,38-39
3. Bawlos
  - a. Rooma 1:4-5; 5:1,5; 8:1-4,8-10
  - b. 1 Korintos 1:8-10; 12:4-6
  - c. 2 Korintos 1:21; 13:14
  - d. Galatiya 4:4-6
  - e. Efesos 1:3-14,17; 2:18; 3: 14-17; 4:4-6
  - f. 1 Tesaloniika 1:2-5

- g. 2 Tesaloniika 2:13
  - h. Tiitos 3:4-6
  - 4. Butros – 1 Butros 1:2
  - 5. Yuudas – aaydaha 20-21 hint
- Tani sidoo kale way ku sharraxan tahay Axdigii Hore
1. Ereyada sida jamaca ah Ilaah loogu magacaabo
    - a. Magaca *Elohim* waa jamac ama plural, laakiin marka Ilaah loo adeegsanayo waa erey keligii ah oo aan wax badan tilmaamayn
    - b. “Annaga” waxa ay ku jirtaa Bilowgii 1:26-27; 3:22; 117
  2. Malaa’igta Rabbigu waxa ay ahayd wakiil loo jeedo u ahayd Ilaah
    - a. Bilowgii 16:7-13; 22:11-15; 31:11,13; 48:15-16
    - b. Baxniintii 3:2,4; 13:21; 14:19
    - c. Xaakinnadii 2:1; 6:22-23; 13:3-22
    - d. Sakariyaah 3:1-2
  3. Ilaah iyo Ruuxu way kala soocan yihiin, Bilowgii 1:1-2; Sabuurrada 104:30; Ishacyaah 63:9-11; Yexesqeel 37:13-14
  4. Ilaah (YHWH) iyo Masiixa (*Adon*) way kala soocan yihiin, Sabuurrada 45:6-7; 1101; Sakariyaah 2:8-11; 10:9-12
  5. Masiix iyo Ruuxu waa kala soocan yihiin, Sakariyaah 12:10
  6. Dhammaan saddexdaba waxaa lagu sharraxay Ishacyaah 48:16; 61:1
- Ilaahnimada Ciise iyo shaqsi ahaanshaha Ruuxu waxay dhibaatooyin ku keeneen hab sami u socodkii, monotheistic, rumaystayaashii ugu horreeyay:
1. Tertullian—Sida Wiilku iga hooseeyo Aabbaha
  2. Origen—kala hoosaynta nolosha Ilaahiyanka ah ee Wiilka iyo Ruuxa.
  3. Arius—Diidista Ilaahnimada Wiilka iyo Ruuxa
  4. Monarchianism- Ilaah oo jiritaankiisa si adag loo rumaysto
- Saddex midnimadu waa hab si taariiq ahaaneed loo soo arkay oo horumar u sameeyay oo lagu arkay waxa uu Kitaabka Qudduuska ahu ka kooban yahay
1. Ilaahnimada buuxda ee Ciise, oo la mid ah Aabbaha, waxaa caddeeyay golihii Nicca 325 A. D.
  2. Shaqsiyadda kaamilka ah iyo Ilaahnimada Ruuxa oo la mid ah aabbaha iyo Wiilka waxaa qeexay golihii Constantinople (381 A. D.)
  3. Madhabta saddex midnimada waxaa si buuxda loogu qeexay Augustine shaqadiisii, *De Trinitate* Sida runta ah waxaa halkan yaal yaabab run ah. Laakiin Axdiga Cusub wuxuu adkaynayaa hal jiritaan oo weyn oo kala ah saddex shaqsi oo weligood muuqaal shaqsi ahaaneed lahaa.

▣ “jidhkiinna dhimanayana wuxuu ku noolayn doonaa” Sare kicidda ay Ciise iyo kuwiisa raacsan ay sare keceen waa mabda’ lagama maarmaan ah (cf. 1 Korintos 15:1ff; 2 Korintos. 4:14). Masiixiyaddu waxay ku xooggan tahay in rumaystayaashu ay nolosha weligeed ah ku leeyihiin nolol jidh ahaaneed (cf. 1 Yooxanaa 3:2) Haddii Masiix Ruuxa lagu sare kiciyey, Kuwiisa raacsanna waa sidaas oo kale (cf. aayadda 23).

**NASB (UPDATED) TEXT: 8:12-17**

<sup>12</sup>Sidaas daraaddeed. walaalayaalow, wax baa inagu waajib ah, laakiin waajib inooguma aha jidhka, inaynu u noolaanno sida jidhka, <sup>13</sup>waayo, haddaad sida jidhka u noolaataan, hubaal waad dhiman doontaan, laakiin haddaad falimaha jidhka Ruuxa ku dishaan, waad noolaan doontaan. <sup>14</sup>In alla intii Ruuxa Ilaah hoggaamiyo, waa carruurta Ilaah. <sup>15</sup>Waayo, ma aydnaan helin ruuxa addoonnimada inaad mar kale cabsataan, laakiinse waxaad hesheen Ruuxa carruur idinka dhigay, kan aynu ku qaylinno Aabbow. <sup>16</sup>Ruuxa qudhiisu wuu markaati furaa oo wuxuu ruuxeenna u sheegaa inaynu innagu nahay carruurta Ilaah. <sup>17</sup>Oo haddaynu carruur nahay, de haddaba waxaynu nahay kuwo wax dhaxla, kuwo Ilaah dhaxla oo Masiix wax la dhaxla, haddii aynu isaga la xanuunsanno, in laynala ammaano isaga.

**8:12 “Sidaas daraaddeed. walaalayaalow”** Bawlos wuxuu sii wadaa to in uu taswiir ka bixiyo caddaymihiisa uu soo ban dhigayo ee aayadaha 1-11.

▣ **“wax baa inagu waajib ah”** Tani waa dhanka kale ee xorriyadda Masiixiga (cf. 14:1-15:13). Waa gabagabadii laga soo qaadat wada tashigii ku saabsanaa qudduusnoqoshada ee aayadaha 1-11, kuwaasoo ah caddayn boos iyo horumar labadaba. Sidoo kale waxa ay si cad inoogu muujinaysaa in kuwa rumaysadka leh ay qasab ku tahay in ay la hardamaan dabeecaddii hore ee dhacday ama guul darraysatay (cf. Rooma 7). Waxaa jirta doorasho ay tahay in la samaysto (bilowga iimaanka) iyo in iimaan sii soconaya la sameeyo kaa soo ah (Qaab nololeedka iimaanka)!

**8:13 “Haddii”** waxaa jira jumlado shuruudaha ka hadlaya oo soo noqnoqonaya mar kale sida aayadaha 9, 10, 11, 13 iyo sidoo kale 17. Dhammaantood waa kuwo booska koowaad gelaya, kuwaasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeedooyinkiisii uu wax u qoray. Bawlos wuxuu qiyaasayey in kuwa markaa isaga wax ka aqrisanayey ay ahaayeen masiixiyiin Ruuxa ku nool.

▣ **“haddaad sida jidhka u noolaataan, hubaal waad dhiman doontaan”** labada juladood ee aayaddan 13 aad waa fal jooga. Waxa ay ka hadlayaan ficil socda. Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu muujinayaa saddex arrimood ku saabsan dhimashada. (1) Dhimashada ruuxiyadeed (cf. Bilowgii. 2:17;3:1-7; Efesos 2:1); (1) dhimashada jidhka (cf. Bilowgii 5); iyo (3) Dhimashada weligeed ah (Muujintii. 12:11; 20:6,14; 21:8). Midda mowduucan looga hadlayo waa dhimashadii u Aadan ka dhintay xagga Ruuxa (cf. Bilowgii 3:14-19) Taas ayaa keentay in aadanuhu uu jidh ahaan dhinto nooc hasta oo ay yihiinba (cf. Bilowgii. 5).

Aadan dembigiisii wuxuu aadanaha u keenay dhimasho (cf. 5:12-21). Midkeen kasta wuxuu doortay in uu si doorashadiisa ah ku galo dembiga. Haddii aan dooranno in aan ku sii jirno, wuu ma dilayaa, marka hore “ruux ahaan” (cf. Muujintii 20:6,14 “oo ah dhimashada laabaad”). Haddii aan Masiixiyiin mahay waa in aan ka dhimannaa dembiga oo aan u nimaanna in aan Ilaah u noolaanno (cf. Rooma 6).

▣ **“laakiin haddaad falimaha jidhka Ruuxa ku dishaan, waad noolaan doontaan”** Hubsashada badbaadada rumaystayaasha waxay ka muuqataa oo ay ka soo baxdaa noloshooda Masiixi ahaan (cf. Buugaagta Axdiga Cusub ee Yacquub iyo warqadda laad ee Yooxanaa). Masiixiyiintu noloshan cusub uguma noolaa mid dadaalkooda ah, laakiin waxay ugu nool yihiin midda Ruuxa Qudduuska ah (cf. aayadda 14). Arintu si kastabaq ha ahaatee, waa in maalin kasta au noloshooda u dhiibaan isaga si uu u hago iyaga (cf. Efesos 5:17-18).

Marka la eego micnaha meeshan ku jira ee ah “Camallada jidhka” ayaa waxaa loo arkayaa si la mid ah sida loo arkayey tii hore ee dembiga miiran ahayd. Tan macnaheedu ma ahan in la diidayo jiritaanka jidha ee nolosha weligeed ah (cf. 8:23) laakiin waa farqiga ka dhexeeya ku dhex noolaashaha Ruuxa (filka cusub) iyo la dagaallanka dembiga (Noloshii hore).

**8:14 “In alla intii Ruuxa Ilaah hoggaamiyo”** Tani waa fal jooga oo hadal maldaheed ah, oo muujinaysa in Ruuxa Qudduuska ah uu si joogto ah ahge noogu yahay. Ruuxu wuxuu nooga yimid Masiixa, waana qasab in uu nolosheenna dhexdeeda ka muujiyo Masiix (cf. aayadda 29). Waxaa jira waxyaabo badan oo ku wajahan Masiixiyadda oo ka weyn go’aanka. Runtii tani waa xernimo joogto ah laakiin go’aanka ayuu ka bilowdaa. Tani kuma xidhna dhacdooyin qaas ah, waqtiyo ama adeegyo, laakiin waa waxqabadyada maalmeed.

▣ **“waa carruurta Ilaah”** Ereygan jamaca ah waxaa loo isticmaalay malaa’igaha iyadoo mar mar dhif ahna aadanaha. Keli ahaan waxaa loogu adeegsaday Aadan, Israa’iil, boqorkeeda iyo Masiixa. Halkan waxay taagan tahay rumaystayaasha oo dhan. Sida ku jirta aayadda 14aad Giriig ahaan ereyga “sons” *huioi* waxaa lagu isticmaalay aayadda 16aad, iyadoo laga wado, *tekna* (children). Si soo noqnoqod leh ayaa qoraalkan dhexdiisa loogu isticmaalay.

**8:15 “ruuxa”** Aayaddani uma qeexna sida aayadda 10aad. Waxaa lagu qeexi karaan ruuxa cusub ee aadanaha madax furtay eek u jira Masiixa amaba Ruuxa Qudduuska ah. Labadaba aayadda 16 ayaa laga dhex helayaa.

Waxaa jira meelo dhowr ah oo qoraalka Bawlos ku jira kuwaasoo dhismaha naxwe ahaaneed loo isticmaalay si loogu sharraxo waxa Ruuxa Qudduuska ahu ka soo dhex saaro shaqisa rumaystaha ah

1. Halkan, “ma aha ruuxa addoonnimada,” laakiin “Ruuxii naga dhigay carruur la leeyahay”, aayadda 15

2. “Ruux caaqilnimo,” 1 Korintos 4:21
3. “Ruux iiman (Aamminaad), 2 Korintos 4:13
4. “Ruux xigmad iyo muujineed,” Efesos 1:17

Waxaa jira meelo dhowr ah gaar ahaan 1 Korintos, halkaasoo uu Bawlos isticmaalayo *Pneuma* si uu naftiisa ugu muujiyo (cf. 1 Korintos 2:11; 5:3, 14; 7:34; 16:8; iyo Kolosay 2:5). Marka qoraalladan la eego aayadaha 10 iyo 15 ayaa xaalkan aad u kaamilaya.

▣ **“addoonnimada inaad mar kale cabsataan”** Dabeecadaha dabeecaddii hore waa cabsi. Dabeecadaha dabeecadda cusubina waxaa lagu qeexay ama lagu sharraxay aayadaha 14-17.

▣ **“carruur idinka dhigay”** Sharcigii reer Roma wax adag ayuu ka dhigay in carruur la korsado, laakiin waa la sameeyay, oo joogto ayey ahayd. (cf. Galatiya 4:4-6). Qiyaastani waxay caawinaysaa runta ku jirta barashada Ilaah ee ammaanka uu rumaystuhu helayo. Waxaa dhacda in cunugga la dhalay ay dhacdo in aan dhaxal la siin laakiin carruurta la korsaday sidaas ma aha. Tan waa mid ka mid qiyaasaha ama taswiiraha ugu caansan ee Rasuul Bawlos ee uu ku qeexay badbaadad (cf. vv 15, 23). Yooxanaa iyo Butros waxay isticmaaleen taswiiraha ama qiyaaso kuwaas la xiriira, “Dhalasho labaad” (cf. 3:3; 1 Butros 1:3,23).

▣ **“Aabow”** ereygu afka Arameegga wuxuu ku ahaa sida ay carruurta ugu yeeraan aabbahood (sida “aabbe” ama “baabba”). Ciise iyo rasuulladu ay way ku hadlayeen afka Arameegga. Kuwa rumaysanaya waxay hadda Ilaaha Qudduuska ahu ugu yimaadaan sababta dhiigga Qudduuska ah ee Masiixa, iyadoo uu u soo marayo Ruuxa Qudduuska iyagoo leh immaan adag iyo kalsooni qoys ahaaneed (cf. Markos 14:36; Galatiya 4:6). Miyeyaan layaab ahayn in aadanihii guuldarradu ku dhacday ay Ilaah ugu yeeri karaan Aabbe, oo kan qudduuska ah ee weligiis jiraya uu middaas ku farxayo! Ka arag mawduuca gaarka ah: Aabbe 1:7

▣ **“Ruuxa qudhiisu”** Luuqadda Giriigga ereyga Ruux waa NEUTER, sidaas daraaddeed KJV wuxuu midan u turjumay “Ruuxa qudhiisa,” laakiin ruuxu waa qof; waa uu murugoon karaa (cf. Efesos 4:30; 1 Tesaloniika 5:19), sidaas daraaddeed, “Qudhiisa” ayaa ah turjumaadda wanaagsan.

▣ **“wuu markhaati furaa oo wuxuu ruuxeenna u sheegaa inaynu innagu nahay carruurta Ilaah”** Sida lagu sheegay aayadda 13aad, hal qayb oo hubsashada iimaanka ah waxaa laga arkayaa sida rumaystaha noloshiisu isu beddeshay ama isu beddelayso (cf. Axdiga Cusub buugaagta Yacquub iyo 1 Yooxanaa). Qaybta kale hubsashada waxaa weeye in Ruuxu uu dhex degay oo uu ka saaray cabsidii uu Ilaah ka qabay oo ay u beddelanto jacayl qoys ahaaneed. Ogsoonow RSV iyo NRSV turjumaadahooda iyo joogsiyadooda, “Marka aan ku qayshanno Aabba, ama Aabow! Waa Ruuxa Qudhiisa oo marqaati fur siinaya ruuxeenna aannu ku nahay carruurta Ilaah” (cf. Galatiya 4:6). Tani waxay macne ahaan na siinaysaa in hubsashadu ay timaaddo rumaystuhu uu Ilaah ugu yeeri karo Aabbe, oo uu Ruuxu siiyo.

Marqaatifurka gudaha ee Ruuxu ma aha mid la maqli karo, laakiin waa mid ficil ahaa loo arko.

1. Gef ku yimaada dembiga
2. Rabitaan ah in Masiixa lala mid noqdo
3. Rabitaan ah in laga mid noqdo qoyska Ilaah
4. In baahi loo qaado Ereyga Ilaah
5. Dareenka ah in baahi loo qaado in wacdiye la noqdo
6. In baahi loo qaado in masiixigu naftiisa huro

Kuwani waa noocyada rabitaannada gudaha oo keena caddayn iimaan ah inuu is beddelay.

Hubsashada badbaadada waxaa loo leexiyey sida ay firqooyinka looga dhex arko:

1. Barashada Kaatooliggu way qaadacayaan hubsashada noloshan iyagoo ku saleeya inj qofku uu ka mid noqdo xubnaha macbudka ee “runta” ah.
2. John Calvin (Dhaqanka Reform-ka) waxa uu ku salaysan yahay hubsasho ku salaysan doorasho (predestination), laakiin qofna ma garan karo hubaasha illaa laga gaaro maalinta dambe ee xukunka laga gaaro
3. John Wesley (Dhaqanka Methodist-ga) waxa uu ku salaysan yahay jatcayl kaamil ah (In lagu noolaado nolol ka sarraysa dembiga la yaqaan.
4. Baabtiistaasha badankood waxay waxay hubsashada ku sharraxaad in ay aasaas u tahay ballammada Kitaabka Qudduuska ah oo ah nimo fasaxan. (laakiin la iska dhego tirayo dhammaan digniinaha iyo

waanooyinka. Waxaa jira labo qatarood oo la xiriira bandhigyada aan caqli-galka ahayn ee Axdiga cusub oo ku aaddan hubsashada Masiixiyiinta:

1. Xoojinta sarraysa “mar la badbaadshay, mar kasta badbaadsan”
2. Xoojinta adage e fulinta aadanaha qabsashada badbaadada.

Ciraaniyada cutubka lixaad ayaa in baraya “mar ka bax mar kasta ka baxsan.” Dadaallada aadanaha (shaqooyinka wanaagsan) kama dhigayso in rumaystayaashu ku badbaadayaan (cf. Galatiya 3:1-14). Laakiin shaqooyinka wanaagsani waa hadafka nolosha Masiixiyiinta (cf. Efesos 2:10). Waa natiijada lagula kulmayo Ilaah oo lagu lahaanayo. Waa caddaynta uu mid ku muujin karo in uu is beddel masiixinnimo ku dhacay.

Hubsashada loolama jeedo in Kitaabka u yeeristiisa lagu qafiifinayo qudduusnimo! Ka hadlidda barashada Ilaah, ee hubsashada kuma xirna dabeecadaha iyo ficillada Ilaaha runta ah:

1. Jacaylka iyo naxariista aabbaha
2. Shaqadii is bixinta wiilka ee dhammaatay
3. Shaqada uu Ruuxu ugu qayshanayo Masiixa ee uu dabadeed rumaystaha ku dhex beerayo Masiixa.

Daliisha badbaadadani waa muuqaalka adduunka oo is beddelay, qalbi is beddelay, hab nololeed is beddelay iyo rajo is beddeshay. Laguma salayn karo go’aan hammiyeed oo aan lahayn daliil hab nololeed (i. e., fruit, cf. Matayos 7:15-23; 13:20-22; Yooxanaa 15) Hubsashada, sida badbaadada, sida nolosha Masiixiga waxa ay ka timaaddaa jawaabta naxariista Ilaah oo halkaas ayey jawaabtaasu iga sii socotaa nolosha dhexdeeda. Waa nolol iimaan leh oo is beddel samaysay waddana in ay is beddel samayso!

▣ **“wuu markhaati furaa”** kani waa calaamad kale oo isku xiran. Ruuxu wuxuu ka marqaati kacaa ruuxa rumaystaha. Bawlos wuxuu ereyadan is wata ku adeegsaday 2:15;8:16 iyo 9:1.

**8:17 “Haddii”** waxaa jira jumlado shuruudaha ka hadlaya oo soo noqnoqonaya mar kale sida aayadaha 9, 10, 11, 13 iyo sidoo kale 17. Dhammaantood waa kuwo booska koowaad gelaya, kuwaasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeeddooyinkiisii uu wax u qoray. Bawlos wuxuu qiyaasayey in kuwa markaa isaga wax ka aqrisanayey ay ahaayeen masiixiyiin Ruuxa ku nool.

Aayaddan dhexdeeda waxaa ku jira saddex erey oo isku xiran iyadoo la adeegsanayo *syn* oo loola jeedo “Ka qayb gal isugu xidh.” Masiixiyiintu waxay waxa ay leeyihiin oo dhan ay la wadaagaan Masiix; Kuwa rumaysadka lahu waxay silicooda la wadaagaan Masiixa; oo kuwa rumaysadka lahu waxay ammaan la wadaagaan Masiixa. Waxaa jira dhowr erey oo kale oo isku xiran oo ku jira aayadaha 22 (labo jeer) 26&28. Efesos 2:5-6 sidoo kale waxay leeyihin saddex erey oo isku xiran taasoo caddaynaysa nolosha rumaystaha ee Masiixa.

▣ **“wax dhaxla”** Tani waa tilmaan kale oo qeexaya kuwa rumaysadka leh (cf. 4:13-14; 9:8; Galatiya 3:29. Eeg mawduuca gaarka ah ee soo socda.

#### **MAWDUUC GAAR AH: DHAXALKA RUMAYSTAYAASHA**

Qorriinnadu waxa ay sheegayaan in rumaystayaashu ay dhaxlayaan waxyaabo sababtuna ay tahay xiriirkooda ay Ciise Masiix la leeyihiin oo ah kan wax kasta dhaxlaya (cf. Cibraaniyada 1:2), iyo in ay yihiin kuwo wax la dhaxla (cf. Rooma 8:17; Galatiya 4:7) in la dhaxlayaan

1. Boqortooyada (cf. Matayos 25:34, 1 Korintos 6:9-10; 15:50)
2. Nolosha Weligeed ah (cf. Matayos 19:29)
3. Ballammadii Ilaah (cf. Cibraaniyada 6:12)

Ilaah ilaalintiisa ballammada (cf. 1 Butros 1:4; 5:10).

▣

**NASB, NKJV**

**“haddii aan isaga la silicon”**

**NRSV**

**“hadii caqiiqdii aynaan isaga la silcin”**

**TEV**

**“haddii aynaan Masiixa la wadaagin silicyada”**

**JB**

**“la wadaagno silicyada”**

Silicu waa u xeer ay maraan kuwa rumaysadka lahu maaddaama ay aduun dhacay dhex joogaan (cf. Matayos 5:10-12; Yooxanaa 15:1821; 16:1-2; 17:14; Falimaha rasuullada 14:22; Rooma 5:3-4, 8:17; 2 Korintos 4:16-18; Filiboy 1:29; 1 Tesaloniika 3:3; 2 Timoteyos 3:12; Yacquub 1:2-4; 1 Butros 4:12-19). Ciise Masiix ayaa

tusmadan sii habeeyey (cf. Cibraaniyada 5:8). Cutubkan inta ka hadhsan waxa uu horumar ku samaynayaa isla qaabkan.

▣ **“in laynala ammaano isaga”** Sida ku jirta qoraallada Yooxanaa goor kasta oo uu Ciis dhimashadiisa ka hadlayey, wuxuu ugu yeerayey “in la amaanay.” Ciise wuu ku ammaanna siliciisii. Kuwa rumaysadka leh gaar ahaan iyo guud ahaa waa kuwo waayo aragnimo u leh in ay la wadaagaan wixii Ciise ku dhacay ama dhacdooyinkii qabsaday Ciise Masiix. (cf. Rooma 6). Ka eeg mawduuca gaarka ah wax ka maammulidda Boqortooyada Ilaah ee 5:17-18.

**NASB (UPDATED) TEXT: 8:18-25**

<sup>18</sup>Waxaan ku tirinayaa in waxyaalaha wakhtigan la joogo lagu xanuunsadaa ayan istaahilin in lala simo ammaanta iman doonta oo laynoo muujin doono. <sup>19</sup>Uunku wuxuu filasho aad u weyn ku sugaa muujinta carruurta Ilaah. <sup>20</sup>Uunkii waxaa la hoos geliyey wax aan waxtar lahayn, ikhtiyaarkiisna uma uu hoos gelin, laakiin waa kii hoos geliyey aawadiis, <sup>21</sup>taasoo la rajaynayo in uunka qudhiisana laga xorayn doono addoonnimada qudhunka ah oo la gelin doono xorriyadda ammaanta carruurta Ilaah. <sup>22</sup>Waayo, waxaynu og nahay in uunka oo dhammu wada taahayo oo wada foolanayo ilaa haatan. <sup>23</sup>Iyagoo keliya ma aha, laakiin innagana waa sidaas oo kale, kuweenna haysta midhihii ugu horreeyey ee Ruuxa, xataa innaga qudheennu dhexdeenna ayaynu ka taahnaa, innagoo sugayna carruurnoqoshadeenna, taasoo waxaa weeyaan samatobixinta jidhkeenna. <sup>24</sup>Waayo, waxaynu ku badbaadnay rajo, laakiin rajadii la arko rajo ma aha, maxaa yeelay, waa ayo kan rajeeyaa wuxuu arko? <sup>25</sup>laakiin haddaynu rajayno wax aynaan arkin, de haddaba dulqaadasho ayaynu ku sugnaa.

**8:18 “Waxaan ku tirinayaa”** Tan marka la soo kobo waxa uu macnaheedu noqonayaa “wax lagu darayo wax kale” WAA FAL JOOGA OO WAX MUUJINAYA. Bawlos wuu sii wadaa in uu tixraac ku sameeyo noocyada silicyada Masiixiga. Tani waa arrin in la xuso mudan in lagu yimaado dhaammad aad baaris loogu soo sameeyay. Waa maaddo ama mawduuc socda oo ku jira Rooma (eeg tusmada 2:3). Kuwa rumaysadka lahu waa in ay ky socdaan iftiinka xaqiiqooyinka ruuxiga ah ee ay fahansan yihiin.

▣ **“Xanuunnada”** qaar fikradahan silica ee ay ku jiraan in Masiixa loo shaqeeyo waxaan ka helaynaa 1 Korintos 4:9-12; 2 Korintos 4:7-12; 6:4-10; 11:24-17; Cibraaniyada 11:35-38.

▣ **“Waqhtigan la joogo”** Yuhuuddu waxay rumaysnaayeen in taariikhda adduunku aylabo fac u qaybsan tahay, faca sharka ee la joogay iyo cafa xaqnimada ee ay tahay in uu yimaado. (cf. Matayos 12:32; Markos 10:30). Axdigii hore waxay sugayeen Masiixa ay ahayd in uu yimaado ee facan cusub ee xaqnimada. Arrintu si kastaba ha ahaatee, labada imaansho Masiixa, mid waa isagoo badbaadiye ah (dhalashada labaad) tan labaadna Rabbi (imaashada labaad) oo ay sababeen labadan fac. Kuwa rumaysadka lahu waxay ku nool meel dhexaysa “tii hore” iyo “weli” oo ah Boqortooyadii Ilaah. Ka arag mawduuc gaar ah: Facan iyo facii hore 12:2.

▣ **“mudan. . . Ammaan”** ereyadan labaduba waa kuwo la xiriira fikirki Axdigii Hore ee culayska- in culaysku qiimo leeyahay. “Mudan” waxay ka timid ereyo ganacsi oo macnahoodu ahaa “in loo cusleeyo si ka weyn sidii”. Ereyga Cibraaniga ah ee “ammaan” wuxuu sidoo kale ka yimid xidid ahaa oo macnihiisu yahay “culays” oo ah in ofku uu lahaado dareenka iyo qiimo, sida kan dahabka oo kale ah. Kan oo dhammaystiran ka eeg 3”23.

Ereyga “ammaan” eek u jira qoraallada rasuul bawlos waxay leyihiin micne fog oo qoto dheer leh. Wuxuu u taagan yahay mucjisada iyo awoodda dib u soo noqoshada Masiixii la subkay ee ammaanta lahaa. (cf. Kolosay 3:4). Eeg mawduuca gaarka ah: ammaanta ee 3:23.

▣ **“oo laynoo muujin doono”** ereyadan hadal sarbeebedka ah waxay sharraxaad ka bixinayaan adeegaha Ilaah ama Ruuxa (cf. aayadda 20). Rumaystayaashu waxay tan ugu nool yihiin iimaan ma aha asagti (cf. aayadda 24 & 1 Korintos 2:9; 13:12; 2 Korintos 5:7 & Cibraaniyada 11:1).

**8:19 “uunku wuxuu filasho aad u weyn”** jidh ahaan abuurka waxaa loo gaar yeelay shaqsi ahaan iyagoo loo sameeyay qoor leexleexanaysa oo ay ku arkaan cirifka. Abuurka waxay si waxyeelladu u gaartay markii Aadan iyo Xaawo ay fallaagoobeen (cf. Bilowgii 3:17-19). Abuurka oo dhan waa la madax furan doonaa (marla laga

reebo malaa'igaha fallaagoobay, aadanaha aan rumaysadka lahayn, iyo meeshoodii loo diyaariyey in lagu takooro, cf. Bruce Corley iyo Curtis Vaughan, *Rooma*, bogga 95, tusmo hoosaadda 46).

## MAWDUUC GAAR AH: ILAHA QAYRAADKA DABIICIGAAH

### I. Hordhac

- A. Abuurka oo dhan waa kuwo ku yimid Ilaah jacaylkiisa uu u qabo aadanaha.
- B. Dhicitaankii ayey la wadaageen (cf. Bilowgii 3:17; 6:1ff; Rooma 8:18-20). Sidoo kale, way la wadaagayaan madax furashada aan wax la soo koobi karo la arag. (cf. Ishacyaah 11:6-9; Rooma 8:20-22; Muujintii 21:22).
- C. Dembi badnaantii iyo dhicitaankii aadanuhu waxay danaastenimadoodii xumayd ku qarribeen qayraadkii dabiiciga ahaa. Hoos waxaa ku qoran xigasho laga soo qaatay *The Canon of Westminster* ee Edward Carpenter.
  - a. “. . . Aadanaha weerarkooda waxdayn la'aanta ah ee arrimaha adduunka, ee ay ku hayaan caalamka ku wareegsan—taasi waxay dul saaran tahay abuurta Ilaah—waa weerar uu ku hayo hawadii oo wasaqowday; waddooyinkii ilihii dabiiciga ahaa ee biyaha oo la qarribay, carradii oo la sumeeyay; kaymihii oo uu jarayo, kuwan oo dhan waxay ku keenayaan burbur. Weerarkani waa cad yar oo cunno ah lamana kor meerayo. Wax yar ayaa waxaa loo baabbi'inayaa wax yar iyadoo aan la eegayn wixii jiil uu jiil kale ka dhaxli lahaa.”
- D. Ma aha in aan guranaynno natiijada wasaqaynta iyo qarribidda meeraheenna, laakiin xitaa tafiirteenna ayaa guran doonta wax xitaa intaa ka sii daran, saamayn aan dib loo hagaajin karayn.

### II. Waxyaabaha Baybal ahaaneed

#### A. Axdigii Hore

##### 1. Bilowgii 1-3

- a. Abuurtu waa wax Ilaah abuuray si ay aadanaha wehelnimo ula yeeshaan (Bilowgii 1:1-25).
  - b. Abuurtu way wanaagsan tahay (cf. Bilowgii 1:4,10,12,18,21,25, haa, aad ayey u wanaagsan tahay (Bilowgii 1:31). Waxaa macnaheedu yahay in marqaati looga ahaado Ilaah (cf. Sabuurrada 19:1-16).
  - c. Baniid aadannimadu waa ujeeddada koraysa ee abuurta (cf. Bilowgii Bilowgii 1:26-27).
  - d. Aadanaha waxaa loo siiyey in ay maammulayaal ka noqdaan. (Cibraaniyada, “si loola macaamilo” iyada oo ilaaliyeyaal looga noqonayo Ilaah (cf. Bilowgii 1:28-30; Sabuurrada 8:3-8; Cibraaniyada 2:6-8). Ilaah jooqe, isaga ayaana ah abuure jooqi doona, wax madax furta, oo ah Rabbiga abuurta (cf. Baxniintii 19:5; Ayuub37-41; Sabuurrada 24:1-2; 95:3-5; 102:25; 115:15; 121:2; 124:8; 134:3; 146:6; Ishacyaah 37:16).
  - e. Aadanaha wakiilnimadooda abuurta waxaa laga arki karaa Bilowgii 2:15, “si ay u carro rogaan, u dhowraan una difaacan” (cf. Laawiyiintii 25:23; 1 Korintos 29:14).
- ##### 2. Ilaah waa jecel yahay abuurta gaar ahaan xayawaanka.
- a. Sharcigii Muuse wuxuu macaamil ku filan u lahaa xayawaanka
  - b. YHWH oo la cayaaraya Levathan (cf. Sabuurrada 104:26)
  - c. Ilaah wuu daryeela xayawaannada (Yoonis 4:11)
  - d. Joogitaanka runta ee Nadiiciga (cf. Ishacyaah 11:6-9; Muujintii 21:22)
- ##### 3. Dabiicigu, si ahaan Ilaah wuu ka farxiyaaq.
- a. Sabuurrada 19:1-6
  - b. Sabuurrada 29:1-9
  - c. Ayuub 37-41
- ##### 4. Dabiicigu waa ha macne oo uu Ilaah jacaylkiisa iyo daacadnimadiisa axdiga ugu muujiyo.
- a. Sharciga Ku Noqoshadiisa 27-28; I Boqorrada 17
  - b. Isagoo nebiyadiisii soo marinaya

#### B. Axdiga Cusub

1. In Ilaah yahay abuuraha ayaa loo arkaa. Waxaa jira ha abuure oo qura, Ilaaha wax ka weyn aanay jirin (Elohim, Bilowgii 1:1 Ruuxa, Bilowgii 1:2 iyo Ciise AxdigaCusub). Waxa kaloo dhan waa la abuuray.



- a. Falimaha Rasuullada 7:24
- b. Cibraaniyada 11:3
- c. Muujintii 4:11
2. Ciise waa wakiilka gaarka ah ee abuurta
  - a. Yooxanaa 1”3,10
  - b. I Korintos 8:6
  - c. Kolosay 1:16
  - d. Cibraaniyada 1:2
3. Ciise wuxuu si sarbeeb ah daryeelka abuurta uga hadlay w/Wacdiyadiisii
  - a. Matayos 6:26,28-30 shimbiraha circa iyo ubaxyada duurka
  - b. Matayos 10:29 dharka
4. Bawlos aad ayuu ugu doodayaa in aadanuhu ay aqoontooda masuul uga yihiin Ilaah xagga abuurta (i.e., Muujinta dabiiciga, cf. Rooma 1:19-20; Muujintii 21”22).

### III. Gaboggabo

- A. Waxaan dhexda kaga jirnaa dabeecaddan isa saaran!
- B. Aadanaha dembiga badanu waxay caayeen hadiyaddii Ilaah ee dabiiciga iyagoo weliba hasyta dhammaan hadiyadihii kale ee Ilaah.
- C. Dabiiciga habaysnaantiisu waa wax dhuleed. Waa wax dhimanaya (IIButros 3:7). Ilaah wuxuu dunida u qaadayaa meel taariikh ahaan loo dhigo. Dembigu inkaartiisa ayuu la carari doonaa, Ilaah ayaana go’aan ka gaaray xadadkiisii. Abuurta waa la madax furan doonaa (cf. Rooma 8:18-25).

▣ **“muujinta”** Ereygan waxaa loola jeedaa “in dib loo qaado daahii” si loo furo ama daaha looga qaado. Sidoo kalena waa magaca kitaabka ugu dambeeya Axdiga Cusub, “The apocalypse.” Soo noqoshada labaad waxaa aalaaba lagu qeexaa muujinta ama imaanshaha (cf. I Korintos 1:7-8; I Butros 17,13).

▣ **“carruurta Ilaah”** Tani waxay ahayd tilaan qoys ahaaneed oo lagu muujin jiray Masiixiyiinta. (cf. 8:14,16). Jumladu waxa ay Ilaah ku tilmaamaysaa in uu yahay Aabbe, Ciise na wiilkiisa aan wax loo dhigo aanay jirin (cf. Yooxanaa 1:18; 3:16,18; Cibraaniyada 1:2; 3:6; 5:8; 7:28; I Yooxanaa 4:9).

Axdigii Hore dhexdiisa Israa’iil wuxuu ahaa wiilkii Ilaah (cf. Hoosheeca 11:1), Sidoo kale boqorku wuxuu ahaa wiilka Ilaah (cf. II Samuu’eelka 7) Arrintan markii ugu horraysay waxaa lagu dhex sheegay Axdiga Cusub ee Matayos 5:9 iyo sidoo kale (cf. Yooxanaa 1:12; II Korintos 6:18; Galatiya 3:26; I Yooxanaa 3:1,10; Muujintii 21:7).

### 8:20

NASB, NKJV,

NRSV

TEV

JB

**“Uunka waxaa la hoos geliyey wax aan wax tar lahayn”**

**“Uunka waxaa lagu eedeeyay in ay noqdeen wax aan waxtar lahayn.**

**“Ma aha gef ay sameeyeen qayb ka mid ah uunka wixii ay u awoodi waayeen in ujedkoodii ay fuliyaan”**

Tan waxaa lagu turjumay “Wax aan wax tar lahayn” Waxaa loo isticmaalay dhawr qaab oo ku jira Septuagint –aan macne lahayn—aan mudnaan lahayn—aan faa’ido lahayn oo Ilaahyo beena ah (sanamyo), iyo weliba madhnaan. Abuurta oo dhan waxa ay noqdeen wax aan faa’ido u lahayn qorshihii Ilaah markii hore ugu talo galay (cf. Bilowgii 3:17-19) , laakiin mar baa Ilaah ka tiri lahaa habaarkii dhicitaankoodii (cf. Muujintii 22:3). Adduunkani ma aha kii Ilaah ugu talo galay in uu ahaado!

▣ **“laakiin waa kii hoos geliyey aawadiis”** ereygan fal sameeyaha ahu wuxuu si toos wax kuga tilmaamayaan Ilaag (cf. NASB, NKJV, TEV). Wuxuu dhammaan wixii jidhka lahaa oo dhan wuxuu ka dhigay wax aan wax tar lahayn

1. Aadanaha fallaagonimadooda awgeed

2. Isku dayey in aadanaha uu u leexiyo xaggiisa (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 27-29)

Arrinkan waxtar la’aanta ah waxay ku jiri doonaan oo qura muddo yar. Kii aadanaha madax furtay ayaa ballan qaaday muuqaal mustaqilka (jir ahaan iyo Adduun ahaanba).

Ilaah oo ogaa fallaagonimadii Aadan. Ayuu oggolaaday in ay dhacdo oo uu aadanihii guul darraystay kula shaqeeyo adduun dhacay. Kan ma aha aduunkii Ilaah ku talo galay in uu ahaado. Kan ma aha adduunka maalin uu dib u ahaan doona. (cf. II Butros 3:10; Muujintii 21:1-3). Sidoo kale, ka eeg note ka “rajo” ee 5:2.

**8:21 “taasoo la rajaynayo in uunka qudhiisana laga xorayn doono addoonnimada”** Dabiicigu wuxuu qayb ka ahaan doonaan kuwa helaya nolosha weligeed ah (cf. Ishacyaah 11:6-10). Janadu waxay dib ugu soo laaban dhul dib loogu abuuray (cf. Matayos 5:18; 24:25; II Butros 3:10; Muujintii 21:1). Mustaqbalku waxaa jiri doonta beertii Ceedan oo dib u soo laabata, oo uu dhaco wehelnimo ka dhexaysa Ilaah iyo aadanaha, shaqsi shaqsi, aadanaha iyo xayawaanka, iyo aadanaha oo dhulka dega! Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu ku bilaabanayaa Ilaah, dadka iyo xayawaanka oo wehelnimo iyo ku wada leh beerta dhexdeeda. (cf. Bilowgii 1-2) sidoo kal ayaana Kitaabku ku dhammaadaa (cf. Muujintii 21-22).

▣ **“qudhunka”** Ka eeg mawduuca gaar ah ee 1:23

▣ **“xorriyadda ammaanta carruurta Ilaah”** Sida ku jirta aayadda 14aad kuwa rumaysadka leh waxaa loogu yeeray “wiilashii Ilaah”; Aayadda 16aad na “Carruurtii Ilaah”; aayadda 17aad na “Kuwo Ilaah dhaxla.” Aayadda 18aad na waxa ay sheegaysaa in ammaanta weyn ee Ilaah loo muujin doono KUwa rumaysadka leh. Hadda aayadda 19aad uunku wuxuu sugayaa muujinta wiilasha Ilaah maxaa yeelay waxay waagi doonaan aanna weligeed ah (cf. aayadda 21. Dib u soo celinta abuurta gaar ahaa aadanaha, waxay oggolaan doontaa in ujeedkii asalka ahaa ee abuurta in la fuliyo—Ilaah iyo aadanihii uu araggiisa ka abuuray ayaa is weheshi dambe yeelan doona.

**8:22 “in uunka oo dhammu wada taahayo”** tani waa mid kale oo uu Bawlos ku adeegsanayo erey dhoawr erey ka kooban, “wada taahayo.” Waa in uu wax badan oo iyaga ah isku keenay. Waxaa macquul ah in uu maldahayey oo uu si sarbeeb ah u sheegayey Yeremyaah 12:4,11 (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 27-29), halka uu dhulka Reer Bani Israa’iil ka taahayo xumantii uu dembiga dadku sababay.

▣ **“La silcayo xanuunka dhalidda carruurta”** marka lagu dhex jiro dhaqanka Yuhuudda, ujeeddadatan waxaa loo yeeri jiray “Fooshu waxay xanuujisaa da’da cusub” (cf. Markos 13:8). Dhalashada maalinta cusub ee xaqnimadu ma ahaan doonto dhibaato la’aan. Niyadda iyo xaaladda ruuxi ahaaneed ee adduunkan dhacay ayaa sii xumaan doona oo sii xumaan doona (cf. II Tesaloniika 2:1-12; iyo toddobada ulood, toddobada buun, bowls Muujintii 5:18).

Saddex taah ayaa ku jira meeshan: (1) uunka (aayadda22); (2) kuwa rumaysadka leh (aayadda 23); iyo (3) Ruuxa oo ah ka baryootamaya (aayadda 26), saddexdan oo dhan sababtii ka dhalatay Bilowgii 3 (Tusaaluhu wuxuu ka yimid aayadda 16).

**8:23 “annaga qudheenna. . . annaga qudheenna. . . annaga qudheenna”** magic u yaalladu waa kuwo xoog badan oo soo noqnoqonaya.

▣ **Miraha ugu horreeya ee Ruuxa”** Arrintan Giriigta casriga ah dhexdooda waxaa looga adeegsadaa “Faraantiga alkumashada” tani waxay ku wareegsan tahay “Ballankii Ruuxa” sida ku jirta IIKorintos 1:22; iyo Efesos 1:14.

Axdigii Hore dhexdiisa miraha ugu horreeya waxa ay ahaayeen ballanka beero goyska iman doona. Waxay calaamad ahaan ugu sameeyeen in Ilaah yahay kan beero goys oo dhan iska leh. Ruuxu waa miraha ugu horreeya ee faca ama jiilka cusub sidii Ciise ba u ahaa mirihii ugu horreeyay ee sare kicidda (cf. I Korintos15:20). Kuwa rumaysadka leh, maaddaama ay yihiin carruurta Ilaah, xitaa waqtigan la joogo way arkaan farxadda jannada maaddaama uu Ruuxa Qudduuska ahu la jiro oo ku jiro iyaga. Tani waa “tani horraan” laakiin ma aha “weli” oo waa xiisadda is daba rogaysa ee loabada face e Yuhuudda. Kuwa rumaysadka lahu waa waddaniyiinta Jannada ama jannaaleyaasha iyo kuwa dhullka ku nool!

▣ **“xataa innaga qudheennu dhexdeenna ayaynu ka taahnaa”** waxaad moodda in tani ay ka hadlayso labada xiisadood ee u dhexeeya “Horay” iyo “weli ma noqon” ee labada face e Yuhuudda ah ee is daboolaya. Boqortooyada Ilaah waa mid joogta mana lunto. Kuwa rumaysadka lahu waxa ay leeyihiin nolol sare kicid leh,

weli jir ahaan way u dhimanayaan haddana, (cf. II Korintos 5:2-4). Dhammaanteed waannu badbaadnay hase ahaatee weli dembiilayaal ayaannu nahay (Rooma7).

▣ **“innagoo sugayna carruurnoqoshadeenna”** ereyga accruurnoqoshada waa ereyga Bawlos ugu jecel yahay u adeegsiga badbaadada tusaale ahaan (cf. aayadda 15). Rumaystayaasha badbaadadooda waa hannaan ka soo bilowda ugu horraynta tawbad keenka iyo iimaanka wuxuuna ku horumaraa in qofku uu u koro u ekaanta Masiixa. Kuwa rumaysadka leh si buuxda badbaado uma haystaa illaa maalinta sare kicidda (cf. aayadda soddon iyo I Yooxanaa 3:2).

Ereyga “carruurnoqosho” wuu ka tirtiran yahay qaar ka mid qardaasyadii Giriigta (cf. MMS P<sub>46</sub>, D, F, G, iyo qaar ka mid qoraalladii Laatiinkii hore. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxa uu ku jiraa X, A, B, C, iyo qaar fartii laatiinkii hore ah, Fulgate-ka, Syriac, Coptic iyo Armanian-ka qaybahaas oo dhan. UBS<sub>4</sub> hor galkiisa ayey ka wada xiriiraan sida “A” (Dhab ah).

▣ **“samatobixinta jidhkeenna”** Ujeeddada macnuhu waa “in dib loo iibsado” qaabkan waa lagu isticmaalay Axdigii Hore dhexdiisa si loogu qeexo in qof uu qof qaraabo ahi ka sii daayey ama ka xoreeyay addoonsigii (*go'el*). Middan waxaa masaal ahaan loo adeegsan karaa sidii Ilaah aadanaha iga soo badbaadshay addoonsigii demgiga markii ay dhaceen kaddib. Qiimihii la bixiyey waxa uu ahaa naftii dembi la'aanta ahayd ee wiilkii sare kacay. Eeg mawduuca qaaska ah ee 3:24.

Masiixiyada, iyo la mid ahaanshaha Juudiisimka (cf. Ayuub 14:14-15; 19:25-26; Daanyeel12:2), waxa uu xoojinayaa in rumaaystayaashu ay yeelan doonaan muuqaal (in kastoo aan saas ah looba sii baahnayn, cf. I Korintos 15:35-49) jidh ahaaneed meesha aan laga dhiman doonin dhexdeeda. Rumaystayaasha jirkooda ruux ahaaneed ayaa waxaa si kaamil ah loogu diyaarin doonaa in uu nolol ku qaato nololsha cusub dhexdeeda, taasoo ah nololsha xiriir ku dhow la leh Ilaah.

**8:24 “waxaynu ku badbaadnay rajo”** hadalkani waa hadal sarbeebed. Haddii aan eegno aayaddii 2iyo labaatanaad waxa ay sharraxaysaa badaadadeenna mustaqbalka. Ayaadda 24 waxa ay noo tilaamaysaa badaadadeenni hore eek u jirtay wakiilnimadii Ruuxa. Axdiga Cusubi waxa uu isticmaalay dhowr eey oo fal sameeyayaal oo uu ku qeexayo badbaadada.

1. AORIST, Falimaha Rasuullada 15:11 (Rooma 8:24; II Timoteyos 1:9; iyo Rooma 13:11 Ereyga Aorist ku xiriiri UJEEDKA MUSTAQBALKKA)
2. Present, Efesos 2:5,8
3. Present, I Korintos 1:18; 15:2; II Korintos 2:15; I Butros 3:21; 4:18
4. MUSTAQBALKKA (oo loo adeegsaday macnaha guud ee weedha) , Rooma 5:9,10; 10:9; I Korintos3:15; Filiboy 1:28; I Tesaloniika 5:8-9; Cibraaniyada 1:14-; 9:28.

Sidaas daraaddeed, badbaadadu waxa ay ka unkanaysaa bilowga go'aansashada iimaanka waxayna ku soconaysaa in aad ku korto oo qaab nololeedkaaga iyo iimaankaaga oo wada socda lagaa arko (cf. I Yooxanaa 3:2)

**8:25 “Rajada”** mawduuca gaarka ah ka eeg meesha hoose.

#### **MAWDUUC GAAR AH: RAJADA**

Bawlos marar badan ayuu ereygan adeegsaday laakiin jumlado wada socda ayey ahaayeen. Sida badan waxay la xiriirtay in qofka iimaankiisu uusan ka shakiyin ama ka hallaabin ee uu kaamilmo. (tusaale ahaan. I Timoteyos 1:1). Tan waxaa sidoo kale lagu sharrixi karaa ammaan, nololsha weligeed ah, badbaadada ugu dambaysa, Imaanshada labaad, IWM. Kaamilnimadu waa wax dhab ah, laakiin waqti la adeegsano waa mustaqbal oo lama oga. Had iyo jeer waxay la soo socotay “iimaan iyo “jacayl” (cf. I korintos 13:13; I Tesaloniika1:3; II Tesaloniika 2:16). qaar ka mid kuwii Bawlos isticmaalay waxaa ka mid ah:

1. Imaashada labaad, Galatiya 5:5; Efesos 1:18; 4:4; Titos 2:13
2. Ciise waa rajadeenna I Timoteyos 1:1
3. In kan rumaysaka lahu isu dhiibo Ilaah, Kolosay 1:22-23; I tesaloniika2:19
4. Rajadu waxa ay dhex taallaa jannada, Kolosay 1: 15
5. Rumeel Injiilka, Kolosay 1:23; I Tesaloniika 2:19
6. Badbaadada ugu dambaynta ah, Kolosay 1:5; I Tesaloniika 4:13; 5:8

7. Ammaanta Ilaah, Rooma 5:2. II Korintos 3:12; Kolosay 1:27
8. Badbaadadii aan dadka yuhuuda ahayn ku badbaadeen Masiixa, Kolosay 1:27
9. Hubsashada badbaadada, I Tesaloniika 5:8
10. Nolosha weligeed ah, Titos 1:2; 3:7
11. Natijoooyinka qaan gaadhnimada Masiixiga, Rooma 5:2-5
12. Soo Furashadii uunka oo dhan, Rooma 8:20-22
13. Kaamilnimadii carrurnoqoshada, Rooma 8:23-25
14. Magacaabashada ama talo saarashada Ilaah, 15:13
15. Rabitaankii Bawlos u qabay rumaystayaasha, II Korintos 1:7
16. Axdigii Hore wuxuu hage tusaale u yahay rumaystayaasha Axdiga Cusub, Rooma 15:4

▣ **“Dulqaadasho”** Ereyga *hupomonē* waxaa lagu soo isticmaalay 5:3 iyo 15”4-5. Badbaadadu waxa ay ku dhex jirtaa hannaanka qaan gaarnimada oo maalin un ayey kaamilantaa. Dulqaadasho (cf. Muujintii 2:8,11,17,26; 3:5,12,21; 21:7) waa mid moo baahan yahay in la isku miisaamo Baabtiisaha iyadoo aad loo adkaynayo maxaa yeelay waa “hal badbaado” oo aad “weligaa ku badbaadsan tahay.” Runta ku jirta Kitaabka Qudduuska ah gudhiisa waxaa lagu qeexay kuwo si kasta isugu jahaysan xiisad ahaan iyo xilli ahaanba.

### **MAWDUUC GAAR AH: U BAAHNAANTA SII SOCOSHADA**

Way adag tahay in la qeexo madhab yada baybalka ee nolosha Masiixiyiinta maxaa yeelay waxaa loo muujiyey laho ahaan kuwo galbeedka ku xiran. Labadan hab waxaad moodaa in ay iska hor imanayaan laakiin weli waa isla baybalkii. Masiixiyiinta Galbeedku waxay go’aansadeen in ay doortaan midh qura oo ay ka istaagaan tii kale ee taa liddiga ku ahayd. Bal aan sharraxaad ka dhiibo.

1. Badbaadadu ma go’aanka koowaad ee Masiixa la aamminaa, mise waa nolol lagaa rabo in aad weligaa xernimo u diyaar ahaatid?
2. Badbaadadu ma doorashaa halkii ay noqol lahayd nimco Ilaaha Weyn nooga timid mise rumaysadka iyo tawbadkeenka aadanaha ayaa u ah jawaab lagu helo deeqda rabbaaniga ah?
3. Ma hal mar baa la helaa badbaadada, oo macquul ma aha in la lumiyo, mise waxaa jirta baahi loo qabo in si joogto ah loo wado.

Arrintan dulqaadashadu waa mid weligeed ka soo dhex jirtay taariikhdii kaniisadda. Dhibaatu waxa ay si toos ah uga bilaabanaysaa isku dhacyada qoraallada sida tooska ah isaga hor imanaya ee Axdiga Cusub:

1. Hubsashada qoraalka
  - a. Hadalladii Ciise (Yooxanaa 6:37; 10:28-29)
  - b. Hadalkii Bawlos, (Rooma 8:35-39’ Efesos 1:13; 2:5,8-9; Filiboy 1:62:13; II Tesaloniika 3:3 II Timoteyos 1:12; 4:18)
  - c. Hadalkii Butros (I Butros 1:4-5)
2. Qoraallada loo baahan yahay in ay sii socdaa
  - a. Hadalladii Ciise (Matayos 10:22; 13:1-9,24-30; 24:13; Markos 13:13; Yooxanaa 8:31; 15:4-10; Muujintii 2:7,17,20; 3:5,12,21)
  - b. Hadalladii Bawlos Rooma 11:22; I Korintos 13:5; Galatiya 1:6; 3:4; 5:4;6:9; Filiboy 2:12; 3:18-20; Kolosay 1:23)
  - c. Hadalladii qoraagii Cibraaniyada (2:1; 3:6,14; 4:14; 6:11)
  - d. Hadalladii Yooxanaa (I Yooxanaa 2:6; II Yooxanaa 9)
  - e. Hadalka Aabbaha Muujintii 21:7)

Badbaadada Baybalku waxa ay ka soo baxdaa jacaylka, naxariista, iyo nimcada Ilaah weyn ee qaadirka ah. Ma jiro aadane badbaadi kara haddii aanu Ruuxa Qudduuska ahu ku toosin (cf. Yooxanaa 6:44,65). Barashada Kitaabka ayaa marka hore timaadda oo arrinta ayey hagaajisaa, laakiin waxay ku xiran tahay hadba sida aadanuhu uga jawaabo iimaanka iyo yawbad keenka, bilow ahaan iyo joogto ahaan labadaba. Ilaah wuxuu aadanaha kula shaqeyaa xiriir axdi leh. Ahmiyado iyo masuuliyado ayuu leeyahay labadaba oo ku jira!

Aadanaha oo dhan waa loogu deeqay badbaadada. Dhimashadii Ciise waxa ay la macaamishay dhibaataadii dembigii aadanihii dhacay. Ilaah waddo ayuu siiyey wuxuuna kuwa isaga araggiisa ka abuurin oo dhan ka

doonayaa in ay gartaan jacaylkiisa iyo shaqadiisa weyn ee uu noogu qabtay Ciise Masiix. Haddaad jeclaan lahayd in aad aqrisid in badna oo maaddadan ku saabsan adigoon wax jaraa oo madhabtra Calvin ah ka sugayn , ka eeg

1. Dale Moody, *The Word of Truth*, Eerdmans, 1981 (PP 248-365)
2. Howard Marshall, *Kept by the power of God*, Bethay fellowship, 1969
3. Robert Shank, *Life in the Son*, Westcott, 1961

Kitaabka Qudduuska ahu labo dhibaato oo kala wuan ayuu meeshan ku sheegayaa: In aad hubsashada u qaadatid sidii sharci wax kuu fasaxaya waa in lagu noolaado mro la'aan iyo nolol danaystenimo (2) iyo adigoo ku dhiirri gelinaya kuwaa iyagu la hardamaya hawsha iyo dembiyadooda shaqsi ahaaneed. Dhibaatadu waxaa weeye in kooxaha qaldani ay qaaadanayaan farriin qaldan oo ay sidaas hab qaab climiyeed aan fadhin ku sameeyaan iyagoo qayb yar oo xadaysan oo Kitaabka ah. Masiixiyiinta qaar ayaa si aad u daran ugu baahan farriintan hubsashada, halka kuwo kale ay uga baahan yihiin digniino ad-adag! Kooxdee ayaad adigu ka tirsan tahay?

#### **NASB (UPDATED) TEXT: 8:26-27**

<sup>26</sup>Sidaasoo kalena Ruuxu wuxuu inaga caawimaa itaaldarradeenna, waayo, garan mayno wax inoo eg oo aynu ku tukanno, laakiin Ruuxa qudhiisu waa inoo duceeyaa isagoo ku taahaya taah aan sanqadhayn. <sup>27</sup>Oo kii qalbiyada baadhaa waa yaqaan fikirka Ruuxa, maxaa yeelay, wuxuu qoduusiinta ugu duceeyaa sida Ilaah doonayo.

**8:26 “Sidaasoo kalena”** Tani waxa ay xiriir la leedahay oo ay ku xiran tahay adeegga Ruuxa ee baryada ku salaysan “taahii iyo rajadii” lagu soo sheegay aayadaha 23-25.

▣ **“Ruuxu sidoo kale caawimaad ayuu buxiyaa”** falkan waa fal waqti la joogo ah, waana WAX CADDEEYE. Waa isku xirro labanlaaban oo aad ku arki doontid aayadda 28, turjumaadda ugu fiican ee la siiyeyna waa “Wax la qabasho” ereyadan waxaa laga helayaa oo qura halkan iyo Luukos 10:40. Ujeedka guud ee Ilaah ka leeyahay na waa kuwa rumaysadka leh. Ilaah wuxuu wiilkiisa u soo diray in uu u dhinto aadanaha aawadood, oo Isagu haddadan la joojo ayuu inoo doodaa (cf. I Yooxanaa2:1). Ruuxu wuxuu dadka lunsan u soo jiidaa xaggaa Masiixa oo Ciise Masiix ayuu dhexdooda ku ekaysiiyaa ama fadhiisiiyaa (cf. Yooxanaa 16:8-15). Arrintu si kastaba ha ahaatee, ereyga “caawimaad” oo loola jeedo “in wax lala qabto qof kale,” ayaa waxa ku lug yeelanaysaa in rumaystayaashu ay qayb ka leeyihiin caawimaadda Ruuxa (Ilaah u baryid).

▣ **“laakiin Ruuxa qudhiisu waa inoo duceeyaa isagoo ku taahaya taah aan sanqadhayn”** Kuwa rumaysadka lahu waxay ka taahaan dhicidoodii hore Ruuxuna wuxuu la taahaa in uu u duceeyo iyaga. Ruuxa oo uu ku jiro kii madax furtay ayaa u duceeya iyaga, iyo Ciise oo fadhiya gacanta midi gee Ilaah ayaa u duceeya iyaga, (cf. aaydaha 27,34; Cibraaniyada 9:24; I Yooxanaa 2:1). Ducadani waxay rumaystaha awood ku siisaa in uu tukado (cf. aayadda 15; Galatiya 4:6). Mawduucan aannu haatan ku jirno kama hadlayo hadiyadda ruuxiga ah eek u hadalka afafka kale, laakiin wuxuu ka hadlayaa Sida Ruuxu isagoo magacooda ku hadlaya uu kuwa rumaysadka leh Ilaah ugu baryo.

▣ **“U ducayn”** Eeg Mawduuca gaarka ah ee: Bawlos adeegsigiisii *Huper* oo ereyo isku xiran ahaa 1:30.

**8:27 “kii qalbiyada baadhaa w”** Kani waa masaal soo noqnoqonaya oo lagu isticmaalay Axdigii Hore (cf. I Samuu’eel 2:7; 16:7; I Boqorrada 8:39; I Taariikhda 28:9 II Taariikhda 6:30; Sabuurrada 7:9; 44:21; Maahmaahyadii 15:11; 20:27; 21:2; Yeemyaah 11:20; 17:9-10; 20:12; Luukos 16:15; Falimaha Rasuullada 1:24; 15:8). Ilaah run ahaantii wuu na garanayaa oo weliba wuu na jecel yahay (cf. Sabuurrada 139).

▣ **“wuxuu qoduusiinta ugu duceeyaa sida Ilaah doonayo”** hawsha Ruuxa waxaa si aada ah loogu qeexay Yooxanaa 16:2-15. Mid ka mid ah qeexiddaas waa u tukashada.

Ereyga “kawa la subkay” had iyo jeer waa jamac inta aan ka ahayn Filiboy 4:21 taasoo looga jeedo rumaystayaasha oo dhan. Masiixiyiintu waxa ay ka mid yihiin qoyska Ilaah, Jidhkii Masiixa, macbudka cusub ee

laga dhex dhisay shaqsi kasta oo rumayste ah. Tan ayaa ah midda la doonayo ee ah in la simo Cilmiga Barashada Ilaahoo loo sheego kuwa reer galbeedka (Maraykanka) si shaqsi shaqsi ah. Eeg mawduuca gaarka ah: Kuwa la subkay: 1:7.

### MAWDUUC GAAR AH: SHAQSI AHAANSHAHA RUUXA

Tani waa sharraxaada koobaad ee qof ahaanshaha “Ruuxa Qudduuska” waa Rooma (ogsoonow ma aha markii ugu horraysay ee reyg la adeegsaday, cf. 5:5; 9:1; 14:17; 15:13,16). Axdigii Hore gudhiisa “Ruuxa Ilaah” (i.e., *ruach*) wuxuu ahaa awoodii dhammaystirtay ujeedkii YHWH, laakiin ma jiraan wax soo jeedinno ah in uu shaqsi ahaa (i.e., Monothieism Axdigii Hore). Arrintu si kastaba ha ahaatee, Axdiga cusub dhexdiisa shaqsiyadda iyo shaqsi ahaansha Ruuxa Qudduuska ah oo buuxda ayaa ku diwaan gashan.

1. Waa lagu aflagaaddoona karaa (cf. Matayos 12:31; Markos 3:29)
2. Wax buu baraa (cf. Luukos 12:12; Yooxanaa 14:26)
3. Marqaati ayuu furaa (cf. Yooxanaa 15:26)
4. Qirashuu sameeyaa, waa hage (cf. Yooxanaa 16:7-15)
5. Waxaa loogu yeeraa “kuma” (i.e., *hos*) (cf. Efesos 1:14)
6. Waa laga caraysiin karaa (cf. Efesos 4:30)
7. Waa la qancin karaa (cf. I Tesaloniika 5:19)

Qoraallada saddexmidnimadu sidoo kale way ka hadlaan saddexda qof

1. Matayos 28:19
2. II Korintos 13:14
3. I Butros1:2

Ruuxu wuxuu la xiriisan yahay waxqabadyada aadanaha.

1. Falimaha Rasuullada 15:28
2. Rooma 8:26
3. I Korintos 12:11
4. Efesos 4:30
5. I Tesaloniika 5:15

Bilowga ugu horreeya ee Falimaha Rasuullada Dooraka Ruuxu so xooggan ayuu ugu sharraxan yahay. Maalintii ruuxu soo degay ma ahayn bilowgii shaqadii Ruuxa, laakiin cutub cusub. Ciise had iyo goor Ruuxa wuu watay. Baabtiiskiisii ama maqurintiisii ma ahayn bilowgii shaqadii Ruuxa, laakiin cutub cusub. Luukos wuxuu kaniisadda u diyaariyey boq cusub oo adeegga firfircooni u lahaa. Weli ujeedku waa Ciise Masiix, Ruuxu waa macnaha wax tarka leh oo ka turjumaya jacaylka Aabbaha, cafiska, iyo dib u soo celinta aadanihii isaga aragiisa laga abuuray ayaa yoolku yahay!

### NASB (UPDATED) TEXT: 8:28-30

<sup>28</sup>Oo waxaynu og nahay in wax waliba wanaag ugu wada shaqeyaan kuwa Ilaah jecel xataa kuwa qasdigiisa loogu yeedhay. <sup>29</sup>Waayo, kuwuu hore u yiqiin wuxuu haddana hore ugu doortay inay u ekaadaan suuradda Wiilkiisa, inuu isagu curad ku noqdo walaalo badan dhexdood. <sup>30</sup>Oo kuwuu hore u doortayna, haddana wuu u yeedhay, kuwuu u yeedhayna, haddana xaq buu ka dhigay, kuwuu xaq ka dhigayna, haddana wuu ammaanay.

**8:28 “wax waliba”** Qardaasyadii Giriigtii hore A iyo B, waxa ay leeyihiin “Ilaah wax walba ayuu sababaa.” Qardaasta Papyri P46 waxa uu leedahay “Ilaah” oo wax sameeyaha “Wada shaqaynaya” Xitaa naxwe ahaan waa macquul in ficil sameeyaha aayadda uu yahay “Ruuxa” (cf. aayadda 27 iyo NEB iyo REB). Sidoo kale aayaddani waxa ay la rixiirtaa “silicyada” of 17-18; iyo “taahyada” ku jira aayadda 23. Wax ka nasiib badan kuwa nasiibka leh ma jiraan oo xagga fursadda iyo xiriirka.

☐ **“wanaag ugu wada shaqeyaan”** Kani waa fial jooga oo waxa caddeeya ah sidoo kale waa ereyo isku xiran (cf. 26). Aisaas daraaeed, marka la isku soo kobo ama la soo kobo “wax kasta waxa ay ku imanayaan in midba midka kale ka wada shaqeyaan wanaagga.” Tani waa wax ku adag adduunyadan uu sharka iyo xumaantu ka buuxdo. L(Labo bug oo caawimaad u leh maaddadan waawanaagga Ilaah ee Wennah Whithall Smith,

*Siyaasadda Masiixiga ee nolosha farxadda leh*). “Wanaagga” halkan waxaa lagu qeexay aayadda 29 aad oo waxaa loogu qeexay “Xaqiijinta in laga tusaale qaato wiilkiisa.” U ekaanta Ciise Masiix, ma aha barbarwaaqo, gaajo ama caafimaad, waa qorshaha aan la soo koobi Karin ee Ilaah u hayo kan rumaysadlka leh.

▣ **“kuwa Ilaah jecel xataa kuwa qasdigiisa loogu yeedhay”** kuwani waa labo qaybood oo fal jooga ah oo isla socda. Waxaa jira labo xaaladood oo qofka rumaystaha u oggoolaanaysa in uu si wato noloshiisa isagoo aan ka ama ku mashquulayn wax duruuf ah si kasta oo ay u dhacaan, isagoo sid furan uga jawaab celinaya (cf. aayadda). Xusuusnow labada shay ee axdiga ah ee aadanah xor ka dhigaya “jacayl” iyo “ugu yeeridda” weynaanta Ilaah.

**8: 29-30** ereyada fal sameeyaha eek u jira aayadahan. Waxa ay qaabaynayaan silsilad isku xidhan oo ah waqtigii hore iyo waqti kasta waxa uu yahay. Ilaah mar kasta wuu na garanayaa, oo weli wuu noo joogaa oo wuxuu doonayaa in uu mar kasta nala joogo. Tani waa wada shaqan ma aha shaqo hal dheinac ah. Falimaha ammaantu weli mustaqbalka ayey jirtaa, laakiin xaaladan dhexdeeda waxaa loogu qeexay in horraanba la dhammaystiray dhacdadaas.

**8:29 “kuwuu hore u yiqiin”**Bawlos labo goor ayuu ereygan isticmaalayaa halkan iyo 11:2 Wuxuu ku muujinayaa Axdigii Ilaah la dhigtay reer Bani Israa’iil waa hore. Xusuusnow in ereyga “Yaqaan” uu af Cibraani yahay oo la xiriir sida qofku uu xiriir qaas ah ula leeyahay, Ma aha xaqiiqo wax looga sheegayo arrin qof. (cf. Bilowgii 4:1; Yeremyaah1:5). Halkan waxaa ku jirta silsilad xiriirsan oo dhacdo ku saabsan (cf. aayadaha 29-30). Ereygani wuxuu la xiriiraa qiyaas. Arrintu si kastaba ha ahaatee , waa in la caddeeyaa in Ilaah aqoontiisa uu wax walba u leedahay ayan ahayn ama ku salaysnayn doorasho ah haddii ay sidaa ahaan lahayd, dabadeed doorashadu waxa ay ku salaysnaan lahayd dhiciddii aadanaha iyo sidii ay iygu uga jawaabi lahaayeen mustaqbalkooda, taasoo ku aaddanaan shaqo ay aadanuhu qabtaan. Ereygan waxa sidoo kale laga heli karaa Falimaha Rasuullada 26:5; I Butros 1:2,20 iyo II Butros3:17.

▣ **“hore ugu doortay”** Ereyada “Horay u yiqiin” (*Prognōskō*) ama hore u (*Proorizo*) doortay, waxa dhammaantood ku xidhan meeleeeyaha ah “ka hore” sidaas daraaddeed waxaa loo turjumayaa “mar hore yiqiin” Qaybaha tooska ah eek u jira Axdiga cusub ee sheegaya middan waa Rooma 8:28-30; Efesos 1:3-14 iyo Rooma 9. Aayadan dhaammntood waxay runtii tilmaamayaan in Ilaah yahay qaadir wax kasta awooda. Isaga ayawax kasta shaqadooda haya, xitaa taariiqda aadanaha. Waxaa jirta hawl madax furay oo ilaa waqti ba waqti ay shaqadoodu soo socotay. Hase yeeshee, haddana qorshahani ma aha mid la iska dooran karo. O kumja xidhna oo qura Ilaah weynaantiisa iyo in wax walba uu soo og yahay, laakiin sidoo kale dabecaddiisa aan is beddelayn, jacaylkiisa, naxariistiisa iyo nimcadiisa aan wax mudan la rag.

Reer Galbeed ahaan (ama Maraykan ahaan) waa in aan iska ilaalinaa shaqsiyadeenna ama jidbada annagoo eeganayna runtun cajiibka ah. Oo waa in aan xitaa iska ilaalinaa xurfihii tacliineed uu ee u dhexeeyay Augustine oo ka soo hor jeeda Pelegius ana Calvinism-ka oo ka soo hor jeeda Arminiansm-ka

Hore u doorashadu ma aha mad’hab in ay xadaynayso ama xakamanayso Ilaah jacaylkiisa, nimcadiisa, ama nimcadiisa ama ay qofka Injiilka la saarayso. Waxaa macnaheedu yahay in rumaystaha ku xoojinayso sidii uu isaha ilaalin lahaa aragtida jiidashada leh ee adduunka. Ilaah aadanaha oo dhan ayuu Ilaahood yahay (cf. 3:16; I Timoteyos 2:4; II Butros 3:9). Ilaah wax walba maammulkooda isaga ayaa haya. Bal maxaa naga goyn kara ama naga saari kara isaga (cf. Rooma 8: 31-39? Horay u doorashadu waxay habaysaa labo qaybood oo nolosha ah. Ilaah isaga ayaa habeeya taariikhda dadka waqti kasta oo ay tahay. Aragtideenna iyo waxa aan qaban karno intuba way xadaysan yihiin. Ma jiro wax iska hor imaad ah oo ka dhexeeya Ilaah qaaddirmadiisa iyo doorshada xorta ah ee ay aadanuhu leeyihiin. Waa wax kala xadaysan. Mad;habyada Kitaabka Qudduuska ah laga soo ururiyey waa kuwo lagu qaabab kala duwan oo loo baahnaa. Waxay badanaa u muuqdaan wax aan caqli gal ahayn. Mad’habaha baybalku waa kuwo si ahaan u muuqada in ay iska soo hor jeedaan. Waa in aynaan ka bixin meesha xiisadda meesha ku jirta annagoo annagoo qayb yar ka qaadanayna. Waa in aynaan kala soocin ama aynaan u kala qaadin sida ay isugu xiran yihiin ama ay isku haystaan.

Sidoo kale waa muhiim in yoolka doorashadu maaha jannada oo qura marka aannu dhimanno, laakiin hadda waxaan nahay ekaanta Masiixa (cf. Efesos 1:4; 2:10)! Waxaa naloo doortay in aan noqonno “kuwo qudduus ah oo eed la’aan ah.” Ilaah wuxuu noo dooranayaa si kuwa kale ay u arkaan is beddelka iyo jawaabta imaankeena aan u qabno Ciise Masiix. Doorashada horay naloo doortay ma ahmiyad shaqsi ahaaneed laakiin waa masuuliyad ballameed!

▣ **“inay u ekaadaan suuradda Wiilkiisa”** xaqiiqo weyn ayaa tuducdan ku jirta. Kan ayaana ah yoolka Masiixiyadda (cf. Galatiya 4:19; Efesos 4:13). Qudduusnimadu waa Ilaah doonistiisa uu ugu talo galay rumaystayaashiisa. Doorashada Ilaah waa in aan yeelanno ekaanta Masiixa (cf. Efesos 1:14), ma aha taagnaan gaar ah. Aragtida Ilaah ee aadanaha la siiyey waa abuurka. (cf. Bilowgii 1:26; 5:1,3; 9:6) waa in dib loo soo celiyo (cf. Kolosay 3:10). Eeg tasmada 8:21 iyo Mawduuca Gaarka ah: Kuwa loogu yeeray 1:6.

▣ **“inuu isagu curad ku noqdo walaalo badan dhexdood”** Sida ku jirta Sabuurrada 89:27 ‘curadka’ waa mid cinwaan ama magic u ah Masiixa. Axdigii Hore wiilka curadka ahu wuxuu lahas qiimo iyo mudnaan gaar ah. Ereygaa waxaa lagu isticmaalay Kolosay 1:15 si ay u muujiyaan Ciise mudnaanta uu abuurta ka dhex leeyahay, sida ku jirta Kolosay 1:18 iyo Muunjintii 1:5 waxay ahayd in uu ku muujiyo sare kiciddiisii. Qoraalkan sida ku jirta kuwa rumaysadka leh waxay ku dhex jiraan isaga, waxaana lagu celiyey isaga weynaantiisa!

Ereygan ka am hadlayo dhalashada labaad ee Ciise, laakiin isagu maaddaama uu yahay madaxa fac cusub (cf. 5:12-21), mar koowaan waa taxane inoo socda, oo saldhig u ah iimaankeenna, waana durdurka ay barakada Aabbuhu ugu timaaddo qoyska rumaysadka leh! Mawduuc gaar ah ka eeg hoos.

### **MAWDUUC GAAR: CURADKA**

Ereygan “curadka” (*Prōtotokos*) waxaa Kitaabka Qudduuska ah dhexdiisa qaabab cayiman.

1. Axdigii Hore, waxaa saldhig u ah imaanshaha wiilka ugu horreeya ee qoyska (cf. Sabuurrada 89:27; Luukos 2:7; Rooma 8:29; Cibraaniyada 11:28)
2. Istickmaalkeeda lagu isticmaalay Kolosay 1:15 waa uu Ciise Masiix uga hadlayaa in uu yahay bilowgii abuurta taasoo laga arki karo Axdigii Hore. Waa Maahmaahyadii 8:22-31, ama in uu yahay wakiilka Ilaah ee abuurka (cf. Yooxanaa 1:3; I Korintos 8:6; Kolosay 1:15-16; Cibraaniyada 1:2)
3. Istickmaalkeeda lagu isticmaalay Kolosay 1:18; 1 Korintos 15:20. (halkan) Waxa uu ku qeexaysa in uu yahay Ciise curakii kuwii dhintay
4. Waa magacii Axdigii Hore ee Masiixa (cf. Sabuurrada 89:27; Cibraaniyada 1:6; 12:23). Waxa uu ahaa magic isku xiraya dhowr arrimood oo ku saabsan sida Ciise u yahay gun dhigga uunka. Arrintan aan hadda ka hadlaynno gudaheeda lambarka 3# iyo kan 4# ayaa ugu wanaagsan.

**8:30 “ammaanay”** Magacyada inta badan Ilaah lagu tilmaamay Axdigii Hore dhexdiisa waxaa u badan “Ammaan.” Ereygu wuxuu ka yimid ereyada ganacsiga loo adeegsado kaasoo macnihiisu yahay “Culays” marka ma qeexana, waxa uu u qiimo badan yahay sida dahabka oo kale. Eeg mawduuca qaaska ah ee 3:23. Marka la eego Cilimiga barashada Ilaah, Ilaah waxa uu madax furanayaa aadanihii dhacay, isagoo u soo marinaya dhowr dhowr tallaabo oo ku jirta 29-30. Tallaabada ugu dambaysa waa “ammaanta.” Tani waxa ay noqon doontaa badbaadada dhammaysta daran ee kuwa rumaysadka leh. Waxa ay dhici doontaa maalinta ugu dambaysa marka jirkooda ruuxiga ah la siiyo. ( I Korintos 15:50-58) Ilaah ayey si toos ah ugu xirmayaan iyaguna way isku xirmayaan (I Tesaloniika 4:13-18; I Yooxanaa 3:2).

### **NASB (UPDATED) TEXT: 8:31-39**

<sup>31</sup>Haddaba maxaan waxyaalahan ka nidhaahnaa? Haddii Ilaah inala gees yahay, yaa inaga gees ah?  
<sup>32</sup>Kii aan xataa Wiilkiisa lexejeclaysan, laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey, sidee buusan wax walbana inoola siin doonin isaga? <sup>33</sup>Yaa ashtakayn doona kuwa Ilaah doortay? Waa Ilaah kan wax xaq ka dhigaa. <sup>34</sup>Waa ayo kan wax xukumi doona? Waa Ciise Masiix kii dhintay, oo haddana kuwii dhintay ka sara kacay, oo Ilaah midigtiisa jooga, oo haddana inoo duceeya innaga. <sup>35</sup>Yaa jacaylka Masiixa inaga sooci doona? Ma dhibaato, mise cidhiidhi, mise silic, mise baahi, mise arrad, mise khatar, mise seef?  
<sup>36</sup>Sida qoran, Adiga daraaddaa ayaa lanoo laayaa maalinta oo dhan, Waxaa lanoo tiriyey sida ido la qalayo. <sup>37</sup>Maya, waxyaalahan oo dhan dhexdooda aad baynu ugu guulaysannaa kii ina jeclaa xaggiisa.  
<sup>38</sup>Waayo, waxaan hubaa inaan dhimashada, ama nolosha, ama malaa'igaha, ama kuwa madaxda ah, ama waxyaalaha haatan jooga, ama waxyaalaha iman doona, ama kuwa xoogga leh, <sup>39</sup>ama kor, ama hoos, ama uun kaleeto inaga sooci karin jacaylka Ilaah oo ku jira Rabbigeenna Ciise Masiix.



**8:31 “Haddaba maxaan waxyaalahan ka nidhaahnaa”** Tani waxa ay ahayd jumlad si aad ah gaar u ah oo u Bawlos ku soo bandhigao arrintan (cf. 3:5; 4:1; 6:1; 7:7; 9:14,30). Su’aashani waxa ay ku xiran tahay runtii horay loo bixiyey. Waa wax aan caqli gal ahayn marka la eegi sida ay waqti hore wax uga sheegayso. Waxay u gudbi kartaa 3:21-31 ama 8:1 ama 8:18. Sababtuna waa adeegsida “Haddaba” ee 8:1 iyo arrinta ku jirta 8:18 dabcan waa kuwo la malayn karo.

▣ **“Haddii”** Tani waa jumlad ka hadlaysa xaalad shuruurd ku xiran, taasoo laga arkayo qoraaga filashadiisu. Waxa la yaabka leh ee meesha ku jira ayaa sida aannu dembiga ula hardanno, Ilaahna noola jiro!

▣ **“yaa inaga gees ah”** Magac u yaalka “kuma” waxa ay ku soo noqnoqonaysaa aayadaha 33,34 iyo 35. Waxa ay tilmaamaysaa shaydaanka (kaasoo aan loo sheegin magic ahaan illaa 16:20). Qoraalkan laga bilaabo 31-39, Waxaa soo adeegsan jiray nebiyadii axdigii Hore marka xukun jiro (cf. Miikaah 1&6). YHWH wuxuu dadkiisa u qaadi jiray maxkamadda marka ay macsi sameeyaa. Tani waxa ay ku qoran Ishacyaah 50:8-9.

Ogsoonow ereyada sharciga a: “ka soo hor jeeda” aayadda 31; “dacwayn” aayadda 33; “Xaq ka dhigid” 33; “Cambaarayn” aayadda 34; iyo “U ducayn” aayadda 24. Ilaah ayaa ah xaakinka. Ciise Masiix waa Qareenka difaaca. Shaydaanku waa kan wax duufsanaya (laakiin waa aammusan yahay.) Malaa’iguhu waxa ay maxkamadda gudaheeda u soo buuxin doonaan in ay noqdaan u kuur galayaal (cf. I Korintos 4:9; Efesos 2:7; 3:10).

▣ **“laakiinse innaga dhammaanteen u bixiyey”** Ilaaha Aabbaha ahu wuxuu aadanihii dhacay siiyey wixiisii ugu wanaagsanaa. Marna kama tegayo kuwa rumaysadka leh hoosna uma dhigayo (cf. Yooxanaa 3:16; Rooma 5:8). Bal eeg sida ay ujeeddadan ugu tahay wax muhiin ah iyo Ciise ba Axdigii Hore dhexdiis! Hadiyaddan ugu dambaysay waxa ay dib ugu noqonaysaa hadalkii Ilaah ee Ibraahim eek u jirta Bolowgii 22:12, 16. Rabbiyiintu waxay qormadan Axdigii Hore ka midka ah in ay ku taageeraan mad’abta in faraca Ibraahim uu noqonayo kafaaragudka dembiga.

▣ **“sidee buusan wax walbana inoola siin doonin isaga”** ereyga “dhammaan” eek u jira jumlada waa calaamad. Ciise wuxuu u dhintay dembiyada adduunka (cf. Luukos 2:10-11; 4:42; 11:51; I Timoteyos 4:10; I Yooxanaa 2:2; 4:14). Tani waxa ay ku tusinaysaa farqiga u dhexeeya aadan iyo Ciise, 5:12-21. Dhimashadii Ciise waxa ay xallisay dhibaatadii dembiga. Hadda waxa ay tahay oo qura “rumee ooh el” dhibaato.

▣ **“Wax kasya six or ah nagu siinaya”** Ereygan wuxuu ka yimid luuqad Giriig ah oo tilaamaya xidid. “wax kasta” waxaa laga arki karaan aayadda 17. Eeg ogaysiiska ku yaal 3:24.

**8:33-34 “Xukumid. . . Xaq ka dhigid. . . eedayn. . . U ducayn”** Kuwani waa ereyo xagga sharciga ah. Aayadaha 31-39 waa xukunka maxkamadda jannada. Tani waxay ku qeexan tahay Ishacyaah 50:8-9.

**8:33 “Ilaah doorashadiisa”** Ciise Masiix waa ninka Ilaah u doortay aadanaha oo dhan (Barth). Qoraallada ugu waaweyn ee noo sheegaya runta ku jirta Axdiga cusub waa Efesos 1:3-4 iyo Rooma 9:14-26. Aabbuhu wuxuu doortay Ciise si u aadanaha oo dan u doorto. Ciise waa “haada” Ilaah halka dadku ay ka yihiim “maya!”

**MAWDUUC GAAR AH: DOORASHO/ HORAY LOO DOORTAY IYO BAAHIDA ISLA SIMIDDA BARASHADA WAX KU SAABSAN JIRITAANKA ILAAH.**

Doorashadu waa mad’han aad cajiib u ah. Arrintu si kastaba ha ahaatee, laakiin ma aha wax la iska samaysan karo ee waa u yeeris in aad noqoto durdur, qalab oo aad kuwa kale madax furasho u noqotid! Axdigii hore ereyga waxaa loo isticmaali jiray marka ugu horraysa adeeg, Axdiga Cusubna waxaa loo isticmaalay marka ugu horraysa badbaadada. Kitaabka Qudduuska ah marna wax is burinaya kam uusam dhigin qorshaha Ilaah iyo doorashada xorta ah ee aadanaha, laakiin wuu xoojiyaa labadaba. Tusaale wanaagsan oo aan qaadan karno oo ku saabsan xiisadda baybalka waxaa ka helaynaa Rooma 9 ee ah Doorashada Ilaaha qaaddir ah iyo Rooma 10 oo ah jawaabta lagama maarmaanka ah ee laga doonayo aadanaha (cf. 10:11,13).

Furaha xiisaddan barashada Ereyga Ilaah waxaa laga heli karaa Efesos 1:4 Ciise ayaa ah ninka Ilaah u doortay in kuwa kale oo dhan isaga ay doorasho ku helaan. (Karl Barth). Ciise waa “Haada” Ilaah ee baahida aadanihii dhacay (Karl Barth) Efesos 1:4 waxa ay sidoo kale caawinaysaayaga oo sheegaya in yoolka iyo doorashadii hore aysan ahayn in la galo jannada, laakiin qudduusnimo (U ekaanta Masiixa). Had iyo jeer waxaa na soo jiita faa’iidooyinka ku jira Injiilka masuuliyadha se waannu iska dhego tirnaa! Uyeerista Ilaah (Doorashada) waxay leedahay waqti si la mid ah si nolosha weligeed ah oo kale!

Mad’habuhu waxa ay ku xiriir lala yeesho rumaysadyada kale, ma aha mid keliya, run aan isku xirnayn. Isla socoshada wanaagsan waxa ay tahay in aayadaha laga dhigo in ay yihiin sidii hal xiddig oo kale. Ilaah wuxuu runta u soo diraa bariga, ma aha galbeedka ma aha nooc. Waa in aynaan kala qaadin maxaa yeelay waxay siugu xiran yihiin hab isu sar go’an:

1. Doorashadii hore oo ka soo hor jeedda doorashada xorta ah ee
2. Ammaanka rumaystayaasha oo ka soo hor jeedda u baahnaanta dib u xallinta.
3. Dembigii hore oo ka soo hor jeeda xal u helista dembiga.
4. Dembi la’aanta (kaamilnaanta oo ka soo hor jeedda dembi yaraanta.
5. Bilowga qudduus ka dhigidda, iyo qudduus noqoshada oo ka soo hor jeedda qudduus noqosho horumar leh.
6. Xorriyadda Masiixiga oo ay ka soo hor jeeddo masuuliyadda Masiixiga
7. God’s Transcendence vs. God’s Immanence
8. Ilaah oo aan sinnaba loo ogaan Karin qorshihiiisa dambe oo ka soo hor jeeda sida Ilaah looga ogaan karo qorniinka dhexdiisa
9. Boqortooyada Ilaah oo joogta iyo liddigeeda oo ah kaamilnimada mustaqbalka
10. Tawbadkeenka oo ah hadiyad Ilaah oo ay ka soo hor jeeddo tawbadkeen lagama maarmaan u ah jawaab axdiyeed
11. Ciise oo ah mid Ilaah oo ay liddi ku tahay Ciisde oo Bani aadan ah
12. Ciise wuxuu la mid yahay aabbaha oo ay ka soo hor jeeddo Ciise oo adeege u ah Aabbaha

Barashada tiyooloji ahaaneed ee “axdiga” waxa ay midaynaysaa sarraynta Ilaah (in mar kasta uu leeyahay go’aanka uu doonayo in uu wax ku habeeyo) oo leh bilow la qorsheeyay iyo iyo tawbadkeen cosda, iyo jawaab rumaysad oo ka timaaddo aadanaha. Ka taxaddar in aad hal qayb ka qaadatid qoraalka wada socda oo aad qaybta kalena ka tagtid! Ka taxaddar in aad qaadatid go’aan adiga ku gaar ah oo aad ku tafiiranaysid mad’habtaaad leedahay ama hab kale oo tiyoojagi!

**8:34** Aayaddanu waxa ay sharraxaad si taxane ah uga bixinaysaa sababihii Ciise adeeggiisa (1) Wuu dhintay, (2) waa la sare kiciyey, (3) wuxuu joogaa gacanta midig ee Ilaah iyo (4) Rumaystayaasha ayuu u duceeyaa.

Dhamashadii Ciise waxa ay bixisay ganaaxii dembigeenna (cf. Ishacyaah 53; Markos 10:45; II Korintos 5:21). Sare kiciddii Ciise waxa ay muujinaysaa In aabbuhu uu raalli ka ahaa shaqadii wiilka oo uu rajo ku bixinayo wejiga silca iyo dhimashada. Ciise ammaanta uu ku leeyahay gacanta midig ee Aabbaha iyo ducaa uu inoo soo ducaynayo ayaa waxa ay kuwa rumaysadka leh siinaysaa in ay u dagaallamaan dagaalka weyn ee iimaanka.

▣ **“gacanta midig ee Ilaah”** dadku waxa ay ku wareeraanqaabka adeegsiga ereyada. Ilaah ma laha jidh muuqda. Maxaa yeelay Ilaah “Ruux” ereygan waxa uu ka hadlayaa meesha awoodda, xukunka iyo kala dambaynta. Bawlos inta badan ma isticmaalay (cf. Efesos 1:20; Kolosay 3;1). Waxa laga yaabaa in Bawlos uu middan ka soo xigtay Masiixiyiin hore marka laeego aayadda 34 (Filiboy2:6ff.; Timoteyos 3:16).

▣ **“ududcayn”** Ciise Maxiis adeeggiisu waa socdaa, Ciise Wuu inoo duceeyaa (cf. Cibraaniyada 4:4-16; 7:25) Ruuxuna sidoo kale ayuu inoo sameeyaa (cf. aayadaha 26-27). Tani waxa ay ka imanaysaa weedha *Perecleto* oo laa adeegsaday Ruuxa eek u jirta Yooxanaa 14:16 ito tan Wiilka oo ee IYooxanaa 2:1. Tani waa mid ku aaddan oo sida adeeguhu u sildco (cf. Ishacyaah 53: 12).

**8:35 “Jacayka Masiixa”** JUmladdani waxa ay noqon kartaa ficil sameeye iyo lagu sameeye. Jacaylku uu rumaystuhu u qabo Masiixa iyo tan lanaad oo ah jacaylka uu rumaystuhu u qabo Masiixa. Midda koobaad ayaa aad ugu haboon middan. (iyo II Korintos 5:14) maxaa yeelay jacaylka rumaystuhu u qabo Masiixa wuu yimaadaa wuuna baxaa, laakiin jacaylka uu Masiixu noo qabo waa mid hubaal oo aan liiqliiqan.

Waa jira qardaas Giriig ah oo aad uga faalootta tan iyada ah. Qoraalladii hore ee Giriigtii WAXa ay leeyihiin “jacaylka Ilaah” (cf. MS 8). Mid qoraalladii hoe ka mid ayaa sheegaya middam sidoo kale oo leh “Jacaylka Ilaah eek u jira Masiixa” (cf. MS B(. USB4 kuwa ka munaashaqooda waxa ay sheegayaa, “jacaylka masiixa” iyo “A” iyagoo xaqqiqaaynaysa waxaay ka muuqataa MSS C, D, F, G, oo ah qaybihii hore ee qoraallada iyo VULGATE IYO peshitta.

☐ **“Ma dhibaato, mise cidhiidhi, mise silic”** Masiixiyiintu dhibaato ayey ku muan doonaan adduunyadan, laakiin ma aha dhibaatooyinka ma awoodda shaydaanka labaduba kuwo inaga saari kara ama naga goyn kara Ilaah. Eeg Mawduuca gaarka ah: Dhibaatooyin 5:3.

**8:36** tan waxaa laga soo xigtay Sabuurrada 44:22. Sabuurkan gudihiiisa Ilaah wuxuu ku sheegay in kuwii la dhaawacay uu nasiino siin doono.

**8:37**

**NASB** “waxyaalahan oo dhan dhexdooda aad baynu ugu guulaysannaa kii ina jeclaa xaggiisa.”

**NKJV** “Weliba waxyaalahan oo dhan dhexdooda waxaannu ugu guulaysannaa is ka badan kuwa guulaysta”

**VRSV** “May, waxyaalahan oo dhan dhexdooda waxaannu ugu guulaysannaa is ka badan kuwa guulaysta”

**TEV** “May, waxaan waxyaalahan oo dhan guul kaamil ah ugu haysannaa isaga”

**JB** “Kuwani waa waddooyinkii aan u soo marnay guusha.”

Ereyga “*Ka guulaysi*” Bawlos wuxuu u isticmaalay in uu ku muujiyo awooda aan wax uga guulaysan karno. Kuwa rumaysadka leh waxa ay leeyihiin oo ah in ay wax kasta uga guulaysan karaan, taasina waxa ay ugu jirtaa Cisse Masiix. (cf. I Yooxanaa 2:13-14; 4:4; 5:5). Bawlos oo ereyga uu adeegsanayo waxaa la yiraa *Huper lagu daray nikao*. Haddaba huper waxaad waxa aad ku arki kartaa 1:30.

☐ **“kii ina jeclaa xaggiisa”** Ereygani wuxuu u noqonayaa Ababbaha ama Wiilka.

**8:38** “waxaan hubaa” Kani waa fal tegay oo maldahan oo wax caddaynaya, oo macnihiisu yahay “waxaan ahay mid u jiray una jiraya in la aqoonsado.”

☐ **“waxaan hubaa”** Kuwa aaminsan rabbaaniga waxay aad uga masayraan jacaylka iyo ku talo galka uu Ilaah u hayo aadanaha, oo sidaas daraqaddeed, donayao in uu iyaga dib u marti geliyo. Macallimiinta beenta ah e Gnostic-gga waxay ku fasireen in badbabaadada lagu heli karo oo qura lambar sir ah iyadoo loo soo marayo malaa’igo qudduus ah oo hawaadaa sare heehaaba. (cf. Kolosay iyo Efesos).

George Eldon Ladd soo koobid wanaagsan ayuu ereyadan ku sameeyay oo ah kuwa uu Bawlos ku adeegsaday Kitaabkiisa uu qoray, George wuxuu tan ku soo koobay kitaabka magaciisa la yiraahdo, *Barashada ereyga Ilaah ee Axdiga Cusub dhexdiisa*.

Bawlos marna magacan uma soo qaadan maqlaa’ig fiican ama mid xun toona, ama shayddaan ama jinniyo, waxa uu adeegsanayaa ereyo uu ku muujinayo herka darajada ruuxyada. Ereybixintu waa sidan soo socota:

‘Sharci’ (*archai*), I Korintos 15:24; efesos 1:21; Kolosay 2:10

‘Sharciyo’ *archai* RSV, Masuuliyad siin, Efesos 3:10; 6:12; Kolosay 1:16; 2:15 Rooma 8:38

‘Xukun’ {*exousia*} I Korintos 15:24; Efesos 1:21 Kolosay 2:10

‘Xukunnada’ {*exousiai*} RSV maamullada, Efesos 3:10; 6:12; Kolosay 1:16. 2:15

‘Awood’ {*dynamis*} I Korintos 15:24; Efesos 1:21

‘Awoodo’ {*dynameis*} Rooma 8:38

‘Taaj’ {*thronoi*} Kolosay 1:16

‘Rabbinimo’ {*kyriotes*} RSV, “demonion” Efesos 1:21

‘Rabbinimooyinka’ {*kyriotetes*}

‘Sharciyada adduunka ee mugdigan’ Efesos 6:12

‘Ruuxda share e samooyinka’ Efesos 6:12

‘Maammullida mugdiga Kolosay’ 1:13

‘Magac kasta oo la magacaabay’ Efesos 1:21

‘Jiritaannada jannada, dhulka, iyo kuwa kale, filiboy 2:10” (Bogga 401).

Ma jito war bixin toos ah oo uu Kitaabku sheegayo in ay ka dhexeeyaan xiriir malaa'igtii jannada laga soo eryay ee yy Axdigii iyo jiniyada uu Axdiga Cusubi sheegay. Kuwo badan waxa ay sheegayaan in ay isku mid yihiin. Sida qoraalla Yuhuuddu ay sheegayaan waxa ay oranayaanoo sheegayaan in ay yihiin ruuxyo ama Nephilim ewaana sida ku qoran Bilowgii 6, kuwaasoo ah malaa'igta badhkeed. Jidhkoodii waxaa lagu burburiyey daadkii. Sidaas daraaddeed waxay doondoonaan in ay noqdaan kuwa jidhka leh. Tani waa malo ama fikir. Kitaabku kam wada jawaabo dhammaan su'aalaha aannu u baahan nahay in aan jawaab ka helno ee ku saabsan asalka, ujeedkeeduna waa in aadanuhu ku tawbad keenaan ee ma ah in ay wax ku raadiyaan maankooda!

▣ **“waxyaalaha... xoogga leh”** middani waxay tix raacaysaa (1) malaa'igta sharka leh amaba awoodaha jinka ee wakhtigan (Efesos 2:2; 6:12; 1 Korintos 15:24; Kolosay 1:16), amaba (2) waxa suurto gala inuu noqon karo xad nidaamyada leexday ee aadanuha ( diinta, dawuladda, tacliinta, caafimaadka, iwm.) waxyaalahaasina aadanaha leexday waxay u ogolaanayaan inay Ilaah ka madax bannaanaadaan ( Hendrickus Berkhoff kitaabkiisa *Principalities and Powers*) Eeg 13:1.

#### **MAWDUUC GAAR AH: ARCHĒ**

Ereyga xukun waxa uu la ‘domain’ waxa uu ka yimid *archē*, oo macnihiisu yahay “Bilowgii ama ‘asalkii’.

1. Bilowgii sidii wax loo abuuray (cf. Yoxanaa 1:1, I Yooxanaa 1:1)
2. Bilowgii Injiilka (Markos 1:1; Filiboy 4:15)
3. Marqaati furkii ugu horreeyay (Lukos 1:2)
4. Bilowga calaamadaha (mucjiisooyinka, xf. Yooxanaa 2:11).
5. Bilowgii sharciyada (cf. Cibraaniyada 5:12)
6. Bilowgii hubshaha/kalsoonanta (Cibraaniyada 3:14)

Waxay noqotay in loo adeegsado “xukun” ama “maammul”

1. Saraakiisha aadanaha ee wax maammula
  - a. Luukos 12:11
  - b. Luukos 20:20
  - c. Rooma 13:3; Tiitos 3:1
2. Maammula malaa'igaha
  - a. Rooma 8:38
  - b. I Korintos 15:24
  - c. Efesos 1:21; 3:10; 6:10
  - d. Kolosay 1:16; 2:10,15

Macallimiinta beenta ahu way xaqiraan maammullada oo dhan, miida dhulka iyo midda samada labadaba. Iyagu waa kuwo iskood si gaar u qaayta in ay awooddooda u leeyihiin. Iyaga naftooda ayey dhigaan booska koowaad laakiin laakiin meesha koowaad ma geliyaan, Ilaah, ama malaa'igaha, ama maammulka dawliga ah, ama hoggaamiyeyaasha diinta.

**8:39 “ama kor, ama hoos,”** ereyadan waxaa loo isticmaalay apogee iyp perigee ee xiddigaha, kuwaasoo cirbixiyeennadii jaahiligu ay rumaysnaayeen in ay yihiin ilaahyada xukuma aadahanaha noloshooda. Markii dambana waxa ay noqotay in loo adeegsado heerka u dhexeeya malaa'igaha iyo ilaaha weyn iyo ilaaha yare ee eega dhacdooyinka dembiyaqda.

▣ **“ama uun kaleeto inaga sooci karin”** Tan marka aan soo koobno macnaheedu wuxuu noqonayaa “abuur nooc kale ah”. Sida qoraalkani xambaarsan yahay, tani waa taxraac dheeraad ah oo ku saabsan awoodaha malaa'igaha. Haddii la eego ereyga meeleyaha loo yaqaan xagga naxwaha waa *heteros*. Oo macnaheedu nooc kale, iyo *allos* oo macnaheedu yahay nooc kale oo isla sidaas ah oo kale ah. Laakiin hadii la isla eego kuwani waxa ay weli ma tusayaan xoogaa qiyaaso ah oo ku saabsan in ayan wax Ilaah naga sooci kara.

▣ **“jacaylka Ilaah oo ku jira Rabbigeenna Ciise Masiix.”** Halkan waxaa ah habsasho weyn . cutubkan waxa uu ka bilowdaa xukun wuxuuna ku dhammaadaa kala tag. Ma jiro qof qaadan kara badbaadada rumaystaha. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa in uu ka jawaabaa bilowga (cf. 3:21-31), oo uu ka sii wataa illaa (cf. cutubka 4-8). Ruuxa ayaa fure u ah, laakiin waa in uu ahaa mid xadkiisii leh. Tawabadkeen iyo iimaan ayaa loo baahan yahay (cf. Kaarkos 1:15; Falimaha |Rasuullada 3:16, 19; 20:21), iyadoo loo baahan yahay baarrinimo iyo adkaan.

## SU'AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su'aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Sidee buu cutubka 8 ula xidhiidhaa cutubka 7?
2. Haddii xukun uusan jidhin, muxuu dembigu u saameeyaa nolosha rumaystaha?
3. Miyaa Ruuxa ama Ciise dhex deggan yahay rumaystaha (aayadda 9)?
4. Sidee baa dembiga aadanuhu u saameeyay dabiiciga (aaydaha 19-22)? Miyaa dabiicigu qayb ka noqon doonaa jannada (cf. Ishacyaah 11:6-11)?
5. Sidee buu Ruuxu inoogu duceeyaa (aayadaha 26-27) Miyey tani la xidhiidhaa “in afaf lagu hadlo?”
6. Sidee buu Kitaabka Qudduuska ahu u sheegayaa in shay kasta uu wanaag u shaqaynayo adduunka shaqrka ah dhexdiisa (aayadda 28)? Waxyi “wanaag” (aayadda 29).
7. Sidee baa xaq ka dhigidda loogu reebay silsiladda dhacdooyinka fiqi ahaaneed sida ku jirta aayadda 30?
8. Sababtee bay aayadaha 31-39 ay u sheegeen in xukunka loo diyaar ahaado?
9. Tax ku same afar waxyaabood oo ay aayadda 34-aad ka tilmaamayso Ciise Masiix?

# ROOMA 9

QAYBAHA BAARAGARAAFYADAAE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Ilaah doorashadiisa Dadkiisa	Diidmadii Israa'iil Masiixa	Dhibaataadii rumaysad la'aan tii Israa'ill	Ilaah iyo dadkiisa	Fursaddii israa'iil
9:1-15	9:1-15	9:1-15	9:1-15	9:1-15
	Diidmadii Israa'iil iyo Iyo ujeedkii Ilaah	Ballanqaadkii Ilaah ee Israa'iil		Ma uu guul darraysan Ilaah ballammadiisii wuu oofiyey
9:6-13	9:6-13	9:6-13	9:6-9 9:10-13	9:6-13
	Diidmadii Israa'iil Iyo caddaaladda laalh	Xaqnimada Ilaah in la doorto		Ilaah ma caddaalad xumaado
9:14-18	9:14-29	9:14-18	9:14-18	9:14-18
Ilaah caradiisa iyo naxariistiisa			Ilaah caradiisa iyo Naxariistiisa	
9:19-29		9:19-26	9:19-21 9:22-29	9:19-21 9:22-24
		9:27-29		Dhammaan waxaa lagu sii Dhex sheegay Axdigii Hore 9:25-29
Israa'iil iyo Injiilka	Xaaladda israa'iil ee Maanta	Xaqnimada runtaa waa Iimaanka	Israa'iil iyo Injiilka	
9:30-10:4	9:30-33	9:30-10:4	9:30-10:4	9:30-10:4

## AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga viii)

### ADIGA OO RAACAYA UJEEDKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan middan u dhaafin in lagu tuso.

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad

4. IWM.

**CUTUBKA 9-11 XIRIIRKA KALA DHEXEYYA 1-8**

- A. Waxaa jira labo waddo ooa h xiriirka ka dhexeeya cutubyadan iyo cutubyada 1-8.
1. Dhammaantood waa mawduucyo kala soocan, oo leh faallo cilmi tiyoolaji.
    - a. Waxaa jira farqi weyn oo ah xagga xiriirka cutubyada 8:39 iyo 9:1
    - b. Tani waxay si toos ah ula xiriirtaa xiisaddii taariiqeed ee kaniisaddii Rooma oo ahayd mid u dhaxaysay in la rumaayo Yuhuudda iyo in la rumeeyo kuwa aan Yuhuudda ahayn. Caqli ahaan waxay middani ku xirnayd in markaa uu hoggaankii Haniisadda ee dadka aan Yuhuudda ahayn uu soo korayey.
    - c. Waxaa jiray fahan darro ku saabsanayd wuxuu Bawlos uu ku wacdinayey ee quseeyay Israa'iil (iyo sharciga) iyo rasuul u ahaanshada dadka aan Yuhuudda ahayn (isagoo ugu deeqaya nimco xorriyadeed) sidaas daraaddeed, mawduucan wuxuu kula macaamilayaa qaybtan iyada ah.
  2. Tani waa dhammaystir kaamil ah oo Rasuul Bawlos ugu talo galay soo bandhigiddiisa Injiilka.
    - a. Bawlos wuxuu cutubka 8 aad ku soo gabogabaynayaa ballantii ahayd "Ma jiro wax looga soocmi karo jacaylka Ilaah." Bal ka warran rumaysad la'aanta dadka Axdiga?
    - b. Rooma 9-11 waxa ay ka jawaabaysaa in Israa'iil rumaysad la'aantoodu aysan ahayn wax macquul ku ah Injiilka!
    - c. Bawlos waxuu tan ku sheegay warqadda oo dhan (cf. 1:3,16; 3:21,31 iyo 4:1ff).
    - d. Bawlos waxa uu ku doodayaa in Ilaah yahay mid run ah oo uu Ereygiisu sheegayo. Ka warramay Ereygiisa ah Axdigii Hore ee ku aadan Israa'iil? Miyey ballammadan oo dgammi ahaayeen wax aan la aqbali karin ama aan wax ku fadhin.
- B. Waxaa jira dhowr wado oo lagu soo koobi karo maqaalkan.
1. sidoo Bawlos u isticmaalayey ficil ereyada cabsashada ah
    - a. 9:6
    - b. 9:14
    - c. 9:19
    - d. 9:30
    - e. 11:1
    - f. 11:11
  2. Rooma 9-11, waa qoraal isku xidhan (ma jiraan meel cutub iyo aayad lagu kala qaaday oo dabeeto gadaal looga daray). Waa in si guud ahaaneed la isugu wada turjumaa ama loo fasiraa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa ugu yaraan jira saddex maaddo oo waaweyn oo ku saabsan qaybbinnada.
    - a. 9:1-29 (Ilaah qaaddirnimadiisa oo diiradda la saarayo)
    - b. 9:30-10:21 (Masuuliyadda aadanaha oo diiradda la saarayo)
    - c. 11:1-32 (Sida Ilaah ugu jiro ujeedka badbaadada weligeed ah)
  3. Mawduucyada ugu waaweyn: sharraxaadda wanaagsan ee qaybtan Rooma waxaa laga helayaa sida ay tuducyadu u kala go'an yihiin ama u kala qaybsan yihiin ee ku jirta NKJV oo ah daabacaaddii Toomas Nelson
    - a. Diidmadii Israa'iil ee Masiixa, 9:1-5
    - b. Diidmadii Israa'iil ee Ujeedkii Ilaah, 9:6-13
    - c. Diidmadii Israa'iil ee caddaaladda Ilaah, 9:14-29
    - d. Xaaladda taagan ee Israa'iil, 9:30-33
    - e. Israa'iil iyo Injiilka, 10:1-13
    - f. Israa'iil waa diiday Injiilka, 10:14-21
    - g. Diidmada Israa'iil ma aha mid gebi ahaan ah, 11:1-10
    - h. DIIDMADA Israa'iil ma aha mid gaboggabo ah, 11:11-36
- C. Qaybtan oohinteeda qalbiga waxay u badan tahay si la mid sida waxa la soo bandhigayo ay maskaxda uga yimaadaan (soo koobid caqli gal ah). Tan qiirada ku jirtaahi waxay na xusuusinaysaa mid ka mid ah qalbi xumooyinkii uu Reer Bani Israa'iil uga qaaday ka fallaagoobiddoodii awgeed sida ku jirta Hoosheeca 11:1-4,8-9

Waddooyin badan oo ah xanuunka iyo wanaagga sharciga ee cutubka 7 aad ayaa cutubyada 10-11 lagu simayaa. Sida ku jirta labada dhaco, waxaa Bawlos qalbigiisa jebinayey adkaantii sharci adag oo Ilaah ka yimid oo keenay dhimasho halkii nolol ka keeni lahaa!

D. Bawlos in ka badan 25 xigasho ayuu ku isticmaalayaa cutubyada 9-11 ayaa muujinaya rabitaankiisa uu isugu soo qaadanayo Israa'iishii Axdigii Hore arrimahoodii, sidii uu isla cutubka 4aad ku sheegay, in aysan ahayn midda haatan taagan. Farcankii Ibraahim jir ahaan ka soo tafiirmay sida ay u badan yihiin way diideen Ilaah, Xitaa waqtigii la soo dhaafay (cf. Falimaha Rasuullada 7; Nexemiyaah 9).

E. Qoraalkan, Efesos 1:3-14, waxa ay la macaamilayaan ujeeddooyinka Ilaah uu ku doonayo in ku badbaadiyo aadanaha oo dhan.

Marka kowaad waxa ay u muuqataa in lagu qeexo Ilaah oo dooranaya xoogaa shaqsiyaad ah oo diidaya kuwa kale (supralapsarian Calvinism), hase ahaatee, waxan filayaa in ujeedku uusan ahayn shaqsiyaadka laakiin uu yahay Ilaah qorshihiiisa badbaadada weligeed ah (cf. Bliwogii 3:15; Falimaha Rasuullada 2:23; 3:18; 4:28; iyo 13:29).

*The Jerome Biblical Commentary*, ivol. 2, "Axdiga Cusub," oo uu tafo tiray Joseph A. Fitzmyer iyo Raymond E. Brown, ayaa waxa uu sheegayaa:

"Waa muhiim in la xaqiiqsado in waxa Bawlos dhabta ka leeyahay ay tahay dhaqada; kama hadlayo masuuliyadda shaqsiyaadka. Haddii uu u jeedo in uu so saaro su'aasha ku aadan doorashadii hore, tani waxba u qaban lahayn ama uma tari lahayn in shaqsiyaad la doorto si loo sharfo" (Bogga 318).

## FAHAN MACNAHA GUUD EE CUTUBKA 9

A. Muxuu yahay isbeddelka weyn ee dareenka ee u dhexeeya cutubka 8aad iyo cutubka 9aad.

B. Qoraalkan ku jira (9-11) waxa ay la macaamilayaan tiyoolaji ahaan (1) aasaaska badbaadada, (2) Ujeeddada Ilaah doorashadiisa, (3) iimaan la'aantii rumaysad darradii reer Israa'iil iyo Aamminnimadii YHWH, iyo (4) iyo sidii aadanuhu uhgu yimaadeed badbaadadii Ciise Masiix.

C. Cutubka 9 aad waxa uu ka mid yahay cutubyada Axdiga Cusub ugu xoogga badan ee ka hadlaya qaaddirmimada Ilaah (i. e., noolayaasha kale Efesos 1:3-14) halka cutubka 10 uu si cad oo muuqata uga hadlayo doorashada aadanaha ee xorta ah si ku celcelis ah (cf. "mid kasta" aayadda 4. "Ku kasta". 11,13; "dhammaan" aayadda 12 labo jeer). Bawlos marna iskuma dayin in la macaamilo xiisaddan tiyoolaji ahaaneed. Labaduba waa run! Sida badan mad'habyada baybalka waxaa lagu saleeyay labo qaab oo is feer socda. Marka aad eegto sida ay u badan yihiin tiyoolaji ahaan waa wax caqli gal ah, laakiin caddayna qoraal ahaaneed waxay sheegaysaa hal arrin oo ah baybalka. Augaustine iyo Calvin iyo Pelagianism iyo Amminianism ku kulli way leeyihiin waxyaabaha runta ah iyo qalad. Xiisad baybalka oo u dhexaysa mad'habyadu waa kuwo laga doorbidi karo qoraalka caddaynta ah ee toosnaanta, sabab lahaanta, iyo habka tiyoolaji ahaaneed oo Baybalka dhigaya in uu noqdo mid shabakad ahaan wada shaqeeya!

D. 9:30-33 waa soo koobid ku saabsan cutubka 9 iyo ballanta ku jirta cutubka 10.

## BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 9:1-5

<sup>1</sup>Runtaan ku sheegayaa Masiixa, oo been sheegi maayo, qalbigayguna marag buu iigu furayaa Ruuxa Qoduuskaa <sup>2</sup>in caloolxumo weyn iyo xanuun aan joogsanaynin ay ku jiraan qalbigayga. <sup>3</sup>Waayo, waxaan jeclaan lahaa inaan aniga qudhaydu ka inkaarnaado Masiixa walaalahay aawadood oo ah xigaalkayga aannu isku jidhka nahay, <sup>4</sup>kuwa ah reer bini Israa'iil, oo leh carruur-ka-dhigidda, iyo ammaanta, iyo axdiyada, iyo sharciga siintiisa, iyo u-adeegidda Ilaah, iyo ballamada, <sup>5</sup>kuwa awowayaasha leh, oo xagga jidhka Masiixu ka yimid iyaga, kan wax walba ka sarreeya oo ah Ilaah ammaanta leh weligiis. Aamiin.

9:1-2 Aayadaha 1 iyo 2 waxa ay ka wada yimaadeed hal jumlo Giriigga dhexdiisa. Bawlos wuxuu bixinayaa sababo dhowr ah sida (kanisadda Rooma) ay u ogaan lahaayeen in uu runta sheegay: (1) Midnimada uu Masiixa



la leeyahay, aayadda 1 (2) Ruuxiisa oo uu dhisan, aayadda 1 iyo (3) dareennadiisa qotada leh ee uu u hayo Israa'iil aayadda 2.

**9:1 “runtaan ku sheegayaa Masiixa, oo been sheegi mayo”** Sida badan Bawlos wuxuu hadalkan u sameeyay (cf. II Korintos 11:10; Galatiya 1:20; I Timoteyos 2:7) ama mid taas la siman oo ku saabsan sida Ilaah u yahay marqaatigiisa (cf. Roomaq 1:9; II Korintos 123; 11:31; Filiboy 1:8; I Tesaloniika 2:5, 10). Waa waddadiisuu uu doonayey in uu ugu sheego run sheegiddiisa wax baridda iyo wacdiga.

▣ **“qalbigayguna marag buu iigu furayaa”** Tani waxa ay ku xiran tahay Ruuxa Ilaah siiyey rumaystaha, oo ah mid niyad dareen san leh. Marka hal arrin la eego waxa ay noqonaysaa fure awoodeed oo ay rumaystayaashu leeyihiin. Waa Ilaah Ereygiisii oo uu na fahan siiyey noona dhaqan geliyey Ruuxa Ilaah oo uu maskaxdeenna ku beeray (I timoteyos 1:5,19). Dhibaatadu waxa ay kacdaa marka kuwa rumaysadka leh—oo sababtaas daraaddeed, kuwa aan rumaysadka lahayn—ay sii wadaan in ay diidaan Ereyga iyo Ruuxa; dabadeed way fududdahay in la yareeyo mid dembigiisa (cf. I Timoteyos 4:2). Dhaqan ahaan marqaatiyadeennu waxay noqon karaan kuwo wacyi ahaan ku xidhan xaalad.

▣

**NASB, NKJV**

**“qalbigayguna marag buu iigu furayaa Ruuxa Qoduuskaa”**

**NRSV**

**“Waxaa xaqiijiya Ruuxa Qudduuska ah”**

**TEV**

**“Waxaa maamula Ruuxa Qudduuska ah”**

**JB**

**“Waxaa ii xaqiijiya Ruuxa Qudduuska ah ee igu jira”**

Nawlos wuxuu rumaysnaa in uu lahaa u yeeris gaar ah oo ka timid Masiixa (Falimaha Rasuullada 9:1-22; Galatiya 1:1). Wuxuu ahaa Rasuul wuxuuna ku hadlayey awood ama xukun xagga sare ka yimid (cf. I Korintos 7:25,40). Wuxuu murugadii Ilaah la wareegay kuwaa aan rumaysadka lahayn iyo Yuhuuddii dhulaas degganayd (cf. aayadda 2) faa'iido badan ayey lahaayeen (cf. aayadaha 4-5).

**9:3**

**NASB, NKJV,**

**NSRV**

**“waxaan jeclaan lahaa. . .”**

**TEV**

**“iyaga awgood waan filan lahaa”**

**JB**

**“Waan dooni lahaa. . .”**

Bawlos wuxuu si qoto dheer ku dareemay dadkiisii, Israa'iil, oo ah haddii ka soocnaantiisu ay saamaynayso so geliddooda, uu yeeli lahaa, aayadda 3. Aayaddani waxa ay leedahay micne isku xir aad iyo aad u weyn oo xooggan naxwe ahaan. Xaddiga iyo culayska tukashdan waxay aad ula siman tahay ducadii uu Muuse dadka reer banii Israa'iil uga ducaynayey dembi bdnaantoodii eek u qoran Baxniintii 32:30-35. Tan waxaa sida ugu fiican loo fahmay in ay tahay hadal rabitaan, ma aha dhacdo. Waxa ay la mice taha yiyadoo la adeegsaday xaalad aan dhammaytirnayn sida ku jirta Galatiya 4:20. U eeg mawduucan gaarka ah sida soo socota.

## **MAWDUUC GAAR AH: SALAADDA DHEXDHEXAADINTA AH**

### **I. Hordhac**

#### **A. Tukashadu waxay ku eg tahay tusaalihii Ciise**

1. Salaad gaar ah, Markos 1:35; Luukos 3: 21; 6:12; 9:29; 22:29-46
2. Nadiifinta macbudka, Matayos 21:13; Markos 11:17; Luukos 19:46
3. Tukashada beenta ah Matayos 6:5-13; Luukos 11:2-4

#### **B. Tukashadu waa anngoo si ficil ahaan u muujinayna rumaysadkeenna shaqsi ahaaneed, annagoo daryeelaynna Ilaaha jooga doonistiisa, isagoo noo hadli kara una hadli kara kuwa kale tooda.**

#### **C. Ilaa hwuxuu si shaqsi ahaaneed u xadeeyay in uu markiiba uga jawaabo baryooyinka carruurtiisa meelo badan (cf. Yacquub 4:2)**

#### **D. Ujeedka ugu weyn ee salaaddu waxaa weeyaan in wehelnimo iyo waqti lala qaato Ilaah Qaadirka ah.**

#### **E. Waxa tukashada diiradda lagu saarayo waa shay kasta ama mid kasta oo dan u haya rumaystayaasha. Waxaan ka tukan karnaa hal mar , innagoo rumaysan, ama marar badan haddii**

fakarka ama dantu soo noqnoqto.

- F. Salaadda waxaa ku jiri kara arrimo dhowr ah.
1. In la ammaano oo la caabudo Ilaah Qaaddirka ah.
  2. In Ilaah looga mahad celiyo xaaridnimadiisa, wehlnimadiisa, iyo adeeggiidsa.
  3. Qirasho dembiyadeenna ah, kuwii tegay iyo kuwa jooga labadaba
  4. In aan ka soo laabanno damacyadeenna iyo rabitaannadeenna
  5. In aan qalbi ahaan uga marqaati kacno halka aanu ka qabanaynno baahiyada iyo kuwa kale Aabbaha hortiisa
- G. Sallaadda aad u tukato qofka aoo kaa maqan waa wax cajiib ah. Ilaah wuu jecel yahay marka aanu kuwa kale u ducaynno in ka badan inta aann shaqsi ahaanteenu u ducaysanaynno, iyadoo baahiyadu ay weli saamayn ku yeeshaa is beddelka, wax la doonayo in laga jawaabo ama baahi, nafta oo qura ma aha laakiin, iyaga.

## II. Waxyaabaha Baybal ahaaneed

### A. Axdigii Hore

1. Tusaalooyin dhowr ah oo ah u tukashada kuwa kale
  - a. Abraham oo u tukanaya Sodom, Bilowgii 18:22ff
  - b. Salaadihii Muuse ee reer Bani Israa'iil
    - (1) Baxniintii 5:22-23
    - (2) Baxniintii 32:31ff
    - (3) Sharciga ku noqoshadiisa 5:5
    - (4) Sharciga ku noqoshadiisa 9:18,25ff
  - c. Samuu'eel oo u ducaynaya Reer bani Israa'iil
    - (1) I Samuu'eel 7:5-6,8-9
    - (2) I samuu'eel 12:16-23
    - (3) I Samuu'eel 15:11
  - d. Daa'uud oo u duceeyay wiilkiisii, II Samuu'eel 12:16-18
2. Ilaah wuxuu doondoonyaa kuwo kuwa kale u duceeya, Ishacyaah 59:16
3. Dembiga la og yahay, ee aan la qiran ama maanka tawbadkeen la'aanta aku wuxuu wax yeelleeyaa tukashooyinkeenna.
  - a. Sabuurrada 66:18
  - b. Maahmaahyadii 28:9
  - c. Ishacyaah 59:1-2; 64:7

### B. Axdiga Cusub

1. Adeegga tukasho ee Wiilka iyo Ruuxa
  - a. Ciise
    - (1) Rooma 8:24
    - (2) Cibraaniyada 7:25
    - (3) I Yooxanaa 2:1
  - b. Ruuxa Qudduuska ah, Rooma 8:26-27
2. Adeegii tukashada ee Bawlos
  - a. U tukashadiisii Yuhuudda
    - (1) Rooma 9:1ff
    - (2) Rooma 10:1
  - b. Salaadihii Macbudyada
    - (1) Rooma 1:9
    - (2) Efesos 1:16
    - (3) Filiboy 1: 3-4,9
    - (4) Kolosay 1:3,9
    - (5) I Tesaloniika 1:2-3
    - (6) II Tesaloniika 1:11
    - (7) II Timoteyos 1:3
    - (8) Felemon aayadda 4

- c. Bawlos oo kaniisadaha weyddiistay in ay u soo duceeyaan
  - (1) Rooma 15:30
  - (2) II Korintos 1:11
  - (3) Efesos 6:19
  - (4) Kolosay 4:3
  - (5) I Tesaloniika 5:25
  - (6) II Tesaloniika 3:1
- 3. Adeeggi Kaniisadda ee ducada
  - a. In la isku duceeyo
    - (1) Efesos 6:18
    - (2) I Timoteyos 2:1
    - (3) Yacquub 5:16
  - b. Salaado loo codsaday kooxo gaar ah
    - (1) Cadawyadeenna, Matayos 5:44
    - (2) Shaqaalaha Masixiyiinta, Cibraaniyada 13:18
    - (3) Hoggaamiyayaasha, I Timoteyos 2:2
    - (4) Kuwa jirran, Yacquub 5:13-16
    - (5) Back sliders Dembiga xagga dhimashada I Yooxanaa 5:16
  - c. Salaad dadk a oo dhan ah, I Timoteyos 2:1

### III. Shuruudaha salaadda laga jawaabo

- A. Xiriirkeenna aannu la leenahay Masiixa iyo Ruuxa
  - 1. In isaga lagu jiro, Yooxanaa 15:7
  - 2. Magaciisa, Yooxanaa 14:13,14; 15:16; 16:23-24
  - 3. IN Ruuxa lagu jiro, Efesos6:18; Yuudas 20
  - 4. Doonista Ilaa hawgeed, Matayos 6:10; I Yooxanaa 3:22; 5:14-15
- B. Ujeeddooyinka
  - 1. IN aadan ku celcelin, Matayos 21:22; Yacquub 1:6-7
  - 2. Is hoosaysiin iyo tawbadkeen, Luukos 18:9-14
  - 3. Si xun u weyddiisasho, Yacquub 4:3
  - 4. Danaystenimo, Yacquub 4:2-3
- C. Arrimo kale
  - 1. Dib u xallin
    - a. Luukos 18:1-8
    - b. Kolosay 4:2
    - c. Yacquub 5:16
  - 2. Wada weyddiisashada
    - a. Matayos7:7-8
    - b. Luukos 11:5-13
    - c. Yacquub 1:5
  - 3. Muranka Gurigaaga, I Butros 3:7
  - 4. Xor ka noqoshada dembiga la og yahay
    - a. Sabuurrada 66:18
    - b. Maahmaahyadii 28:9
    - c. Ishacyaah 59:1-2
    - d. Ishacyaah 64:7

### IV. Gabaggabo Tiyooloji ahaaneed

- A. Maxaa muhiimad ah! Maxaa fursad ah! Maxaa waajib iyo masuuliyad ah!
- B. Ciise ayaa ah tusaalaheenna. Ruuxu waa hagaheenna. Aabbuhu si xamaasad leh ayuu inoo sugayaa.
- C. Way beddeli kartaa adiga, qoyskaaga, saaxiibbadaa, iyo adduunkaba.



<b>NASB</b>	<b>“inaan aniga qudhaydu ka inkaarnaado Masiixa”</b>
<b>NKJV</b>	<b>“Waa ka inkaaranay Masiixa”</b>
<b>NRSV</b>	<b>“Waan ka inkaaranay oo ka go’nay Masiixa”</b>
<b>TEV</b>	<b>“Inkaartii Ilaah ayaan hoos galnay oo aan Masiixa uga gaadh noqonay”</b>
<b>JB</b>	<b>“Waan xukumanay oo aan Masiixa uga go’nay”</b>

Barashada Tiyooolojiga aasaasiga ah ee “Qudduus” waa in aad u gaar noqotid Ilaah iyo waxa uu rabo on uu kuu adeegsado. Qaabkan marka dhika kale ee taa liddigeeda laa adeegsado waxa uu noqonayaa “inkaar” Wax ama qof iska gaar yeelay Ilaah. Waxa ay noqon kartaa waayo aragnimo furan oo iska caadi ah (cf. Laawiyiintii 27:28; Luukos 21:5 ama waayo aragnimo aam caadi ahayn oo diidmo ah (Yashuuca 6-7; Rooma 9:3), xaaladda uun bay ku xiran tahay.

### **MAWDUUC GAAR AH: HABAARKA (ANATHEME)**

Waxaa jira dhowr erey oo ah “habaarka” afka Cibraaniga dhexdiisa. *Herem* waxaa loo adeegsaday wax la siiyey Ilaah. (cf. LXX sida anathema, Laawiyiintii 27:28), aalaaba xagga burburka (cf. Sharciga ku noqoshadiisa 7:26; Yashuuca 6:17-18; 17:12). Waa erey loo adeegsaday ujeedka “dagaalka qudduuska ah.” Ilaah wuxuu sheegay in buburinta Kancaaniyiinta iyo Yeriixoo ay ahayd fursadda ugu horraysa, “miraha ugu horreeya.”

Axdiga Cusub dhexdiisa *anathema* iyo sida uu qaabkeedu ula xiriiro waxaa loogu isticmaalay darreeno kala duwan oo dhowr ah.

1. Sidii hadiyad ama alla bari Ilaah loo bixinayo (cf. Luukos 21:5)
2. Sidii dhimasho ama ballan (cf. Falimaha Rasuullada 23:14)
3. In la inkaaro oo la dhaarto (cf. Markos 14:71)
4. Qaabkii uu ay inkaarto ula xiriirtay Ciise (cf. I Korintos 12:3)
5. In qof ama shay loo bixiyo beddelkii ciqaabta iyo burburka Ilaah (cf. Rooma 9:3; I Korintos 16:22; Galatiya 1:8-9).

**9:4-5** Aayadahani waxa ay ku saabsan yihiin sidii dadka reer Bani Israa’iil ay muhiimka u ahaayeen. Oo rumaysad la’aantoodu u noqotay wax gef ku ah nuurka faa’idooyinkan. Kii wax badan la siiyo, waxa badan ayaa laga doonayaa (cf. Luukos 12:48)!

**9:4 “kuwa ah reer bini Israa’iil”** Kani wuxuu ahaa magacii Axdigii Hore loogu yeeri jiray faraca Ibraahim. Magacii Yacquub waxaa markii Ilaah uu laq kulmay kaddib loo beddelay Israa’iil (cf. Bilowgii 32:28). Waxa uu noqday cinwaan magic ururiya u noqday quruunka Yuhuudda. Ereygani wuxuu Etymology ayah waxaa dhacda in uu yahay “may *EL* (God) persevere” Macnuhuna ma aha in tahi ay ku timid qiyaanadii uu Yacquub sameeyay.



**“oo leh carruur-ka-dhigidda”** Axdiga Hore gudhiida magaca jamaca “wiilasha” waxa uu la xidhiidhay malaa’igaha (cf. Ayuub 1:6; 2:387; Daanyeel 3:25; Sabuurrada 29:1; 89:6-7), halka marka uu kelida yahayna u ka tilmaamayo

1. boqorka Israa’iil (cf. II Samuu’eel 7:14)
2. quruunta (cf. Baxniintii 4:22,23; Sharciga ku noqoshadiisa 14:1; Hosheeca 11:1)
3. Masiixa (cf. Sabuurrada 2:7)
4. Waxa uu la xidhiidhaa aadanaha (cf. Sharciga ku noqoshadiisa 32:5; Sabuurrada 73:15; Yexesqeel 2:1; Hoosheeca 1:10. Bilowgii 6:2 waa mid aan yara caddayn oo yara dahsoon; labadaba way noqon kartaa). Axdiga Cusub gudhiisa ereygan macnihiisu waxaa weeyaan mid laga leeyahay ama ku jira qoyska Ilaah.

Bawlos tusalaalihiisa uu badbaadada u soo qaatay wuxuu ahaa “carruur ka dhigasho,” halka Yooxanaa iyo Butros kuwoodu u ahaa “mar labaad halka Yooxanaa iyo Butros kuwoodu u ahaa “mar labaad dhashay.” Labaduba waxa ay tusaalaynayaan qoyska. Ma aha tusaale Yuhuudeed, laakiin tusaale Roomaan. Waxa ay ahayd wax adag oo waqti weyn qaadanaya in carruur la korsanayo sharci loogu helo. Oo Haddiiba ilmo korsad laga dhigto waxaa loo qaddarinayey qof cusub, waxaana waajib ahayn in aabbuhu uusan dayici Karin oo uusan sidoo kale dili Karin.



**“ammaanta”** asalka Cibraanigu waa “in mid culus la noqdo” oo tusaale u ahayd wax qiimo leh. Halkan waxay u taagan tahay (1) Ilaah oo qudhoosu isku muujinaya Buurta Siinaay dusheeda (cf. Baxniintii 19:18-19); ama haddii kale (2) *Shekinah* daruurtii amaanta ee reer Israa’iil hor socotay markii ay cidlada ku wareegayeen (cf. Baxniintii 40:34-38). YHWH ayaa naf ahaantiisa qaab sida caadiga ah ka gooni ah isugu muujiyey Israa’iil. La joogista YHWH waxa ay ka maqna ahayd Ammaantiisa (cf. I Boqorrada 8:10-11; Yexesqeel 1:28). Ka eeg mawduuc gaar ah 3:23.

▣ **“axdiyada”** Qoraalladii horee Giriigta ee Qudduuska ahaa sida P46, B, iyo D waxaa lagu isticmaalay “axdi” oo waa erey kelidii. Arrintu si kastaba ha ahaatee, ereyga oo jamac ahu wuxuu ku jiraa MSS 8, C, iyo Laaqtinkii hore, Vulgate, iyo qaybaha Coptic. UBS<sup>4</sup> wuxu jamaca swiinaya “B” isagoo ku qiimaynaya (ugu dhawaan sax). Arrintu si kastaba ha ahaatee, isagoo jamac ah laguma isticmaalin Axdigii Hore. Waxaa Axdigii hore dhexdiisa waxaa ku jira dhowr Axidyood oo gaar ah: Aadan, Nuux, Abraham, Muuse, iyo Daa’uud. Maaddaama sharciga bixintiisa la sii sheegay, waxay tani ugu dhawaan ku aaddan tahay Axdigii Abraham kan uu Bawlos u arkay in uu aasaas ah ahaa (cf. 4:1-25; Galatiya 3:16-17) isagoo dhowr jeer ku soo celceliyey (cf. Bilowgii 12, 25, 17) patriarch ahaan.

#### MAWDUUC GAAR AH: AXDI

Ereyga *berith*, ama Axdi ee Axdigii Hore, ma fududa in la qeexo. Ma jiro erey fal ah oo la mid ah Afka Cibraaniga dhexdiisa. Isku dayadii la sameeyay oo dhammi waxa ay noqdeen kuwo aan si toos ah u qeexayn. Arrintu si kastaba ha ahaatee, bar dhexaadda ujeeddadu waxa ay `kuwii aqoonta lahaa ku qasabtay in ay baadhaan adeegsiga ereyga si ay isugudayaan in ay xaqiiqsadaan macnaha uu ku shaqaynayo.

Axdi macnahiisu waxaa weeye kan uu Ilaaha runta ahu kula xidhdho ama kula macaamilo abuurtiisa aadanaha ah. Ujeedka axdi, macaamil, ama heshiis waa mid aad muhiim ugu ah fahanka muujinta Baybal ahaaneed. Arrinta u dhexaysa wayenaanta awoodda Ilaah iyo doonista xorta ah ee aadanaha waxaa si cad looga dhex arki karaa gudaha ujeeddada axdiga. Axdiyada qaar waxa ay ku salaysan yihiin ujeeddooyinka, falimaha, iyo dabciga Ilaah.

1. Uunka naf ahaantiisa (cf. Bilowgii 1-2)
2. U yeeristii Abraham (cf. Bilowgii 12)
3. Axdigii lala dhigtay Abraham (cf. 15)
4. Dhawristii iyo ballankii Muux (cf. Bilowgii 6-9)

Arrintu si kastaba ha ahaatee, dabecadda axdiga waxay u baahan tahay ka fal celin

1. Aadan waa in uu rumaysadkiisa awgii ku addeecaa Ilaah oo uusan cunin midhihii Ceedan ku dhex yiil (cf. Bilowgii 2)
2. Abraham waa in uu rumaysadkiisa awgii ka ka tagaa qoyskiisa, raacaa Ilaah, oo rumaystaa faracyada mustaqbalka (cf. Bilowgii 12,15)
3. Nuux waa in uu rumaysadkiisa awgii ku dhisaa doon weyn meel biyo ka fog oo uu xayawaanka isugu keenaa (6-9)
4. Muuse rumaysadkiisa awgii ayuu dadka reer binu Israa’iil kaga soo saaray Masar wuxuuna xeerar diimeed oo muuqda ugu helay noloshii bulshada, ballamihii balamihii barakooyinka iyo inkaaraha awgood (cf. Sharciga ku noqoshadiisa 27-28)

Aerrin noocan oo kale ah oo ay ku jirto xiriirka Ilaah ee aadanaha ayaa waxa ay ku caddanaha “Axdiga Cusub.” Arrintan waxaa si toos ah loo barbar dhigi karaa tii tii Yexesqeel.18 iyo Yexesqeel 36:27-37. Axdigu ma wuxuu ku salaysan yahay Ilaah shaqadiisa nimcada leh mise jawaabo aadane oo la go’amiyey? Tani waxay ku saabsan tahay arrintii gubashada ee Axdigii Hore iyo kan Cusub. Labadaba ujeeddooyinkoodu waa isku mid: (1) dib u soo celintii wehelnimadii luntay sida ku jirta Bilowgii 3 iyo (2) samaynta dad xaq ah oo ay ka soo ifto dabecadda Ilaah.

Axdiga cusub ee Yerenyaah 31:31-34 waxa uu xallinayaa xiisadda isagoo wax qabashada aadanaha uga bixinaya in ay sidii wax aqbalaad lagu gaarayo. Sharciga Ilaah waxa uu noqonayaa rabitaan gudaha ah booskii wax qabashada dibadda. Hadafka ama ujeedka dadka xaq ah ee Ilaah aaminsan sidiisii ayuun buu sii ahaadaa laakiin qaabka ayaa is beddela. Aadanihii dhacay waxay nafsad ahaantoodii isu caddeeyeen in aysan ahayn kuwo ku filan in ay araggii Ilaah ka soo ifo iyaga (cf. Rooma 3:9-18). Dhibaatadu ma ahayn axdiga, laakiin dembi badnaanta iyo tabar yaraanta aadanaha (cf. Galatiya 3).

Arrintan mid la mid ah ee ah axiga aan shuruudda ku xidhnayn iyo kan shuruudda ku dhidhan ee k u jira Axdigii Hore, ayaa ku ekaaday Axdiga cusub. Badbaadada lama dhaafaankeedu dabcan waxay wax xor ah ku noqotay shaqadii Ciise Masiix, laakiin waxa u baahan tahay tawbadkeen iyo aamminaad (marka aad bilowdo iyo kala joogsi la’aan labadaba). Waa mid si sharci ah magic u ah oo loogu yeeri karo u-ekaanta Masiixa, oo ah hadal caddayn u ah aqbalaadda lagama maarmaanna u ah qudduusnimada! Rumaystayaashu kumaysan badbaadin hawl qabdkooda, laakiin addeecid ayey ku badbaadeen (cf. Efesos 2:8-10). U noolaanshaha si Ilaah raalli ka yahay waxa ay noqotaa caddaynta badbaadada, ma aha macnaha badbaadada.

▣ **“sharciga siintiisa, iyo u-adeegidda Ilaah,”** Tani waxay u gudbaysaa (1) Musse Heliddiisii sharciga ee Buur Siinaay dusheeda (cf. Baxniinti 19-20) iyo Daa’uud habaybtiisii adeegga macbudka, ama (2) waxaa macquul ahaan taambuuggii lama degaanka xilligii warwareegga (cf. Baxniintii 25-40 Laawiyiintii).

▣ **“ballamada”** Ilaah qorshayaashiisii mustaqbalka wuu muujiyey (cf. 1:2; Falimaha Rasuullada 13:32; Tiitos 1:2; Cibraaniyada 1:1) isagoo Axdigii Hore soo dhex marinaya.

Maaddama “axdiyadii” waa hore la soo sheegay, “ballamadu” waxay sida dhabta ah wax uga sheegayaan Masiixa (cf. aayadda 5, e.g., Bilowgii 3:15; 46:10; Sharciga Ku Noqoshadiisii 18:15,18-19; II Samuu’eel 7; sabuurrada 16:10; 118:22; Ishacyaah 7:14; 9:6; 11:1-5 Daanyeel 7:13,27 Miikaah 5:2-5a Sakariyaah 2:6-13; 6:12-13; 9:9; 11:12).

Ballammadan (axdiyadan) Labadaba way yihiin, kuwo aan shuruud ku xidhnayn iyo kuwo shuruud ku dhiran. Iyagu wax shuruud ah kuma xidhnayn si la fogaansho ah shaqada Ilaah (cf. Bilowgii 15:12-21), laakiin iimaanka iyo addeecidda aadanaha awgood shuruud ayey ku xodhan tahay (cf. Bilowgii 15:6 iyo Roomaq 4). Israa’iil oo qura ayaa haystay Ilaah is muujintiisii imaanshadii Masiixa ka hor.

▣ **“awowayaasha”** Tani waxa ay ka hadlaysaa Abraham, Isrxaq iyo Yacquub iyagu waa Patriarchs ka Bilowgii 12-50 (cf. Rooma 11:28; Sharciga Ku Noqoshadiisa 7:8; 10:15).

▣ **“oo xagga jidhka Masiixu ka yimid iyaga”** Tani waxay la xiriirtaa halka uu jidh ahaan ka soo jeedo (cf. 1:3), kan la subkay, adeegaha Uu Ilaah sida gaarka ah u doortay ee ballammadii iyo qorshayaashii Ilaah ebyi lahaa, (cf. 10:6).

Ereyga “Masiixa” waa turjumaadda Giriigge ee Afka Cibraaniga oo ah “Kii la subkay” Axdigii Hore dhexdiisii saddex kooxood oo hoggaamiyeyaal ah ayaa lagu subkay saliid gaar ah oo qudduus ah (1) Boqorradii Israa’iil, (2) wadaaddadii sare ee Israa’iil, iyo (3) Nebiyadii Israa’iil. Waxa ay calaamad u ahayd Ilaah doorashadiisa iyo u qalabayntooda xagga Adeeggiisa. Ciise Masiix wuu kaamilay saddexdan subkid oo dhan (cf. Cibraaniyada 1:2-3). Isagu Ilaah muujintiisii oo kaamil ah ayuu ahaa, maxaa yeelay wuxuu ahaa Ilaah oo jidh ahaan isugu keen muujiyey (cf. Ishacyaah 7:14; 9:6; Miikaah 5:2-5a; Kolosay 1:13-20).

▣

**NASB** “xagga jidhka Masiixu ka yimid iyaga, kan wax walba ka sarreeya oo ah Ilaah ammaanta leh weligiis’

**NKJV** “Maxiisa yimid, ee wax walba ka sarreeya, ee ah Ilaaha weligii ammaanta leh”

**NRSV** “Masiixa imanaya, ee wax walba ka sarreeya, Ilaah ammaanay weligii”

**TEV** “Oo Masiixa oo aadane ah, oo ka soo jeeda farcankiisa. Ilaah oo ah kan wax kasta ka sarreeya, ammaanu ha u ahaato weligeed”

**JB** “Noqday Masiixa wax walba ka sarreeya, Ilaah weligii ammaanta leh”

Marka maxwe ahaan loo eego tani waxay ahaan lahayd barasho (TEV), laakiin xaaladdu waxay qiimaynaysaa Bawlos xoojinta ah Ciise Ilaahnimadiisa. Bawlos had iyo jeer ereyga *Theos* una adeegsado Ciise, laakiin wuxuu ku isticmaalay (cf. Falimaha Rasuullada 20:28; Tiitos 2:13; Filiboy 2:6). Aabbayaashii bilowgii Kaniisadda dhammaantood waxay qoraalkan u turjumeen in uu la xidhiidho Ciise.

▣ **“kan wax walba ka sarreeya”** Middani waxay sidoo kale qeexid u tahay Ilaaha Aabbaha ah ama Ciise oo Wiilka ah. Waxay dib ugu laabanaysaa hadalkii Ciise eek u jiray Matayos 28:19 iyo kii Bawlos eek u jiray Kolosay 1:15-20. Mucjisada weedhani waxay mujinaysaa doqonnimadii Israa’iil ay ku diidday Ciiseaha reer Naasareed.

▣ **“weligiis”** tan maca ahaa waa weedh sarbeebed Giriig ah “da’da oo dhan” (cf. Luukos 1:33; Rooma 1:25; 11:36; Galatiya 1:5; I Timoteyos 1:17). Tani waxa ay mid ka tahay dhowerka weedhood ee xidhiidhku ka dhexeeyo (1) “da’ dhammaanteed” (cf. Matayos 21:19; {Maarkos 11:14}; Luukos 1:55; Yooxanaa 6:5,58; 8:35; 12:34; 13:8; 14:16; II KORintos 9:9) ama (2) “faca fackasta oo dha” (cf. Efesos 3:21). Halkaa waxaa ka muuqata in aqysan jirin wax qiyaas ah oo u dhexaysa sarbeebahan xagga ereyga “Weligeed.” Ereyga “faca” laga yaabee in ay tahay erey jamac ah oo ku jira dareen wax muujinaya isku xidhka naxwaha loo yaqaan “The plural of Majesty” ama waxaa laga yaabaa in ay ka hadlayso aragtida dhowerka “da” dareenka Yuhuudda ee ah “da’dii dembi la’aanta,” “da’dii sharka.” “da’da imanaysa” ama “da’da xaqnimada.”

▣ **“Aamiin”** Ka eeg mawduuc gaar ah 1:25.

**NASB 9:6-13**

<sup>6</sup>laakin mana aha sidii iyadoo dhacay. Waayo, kuwa Israa'iil ka dhashay kulligood reer bini Israa'iil ma wada aha. <sup>7</sup>Farcankii Ibraahim oo ay yihiin aawadeed kulligood carruur kuma wada aha, laakiin waxaa la yidhi, Kuwa Isxaaq ka farcama ayaa farcankaaga loogu yeedhi doonaa. <sup>8</sup>Taas waxaa weeyaan, inaan carruurta jidhku ahayn carruurta Ilaah, laakiin carruurtii loo ballan qaaday ayaa farcan lagu tiriyaa. <sup>9</sup>Waayo, kanu waa hadal ballan ah, Wakhtigan oo kale ayaan kuu iman doonaa, oo Saarah waxay dhali doontaa wiil. <sup>10</sup>Oo taas oo keliyana ma ahee, laakiin Rebeqahna mid bay u uuraysatay, kaas oo ahaa aabbeheen Isxaaq. <sup>11</sup>Waayo, carruurta oo aan weli dhalan oo aan weli samayn wanaag iyo xumaan midna, in qasdiga Ilaah doorashada ku istaago. oo uusan ahaan xagga shuqullada. Laakiin xagga kii dadka u yeedha, <sup>12</sup>waxaa iyada lagu yidhi, Kan weynu wuxuu u adeegi doonaa kan ka yar. <sup>13</sup>Sida qoran, Yacquub waan jeclaaday, Ceesawse waan necbaaday.

**9:6 “hadalkii Ilaah”** Marka arrintan la eego weedhani waxa ay ku saabsan tahay ballammadii axdiyeed eek u jiray Axdigii Hore. Ilaah ballammadiisu waa hubanti (cf. Tirintii 23:19; Ishacyaah 40:8; 55:11; 59:21).

**NASB, NRSV,**

**TEV, JB**

**“dhacay”**

**NKJV**

**“uusan qaadin wax saamayn ah”**

Ereygan (*ekpiptō*) Septuagint-ga dhexdiisa ayaa dhowr shay loo isticmaalay (cf. Ishacyaah 6:13) ama qof (cf. Ishacyaah 14:12) dhicitaan. Halkan waxaa ah caddayn xoogan oo kaalim ah, oo tusaale ka bixinaysa xaaladda ahaansho ee natiijooyinka waaraya (laakiin waa la diiday). Bal ogaysiiska kore ka eeg sida Ereyga Ilaah hubaasha u yahay.



**NASB**

**“kuwa Israa'iil ka dhashay kulligood reer bini Israa'iil ma wada aha”**

**NKJV**

**“in kuwa Israa'iil oo dhan aysa Israa;iil wada ahayn”**

**NRSV**

**“in Israa;iil oo dhan aanan si run ah Israa'iil looga lahayn”**

**TEV**

**“Ma aha in dadka Israa'iil oo dhan ay yihiin dadka Ilaah”**

**JB**

**“ma aha kuwa Israa'iil ka soo farcamay ay Israa'iil wada yihiin”**

Macnaha hadalkan iska daba noqonayaa waxaa weeye farqiga kitaabku sheegayo ee u dhexeeya macnaha ereyga ‘Israa’iil’ : (1) Israa’iil macnaheedu waxaa weeye faracii Yacquub (cf. Bilowgii 32:22-32); (2) Israa’iil macnaheedu waxaa weeye dadkii Ilaah ee la doortay (cf. TEV); ama (3) Israa’iil Ruuxu ah, Israa’iil oo macnaheedu yahay Kaniisadda, (cf. Galatiya 6:16; I Butros 2:8,9; Muujintii 1:6) oo ay ka soo hor jeeddo Israa’iisha dabiiciga ah (cf. aayadaha 3-9). Qaar ka mid ah carruurtii Ibraahim oo qura ayaa ahaa carruurtii ballanka (cf. aayadda7). Xitaa Yuhuuddu marka Ilaah xaq kulama aysan socon intii ay farac ahaan soo jireen (cf. aayadda 7), laakiin iimaankooda (cf. 2:28-29; 4:1ff; Yooxanaa 8:31-59; Galatiya 3L7-9; 4:23). Waa haraagii rumaysadka lahaa kuwii helay ballammadii Ilaah ee rumaysadka ugu socday iyagii (cf. 9:27; 11:5).

Aayadda 6aad waxa ay bilaabaysaa diidmooyin la diiday (cf. 9:14,19,30; 11:1). Tani wax ay sii wadaysaa weerarkii Bawlos lagu hayey ee hawshiisan ku aadanaynd. Waxay ay bixinaysaa macnaha kan wax ka soo hor jeesanaya (cf. Matayos 1:2,6,7,[labo jeer], 12,13; 2:14,17 [labo jeer]; 3:7,13,14).

**9:7** Badhka labaad ee aayaddan waxaa laga soo xigtay Bilowgii 21:12d. Ma aha in carruurta Abraham oo dhan ay ahaayeencarruurtii ballane Axdigii Ilaah (Bilowgii 12:1-3; 15:1-11; 17:1-21; 18:1015; Galatiya 4:23). Tani waxa ay muujinaysaa xadka u dhexeeya Ismaaciil iyo Isxaaq sida ku jirta aayadaha 8-9 iyo Ceesow ee aayadaha 10-11.

**9:8** Halkan Bawlos wuxuu ku isticmaalayaa ereyga “jidh” si uu u muujiyo farcanka quruun ahaaneed (cf. 1:3; 4:1; 9:3,5). Wuxuu ku eegayaa sinnaanshaha carruurtii dabiiciga ahayd ee Ibraahim (Yuhuuddii 9:3) ay la leeyihiin curruurta ruuxiga ah (carruurtii ballan qadka) ee Ibraahim (Kuwaasoo rumaysan ku aammini lahaa Masiixii Ilaah ballan qaaday). Farqiga kuwani la mid ma aha sida tii 8:4-11, aadanihii dhacay iyo aadanihii la madax furtay.

**9:9** Middan waxaa laga soo xigtay Bilowgii 18:10,14. Wiilkii ballanka (“Faracii”) wuxuu ka iman doonaa Sarah sidii Ilaah ku dhawaaqay. Sida dhacaysa middan waxay ku dhammaystirmi doontay dhalashadii Masiixa Isxaaq wuxuu oofin gaar ah u ahaa ballankii Ilaah ee Ibraahim sida ku jirta Bilowgii 12:1-3 ee saddex iyo toban sano markaa ka horraysay.

**9:10** Xaasaskii Ibraahim, Isxaaq iyo Yacquub waxay ahaayeen kuwo aan midho lahayn, waxba maysan dhali Karin. Awooddarradoodii ahayn in ay ilmo yeelan waayaan waxay ahayd mi Ilaah ku muujinayo in uu ilaalinayey aqxdigii ballammihisa, ee qadka Masiixa.

Waddada kale waxay ahayd in waddada runtaq ah ee Masixiisu aysan marna soo mari lahayn wiilka ugu weyn goyska (ee dhaqan ahaan la sugayey). Furuhu waa Ilaah doorashadiisa (cf. aayadaha 11-12).

**9:11-12** Aayadaha 11-12 iyo labo iyo toban waa isku hal weedh xagga Giriigga. Waxaa tixraaceeda laga soo xigtay Biulowgii 25:19-34. Tusaalahan waxaa loo isticmaalaa in lagu muujiyo doorashada Ilaah (cf. aayadda 16) in aysan ahayn (1) faraca aadanaha soo yaalkooda ama (2) ama mudnaan ama guulo (cf. aayadda 16). Tani waa wadnaha Injiilka, Axdiga Cusub (cf. Yereymyaal 31:-34; Yexesqeel 36:22-36). Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa waajib ah in la xusuusnaado in doorashada Ilaah ayan ahayn ama loola jeedin in ka saarayso, laakiin waa ay ku daysaaa! Masiixu wuxuu ku iman doonaa midh la dortay, iyadoo ay sidaas tahay se, waxa uu u imanayo waa dhaamaan (kuwa iimaanka qaata, cf. 2:28-29.4:3,22-25; cutubka 10).

**9:11** “**qasdiga**” Kani waa isku xidhka ereyga *pro* oo lagu daray *tithēmi*, oo leh dhowr macne

1. Rooma 3:25
  - a. In si waadax ah loo furo.
  - b. Hadiyad
2. Horay loo sii qorsheeyay
  - a. Bawlos ka hor, Rooma 1:13
  - b. Ilaah hortii Efesos 1:9

Habka ereyga MAGACA AH (*Prothesis*) ee qoraalkan macnihiisu waa “in la hor dhigo”

1. Waxaa loo isticmaalay hawlaha kala duwan ee macbudka, Matayos 12:4; Maarkos 2:26; Luukos 6:4
2. Waxaa loo isticmaalay in lagu kala saaro qaabka ujeedkii badbaadada Ilaah, Rooma 8:28; 9:11; Efesos 1:5,11; 3:10; II Timoteyos 1:9; 1:10

Dhawr jeer ayaa Bawlos isticmaalayaa ereyo isku xidhan isagoo ku daraya meeleyaha *pro* oo horay ka gelinaya adigoo ku arki kara cutubyada 8 iyo 9 iyo Efesos

1. *Proginōskō* (Horay u oгаа) Rooma 8:29
2. *Proorizō* (horay loo qaabeeyay), Rooma 8:29 (Efesos 1:5.11), 30 (Efesos 1:9)
3. *Prothesis* (Ujeeddo horay loo qorsheeyay) Rooma 9:11
4. *Proetoimazō* (Si ka badan loo soo hor dhigo) Rooma 9:23
5. *Prolegō* Waa hore la sheegay), Rooma 9:29
6. *Proelpizō* (Hroay loo rajaynayey), Efesos 1:12

**9:12** Tani waa xigasho ka timid wax sii sheegidii Bilowgii 25:23 oo ku saabsan ceesow iyo Yacquub. Tani waxay muujinaysaa in Rebeqah iyo Yacquub ay sameeyeen waxsiisheegiddii iyagoo aan shaqsi ahaan u kasban, qiyaanadii Isxaaq si uu u qaato barakada!

**9:13** “**Ceesawse waan necbaaday**” Tani waa xigasho ka timid Malaakii 1:2-3. “Necbaad” waa sarbeeb is barar dhig oo Cibraani ah. Waxa aan la jeclaysan ayey u muuqanaysaa marka Af Ingiriisi lag usheego middan, balse aannu barbar dhigno Bilowgii 29:31-33; Hsarciga Ku Noqoshadiisa 21:15; Matayos 10:37-38; Luukos 14:26, iyo Yooxanaa 12:25. Ereyada muujinaya “jacaylka” ama “nacaybka” ma aha kuwo la xiriira dareenada Ilaah ee la xiriira shaqsiyadan, laakiin waa ku toosnaantiisii ballankiisii qadkii uu Masiixu ku iman lahaa. Yacquub wuxuu ahaa wiilkii ballanka, ee ay eku salaysnayd wax-sii-sheegidda Bilowgii 25:23. Ceesow, sida ku jirta Malaakii 1:2-3, eek u saabsan quruuntii reer Edom (faracii Ceesow).



**NASB 9:14-18**

<sup>14</sup>Maxaan nidhaahnaa haddaba? Ma xaqdarro baa Ilaah la jirta? Ma suurtoowo! <sup>15</sup>Waayo, wuxuu Muuse ku yidhi, Waan u naxariisan doonaa kii aan u naxariisto. waanan u nixi doonaa, kii aan u naxo. <sup>16</sup>Sidaas daraaddeed xagga kan doonaya ma aha, xagga kan ordana ma aha, laakiinse waa xagga Ilaaha naxariista leh. <sup>17</sup>Waayo, Qorniinku wuxuu Fircoon ku leeyahay, Tan daraaddeed baan kuu sara kiciyey inaan xooggayga adiga kaa dhex muujiyo iyo in magacayga dhulka oo dhan lagu faafiyo. **18**Haddaba kuu doonayo wuu u naxariistaa, kuu doonayona qalbigiisuu engejiyaa.

**9:14 “Maxaan nidhaahnaa haddaba”** Sida badan Bawlos wuxuu adeegsadaa habkan weerarka ah (cf. 3:5; 4:1; 6:1; 7:7; 8:31; 9:14, 19,30).

▣ **“Ma xaqdarro baa Ilaah la jirta”** Sidee Ilaah u qaadi karaa masuuliyadda aadanaha haddii Ilaah awooddiisu ay tahay wixii uu go’aansado (cf. aayadda 19)? Ani waa yaabka doorashada. Ujeeddada qoraalkan waxaa weeyaan in Ilaah uu xor u yahay wixii uu doonayo in u sameeyo aadanaha (kuwaa soo ah aadane fallaago ah), oo arrintu si hasta o ay ahaato ba Qaaddirnimada Ilaah waxaa lagu qeexay naxariis (eeg ogaysiiska aayadda 15), ma aha awood qaydhiin ah.

Waxaa habboon in la ogaado in qaaddirnimada Ilaah aysan ku salaysnayn ogaal badnida Ilaah u leeyahay ficillada iyo doorashooyinka mustaqbalka ee aadanaha. Haddii ay middani run ahaan lahayd dabeeto dooraqshooyinka iyo ficillada iyo mudnaanta shaqsiyaadku waxay ahaan lahaayeen kuwo Ilaah doorashooyinkiisu ay sal u yihiin (cf. aayadda 16; I Butros 1:2). Tan wixii ka dambeeyaa waa aragtida dhaqan ahaaneed ee Yuhuuddu ka qabaan barwaaqada xaqnimada (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 27-28; Ayuub iyo Sabuurrada 73). Laakiin, Ilaah wuxuu doortaa in uu barakadeeyo kuwa aan mudnayn isagoo u soo marinaya rumaysadka (ma aha camal ama shaqo ay qabtaa, cf. 5:8). Ilaah wax kasta wuu og yahay, laakiin wuxuu doortay in uu doorashooyinkiisa ku xadeeyo (1) naxariis iyo (2) ballan. Waxaa jirta jawaab lagama maarmaan ah oo laga doonayo aadanaha, laakiin waxa ay raacaysaa caddaynta ugu dambaysa ee uu ku muujinayo Ilaah doorashadiisa bedeelida hab nololeedka.

▣ **“Ma suurtoowo”** Diidmadan waa mid ku yar adeegsida Bawlos ee uu u adeegsado su’aalaha kuwa isaga ka soo hor jeeda (cf. 3:4,6,31; 6:2,15; 7:7,13; 1:1,11 sidoo kale I Korintos 6:15; iyo Galatiya 2:17; 3:21; 6:14).

**9:15** Tani waa xigasho ka timid Baxniintii 33:19. Ilaah waa u xof in uu sameeyo ujeedooyinkiisa la xidhiidha madax furashada. Xitaa Muuse ma astaahilin barakada Ilaah (cf. Baxniintii 33:20). Wuxuu ahaa gacan ku dhiigle (cf. Baxniintii 2:11-15). Furuu waa in doorashooyinkiisu ay yihiin kuwo naxariis ah (cf. aayadaha 16, 18-23; 11:30,31,32).

**9:15-16 “naxariista”** ereygan Giriigga ah (*eleos*, cf. aayadaha 15,16,18,23; 11:30,31,32). Waxaa lagu isticmaalay Septuagint (LXX) si loogu tarjumo ereyga gaarka ah ee Ciraaniga ah *hesed* (xusuusnow qoraayadii Axdiga Cusubi waxa ay ahaayeen aqoon yahanno Cibraaniyiin ah oo jidadka Giriigta wax ku qoraya), oo loola jeeday, “waxay ahaayeen kuwo axdiga heegan iyo daacad u ah.” Ilaah naxariistiisa iyo doorashadiisu waa jamac isku xidhan, (Yuhuudda [Isxaaq], ma aha [Ismaaciil]; Israa’iil [Yacquub], ma aha Edom [Ceesow], laakiin rumaysadka Yuhuudda iyo rumaysadka kuwa aan Yuhuudda ahayn, cf. aayadda 24) si la mid ah sida shaqsiyada. Runtani waa mid ka mid ah furayaasha lagu furanayo yaababka mad’habta kartidaq (madax furshada caalamka). Furaha kale ee arrinta cutubyada 9-11 dabeecadda Ilaah e aan is beddelin—naxariistiisa (cf. 9:15,16,18,23; 11:30,31,32), mana aha camal ama wax qabad aadane. Naxariis doorasho soo dhex martaahi waxay hubaal gaadhi doontaa dhammaan kuwa Masiixa rumaysan. Kan dadka oo dhan u fura irrida iimaanka (cf. 5:18-119).

**9:17-18** aayadda toddobao iyo tobaan waa xigasho laga soo qaatay Baxniintii 9:16 iyo aayadda 8 oo ah gunaanad ka yimid xigashada. Fircoon waxaa loo sheegay in qalbigiisa la adkaynayo sida ku jirta baxniintii 8:15,32,; 9:34. Ilaah ayaa sheegaya in uu adkaynayo qalbigiisa sida ku jirta Baxniintii 4:21; 7:3; 9:12; 10:20,27; 11:10. Tusaalahan waxaa loo adeegsaday in lagu muujiyo qaaddirnimada Ilaah (cf. aayadda 18). Fircoon doorashooyinkiisa isgaa masuula ka ah. Ilaah madax adkaanta fircoon ayuu u adeegsanayaa, in u ku oofiyo doonistiisa ku aaddan Israa’iil (cf. aayadda 18).

Sidoo kale ogsoonow ijeeddada falimaha Ilaah ee fircoon waxa ay ahaayeen maxad furasho; iyo fursad wax ku darineed. Waxaa loogu talo galay:

1. In ay muujiyaan awoodda Ilaah (oo ay ka soo hor jeedo dabeecaddii iyo ilahyadii xawayaanka ahaa ee Masaarida, sida ku qoran Bilowgii 1, ee ah wixii uu ku sameeyay ilaahyadii Baabilyoon)
2. In Ilaah isu muujiyo Masar iyo qiimaha kale ee weyn ee uu dhulka oo dhan u hayo (cf. aayadda 17).

Fikradda reer Galbeedka (Maraykanka) ahi waxay buunbuunisaa shaqsiyada, laakiin fikradda barigu waxay ku dhisan tahay baahida loo qabo wada shaqaynta guud. Xusuuso, sidoo kale wada shaqanta tusaalooyinka Axdigii Hore ee:

1. Carruurtii ugu horraysay ee Ayuub oo dhimanaya wada hadalkii Ilaah shaydaanka awgeed (cf. Ayuub 1-2)
2. Askartii Israa'iil oo u dhimanaya dembigii Caakaan aawadii (Yashuuca 7)
3. Daa'uud ilmihisii curadka ahaa ee Badshebac oo u dhimanaya dembigii Daa'uud awgii (cf. II samuu'eel 12"15).

Waxaa dhammaanteen na waxyeelleeya doorashooyinka kuwa kale. Jidh ahaanta waxaa laga arki karaa Axdiga Cusub ee Rooma 5:12-21.

#### **NASB 9:19-26**

<sup>19</sup>Waxaad igu odhan doontaa, **Muxuu weli ii eedaynayaa? Waayo, yaa doonistiisa ka gees noqda?** <sup>20</sup>Laakiinse, nin yahow, kumaad tahay kaaga Ilaah u jawaabayow? Wixii la sameeyey miyey kii sameeyey ku odhan doonaan, Maxaad sidan noogu samaysay? <sup>21</sup>Dheryasameeyuhu miyuusan lahayn amar uu ugu taliyo dhoobada inuu fud keliya in ka sameeyo weel cisa leh, inta kalena mid an cisa lahayn? <sup>22</sup>Bal maxay la tahay Ilaah haddii, isagoo doonaya inuu cadhadiisa muujiyo oo xooggiisa dadka ogeysiyo, uu samir badan ugu dulqaatay weelasha cadhada oo loo diyaariyey baabbi'idda, <sup>23</sup>23iyo inuu hodantinimadii ammaantiisa ogeysiyo weelasha naxariista oo uu hore ugu diyaariyey ammaanta, <sup>24</sup>xataa kuweenna uu u yeedhay oo uusan uga yeedhin Yuhuudda oo keliya laakiinse uu uga yeedhay quruumaha kalena? <sup>25</sup>Siduu Hooseeca ka dhex yidhi, Kuwo aan dadkaygii ahayn ayaan u bixin doonaa, Dadkayga, Tu aan ahayn gacalisadaydiina waxaan u bixin doonaa, Gacaliso. <sup>26</sup>Oo waxay noqon doontaa, meeshii laga yidhi iyaga, Dadkayga ma ihidin, Meeshaas waxaa looga bixin doonaa, Carruurtii Ilaaha nool.

**9:19 “yaa doonistiisa ka gees noqda”** Tani waa caddayn kaamilan oo xoojinaysa dhacdo ku degtay natiijooyin soo noqnoqday (cf. II Taariikhda 20:6; Ayuub 9:12; Sabuurada 135:6; Daanyeel4:35). Weerarku wuu sii socdaa. Marka aannu caqli ahaan eegno, in la raaco doodda tan Bawlos wado ayaa ah waddada ugu wanaagsan ee lagu ogaan karo ama lagu fahmi karo fikirka Bawlos. Ee hordhaca cutubka, B.,1. Doonista Ilaah waxa ay u baahan tahay in lagu arko labo heer. Midka koowaadi waxaa weeye qorshayaashiisii madax furashada ee dhammaan aadanihii dhacay nooc kastuu yahay ba (Bilowgii 3:15). Qorhsyaashani waa kuwo aysan saamayn ku lahayn doorashada aadanuhu. Laakiin heerka labaad, Ilaah wuxuu doonayaa in uu aadanaha u adeedsado aalad ahaan (cf. Baxniintii 3:7-9 iyo 10). Dadka waxaa loo doortay in ay dhammaystiraan qorshayaashiisa (ha noqoto Muuse oo Ilaah raacsanaa, iyo fircoon oo ka soo hor jeestay labadaba).

▣ **9:20-21** Qiyaastan waxaa laga soo qaadanaayaa Ishacyaah 29:16' 45:9-13; 64:8 iyo Yeremyaah18:1-12. Tusaalaha YHWH ee dheri sameeyahawaxaa loo isticmaali jiray Ilaaha abuuraha., halka aadanuhuna ay ka yimaaddeen dhoobada (Bilowgii 2:7. Bawlos wuxuu meeshan ku adeegsanaanayaa saddex su'aalood oo dheeraad ah marka uu ka haaadlayo aratida qaarridnimada Ilaah labada ugu horreeyaahi waxa ay ku jiraan aayadda 20 tan saddexaadna aayadda 21. Su'aasha ugu dambaysaahi wax ay u labanayssa Ilaah doorashadiisa toosan eek u aaddan sidii Muuse iyo tiisii diidmada ahayd ee Forcoon. Arrimo tidaas la mid ah waxaa lagu arkayaa (1) Isxaaq – iyo Ismaaciil, aayadadaha 8-9; (2) Yacquub iyo –Ceesow sida ku jirta aayadaha 10-12; iyo (3) oo ah quruunta Israa'iil iyo quruunta edom sia ku jirta aayadda 13. Arrintani waa mid sidoo kale bawlos aad ugu kroaysay si uu dib ugu soo celiyo Yuhuuddii rumaysad laawayaasha ahaa. Ilaah doorashaaadiisa xorta ah waxaa ugu dambayntii soo koobsanaysa sidii uu markii dambe ugu soo daray dhammaan xitaa kuwii aan Yuhuudda ahaayn (aayadaha 24-29 & 30-33)!

▣ **9:22 “Haddii”** Taani waxa ay qatb ka tahay WEEDHAKA XAALADDA KU XIDHAN, oo ah waxa badiyaa laga rajeeyo ama runta loogu qaadan karo ujeeddada qoraaga, laakiin dhammaystir naxwei ma laha. Aaydaha 22-

24 waa weedh Giriigga dhexdiisa. Aayadda 22 waxa ay muujinaysaa dabeecadda Ilaah ee madax furashada ah. Ilaah Waa Ilaah caadil ah. Waa mid mar walba u xisaaba baahiyadooda. Laakiin Isugu sidoo kale waa Ilaah caakin ah. Aadanaha oo dhan way mudan yihiin in ay dhintaan (xf. 1:18-3:21). Xukunku ma aha farriin wanaagsan! Ilaah dabeecaddiisa ugu horraysa waa naxariis, ma aha caro (Sharciga Ku Noqoshadiisa %:9-10; 7:9; Hosheeca 11:8-9). Dpoorashadiisu waa madax furasho (Yexesqeel 36:22-33). Wuu u dul qaad badan yahay aadanaha dembiga badan (xf. Yexesqeel 18). Isagu wax balaayo ah ayuu u isticmaalaa ujeedooyinkiisa madax furashada tusaale ahaan waxaan u soo qaadan karnaa (shayddaan, firciin, sixirkii Edor, Aashuuriya, Nabdokunasar, Cyrus, iyo cutubka 11, Israa'iishii aan rumaysadka lahayn)!



**NASB** “doonaya inuu cadhadiisa muujiyo”  
**NKJV** “doonaya in uu cadhadiisa soo ban dhigo”  
**NRSV** “rabitaan u leh in uu cadhadiisa doo ban dhigo”  
**TEV** “raba in uu xanaaqiisa soo ban dhigo”  
**JB** “Diyaar u ah in uu xanaaqiisa muujiyo”

Ilaah wuu muujiyaa cadhadiisa si uu u muujiyo in la goaado labadaba awooddiisa (cf. aayadaa 22), iyo barwaaqada ammaantiisa (cf. aayadda 23). Falimaha Ilaahayd waa kuwo mar kasta leh ujeedooyin madax fureasho (marka laga reebo *Gehenna*, oo ah ciqaabta soocitaanka ugu dambeeya ee dambiiyalaasha).

▣ “weelasha cadhada” ereyganii wuxuu soi wadayaa tusaalihii Bawlos eek u aaddanaa dhoobada sida ku jirta aayadaha 20 iyo 21. Tani waxa ay qaxiiq wax uga timaamaysaa rumaysad darrada aadanaha Ilaahna wuxuu u isticmaalaya awood dheeraad ah qorshihiiisa madax furashada.



**NASB** “diyaariyey”  
**NRSV** “la sameeyay”  
**TEV** “la qiyaasay”  
**NJB** “la habeeyay”

Kani waa hadan MALDAHA OO KAAMIL AH. Ereygawaxaa loo isticmaala wax sidii la rabay ee ay ahaan lahaayeen loo dirariyey. Fallaagada rumaysad la'aantu waxa ay yeelay doontaa maalinteeda xukunka iyo natijada. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Ilaah waxa uu isticmaalaa kuwa aan runaysadka lahayn si uu u kaamilo ujeedooyinkiisa madax furashada ee ballaadhan ee wax ku soo daridda ah.

M. R. Vincent, *Word Studies*, Qaybtiisa labaad, waxuu ku sheegayaa “Ilaah burburka kuma qanco, laakiin dareenka sifaha wax diyaarin. *Diyaarinta iyo bisaylka* laga dhaxlo burburka dhexdiisa. Ka qayb galka lagu caddaynayo xaaladda haatan taagan ee horay loo sii habeeyey, laakiinse aan sharraxaadda laga dhiibin sidii loo habeeyay.”

▣ “baabbi'idda” Ka eeg mawduuca gaarka ah ee 3:3.

**9:23 “inuu hodantinimadii ammaantiisa ogeysiisii”** Runai waxay sidoo kale ku caddahay Rooma 8:29-30 iyo Efesos 1:4,11. Cutubkani waa qeexidda ugu xooggan ee sheegaysa qaaddinimada Ilaah ee Adiga Cusub. Ma jiro wax muran ah oo ka iman kara in Ilaah gebi ahaanba masuul ka yahay uunka iyo madax furashada. Runtan iyada ahi ma aha mid marna la qafiifiyey. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa in doorshada Ilaah lagu qiyaasaa ama looga cabbir qaataa sida axdigu ugu xidhan yahay uunka aadanaha ah, ee uu araggiisii ka sameeyay. Waa wax hubaashii dhab ah in qaar balammadii Axdigii Hore ka mid ah sida Bilowgii 9:8-17 iyo 15:12-21, aysan wax shuruuc ah ku xidhnayn, oo aysan la xidhnayn jawaab ama ficil aadane ka yimid, laakiin ballammada qaar waxay ku jidhan yihiin jawaab laga doonayo aadanaha (i. e., Ceedan, Nuux, Muuse, Daa'uud). Ilaah wuxuu qorshe madax furasho u hayaa uunkiisa, mana ah mid ku imanaysa wax qabad aadane oo ay wax uga qaban karaan qorshihiiisa. Ilaah isaga ayaa doorta shaqsiyaadka uu doonayo in ay ka qayb qaataan qorshayaashiisa. Fursaddan ka qayb qaadashadu waa mid Tiyoollaji ahaaneed ama fiqi ahaaneed waana xiisad ama arrin u dhexaysa qaaddinimada Ilaah (Rooma 9) iyo doorashada xorta ah ee aadanaha (Rooma10).

Ma aha wax macquul ah in hal caddayn laga qaato kitaabka tan kalena la iska tuuro. Waxaa jira arrin u dhexaysa mad'habyada. Maxaa yeelay dadka reer galbeedka ahu waxay runtun u qaataan sidii xidhxidhmo oo kale. Mad'habyada waa in ay xidhiidh la leeyihiin mad'habyada kale. Runtu waa run qoto dheer.

Runtii wax yaab leh ayaa hal yaal! Bawlos halkan kuma sheegin gabaggabada waxa kuwa aan rumaysadka lahayn loo sii diyaariyey (*katabtizō*) ee ah cadhada (cf. aayadda 22) kuwa rumaysadka lehna loogu diyaarshay (*proetoimazō*) ammaanta (cf. aayadda 23). Doorahsada Ilaah ma hal cunsur oo keli ahbaa, mise waxa ay ku salaysan tahay naxariis u ahaata dadka oo dha, oo qaarba deeqdiisan haba diidaane? Miyey aadanuhu qayb ku leeyihiin mustaqbalkooda u gaar ah (cf. 9:30-10:21)? Waxaa jira war bixinno dheeraad ah oo ka imanaya labadaba (Augustine –Pelagius) Ani ahaan ujeedka axdigu wuxuulabadaba ku xidhiidhiyaa xooga ku jira Ilaah. Aadanuhu waxa ay ka jawaabi karaan oo qura wixii Ilaah u tilaamo iyaga (tusaale ahaan, Yooxanaa 6:44,56). Laakiin ani ahaan, dabeecadda Ilaah waa mid naxariis ah oo aan cadho ahayn. Wuxuu soo gaadhsiiyaa dhammaan aadanaha dareenka leh ee uu araggiisa ka abuuray (Bilowgii 1:26,27). Waan la halgamaa arrintan. Aad ayey u awood badan tahay, welise way xanuujinaysaa caddaan iyo madowba. Ujeedkeedu waa Yuhudda aan runaysadka lahayn, ee ay ku timid natijadii aan kuwa aan Yuhudda ahayn ku yimaadeen. (Cutubka 11)! Laakiin tan oo qura ma aha qoraaka sheegaya dabeecadda Ilaah!

▣ “**ammanta**” ka eeg tasmada 3:23.

▣ **9:24** Aayaddani waxa ay muujinaysaa in ballanka Ilaah uu ka ballaaran yahay Israa’iisha mitidka ah. Ilaah naxariis ayuu u muujieyey aadanaha taasoo ah doorashadiisa. Ballantii Bilowgii 3:15 waxay la xidhiidhaa aadanaha oo dhan (maxaa yeelay wax Yuhuud ah kuma jiraan illaa laga soo gaaro cutubka 12). U yeedhiddii Abraham waxa ay la xidhiidhay aadana oo dhan, Bilowgii 12:3. U yeedhiddii Israa’iil ee boqortooyadii wadaadnimadu waxa ay la xidhiidhay aadanaha oo dhan (cf. Baxniintii 19:5-6)! Tani waa mucjiso Ilaah, oo la qarsoonayd, laakiin hadda si kaamil ah loo muujiyey (cf. Efesos 2:11-3:13; Galatiya 3:28; Kolosay 3:11).

Bawlos ijeedkiisa ku jira aayadda 24 waxaa lagu tilmaami doonaa xigashooyin Axdigii Hore ee (aayadaha 25-19).

1. Aayadda 25, Hoosheeca 2:23
2. Aayadda 26, Hoosheeca 1:10b
3. Aayadda 27, Ishacyaah 10:22 iyo/ama Hoosheeca 1:10a
4. Aayadda 28, Ishacyaah 10:23
5. Aayadda 29, Ishacyaah 1:9

▣ **9:25-26** arrinta ku jirta qoraalkan waxa ay ka timid Septuagint (LXX) ee Hoosheeca 2:23 ( waxa ay ;leedahay xoogaa sharraxaad ah), 1:10, waxa ay ka hadlaysaa tobankii ee qabiilo ee waqooyiga, laakiin Bawlos waxa uu u la jeedaa kuwa aan Yuhudda ahayn. Tani waa isla sidii uu qoraa Axdiga Cusub ahi isticmaalay isagoo ka soo qaadnaya Axdiga Hore. Waxay kaniisadda u arkeen oofinta ballamihii Reer Bainu Israa’il (cf. II Korintos 6:16; Tiitos 2:14; I Butros 2:5-9). Marka aad eegto qoraalka Hoosheeca waxa uu ka hadlayaa rumaysadka Israa’iil. Ilaah soo celinayo tobankii qabiil ee reer waqooyiga ee sanam caabudayaasha ahaa, Bawlos wuxuu midan u arkay in ay caddayn u tahay jacaylka iyo cafiska Ilaah kuwaasoo maalin ku soo biiri doonaan xitaa kuwa cawaanta ah (kuwa aan Yuhudda ahayn).

**NASB :27-29**

<sup>27</sup>Oo Isayos wuxuu ku qayliyey wax Israa’iil ku saabsan isagoo leh. In kastoo tirada reer bini Israa’iil noqoto sida cammuudda badda, intii hadhay waa badbaadi doontaa, <sup>28</sup>waayo, Rabbigu hadalkiisa dhulkuu ku samayn doonaa, isagoo dhammaystiraya oo soo gaabinaya, <sup>29</sup>oo sidii Isayos hore u yidhi, Haddaan Rabbigii Saba'oot farcan inoo reebin. Sidii Sodom baan noqon lahayn, oo sidii Gomora baa laynaga dhigi lahaa.

**9:27**

**NASB, NKJV,**

**NRSV, NJB**

**“in kastoo”**

**TEV**

**“oo xitaa”**

Tani waa weedh shuruudeed heerka saddexaad ah (*ean* oo lagu daray SUBJUNCTIVE MOOD), oo qeexaysa fal dheeraad ah.

**9:27-28** Tani waa xigasho luntay oo laga soo qaatay Suptuagint (LXX) ee Ishacyaah 10:22-23. Textus Receptus ayaa ku daray aayad gaboggabo ah oo ka timid Suptuagint-ga Ishacyaah 10:23. Laakiin waa ay ka maqan tahay qoraalladii Gudduuska ahaa ee ee Giriigti hore. P46 x, A, iyo B, oo muujinaysa in kuwii koobiyeenayey ay goor dambe ku dareen. UBS<sup>4</sup> waxa uu ku muujinayaa “wax xaqiiq ah”

▣ **“sida cammuudda badda”** Qaybtan luuqad susaaleedda ah waxa ay kahadlaysaa natiijada faraha badan eek u jirta ballankii Ilaah ee Israa’iil (cf. Bilowgii 15:5; 22:17; 264).

▣ **“intii hadhay waa badbaadi doontaa”** Ereyga “intii hadhay” waxaa inta badan soo isticmaali jiray Nebiyadii Axdigii Hore taasoo la xidhiidhay mararkii Israa’iil masaafuriska loo kaxaystay, Ilaahse uu dib ugu soo celin doono dhulkii ballanqaadka. Bawlos Isticmaalkiisa ereyga, waxa ay la xidhiidhaa Yuhuuddoii xidhiidhka rumaysadka leh la lahayd Ilaah iyo kuwii maqlay Injiilka ee rumaysadka ugu jawaabay Masiixa.

Xitaa axdiga dhexdiisa Israa’iil kala go’ a ruux ahaaneed markuu ku dhacay, weli qaar ayaa Ilaah hortiisa xaq ku ahaa. Doorashadii Israa’iil maysan dibadda u saarin baahidii jawaabtii rumaysadkii shaqsiga (Ishacyaah 1’16-20).

Bawlos wuxuu adeegsanayaa weedh Axdigii Hore ah oo markii hore la xidhiidhay masaafurintii Israa’iil, maaddaama ay qaar Yuhuuddii ka mid ahi ku soo laabteen dhulkii Falastiin, si uu ugu xidho kuwii maqlay Injiilka, laakiin kuwoodii ugu badnaa aysan rumaysan aysanna helin Masiixaq. Keliya boqolkiiba in oo ah kuwii markii ugu horraysay maqlay (Yuhuuddii iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn) ayaa si qumman u qaatay marriitii Injiilka. Bawlos wuxuu kuwan ugu yeeray kuwii soo hadhay.

**9:29** tani waa xigasho ka timid LXX ee Ishacyaah 1:9, oo cambaarayn u ah dembi badnaanta quruunta Israa’iil.

**MAWDUUC GAAR AH: KUWII HADHAY, SADDEX DAREEN**

Ujeedka Axdigii Hore “kan rumaysadka ku jooga” waa mid ay nebiyadu ku sifoobi jireen (gaar ahaan qarnigii siddeedaad ee nebi Yeremyaah). Saddex qaab ayaa loo isticmaali jiray:

1. Kuwii masaafurinta ka soo badbaaday (tusaale ahaa. Ishacyaah 10: 20-23; 17:4-6; 37:31-32; Yeremyaah 42:15,19; 44:12,14,28; Caamoos 1:8)
2. Kawii rumaysadka ugu hadhay YHWH (tusaale ahaan. Ishacyaah 4:1-5; 11:11,16; 28:5; Yoo’eel 2:32; Caamoos 5:14-15; Miikaah 2:12-13; 4:6-7; 5:7-9; 7:18-20)
3. Kuwa qaybta ka ah dib u cusboonaanaya ee abuurta cusub noqonaya (Tusaale ahaan. Caamoos 9:11-15)

Qoraalkan dhexdiisa Ilaah wuxuu ku dooranayaa qaar keliya (kuwii rumaysadka qiirada lahaa) ku sugaye (kuwii ka soo samato baxay masaafuriskii) si ay dib ugu soo laabtaan Yuhuuda. Sidii aan cutubkan hortiis soo aragnay, maaddada ah dib u soo celinta Israa’iil sida ku jirta (aayadda 6) Ilaah wuxuu ku yaraynayey tiradooda si uu u tuso awooddiisa, hawshiisa iyo daryeelkiisa (tusaale ahaan, Gidicoon, Xaakinnadii 6-7).

▣ **“Rabbigii Saba’oot”** Kani waxa uu ahaa macag Axdigii Hore oo uu YHWH lahaa, oo aalaaba lagu turjumi jiray “Rabbiga Marti gelinta” (cf. Yacquub 5:4). Iyadoo ku xidhan macnaha guud, tani waxay ka hadlaysaa Ilaah ciidammadiisa “Kabtan ciidammada ee jannada” (cf. Yashuuca 5:13-15, ama dareen agaasin , sida badaan aragtidii cirka ee Baabilyoon ee la xidhiidhay jidhka samada, macnaha in ay jiraan ciidammo samada jooga, “Rabbiga jidhka samaawiga ah” Xiddiguhu waa abuur, ma aha Ilaahyo; ma jirto waxaay sameeyaan oo ay muuq u yeelaan (cf. Bilwogii 1:16’ Sabuurada 8:3; 147:4; Ishacyaah 40:26).

- ▣
- |             |  |
|-------------|--|
| <b>NASB</b> | <b>“farcin inoo reebin”</b>                      |
| <b>NKJV</b> | <b>“uusan tafiir inpoo reebin”</b>               |
| <b>NRSV</b> | <b>“kuwo badbaada nooga tegin”</b>               |
| <b>TEV</b>  | <b>“uusan wax farac ah nooga tegi lahayn”</b>    |
| <b>NJB</b>  | <b>“uusan dhowr badbaadda nooga tegi lahayn”</b> |

Qoraalka Cibraaniga ee Ishacyaah 1:9 waxa uu leeyahay “hadhay” laakiin Suptuagint gu wuxuu ku turjumayaa “Midh” (NKJV). Ciqaabta Ilaah ee dadka reer Bani Israa’iil waxaa had iyo jeer dabooli jiray (1)

Kuwii rumaysadka lahaa ee dhadhay ama (2) qadkii Ilaah ugu talo galay in Masiixu ku yimaado. Ilaah wuxuu kuwaas xoogaaga ah kayd uga dhigay in ay gaaraan kuwa kale.

▣ **“Sodom. . . Gomora”** aayadda 28 waxa ay la xidhiidhaa ciqaabta Ilaah. Aaddani waxay si gaar u carrabbaabaysaa labo magaalo oo cawaan ahaa oo uu Ilaah burburiyey sida ku jirta Bilowgii 19<sup>o</sup>24-26, laakiin waxa ay noqdeen ereyo masaal u ah ciqaabta Ilaah (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 29:34; Ishacyaah 13<sup>o</sup>19; Yeremyaah 20:16; 49:18; 50:40; Caamoos 4:11).

**NASB 9:30-33**

<sup>30</sup>Maxaan nidhaahnaa haddaba? Dadka aan Yuhuudda ahayn oo aan xaqnimada raacin, waxay heleen xaqnimada, oo ah xaqnimada rumaysad lagu helo; <sup>31</sup>laakiin reer binu Israa'iil iyagoo raaca sharciga xaqnimada, sharcigaas ma ay gaadhin. <sup>32</sup>Tan sababteedu waa maxay? Maxaa yeelay, rumaysad kuma ay doondooin, shuqullada samayntooda mooyaane. Waxay ku turunturoodeen dhagaxii turunturada; <sup>33</sup>sida qoran, Bal eega, waxaan Siyoon dhex dhigayaa dhagax lagu turunturoodo oo ah sallax lagu xumaado; Oo kii rumaysta isaga ma ceeboobi doono.

**9:30-31** Tani waa gaboggabo la yaab leh oo ku saabsan Ilaah doorashadiisa ujeedkiisa. Aayadaha 30-33 waxa ay koobayaan cutubka 9 iyagoo weliba gogoldhig u noqonaya cutubka 10. Kuwa aan Yuhuudda ahayn ee rumaysadka leh waa kuwo Ilaah hortiisa xaq ku ah, laakiin Yuhuudda oo dhan ma ah! {{La soco yaa!

Ilaah wuxuu aadanaha oo dhan kula macaammilaa waddada Axdiyadiisa. Mar kasta Ilaah wuxuu qaataa qorshe uu ku habaynayo xaaladahaas. Dadku waa in ay sameeyaan tawbadbeen iyo rumaysad, adeecis iyo dulqaad. Aadanaha oo dhan waxaa badbaadiyey (1) awoodda Ilaah; (2) nacariista Ilaah ee inoo soo martay rumayntii Masiixa shaqadii uu inoo shammeyay; ama (3) mise waa ficil ku yimaada rumaysad shaqsi ahaaneed? Haa!

“Ujeed” ahaan eeg tasmada 14:19

▣ **“xaqnimo”** eeg mawduuc gaar ah: 1:17

**9:32 “shuqullada”** Texus Receptus wuxuu ku daray “ee sharciga” kani wuxuu ahaa koobbi goor dambe lagu daray. Bawlos wuxuu had iyo goor isticmaalayaa weedhan “shuqullada sharciga” (cf. 3:20, 28; Galatiya 2:16; 3:2,5,10). Arrintu si kastaba ha ahaatee, Qoraallada Qudduuska ah ee Giriigii hore P46, x, A, B, F, iyo G, way ka gudbayaan aayaddan. UBS-ku qoraal yar ayuu ku qiyaasayaa “B” oo ugu badnaan ah ‘waa xaqiiq’

Furaha xaqnimada Ilaah ma aha wax qabadka aadanaha laakiin waa dabeecadda iyo hadiyadda Ilaah ee masiixa inoogu timid. Xaqnimadu waa aysan caqli gal ahayn in ay gaadhaan aadanihii aadanihii dhacay, sidaas darted waa deeq xor ah oo lagu siiyey rumaysadka Masixxa (cf. 3:21-31). Arrintu is kastaba ha ahaatee, waa in la hanta (cf. aayadda 33; Yooxanaa 1:12; 3:16; Rooma 4:1ff; 10:9-13; Efesos 2:8-9). Tan ayaa ah runta aan wax loo dhigo la arag ee ay kuwa ddimaha, Yuhuudda rabitaankoosa iska raacay (iyo dhammaan kuwa sharcigu) ay gafeen!

George Eldon Ladd buuggiisa *Fiqiga Axdiga Cusub*, waxa uu samaynayaa tilmaan wanaagsan:

Wax baraidii Bawlos ee Sharcigu waxa uu uu had iyo goor ka soo qaadanayey taariikhdiisii la soo maray Bawlos shaqsi ahaantiisa markuu Diinta Yuhuudda haystay, ama qarnigii koowaad ee ay Yuhuuddu Sharciga ku hoos jireen.

Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa in fikirka Bawlos aan loo arag in uu ka sheekaynayo noloshiisii ruuhiyadeed ama sharraxaad uu ka bixinayo dabeecaddiisii sharcii Faarisiinta ee qarnigii ugu horreeyay, laakiin waxa uu tarjumaad ku samaynayaa fikir Masiixiga ee labo waddo oo xaqnimo0 lagu raadinayo: Sharciga iyo rumaysadka. (Bogga 495).

**9:33** Tan waxaa laga soo qaatay Ishacyaah 28:16 oo ay ku lifaaqan tahay 8:14.

“Bal eega, waxaan Siyoon dhex dhigayaa dhagax” 28:16a

“dhagax lagu turunturoodo oo ah sallax lagu xumaado”8:14b

“Oo kii rumaysta isaga ma ceeboobi doono.” 8:14b

Isaga oo aayadahan isugu xidhaya habkan (Rabbnical Tichnique) ayauu ku beddelay macnihii ku jiray Ishacyaah 28:16, isagoo ka keenay hadal aan diidmo ahayn oo keenay hadal diidmo ah. Bawlos wuxuu isku jarjartay Axdigii Hore si uu ugu adeegsado ujeeddooyinkiisii gaarka ahaa.

1. Wuxuu doortay Tarjumaaddee (LXX, MT ama tiisa)
2. Wuxuu beddelaa tixraacyada (Ka timid masaafurintii ku socota Kuwa aan Yuhuudda ahayn)
3. Wuxuu isku xidhaa qoraalka
4. Wuxuu beddelayaa magacyada iyo magic-u-yaallada, isagoo YHWH u qaadnaya Ciise.

▣ **“Oo kii rumaysta isaga ma ceeboobi doono.”** Tani waxa ay ka timid Ishacyaah 29:16b. Tan waxaa sidoo kale lagu xigtay Rooma 110:11 waxa ayna la mid tahay Yoo’eel 2:32, oo waxaa lagu xigtay Rooma 10:13. Furaheeda badbaadadu waa laalabadaba (1) kan wax lagu samaynayo (Dhagaxgeeseedka) iyo (2) qaadashada shaqiga (Rumaysadka ku jira Isaga).Eeg Mawduuc gaar ah: Rume 4:5.

▣ **“dhagax”** Wuxuu asal ahaan magic u ahaa Ilaah (cf. Sabuurrada 18:1-2,31,46; Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:18; I samuu’eel 2:2; Sabuurrada 28:1; 31:3; 42:9; 71:3; 78:35), laakiin waxaa hadda noqotay in uu magaca Masiixa ahaado (cf. Bilowgii 49:24; Sabuurrada 118:22; Ishacyaah 8;14; 28:16; Daanyeel 2:34-35, 44-45; Matayos 21:42-44). Shayga furaha ah ee axdigii ballanka Ilaah (Masiixa) six un ayaa loo fahmay oo waa la diiday \*cf. I Korintos 1L23). Yuhuuddu waxa ay garan waayeen ma aha oo qura ujeedkii Masiixa, laakiin shuruudihii aasaasiga ahaa ee axdigii Ilaah. Ciise wuxuu u yimid in uu joogsi u noqdo Yuhuudda (cf. Ishacyaah 8:14; Luukos 2:34), laakiin kuwa rumaysadka leh, Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynba, wuxuu u noqday dhagaxa aasaaska ah (cf. Ishacyaah 28:16; I Butros 2:6-10).

#### **MAWDUUC GAAR AH: DHAGAXGEESEEDKA**

##### **I. Adeegsigiisii Axdigoo Hore**

- A. Ujeedka sida dhagaxu adayg badan yahay u sii jiri karo oo uu aasaas wanaagsan u sameeyay ayaa YHWH lagu magacaabay (Sabuurrada 18:1).
- B. Waxaa lagu horumariyey macaga Masiixa (cf. Bilowgii 49:24; Sabuurrada 118:22; Ishacyaah 28:16).
- C. Waxa ay u taagan tahay Xukun ka yimid YHWH oo u timid Masiixa (cf. Ishacyaah 8:14; Daanyeel 2:34-35, 44-45).
- D. Middani waxa ay ku hour martay in ay tusaale u noqoto dhismaha.
  1. Dhagax aasaas ah, meeshii ugu horraysay, ee ammaanka ahayd ee ay malaa’igtu ka fadhiisato dhismaha oo loogu yeero “Dhagaxgeeseedka”
  2. Waxay sidoo kale moqon kartaa dhagaxa ugu dambeeya ee meel la dhigo, ee isku qabta derbiyada (Sakariyaah 4:7’ Efesos 2:20,21), oo loogu yeero “the cap stone” oo macnaheedu dhagaxa madaxa ah oo ka yimid erey Cibraani ah *rush* (madax)
  3. Waxa uu noqon karaa “dhagaxa hore” ee yaalla badhtamaha jidka waddada ee qabata derbiga oo dhan.

##### **II. Adeegsiyadiisa Axdiga Cusub.**

- A. Ciise wuxuu ka soo xigtay Sabuurrada 118 marar badan isagoo naf ahaantiisa isku sheegaya (cf. Matayos 21:41-46; Maarkos 12:10-11; Kuulos 20”17)
- B. Bawlos wuxuu isticmaalayaa Sabuurrada 118 isagoo ku xiriirinaya diidmadii Israa’iil ay fallaagonimadeedii iyo rumaysad la’aanteedii ku dooday YHWH (cf. Rooma 9:33)
- C. Bawlos wuxuu fikirka “dhagaxa hore” ku adeegsaday Efesos 2:20-22 isagoo ka wada Masiixa
- D. Butros wuxuu ujeedkan u adeegsaday Ciise middan oo ku jirta I Butros 2:1-10. Ciise waa Dhagaxgeeseedka rumaystayaashuna waa dhagaxa nool (rumaystayaashu waa macbudyada , I Korintos 6:19), kuwaasoo uu Isagu dhisay (Ciise waa macbudka cusub, cf. Maarkos 14:58; Matayos 12:6; Yooxanaa 2:19-20).

##### **III. Warbixinnada fiqi ahaaneed**

- A. YHWH wuxuu Daa’uud iyo Sulaymaan u oggolaaday in macbud dhisaan. Wuxuu u sheegay in haddii ay axdiga xajiyaan uu barakdayn doono lana joogi doono iyaga, laakiin haddii ayan yeelin, macbudku uu hallaabi doono (cf. I Boqorrada 9:1-9)!

- B. Yuhuudda Rabbaaniyiinta ahu waxa ay diiradda saareen xagga wanaagga oo la dayacay sababtii rumaysadka ee shaqsi ahaaneed (tani ma aha war bixin daah saaran yahay; waxaa jiray Rabbaayiin Ilaah aamminsana). Ilaah maalin kasta ayuu doondoonaa dadka, xiriirka ilaahiga ah la leh kuwa uu isagu araggiisa ka abuuray (Bilowgii 1:26-27). Luukos 20:17-18 waxaa ku jira ereyo laga naxo oo ku saabsan xukunka.
- C. Ciise Masiix wuxuu qaabka macbudka u adeegsaday in uu u taagan yahay muuqaalkii jidh ahaaneed. Way sii socotaa oo waxay ku baahdaa ujeedka shaqsi ahaan. Rumaysadka Masiixa ayaa ah fure xidhiidh lagula yeelan karo YHWH.
- D. Badbaado macnaheedu waxaa weeye in Ilaah uu araggiisii dib ugu soo celiyo aadanaha si weheshi ay Ilaah la yeeshaan uu suurto gal u boqdo. Hadda yoolka Masiixiyaddu waa U-ekaanta-Maxsiixa. Kuwa rumaysadka lahu waa in ay noqdaan dhagaxyo nool oo lagu dhisay oo Masiixu jaan gooye u yahay. Macnaha in ay noqdaan (Macbud cusub).
- E. Ciise waa aasaaska iimaankeenna iyo dhagaxa madaxa u ah iimaankeenna ( waa Alpha iyo Omega “jira weligiina jiri doona”). Weliba wuxuu noo yahay dhagaxa wax celiya iyo dhagaxa difaaceenna. In aan isaga weynno waa in aan wax walba weynnay. Halkani ma laha boos dhexe!

## SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahaan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Sidee buu cutubka 9 ugu xidhan yahay cutubka 10 (xagga doonista furan)?
2. Maxay tahay maaddada ku jirta cutubka 9:1-29?
3. Miyuu Ilaah jebiyey ballankiisii Israa’iil?
4. Dhegayso faa’idooyinka ay Israaiil ku raaxaysatay (9:4-5).
5. Miyey Yuhuudda oo dhammi ku qummanaayeen Ilaah? Maxay tahay sababtu maxaysase ahayn (9:6)?
6. Haddii qofka lagu qasbo in uu sameeyo doonista Ilaah miyuu niyad ahaan masuul ka yahay?
7. Sidee bay “naxariistu” fure ugu tahay doonista furan (cf. 15, 16, 18, 23; 11:30-32)?



# ROOMA 10

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Israa'iil iyo Injiilka	Israa'iil Injiilka ayey u baahan tahay	Xaqnimadu waa runaysad	Israa'iil iyo Injiilka	Israa'iil oo ku guuldarraysatay inay aragto in Ilaah yahay Qudduus
9:30-10:4		9:30-10:4	9:30-10:4	
	10:1-13			10:1-4
Badbaadada dadka oo dhan			Badbaadada dadka oo dhan	
10:5-13	Israa'iil oo diiddan Injiilka	10:5-13 Israa'iil oo masuul ka ah guuldarrooyinkoodii	10:5-13	10:5-13 Marqaati furkii Muuse
10:14-21	10:14-17	10:14-17 10:18-21	10:14-17 10:18-21	10:14-17 10:18-21

## AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga viii)

### ADIGA OO RAACAYA UJEDKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiirka. Waa in aadan middan ula tegin qof kuu tafsiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

## FAHAN MACNAHA GUUD

- A. Cutubka 10 waxa uu diiradda saarayaa Israa'iil fursadaheedii ay uga jawaabi lahayd YHWH deeqdiissa nimcada leh ee badbaadada. Cutubka 9 waxaannu uga soo hadalnay Ilaah doorashadiisii uu Yuhuudda ugu doortay arrintii doorashada adduunka laakiin Yuhuuddu ay iska diidday in ay hanato doorashadiisii (i.e., addeecidda axdiga).
- B. Bawlos wuxuu horay u sii wadaa adeegsigiisii Axdigii Hore arrinkiisii ku aaddanaa Injiilka. Tani waa qaabka dabecadda wacdiyada rasuullada ee Falimaha Rasuullada, oo loo yaqaan *Kerygma* (i. e., taasoo la sii shaaciyey, lagu wacdiyey.). Mawduuc gaar ah: Kerygma 1:2

C. Runta ku jirta ee tiir dhexaadka u ah 9:30-10:4 waa

1. Kuwa aan Yuhuudda ahayn waxay xaqnimada Ilaah ku haystaan rumaysada Masiixa
2. Yuhuuddu ma haystaan xaqnimada Ilaah rumaysad la'aantooda Masiixa la'aantood
3. Sharcigu xaqnimo muusan bixin Karin. Waxa ay ahayd xaqnimada Ilaah uu soo mariyey rumaysadka Masiixa camallo aadane-na laguma kasban Karin (cf. 3:21-31)

D. Bruce Korley iyo Curtis Vaughan waxa ay qoreen *A Study Guide Commentary, Romans*, ee uu daabacay Zondervan, bogagga 115-116, waxaa ku jira taswiir caawimaad u leh dembiyadii Yuhuudda

1. Isla weyni diineed, 10:2a
2. Indho la'aan ruuxa ah, 10:2b, 3a
3. Xaqnimo isla lahaan, 10:3b
4. Adkaan aan ka soo laabad lahayn 10:4a

Sidoo kale waxaa jeclahay qodobbada ay ku soo gunaanadayaan dhammaadka cutubka 9 ee ku saabsan cutubka 10. “dooshadu waxa ay ka dhex dhacdaa wacdinta isku tallaabta (I tesaloniika 1:4-10), oo sharraxaysa sida difaaca awoodda Ilaahiyanka ah (9:6-29) ay u raaci karto adeegga Ilaah ee qoraalka ku jira warqadaha Bawlos (10:1-21). Go'aanka kama dambaysta ah ee Injiilka lagu wacdiyo waa cilmigaa, sidaa lagu samaynayo, oo marka sidaa la sameeyona Ilaah waa aammin in uu ujeedkiisii doorashada ku samaynayo Masiixa” (Bogga 114).

## BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 10:1-4

<sup>1</sup>Walaalayaalow, waxaan qalbigayga ka doonayaa oo Ilaah ka baryaa inay iyagu badbaadaan. <sup>2</sup>Waayo, waxaan markhaati u furayaa inay iyagu Ilaah qiiro weyn u qabaan, laakiinse xagga aqoonta ma aha. <sup>3</sup>Waayo, iyagoo aan ogayn xaqnimada Ilaah oo doonaya inay taagaan tooda, ayayan hoos gelin Ilaah xaqnimadiisa. <sup>4</sup>Waayo, Masiixu wuxuu mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga dhammaadkiisii xagga xaqnimada.

**10:1 “Walaalayaalow”** Ereygan waxaa sida badan uu Bawlos u isticmaalayaa in uu ku baro maaddo cusub (cf. 1:13; 7:4; 8:12).

☐ **“qalbigayga ka doonayaa oo Ilaah ka baryaa inay iyagu badbaadaan”** Bawlos wuxuu aaminsanaa in Yuhuuddu ay badbaadi lahaayeen oo ay ducadiisu is beddel samaynayo. Tani waa tan layaabka leh ee lidiga ku ah kartidii !

Eeg Mawduuca gaar ah: Ducada qofka kaa maqan 9:3.

Waxaa jira qoraal Giriig ah oo ku kala duwan “for them” ama “u ahaaday iyaga.” Textus Receptus wuxuu tan ka dhigay in ay u taagan tahay “For Israel” ama “Israa’iil u ahaaday.” Arrintu si kastaba ha ahaatee, caddaynta qoraalku waxa ay door bidaysaa “for them” (MSSP<sup>46</sup>, ⸜\*, B, C, D\*, F, G). UBS<sup>4</sup>-ku wuxuu siinayaa “A” oo cabbiraysa (xaqiiq).

**10:2 “iyagu Ilaah qiiro weyn u qabaan”** Qiiryo iyo hilow kumaq filna (cf. aayadaha 3-4). Bawlos si wannaagsan ayuu midan u garanayey (cf. Falimaha Rasuullada 9:1; Galatiya 1:14; filiboy 3:6)!

**10:2-3 “laakiinse xagga aqoonta ma aha. 3 Waayo, iyagoo aan ogayn xaqnimada Ilaah”** Ereyga “ogaan” ee (aayadda 2, *epiginōskō*) labo waddo ayuu u shaqayn karaa: (1) Yuhuuddu maysan fahmin injiil xor ah (sida ay Giriigtu ka qabaan ereyga “ogaan”), ama (2) Yuhuuddu xdhidh rumaysad lamaysan lahayn Ilaah (sidaay Cibraaniyadu ka qabto ereyga “ogaan,” cf. Bilowgii 4:1; Yeremyaah 1:5). Yuhuuddu jaahil kamaysan ahayn baahida ay u qabaan in ay u jawaabaab Ilaah (aayadaha 16, 18, 19), laakiin booskeeda waxay geliyeen iimaankii oo cammaloo aadane ku salaysan, kuwaasoo hor seeday isla weyni, kibir, iyo gaar noqosho (aayadda 3a)!

**10:3 “Ilaah xaqnimadiisa”** Macnaha ku jira cutubyada 9-11 weedhani waxa ay tilmaamaysaa la Ilaah socoshadiisa xaqa ah ee laga murmay sida ku jirta (Rooma 4) taasoo ku salaysan oo qura naxariistiisa, ah hawshii Masiixa ee ebyantay, Ruuxa xoojintiisa, iyo tawbadkeenka aadanaha dembiga badan, jawaab rumaysad iyo in la sii wado adeecidda iyo dulqaadashada.

Mid ayaa hubaal u fahmi kara sidii ay Yuhuuddu six un ugu fahantay xaqnimada Ilaah. Axdigii Hore waxa uu adeeciddii sharciga ku muujnayaa (cf. Sharciga Ku noqoshadiisa 4:28-6:3,17,24-25). Wixii ay ku guul darraysteen in ay xaqiiqsadaan wax ay ahayd isu dheelli tirnaantii loo baahnaa ee rumaysadka iyo tawbadkeenka (cf. Sharciga Ku noqoshadiisa 5:29-30; 6:5). Sharciga Ku Noqoshadiisu wuxuu si cad u sharraxayaa in wixii Ilaah uu Israa’iil u sameeyay aysan ahayn xaqnimadooda awgeed, laakiin sifihiisa (cf. 9:6,7,13,24,27; 10:12-22; Yexesqeel 36:22-38). Xitaa Israa’iil dhulkii Kancaaniyiinta looma siin xaqnimadooda darted, laakiin dembigoodi awgii (cf. 9:4-6; Bilowgii 15:16). Eeg mawduuc gaar ah 1:17.

▣ **“ayayan hoos gelin Ilaah xaqnimadiisa”** ereygu fal sameeye WAANA HADAL SARBEEBEED, laakiin waxaa lagu tarjumay cod dhexe (cf. TEV). Shaqada HADALKA DHEXE waxaa laga soo qaatay hadal sarbeebed ku jira Koine Giriig. Macnaha guud ee meesha ku jirs ayaa ah kan wax lagu go’aminayo.

Tani waxaay sida dhabta ah noqonaysaa “submit” “is geyn” oo ah erey ciidameed amar ku imanay. Yuhuuddu waxa ay isku dayeen in ay kasbadaan xaqnomada Ilaah, laakiin hadyad ayey ahayd (cf. 3:24; 5:15; 6:23; Efesos 2:8-9). Bawlos wuxuu midan si cad ugu arkay waddadii Dimishiq ku socotay.

### **MAWDUUC GAAR AH: ISUDHIIBID (HUPOTASSŌ)**

Saptuagint-gu wuxuu adeegsadaa in uu ereygan ku tarjumo toban erey oo kala duwan oo Cibraani ah. Micnihiisa salka ah ee Axdigii Hore wuxuu ahaa “to order” “in la amri” ama “xaqa amarka.” Waxaa laga soo qaaday LXX.

1. Ilaah oo wax amraya (cf. Laawiyiintii 10:1; Yoonis 2:1; 4:6-8)
2. Muuse oo wax amraya (cf. Baxniintii 36:6; Sharciga Ku Noqoshadiisa 27:1)
3. Boqorrada oo wax amraya (cf. II Taariikhdii 31:13)

Axdiga Cusub dhexdiisa waxaad arrintan ku arkaysaa Falimaha Rasuullada dhexdooda 10:48, halkaasoo uu rasuul amar ku dhiibato. Arrintu si kastaba ha ahaatee, isku xirro cusub ayaa ku hour marsan Axdiga cusub dhexdiisa.

1. Aragti iskaa wax u qabo ah ayaa hour martay (HADAL DHEXAAD)
2. Ficilkan ia xadaynta waxaa laga arki karaa sidii uu Ciise Masiix isugu dhiibay Aabbaha (cf. Luukos 2:51)
3. Rumaystayaasha oo u dhiiban aragtiyada dhaqanka si aanan Injiilka si cadawnimo leh loo wax yeellayn
  - a. rumaystayaasha oo dhan (cf. Efesos 5:21)
  - b. afooyinka rumaysadka leh (cf. Kolosay 3:18; efesos 5:22-24; Tiitos 2:5; I Butros 3:1)
  - c. rumaystayaasha oo ku socda dawladaa aan diinta haysan (cf. Rooma 13:1-7; I Butros 2:13)

Rumaystayaashu waxay wax ka qabtaan muhiimadaha jacaylka u leh, Ilaah, Masiixa, Boqortooyada, una wanaagsan kuwa kale. Sida *agapaō* kaniisaddu waxa ay ereygan ku dartay macne cusub oo ku salaysan baahiyada Boqortooyada iyo baahiyada kuwa kale. Ereygani waxa uu xambaarsan yahay darajo fiican oo ah naftoo aan jeclaysanayn, balse aqan amar ahayn, laakiin ku xiran xiriir cusub oo ah nafta oo la siiyo Ilaah iyo Masiixa. Rumaystayaashu waxay addeecaan oo isu dhiibaan wanaagga guud iyo barakada qoyska Ilaah.

**10:4**

**NASB, NKJV,**

**NRSV**

**“Masiixu wuxuu mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga dhammaadkiisii”**

**TEV**

**“Masiixu wuxuu sharcigii ka dhigay mid dhammaad yeesha”**

**JB**

**“laakiin hadda sharcigu wuxuu noqday mid mu dhammaaday Maxiisa”**

Qormadani waxa ay xiriir la leedahay Matayos 5:17-48. Ujeeddada, yoolka ama dhammaadka (*telos*) sharcigu ma ahayn badbaado, laakiin wuxuu ahaa xukun, oo ujeedkaasi wuu socdaa (Galatiya 3:24-25). Qoraalka caadiga ah ee Axdiga Cusub eek u saabsan maaddadan waa Galatiya 3:1-29.

Marka laga waxa hadlayo arrintan, macnaha guud waa lagama maarmaan. Bawlos wuxuu Axdigii Hore u isticmaalayaa habab kala duwan. Marka laga wada hadlayo noloshu masiixiga, Axdigii Hore waa muujint Ilaah

(cf. Rooma15:4; I Korintos 10:6,11), laakiin marka badbaado laga wada hadlayo waa cidlo waa uu dhintay (cf. Cibraaniyada 8:13). Waa sidaas maxaa yeelay waxa uu tusaale u ahaa facii hore, dadkii hore. Injilka ah rumaysadka Ciise Masiix ayaa ah da'da cusub ee Ruuxa. Sharciga waqtigiisii waa uu ku daayey! Eeg mawduuc gaar ah: Aragtiyadii Bawlos eek u aaddanaa sharcigii Muuse 13:9.



**NASB, NKJV** “mid kasta oo rumaysta u yahay sharciga dhammaadkiisii xagga xaqnimada”  
**NRSV** “si ay xaqnimo ugu ahaato mid kasta oo rumaysta”  
**TEV** “si mid kasta oo rumaysta uu Ilaah hortiisa xaq ugu noqdo”  
**NJB** “sidaas darteed kuwa rumaysadka leh oo dhan xaq baa laga dhigi doonaa”

Cutubyada 9-11 waa in si wada jir ah la isugu sharraxaa. Ilaah qaaddirnimadiisa waxaa si xooggan loogu sharraxayaa cutubka sagaalaad marka waxaa waajib ah in taas lagu xiriiyaa u yeedhista dadka oo dhan loogu yeeray in ay rumasyaan eek u jirta cutubka 10 (cf. aayadaha 4,9,11,13,; 3:22; 4:11,16).

Ujeeddada madax furashada iyo jacaylka Ilaah ww caamka ah waxaa lagu sheegay Bilowgii 3:15 waxaana si xooggan loogu soo qaatay Bilowgii 12:3 iyo baxniintii 19:5-6. Nebiyadu waxat had iyo good ka hadlayeen qorshaha iyo jacaylka guud ahaaneed ee uu ku midaynayo aadanaha oo dhan. Xaqiiqda ah in uu jiro hal Ilaah oo uu Isagu aadanaha oo dhan ka abuuray aragtidiisa waxay bixinaysaa casumaad caalami ah oo ah in ay dhammaantood ku badbaadayaan. Arrintu si kastaba ha ahaatee, tan la yaabka leh ayaa waxa ay tahay in qofka uusan ka jawaabi Karin caawimaadda Ruuxa mooyaane 9cf. Yooxanaa 6:44,65). Dabadeed su'aashu waxa ay noqonaysaa, “Ilaah ma aadanaha oo dhan buu u kexeeyaa badbaadada?” Jawaabtu waa in ay noqotaa, “Haa!” cf. Yooxanaa 3:16; 4:42’ I Yooxanaa 2:2; 4:14; I Timoteyos 2:4; II Butros 3:9). Caqabadda aan la hilmaami Karin ee dembiga, dhiciddii, iyo shayddaanka ayaa ah waxa ay qaar yiraahdaan “Maya.” Markii Bawlos wacdiyey, Yuhuuddii qaar way ka jawaab celiyeen qaarna maysan ka jawaab celin, qaar aan Yuhuud ahayni way ka jawaab celiyeen, qaarka maysan ka jawaab celin!

Ereyga “Believe” “rumayn” (*pisteuō*) waxaa lo tarjumaa saddex erey oo af Ingiriisi ah, “Believe,” “rumayn,” “faith,” “iimaan,” iyo “trust” “aamminid.” Waa xaalad hadda la taagan yahay, oo ka hadlaysa rumaysad aan joogsi lahayn. Ma aha aqbalaadda xaqiiqooyinka (ama fiqiga, faahfaahinnada taariikh ahaaneed, war bixinnada injiilka) oo lagu helo hadyadda nimcada Ilaah noo soo mariyey Ciise Masiix. Axdiga Cusub waa ballan; Ilaah ayaa habaynaya gundhigga oo tilmaamaya jawaabta lagama maarmaanka ah, laakiin shaqsigu waa in uu uga jawaabaa bilogaba iimaan iyo tawbadkeen iyo iimaan iyo tawbadkeena aan joogsi lahayn. Adeec iyo dulqaadasho waa muhiim. U-ekaanta Masiixa iyo adeeggu waa yoolka!

**MAWDUUC GAAR AH: EREYGA GIRIIGGA EE FALKA JOOGA AH EE LOO ISTICMAALO BADBAADADA**

Badbaadadu ma aha shay wax soo saara, laakiin waa ririir. Kuma eka oo qura marka uu qofku aammino Masiixa. Way bilaabatay oo qura! Ma aqha caymis boolis oo dab demis ah, ama tigidh jannada loo goosto midna ma aha, laakiin waa koritaan nololeed oo u0ekaanta Masiixa ah.

**BADBAADADA OO AH FALIMO LA DHAMMAYSTIRAY (AORIST)**

- Falimaha Rasuullada 15:11
- Rooma 8:24
- II Timoteyos 1:9
- Tiitos 3:5
- Rooma 13:11 (AORIST waxa ay ku xiran tahay waddada muqtaqbalka)

**BADBAADADA OO AH XAALAD AHAANSHO (EBYAMAY)**

- Efesos 2:5,8

**BADBAADADA OO AH HANNAAN SOCONAYA AH (WAQTI LA JOOGO)**

- I Korintos 1:18; 15:2
- II Korintos 2:15

**BADBAADADA OO AH WAX MUSTQBALKA DHAMMAANAYA (MUSTAQBALKA sida ku jirta**

EREYGA FAL SAMEEYAHA AH ama macnaha guud)

- Rooma 5:9,10; 10:9,13
- I Korintos 3:15; 5:5
- Filiboy 1:28; I Tesaloniika 5:8-9
- Cibraaniyada 1:14; 9:28
- (Sida lagu sharraxay Matayos 10:22, 24:13; Markos 13:13)

**NASB (UPDATED) TEXT: 10:5-13**

<sup>5</sup>Waayo, Muuse wuxuu qoray in ninkii yeelaa xaqnimada sharciga uu ku noolaan doono iyada. <sup>6</sup>Laakiin xaqnimada rumaysadku sidanay tidhaahdaa, Qalbigaaga ha iska odhan, Yaa samada kori doona (inuu Masiix soo dejiyo)? <sup>7</sup>Ama, Yaa yaamayska hoos u geli doona (inuu Masiix kuwa dhintay ka soo sara kiciyo)? <sup>8</sup>Laakiin maxay leedahay? Eraygii waa kuu dhow yahay, waana ku jiraa afkaaga iyo qalbigaaga, waxaa weeyaan erayga rumaysadka oo aannu kugu wacdinno. <sup>9</sup>Maxaa yeelay, haddaad afka ka qiratid in Ciise yahay Rabbiga, oo aad qalbiga ka rumaysatid in Ilaah isaga ka sara kiciyey kuwii dhintay, waad badbaadi doontaa, <sup>10</sup>waayo, qalbiga wax baa laga rumaystaa xagga xaqnimada, afkana wax baa laga qirtaa xagga badbaadinta. <sup>11</sup>Waayo, Qorniinku wuxuu leeyahay, Ku alla kii rumaysta isaga, ceeboobi maayo. <sup>12</sup>Waayo, Yuhuudda iyo Gariigtu waxba kuma kala duwana, waayo, isku Rabbi baa Rabbi u wada ah, waana u taajir in alla intii barida isaga. <sup>13</sup>Waayo, ku alla kii magaca Rabbia ku baryaa, waa badbaadi doonaa.”

**10:5** Aayaddani waxa ay aayaddani waxay sharraxaad u tahay Laawiyiintii 18:5. Balankeedu waa wax la hubo. Haddii qofku uu Sharciga xajin lahaa, wuxuu noqon lahaa mid xagga Ilaah laga aqbalo (cf. Luukos 10:28; Galatiya 3:12). Dhbaatadu se waxay tahay in Rooma 3:9,10-18,19,23; 5:18; 11:23 ay xaqiiqda caddaynayaan. Dhammaan way wada dembaabeen. Naftii dembowdaa waa in ay dhimataa (cf. Bilowgii 2:17; Sharciga Ku Noqoshadiisa 30:18; Yexesqeel 18:4, 20). Waddadanb axdigii hore way xidhan tahay. Waxay noqotay mi lagu xukumay dhimasho iyo inkaar (cf. 7:10; Galatiya 3:13; Kolosay 2:140).

**10:6-8** Tani waxa ay sharraxaad u tahay Sharciga Ku Noqoshadiisa 30:11-14 ee ku jirta Septuagint (LXX), taaso Bawlos uu ujeedooyinkiisii ku muujiyey. Qoraalkan waxaa asal ahaantiisii ku hadlay Muuse isagoo ku sharraxayey sharciga, laakiin waxaa sidoo kale tix raac ahaan loogu qaadan karaa Ciise dhalashadiisii labaad, dhimashadiisii, iyo sare kiciddiisii (cf. aayadda 9; Efesos 4:9-10). Ujeedka uu Bawlos middan ka leeyahay waxaa weeye in si la aqrisan karo loogadhex heli karo haddii rumaysad loo soo maro middan (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 30:15-20). Way fudduhay, waa la heli karaa, dadka oo dhan ayey u ahaatay, oo way ka duwan tahay middii furaha u ahayd Sharcigii Muuse.

☐ **“laakiin xaqnimada rumaysadku sidanay tidhaahdaa”** Bawlos wuxuu horay jidh ugu yeelay “dembiga” iyo “Nimcada,” haddana wuxuu jidh u yeelayaa “xaqnimada rumaysadka.” Waxay uga hadlaysaa xigasho ka timid Axdigii Hore sida ku jirta aayadaha 6,7 iyo siddeed.

☐ **“kori doona. . . soo dejiyo”** Aadanuhu umaysan bixin in ay doon doonaan Masiixa; Ilaah aya si waadax ah ugu soo diray dadka oo dhan. Aadanaha raadintoodu lagama maarmaan ma aha.

☐ **“qalbiga”** qalbigu wuxuu u taagan yahay waxa naftu dib u sii celiso. Ka arag mawduuc gaar ah 1:24

**10:9 “Haddii”** ereygani wuxuu caddaynayaa arrin shuruud oo mustaqbalka ah oo lagama maarmaan ah. Aayadda 9 waa qancinta (*hoti*) farriinta rumaysadka.

☐ **“qiratid”** eregan la isku keenay, *homologeō*, wuxuu si toos ah u noqonayaa “to say” iyo “the same” oo ah “in la yiraahdo” iyo “isla sidii” oo macnahoodu yahay “in si waadax ah loogu raaco” (in si cod weyn leh loogu hadlo si kuwa kale ay u maqlaan). Qirashada rumaysadka Masiixa oo dadka dhexdooda laga qirto waa muhiim (cf.

Matayos 10:32; Luukos 12:8; Yooxanaa 9:22; 12:42; I Timoteyos 6:12; I Yooxanaa 2:23; 4:15). Qirashadii horraantii kaniisadduu wuxuu ahaa Maquurinta baabtiiska. Qofka dalabanaya in uu qirto rumaysadkaq Masiixa ayaa waxa ay ahayd in uu yiraahdo, “waxaan rumaysanahay in Ciise yahay Rabbiga.” Arag mawduuc gaar ah oo soo socda.

### MAWDUUC GAAR AH: QIRASHADA

- A. Waxaa jira labo ha boo isla asala Giriigga ku jira oo loo adeegsado qirashada ama soo bandhigidda, *homolegeō* iyo *exomolegeō*. Ereyga isku xiran ee uu Yacquub adeegsanayo waxa uu ka yimid *homo*, “the same” isla sidii; *legō*, “to speak” in loo hadlo iyo *ex*, “out of” dibadda ka ah. Tan macnaheeda aasaasiga ahu waa in isla sidii oo kale la yiraahdo, la isku raaco. *Ex*—tii oo lagu daray aragtida u bandhigidda bulshada
- B. Tarjumaadda Ingiriisiga ee ereygan kooxdiiisu waa.
1. Praise faanin, ammaanid
  2. Agree ku raacid
  3. Declare caddayn
  4. Profess aqoonsasho
  5. Confess qirid, qirasho
- C. Kooxdan ereygu waxay lahaayeen labo muuqaal oo iska soo hor jeeda
1. To praise (God) In la amaano (Ilaah)
  2. To admit sin In la qirto dembiga
- Kuwani waxa ay ku soo baxeen dareenka aadanaha ee qudduusnimada Ilaah iyo siday iyaga naf ahaantoodu u dembi badan yihiin. In halk run ah la aqoonsado waa iyadoo labadaba la aqoonsaday.
- D. Kooxda ereyga ee uu Axdiga Cusubi adeegsadaahu waxay yihiin
1. In la ballan qaado (cf. Matayos 14:7; Falimaha Rasuullada 7:17)
  2. In lagu raaco ama la oggolaado (cf. Yooxanaa 1:20; Luukos 22:6; Falimaha Rasuullada 24:14; Cibraaniyada 11:13)
  3. In la ammaano (cf. Matayos 11:25; Luukos 10:21; Rooma 14:11; 15:9)
  4. In loo qirto ama loo sheego
    - a. Qof (cf. Matayos 10:32; Luukos 12:8; Yooxanaa 9:22; 12:42; Rooma 10:9; filiboy 2:11; I Yooxanaa 2:23; Muujintii 3:5)
    - b. Si run ah (cf. Falimaha Rasuullada 23:8; II Korintos 11:13; I Yooxanaa 4:2)
  5. In si waadax ah loogu muujiyo (dareenka xaqa ah eek u adkaanshaha diimeed, cf. Falimaha Rasuullada 24:14; I Timoteyos 6:13)
    - a. Qirasho la'aanta dembi falista (cf. I Timoteyos 6:12; Cibraaniyada 10:23)
    - b. Qirshada dembi falista (cf. Matayos 3:6; Falimaha Rasuullada 19:18; Cibraaniyada 4:14' Yacquub 5:16' I Yooxanaa 1:9)



**NASB** “Ciise yahay Rabbiga”  
**NKJV** “Rabbiga ah Ciise”  
**NRSV, TEV, JB** “Ciise waa Rabbiga”

Kani waa qorshihii fiqi ahaaneed ee kaniisaddii hore qirashadeedii iimaanka iyo maquurinta ama baabtiiska. Adeegisigii ereyga “rabbi” wuxuu xaqiijiyey Ciise Ilaahnimadiisa (cf. Yoo’eel 2:32; Falimaha Rasuullada 2:32-22,36; Filiboy 2:6-11) halka magacii loo biciyey ee ahaa “Ciise” uu ka xaqiijiyey taariikhdiisa aadanenimo (cf. I Yooxanaa 4:1-6).

### MAWDUUC GAAR AH: MAGACA RABBIGA

Tani waxay ahayd weedh uu Axdiga Cusubi si guud ahaaneed ugu adeegsanayo la jiiigista shaqsi ahaaneed iyo awooddiisa firfircoonida leh ee triune ee Ilaaha runta ah kaniisadda dhexdeeda. Maysan ahayn arrin mucjiso leh oo lala yaabo, laakiin codsi ku aaddan ahaanshaha ama dabeecadda Ilaah.

Sia badan weedhani waxa ay Ciise ku muujinaysaa in uu yahay Rabbiga ayaa ah (cf. Filiboy 2:11)

1. Qirashada uu qofka rumaysadkiisa Ciisre Masiix ku qirto maqurinta ama baabtiiska (cf. Rooma 10:9-13; Falimaha Rasuulladaq 2:39; 8:12,16; 10:48; 19:5; 22:16, I Korintos 1:13,15; Yacquub 2:7)
2. Inuu wax ku saaro ama ku bixiyo (sida jinka) (Matayos 7:22; Maarkos 9:38; Luukos 9:49; 10:17; Falimaha Rasuullada 19:13)
3. Inuu wax ku bogsiiyo (cf. Falimaha Rasuullada 3:6,16; 4:10; 9:34; Yacquub 5:14)
4. In loo adeego (cf. Matayos 10:42; 18:5; Luukos 9:48)
5. Waqtiga ay kaniisaddu samaynayso edbinta (cf. Matayos 18:15-20)
6. Marka la wacdinayo kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 9:15; 15:17; Rooma 1:5)
7. Tukashada dhexdeeda (cf. Yooxanaa 14: 13-14; 15:2,16; 16:23; I Korintos 1:2)
8. Waddo ay Masiixiyaddu ku si gudbi karto (cf. Falimaha rasuullada 26:9' I Korintos 1:10; II Timoteyos 2:19; Yacquub 2:7; I Butros 4:14)

Wax walboo aan ku samaynno faafiyeyaal, adeegayaal, caawiyeyaal, bogsiiyeyaal, jinni saareyaal, IWM, wax kale kuma samaynno, ee waxaannu ku dabeecaddiisa, awooddiisa, shuqulladiisa—waaweyn ee Magaciisa!

▣ **“oo aad qalbiga ka rumaysatid”** weedhani waxay la mid tahay qirashada, oo waxay bixinayaa labada arrimood ee matanaha ah ee rumaysadka. Baybal ahaan ereyga “rumaysad” (*pistis*) waxaa ku jira (1) aaminaad shaqsi ahaaneed (Cibraaniga), (2) Ku qanacsanaan in-dheer-garadnimo (Giriig), iyo (3) u diyaarsanaan go'aan ah oo aan kala o' lahayn (Sharciga Ku Noqoshadiisa 30:20).

Ereyga “qalbi” Axdigii Hore dhexdiisa waxaa loo isticmaalay qofka gebi ahaantiis. Bawlos arrintan dhexdeeda wuxuu ku xusay labo erey oo kala ah “af” iyo “qalbi” sababtuna waa isagoo ka soo xigtay Sharciga Ku Noqoshadiisa 30:14 sida ay ugu jirto aayadda 8. Tan loolama jeedin in la aasaasayo xeer adag oo degdeg ah oo ay tahay in qofku cod dhawaaq weyn uu ku ducaysto si uu ugu badbaado.

**10:10 “laga rumaystaa xagga xaqnimada”** Ujeeddada Ilaah uu qof kasta rumayste ah u hayo ma aha inuu jannada maalin geli doono, laakiin u-ekaanta Masiixa oo hadda ah! Qaybta kale ee xooggan eek u saabsan doorashada xorta ah, eek u jirta Efesos 1:3-14, waxay si awood badan tusaale ugu tahay runtan ku jirta aayadda 4. Rumaystayaasha waxaa loo doortay in ay noqdaan kuwo qudduus ah oo eed la'aan ah! Doorashadu ma aha oo keliya mad'hab, laakiin waa qaab nololeed (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 30:15-20).

Aayadda 10 waxaa ku jira labo caddaymood oo xoojinaya amarkii weynaa ee (cf. Matayos 28:19-20), badbaadada (xer ka dhiga) iyo xaqnimada oo ah (bara inay dhawraan wax walba oo aan idinku amray). Sinaatan oo kale waxaa laga helayaa Efesos 2:8-9 (badbaado xor ah oo ku timid nimcada Ilaah ee inoo soo martay Masiixa) iyo ugu yeeridda “shuqullo wanaagsan” sida ku jirta “Efesos 2:10. Dad oo ah kuwii uu araggiisa gaarka ah ayaa Ilaah rabitaankiisu ahaa.

**10:11** Tani waa xigasho ka timid Ishacyaah 28:16, oo uu Bawlos ku daray ereyga ah “ku alla kii.” Sida ku jirta Ishacyaah tani waxa ay la xidhiidhaa rumaysashada Ciise Masiix, dhagaxii turunturada ee Ilaah (cf. 9:32-33). Sida cutubka 9 uu u weynaynayo qaaddirnimada Ilaah, ayaa cutubka 10 na u weynaynayaa baahida ay shaqsiyaadku u qabaan, keli ahaan iyo dhammaantood, in ay jawaab u celiyaan Masiixa. Deeqda caalamiga ah waxaa si cad loogu arkayaa marka uu leeyahay “mid kasta” sida ku jirta aayadda 4 iyo “Ku alla kii” oo ku jirta aayadaha 11,13 iyo “in alla” sida ku jirta aayadda 12 (labo jeer)! Middani waa isla simidda fiqi ahaaneed ee (doorashada xorta ah) ee la xushay ee ku cad cutubka 9.

▣ **“rumaysta isaga”** tanaa ficil jooga oo wata ama uu la socdo meeleeeyaha *epi* (cf. 4:24; 9:33; I Timoteyos 1:16). Rumayntu ma aha oo qura jawaabta bilowga ah, laakiin waa shuruudo badbaado oo socda! Ma aha fiqi saxan (runta ku jirta injiilka) waxa lagu badbaadayo, laakiin xidhiidh shaqsi ahaaneed (qof injiilka ku qumman) oo ay ka muuqato nolol Ilaah (nolol injiileed). Iska ogoow rumaysadka fududi wuxuu kala fogeeyaa runta iyo nolosha. Rumaysadka wax badbaadiyaahi waa rumaysadka adkaysta ee is beddelka sameeya! Nolosha weligeed ahi waxay leedahay dabeecado lagu garan karo! Arag mawduuc gaar ah: Rumaystayaasha 4:5.



**NASB, TEV  
NKJV, NRSV  
JB**

**“Niyad jebi mayo”**

**“ceeboobi maayo”**

**“wax sabab ah uma lahaan doonpo ceebta”**

Kuwa aamina (“rumeeya”) Masiixa marna ma leexan doonaan. Tani waa xigasho ka timid ama laga soo qaatay Ishacyaah 28:16, oo aayad fure ah u ahayd wax baristii rasuul Bawlos ee 9:33.

**10:12 “Yuhuudda iyo Gariigtu waxba kuma kala duwana”** Tani waa awoodda ugu weyn ee ku jirta Axdiga Cusub (cf. Rooma 3:22,29; Galatiya 3:28; Efesos 2:11-3:13; Kolosay 3:11). Ilaahii kelida aha ayaa uunkiisii lumay ku madax furtay falliimmadiisa u gaarka ah. Wuxuu rabaa in dhammaan aadanihii uu araggiisa ka abuuray ay isaga u yimaadaan oo ay Isagoo kale noqdaan! Dhammaantood u yimaadaan Isaga!

Dabeecadda caalamigaah ee injiilka (warka wanaagsan) dhexdiisa (“in alla” labo jeer ayaa lagu adeegsaday aayadda 12) labo waddo ayeyna u kala qaadaysaa: (1) ma jiro kala duwanaansho u dhexeeya Yuhuudda iyo Giriigta; dhammaantood way lumeen (cf. 3:9,19,22-23; 11:32) iyo (2) ma jiro kala duwanaansho u dhexeeya Yuhuudda iyo Giriigta; dhammaantood way heli karaan badbaadada. Injiilku isagaa qaada dhammaan culaabaha aadanaha (cf. Yoo’eel 2:28-29; I Korintos 12:13; Galatiya 3:28; Kolosay 3:11), ugu yaraan booska badbaadada.

▣ **“waana u taajir”** Marka Nawlos uu ka fakaro nimcada Ilaah eek u jirta Ciise Masiix, wuxuu aalaaba isticmaalayaa ereyga “taajir” (cf. 2:4; 9:23; 11:12 [labo jeer],33; I Korintos 1:5; II Korintos 8:9; Efesos 1:7,18; 2:7; 3:8,16; Filiboy 4:19; Kolosay 1:27; 2:2).

**10:13** Xigashadan caanka ah ee ka timid Yoo’eel 2:32 waxa ay leedahay labo xoojinood marka la eego adeegsiga Bawlos (1) Yoo’eel dhexdiisa magaca YHWH ayaa loo adeegsaday, Bawlos na Rooma dhexdeeda, Butrosna Falimaha Rasuullada 2:21, iyadoo macaga Masiixaq u taagan (Sidoo kale ogsoonow Yooxanaa 12:4 iyo Ishacyaah 6:9-19; Filiboy 2:9 iyo Ishacyaah 45:22-25; Rooma 9:33 iyo Ishacyaah 8:13-14); iyo (2) iyo Yoo’eel dhexdiisa “badbaadaada” waxaa loo adeegsaday in si jidh ahaana loo keeno, sida ku jirta Roomana waxaa cafiska iyo badbaada weligeed ah.

Axdigii Hore, aragtida ah “ku dhawaaqidda magacu” waxay tusaale u ahayd in si bayaan ah qaab cibaado loou qirto rumaysadka. Isla middan waxaa lagu dhex arki karaa Falimaha Rasuullada 7:59; 9:14,21; 22:16; I Korintos 1:2; II Timoteyos 2:22. Ka arag mawduuc gaar ah: Ugu yeedhid 1:6.

#### **MAWDUUC GAAR AH: CIISAHA NAASAREET**

Waxaa jira dhawr erey oo kala duwan oo Giriig ah oo lagu isticlaay Axdiga Cusub dhexdiisa si Ciise loogu muujiyo si cad kan uu yahay.

##### **A. Ereyada Axdiga Cusub**

1. Naasareet – Magaalada ku taal Galiili (cf. Luukos 1:26; 2:4,39,51; 4:16; falimaha Rasuullada 10:38). Magaaladan laguma sheegin qoraalladii oo dhan laakiin, fariimihii dambe ayaa laga helay.

In Ciise uu Naasareet la yimaado wax amaan ah (cf. Yooxanaa 1:46). Calaamadda iskutallaabta Ciise ee ku jirtay meeshan magaceeda ayaa waxa ay calaamad u ahayd nacaybka Yuhuudda.

2. *Nazarēnos* - waxay sidoo kale u la xidhiidhtaa booska juquraqafi ahaaneed (cf. Luukos 4:24; 24:19).

3. *Nasōraios* - waxay u taagan tahay magaalo, sidoo kalena waa cayaar ku aaddan sida Cibraaniga uu ku yahay ereyga Masiixi “Laan” (*netzer*, cf. Ishacyaah 4:2; 11:1; 53:2; Yeremyaah 23:5; 33:15; Sakariyaah 3:8; 6:12). Luukos Ciise ayuu middan u adeegsanayaa sida ku jirta 18:37 iyo Falimaha Rasuullada 2:22; 3:6; 4:10; 6:14; 22:8; 24:5; 26:9).

##### **B. Adeegsiyadii taariikh ahaaneed ee ka baxsanaa Axdiga Cusub. Doorashadan waxay lahayd adeegso kale oo taariikh ahaaneed.**

1. Waxay muujinaysaa Yuhuud (pre-Christian) in ay yihiin kooxda faraca.

2. Waxaa loo adeegsaday goobaha Yuhuudda si loo muujinyo rumaystayaasha ku jira Masiixa (cf. Falimaha Rasuullada 24:5,14; 28:22).



3. Wuxuu noqday ereyga tooska ah ee lagu muujiyo rumaystayaasha sida kaniisadihii Suuriya ee (Aramyga). “Masiixi” waxaa laga dhex adeegsanayey kaniisadihii Giriigta si loogu yeero rumaystayaasha.
4. Waqti ka mid ah dhiciddii Yerusaaalem, Faarisiintii ayaa waxay dib isugu abaabuleen Jamnia waxayna dejiyeen in uu jiro farqi u dhexeeya sunnagooqga ito kaniisadda. Tusaale ka mid ah nooca inkaarta looga soo hor jeedo Masiixiyiinta ayaa laga helayaa “Siddeed iyo toban saadaalood” oo ku jira *Berakoth* 28b-29a. oo rumaystayaasha ugu yeeraya “Nazarenes” “Naasariiniyiinta.”

“Mar qura Naasariiniyiinta iyo kuwa dhaxalku muuq beeleen; iyaga waxaa laga tirtiri doonaa buugga nolosha oo kua rumaysadka leh lagulama qori doono.”

#### C. Aragtida qoraaga

Waxaa iga yaabiyey dhawaaqyo badan oo uu ereygu leeyahay, inkasoo aan garanayo in aan Axdigii Hore loogu maqlin sida kitaabka (Yashuuca) dhexdiisa uu dhawr dhawaaq oo kala duwan ugu leeyahay Af Cibraaniga. Welise, (1) waxaad marka koowaad arkaysaa sida uu xiriirka ula leeyahay ereyga Masiixiyaddu ereyga “Branch” ama “laan”. (2) Marka labaad, sida uu ugu xiran yahay tusaalaha diidmada ah; (3) saddex, waa yar yahay ama maba jiro dareen ay dadkii ay isku xilliga ahaayeen ka qabeen magaalada Naasareet ee Galiili ku taal ay iga dhigayso in aan ku joogo si aan caadi ahayn sida macnaheeda saxda ah uu yahay; iyo (4) tan afraad o ah, sida jinnigu u sheegayo dareen ah sidii dhammaadkii waqtiga oo kale (“Ma waxaad u timid in aad na burburiso?”)

Barasho ereyadan baybalka oo faahfaahsan waxaad ka heli kartaa Colin Brown (ed.), *The new International Dictionary of New Testament Theology*, vol. 2, bogga 346.

#### **NASB (UPDATED) TEXT: 10:14-15**

**<sup>14</sup>Haddaba sidee bay ugu baryi doonaan kan aanay rumaysnayn? oo sidee bay u rumaysan doonaan k4an aanay maqlin? oo sidee bay u maqli doonaan haddii aan la wacdiyin? <sup>15</sup>oo sidee bay u wacdiyi doonaan haddaan la dirin? sida qoran, Qurux badanaa cagaha kuwa wax ku wacdiya waxyaalaha wanaagsan.”**

**10:14-15** Waxaa jira su’aalo ku saabsan xigashooyinka laga soo qaadanyo Axdigii Hore in ay tilmaamayaan in Israa’iil aysan marna ka jawaabin YHWH farriimihisa oo aysan u jawaabin farriin-wadayaashiisa (cf. Nexemiyaah9; Falimaha Rasuullada 7). Ilaah wuxuu soo diray farriinsidayaal (Nebiyo, rasuullo, wacdiyeyaal, macallimiin, kuwo dadka gaara). Farriin-wadayaashani waxay barakooyin Ilaah u yihiin adduunka baahan. Haddaba maaddaama Ilaah soo diro farriin-wadayaasha injiilka waxaa kuwa maqla laga doonayaa in ay si ku habboon uga jawaabaan farriimahooda. Bawlos wuxuu fikirkan ku fadhiisayey xigasho uu ka soo qaatay Ishacyaah 52:7. Bawlos wuxuu aayaddan Axdigii Hore ah u ballaadhiyey in ku nuujiyo macallimiinta injiilka.

Rumaysadka wax badbaadiyaahu wuxuu leeyahay dhawr sheeyood (1) farriintaq oo la rumeeyo. (2) Qofka oo qaata (3) bilaabis tawbadkeen iyo rumaysad aan kala go’ lahayn (4) nolol adeecis badan; iyo (5) dulqaadash ( ka eeg tusmo hoosaadda 1:5).

**10:15** Tan ayaa ah hawsha weyn ee uu kitaabka rooma xambaarsan yahay. Badbaadadu waxay ku timaaddaa in la maqlo injiilka iyo in la qaato injiilka. Wacdiyeyasha waxaa loo soo diraa in dadka “dhaamtaantood” ay ku badbaadaan!

#### **NASB (UPDATED) TEXT: 10:16-17**

**<sup>16</sup>laakiin kulligood ma ay wada dhegaysan injiilka. Waayo, Isayos wuxuu leeyahay, Rabbow, yaa rumaystay warkayagii? : <sup>17</sup>Haddaba rumaysadku wuxuu ka yimaadaa maqlidda, maqlidduna waxay ku timaadaa hadalka Masiixa.”**

**10:16** Haddaba Bawlos wuxuu adeegsanayaa qoraal wax sii sheegid oo Axdigii Hore ah oo rasmi ahaan qeexaysa Farriintii YHWH ee ku socotay Israa'iil, in uu ku qeexo injiilka Ciise Masiixa. Sidii ay Yuhuuddii Axdigii Hore u diidday farriintii Ilaah, si la mid ah eyey Yuhuuddii waagii Bawlos u u diidday. Aayaddani waa xigasho iyana laga soo qaaday Ishaacyaah 53:1 laakiin waxay sidoo kale fiqi ahaan la xidhiidhtaa Israa'iil diidmadeedii farriinta Ilaah sida ku jirta Ishacyaah 6:9-13.

**10:17** Injiilku marka koowaad waa farriin (Galatiya 3:2). Laakiin farrintu waxa ay noqonaysaa erey qof leeyahay “ereyga Masiixa” (cf. Kolosay 3:15-16).

▣ **“hadalka Masiixa”** marka la eego macnaha ay xambaarsan tahay waxaa qasab ah in tani ay qeexayso farriintii Masiixa ee dadka lagu wacdiyey. Wacdiga injiilku waa waddo Ilaah deeqdiisa adduunka u soo marinayo Masiixa.

Qoraalladii hore ee Giriigga ee qudduuska ahaa halkan way ku kala duwan yihiin: (1) MSSP<sup>46</sup>,  $\kappa^*$ , B, C, D<sup>\*</sup> waxay leeyihiin “ereyga Masiixa” halka (2) MSS  $\kappa^c$ , A, D<sup>c</sup>, K, P, ay leeyihiin “ereyga Ilaah.” Kan koowaad waa caadi ma aha (cf. Kolosay 3:16 oo sidaas daraaddeed, rasmi ahaan (tani waa mid ka mid ah sida dadku ay eedda ugu sameeyaan qoraalka.) UBS<sup>4</sup>-ku wuxuu siinayaa xarafka “A” isagoo ku xadaynaya ama ku sheegaya (waa la hubaa). Tani waa meesha kale ee qura ee uu ka muuqanayo Axdiga Cusub dhexdiisa. Midda xigta, “ereyga Ilaah” marar badan ayuu ka dhex muuqanayaa oo aad ku arkaysaa Axdiga Cusub dhexdiisa (cf. Luukos 3:2; Yooxanaa 3L34; Efesos 6:17; Cibraaniyada 6:5 iyo 11:3).

**NASB (UPDATED) TEXT: 10:18-21**

**<sup>18</sup>laakiin waxaan leeyahay, Miyaanay maqlin? Haah, runtii. Codkoodii wuxuu gaadhay dhulka oo dhan, Hadalkoodiina wuxuu gaadhay dunida meesha ugu shishaysa. <sup>19</sup>laakiin waxaan leeyahay, Miyaan reer bini Israa'iil ogayn? Ugu horraystii Muuse wuxuu yidhi, Waxaan idinkaga hinaasin doonaa kuwo aan quruun ahayn; Quruun aan wax garanayn waan idinkaga cadhaysiin doonaa. <sup>20</sup>Isayosna waa dhiirranaa oo wuxuu yidhi, Waxaa i helay kuwo aan i doonayn, Waxaan u muuqday kuwo aan wax i weydiinayn. <sup>21</sup>laakiin reer bini Israa'iil wuxuu ku yidhi, Maalintii oo dhan waxaan gacmahayga u kala bixinayay dad caasi ah oo muran miidhan ah.”**

**10:18** aayaddani waxa ay caddaynaysaa in Yuhuudda badankood ay maqlen farriinta oo ay diidmadeedii iyagu masuul ka ahaayeen (weedha qoraalka Giriigga wuxuu muujinayaa oo ku jirta labo doodmo oo xoogan). Dhibaataadu ma ahayn jaahilnimo, laakiin rumaysaddarro!

Bawlos wuxuu soo xiganayaa Sabuurrada 19:4. Sabuurkan dhexdiisa aayadaha i-6 waxa ay qeexayaan muujinta dabiicigaah, ee uu Ilaah uunka uga dhex hadlayo (Rooma 1-2). Bawlos wuxuu u beddelayaa (1) marqaati furka caalamiga ah (“ee dhulka oo dhan”) iyo (2) oo macnuhu yahay in farriinta laga soo gudbiyo codka aammusan ee uunka oo loo soo gubkiyo wacdigaayaasha injiilka (rasuullada, nebiyada, kuwa dadka gaara, wadaaddada, iyo macallimiinta cf. Efesos 4:11), oo qeexaysa muujin gaar ah (cf. Sabuurrada 19:8-14). Hadafka ugu weyn waxa uu yahay in injiilku kor ugu soo baxay in adduunku garto waqtigii Bawlos (Greco Roman World). Bawlos wuxuu isticmaalayaa tarjumaado RABBANICAL ah; macnihii Axdigii Hore ayuun buu ujeedooyinkiisa fiqi ahaaneed ugu adeegsanayaa. Waxaa loo baahan yahay in cad loo sheego in Bawlos isticmaalkiisii Axdigii Hore, si la mi ah sidii rasuulladii kaleba, ay ahaayeen wax Ilaah wato oo uu Ruuxa Qudduuska ahu hoggaaminayo (cf. II Butros 1:20-21). Rumaystayaasha maanta, ee iftiinka Ruuxa ku hoos jira, in ay dib u soo saaraan qodobbo tarjumaadeed oo ku saabsan qoraayaashii Axdiga Cusub.

**10:19-20** Yuhuuddu xitaa Muuse ayey ka maqlen farriinta. Yuhuuddu way maqlen oo way awoodeen in ay fahmaan rumaysadka ku jira farriinta eek u saabsan in iyada awgeed ay dadka oo dhan xaq kaga noqonayaan Ilaah hortiisa.

Aayadahan dhexdooda, Ilaah wuxuu dadkiisii ballanka ugu sheegay sida kuwa aan Yuhuudda ahayn ku soo galayaan. Tan waxaa lagu samaynayaa xigasho laga soo qaaday kitaabka Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:21 sida ku jirta aayadda 19 iyo Ishacyaah 65:1-2 iyo aayadaha 20-21). Ku soo daristan yaabka leh waxay ahayd in dadka Yuhuudda ah dareenkooda rumaysadka lagu kiciyo (cf. 11:11,14).

**10:21** qoraakan waa xigasho laga soo qaatay tarjumaaddii Septuagint ee Ishacyaah 65:2 oo khuseeya dadkii axdiga diidmaddoodii YHWH (cf. Ishacyaah 65:1-7). Ilaah aammin buu ahaa; laakiin Israa’iil aammin ma ahayn. Aammin darraddoodii waxay keentay in xukun dhulka ahu uu ku dhaco quruuntii halkii qof qof ka ahayd waagii hore, laakiin diidmaddoodii Ilaah xaqnimadiisii uu u soo mariyey Ciise masiix ayaa iyaga u hor seedi doonta xukun weligiis ah!

## SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Hadii doorashada Ilaah ay muhiim tahay muxuu Bawlos ugu tukaday Israa’iil sida ku jirta 10:1? Maxay tahay sababta 10:9-11 ay aad u xoojinayaan baahida jawaabta aadanaha?
2. Muxuu yahay macnaha aayadda 4 aad? “Masiixu ma wuxduu so af jaray sharciga”?
3. Tax u same waxyaabaha loo laabahan yahay in la rumeeyo ee ku jira 10:9-11.
4. Muxuu Bawlos had iyo goor u soo xigtaa Axdigii Hore? Maxay tani ula xidhiidhaa kaniisaddii hore ee dada aan Yuhuudda ahayn ee Rooma?
5. Sidee bay aaydaha 11-13 ula xidhiidhaan cutubka 9 aad?
6. Sidee bay aayadaha 14-15 ula xidhiidhaan hawlgallada adduunka?
7. Sidee bay doonista xorta ah ee aadanaha loogu muujinayaa in ay qayb ka tahay badbaadada aadanaha sida ku jirta cutubta 10?

# ROOMA 11

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Haraadigii Israa'iil	Diidmadii Israa'iil kaamil ma ahayn	Diidmadii Israa'iil mid ugu damabayn ah ma ahayn	Naxariista Ilaah ee Israa'iil	Haraadigii Israa'iil
11:1-10	11:1-10	11:1-10	11:1-6 11:7-10	11:1-10
Badbaadada dadka aan Yuhuudda ahayn	Diidmadii Israa'iil mid ugu damabayn ah ma ahayn			Yuhuudda oo dib loo soo celinayo mustaqbalka
11:11-12	11:11-36	11:11-12	11:11-12	11:11-15
	Diidmadii Israa'iil kaamil ma ahayn		Badbaadada dadka aan Yuhuudda ahayn	
11:13-16		11:13-16	11:13-15	Yuhuuda oo weli ah dadkii la doortay
		Masaalka geedka saytuunka	11:16-18	11:16-24
11:17-24		11:17-24	11:19-24	
Dib u soo celintii Israa'iil		Israa'iil oo dhan way badbaadi doontaa	Ilaah naxariistiisadadka oo dhan	Israa'iil u soo noqoshadeedii Ilaah
11:25-32		11:25-32	11:25-32	11:25-27 11:28-29 11:30-32
			Ilaah baa ku ammaan	Qasiido ku aaddan naxariista Ilaah iyo Xikmad
11:33-36		11:33-36	11:33-36	11:33-36

## AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga viii)

### ADIGA OO RAACAYA UJEEDEKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafiiri lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafiirka. Waa in aadan middan ula tegin qof kuu tafiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

1. Baaragaraaf-ka koowaad

2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

#### FAHAN MACNAHA GUUD

- A. Cutubka 11 waxa uu sii wadayaa xiriirka wada socda ee ka dhexeeya doorashada iyo injiilka. Doorashadii Axdigii Hore waxay ahayd mid adeeg ku imanaysay, halka Axdiga Cusub ay doorashadu ka tahay badbaado (check your concordance!) Rumaystayaasha waxaa loogu yeeray labadaba in ay noqdaan qoyska Ilaah (Axdiga Cusub) iyo adeegayaal (Axdigii Hore). Doorashadu waa mid baahsan iyo mid shaq ah labadaba, eyelid iyo diidid (Yacquub/Israa'iil-Ceesow/Edom; Muuse/Fircoon). arrinta meesha taallaahi ma aha wax u dhexeeya qaaddirnimada Ilaah iyo doorashada xorta ah ee aadanaha, laakiin dabeecadda Ilaah. Cutubyada 9-11 waxa ay si ku celcelis leh u qeexayaan naxariista Ilaah iyo fallaagonimada aadanaha dhacay. Ilaah waa aammin, aadanuhuna waa aammin xumayaal.
- Doorashadu maaha mad'hab wax dibadda u bixinaysa, laakiin waa aasaas rajio, ammaan iyo kalsoonaan u leh kuwii ka jawaabay ballammadii iyo wiilkiisii uu axdigii mu soo kaamilay.
- B. Cutubka 9 Bawlos wuxuu muujinayey Ilaah qaaddinimadiisa iyo doorashadiisa xorta ah. Xitaa xidhiidhka ballanka dhexdiisa, Ilaah waa ku xor. Cutubka 10 Bawlos wuxuu ku muujiyey in Yuhuuddu ay xor u ahaayeen in aqbalaan ama ay diidaan ballammadii iyo axdiyadii Ilaah. Maaddaama ay caddeeyaan in aysan aammin ahayn oo ay diideen ballammadii iyo axdigii Ilaah, hal dareen ayey wada qabeen, oo haa kii Ilaah ku diiday. Arrintu si kastaba ha ahaatee, cutubka 11 Bawlos wuxuu ku xoojinayaa aamminimada Ilaah, xitaa wejiga rumaysaddarrida Israa'iil (cf, Sharciga Ku Noqoshadiisa 8).
- C. Waagii hore, iyo haatan la joogaba, Yuhuud haraa ah ayaa rumaysay oo si muuqata looga arkay rumaysadka Masiixa Ilaah. Bawlo qudhiisa ayaa middan tusaale u ahaa. Rumaysad la'aantii qaar Yuhuudda ka mid ah, ayaa waxa ay oggolaatay in la oggolaado kuwa aan Yuhuudda ahayn ee rummaysadka leh. Kusoo dariddii kuwa aan Yuhuudda ahayn waxay keentay natiijada ah (1) dadkii Ilaah oo dhammays tiran, ama tirade buuxda ee Ilaah doorashadiisa, Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn labadaba. Ku soo dariddan kuwa aan yuhuudda ahayn, waxa ay Israa'iil u kacdo in ay aaminaan Ilaah Masiixiisa ah, Ciise.

#### BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

##### NASB (UPDATED) TEXT: 11:1-6

<sup>1</sup>“De waxaan leeyahay, Ilaah miyuu xooray dadkiisii? Ma suurtoowdo. Waayo, anba waxaan ahay mid reer bini Israa'iil ah. oo farcankii Ibraahim ah, oo qabiilkii Benyaamiin ah. <sup>2</sup>Ilaah dadkiisii uu hore u yiqiin ma xoorin. Mise ma waydaan aqoon waxa Qorniinku ka sheegayo Eliyaas? siduu Ilaah ugu cawday isagoo reer bini Israa'iil ka cabanaya oo leh, <sup>3</sup>Rabbow, nebiyadaadii way dileen, meelahaagii allabarigana way dumiyeen, oo keligay baa hadhay, oo naftayday doondoonaayaan. <sup>4</sup>laakiinse jawaabtii Ilaah oo u timid isaga maxay leedahay? Waxaan nafahaantayda ula hadhay toddoba kun oo nin oo aan Bacal u jilba joogsan. <sup>5</sup>Sidaas oo kale wakhtigan la joogona waxaa jira kuwo hadhay oo nimco lagu doortay. <sup>6</sup>laakiinse haddii nimco lagu doortay, de haddaba ma aha mar dambe xagga shuqullada, haddii kalese nimcadu mar dambe nimco ma aha.”

**11:1 “Ilaah miyuu xooray dadkiisii”** Su'aashani waxa ay sugaysaa jiwaabteeda oo noqonaysa “maya”. Bawlos wuxuu su'aashan uga jawaabayaa 1b-10. Qaybtan waxaa qasab ah in ay la xidhiidhto Bawlos dooddiisii hore. Cutubyada 9-11 waxa ay muujinayaan sidii dooddu isugu xidhantay.

Aad ayey u xiiso badan tahay in la ogsoonaado in qoraalladii qudduuska ahaa ee Giriigta ee waraaqaha ahaa ee P46 uncial F iyo G ay leeyihiin “Inheritance” “dhaxal” baddelka “people” ama “dad”, oo laga yaabo in ay ka yimaadeen LXX ee Sabuurada 94:14.

▣ **“Ma suurtoowo”** Tani waxa ay ahayd dabeecadda Bawlos in uu su’aalaha u yeelo qaab diidmo sida ku jirta (diatribe cf. 3:4,6,31; 6:2,15; 7:7,13; 9:14; 11:1,11).

▣ **“anba waxaan ahay mid reer bini Israa’iil ah”** Bawlos asaga naf anaatiisa ayaa is sheegaya si uu u muujiyo in ay jiraan Yuhuud rumaysad leh. Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan taariqa Bawlos Yuhuudnimadiisa waxaad ka heli kartaa Filiboy 3:5.

▣ **“Ilaah dadkiisii uu hore u yiqiin ma xoorin”** Middan waxaa laga yaabaa in laga soo xigtay Sabuurrada 94<sup>14</sup> (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 31:6; I Samuu’eel 12:22; I Boqorrada 6:13; Baroortii 3:31-32). Waa jawaab waafi ku ah su’aasha aayadda 1.

▣ **“uu hore u yiqiin”** kani waa tix raac iska cad in Ilaah uu horay u doortay reer banii Israa’iil. Eeg tasmada 8:29. Waxay doodda dib ugu celinaysaa cutubka 9, sida aayadaha 4-6 ay sidoo kale samaynaayan. Arrintu ma ahayn camalka ama shaqada Israa’iil, laakiin Ilaah doorashadiisa. Ilaah aammin ayuu ballammadiisa ugu yahay sida uu yahay, laakiin ma aha camal ama shaqo ay Israa’iil samaysay (cf. Yexesqeel 36:22-32).

▣ **“Qorniinku ka sheegayo”** waa tix raac la soo qaatay oo qeexaya baxsashadii Eliyaas uu Yesebeel ka soo baxsaday sida ku qoran I Boqorrada 19:10, oo xigasho ahaan loogu qoray aayadda 3.

▣ **“Waxaan nafahaantayda ula hadhay toddoba kun”** “For myself” oo macnaheedu yahay “aniga qudhaydu” kuma jirto qoraalka Masoretic ee Cibraaniga ah sida ay u qoran tahay I Boqorrada 19:18 (Bawlos kama soo qaadan MT-ga ama LXX), laakiin Bawlosaya ku daray si uu ugu xoojiyo doorashada Ilaah. Haraaga rumaysadka leh ee ku qoran I Boqorrada 19:18 waxa aqy muujinaysaa Ilaah doorashadiisa, ma aha diidmadooda in ay Bacal caabudaan.

Tilmaanta uu Bawlos samaynayo waxaa weeye in ay jirtay koox yar oo rumaysad lahayd, kuwaasoo xitaa ku dhex jiray ama ku dhex noolaa israa’iishii aan iimaanka lahayn ee sanam caabudayaasha ahaa ee xilligii Eliyaas. Waqtigii Bawlos waxaa sidoo kale jiray dad Yuhuudda kasoo haray oo rumaysad lahaa oo iyaguna Yuhuud ahaa. Fac kasta dhexdiisa waxaa ku jirtay Yuhuud rumaysadkooda awgii loogu jawaabay balse aan loogu jawaabin dadaallo ay shaqsi ahaantooda u qabteen. Bawlos wuxuu caddaynayaa in Yuhuuddan rumaysadka leh ay Ilaah naxariistiisa iyo nimcadiisu ay tamar siiyaan iyaga (aayadaha 5-6).

▣ **“Bacal”** waa magic lab oo uu la socdo aartikal dheddig. Sababtuna waxay tahay iyadoo ay Yuhuuddu caadiyan shaqallada dheddig ku dari jireen iyagoo ka soo qaadanaya ereyga Cibraaniga ah ee “shame” (*Bosheth*) oo ku daraya shibbaneyaasha magacyada ilaahyada qalaad si wax wanaagsan uga dhigaan.

**11:5-6** Kuwani waa aayado fure ah. Waxay falimihii hore ee Ilaah ee Axdigii Hore ku xidhiidhinayaan xaaladda haatan taagan. Xidhiidhku waa doorashadiisa naxariistiisa awgeed (cf. 9:15,16,18; 11:30,31,32). mudnaanta koowaad waa nimcada Ilaah, laakiin rumaysadka aadanuhu waa lagama maarmaan (cf. Maarkos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21), si kasta oo ay ahaatana, kuma imanayso mudnaan aadane, (cf. 2:8-9; II Timoteyos 1:9; Tiitos 3:5). Runtan ku jirta doodda Bawlos ee cutubyada 9-11 waa kuwo lagama maarmaan ah.

**11:6 “Haddii”** waxaa jira jumlado shuruudaha ka hadlaya oo waa kuwo booska koowaad gelaya, kuwaasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeeddooyinkiisii uu wax u qoray. Badbaadadu waxa ay ku timaaddaa nimcad a Ilaah (eeg tasmada 3:24, cf. 6:23; Efesos 2:8-9).

▣ Kitaabka King James KJV waxa uu ku darayaa weedhan xoogaa qoraal ah aayadda 6. “laakiinse haddii nimco lagu doortay, de haddaba ma aha mar dambe xagga shuqullada, haddii kalese nimcadu mar dambe nimco ma aha.” Weedhani kuma jirto sida ay qoraalladii Giriigta ee qudduuska ahaa u badan yihiin P<sup>46</sup>, <sup>⋆</sup>, A, C, D, G ama P iyo qaybaha Laatiinkii hore, laakiin labo hab oo kala duwan oo weedha ah ayaa laga helayaa qoraallada <sup>⋆c</sup>, iyo B. UBS<sup>4</sup> wuxuu middan u caddaynayaa “A” oo laga wado waa xaqiiq.

**NASB: (UPDATED) TEXT: 11:7-10**

<sup>7</sup>“Waa maxay haddaba? Wixii reer bini Israa’iil doondooneyeen ma ay helin, laakiinse kuwii la doortay waa heleen, intii kalena waa la engejiyey, <sup>8</sup>sida qoran, Ilaah wuxuu iyaga siiyey maskax hurudda, iyo indho aanay waxba ku arkin, iyo dhego aanay waxba ku maqlin, ilaa maalintatan. <sup>9</sup>Daa’uudna wuxuu yidhi, Miiskoodu ha u noqdo dabin iyo wax qabsada iyaga, Iyo wax ay ku turunturoodaan, iyo wax ka aarguta iyaga; <sup>10</sup>Indhahoodu ha madoobaadeen si aanay waxba u arkin, Dharbarkoodana foorari weligiis.”

**11:7 “Wixii reer bini Israa’iil doondooneyeen ma ay helin”** Tan meesha ugu horraysa ayaa laga dhigay weedha Giriigga si fikirkii Bawlos loo muujiyo. Yuhuud badan ayaa doondoonyaysay in Ilaah hortiisa xaq ku noqdaan, iyagoo ku raadinayey inay ficillo diimeed qabtaan, oo ay sidaas dadaallo naftooda ah ugu helaan xaqnimada. Yoolkoodii way seegeen! Jidhku kuma ammaanmo Ilaah hortiisa (cf. I KORintos 1:29; Efesos 2:9).



**NASB** “Laakiin kuwii la doortay waa ay helen”  
**NKJV** “laakiinse kuwii la doortay waa heleen”  
**NRSV** “kuwa la doortay ayaa helay”  
**TEV** “Koox yar oo qura ayey ahayd kuwii Ilaah u doortay in ay helaan”  
**JB** “Laakiin xoogaagii la doortay oo qura”

Tani waa aragtida Axdigii Hore ee “haraaga,” oo halkan aan uga arki karno 7000 ee haraaga ahayd eek u jirtayu I Boqorrada 19:18. Furuu ma aha dadaalka aadanaha, jinsiga ay yihiin ama dad diineed (aayadda 6), laakiin Ilaah nimcadiisa ku jirta doorashada (cf. Efesos 1:3-14).



“intii kalena waa la engejiyey” tani waa weedh darbeeb ah (cf. II Korintos 3:14). Tilmaantu waxay tahay in Ilaah engejiyey iyaga (cf. aayadaha 8-10). Macnaha qallafintu waa midka sharka leh (cf. II Korintos 4:4). “Hardened” (*Pōroō*) “engejin” waa erey xagga dawada la xidhiidha oo macnahiisu yahay indho beeline (Rooma 11:25; II Korintos 3:14; Efesos 4:18). Isla ereygan waxaa lagu adeegsaday Maarkos 6:52. Waa ereyga Giriig ka duwan kan ku jira 9:18 (*sklērunō*) oo naxariista cagsi ama liddi ku ah (cf. Cibraaniyada 3:8,15; 4:7).

Aayaddani waa bayaan ah waxayna soo koobaysaa 11:1-6. Intii la doortay waa ay rumeeyeen, laakiin kuwii aan la dooran waa la engejiyey. Arrintu si kastaba ha ahaatee, aayaddan si gooni ah looma qorin hab fiqi ahaaneed. Waxa ay qayb ka ahayd dood fiqi ahaaneed oo xasishay. Waxaa jirta xiisad u dhexaysa runta sida cad loogu dhex sheegay aayaddan iyo casumaadaha caalamiga ah ee cutubka 10. Wax cajiib ah ayaa halkan ku jira. Laakiin xalku ma aha in la diido ama la yareeyo haddii lab-labayni ku jirto ama wax wada socda tahay midba.

**11:8-10** Aayadahani waa xigashooyin laga soo kala qaaday Ishacyaah 29:10 (aayadda 8), Sharciga Ku Noqoshadiisa 29:4 (aayadda 8b laakiin lagama soo qaadan MT ama LXX) iyo Sabuurrada 69:22-23 ee (aayadaha 9-10). Waxay si run ah ugajawaabayaan hawshii Ishacyaah eek u aaddanaa Israa’iishii fallaagada ahayd eek u qoran 6:9-13. Ishacyaah wuxuu soo bandhigayey ereyga Ilaah, laakiin dadka Ilaah maysan awoodin, oo maysan ka jawaabi Karin. Bawlos wuxuu bixinayaa sharraxaad ku saabsan sida Ilaah u qallafinayo qaar sidii uu ku sameeyay 9:13,15,17.

**11:8**

**NASB, NKJV** “Ilaah wuxuu iyaga siiyey maskax hurudda”  
**NRSV, JB** “Ilaah wuxuu iyaga siiyey ruux hooseeya”  
**TEV** “Ilaah maskaxdoodii iyo qalbigoodii ayuu damiin ka dhigay”

Ereyga Giriigga ah ee (*katanuxis*) waxaa lagu isticmaalay oo qura Axdiga Cusub dhexdiisa, waxaa loo isticmaalaa qaniinyo cayayaan oo tirtirta dareenka oo maskaxda dareen aad u badan ku furta.

**11:10 “Indhahoodu ha madoobaadeen si aanay waxba u arkin, Dharbarkoodana foorari weligiis”** kan waxaa la yiraahdaa AORIST PASSIVE IMPERATIVE oo uu la socdo AORIST ACTIVE IMPERATIVE. Tani waa shayga la yaabka leh ee qaaddirnimahda Ilaah iyo jawaabta lagama maarmaanka ah ee laga rabo aadanaha. Wax walba waxaa laga helaa Ilaah xaggiisa, Isagu waa kan wax walba sameeya, welise doonistiisa qaaddirnimo

ayuu ku amray aadanaha in ay yeeshaan doorasho xor ah, maaddaama ay yihiin uunkiisii ugu dambeeyay. Kuwa aan rumaysadka ku jawaabin ayaa ah kuwa la qallafinayo rumaysad darradooda awgeed.

Qoraalkan Bawlos wuxuu ku qeexayaa Qorshaha Ilaah ee weligiis ee uu carruurta aadan oo dhan uu ku soo madax furanyo. Rumaysad darrada Yuhuuddu waxay irrid iimaan ama rumaysad u furtay kuwii aan Yuhuudda ahayn iyo dib u soo celinta laga masayro ee Israa'iil! Waa qorshe wax ku soo darin ah (cf. Efesos 2:11-3:13), ma ahn ka saarid! Qallafintu waxa ay qabataa beero goys weyn!

**NASB (UPDATED) TEXT 11:11-16**

**<sup>11</sup>“Haddaba waxaan leeyahay, Miyey turunturoodeen inay dhacaan? Maya, ma suurtoowdo! Laakiin dhicitinkoodii aawadiis ayaa badbaadinu ugu timid quruumaha kale inay ka hinaasaan <sup>12</sup>Haddaba haddii dhicitinkoodii yahay taajirnimadii dunida, liidnaantoodiina tahay taajirnimadii quruumaha kale, de buuxnaantooduna intee bay sii badin doontaa taajirnimadii? <sup>13</sup>laakiin waxaan la hadlayaa kuwiinan oo ka mid ah dadka aan Yuhuudda ahayn. Haddaba anigoo ah rasuulkii dadka aan Yuhuudda ahayn, hawshayda waan derejeeyaa, <sup>14</sup>Si aan uga hinaasiyo kuwa aan isku jidhka nahay oo aan qaarkood badbaadiyo. <sup>15</sup>Waayo, haddii ooriiddoodii tahay heshiiskii dunida, aqbaliddoodii maxay noqon doontaa, soo noolaadka kuwii dhintay mooyaane? <sup>16</sup>Inta ugu horraysa oo cajiinku hadday qodus tahay, de cajiinkuna wuu yahay, haddii xididku qodus yahayna, de laamahuna way yihiin.”**

**11:11 “Haddaba waxaan leeyahay”** Tani waxa ay la mid tahay weedhii ku jirtay 11:1. Waxay hab sidii hore ka duwan u sii wadaysaa dooddii fiqiga ee Bawlos. Aayadaha 1-10 ma aha in Israa'iil oo qura Ilaah xoorayo; aayadaha 11:24 sida ku jirta diidmada Israa'iil mid joogto ah maahayn; ujeeddaa ku jirtay. Iyada awgeedayaa dadka aam Yuhuudda ahayn loogu soo daray iimaanka.



**NASB** “uma aysan turunturroon si ay u dhacaan, miyey dhacday”  
**NKJV, NRSV** “Haddaba waxaan leeyahay, Miyey turunturoodeen inay dhacaan”  
**TEV** “markii Yuhuuddu turunturrootay,umaysan dhicin xumaantoodii”  
**JB** “Ma waxay Yuhuuddu dhacay dhcid weligeed ah, mise way turunturrootay”

Su'aashani wax kale ma sugayso oo aan ka ahayn “maya”. Rumaysad darrida Yuhuuddu ma ahayn arrin joogto ah.



**NASB** “Xadgudubyadooda awgood”  
**NKJV** “dhicitinkoodii aawadiis”  
**NRSV** “turunturradoodii ku timid”  
**TEV** “Waayo way dembaabeen”  
**JB** “dhicitinkoodii”

Macnaha aya middani xambaarsan tahay waxaa weeye diidmadii Yuhuuddu ay diidday in Ciise yahay Masiixa (cf aayadda 12).

▣ **“ayaa badbaadinu ugu timid quruumaha kale”** Alla maxay tani wax bixin lala argaggaxo u ahayd Yuhuuddii qarnigii koowaad (cf. aayadda 12; Falimaha Rasuullada 13:46’ 18:6; 22:21; 28:28).

▣ **“inay ka hinaasaan”** Qorshaha Ilaah ee ku soo dariddii dadka kale waxay ahayd labo ujeeddo (1) Ilaah madax furashadisii aadanaha oo dhan, iyo (2) dib u soo celintii haragii ree binu Israa'iil in ay rumaysad shaqsi ahaaneed helaan. Anigu waxaan si shaqsi ahaaneed ula yaabaa sida ay labo meesha u soo geli lahayd waqti dhammaad ah, is beddelidii Yuhuudda (Sakariyaah 12:10) ama sunagoogyadii dambe ee Masiixiyiintu ay ahaan lahaayeen kaamiliddii la ballan qaaday.

**11:12-14** Aayadahan waxaa ku jira toban weedh ama jumlo oo shuruud ana xaalad ku xiran lana xirirta rumaysad darrada Yuhuudda siday ugu xiran tahay rumaysadka kuwa aan Yuhuudda ahayn. Aayadaha 12,14,15,16,17,18,21,24 waa kuwa leh shuruudaha booska koowaad ku jira kuwaasoo lagu qiyaasayo runta ka soo



baxaysa aragtida qoraaga ama ujeeddooyinkiisii uu wax u qoray, halka aayadha 22 iyo 23 ay yihiin jumlado ama weedho booska saddexaad ah oo muujinaya mustaqbal lagama maarmaan ah.

**11:12**

**NASB** “Intee IN le’eg ayey kaamilistoodu noqon doontaa”

**NKJV** “buuxnaantooduna intee bay sii badin doontaa taajirnimadii”

**NRSV** “intee bay ku daristoodu macnayn doontaa”

**TEV** “intee bay tirade kuwa soo galaya noqon doonaan, haddii inta Yuhuuddu tahay lagu soo dara”

**JB** “Dabadeed, bal ka fikira inta Ilaah u soo noqoshadoodaka faa’idi doonta”

Ereyga salka u ah tarjumaaddan waa “Buuxnaantooda” kaasoo la xiriirta ama ku saabsan (1) Yuhuudda oo badnaadda aayadaha 14b, 26a ama (2) Tirada ugu dambaysa ee kuwa rumaysadka leh ee la doortay kuwa Yuhuudda aha iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn.

**11:13** “waxaan la hadlayaa kuwiinan oo ka mid ah dadka aan Yuhuudda ahayn” Cutubyada 9-11 waxa ay ka jawaabayaan “saababtee baa Masiixa oo Yuhuudi ah ay dadka Yuhuudda ahu u diideen?” Arrintu si kastaba aqha ahaatee, waxaa su’aasha laga dareemi sababtii uu Bawlos ugu baahnda y warqaddan, inuu ku soo bandhigo sidii uu su’aashan ula macaamili lahyaa.

Aayadaha 13-24, 25c waxaa aan ka dhex arkaysaa in ay jirtau dhibaato soo kal dhex gashay Yuhuuddii xag jirka aaynd iyo kuwii kale ee aan Yuhuudda ahayn. Ha noqoto in ay ahayd mid u dhexeeya Yuhuudda rumaysadka leh iyo kuwa rumaysadka leh ee aan Yuhuudda ahayn, ama kuwa rumaysadka leh ee aan Yuhuudda ahayn iyo Yuhuuddii aan rumaysadka lehayn (kuwii sunagoogyada), ma kala cadda.

▣ “anigoo ah rasuulkii dadka aan Yuhuudda ahayn” Bawlos wuxuu si rabbaani ah u dareemay in adeeggiisa loogu yeerhay in uu u adeego dunida aan Yuhuudda ahayn (Falimsha Rasuullada 9:15; 22:21; 26:17; Rooma 1:5; 15:16; Galatiya 1:16; 2:7,9’ I Timoteyos 2:7’ II Timoteyos 4:17).

▣

**NASB, NKJV** “hawshayda waan derejeeyaa”

**NRSV** “Hawshayda waan ammaanaa”

**TEV** “Isla weynaana ayaan ku qabaa shaqadayda”

**JB** “aad baan isuguna waynahay in la i diray”

Ereyga “derejain” waxa uu macnihiisu noqonayaaa (1) ku mahad naqid badan; (2) isla weynaana ku qabid; ama (3) in wax kastoo dhan ay middani kala horrayso isaga. Tani waxay sidoo kale dhibaato u keeno kartay kaniisaddii Rooma! Bawlos (1) waxaa farxad geliyey in uu u adeego kuwa aan Yuhuudda ahayn; ama (2) wuxuu u arkay hawshiisu ay ka masayrsiin doonto Yuhuudda, taasoo saamayn u noqon lahayd badbaadadooda (cf. aayadaha 11, 14 iyo 9:13).

**11:14** “oo aan qaarkood badbaadiyo” middan ayey ahayd hawshii Bawlos gaariddiisii dadka. Wuxuu ogaa in gaaristiisu gaaristiisu ay dadka qaar uga jawaabi dooneen in ay injiilka ku wacdiyaan. (cf. I Korintos 1:21), halka ay kuwo kalena ka diidoi lahaayeen (cf. I Korintos 9:22). Tani waa haywsha doorashada (AH iyo AC)!

**11:15** Israa’iil doodistoodii Axdigii Hore waxa ay ka mid ahayd qorshihii Ilaah madax furashada ugu keeni lahaa aadanaha oo dhan (*kosmos*). Xaq isala noqoshadii Yuhuudda, isla weynaatii xagjirta ahayd iyo qaabkii sharcigu waxay dhammaan ka waxay xoojinayeen baahida loo qabo rumaysadka (cf. 9:30-33). Rumaynta YHWH iyo Masiixiisa ayaa ah midda xaq lagu noqon karo ee lagu istaagi karo midigta Ilaah, ma aha camallo diimeed oo ay aadanuhu sameeyaan. Haka yaabin. Laakiin xusuusnow, xusuusnow, diidmada Israa’iil waxay ahayd ujeedkii madax furashada aadanaha. Ma jirto meel ay isla qab weynida aadanuhu ka shaqaynayso, ha noqoto Yuhuud iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynba. Tani waxa ahayd farriin ku habboon oo ay u baahnayd in kaniisadda Rooma ay maqasho.!

▣ “heshiiskii dunida” Tani waxa ay fiqqi ahaan la siman tahay “xaqnimada Ilaah.” ereygu wuxuu ka yimid *kata* oo lagu daray *allassō* (in la beddelo, la geddiyo, dhalan rog lagu sameeyo) waxa ay qeexaysaa cadawtinnimadoo oo nabad lagu baddalanayo, oo ah dib u soo celin naxariis ku timids (cf; Rooma5:11; 11:15; II

Korintos 5:18,19). Ilaah wuxuu doonayaa in uu dob u soo celiyo xiriirkii wehelnomo ee Ceedan. Dembi ayaa jebiyey wehelnimadaas, laakiin Masiixa ayaa dib ugu soo celiyey aragtiddii Ilaah ee ay aadanuhu lumiyeen taasoo u ahaatay dhammaan itii isaga rumaysa. Waa lala heshiinayaa oo la aqbalayaa (waxay la socotaa aayadda 15). Aadanuhuawood uma laha ay tan ku soo celiyaan laakiin Ilaah ayaa awooda oo sameeyay!

**11:16 “haddii xididku qodus yahayna”** Tani waa weedh shuruudeed heerka koowaad ah taasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeeddooyinkiisii uu wax u qoray. Waa xigasho laga soo qaday Tirintii 15:17-21. Waa tusaale la mid ah ujeeddadii Axdigii Hore ee miraha ugu horreeya ee Ilaah loo bixin jiray so loogu muujiyo in moraha la goostay oo dhan uu isagu leeyahay.

Haraagii Yuhuudda ee rumaysadka lahaa waxay noqdeen ku weli saamayn ku dhex yeeshay quruurta (Bilowgii 18:27-33; II Taariikhadii 7:14). Tusaalaha ama masaalka “first piece” “jabka ugu horreeya” wuxuu la siman yahay “the root” “xididka” (Yeremyaah 11:16-17), kuwaasoo labaduba tusaalaynaya kuwa reer Banii Israalii lee rumaysadka leh, gaar ahaan kuwii haystay Axdigii Hore (cf. aayadda 28).

**NASB (UPDATED) TEXT: 11:17-24**

<sup>17</sup>laakiinse haddii laamihii qaarkood laga jebiyey, oo adigoo saytuun dibadeed ah lagugu tallaalo meeshoodii, oo aad ka qayb gasho wanaagga xididka geedka saytuunka ah, <sup>18</sup>ha ka faanin laamaha, laakiinse haddii aad faantid, bal ogow inaad ahayn kan xididka sida, laakiinse xididka adiga ku sida. <sup>19</sup>Haddaba waxaad odhan doontaa, Laamihii waxaa loo jebiyey in aniga laygu tallaalo meeshoodii. <sup>20</sup>Waa tahay. Rumaysaddarradoodii baa loo jebiyey, adna waxaad ku taagan tahay rumaysadkaaga. Ha iskibrin, laakiinse cabso; <sup>21</sup>waayo, haddaan Ilaah u tudhin laamihii asliga ahaa, de adna kuu tudhi maayo. <sup>22</sup>Bal hadda fiiri roonaanta iyo adkaanta Ilaah; kuwii dhacay xaggooda adkaantiisaa la jirta, laakiinse xaggaaga waxaa la jirta roonaanta Ilaah, haddaad roonaantiisa ku sii socotid, haddii kaleeto adna waa lagu gooyn doonaa. <sup>23</sup>Iyagana haddayan rumaysaddarradoodii ku sii socon, waa lagu tallaali doonaa meeshoodii, waayo, Ilaah waa awoodaa inuu iyaga mar kale ku tallaalo meeshoodii. <sup>24</sup>Waayo, haddii adiga lagaa soo gooyay saytuun dibadeed oo si aburiddiisa ka gees ah laguugu tallaalay geed saytuun wanaagsan ah, intee baa in ka sii badan kuwan oo ah laamihii asliga ahaa loogu tallaali doonaa geedkoodii saytuunka ahaa?”

**11:17 “haddii”** tan waxaad ka eegi kartaa tasmada 11:12-24

▣ **“laamihii qaarkood laga jebiyey”** tani wax ay wax ka tilmaamaysaa Israa’iisha aan rumaysadka lahayn (cf. aayadaha 18, 19, laamaha dabiiciga ah aayadda 21).

▣ **“saytuun dibadeed ah lagugu tallaalo meeshoodii,”** Tani waxa ay tilmaamaysaa kuwa rumaysadka leh ee aan Yuhuudda ahayn oo ka jawaabay wacdigiin injiilka.

▣ **“tallaalo”** Bawlos wuxuu midan ku sharraxayaa tusaalayaasha uu u soo qaadanayo beero falashada oo ka soo bilaabmaysa aayadda 16, beerista geed saytuunka laamihiisa oo caawimaadda u leh in geed cusub la beero (cf. aayadda 24).

▣ **“Geed Saytuun”** tani waxay masaal u tahay quruunta Israa’iil (cf. aayadda 24; Sabuurrada 52:8; 128:3; Yeremyaah 11:16; Hoosheeca 14:6) tani waa tusaalaha labaad ee uu Bawlos la soo qaadanayo Axdigii Hore ee uu ku sharraxayo xiriirka ka dhexeeya Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn

**11:18 “Ha iskibrin,”** Ku wani waa tusaalayaal ka hadlaya hadal taagan oo wax ka qabasho u baahan, aalaaba wuxuu qaataa oo macnihiisu yahay in la joojiyo dabadeedna ficil ahaan looga ficil celiyo. Aayaddan oo lagu daray 13,20,25, waxa ay tusaalaynayaan in ay jirtay dhibaato ka dhex jirtay kaniisadda Rooma oo ku saabsan kuwa Yuhuudda aha iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn.

**11:19-20** Aayadda 19 sidoo kale waa Diatribe oo ka tarjumaysa falka wax lagu sameeyaha ah. Bawlos wuxuu ka hadlayaa sababta Yuhuudda loo diiday. Waxay ahayd rumaysad darradooda awgeed, ee ma aha in iyaga laga

jeclaa kuwa aan Yuhuudda ahayn! Kuwa aan Yuhuudda ahayn waxay ku soo galeen oo qura in looga masayriyo iyaga. (cf. aayadaha 11, 14).

**11:20**

**NASB** “waxaad ku taagan tahay rumaysadkaaga”

**NKJV** “Adigu ku taagnow rumaysadka”

**NRSV** “Laakiin waxaad ku taagan tahay oo qura rumaysadka”

**TEV** “marka aad ku sii joogto meeshaa ayaad tahay mid rumaysan”

**JB** “Haddan weli ku soo adkaato , ayaad mahad naq ku helaysaa rumaysadkaaga”

Qoraalkani naxwe ahaa naxwe ahaan waxa ay ku noqona fal jooga oo dhammaystirmay marka xagga macnaha laga eegana waa qaab shuruud ahaaneed. Muhiimaddu waa in aan Ilaah la hor tagnaa rumaysad oo annagoo aan joojinayn marna. Haddii rumaysadku qayoodo ama yaraado, hor istaaggeenuna waa uu lumayaa. Badbaadadu waa (1) jawaab rumaysad oo bilaabanta; (2) in aan ku joogo rumaysad; (3) iyo hannaan socda oo rumaysad; iyo (4) rumaaysadka oo kaa muuqada. Ka taxaddar qaabka fiqi ahaaneed ee doiradda saaraya runta ku saabsan middan ee ah runta ku jirta Kitaabka. Ka eeg Mawduuc gaar ah 10:4

Ilaah ayaa ah qoraaga, bilaabaha, iyo ebyaha badbaadada, laakiin waxa ay ku imanayaan qaabkii axdiga. Wuxuu doortay in uu aadanaha dembiga leh ay jawaabaan oo ay sii wadaan in ay ku jawaabaab tawbadkeen iyo rumaysad iyo tallaabo kasta oo ku saabsan hannaankan.

▣

**NASB** “Ha iskibrin, laakiinse cabso”

**NKJV** “Ha isla weynaanina, laakiin cabsada”

**NRSV** “ha is qaadqaadina, laakiin ku taagnaada cabsida

**TEV** “Laakiin ha isku kibrina ; laakiin cabsada”

**JB** “halkii aad taa ku kibri lahaydeen, ha noqoto mid idin cabsi gelisa.

Qoraalkani naxwe ahaa naxwe ahaan waxa ay ku noqona fal jooga oo dhammaystirmay marka xagga macnaha laga eegana waa qaab shuruud ahaaneed. Waxay ah dhibaato ku keentay kaniisadda Rooma. Arrinta cabsida waxaa lagu sheegay aayadda 21.

**11:21** “adna kuu tudhi maayo” Maaddaama ay Israa’ii isaga tageen oo ay ka jeesteed YHWH iyagoo isla weyni iyo rumaysad darro ayey la go’een, sidaasoo kale ayey ayey kaniisaddu u go’aysaa haddii ay rumaysadka Masiixa uga tago isla weynideeda iyo xaq isla noqoshadeeda. Rumaysadka bilowgiisu waa in uu la socdo rumaysad nolosha dhexdeeda ka muuqda (cf. Matayos 13:1-12; Maarkos 4:12; Luukos 8:4-10). Waa in si aan kala joogsi lahayn la isaga ilaaliyaa kibirka o la isaga caabbiyaa. Waxaan waxa aan nahay ku nahay nimcada Ilaah, waxaannu walaalo la nahay dhammaan inta rumaysa Ciise Masiix!

**11:22** “roonaanta iyo adkaanta Ilaah” Marka kasta aadanaha dhacay waxa ay waddooyinka Ilaah u arkaan wax is burrinaya (cf. Ishacyaah 55:8-11). Cawaaqib darro ayey leeyihiin doorashooyinkeenu. Ilaah doorashadiisa xorta ahu kama soo hor jeedo. Doorashada quruunka Israa’iil maysan ballan qaadin shaqsi kasta badbaadadiisa.

▣ “haddaad roonaantiisa ku sii socotid” Tani waa weedh shuruudeed oo booska saddexaad ku jirta oo uu la socdo isku xire waqti jooga ah. Isku xidhankan macnihiisu waxaa weeye in kuwa aan Yuhuudda ahayn ku soo socoshadiisu ay shuruud tahay (waa waddada tooska ah ee qaaddirnimada Ilaah ee Rooma 9); waa in aan had iyo goor hawlkarro ku noqonnaa rumjaysadkeenna (cf. Filiboy 2:12-13). Tani waxa ay ka hadlaysaa labadaba koox ahaan iyo shaqsi ahaan (cf. Galatiya 6:9; Muujintii 2:7,17; 3:6,13,22). Waa la yaabka waa arrinta jidh ahaaneed iyo tan shaqsi ahaaneed eek u jirta Kitaabka Qudduuska ah. Way jiraan labadaba ballammood (kmid ku salaysan dabeecadda Ilaah) iyo axdiyo shuruud ah (ku salaysan jawaabta aadanaha). Eeg mawduuc gaar ah: Baahida dulqaadashada 8:25.

**11:23** Aayaddani waxay naxwe ahaan iyo fiqi ahaan la xidhiidhaa tusaalaha aayadda 22. Haddii Yuhuuddu ay tawbad keenaan waa lagu soo darayaa. Haddii kuwa aan Yuhuudda ahayn ay joojiyaan in ay rumaystaan, waa la diidayaa (aayadda 20). Bilaabista rumaysadka masiixa iyo in rumaysadka Isaga loo qabo ay joogsi la'aan noqdaan waa laga maarmaan labaduba.

**NASB (UPDATED) TEXT: 11:25-32**

<sup>25</sup>Walaalayaalow, anigu dooni maayo, inaad jaahil ka ahaataan qarsoodigan, waabase intaas ood iskibrisaan. Adkaan aan dhammayn baa ku dhacday reer bini Israa'iil ilaa tirada buuxda oo quruumuhu soo gasho; <sup>26</sup>oo sidaasay reer bini Israa'iil oo dhammu u wada badbaadi doonaan, sida qoran, Waxaa Siyoon ka soo bixi doona Bixiyaha. Wuxuu Yacquub ka sii jeedin doonaa cibaadola'aanta. <sup>27</sup>Oo kanu waa axdigayga aan la dhigan doono iyaga, Markaan dembigooda ka qaadi doono. <sup>28</sup>Xagga injiilka iyagu waa cadaawayaal aawadiin, laakiinse xagga doorashada waa kuwo la jecel yahay awowayaasha aawadood. <sup>29</sup>Waayo, hadiyadaha iyo yeedhidda Ilaah ka-soo-noqosho ma leh. <sup>30</sup>Waayo, idinkuba mar baad Ilaah caasi ku ahaydeen, laakiinse haatan waxaa laydiinku naxariistay kuwaas caasinimadooda, **31** sidaas oo kalay iyaguna haatan caasi u noqdeen, in naxariistii laydin tusay, iyagana haatan loogu naxariisto. **32** Waayo, Ilaah kulli wuxuu ku wada xidhay caasinimo inuu u wada naxariisto kulli.

**11:25** “Walaalayaalow, anigu dooni maayo, inaad jaahil ka ahaataan”Kuwani waa sarbeebaha dabecad ahaan uu Bawlos adeegsado (cf. 1:12; IKorintos 10:1; 12:1; II Korintos 1:8; I Tesaloniika 4<sup>th</sup>13). Waxa ay inta badan baraysaa wada tashiyo muhiim ah. Waxa ay u shaqaynaysaa sida Ciise firitaankiisii “Amen, Amen.” Had iyo jeer Bawlos wuxuu u adeegsadaa mawduuca cusub ee keligii ah



**NASB, NKJV,**  
**NRSV**            **“Qarsoodiga”**  
**TEV**             **“Runta qarsoon”**  
**JB**                **“Sabab middan darteed u qarsoon”**

**MAWDUUC GAAR AH: MARSOODIGA**

Ilaah ujeeddo midaysan ayuu u ahayaa Madax furashada aadanaha inkastoo ay dhaceen (Bilowgii 3). Qarsoodiga middan waxaa lagu muujiyey Axdigii Hore (cf. Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6 iyo qoraalladii caalamiga ahaa ee nebiyadii). Arrintu si kastaba ha ahaatee ajanduhu muusan caddayn (cf. I Korintos 2:6-8). Imaanshadii iyo Ciise Masiix iyo Ruuxa Qudduuska ah ayey ku noqotay wax aad u cad. Bawlos wuxuu adeegsanayaa ereyga “qarsoodiga” si uu ugu muujiyo qorshahan madax furashada (cf. I Korintos 4:1; Efesos 6:19; Kolosay 4:3; I Timoteyos 1:9). Arrintu si kastaba ha ahaatee, wuxuu ku isticmaalayaa xilliyo badan:

1. Qayb ahaan in Israa'iil la qallafiyo si loogu soo aro dadka aan Yuhuudda ahayn. Waxa ay keenaysaa in kuwa aan Yuhuudda ahayn ay sidii aalad oo kale uga shaqeeya in Yuhuuddu ay Ciise u aqbalaan in uu yahay Masixii horay loo sii sheegay (cf. Rooma 11:25-32).
2. Injiilka oo noqday in quruumaha oo dhammi ay gartaan, kuwaasoo loogu soo daray Masiixa awgiis, iyo iyadoo farriintan loo soo mariyey Masiixa naftiisa (cf. Rooma 16:25-27; Kolosay 2:2).
3. Rumaystayaasha jidhkooda cusub eek u cusboonaan doona imaanshada labaad (cf. I Korintos 15:5-57; I Tesaloniika 4:13-18).
4. Isu keenidda shayada oo dhan Masiixa dartii (Efesos 1:8-11).
5. Kuwa aan Yuhuudda ahayn iyo Yuhuudduba waa wehello dhaxal leh (cf. Efesos 2:11-3:13).
6. Fahanka xidhiidhka u dhexeeya Masiixa iyo Kaniisadda oo lagu qeexayo ereyada guurka (cf. Efesos 5:22-33).
7. Kuwa aan Yuhuudda ahayn oo loogu soo daray dadkii axdiga awgood oo uu keenay ruuxa Qudduuska ah ee Masiixa si uu u soo saaro qaan gaarro ekaanta Masiixa leh, taasoo ah, in dib loo soo celinaya araggii Ilaah ee ay aadanaha dhacay ay lahaayen (Bilowgii 6:5, 11-13; 8:21) iyo naxariista Ilaah u qabo aadanaha (cf. Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6; Kolosay 1:26-28).
8. Dhammaadka waqtiga iyo kuwa Masiixa ka soo hor jeeda (cf. II Tesaloniika 2:1-11).
9. Qarsoodigii bilowgii kaniidda oo kooban waxaa laga helayaa I Timoteyos 3:16

▣ **“waabase intaas ood iskibrisaan”** Halkan waxaa ku jirta digniin kale oo ku saabsan xiisadda aloosan kaniisada (ha) Rooma (cf. aayadda 18).

▣

**NASB** “in qayb ahaan ay adkaani ku dhacday reer banii Israa’iil”  
**NKJV** “Adkaan aan dhammayn baa ku dhacday reer bini Israa’iil”  
**NRSV** “qallafsanaan baa ku timid qaar Israa’iil ka mid ah”  
**TEV** “in adkaanta dadka rer banii Israa’iil aysan ahayn wax joogto ahaa”  
**JB** “qayb Israa’iil ka mid ayaa indho beeshay”

Hadalkani waxa uu la xidhiidhaa cutubka 11 oo dhan. Way jirtay oo way jiri doontaa in in Yuhuudda qaarkood rumaystaan. Qaybtan indho la;aanta, Ilaah ayaa asalkaba sameeyay (aayadaha 8-10) sababtuna waa Yuhuudda diidmaddoodii Ciise, oo ku balaadhatay Ilaah qorshihiiisii uu ku madax furanayey aadanaha oo dhan. Ilaah dhammaan ayuu u ballan qaaday badbaadada (cf. Bilowgii 3:15). Wuxuu Ibraahim u doortay inuu ku gaaro dhammaan (cf. Bilowgii 12:3). Wuxuu Israa’iil u doortay in ku gaaro dhammaan (cf. Baxniintii 19:5-6). Israa’iil waxay dadaaladeedii hawshii Ilaah ugu guul darraysatay isla weynidii, iimaan la’aantii iyo rumaysad darradoodii awgeed. Ilaah wuxuu doonayey in uu dunida aan Yuhuudda ahayn ku gaaro barakadiisii uu reer Bani Israa’iil u sameeyey (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 27-29). Israa’iil ma aysan xajin Karin axdigii, sidaas daraaddeed, Ilaah xukunkiisii soo yaalka ayaa ayaa ku dhacay iyada. Hadda Ilaah wuxuu xukunkiisan cajiibka ah u qaaday in uu ku ebyo ama ku soo kaamilo ujeedkiisii uu madax furashada ugu keeni lahaa aadanaha isagoo rumaysadka u soo marinaya (cf. aayadaha 30-31; Yexesqeel 36:22-38).

▣ **“ilaa tirada buuxda oo quruumuhu soo gasho”** Ereygan oo kale (pleroma) waxaa Yuhuudda loogu isticmaalay aayadda 21. Labada aayadoodba waxa ay ka hadlayaan garashada fog ee Ilaah iyo doorashadiisa xorta ah. Ereyga “until” “ilaa” waxa uu tilmaamayaa xadka waqtiga go’an ee dadkii aan Yuhuudda ahayn (cf. Luukos 21:24).

**11:26 “reer bini Israa’iil oo dhammu u wada badbaadi doonaan”** waxaa jira labo tarjumaanood halkan (1) Midi waxa ay le xidhiidhaa qaranka Israa’iil –ma aha shaqsi qura oo Yuhuud ah laakiin sida ay u badan yihiin taasoo dhacaysa waqti kooban oo taariikhda ka mid ahaa. (2) waxa ay la xidhiidhaa aragti ahaan dadka reer Bani Israa’iil ee ruuxiga ah, macnaha Kaniisadda. Bawlos wuxuu ujeedkan ku isticmaalay Rooma 2:28-29; Galatiya 6:16; I Butros 2:5,9; Muujintii 1:6. “oggolaanshaha buuxa ee Yuhuudda” sida ku jirta aayadda 12 iyo “oggolaanshaha buuxa ee kuwa aan Yuhuudda ahayn” sida ku jirta aayadda 25 waxa ay wada sheegayaan xidhiidh isla siman. Waa “dhammaan” dareenka Ilaah doorashadiisu mana aha in dhammaan ay ku imanayso dareenka uu shaqsi walba leeyahay ama qabo. Geedkii saytuunka ee ballanku mar uun buu dhammays tirmi doonaa.

Faallo bixiyeyaasha qaarkood waxa ay tan ku xidhiidhinayaan in ay kooban tahay qaranka Israa’iil oo keliya sababtuna waa (1) macnaha ku jira ccutubyada 9-11; (2) Xigashadii laga soo qaatay Axdigii Hore eek u jirta aayadaha 26-27 iyo (3) hadalka muuqda eek u jirta aayadda 28. Ilaah weli jacayl iyo rabitaan ayuu u qabaa mirihii dabeecad ahaan ka soo farcamay Ibraahim in ay badbaadaan! Waase in ay ku yimaadaan rumaysadka Masiixa (Sakariyaah 12:10).

Su’aasha ah in kuwii Yuhuudda ahaa ee “la qallafiyey” ay yeelan doonaan waqti ay dhammaanayso oo fursad ah in ay midan ka jawaab celiyaan. Middan iyada ah loogama jawaabi karo halkan ama qoraal kale. Haddii aan Maraykan nahay waxaan dhaqan ahaan shuruud nagu noqda is weyddiinta su’aalo shaqsi ahaaneed laakiin baybalku wuxuu diiradda saarayaa baahsanaanta guud. Su’aalaha kuwan oo kale ah oo dhan waa in Ilaah loo daayaa. Isaga ayaa uga jawaabi doona uunkiisa maaddaama uu jecel yahay!

▣ **“sida qoran”** tani waxa ay tix raac la leedahay labo xigasho oo laga soo qaatay Septuagint-ga Ishacyaah 59:20-21 (aayadda 26) iyo 27:9 (aayadda 27). aaladda badbaadadu waxa ay tahay rumaysashada Ciise Masiix. Ma jiro qorshe labaad B, qorshuhu waa kan koowaad A. waxaa jira hal jid oo qura oo lagu badbaadayo (cf. Yooxana 10:7-18; 11:25-29; 14:6).

**11:17** Ishacyaah 27:9, oo xigasho ahaan loogu soo qaatay aayadda 27, waxa ay isku xiraysa dib ugu soo celintii Israa’iil dhulkii ballan qaadka (aayadaha 1-11) ee duullaankii cadawyadii dhaqanka (quruumihii kale ee aan Yuhuudda ahayn) iyaga lagu soo dari doono (cf. aayadaha 12-13). Haddii dib u soo celintan ay tahay mid guud

qarnigaa kaamili lahaa was ii sheegidda. Haddii ay tahay wax tusaale ah, dabadeed axdiga cusub, qarsoodiga injiilka, ee Yuhuudda iyo kuwaaan Yuhuudda ahayn isugu xiraya rumaysadka Ilaah Masiixiisa ayaa ujeedku noqonayaa (cf. Efesos 2:11-3:13). Way adag tahay in la go'aansado. Wax sii sheegidyo Axdigii Hore ku jiray ayaa ku dhaqab galay kaniisadda axdiga cusub. Welise Ilaah waa ku aammin ballammadiisa, inkastoo aadanuhu uusan ahayn (Yexesqeel 36:22-36).

**11:28** aayaddani waxa ay muujinaysaa qaabab doorasho oo mantaano ah (Axdigii Hore dhexdiisa doorashadu waxa ay ku ahaanaysay adeeg ama shaqo. Ilaah ayaa aadanaha u isticmaali jiray qorshihiiisa madax furashada aadanaha; (2) Axdiga Cusub dhexdiisa doorashadu waxa ay ku xiran tahay injiilka iyo badbaadada weligeed ah.

Badbaadadan aadanaha oo dhan eek u samaysantay aragga Ilaah ayaa had iyo jeer ujeedku ahaa haddana yahay. (cf. Bilowgii 3:15). Ilaah waa ku aammin ballammadiisa. Tani waa mid run ka dhex ah rumaystayaashii Axdigii Hore iyo kuwa Axdiga Cusub ee la subkay. Furuhu waa aamminnimada Ilaah, ma aha tan aadanaha, waa naxariista Ilaah, ma aha shaqo aadane. Doorashadu waa ujeeddada barakada, ee ma aha mid meesha wax ka bixinaysa!

▣ **“waa kuwo la jecel yahay awowayaasha aawadood”** Tani waa ballanta Baxniintii 20:5-6; Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:9-10 iyo 7:9. Qoysaska waxa ay ku barakaysan yihiin rumaysadka jiilalkii hore. Israa'iil waxaa barakeeyay aabbayaashii rumaysadka badnaa aawadood (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 4:37; 7:8; 10:15). Masiixu in uu ka iman lahaa Yuudasna waxa ay ahayd ballan loo qaaday Daa'uud (cf. II Samuu'eel 7). Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa in la sheegaa in xitaa kuwii “rumaysadka lahaa” ay awood u yeelan waayeen in ay si buuxda sharciga u xajiyaan (cf. Yexesqeel 36: 22-36). Rumaysad—rumaysad shaqsi, rumaysad qoys, balse ma aha, rumaysad kaamil ah—ayaa Ilaah aqbalaa oo u gudba qoysaska (cf. I Taariikhda 7:8-16).

**11:29**

**NASB, NKJV**

**NRSV**

**“hadiyadaha iyo yeedhidda Ilaah ka-soo-noqosho ma leh”**

**TEV**

**“Ilaah maskaxdiisa kama beddelo kii uu doorto oo barakeeyo”**

**JB**

**“Ilaah marna hadyadihiisa dib uma ceshado oo doorashadiisa kama soo laabto”**

Tani lama xidhiidho hadiyadaha ruuxa ee xagga dadka (cf. I Korintos 12), laakiin waxa ay ka hadlaysaa ballammada Ilaah ee badbaadada, AH iyo AC. Doorashadu saamayn ayey leedahay. Aamminnimada ayaa ah rajada qaranka Israa'iil (cf. Malaakii 3:6)!

**11:30-32** Aayadahani waxa ay soo koobayaan qorshayaasha iyo ujeeddooyinka Ilaah. (1) waxaa mar kasta aasaas u ah naxariistiisa (eeg tasmada 9:15-16, ma aha qaab dhexdhexaadiye wax go'aan ka gaaraya. Ereyga “naxariis” afar jeer ayaa qoraalkan ballaadhan lagu dhex isticmaalay (cf. 9:15,16,18,23). (2) Ilaah aadanaha dhammaantii ayuu xukumay. Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynba waa kuwo dembi badan (3:9,19,23; 5:11). (3) Ilaah wuxuu baahida iyo awooddarrada aadanaha u isticmaalay fursad uu ugu muujiyo naxariista iyagoo dhan (cf. aayadda 22). Sidoo kale ereyga “dhammaan” waxaa aad ku arki kadhaa aayadaha 12 iyo 25-26. Ma aha in dadka oo dhan ay ka jawaabi doonaan deeqda Ilaah, laakiin dhammaantood waxa ay ku jiraan doorashada ah in Ilaah madax furanayo. (cf. 5:12-21; Yooxanaa 3:16). Ilaahow, ay sidaas ahaato!!!

**11:30 iyo 31 “sidaas oo kalay iyaguna haatan”** Tan waxaa ku jiray oo ay ka hadlaysaa tawbadkeenkii ruuxiyadeed ee quruunta reer Bani Israa'iil ee ahaa in ay Ciise Masiix rumaystaan. Kuwii aan Yuhuudda ahayn “aan rumaysadka lahayn” waxaa soo celiyey naxariistii Ilaah, sidoo kale ayaa u ahaan doonta Yuhuudda “aan rumaysadkalahayn.”

**NASB (UPDATED) TEXT: 11:33-36**

<sup>33</sup>Mool dheeraa hodantinimada iyo xigmadda iyo aqoonta Ilaah! Xukummadiisa lama baadhi karo, jidadkiisana lama raadin karo! <sup>34</sup>Waayo, bal yaa soo ogaaday maanka Rabbiga? bal yaase lataliyihiisii noqday? <sup>35</sup>Yaase awil wax siiyey oo loo abaalgudi doonaa? <sup>36</sup>Waayo, wax waluba isagay ka yimaadeen oo ku yimaadeen oo u yimaadeen aawadiis. Ammaanta isagaa leh weligiis. Aamiin.

**11:33-36** kani waa mid ka mid ah hadalladii yaabka cajiibka lahaaq ee Bawlos. Bawlos waxa uu isu dhiibay waddoyinka oo ah: rumaysad, ku soo daridda axdiga, kaamilidda axdiga.

**11:33 “hodantinimada”** Tani hadal sarbeebed gaar ah ayey Bawlos u ahayd (cf. 2:4; 9:23; 10:12; 11:12,33; Efesos 1:7,8; 2:7; 3:8,16; Filiboy 4:19; Kolosay 1:27). U oommanaanta injiilka iyo rajada aadanahuhu waa waa naxariista hodantinimada dabecadda Ilaah ee qorshihiisa (cf. Ishacyaah 55:1-7).

▣ **“Xukumadiisa lama baadhi karo, jidadkiisana lama raadin karo”** Tani waxay naxwe ahaan isku qaab yihiin runta wada socota ee cutubyada 9-11 (cf. Ishacyaah 55:8-11).

**11:34** Tani waa xigasho laga soo qaatay Septuagint-ka Ishacyaah 40:13-14, halkaasoo Ilaah uu adkiisii dib uga soo celiyey masaafurintii. I Korintos 2:16 Bawlos laakiin wuxuu magaca “Lord” ama “Rabbi” ka wadaa Ciise Masiix.

**11:35** Tan waa xigasho aan fadhin uu ka soo qaatay Ayuub 35:7 ama 41:11.

**11:36 “Waayo, wax waluba isagay ka yimaadeen oo ku yimaadeen oo u yimaadeen aawadiis”** Weerahani waxa ay qeexayaan Ilaaha aabaha ah marka macnaha la eego (cf. I Korintos 11:12), balse waxay isla mid yihiin qoraallo kale oo Axdiga Cusub waxa ay tilmaamayaan Ilaah aha Wiilka (cf. I Korintos 8:6; Kolosay 1:16; Cibraaniyada 2:10). Bawlos wuxuu midan ku adkaynayaa in wax kasta ay Ilaah ka yimaadeen oo ay Ilaah u laabanayaan.

▣ **“Ammaanta isagaa leh weligiis”** waa nooc ka mid qaabka uu Axdiga Cusubi u sheego Ilaah. wuxuu ku sheegay (1) mar waa Aabbaha (cf. 16:27; Efesos 3:21; Filiboy 4:20; I Butros 4:11; 5:11; Yuudas 25; Muujinti 5:13; 7:12) iyo (2) marka labaad oo ah Wiilka (cf. I Timoteyos 4:18; II Butros 3:18; Muujintii 1:16. Eeg ogaysiis buuxa oo ku jira 2:23).

▣ **“Aamiin”** Eeg mawduuca gaarka ah eek u jira 1:25

## SU’AALO FALANQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan midan u gaysan fasiraa.

Su’aalahaan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Sidee bay Israa’iil ku wayday Ilaah dariiqiisii badbaadada?
2. Maxay laka yihiin labada sababood ee uu Bawlos ku muujinayo in Ilaah uusan diidin reer baniis Israa’iil?
3. Muxuu Ilaah u qallafiyey qalbiga Yuhuudda? Sidee ayey ahayd?
4. Maxaa loola jeeday marka Yuhuudda lagu magacaabay “haraaga” ee (aayadaha 2-5)?
5. Qeex ereyga “qarsoodiga” Axdiga Cusub dhexdiisa sida uu ku yahay.
6. Muxuu yahay macnaha ku jira 11:26? Sabab? Sidee ayey ula xidhiidhaa 9:6?
7. Maxay ahayd ahayd digniintii uu Rasuul Bawlos siiyey rumaystayaashii aan yuhuudda ahayn?

# ROOMA 12

<b>QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH</b>				
<b>UBS<sup>4</sup></b>	<b>NKJV</b>	<b>NRSV</b>	<b>TEV</b>	<b>NJB</b>
Nolosha cusub ee ku jirta Masiixa	Waaqdhacayada nool e Ilaah loo bixiyo	Nolosha Qudduuska laga dhigay	Nolosha Ilaah u adeegta	Caabudaadda Ruux ahaaneed
12:1-2	12:1-8	12:1-2	12:1-2	12:1-2 Humility and saddaqaada
12: 3:8		12:3-8	12:3-8	12:3-8
Sharciyada Nolosha Masiixiga	U dhaqanka sida Masiixiga	Wax isku boorrinta		Saddaqaada qof kasta oo ay cadaawayaashu ku jiraan
12:9-21	12:9-21	12:9-13 12:14-21	12:9-13 12:14-16 12:17-21	12:9-13 12:14-16

## **AQRINTA TAXANAHA SADDEXAAD (Eeg bogga viii)**

*ADIGA OO RAACAYA UJEEDKA QORAAGA EE KU JIRA QORAALKA*

Darsigani waa hage faallo bixin ah, oo ujeedkiisu yahay in adigu aad masuul ka tahay sidii aad Kitaabka Qudduuska ah u tafsiiro lahayd. Midkeen kastaa waa in uu ku socdo iftiinka aan haysanno. Kitaabka Qudduuska ah iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah ahmiyadda tafsiiirka. Waa in aadan midan ula tegin qof kuu tafsiiira..

Hal fadhi ku aqri cutubka. Qeex maaddooyinka. Maaddadaada la barbar dhig qaybaha turjumaadaha eek or ku qoran. Baaragaraaf samayn lama muujin, hase ahaatee wuxuu fure u yahay raacidda ku talo galka rasmiga ah ee qoraaga, taasoo ah wadnaha tafsiiiridda. Baaragaraaf kasta waxa uu leeyahay hal iyo hal maaddo oo keliya.

5. Baaragaraaf-ka koowaad
6. Baaragaraaf-ka labaad
7. Baaragaraaf-ka saddeexaad
8. IWM.

## **FAHAN MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-8**

- A. Tani waxa ay ku bilaabanaysaa qaab ficil ahaaneed ee Rooma (12:1-15:13). Waraaqaha Bawlos badankoodu waxa ay ahaayeen dukumiintyo arrin ku yimid, sidaas daraaddeed, labada qayba way yihiin, fiqi ahaan iyo dhaqan gelin ahaan. Bawlos wuxuu u qoray in uu ku xalliyo dhibaato ama xiisad deegaanka ka taagnayd. Maaddaama Rooma 1-8 ay tahay fiqi la soo koobay awood isku mid ah ayey qaybtani leedahay ficil ahaan iyo sharci ahaanba.
- B. Barasho fiqi oo aan qaab nololeed dhaqangalineed ka dhex muuqani ma aha mid xagga Ilaah ka timid (Matayos 7:24-27; Yooxanaa 13:17; Rooma 2:13; Yacquub 1:22,25; 2:14-26). Bawlos wuxuu si cad u barayaa badbaado furan oo ku timid nimcada Ilaah uu noo soo mariyey rumaysashada Ciise Masiix, laakiin hadiyaddan xorta ah loolama jeedo in ay si mitidnimo ah u beddesho nafteenna!
- C. Aayadaha 1-2 waxa ay hor dhac u yihiin qaybta wax qabadka filic ahaaneed. Waa salka nolosha Ruuxiyadeed ( eeg cutubka 8).



- D. Aayadaha 3-8 waxa ay ka hadlaysaa lahaanshaha hadiyadda ruuxa. La noolaashaheenna Masiixu waa in ay soo saartaa adeeg aan u qabanayno Ilaah awgiis (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:4-5; Matayos 22:37) iyo kuwa kale (cf. Laawiyiintii 19:18; Matayos 19:19). Hadiyadahani waxa ay caddaynayaan midnimada aan la leenahay Masiixa iyo hadiyada aan leenahay eek ala duwan. (cf. Efesos 1:4-10). Kuwa rumaysadka lahu waa in ay ku macaluulaan midnimada, ma aha isku eekaan hal qaab ay u ekaadaan ama u labbistaan. Ilaah ayaa inoo qalabeeyay sidii midkeenba midka kale ugu adeegi lahaa (cf. I Korintos 12:7,11; Efesos 4:11-13)!

## BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 12:1-2

<sup>1</sup>“Haddaba, walaalayaalow, waxaan idinku baryayaa Ilaah naxariistiisa inaad jidhkiinna Ilaah u siisaan sida allabari nool oo qoduus ah oo Ilaah ku farxo, waana cibaadaysigiinna caqliga leh. <sup>2</sup>Ha u ekaanina dadka ifkan, laakiinse ku beddelma cusboonaanta maankiinna inaad hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah oo wanaagsan oo isagu ku farxo oo kaamilka ah.”

☐ **“Haddaba”** Bawlos wuxuu ereygan u adeegsanayaa marka uu doonayo inuu soo bandhigo runta injiilka ee Kitaabka Rooma Dhexdiisa ah sida ku jirta 5:1ff ee ah “xaq looga dhigay rumaysad”; cutubka 8:1ff waxa ay ugu jirtaa dhexdiisa waxa ay ugu jirtaa rumaystaha xidhiidhkiisa dembiga, oo loogu yeeray in xaq laga dhigo; iyo sida ku jirta 12:1ff waxa ay la xidhiidhaa shaqada ficil ahaneed ee xaq ahaanshada iyo qudduus ahaanshada rumaystaha noloshiisa maalmeed.

### 12:1

NASB “Waxaan idinku boorrinayaa”  
 NJIKV “Waxaan idinku weyddiisanayaa”  
 NRSV, TEV “Waxaan idiinka dalbanayaa”  
 JB “waxaan idinku baryayaa”

Weedhani waxa ay leedahay naxariis iyo Qatar labadaba. Waa u yeedhis lagu toosinayo nolosha. Badanaaba Bawlos wuu adeegsadaa ereygan (cf. 12:1; 15:30; 16:17; I Korintos 1:10; 4:16; 16:15; II Korintos 2:8; 5:20; 6:1; 10:1; 12:8; Efesos 4:1; Filiboy 4:2; I Tesaloniika 4:10; I Timoteyos 1:3; Filemon aayadaha 9-10).

☐ **“walaalayaalow”** Bawlos wuxuu ereyga u adeegsadaa in uu maado cusub ku soo bandhigo oo uu hor dhac uga dhigi.

☐ **“Ilaah naxariistiisa”** Sida ku jirta qoraalka LXX midan waxa uu ku qeexayaa Ilaah dabecaddiisa naxariiseed (cf. Baxniintii 34:6). Halkan waxaq ay ugu jirtaa horumarka fiqi ahaaneed ee cutubyada 1-11. Muhiimad cad oo muuqata ayaa ku jirta Rooma oo ku aaddan “naxariista” (baladaba *iokieirō* iyo *elecō*) Ilaah ee kula macamilayo dhiciddii aadanaha (cf. 9:15,16,18,23; 11:30,31,32; 12:8; 15:9). Maddaama Ilaah nimcadiisii iyo naxariistiisii uu si xor ah ugu deeqay, waa in rumaystayaashu ku noolaadaan nolol Ilaah raalli ka yahay (cf. Efesos 1:4; 2:10) oo ah mid mahadnaq leh, ma aha qiime ama mudnaan (cf. Efesos 2:8-9).

☐ **“inaad. . . u siisaan”** Waa erey qallalan oo aan wax falsamyn ah ku jirin oo AORIST ah. Waa mid ka mid ah ereyada waaqdaaca la sheekaynaya ee macnaha qoraalkan ku jira oo kala ah: allabari, aayadda1; Qudduus, aaydaa 1; ku farxo, aayadda 1. Isla ujeeddadan waxa ay ku caddahay 6:13,16,19. Aadanuhu waa in mid uun ay siiyaan naftooda Ilaah ama Shayddaan. Sidii Ciise masiix ba uu sida aan caadiga ahayn u bixiyey naftiisa in uu sameeyo doonista Aabbaha, xitaa ku dhimashadiisii isku tallaabta dusheeda, waa in kuwa raacsanna ay u noolaadaan sidiisii oo kale iyagoo aan toda ku noolaanayn (cf. II Korintos 5:14-15; Galatiya 2:20; I Yooxanaa 3:16).

☐ **“jidhkiinna”** Masiixiyaddu si aad ah ayey uga duwan tahay Falsafadda Giriigga, kuwaasoo u maleeyay in muuqaalka jidhka ahu yahay kan sharka ah. Isagu waa runga jarribaadda laakiin caadiyan waa dhexdhexaad. Ereyga “jidh” waxa uu u muuqanayaa mid lala simi karo “madkaxda” sida ku jirta aayadda 2. Rumaystayaashu

waxa ay u baahan yihiin in ay si guda ahaana ama qof ahaana isugu dhiibaan Ilaah (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 6:5; I Korintos 6:20) sidii ay horraanba isugu dhiibeen dembiga (cf. Rooma 6).

▣ **“nool”** Tani si xad shaaf ah ayey uga duwanayd allabariyada dhintay ee ay Yuhuudda ama macbudyadii kuwa aan Ilaah aaminsanayn (cf. 6:13; Galatiya 2:20).

Waain middan laga saaraa (macaamilka xanuunka muuqaalka jidh ahaaneed ee ujeeddooyinka diineed). Ma aha jidhka gaar yeeliddiisa, ciqaab ama fal dembiyeed laga qareemanayo, laakiin waa nolol firfircoon leh adeeg iyo jacayl kan Masiixa oo kale ah.

▣ **“allabari . . .oo qudduus ah”** Ereyga “qudduus” macnihiisu waa “in Ilaah adeeggiisa loo gaar yeelo.” Ereygan waxa uu diiradda saarayaa sida ku jirta macnaha guud ee qoraalka qofka rumaysadka leh qudduus ahaanshihiisa iyo helistiisa an in uu diyaar u yahay in Ilaah Ujeeddooyinkiisa u isticmaalo.

## MAWDUUC GAAR AH: QUDDUUS

### I. Axdigii Hore Adeegsiisii

- A. Isku keenidda ereyga (*kadosh*) ma cadda, laga yaabee Kancaaniyiintii. Waa macquul in qayb xididka ereyga ka mid ah ee (i.e., *kd*) uu macnaheedu yahay “in la qaybiyo.” Tan ayaa ah qeexidda caankaah “ka soocan ama laga saaray (dhaqanka Kancaaniyiinta, cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 7:6; 14:2,21; 26:19) sidii Ilaah u adeegsan lahaa.”
- B. Waxa uu ereygu la xidhiidhaa waxyaabo bidco ah, meel, waqti, ama shaqsiyo. Kitaabka Bilowgii dhexdiisa laguma isticmaalin, waxa uu caadi ku noqday Baxniintii, Laawiyiintii, iyo Tirintii.
- C. Sida ku jirta qoraalladii wax sii sheegidda ahaa ee nebiyda (gaar ahaan. Ishacyaah iyo Hoosheeca) shayga gaarka ah ayaa horraanta laogu soo bandhigayaa, laakiin looma xoojin in uu horay imanayo. Waxa uu ahaa qaab lagu caddaynayo jiritaanka Ilaah (Ishacyaah 6:3). Ilaah waa qudduus magaca u taagan dabecaddiisana waa qudduus. Dadkiisa ay tahay in ay dabecaddiisa u muujiyaan adduunka baahanna waa qudduus (haddii ay axdiga rumaysad ku addeecaan).
- D. Ilaah naxariistiisa iyo jacaylkiisu waa kuwo aan laga sooci Karin ujeeddooyinka fiqi ahaneed ee axdiyada, caddaaladda, dabecadda lama huraanka ah. Tan halkan ku jirta ayaa waxa ay tahay arrinka Ilaah ee ku aaddan aadanahan fallaagoobay, dhacay ee aan qudduuskaahayn. Qodob aad u xiiso badan ayaa waxa uu ku jiraa Robert B. Girdlestone, *synonyms of the Old Testament*, bogagga 112-113.

### II. Axdiga Cusub

- A. Qoraayaasha Axdiga Cusub waa wada Cibraaniyiin (marka Luukos laga reebo), laakiin waxaa saameeyay qoraalladii Giriigta (i.e. Septuagint). Waa tarjumaadaha Giriigga ee Axdigii Hore kan kan xadaynaya, laakiin ma aha Giriigga caadiga, manhajkooda, fakarkooda, iyo doontooda.
- B. Ciise waa qudduus, waayo Waa Kii Ilaah oo waa Ilaah oo kale (cf. Luukos 1:35; 4:34; Falimaha Rasuullada 3:14; 4:27,30). Waa kan qudduuska iyo xaq ah (cf. Falimaha Rasuullada 3:14; 22:14). Ciise waa qudduus waayo waa dembi la’aan (cf. Yooxahaa 8:46; II Korintos 5:21; I Tesaloniika; Cibraaniyada 4:15; 7:26; I Butros 1:19; 2:22; I Yooxanaa 3:5).
- C. Waayo Ilaah waa qudduus, carruurtiisuna waa in ay qudduus noqdaan. (cf. Laawiyiintii 11:44-45; 19:2; 20:7,26; Matayos 5:48; I Butros 1:16). Waayo Ciise waa qudduus kuwa isaga raacsanna waa in ay qudduus noqdaan (cf. Rooma 8:28-29; II Korintos 3:18; Galatiya 4:19; Efesos 1:4; I Tesaloniika 3:13; 4:3; I Butros 1:15). Waxaa Masiixiyiinta loo badbaadinayaa in ay ekaanta Masiixa ku adeegaan.

▣ **“oo Ilaah ku farxo”** Tani waxa ay tilmaamaysaa allabari kaamil ah sida kan Axdigii Hore (cf. aayadda 2). Waxa ay la siman tahay ujeedka ah “aan iin lahayn,” marka la doonayo in dadka lagu tilmaamo. (Bilowgii 6:9; 17:1; Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:13; Ayuub 1:1).

▣

NASB  
NKJV  
NRSV

**“oo ah adeeggiina caabudaadda ruu ahaaneed”**  
**“waana cibaadaysigiinna caqliga leh”**  
**“oo ah caabidaaddiinna ruux ahaaneed”**

**TEV** “tani waa caabudaadda runta ah ee aad bixin kartaan”

**JB** “Waddo ku habboon oo aad looga fakaray”

Ereygan (*Logikos*) waxaa laga keenay *logizomai*, oomacnihiisu yahay “sabab ku fadhiya” (cf. Markos 11:31; I Korintos 13:11; Filiboy 4:8). Sida macnahan ku jirta waxa uu noqonayaa wax la taaban karo ama sabab leh. Laakiin ereygu waxaa sidoo kale loo adeegsaday dareenka “ruux ahaneed.” Sida ku jirta I Butros 2:2. Waxa ay middani u muuqataa in waxa Ilaah dartii loo bixinayo ay ahaadaan qofka naftiisa runta ah bixinaya oo ka soo hor jeesanaya allabariyada la qalayo ama xoolo la gawracayo. Ilaah waxa uu nolosheenna ka doodanayaa jacayl iyo in aan Isaga u adeegno, ma aha xeer habaysasho aan wax saamayn ah ku yeelanayn nolosha maalin kasta ah.

**12:2 “Ha u ekaanina”** Weedhani waa ficil jooga oo ah hadal maldahan oo is-barbar-dhigga koowaad ah, oo uu ereyga diidmadu la socdo, oo macnuhu yahay in falakii lagu jiray horayba loo joojiyo. Waxaa jira farqi aayadda 2 oo la siman tan ku jirta Filiboy 2:6-8, oo u dhexeeya baddadda muuqaalka kore (*schema* 2:8) iyo is baddal la’aan gudaha (*morphe* 2:6-7). Masiixiyiinta waxaa lagu dhiirri gelinayaa in aysan sii wadin in ay u ekaadaan habka adduunkan dhacay ee is baddalalaya (facii hore ee fallaagonimada) oo ay weli jidh ahaan qayb uga yihiin, laakiin ay si weyn u baddalmaan ekaanta Masiixa (faca cusun ee Ruuxa).

▣ **“dadka ifkan”** Tani waxa ay u macnaysmaysaa ereyga “da’ ama fac.” Yuhuuddu waxay arkeen labo fac (cf. Matayos 12:32; Markos 10:30; Luukos 20:34-35), faca jooga ee sharka ah (cf. galatiya 1:4 II Korintos 4:4 Efsos 2:2 iyo faca imanaya (cf. Matayos 28:20; Cibraaniyada 1:3; I Yooxanaa 2:15-17). Masiixiyiintu waxa ay ku dhex nool yihiin waqti ay xiisadi buuxisay oo ay facahani si la yaab leh u daboolen. Labada imaansho ee Masiixa awgood, rumaystayaashu waxa ay ku dhex nool yihiin “durba ma aha weli” dareenka Boqortooyada Ilaah hadda yio tan mustaqbalka labadaba.

#### **MAWDUUC GAAR AH: FACAN IYO FACA IMAN DOONA**

Nebiyadii Axdigii Hore waxay mustaqbalka ku muujiyeen badnaanta waqtiga la joogo. Iyaga ahaan mustaqbalku waxa uu u ahaan doonaa dib u soo celinta Israa’iil ee xagga dhulka. Arrintu si kastaba ha ahaatee, xitaa waxa ay arkeen maalin cusub (cf. Ishacyaah 65:17; 66:22). Diidmadii soo noqnoqonaysay ee ay YHWH ku diideen farcankii Ibraahim (xitaa masaafurintii kaddib) tusaale cusub ayaa Yuhuuddii ka dhex samaysmay sida ku qoran Qoraallada intertestamental apocalyptic ee (i.e., I Enoch, IV Cesraa, II Baruch). Qoraalladani waxa ay bilaabeen in ay kala badhaan labada fac: facan jooga ee sharka leh ee uu shaydaanka u taliyo iyo faca iman doonaa xaqnimada ee uu u taliyo Ruuxa oo ku Masiixa ku jira (askari mar kasta awood leh).

Barashada fiqiganee (eschatology) wax horumar cad ihi kama muuqdo. Dadka fiqigu waxay miidan ugu yeedhaan “progressive revelation” “muujin waxtar leh.” Axdiga Cusub waxa uu qirayaa runtan runtan caalamiga ah ee ee labada fac ama jiil (i.e., temporal dualism) (deegaan ku meel gaar ah):

<u>Ciise</u>	<u>Bawlos</u>	<u>Cibraaniyada</u>
Matayos 12:32	Rooma 12:2	1:2
Matayos 13:22 & 29	I Korintos 1:20; 2:6,8; 3:18	6:3
Markos 10:30	II Korintos 4:4	11:3
Luukos 16:8	Galatiya 1:4	
Luukos 18:30	Efsos 1:21; 2:1,7; 6:12	
Luukos 20:34-35	I Timoteyos 6:17	
	II Timoteyos 4:10	
	Tiitos 2:12	

Fiqiga Axdiga Cusub ee labadan fac ee Yuhuudda waa la daboolay sababtuna waa filasho la’aanta iyo saadaalinnada labada imaansho ee Masiixa. Dhalashadii labaad ee Ciise ayaa kaamishay wax sii sheegidyadii Axdigii Hore ee ku soo bixidda faca cusub. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Axdigii Hore xataa waa uu arkay u imaanshadiisii sida xaakin iyo mid aan laga guulaysan Karin, welibase wuxu markii koowaad u yimid sidii Adeege Silcaya (cf. Ishacyaah 53), oo is hoosaysiinaya (Sekariyaah 9:9). Sidoo uu Axdigii Hore u saadaaliyey awood ayuu la soo noqon doonaa (cf. Muujintii 19) labadan hab ee kaamilista ah ayaa Boqortooyada ka dhigtay mid haddadan joogta (lagu dhex jiro) laakiin mustaqbalka ah (aan dhammaan la wada kaamilim). Tan ayaa ah xiisadda uu Axdiga Cusub qabo ee ah durba, maaha weli!

▣ **“laakiinse ku beddelma”** rumaystayaashu waa in ay beddelmaan, ma aha ogaysiin! Habka naxwe ahaaneed ee ereygan waxa uu noqon karaa fan jooga oo is barbar dhigga ah, “Idinka qudhiinnu sii wada in aad nafsaddiinna beddeshaan” ama “wada in aad is beddeshaan.” Sidoo kale waa runta ku jirta “u ekaanta” ee aayadda 2a. isla

macnahan waxaad ka heli kartaa Yexesqeel 18:31 (u go’doomista iyo ficilka aadanaha) oo uu la socoto Yexesqeel 36:26-27 (hadyad rabaani ah). Labadaba waa loo baahan yahay!

Habka ereyga “Baddalimid” waxaa loo adegsaday Ciise Masiix macnihiisuna yahay isbeddelid sida ku jirta (cf. Matayos 17:2), halkaasoo ah meeshii Ilaanimadiisii lagu muujiyey. Runtan ku saabasan dabiicadda Ilaah (II Butros 1:3-4) waa in ay gashaa oo ay baddashaa rumayste kasta (cf. II Korintos 3:18; Efesos 4:13).

▣ **“cusboonaanta maankiinna”** Kani waxa uu ka yimid erey Giriig ah oo noqonaya tayo cusub, (*kainos*) ma cusba waqti uun dhexdiis (*chromos*). Xagga Yuhuudda dareennada aragga iyo maqalku waxa ay ahaayeen daaqadaga nafta. Wixii mid ku fakaro, midbaa noqda. Badbaadada kaddib, Ruuxa ku dhex nool awgii, waa in rumaystayaashu ku helaan natiijo cusub (cf. Efesos 4:13,23; Tiitos 3:5). Adduunkan cusub ee muuqaalka baybalka wata, oo uu la socdo Ruuxa dhex deggan, ayaa ah waxa baddala maskaxda iyo hab nololeedka rumaystayaasha cusub. Rumaystayaashu waxa ay runta u eegayaan qaab gebi ahaan kooda ka duwan maxaa yeelay maskaxdooda ayaa waxaa tammariyey Ruuxa. Maskax cusub oo badbaadasan oo uu Ruuxu hoggaaminayo ayaa waxaa ka dhalanaya natiijoyin galaya qaab nololeedka cusub.!

#### **MAWDUUC GAAR AH: DIB U CUSBOONAAN (*ANAKAINOSIS*)**

Ereygan giriigga ah sida qaababkiisa kala duwan ku jirta (*anakainoō, anakainizō*) labo macne oo aasaasi ah ayuu leeyahay.

1. “in shay lagu sababo in uu noqdo wax cusub oo beddelma (i.e., ka wanaagsan sidii hore)” – Rooma 12:2; Kolosay 3:10
2. “in is baddal lagu sababo iyadoo arrin hore lala xidhiidhinayo” – II Korintos 4:16; Cibraaniyada 6:4-6 (Laga soo qatay *Greek-English Lexicon ee Louw* iyo *Nida*, vol. 1 Bogagga 157 iyo 594).

Sia ku jirta *The Vocabulray of the Greek Testament*, Moulton iyo Milligan waxa ay sheegayaan in ereyga (i.e., *anakkainosis*) qoraallada Giriigga lagama dhex heli karo waqtigii Bawlos ka hor. Waxaa laga yaabaa in Bawlos qudhiisu uu reryadan isku xidhay (Bogga 34).

*New Testament Theology* Frank Stagg, waxa uu ku hayaa faallo xooso leh.

“Dib u dhalashada iyo dib-u-cusboonaan Ilaah oo qura ayaa iska leh. *Anakkainosis*, oo ah ereyga “dib u cusboonaan,” Waa magic ficil ah, waa lagu isticmaalay Axdiga Cusub dhexdiisa, isagoo ah ereyga fal sameeyaha ah ee is beddelid, si loogu muujiyo dib u cusboonaanta aan joogsiga lahayn, sida ku jirta Rooma 12:2, ‘ku beddelma cusboonaanta maankiinna’ iyo II Korintos 4:16 ‘kayaga gudaha ahu maalin kastuu cusboonaanayaa.’ Kolosay 3:10 waxa uu ku sharraxayaa ‘ninka cusub’ in uu yahay kan ‘oo waxaad huwateen dabiicaddii cusbayd taas oo loo cusboonaysiinayo aqoon sida ay tahay u ekaanta kan iyada abuuray.’ Haddaba ‘ninka’ cusub,’ ‘cusboonaanta nolosha,’ ‘dhalashada labaad’ ama ‘dib u cusboonaanta,’ si kasta oo ay ahaataba waa la la sii dooray, oo waxaa loo sii habeeyay in au lahaanayso fal bilow ah iyo iyo fal soconaya oo Ilaah yahay bixiyaha iyo waariyaha nolosha weligeed ah” (bogga. 118).

▣ **“inaad hubsataan waxa ay tahay doonista Ilaah”** Ficil sameeyaha meesha ku jira waa EREY SIDII SI ah. Ereyga (*dokimazo*) ayaa waxaa lala isticmaalayaa talo soo jeedinta ah “in la lagi tijaabiyo aragti ku aaddan aqbalaadda.” Maawduuc Gaar ah ka Eeg 2:18

Doonista Ilaah ayaa ah in aannu ku badnaadno Masiixa (cf. Yooxanaa 6:39-40), dabadeedna aan sida Masiixa oo kale u noolaanno (Rooma 8:28-29; Galatiya 4:19; Efesos 1:4; 4:13,15; 5:17-18). Hubsashada Masiixiyaddu waxa ay ku salaysan tahay

1. Ballama Ilaaha aamminka ah
2. Ruuxa Qudduuska ah ee nagu dhex nool (cf. Rooma 8:14-16)
3. Rumaystaha isbeddeliddiisii iyo noloshooda is beddelaysa (cf. Yacquub iyo I Yooxanaa) “ma aha miro, ma aha xidid” (cf. Matayos 13:1-9,19-23).

▣ **“waxa ay tahay doonista Ilaah”** Eeg Mawduuca Gaarka ah ee soo socda.

## **MAWDUUC GAAR AH: DOONISTA (*thelema*) ILAAH**

### **INJIILKA YOOXANAA**

- Ciise wuxuu u yimid in uu fuliyo doonista Aabbaha (cf. 4:34; 5:30; 6:38)
- In maalinta ugu dambaysa ay ku kacaan kuwa Aabbuhu siiyey wiilka (cf. 6:39)
- In dadka oo dhan ay rumeeyaan Wiilka (cf. 6:29,40)
- Salaadaha laga soo jawaabo oo la xidhiidha samaynta doonista Ilaah (cf. 9:31 iyo I Yooxanaa 5:15)

### **ARAGTIDA AY INJIILLADU KA SIMAN YIHIIN**

- Samaynta Ilaah doonistiisu waa lagama maarmaan (cf. Matayos 7:21)
- Samaynta doonista Ilaah waxa ay dadka ku walaalaysaa Ciise Masiix (cf. Matayos 12:50; Markos 3:35)
- In qof uu dhintoba ma aha doonista Ilaah (cf. Matayos 18:14; I Timoteyos 2:4; II Butros 3:9)
- In Ciise Masiix uu Golgota ku dhinto waxa ay ahayd doonista Aabbaha.

### **BAWLOS WARQADIHIISI**

- Qaan gaadhnimada iyo adeegga rumaystayaasha dhamaantood (cf. Rooma 12:1-2)
- Runaystayaasha oo laga soo waday facii sharka (cf. Galatiya 1:4)
- Doonista Ilaah waxa ay ahayd qorshihiisii soo madax furashada (cf. Efesos 1:5,9,11)
- Rumaystayaasha oo maraya kuna noolaanaya nolol uu Ruuxu hoggaaminayo (cf. Efesos 5:17-18)
- Rumaystayaasha oo ay aqoonta Ilaah ka buuxsantay (cf. Kolosay 1:9)
- Rumaystayaasha oo laga dhigay kuwo buuxa oo kaamil ah (cf. Kolosay 4:12)
- Rumaystayaasha oo qudduus laga dhigay (I Tesaloniika 4:3)
- Rumaystayaasha oo shay kasta ka mahad naqaya (cf. Tesaloniika 5:18)

### **BUTROS WARQADIHIISII**

- Rumaystayaasha oo xaq samaynaya (i.e., u hoggaansamaya xukuumadaha) oo isla markaa ka aammusaya raga nacasiinta ah (cf. I Butros 2:15)
- Rumaystayaasha oo silcaya (cf. I Butros 3:17; 4:19)
- Rumaystayaasha oo aan ku noolayn nolol ay ay naftu udub dhexaad u tahay (cf. I Butros 4:2)

### **YOOXANAA WARQADIHIISII**

- Rumaystayaasha ku jiriddooda weligeed ah (cf. I Yooxanaa 2:17)
- Waxa furaha u ahaa rumaystayaasha ducooyinkooda laga jawaabay (cf. I Yooxanaa 5:14)

▣ “oo wanaagsan oo isagu ku farxo oo kaamilka ah” Tani waxa ay ka hadlaysaa doonista Ilaah ee rumaystayaasha badbaada kaddib (cf. Filiboy 4:4-9). Doonista Ilaah waqtigan la joogo waa in rumaystayaashu ay noqdaan kuwo qaangaadha ah oo wata u-ekaanta Masiixa (cf. Matayos 5:48).

▣ “kaamilka ah” ereygan macnihiisu waxaa weeye “qaangaadh, si buuxda loo qalabeyay, macnaha aan curdan ahayn ee bislaada.” Loolama jeedo “dembii la’aan.” Waxaa loo adeegsaday (1) gacmo iyo lugo la jajabiyey balse la bogsiiyey oo dib loogu soo celiyey waxtarkoodii; (2) Shabag duugoobay balse dib loo dayac tiray oo mar kale wax tar ugu yeeshay qabashadii kalluunka; (3) gabdho yary-yar oo u koray in ay suuqa u baxaan si wax-dubayaal u noqdaan; iyo (4) Markab u daiyaarsamay in uu shiraacdo.

### **NASB (UPDATED) TEXT: 12:3-8**

<sup>3</sup>Waayo, nimcadii lay siiyey ayaan ku hadlayaa, waxaan ku leeyahay, Mid kasta oo idinka mid ah, yuusan isderejaysan intuu isderejaysan lahaa in ka badan, laakiinse miyir qab ha ku fikiro, sida Ilaah mid kasta u siiyey qayb rumaysad ah. <sup>4</sup>Waayo, sida aynu xubno badan ugu leennahay jidhkeenna, oo aan xubnaha oo dhammuna isku shuqul u ahayn, <sup>5</sup>sidaas oo kalaan, innagoo badan, Masiixa isku jidh ku nahay, oo midba midka kale waa xubnihiisii. <sup>6</sup>Innagoo haysanna hadiyado ku kala duwan nimcadii layna siiyey, hadday tahay wax sii sheegid, aan wax ku sii sheegno sida qaybta rumaysadkeenna. <sup>7</sup>Ama hadday tahay adeegid, aan aad u adeegno; kii wax baraana, si fiican wax ha u baro; <sup>8</sup>kii wax waaniyaana, si fiican wax ha u waaniyo; kii wax bixiyaana, deeqsinimo wax ha u bixiyo; kii wax u taliyaana, dadaal wax ha ugu taliyo: kii wax u naxariistaana, farxad wax ha ugu naxariisto.

**12:3** aayadaha 1-2 waxa ay si xooggan u muujinayaan sida loogu baahan yahay “naskaxda cusub.” Ereyga “ku fikirid” ku jira aayadda. 3 waxa uu wataa afar qaab. Buugga *The Zondervan Study Guide Commentary, Romans*, Bruce Corley iyo Curtis Vaughan u kuur galkan ayey samaynayaan:

“Fikir buunbuunin ah. . . Fikir gaar ah. . . Fikir ujeed buuxa leh. . . Fikir Qatar ah” (Bogga 138). Dabeecadahani aad ayey caawimaad u leeyihiin.

Aayaddan sida kuwa 11:13-24 ayaa waxaa kazoo baxaya (1) xiisaddii Rooma ee ka dhexaysay Yuhuuddii rumaysadka lahayn iyo kuwii aan Yuhuudda ahayn ee runaysadka lahaa ama (2) Xaqiiqadii uu Bawlos ka soo qoray Korintos ee uu Rooma u qoray (waqtigii dhammaadkii safarkiisii saddexaad ee shaqadii Rabbiga), meeshaasoo uu ku tilmaamay rumaystayaal isla weyn oo is tusiin ah.

▣ **“nimcadii lay siiyey ayaan ku hadlayaa”** weedhani waxa ay noo AORIST fal dhacay fal kale hortii ah. Nimcadu Ilaah ayey mar hore ka timid, oo waa dhacdo dhammays tiran (i.e., dhacdadii waddadii Dimishiq). Qoraalkan dhexdiisa ereyga “nimco” wuxuu la xidhiidhay mid xagga ruuxa hadiyad ku leh (cf. 15:15; I Korintos 3:10; 15:10; Galatiya 2:9; Efesos 3:7-8), ma aha hadiyadda xaqnimada (cf. Rooma 4). Tani waxa ay tilmaamaysaa is beddelkii Bawlos loogu yeeshay in uu rasuul u noqdo kuwa aan Yuhuudda ahayn (cf. Falimaha Rasuullada 9:15; Rooma 1:1,15; Galatiya 1:15-16; 2:7-8; Efesos 3:1-2,8; I Timoteyos 2:7; II Timoteyos 4:17).

▣ **“waxaan ku leeyahay, Mid kasta oo idinka mid ah”** Digniinta ku jirta aayadda. 3 masiixiyiinta oo dhan ayey ku socotaa, ma aha hoggaamiyeyaasha kelidood.

▣ **“yuusan isderejaysan intuu isderejaysan lahaa in ka badan”** Arag Mawduuc Gaar ah: Bawlos Adeegsigiisii ereygii isku xidhnaa ee Huper ee 1:30.

▣ **“sida Ilaah mid kasta u siiyey”** Kani waa AORIST aan hadal maldahan ahayn. Rumaystayaashu ma doortaan hadiyadahooda ruux ahaaneed (cf. I Korintos 12:11; Efesos 4:7). Waxaa iyaga Ruuxa Qudduuska ahu ku siiyaa badbaadada wanaagga guud ahaaneed (cf. I Korintos 12:7). Hadiyadda Ruuxa Qudduuska ahi ma aha mid furayaal ay mutaysteen oo ay shaqsi ahaan ugu amaanmayaan, laakiin waa maydhidda adeegaha si adeege kasta uu ugu adeego jidhka Masiixa, Kaniisadda.

▣ **“qayb rumaysad ah”** Tani waxa ay tilmaantay awoodda halka qof si firfircooni leh ugu adeegi karo hadiyahooda Ruuxa (cf. aayadda. 6). Si uu caafimaad u yeesho, oo hadiyad ruux ah leh, waa in si toos ah loo ficil ahaan loogu qabto midhaha ruuxa (cf. aayadaha 9-12; Galatiya 5:22-23). Hadiyaduhu waa adeegyada Ciise ee kuwa isaga rumaysan dhexdooda lagu qaybiyey, halka midhuhuna ay ay ka yihiin maskaxda Masiixa. Labaduba lama huraan ayey adeegidda firfircoonida leh u yihiin.

**12:4** Kaani waa masaal caan ah oo qoraallada Bawlos ku jira. Isku tiirsanaantu waxa ay qeexaysaa hadiyadaha kaniisadda (cf. I Korintos 12:12-27; Efesos 1:23; 4:4,12,16; 5:30; Kolosay 1:18,24; 2:19). Masiixiyaddu waa koox ahaan iyo shaqi ahaan labadaba!

**12:5 “sidaas oo kalaan, innagoo badan, Masiixa isku jidh ku nahay”** Aayaddani waxa ay muujinaysaa rumaystayaasha midnimadooda iyo badnaantooda. Tan ayaa ah arrinta hadiyadda ruuxiga ah ee kaniisadda dhexdeeda. Cutubka jacaylka ee I Korintos. 13 waxa uu falanqaynayaa arrinta kala duwanaanshaha hadiyadda (cf. I Korintos 12 iyo 14). Masiixiyiintu ma aha kuwo dagaal ku wada jira, laakiin waa wada jidh!

**12:6-8** Aayadahan waxay qaabaynayan hal weedh Giriigga dhexdiisa labase u qaybsan laakiin laakiin erey fal sameeyey ah ma ah. Sida badan waxaa loo tarjumaan QOFKA SADDEDAAD, “aannu adeegsanno.”

**12:6 “hadiyado. . .nimcdii”** Ereyga “hadiyado” (*charisma*) iyo (*charis*) waa isku mid sal ahaan ereyga Giriigga, oo macnihiisu yahay “six or ah loo bixiyey.” Arag tusmada 3:24. Hadiyadaha Ruuxa waxaa si tax ah loogu sheegay I Korintos 12; Rooma 12; Efesos 4 iyo I Butros 4. Taxooda iyo isku xiggoodu isku mid ma aha, sidaas daraaddeed, waa in ay wakiil, ma aha wax aan dhammaystirmayn. Baybalku marna ma sheego sidii ay rumaystayaashu ku caddayn lahaayeen hadiyad(dooda/ahooda) Ruuxiga ah. Xigmadda aan Baybalka ka iman oo ah qodobbada ku jira InterVariety Press buuggooda, ee uu leeyahay Paul Little ee *Affirming the Will of God*. Garashada doonista Ilaah, waxa aad ka arki kartaa ama aad ka garan kartaa qof keliya hawl uu qabto. Si cad oo

loo garto in rumaystayaashu ay hadiyado leeyihiin waxa ay ka wanaagsan tahay caddaynta in sida hibada loo siiyey ama nooca hadiyadda gaarka ah ee la siiyey.

▣ **“haddii”** Tani waa *eite* (cf. aaydaha. 6,7[labo goor],8), oo loo tarjumo “haddii. .haddii” ama “hadday tahay. .hadday tahay” mace ahaan. Wax erey fal sameeyee ah laguma raacin aayaddan dhexdeeda (cf. I Korintos 3:22; 8:5; II Korintos 5:10), laakiin waxaa aalaaba la raaciyaa magaca falka jooga ee wax-til-maamaha ah (cf. I Korintos 12:26; II Korintos 1:6) sidaas daraaddeed, waa weedh shuruudeed booska ugu horreeya gasha, oo muujinaysa jiritaanka hadiyadahan ruuxa.

▣ **“wax sii sheegid”** Tani lama xiriidho waxa sii sheegidii Axdigii Hore sidii (muujin/ waxyi) ama doodegistii farriimihii Ilaah. Nebiyadii Axdigii Hore Qorniin ayey qoreen (muujin ama waxyi). Adiga Cusub dhexdiisa waa ficilka ah faafinta runta Ilaah. waxa uu sidoo kale ugu jiraa saadaal (cf. Falimaha Rasuullada 11:27-28; 21:10-11). Beegsiga ama higsigu ma aha wax soo saarid cusub laakiinse waa sharrixidda farriinta injiilka iyo sida ay maanta dhaqangelinayso. Waxaa jira is beddelid uu ereygani leeyahay. Waxa uu tilmaami karaa hawsha ay rumaystayaashu dhaqan geliyeen, (cf. I Korintos 14:1,39) iyo hadiyad ruux ahaaneed oo cayiman (cf. I Korintos 12:28; 14:29; Efesos 4:11). Is beddeliddan waxaa sidoo kale laga arki karaa waraaqaha Bawlos ee Korintos oo isku xilli la qoray (cf. I Korintos 12:10,12; 13:8; 14:1,5,29,39).

#### **MAWDUUC GAAR AH: WAX SII SHEEGIDDA AXDIGA CUSUB**

- I. Ma aha sidii wax sii sheegidii Axdigii Hore, oo ahaa xidhiidh rabbaani ah oo ah muujinno waxyi oo YHWH ka yimid (cf. Falimaha Rasuullada 3:18,21; Rooma 16:26). Nebiyada oo qura ayey ahayd in ay Qorniinka qoraan
  - A. Muuse nebi ayaa lagu magacaabay (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 18:15-21).
  - B. Buugaggii taariikhda (Yashuuca – Boqorrada [Ruut mooyee] waxaa lagu magacaabay “nebiyadii hore” (cf. Falimaha Rasuullada 3:24).
  - C. Nebiyadu waxa ay sidii booka Wadaadka Sare ugu jiran in farriinta ka soo gudbiyaan Ilaah (cf. Ishacyaah – Malaakii).
  - D. Aragtida labaad ee Cibraaniyada xeerkoodu waa “nebiyada” (Matayos 5:17; 22:40; Luukos 16:16; 24:23,27; Rooma 3:21).
- II. Axdiga Cusub dhexdiisa aragtida waxaa loo adeegsada dhowr waddoo oo kala duwan.
  - A. Iyadoo lagu tilmaamayo nebiyadii Axdigii Hore iyo farriintoodii waxyiga (cf. Matayos 2:23; 5:12; 11:13; 13:14; Rooma 1:2)
  - B. Iyadoo lagu tilmaamayo farriin ku socota shaqi ama qof beddelkii kooxda wada jirta (nebiyadii Axdigii Hore waxay ugu horraantii la hadleen Israa’iil)
  - C. Iyadoo lagu tilmaamayo Yooxanaa baabtiisaha cf. Matayos 11:9; 14:5; 21:26; Luukos 1:7) iyo Ciise in labadooduba ay yihiin faafiyeyaasha Boqortooyad Ilaah (cf. Matayos 13:57; 21:11,46; Luukos 4:24; 7:16; 13:33; 24:19). Ciise sidoo kale wuu sheegay in uu Nebiyada ka weyn yahay (cf. Matayos 11:9; 12:41; Luukos7:26)
  - D. Nebiyo kale oo Axdiga Cusub ku jira
    1. Noloshii Ciise horraanteedii sida ay ugu jirto Injiilka Luukos (i.e., Maryan suxuusaheedii)
      - a. Elisabed (cf. Luukos 1:41-42)
      - b. Sakariyas (Luukos 1:67-79)
      - c. Simecoon (cf. Luukos 2:25-35)
      - d. Anna (cf. Luukos 2:36)
    2. Saadaashii aadka u adkayd (cf. Kayafas 11:51)
  - E. Iyadoo lagu tilmaamayo hal qof uu faafliya injiilka (taxa hadiyadaha faafinta eek u jira I Korintos 12:28-29; Efesos 4:11)
  - F. Iyadoo lagu tilmaamayo hadiyad kaniisadda dhexdeeda ka socota (cf. Matayos 23:34; Falimaha rasuullada 13:1; 15:32; Rooma 12:6; I Korintos 12:10,28-29; 13:2; Efesos 4:11). Mararka qaar tani qof dumar ah ayey timaami kartaa (Luukos 2:36; Falimaha Rasuullada 2:17; 21:9; I Korintos

11:4-5).

G. Iyadoo lagu tilmaamayo kittaabka Muujintii (cf. Muujintii 1:3; 22:7,10,18,19)

### III. Nebiyada Axdiga Cusub

A. Iyagu ma bixiyaan waxyi muujin ah si la mid ah sidii ay nebiyadii Axdigii Hore bixiyeen (i.e., Qorniin). Hadalkani waa macquul marka la eego adeegisa weedha “rumaysadka” (i.e., dareen ah injiil dhammays tiran) ayaa waxaa lagu adeegsaday (cf. Falimaha Rasuullada 6:7; 13:8; 14:22; Galatiya 1:23; 6:10; Filiboy 1:27; Yuudas 3,20).

Aragtidani waxa ay ku caddahay weedha buuxda ee Yuudas 3, “iimaankii mar la wada siiyey qoduusiinta oo dhan.” “iimaankii mar la wada” waxa ay tilmaamaysaa runta, fiqiga, ujeedooyinka, iyo wax baridda Masiixiyadda ee aragtida adduunka. Qeexiddan ah mar la wada siiyey waxa ay sal u tahay fiqiga baybal ahaneed ee ah in qoraallo waxyi aha ah gebi ahaantood ku joogsadeen Axdiga Cusub, oo aan la oggolaanayn qoraal dambe oo dib laga qoro ama in qoraallo loo aqbal sidii wax waxyi ama muujin. Waxaa jira meelo badan oo aan la hubin, ama aan caddayn, oo midab dambari ah leh oo ku jira Axdiga Cusub, laakiin kuwa rumaysadka lahu rumaysad ayey ku qaadanayaan in wixii loogaa “baahan yahay” rumaysad iyo waxqabad ahu ay si toos ah ugu jiraan Axdiga Cusub. Habkan isaga ah ee qaadashada waxaa loogu yeeraa “the revelatory triangle.”

1. Ilaah ayaa naf ahaantiisa mar is muujiyey (MUUJIN)

2. Dad aadane ah ayuu u doortay in ay qoraan oo ay sharraxaan falimihiisa (WAXYI)

3. Ruuxiisii Qudduuska ahaa ayuu u bixiyeey si uu u furo maskaxda iyo qalbiyada aadanaha si ay u fahmaan qoraalladan, ma aha muuqaalkooda, laakiin si ku filan badbaadada iyo nolol Masiixi oo wax tar leh (IFTIIMIN)

Tilmaanta meeshan ku jirta waxaa weeye in waxygii uu ku joogsada oo uu ku ekaaday Qorniinka. Maba ay jiri karaan qoraallo kale oo wata awood weyn, aragti, iyo muujin. Sharicgani ama qaynuunkani waa la xiray. Waannu haysanna run kasta oo aan u baahannahay in aan Ilaah ugu jawaabno.

Runtan waxa sida ugu fiican looga dhex arki karo waxaa weeye heshiiskii qoraayaasha baybalka ka dhexeeyay iyo tan kaloo ka soo hor jeedo oo ah heshiisdarrada dadka Ilaah rumaysan ka dhex taagan. Ma jiro qof wax qora ama hadla oo casrigan la joogo keeni kara qoraal sidan isku raacsan sida Qorniinku yahay oo kale.

B. Waddooyinka qaar nebiyada Axdiga Cusub way kala mid yihiin nebiyadii Axdigii Hore.

1. Saadinta waxyaabaha mustaqbalka (cf. Bawlos, Falimaha Rasuullada 27:22; Agabos, Falimaha Rasuullada 11:27-28; 21:10-11; nebiyo kale oo aan la magacaabin, Falimaha Rasuullada 20:23)

2. Shaacinta xukunka (cf. Bawlos, Falimaha Rasuullada 13:11; 28:25-28)

3. Falimaha masaalka ah ee qeexaya dhacdo (cf. Agabus, Falimaha Rasuullada 21:11)

C. Waxa ay runta injiilka ku shaaciyeen qaabab saadaal ah (cf. Falimaha Rasuullada 11:27-28; 20:23; 21:10-11), laakiin tani ma aha waxa ugu horreeya ee diiradda la saarayo. Wax sii sheegidda ku jirta kitaabka I Korintos waxa ay sal ahaan xidhiidh la leedahay injiilka (cf. 14:24,39).

D. Waa isla xilligii Ruuxa oo muujinaya xilligii, falimihii dhaqan gelineed ee runta Ilaah oo ku aaddan xaalad ksta, dhaqan kasta, iyo mar ay wax dhacayaan (I Korintos 14:3).

E. Kuwowax qabad leh ayey ahaayeeh xilligii kaniisadihii Bawlos (cf. I Korintos 11:4-5; 12:28,29; 13:29; 14:1,3,4,5,6,22,24,29,31,32,39,39; Efesos 2:20; 3:5; 4:11; I Tesaloniika 5:20) oo waxaa lagu sheegay *Didache*-ka dhexdiisa (kaasoo la qoray goor dambe oo qarnigii koowaad ama kii xigay ah, taariikhdu ma cadda) iyo Montanism-ka dhexdiisa oo la qoray qarniyadii labo iyo saddex waqooyinga Afrika dhexdeeda.

### IV. Miyaa hadiyadihii Axdiga Cusub la joojiyey?

A. Aad ayey u adag tahay in su'aashan laga jawaabo. Waxa ay caawimaad ka qaadanaysaa qeexidda ujeeddada hadiyadaha. Ma waxaa macnahoodu yahay in ay xaqiijiyaan bilowga ku wacdinta injiilka mise waa waddooyinka aan joogsi lahayn ama socda oo u ah kaniisaddu in ay nafteeda iyo tan aduunka lumayba ay u adeegto?

B. Qofku ma wuxuu eegaa taariikha kaniisadda si uu su'aasha uga jawaabo mise Axdiga Cusub naftiisa? Ma jirto caddayn Axdiga Cusub dhexdiisa ku sugnaatay oo ah in hadiyadaha Ruuxu ay



ku meel gaadh ahaayeen. Kuwii isku daya in ay adeegsadaan I Korintos 13:8-13 si ay u tilmaamaan arrintan, waxay caayayaan ama u gafayaan ku talo galkii qoraaga, kaasii sheegay in wax kasta ay dhimanayaan jacaylka mooyaane,

- C. Waa la igu jarribayaa in aan idhaahdo, maaddaama uusan Axdiga Cusubi ahayn taarkhda kaniisadda, waa xukunka ama awoodda, rumaystayaashu waa in ay aqoonsadaan in hadiyaduhu ay weli socdaan oo aysan joogsanayn. Arrintu si kastaba ah ahaatee, waxaan filayaa in dhaqanku saameeyay fasiraadda. Qoraallada muuqda qaarkood wax sidaa u sii dheer dhaqan gelin u baahan sida dhaqannada qaar ku jirta. (i.e., dhunkashada qudduuska ah, dumarku in ay is daboolaan, kaniisadaha ku kulankooda guryaha, IWM). Haddii dhaqanku saameeyo waxa qoran, muusan taariikhda kaniisadda u noqon?
- D. tani waxa ay si sahlan ku noqonaysaa in ay tahay su'aal aan si waadax ah looga jawaabi Karin. Rumaystayaasha qaar waxa ay ku doondi lahaayeen "waa joogsadeen" kuwa kalena "waa joogsi la'aan." Marka ay halkan taagan tahay, sida tafsiirro badan ay qabaan, qalbiga rumaystaha ayaa furaha ah. Axdiga Cusub waa aan la qiyaasi karin iyo dhaqan. Culayska meesha ku jira ayaa ah in la lahaado awood lagu go'aansado nooca qoraallada ee dhaqanka ama taariikhdu saameeyeen iyo kan kale ee abadiiga ah(cf. Fee ito Stuart buuggooda la yiraahdo *How to Read the Bible for All its Worth* bogagga 14-19 iyo 69-77). Halkan ayaa ah meesha ay masuuliyadda iyo wada tashigu ka bilaabmayaan, ee laga helayo Rooma 14:1-15:13 iyo I Korintos 8-10, oo waa kuwo muhiim ah. Sidii aan su'aasha uga jawaabi lahayn labo waddo ayey muhiim ku tahay.
1. Rumayste kasta waa in uu rumaysad ugu socdaa nuurka ay haystaan. Ilaah waxa uu eegtaa qalbiyadeenna iyo ueeddooyinkeenna.
  2. Rumayste kasta waa in uu u oggolaadaa rumaystayaashu in ay fahansanaan ugu dhex socdaan rumaysadkooda. Waa in dulqaad loo yeeshaa isku cufnaanta baybalka. Ilaah waxa uu naga doonayaa in aan is jeclaanno sida uu isaguba u sameeyo.
- E. Si aan u soo gabogabayanno arrintan, Masiixiyaddu waa nolol rumaysad iyo jacayl leh, ma aha fiqiga oo dhammays tiran. Xidhiidh aan la yeelanno isaga oo saamayn u leh ridhiidhkeenna aan kuwa kale la leenahay ayaa aad uga wanaagsan warbxinta muuqata iyo kaamilnaanteed.

▣ **“aan wax ku sii sheegno sida qaybta rumaysadkeenna”** Tani waxa ay si toos ah ula xidhiidhaa aayadda. 3 “sida Ilaah mid kasta u siiyey qayb rumaysad ah.” (Efesos 4:7). Waa in sidoo kale ku xidhnaadaan macnaha guud ee meesha ku jira oo ah sidii ay rumaystayaashu hadiyadahooda u isticmaali lahaayeen. Tani waxa ay ku xidhan tahay garaa, ujeedka iyo tammarta wax qabashada ah adeegyada qof haantooda Ilaah kala siiyey iyaga, kuwaasoo aasaas ahaan ah midhaha Ruuxa eek u qoran Galatiya 5:22-23.

12:7

NASB

“Haddii adeeg”

NKJV, NRSV

“hadday tahay adeegid, aan aad u adeegno”

TEV

“Haddiiay adeeg tahay, waa in aannu adeegnaa”

JB

“haddii ay tahay agaasin, de u adeegsada agaasin”

Tarjumaadaha casriga ahu way ku kala duwan yihiin sababta waa iyadoo aan loo haynin Ingiriisi toos ugu aaddan ama u ah ereyga Giriigga (*diakonia*). Waxa uu noqon karaa (1) adeeg ficil ahaaneed ama (2) agaasin (cf. Falimaha Rasuullada 6:1; I Korintos 12:5,28). *The Analytic Greek Lexicon* ee Harold Moulton dib-u-noqoshada ku sameeyay waxa uu midan ku qeexayaa “shaqayn, adeeg ama xafiisayn” sida ku jirta rooma 12:7; I Korintos 12:5; Kolosay 4:17; II Timoteyos 4:5” (bogga 92). Isku macnayntani waxa ay caawimaad u leedahay rumaystayaal kale.

▣ **“kii wax baraana, si fiican wax ha u baro”** Hadiyaddan (*didaskō*) wax ay ku jirtaa I Korintos 12:28 iyo 14:26. Waxa ay la xidhiidhaa nebiyada ku jira Falimaha Rasuullada 13:1 iyo wadaaddada ku jira Efesos 4:11. Kaniisaddii bilowgii waxa ay kuwan u arkeen in ay yihiin dad hadiyad lahaa oo si qayb ahaan ah u shaqaynaya. Wacdinaya, wax sii sheegaya, dadka gaaraya oo wax baraya dhammaan waxa ay wadaagayaan injiilka, laakiin si kala duwan ayey wax u kala wadaan.

**12:8 “kii wax waaniyaana, si fiican wax ha u waaniyo”** Ereygan (*parakaleō*) waxa uu la xidhiidhaa wax baridda (I Timoteyos 4:13). Waa xirfadda ay runtu uga dhaqan gasho nolosha dhexdeeda. Dabadeed waxa ay ku sii xidhamaysaa Efesos 4: 15,16 “si jacayl ah runta ugu hadlayna” “kordhiso jidhka inuu jacayl ku dhismo.”

▣ **“kii wax bixiyaana, deeqsinimo wax ha u bixiyo”** Eeg Mawduuca Gaarka ah ee soo socda.

#### **MAWDUC GAAR AH: NAXARIIS IYO DAACADNIMO**

Ereygan (*haplotes*) wuxuu lahaa labo xidhiidh, “naxariis” ama “daacad.” Waxa uu ahaa tusaale la xidhiidha aragtida. Axdigii Hore dhexdiisa aragtida waxaa loo isticmaali jiray ujeedo labo waddo ah (1) II shar ah (tan adag, cf. Sharciga Ku noqoshadiisa 15:9 iyo Maahmaahyadii 23:6; 28:22), iyo (2) II wanaagsan (naxariis, cf. Maahmaahyadii 22:9). Ciise Masiix adeegsigan wuu raacay (cf. Matayos 6:22-23); 20:15). Bawlos labo dareen ayuu ereygan u adeegsanayaa (1) “fududaan, daacanimu, saafinnimo” (cf. II Korintos 1:12; 11:3; Efesos 6:5; Kolosay 3:22) iyo (2) “deeqsinimo” (cf. Rooma 12:8; II Korintos 8:2; 9:11,13).

▣ **“kii wax u taliyaana.dadaal wax ha ugu taliyo”** Tani waxa ay tilmaamaysaa hoggaaminta Masiixiyadeed haddii ay ahaan lahayd mid la safrayo ama mid deegaanka ah.

▣ **“kii wax u naxariistaana, farxad wax ha ugu naxariisto”** Tani waxa ay tilmaamaysaa caawinta kuwa jirran iyo kuwa baahan. Ma jiro boos u dhexeeya ku wacdinta fiqiga iyo danaha deegaanka ee bulshada Masiixiyiinta ah. Hal ayey labada dhanba ku yihiin. Ma jiro “injiil bulsh,” waa hal injiil!

#### **SU’AALO WADATASHI OO AADDAN AAYDAHA 1-8**

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahaan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Maxaa la socda in aad jidhkaaga u keento sidii allabari nool (aayadda 1) ?
2. Miyuu rumayste kasta leeyahay hadiyad ruuxi ah? (aayadaha 3-8; I Korintos 12:7)? Haddii ay saas tahay, oo ay raban in ay qaataan keebay doonayaa?
3. Maxay tahay ujeeddada hadiyadaha ruuxiga ah?
4. Miyey jiraan hadiyado ruuxi ah oo kala dhimman oo ku jira Kitaabka Qudduuska ah?
5. Sidee buu qofku ku caddayn karaa hadiyaddiisa?

#### **FAHAN MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 9-21**

- A. Qaybtan waxaa cinwaan looga dhigi karaa “hagaha Masiixiyiinta ee xidhiidhka fasirka shaqsi ahaaneed.” Tani waa falanqayn la taaban karo oo ku saabsan jacayl (cf. Matayos 5-6; I Korintos 13, iyo I Yooxanaa 3: 18,4:7-21).
- B. Cutubka 12 ee Rooma waxa uu qaab ahaan iyo macna ahan la mid yahay I Korintos 12-13. Isla marka ay falanqaynta ku saabsan hadiyadaha ruuxiga ah ay timaaddo waxaa nalaga doonayaa in aynaan ku kibrin oo aan xooga saarno hab nololeed ku dhisan jacayl.
- C. Faahfaahinta qoraalkan
  1. Waa xidhiidhka aan la leenahay Masiixiyiinta (cf. 12:9-13). Tani waxaa weliba si faahfaahsan loogu falanqeyay 14:1-15:13 iyo I Korintos 8:11ff, 10:23-33.
  2. Xidhiidhka aan la leenahay ku aan rumaysadka lahayn amaba xataa Masiixiyiinta ay naga dhexayso isku dhacyadu (cf. 12:14-21). Qaybtani waxa ay u muuqataa in ay ka tarjumayso wacdigii uu Ciise ku qabtay buurta dusheeda (cf. Matayos 5-7).

3. Qaybta qoraalkani waxa ay u muuqataa sidii waxa aan asal ahayn waayo meelahan (xidhiidho), way soo moqnoqdeen.
- D. Qaybtan waxaa aad ugu badan hab nololeed amarro socda (fal taagan oo hadal caadiya ah cf. aayadda. 4[saddex jeer], 16,20[labo jeer], 21[labo jeer] Ficil taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay micnaha hadal caadi ah toddoba iyo toban jeer). Badbaadadu waa hadiyad shuruuc la'aan ah oo ku timid nimcada Ilaah ee shaqadii la dhammays tiray ee Masiixa iyo hadiyadda Ruuxa, laakiin markii la helo waxay u baahan tahay qiimo kasta iyo hab nololeed si buuxda ugu salaysan in loogu noolaado si astaahisha! U yeedhidda Ciise loogu yeero “Sayid” ma aha male awaal! (cf. Luukos 6:46).
- E. Qoraalkani waxaa kale oo uu leeyahay dhowr fal taagan oo gudban oo lagu isticmaalay micnaha hadalka caadiga ee lagu isticmaalay 21. Masiixiyiintu waxay mar horeba ku noolaayeen hubanti ahaan! Macnaha dembi waxaa loo qeexi karaa ka qaadidda hadiyadii Ilaah siiyey
- F. Masiixiyaddu waa in ay ahaataa mid “furan” – maskax furan, gacmo furan, qalbi furan, iyo albaab furan (cf. Yacquub 2).

## BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 12:9-13

<sup>9</sup>Jacaylku ha noqdo mid aan labaweji lahayn, sharka karha, wanaagga xagsada. <sup>10</sup>Kalgacayl walaalnimo isku wada jeclaada, midkiinba midka kale ha hor derejeeyo. <sup>11</sup>Dadaalka ha ka caajisina, ruuxa ku kululaada, oo Rabbiga u adeega. <sup>12</sup>Rajada ku farxa, dhibta u dulqaata, tukashada wadiddeeda ku sii adkaysta, <sup>13</sup>oo ku caawiya waxa qoduusiintu u baahan yihiin, oo shisheeyaha marti geliya.”

**12:9**“Jacaylku ha noqdo mid aan labaweji lahayn” Qoraalka afka Giriigga ku qoran ma jiro wax xidhiidsh la leh ereyadan ee (*asyndeton*) qoraalkanoo ah mid aan caadi ahayn marka la eego Koine Greek. Waxaa dhici karta in ka tarjumo qaabka naxwe ahaan ereyga Cibraaniga ah ee gundhigga “beatitute” oo ah wacdigiis uu Ciise ku wacdiyey buurta dusheeda Matayos 5. Qaab naxweedkani waxa uu xoogga saarayaa in weedh kastaa ay u taagan tahay runta.

“Labawajiilanimu” Waa erey bixin ka hadlaysa “daaha dabadiisa wax ku jira.” Jacaylku waa in aanu cayaarin door matalaad ah ama ujeedo qarsoon leh (cf. II Korintos 6:6). Jacaylku waa dabecadda Masiixiyiinta (cf. Yooxanaa 13:34-35; 15:12,17; I Yooxanaa 3:11, 18; 4:7-21). Waayo waa dabecadda Ilaah.

☐ **“sharka karha”** Tani waa fal taagan oo toos ah oo macnaha hadalka caadiha ah lagu isticmaalay. Rumaystayaashu waxa ay u baahan yihiin in ay cadaadiyaan oo ay ka hor tagaan sharka (cf. I Teosaloniika 5:21-22). Caadiyan waxaa ina saameeya cawaaqibka sida tooska ah uga dhasha nolosheenna.

☐

NASB	“wanaagga xagsada”
NRSV	“Ku dagdaga wanaagga”
TEV	“Qabsada waxa wanaagsan”
JB	“Ku dhagganaada waxa wanaagsan”

Kani waa fal ah taagane sirkaxan (laakiin lagu isticmaalay macne dhexe) dhawaan gudbay oo lagu isticmaalay hadal caadi ah –“ku dhagsanaada” (cf. LXX Bilowgii 2:24; Falimaha Rasuullada 8:29 iyo Filiboy 4:8; I Tesaloniika 5:21-22).

**12:10**

NASB	“Isugu go’dooma jacayl walaaltinimo”
NKJV	“Kalgacayl walaalnimo isku wada jeclaada”
NRSV	“midkiinba midka kale kalgacayl ha u qaado”
TEV	“si Masiixinimo isku wada jeclaada”

**JB “isu jeclaada sidii walaaluhu isu jeclaan lahaayeen”**

Kani waxa uu ahaa ereyo dhafan oo Giriig ah (*phileo+storge*) oo is keenaya “jacayl walaalnimo” “jacayl goys” waxaana lagu isticmaalay halkan Axdiga Cusub oo keliya. Masiixiyiintu waa goys. Waxaa la innagu amray in midkeenba midka kale jeclaado (cf. I Tesaloniika 4:9).

Tani waa midda ugu horraysa taxane taariikheed oo markii hore lagu adkeeyay weedha afka Giriigga



**NASB** “midkiinba midka kale si xushmad leh darajo ha u siiyo”  
**NKJV** “midkiinba midka kale ha hor derejeeyo”  
**NRSV** “wax isku sameeya idinkoo xushmad isku sameeya”  
**TEV** “ku dhiirranaada in midkiinba midka kale xushmad u muujiyo”  
**JB** “midkiinba midka kale xushmad ha u qaado”

Kani waa fal taagan oo ku xidhan mid tegay oo lagu isticmaalay hadalka caadiga ah. Rumaystayaashu waa in ay kuwa kale ula dhaqmaan sidii kuwo ay ku shuraakoobeen oo aad uga wanaagsan naftooda (cf. Efesos 4:2; filiboy 2:3)

**12:11**

**NASB** “Hawlkarnimada ha ka daahina”  
**NKJV** “Dadaalka ha ka caajisina”  
**NRSV** “Qiirada ha ka daahina”  
**TEV** “si adag u shaqeeya oo caajisiin ha noqonina”  
**JB** “Rabbiga ugu adeega dadaal aan ka daal lahayn”

Jacaylka dhabtaahu wuxuu soo saaraa tamar badan (cf. Galatiya 6:9).

**NASB, NKJV** “ruuxa ku kululaada”  
**NRSV** “ku qiirooda ruuxa”  
**TEV** “qalbi isu wada dhiibid leh”  
**JB** “kasbasho weyn oo ruuxi ah”

Kani waa fal toos ah oo taagan oo lagu isticmaalay hadalka caadiga macna ahaanna waxa uu noqonayaa “karkarin” tan oo loo tarjuman karo dib u dhalasho qofka banii aadanka ah lagu cusboonaysiiyo ruuxa (RSV cf. Falimaha Rasuullada 18:25; Muujintii 3:15-16).

▣ **“oo Rabbiga u adeega”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay hadalka caadiga ah. Qoraallada halkan waxa ay muujinayaan kala duwanaansho. Qaar ka mid qoraallada galbeedka Giriigga laga isticmaalo (MSS D\*3, F, G). wada aqri hal “waqti” (*kairos*) oo ah “Sayidka” halkii ay ka ahayd (*kurios*). Kala duwanaanshahani waxa uu muhiimadda siinayaa u adeegidda Sayidka iyo kaniisaddu ay tahay lama huraan marka ay fursaddu timaaddo (cf. Yooxanaa 9:4; Efesos 5:16).

Xaqiiqa ahaan halkan waxaa ka dhacay jahwareer sababtoo ah ereyuga *kurios* si qaldan ayaa loo fahmay ama loo aqriyey. Kan ugu wanaagsan qoraallada qadiimiha ah ee Giriigga P46 x A. B. waxa ay leeyihiin “adeegida Rabbiga.” UBS4 wuxuu leeyahay “Sayid” si “hubaal” ah (A).

**12:12 “Rajada ku farxa”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah. Ereyga “rajo” waxaa badanaaba loo isticmaalaa in uu xidhiidhiyo arrin mar labaad imanaysa (cf. 5:2). Ereygan rajo lama mid aha kan afka Ingiriisiga ah ee macnihiisu yahay filasho laakiin Axdiga Cusub waxaa weeyaan macnaheedu hubaal ama wax la hubo balse waqti ka hadhsan yahay imaanihiisa. Ka eeg tasmada 4:18 iyo 5:2.

▣ **“ku sii adkaysta”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah. Ereygan macnihiisu waa “firfircoon” “mutadawac” “adkaysi qumman.”

▣ **“dhibta”** Sida ku xusan aayadda 5:3, 5 “hope” waxay la idhiidhaa dhib (*thlipsis*). Tani waa udub dhexaadka kuwa raacsan masiixa ee dunida dhacday (cf. Matayos 5:10-1`6; Falimaha Rasuullada 14:22; Rooma 8:17ff; II Timoteyos 3:12; I Butros 4:12ff). Waa in aynaan doonin ama aynaan xidhin! Ka eef Mawduuc aas Gaar ah: Dhibka 5:3.

▣ **“tukashada wadiddeeda ku sii adkaysta”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah. Salaaddu waa edbin ruuxi ah yipo hadliiyad aan ku aqoosanno gacanta firfircoon ee Ilaah taariikh ahaan. Rumaystayaashu waxa ay dunida saamayn ugu yeelan karaan iyaga oo haysta Aabbe jecel oo samaawi ah. Ilaah waxa uu doortay in uu isaga qudhiisu isku xadeeyo salaadaha carruurtiisa (cf. Falimaha Rasuullada 1:14; 2:42; 6:4; Efesos 6:18-19; Kolosay 4:2). Tani waxa ay salaadda ka dhigaysaa masuuliyad amakaaga iyo yaab leh. Bal eeg saddex su’aalood oo muhiim ah oo ku saabsan dagaalka ruuxiga ah sida uu u qoray Clinton Arnol *The Three crucial questions About Spritual Warfare*, bogagga 43-44, 187-188.

**12:13**

**NASB, NRSV** **“idinkoo ugu deeqaya kuwa quddusiinta ah”**

**NKJV** **“oo ku caawiya waxa qoduusiintu u baahan yihiin”**

**TEV** **“Idinkoo waxa aad leedihiin la wadaagaya Masiixiyiinta baahan ee wedaygiinna ah”**

**JB** **“Dadka Ilaah ee baahan la wadaaga wixiinna”**

Ereygan Giriiggaah ee *koinōneō* waa fal ebyan macnihiisu waa “weheshiga.” Ereygani bawlos waxa uu ugu fadhiiyaa macne balaadhan. Waxa uu koobayaa is weheshiga xagga injiilka iyo kan baahiyaha xagga jidhka. (cf. Galatiya 6:6). Waxaa xataa loo isticmaalay la wadaaggidda silicii Masiixa (cf. Filiboy 3:8-10; I Butros 4:13) iyo Bawlos (cf. Filiboy 4:14). La midoobidda masiixa lala midoobo waxa ay la micne tahay in lala midoobo dadkii illaa heer kasta! Eeg Mawduuc Gaar: Quddusiinta 12:7

Kani waa fal ebyan oo dhammays tiran oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah (cf. Maahmaahyadii 3:27; Galatiya 6:10). Rumaystayaashu waa in ay aad u shaqeeyaan si ay magaca Ciise Masiix awgiis wax ugu qabtaan kuwa kale (II Korintos 8:11-12; Efesos 4:28).

#### **MAWDUUC GAAR AH: KOINONIA**

Ereyga “is weheshi” (*koinōnia*) wuxuu la macne yahay

1. Xidhiidh dhow oo cid lala yeesho
  - a. Lala yeesho Wiilka (cf. I Yooxanaa 1:6; I Korintos 1:9).
  - b. Lala Ruuxa yeesho (cf. II Korintos 13:13; Filiboy 2:1).
  - c. Lala yeesho Aabbaha iyo Wiilka (cf. I Yooxanaa 1-3).
  - d. Lala yeesho walaalaha kale ee Axdiga (cf. I Yooxanaa 1:7; Galatiya 2: 9; Felimon 17).
2. Xidhiidh dhow oo lala yeesho shay ama koox
  - a. Lala yeesho Injiilka (cf. Filiboy 1:5; Felimon 6).
  - b. Lala yeesho dhiigga Masiixa (cf. I Korintos 10:16).
  - c. Aan lala yeelan gudcurka (cf. II Korintos 6:14).
  - d. Lala yeesho silicii (cf. Filiboy 3:10; 4:14; I Butros 4:13)
3. Hadiiyad ama caawin si naxariisa loo sameeyo (cf. Rooma 12:13; 15:26; II Korintos 8:4; 9:13; Filiboy 4:15; Cibraaniyada 13:16)
4. Ilaah hadiyaddiisa soo marta Masiixa, taasoo dib u soo celisa Isaga iyo walaalihiis wiilal iyo gabdhoba.

Tani waxa ay caddaynaysaa xidhiidhka qumaatiga ah ( ka aadane ku aadane) oo uu ku imanayo xidhiidhka jiiiftada ah (ka aadane Ku Abuuraha). Tani waxa ay qeexaysaa baahida loo qabo iyo farxadda bulshada Masiixiyiinta ah. Ereyga falka waqtiga jooga ah waxa uu xoojinayaa biliowga iyo sii socoshada waayo aragnimadan bulshadatan (cf. 1:3 [mar labaad],6,7). Masiixiyaddu waa ruru!

▣ **“shisheeyaha marti geliya”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah. Waxa uu macne ahaan noqonayaa “Ficil ahaan u qabta martigelinta” (ka eeg 14:19, cf. I Timoteyos 3:2; Tiitos 1:8; Cibraaniyada 13:2; I Butros 4:9). Adeeggan six ad dhaaf ayuu muhiim ugu ahaa kaniisaddii hore xaaladda sharka ah ee “hodheellada.” Markii hore middani waxa ay ahayd guri siinta iyo quudinta adeegayaasha Masiixiyiinta ah ee safraya.

**NASB (UPDATED) TEXT: 12:14-21**

<sup>14</sup>U duceeya kuwa idin silciya, u duceeya, oo ha habaarina. <sup>15</sup>la farxa kuwa farxaya, la ooya kuwa ooyaya. <sup>16</sup>Midba midka kale ha la fikir ahaado, ha kibrina, laakiin kuwa hoose la socda. Kuwo isla caqli badan ha noqonina. <sup>17</sup>Ninna shar shar ha uga celinina. Ka fikira inaad samaysaan waxa wanaagsan dadka oo dhan hortiiisa. <sup>18</sup>Hadday suurtoowdo, intaad kartaan, nabad kula jooga dadka oo dhan. <sup>19</sup>Gacaliyayaalow, ha aarsanina, laakiin meel u banneeya cadhada Ilaah, waayo, waxaa qoran, Aarsasho anigaa leh; anaa u abaalmarin, ayaa Rabbigu leeyahay. <sup>20</sup>laakiin haddii cadowgaagu gaajaysan yahay, cunto sii: hadduu harraadsan yahayna, waraabi, waayo, haddaad saas samayso waxaad madaxiisa ku kor ururin doontaa dhuxulo dab ah. <sup>21</sup>Sharku yuusan kaa adkaan. Laakiinse sharka wanaag kaga adkow.

**12:14 “U duceeya kuwa idin silciya”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo labo jeer lagu isticmaalay aayaddan. Waxaan ereyga Ingiriisiga ah ee “eulogy” ka helaynaa ereyga, “barakadayn” ama “u ducayn” (cf. Matayos 5:44; Luukos 6:28; I Korintos 4:12; Yacquub 3:9-12; I butros 3:9). Sida ku jirta P46 (The Chester Beatty Papyri) iyo qoraalladii B (Vaticanus), “adiga” waa laga qaadayaa si hadalka looga dhigo mid si aad ah wax u dhex gala ama in qaab kale loo geliyo, in ka badan hadal si guud iska ah. “silcin” waxaa ka eegtaa tusmaada 14:9.

☐ **“ha habaarina”** Kani waa fal dhexaad oo taagan oo wata erey diidmo ah, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray. Tan macnaheedu waxaa weeye in Ilaah magaciisa loogu yeero si aargudasho ah (oo la macne ah habaarka sida ku jirta I Korintos 12:3). Tani ma tilmaamayso aflagaaddo (cf. Efesos 4:29; I Butros 3:9).

**12:15 “la farxa kuwa farxaya, la ooya kuwa ooyaya”** Labadan ereyga ee qallalan ee falka taagan ah waxaa loogu isticmaalayaa macnaha hadallada caadiga ah. Masiixiyiintu waa qoys. Rumaystayaashu tartan kuma wada jiraan, laakiin waa in uu kan kale jacayl kula macaamila ama kula dhaqmaa. Marka le eego macnaha guud ee ku jira aayadaha. 14-21 waxaa xitaa macquul ah in rumaystuhu uu jawaab ugu bixiyo bulshooyinka aan rumaysadka lahayn isagoo adeegsanaya fursado xagga dhaqanka ah ama duruufaha u adeegsanaya fursado gaadhsiinta ah.

**12:16**

**NASB, NKJV**

**“Midba midka kale ha la fikir ahaado”**

**NRSV**

**“midkiinba midka kale heshiis ha kula noolaado”**

**TEV**

**“isku dan u ahaada mid kasta”**

**JB**

**“Mid kasta naxariis isku mid ah kula macaamila”**

Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah (cf. II Korintos 13:11; Filiboy2:2). Waxaa laga yaabaa in aayadda. 16 lagu muujinayo xidhiidh ahaan isku dhicii u dhexeeyay (1) Yuhuudii rumaysadka lahayn iyo kuwii aan yuhuudda ahayn ee rumaysadka lahaa ee Kaniisaddii Rooma (cf. 11:113-24); (2) facii hore isku dhaca kala dhexeeya heerka dhaqaalaha (3) kala duwanaashada nadiyadaha ruuxiga ah; ama (4) dhaqannadii jiil ahaaneed iyo darajooyinka qof ahaaneed.

☐ **“laakiin kuwa hoose la socda. Kuwo isla caqli badan ha noqonina”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray.

Ereyga “kuwa hoose” waxa uu noqon erey LAB ah ama mid shayada dabiiciga ah tilmaamaya. Haddii uu shay dabiici ah tilmaamayo, hadde, markaa tarjumaaddu waxa ay u aqrisaysaa “aqbala waajibaadka hooseeya”; haddiise uu ereygu LAB yahay waa “la socda kuwa saboolka ah ama dadka is hoosaysiia.”

☐ **“Kuwo isla caqli badan ha noqonina.”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray (cf. Maahmaahyadii 3:7; Ishacyaah 5:21; I Korintos 10:12; Galatiya 6:3). Rumaystayaashu waa in aysan dhexdooda noqo kuwo ilsa kala weyn ama ama iskala weyn bulshada aan rumaysadka lahayn.

**12:17 “Ninna shar shar ha uga celinina”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray. Ilaah ayey tiisa tahay in uu si qumman shayada u hagaajiyo, uma taal rumaystayaasha (cf. Maahmaahyadii 20:22; 24:29; Matayos 5:38-48; Luukos 6:27; I Tesaloniika 5:15; I Butros 3:9).

▣ **“inaad samaysaan waxa wanaagsan dadka oo dhan hortiiisa”** Kani waa fal taagan oo tegay oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah (cf. II Korintos 8:21; I Tesaloniika 5:22 iyo I Timoteyos 3:7). Waxaa dhacda in middani ay tahay xigasho ka timid maahmaahyadii 3;4 sida ku jirta Septuagint-ga (LXX). Rumaystayaashu waxa ay ku nool yihiin ilku haynta sidii ay xer uga dhigi lahaayeen kuwa aan rumaysadka lahayn. Waa in aynaan samayn wax gardarro ku ah ama naga fogaynaya kuwaaan rumaysadka lahayn (cf. I Korintos 9:19-23). Xitaa qirashooyinkeennu waa in ay ahaadaan waddooyin jacayl ku dhisan.

**12:18 “Hadday suurtoowdo, intaad kartaan, nabad kula jooga dadka oo dhan”** Tani waa weedh shuruudeed heerka koowaad ah taasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeedooyinkiisii uu wax u qoray. Waxaa la socda fal taagan oo tegay oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah. Tani had iyo goorba ma aha doorashada rumaystaha, laakiin naxwa ayaa noo tilmaamaya in ay had iyo goor macquul tahay (cf. Markos 9:50; II Korintos 13:11; I Tesaloniika 5:13).

**12:19 “ha aarsanina”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray. Ilaah ayaa maalin toosin doona.

▣ **“waayo, waxaa qoran”** Kani waa fal tegay oo maldahan, oo ah sarbeebaha Semitic-ga ah ee tilmaamaya Qorniinka la wayooda. Sarbeebtan waxyigu waxa ay la mid tahay “ayuu Rabbigu leeyahay” (cf. I Korintos 14:21 iyo II Korintos 6:17). Tani waa xigasho ka timid Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:35;

**12:20 “laakiin haddii cadowgaagu”** Tani waa weedh heerka saddexaad ee shuruudda ah oo loola jeeday in ficil mustaqbal oo muqhiim ah uu dhacayo. Cadaawayaal baa iman doona!

▣ **“waxaad madaxiisa ku kor ururin doontaa dhuxulo dab ah.”** Tan waxaa laga soo xigtay maahmaahyadii 25:21-22. Aragtiyada tarjumaaduhu waa

1. Tani waxa ay ahayd tarjumaad sida macquulka ah ka timid Masar oo macnaheedu ahaa in naxariistu ay tahay jidka ugu fiican oo cadawga looga dhigi karo saaxiib. Welise waa jawaabta Masiixiyiinta ee ku aaddan shar kastoo abuurma (Matayos 5:44)
2. “Dhuxulo dab ah” waxay u muuqataa in ay u taagan tahay ceeb qof ficilladiisii aan caadiga ahayn oo si cad loogu iftiimiyey kii kale ee lagu sameeyay jacaylkiisa iyo cafiskiisa sida (Ambrosiaster, Augustine iyo Jerome)
3. Origen iyo Chrysostom waxa ay sheegeen in tani ay timaamayso Masiixiga naxariistiisa taasoo Ilaah u keentay in uu xitaa si ka badan u xukumo tawbadkeen laawayaasha (cf. the *Jerome Biblical Commentary*, vol. 2, bogga 326.

Aragtiyada kor ku yaal waa taas oo qura. Waxaa fure u ah bawlos soo koobiddiisii uu ku qoray aayadda. 21.

**12:21 “Sharku yuusan kaa adkaan. Laakiinse sharka wanaag kaga adkow”** Kani waa fal taagan oo aan toosnayn oo uu la socdo fal taagan oo toosan. Jawaabteenna ku aaddan dhaqankii aan caddaaladda ahayn ayaa waxa uu soo saarayaa heerka nabadda iyo farxadda aan gudaha ku haysanno. Xumaantu waa kanserka ruuxa. Rumaystayaashu waa in ay iyada Ilaah u dhiibaan ama siiyaan.

▣ **“sharka”** Tani way noqon kartaa LAB ama SHAY, oo waxa ay u taagnaan kartaa mid shar ah, ama shay ayey noqon kartaayoo waxa ay timaamaysaa sharka guud. Tani waa waxa aan caddayn eek u jira Axdiga Cusub (cf. Matayos 5:37; 6:13; 13:19.28; Yooxanaa 17:15; II Tesaloniika 3:3; I Yooxanaa 2:13-14; 3:12; 5:18-19).

## **FAHAN MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 9-21**

Kani waa hage tafsiiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaaddaada iyo sida aad u tafsiiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeen kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su'aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Waa maxay sababta ay weedhaha falka taagan ee jooga iyo qabta diidmada ah ay ugu wada jiraan aayadaha. 9-21?
2. Tax u same dhammaan amarrada ku jira aaydana adigoo shax kala gelinaya. Waa tax layaab leh oo ku aaddan ficillada, nolosha ekaanta Masiixa ku jirta!
3. Sababtee ayey u adag tahay in la go'aansado aayadahada la xidhiidha la macaamilka Masiixiyiinta ee kuwa rumaysadka leh iyo kuwa la xidhiidha la macaamilkooda kuwa aan rumaysadka lahayn.



# ROOMA 13

<b>QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH</b>				
<b>UBS<sup>4</sup></b>	<b>NKJV</b>	<b>NRSV</b>	<b>TEV</b>	<b>NJB</b>
Adeecidda sharciga	In loo hoggaansanaado dawladda	Masiixiga iyo dawladda	Waajibaadka ku aaddan awoodda dawladda	U hoggaansanta xukuumadda
13:1-7	13:1-7	13:1-7	13:1-5 13:6-7	13:1-7
Jacayl walaalnimo	Jeclow deriskaaga	Jacaylku wuu fuliyaa sharciga	Waajibaadka laga rabo in uu qofba qofka kale u sameeyo	Jacaylka iyo dagaalka
13:8-10	13:8-10	13:8-10	13:8-10	13:8-10
Dareenka ku aaddan Maalinta Masiixa	Dul saaran Masiixa	Imaanshaha Masiixa ee Labaad		Carruurta Iftiinka
13:11-14	13:11-14	13:11-14	13:11-13 13:14	13:11-14

## **AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD**

### *IYADOO LA RAACAYO UJEEDEEDA ASALKA AH EE QORAAGA*

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraaf-ka koowaad
2. Baaragaraaf-ka labaad
3. Baaragaraaf-ka saddeexaad
4. IWM.

## **FAHAN MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-7**

- A. Sida cutubka 12 uu horraantiibaq ula macaamilay noloshu Masiixiga iyo rumaystayaashiisa raacsan (aayadaha 9-13) iyo kuwa kale ee bulshada ku jira (aayadaha 14-21), ayaa cutubka 13:1-7 horraantaba ula macaamilayaa Masiixiga iyo shacabka dawladda. Arrintu si kastaba, ma jiro macne guud oo u dhexeeya maaddooyinka. Bawlos wuxuu iyaga u arkay muwo hal mid ah. Ma jiro mid la odhanayo waa qudduus ama diinba ma leh. Nafaha oo dhan Ilaah ayaa iska leh. Rumaystayaashu dhan kasta ayey wakiil uga yihiin! Isku xidhka ka dhexeeya labadan cutub waxaa laga arki karaa 12:18.
- B. Rumaystayaasha fahankooda meesha ah shacabka dawladda ah waa lagu kala duwanaa. Axdigii Hore dhexdiisa dawladdu waxa ay ku horumartay qadka ama dariiqii Qaabiil (cf. Bilowgii 4:16-22). Taalladii

Babel (cf. Bilowgii 11), waxa ay la xidhiidhay isku dayga aaddanaha ee is xukun ka dhan ah Ilaah. boqortooyada Israa'iil waxaa macnaheedu ahaa in ay ahaato awoodda xukunka Ilaah oo soo maraya boqor ama adhijidh, laakiin maysan guulaysan dembiga aadanaha awgii. Hadalkii Ciise Masiix ee meesha gaarka ah ee dawladda eek u jirta Matayos 22:21 iyo Markos 12:17 waa wax muhiim ah. Waa wax la yaab leh in Bawlos uusan samayn sharraxaad ku saabsan ereyadii Ciise ee arrintan (in kastoo aayadaha 1-7 iyo 11 ay u muuqdaan in ay la mid yihiin Matayos 22:15-22 iyo 39). Waxaa jira door Ilaah siiyey dawladda adduunka dhacay. Sida badan rasuullada waxaa lagu qasbi jiray in ay la hardamaan sidii ay xukuumadda ugu soo xidhi lahaayeen, labadaba shacabka caadiga ah iyo kuwa diinta. Waxa ay caddaynaysaa in la raaco xukuumadda iyo in la diido ay ku xidhan tahay falimaha xukunka aadanaha. Bawlos dawladdu way difaacday wayna silcisay oo labada way ku samaysay. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Yooxanaa, sida ku jirta Muujintii, waxa uu dawladdu uga hadlayaa sida great Whore (cf. Muujintii 17)!

Waxaa waajib nagu ah in aan taageerno dawladda haddii aysan carqalad gelinayn Ruuxeenna hoggaanka u ah awaamiirta ama hoggaanka ugu dambeeya. Amarka dadku waxa uu door bidaa amar la'aanta (cf. II Tesaloniika 2:6-7).

- C. Maaddadan oo kale waxaa lagu sheegay Tiitos 3:1 iyo I Butros 2:13-17.
- D. Judaism-ku waxa ay ahayd diin dharciiyeysan oo hoos joogtay dawladdii Rooma ee qarnigii ugu horreeyay. Masiixiyadda waxaa sannado badan loo aqoonsanaa in ay tahay qayb yar oo iyada ka mid ah (cf. Falimaha Rasuullada 18:12-16). Tani waxa ay suurto gelisay in difaac sharci ah uu dhaqdhaqaaqa adeegga Masiixiyiintu helo sanadahaas hore. Hal arrin oo ku jirta Falimaha Rasuullada ayaa ahayd in la muujiyo in Masiixiyaddu aysan hanjabaad siyaasadeed ku ahayn Rooma. Arrintu si kastaba ha ahaatee, Rooma waxay bixisay xasilooni iyo nabad caalami ah (*pax Romana*) oo ah tii uu injiilku ku faafay (cf. I Timoteyos 2:1-2).
- E. Qoraalkan waxa uu xoojinayaa iftiinka ku jira waayo aragnimadii Bawlos uu u lahaa xukuumadaha. Waxaa macquul in sidoo kale tan loogu daray sabab ah (1) xiisadihii ka dhex taagnaa kaniisadda Rooma ee sharciga dawladda la xidhiidha (tusaale ahaan., xadaynta muxaadaroooyinka Yuhuudda). Tani waxa ay sababtay in rumaystayaal Yuhuud ah ay ka tagaan caasimadda (tusaale ah., Akula iyo Bariskilla, Falimaha Rasuullada 18:2). Maqnaanshahoodii waxaa ku suurto gashay xidhiidh rumaystayaasha aan Yuhuudda ahayn dhexdooda ka hor mara. (2) xiisadaha Rooma dhexdeeda ka jiray oo wacdintii injiilku ay keentay in bulsho balaadhan oo Yihuud ahi ka samaysanto Rooma. Taariikh yahan Suetonius *Life of Claudius* 25.2, waxa uu qorayaa in Boqortooyadu ay dadkii Yuhuudda ahaa ay caasimadda ka soo masaafiryeen taariikhdu markay ahayd A. D. 49 sababtuna waxa ay ahayd soo noqnoqoshada ka hor imaanshahooda “Chrestus.” Tani waxaa laga yaabaa in ay ku dhawaaqiddo ay Laatiinka ah ee “Christ” ay ku kala duwan yihiin (Christos).

## BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 13:1-7

<sup>1</sup>Naf waluba ha ka dambayso kuwa amarka sare leh, waayo, amar ma jiro kan Ilaah ka yimaada mooyaane. Kuwa jirana Ilaah baa ka dhigay kuwa amar leh. <sup>2</sup>Sidaas daraaddeed kii diida kan amarka leh wuxuu hor joogsadaa amarka Ilaah, kuwa hor joogsadaana waxay nafahaantooda u heli doonaan xukun. <sup>3</sup>Madaxdu cabsi ma geliyaan kuwa shuqul wanaagsan sameeya. kuwa xumaan sameeya mooyaane. Ma waxaad doonaysaa inaadan ka cabsan kan amarka leh? Wax wanaagsan samee, oo ammaan baad ka helaysaa isla isaga. <sup>4</sup>Waayo, isagu wuxuu xaggaaga ku yahay midiidinka Ilaah inuu wanaag kuu sameeyo. Laakiinse haddaad xumaan samaysid, cabso, waayo, isagu seefta uma sito sabab la'aan. Maxaa yeelay, isagu waa midiidinka Ilaah, oo waa mid cadho kaga aarsada kii xumaan sameeya. <sup>5</sup>Sidaas daraaddeed waa in laga dambeeyo kan amarka leh, mana aha cadhada aawadeed oo keliya, laakiinse waa niyadda aawadeedna. <sup>6</sup>Waayo, sababtaas aawadeed waxaad u bixisaan cashuur, maxaa yeelay, iyagu waa midiidinnadii Ilaah oo had iyo goor ka shaqeeya isla waxaas. <sup>7</sup>Mid waluba wuxuu idinku leeyahay siiya, kii baad idinku leh, baad siiya, kii cashuur idinku leh, cashuur siiya, kii laga cabsadana, ka cabsada, kii ciso lehna, ciseeya.

**13:1 “Naf waluba ha ka dambayso”** Kani waa far taagan oo si maldahan xaalad utilmaamaya oo macnihiisu yahay, “sii wada in aad noqotaan kuwo ka isu dhiiba” (cf. Tiitos 3:1; I Butros 2:13). “Submit” ama “isu dhiibid” waxa uu ahaa erey military oo loo isticmaali jiray in lagu muujiyo silsiladda amarka. Bawlos macne ahaan waxa uu ku hagaajinayey rumaystayaasha oo dhan (cf. Efesos 5:21), halkaasoo uu Bawlos ku tilmaamayey in rumaystayaashu midba midka kale ka dambeeyo.

Maalinteenna waxaad mooddaa in isu dhiibiddu u muuqato sidii erey diidmo ah. Waa erey u taagan labadaba is hoosaysiin iyo fahan qoto dheer oo ah ereyga Ilaah iyo booska uu naga taagan yahay. Ciise waxaa laga sheegay in uu ahaa mid is hoosaysiin u lahaa (1) waaliddiintiisii adduunka (cf. Luukos 2:51) iyo (2) Aabbihiisii samada (cf. I Korintos 15:28). Isaga hage amah or jooqe ayuu noogu yahay!

▣ **“kuwa amarka sare leh”** In kastoo Bawlos uu ereygan (*exousia*) u isticmaalay macne kale oo ah in uu tilmaamayo awoodda malaa’igaha bilowgana jinka (cf. 8:38; Kolosay 1:16;2:10,15; Efesos1:21; 3:10; 6:21), halkanna macnuhu waa amraysaa “xukunka shacabka” (cf. I Korintos 2:6,8; Tiitos 3:1; I Butros 2:13). Kitaabka Qudduuska ahu wuxuu u muuqdaa in uu ma tusaalaynayo in ay jiraan awoodo malaa’igeed oo ka dambeeya dawladda aadanaha (Daanyeel 10 iyo LXX-ka Sharciga Ku Noqoshadiisa 32:8 “Markii Ilaaha ugu wada sarreeyaa uu quruumaha dhaxalkooda siiyey, Oo uu kala soocay binu-aadmiga, Intii tirada reer binu Israa’iil ahayd Ayuu dadka soohdimaha u dhigay.”) Laakiin weli xukummadaha dawlga ah Ilaah awooddiisa ayey ku hoos jiraad (cf. aaydaha 1b,4b, iyo 6). Aragt Mawduucaha Gaarka ah ee soo socda.

## MAWDUUC GAAR AH: DAWLADDA AADANAHA

### I. HORDHAC

- A. Qeexid—dawladdnimada waa aadanaha oo nafahaantooda isu agaasimaya si ay u helaan oo ay u dejiyaan baahiyada jidh ahaaneed.
- B. Ujeeddo—Ilaah aya dooray in kala dambayntu ay dejiso fawdada.
  1. Sharci-dejintii Muuse, gaar ahaan Diwaankii, waxa uu ahaa Ilaah doonistiisa oo uu aadanaha uga dhigayo bulsho ahaan. Waxay jimaysaa caabudaadda iyo nololsha.
  2. Ma jiro hab ama qaab dawladeed oo looga dooday Qorniinka, in kastoo Masiixiyiintii hore ee Israa’iil ay ahayd xukun Ilaah oo samada laga sugayey. Dimuquraaddiyad ama shuuciyad midna kuma jirto runta Kitaabka Qudduuska ah. Masiixiyiintu waa in ay si ku habboon u sameeyaan wax kasta oo nidaam dawladeed ah oo ay naf ahaantooda u helaan. Ujeedka Masiixigu waa gaarista dad iyo adeegga Ilaah, ma aha kacaan.
- C. Asalkii dawladdnimada aadanaha
  1. Roomaan Kaatooliggu waxa ay tilmaameen in dawladdnimada aadanuhu ay tahay mid dhaxal ah oo ay si dhab ah ugu baahan yihiin, xitaa dhiciddii ka hor. Aristotle, ayaa waxaad isna mooddaa in uu ballantan ku raacay wuxuu odhanayaa, “ninku waa xoolo siyaasadeed” oo middana waxa uu ula jeeday in dawladdu “ay ku dhex jirto abaabulka nololsha wanaagsan.”
  2. Nidaamka Protestant-ka, gaar ahaan Martin Luther, waxa uu ku tilmaamay in dawladdnimada aadanuhu ay tahay dhaxal ay heleen dhiciddii gudaheeda. Wuxuu iyada ugu yeeray, “Boqortooyada Ilaah Gacanteeda Bidix.” Waxa uu sheegay, “in Ilaah waddadiisa uu ku xakamayn karo ninka xun ay tahay in uu ku xukumo nin xun.”
  3. Karl Marx isna waxa uu ku tilmaamay in dawladdu ay tahay mid ay dhowr dooran ay culaysyada ku ilaaliyaan xukunka. Isaga xaggiisa, dawladda iyo diintu door isku mid ah ayey cayaaraan.

### II. WAXAYAABAHA BAYBALKA

#### A. Axdigii Hore

1. Israa’iil waa naqshadda ama muunadda samada la keeni lahaa. Israa’iishii hore dhexdooda waxaa boqor ka ahaa YHWH. Halkan waxaa ah “Theocracy” oo ah erey lagu caddaynayo Ilaah sharcigiisa tooska ah (cf. Samuu’eel 8:4-9).
2. Boqornimada Ilaah eek u jirta dawladdnimada aadanaha waxaa so toos ah looga dhex arki karaa:
  - a. Yeremyaah 27:6; Cesraa 1:1
  - b. II Taariikhdii Koowaad 36:22
  - c. Ishacyaah 44:28
  - d. Daanyeel 2:21
  - e. Daanyeel 2:44

- f. Daanyeel 4:17,25
- g. Daanyeel 5:28
- 3. Dadka Ilaah waa in ay noqdaan kuwo isku dhiiba oo xushmeeya xitaa dawladaha ku duullaanka ah ee cabbudhinaya:
  - a. Daanyeel 1-4 Nebukadnesar
  - b. Daanyeel 5, Beelshaasar
  - c. Daanyeel 6 Dariyus
  - d. Cesraa iyo Nexemyaah
- 4. Dadka Ilaah waa in ay u duceeyaan xukuumadaha shacabka:
  - a. Yereyaaah 28:7
  - b. Mishnah, Avot. 3:2
- B. Axdiga Cusub
  - 1. Ciise xushmad ayuu tusay dawladaha aadanaha
    - a. Matayos 17:24-27; wuxuu bixiyey cashuurtii Macbudka
    - b. Matayos 22:15-22, meel ayuu ugu dooday cashuurtii Roomaanka iyo sidoo kale xukuumaddii Roomaanka
    - c. Yooxanaa 19:11, Ilaah ayaa bixiya xukunka shacabka
  - 2. Ereyadii Bawlos oo la xidhiidhay dawladaha banii aadanka
    - a. Rooma 13:1-7, rumaystayaashu waa inj ay isku dhiibaan oo ay u duceeyaan xukuumadaha shacabka
    - b. I Timoteyos 2:1-3, rumaystayaashu waa in ay u duceeyaan xukuumadaha shacabka
    - c. Tiitos 3:1, rumaystayaashu waa in ay ka dambeeyaan kuwa amarka sare leh
  - 3. Eeyadii Butros ee la xidhiidhay dawladaha banii aadanka
    - a. Falimaha Rasuullada 4:1-31; 5:29, Butros iyo Yooxanaa Senherdin horteeda (tani waxa ay muujinaysaa addeecista la'aanta shacabka)
    - b. I Butros 2:13-17, rumaystayaashu waa in ay isku dhiibaan ama ka dambeeyaan kuwa amarka sare leh
  - 4. Ereyadii Yooxanaa ee la xidhiidhay dawladaha banii aadanka
    - a. Muujintii 17, Taalladii Baabel waxa ay u taagnayd dawladda aadanaha oo Ilaah ka soo hor jeesatay

### III. GABGGABO

- A. Dawladnimada aadanaha xagga Ilaah ayaa laga amraa. Tani ma aha “xaquuqda rabbaaniga ah ee Boqorrada.” Laakiin meesha rabbaaniga ah ee dawladda. Ninna kan kale ugama doodi karo.
- B. Waa waajibbaad diini ah in rumaystaashu ay ku addeecaan xukuumadda shacabka garaad ama dareen xushmad.
- C. Qaas ayey rumaystayaasha u tahay in ay dawladda aadanaha u saacidaan canshuurta iyo u ducaaynta.
- D. Dawladnimada aadanuhu waa ujeeddada amarka ama kala dambaynta. Ilaah ayey sidan adeegayaal ugu yihiin xagga dhawrista adduunka.
- E. Dawladnimada aadanuhu ma aha qorshaha ugu dambeeya. Waa mid xukunkeeda ku eg.rumaystaashu waa in ay wax ka sameeyaan amarrada u yaal dartood oo ay ku diidaan xukunka shacabka haddii ay ka hor yimaadaan haddii ay cagta ka soo gudbiyaan xadkii loo doortay. Sidi Augustine uu ku tilmaamay *The City of God*, waxaan haysannaa labo dhalashom mid waa mid aan joogto ahayn midna waa tan weligeed ah. Labadaba masuuliyad ayaannu ku lenahay, laakiin waa in la ogaadaa Ilaah Boqortooyadiisa ayaa ah qorshaha ugu dambeeya! Waa shaqsi ahaan iyo urur ahaan masuuliyaddeena aan Ilaah masuulka uga nahay.
- F. Waan ku dhiiri gelinaynaa in rumaystayaashu ay ka qayb qaataan nidaamka dimuqraadiyada oo ay ka qayb galaan hannaanka dawladda oo ay hir geliyaan, haddii ay macquul tahay, barista Qorniinka.
- G. Is beddel gaar ah waa in uu ka muuqadaa marka shaqsiga Ilaah u soo noqdo. Ma jirto rajo waaraysa oo ku jirta dawladnimada. Dawladaha aadanaha oo dhan , inkastoo uu adeegsada oo ay doonis Ilaah ahaayeen, waa dabeecadda is biirsiga aadanaha dembiga badan tan ka soocda iyaga Ilaah. aragtidan waxaa lagu qeexay adeegsigii Johannine “adduunka.”



**NASB** “kuwii jira Ilaah xagga Ilaah ayey ka unkameen ”  
**NJKV** “Kuwa jirana Ilaah baa ka dhigay kuwa amar leh”  
**NRSV** “Kuwii Ilaah ahaysiiyey”  
**TEV** “Kuwii Ilaah meesha dhigay”  
**NJB** “Kuwii Ilaah uu magacaabay”

Tani waa weedh fal ebyamay oo taagan oo adeegsiigiisu hadal maldahan. Waxa uu tilmaamayaa in Ilaah yahay kan ka dambeeya aadanaha oo dhan awooddooda (cf. Yooxanaa 19:11). Middani ma tilmaamayso “xuquuqda rabbaaniga ah ee Boqorrada.” Laakiin waxay ku jeeddaa doonista oo kala dambaynta. Tani ma tilmaamayso nooc cayiman oo dawlad ah, laakiin dawladda naf ahaanteed. Kala dambayta shacabku way ka fiican tahay kala dambayn la’aanta (cf. aayadda. 6).

**13:2 “kii diida kan amarka leh”** Kani waa fal dhexe oo taagan. Tani waxa ay tilmaamaysaa fallaaganimo dhacda oo shaqsi ahaaneed oo looga soo hor jeedo kala dambayn aasaasan. Macna ahaan waa “mid shaqsi ahaantii isugu diyaariyey in mucaarado” (cf. Falimaha Rasuullada 18:6; Yacquub 6:5). Sida ku qoran Markos 12:17, Ciise wuxuu si cad u sheegayaa labada qayb dawladda iyo kaniisadda. Sida ku qoran Falimaha Rasuullada 5:25-32 waxaan arkaynaa waxa dhacaya marka xukuumadi ay ka sallaabto xadadkeeda.



**“joogsadaa. . . joogsadaana”** Kani waa fal tegay oo taagan iyo fal ebyamay oo tegay. Kuwani waxa ay ka hadlayaan fallaaganimo la aasaasay oo la dejiyey. Ilaah kala dambayn ayuu siiyey adduunkan dhacay (cf. aayadaha 4,6). In kala dambaynta laga soo hor jeesto waa iyadoo Ilaah laga soo hor jeesto, haddii xukuumadda shacabka qudheedu aysan gudbin xadadkii Ilaah siiyey. Runta aragtida ruuxiga ahu waa in laga dambeeyo xukuumadaha. Aadanihii dhacay is xukun shaqsi ahaaneed ayey u baahan yihiin!



**“waxay nafahaantooda u heli doonaan xukun”** KJV waxa uu leeyahay “damnation.” Ereygan Ingiriis ahaan wuxuu ahaa mid isku soo noqonaya illaa A. D. 1611. NKJV waxa uu isna I tarjumayaa “xukun.” Macne ahaan tani waxa ay tilmaamaysaa (1) Xukunka Ilaah ama (1) Ciqaabta shacabka (cf. aayadda. 4). Dadkani xukun ayey naf ahaantooda isugu soo jiiddeen fikirhoodii iyo ficilladoodii ay uga soo hor jeesteed xukuumadda (cf. Yooxanaa 3:17-21).

**13:3** Faallo la siman I Butros 2:14.



**“kan amarka leh”** Ka eeg Mawduuc Gaar ah: *Arche* 8:38

**13:4 “isagu wuxuu xaggaaga ku yahay midiidinka Ilaah inuu wanaag kuu sameeyo”** Xukunka dawladnimo waxa uu shacabka uga soo hor jeedaa in ay yihiin xumaan falayaal halka rumaystaha lagu xadeeyo aqbalaaddiisa shaqsi ahaaneed (cf. 12:17-19). Luther middan wuxuu ku sheegay “Ilaah waddadiisa uu ku xukumo aadanaha xun waa in uu dul saaro in ay aadane xun xukumaan. ”



**“haddii”** Kani waa erey shuruudaha ka hadlaya oo heer saddexaad, oo macnihiisu yahay ficil mustaqbal oo macquul ah.



**NASB** “sidii isagoo aan seefta u sidan sabab la’aan”  
**NKJV** “isagu seefta uma sito sabab la'aaan”  
**NRSV** “ sidii isagoo aan seefta u sidan wax-ku-qabasho la’aaan”  
**TEV** “Awooddooda ay wax ku ciqaabayaani waa run”  
**NJB** “ma aha mid aan macne ku fadhin in calaamadda ay xukunka uyihii tahay seef”

Ereyga “seef” (*machaira*) waxa uu tilmaamayaa seefta yare ee Roomaanka ee ciqaabta dilka loo isticmaali jira (cf. Falimaha Rasuullada 12:2; Rooma 8:35). Qoraalkan iyo Falimaha Rasuullada 25:11 waxa ay Axdiga Cusub siinaysaa sal ahaan ciqaab dil ah, halka Bilowgii 9:6 ay si cad u sheegayso rajadii Axdigii Hore. Cabsidu waa mid waxtar u leh ka digidda kala dambayn la’aanta!

▣ **“isagu waa midiidinka Ilaah, oo waa mid cadho kaga aarsada”** Ereygan aargudasho (*ekdikos*) dhowr jeer ayaa Axdigii Hore lagu isticmaalay. Waxaa xitaa lagu isticmaalayaa qaybta hore ee Laawiyiintii 9:18. Axdigii Hore dhexdiisii, haddii qof dilo qof kale, xitaa si aan ula kac ahayn, qofkaas qoyskiisu waxa ay xaq u lahaayeen “in ay ilba isheeda ahaato” macnaha aargudasho (kii isna daadin lahaa dhiigga dhiig qabaha). Halkan waxa ay u muuqataa in bawlos uu ku tilmaamayo dhaqankii Axdigii Hore tan ay xukuumadda dawladda rayidka ah ku kacayso.

**13:5 “waa in laga dambeeyo”** labo sababood ayaa ku cad (1) in laga fakado ciqaabta, tan Ilaah ama tan xukuumadda dawladda rayidkaah iyo (2) ama rumaystaha amarradiisa.

▣ **“waa niyadda aawadeedna”** ma ala wax kala duwanaansho ah oo Axdigii Hore uu kaga soo hor jeedo ereyga Giriigga “niyadda” halka ereyga Cibraaniyada ee “breast” uu ka tilmaamayo aqoonta nafta iyo muhiimadaheeda. Asal ahaan ereyga Giriigga ee lagu tilmaamay niyad lahaanshada waxa ay la xidhiidhay shanta dareen. Waxa ay noqotay in loo adeegsado dareennada gudaha (cf. Rooma 2:15). Bawlos ereygan labo jeer ayuu ku isticmaalayaa xukumadiisii sida ku jirta Falimaha Rasuullada (i.e., 23:1 iyo 24:16). Waxa uu tilmaamayaa dareenkiisa ku aaddan kaasoo uusan si ogaal ah u carqaladaynayn diin kastoo la garanayey waajibaadkeeda ku aaddan Ilaah (cf. I Korintos 4:4).

Damiirku waa fahanka horumaraya ee rumaystayaasha ujeedkooda iyo falimahooda ku salaysan (1) aragtida baybal ahaaneed ee muuqaalka adduunka; (2) Ruuxa Qudduuska ah eek u dhex nool iyaga; iyo (3) aqoon hab nololeed ku dhisan Ereyga Ilaah. waxaa suurto geliyey soo dhawayntii shaqi ahaaneed ee injiilka.

**13:6 “sababtaas aawadeed waxaad u bixisaan cashuur”** Kani waa fal taagan oo toosan oo wax caddeeya ah, inkastoo qaabkiisu ahaan karo fal taagan oo toosan oo si caadi ah loo isticmaalayo (cf. JB). Tani waa hal tusaale oo ka mid Masiixiga masuuliyaddiisa ku aaddan xukuumadda rayidka ah maxaa yeelay kuwaamarka sare leh ee dawladdu waa adeegayaasha Ilaah.

▣

<b>NASB</b>	<b>“Dhiiba wax kastoo ay idinku leeyihiin: canshuur. . .custom. . .ka baqid. . .xushamayn”</b>
<b>NKJV</b>	<b>“Mid waluba wuxuu idinku leeyahay siiya” cashuur. . .custom. . .ka baqid. . .xushamayn</b>
<b>NRSV</b>	<b>“bixiya wixii ay idinku leeyihiin oo dhan—canshuur. . .revenue. . .ka baqid. . .xushamayn”</b>
<b>TEV</b>	<b>“dabadeed bixiya wixii ay idinku leeyihiin; siiya shaqsiyaddiina iyo canshuurta maalkiinna, oo xushmad iyo qaddarin u muujiya iyaga”</b>
<b>JB</b>	<b>“sii wixii dadka sare ee dawladdu xaq ahaan idiin weyddiistaan, ha noqoto canshuur toos iyo midaan toos ahayn, ka baqid ama xushmayn”</b>

Tani waxa ay tilmaamaysaa la koox oo kala gaar ah oo xukuumadda dawladda ah (cf. RSV), laakiin waxa loola jeedo ayaa ah in Masiixiyiintu shacabka amarka sare leh ay canshuur iyo xushmadba siiyaan maxaa yeelay waxa ay iyagu u shaqaynayaan sida adeegayaasha Ilaah (cf. aayadaha 1,4[labo jeer],6; Matayos 22:15-22).

Waxaa jira la erey “tax” iyo “custom” isku si aya halkan loogu isticmaalayaa (inkastoo TEV -gu uu boos u kala samaynayo). Haddii lagu dhidhigay cilmiga barashda salka iyo macnaha ereyga (macnaha asalka ah), tan horraysaahi waxa ay tilmaamaysaa canshuurta nuruunta xoogga lagu haysto (cf. Luukos 20”22) iyo tan labaad oo ah canshuuraha qofka shaqsi ahaan looga rabo (cf. Matayos 17:25; 22:17,19).

#### **FAHAN KA MACNAHA GUUD EE ROOMA 13:8-14**

- A. Waa macquul in aayadaha 1-7 loo fahmo sidii macne shaqi ku kooban. Arrintu si kasta ha ahaatee, ereyga fal sameeyaha ah ee “owing” “ku lahaansho” eek u jira aayadda. 7, ayaa waxa uu u muuqdaa in uu ka kooban yahay dareenno kala duwan sida ku jirta aayadda. 8. Waajibaad ayey dawladdu ku leedahay rumaystayaasha; rumaystayaasha waxaa sidoo kale waajibaad ku leh aadanaha kale ee jira.
- B. Aaydaha 8-10 waxa ay wada leeyihiin fikir midaysan, sida aayadaha 11-14. Waxa ay sii wadayaan wada hadalkii ka soo bilowday cutubka 12 ee masiixiga masuuliyaddiisa ka saaran in uu jeclaado kawa kale.
- C. Bawlos soo qaadashadiisa Axdigii Hore ee uu hagaha Axdiga Cusub uga shigayo waxa ay muujinaysaa sii socoshada ku saabsan Axdigii Hore ee meelaha sheegaya nolol ilaah raalli ka yahay ama (Qudduus ahaanshaha), ma aha badbaado (xaq ka dhigid, cf. Galatiya3). Waxa ay u muuqataa in Bawlos uu dhowr arrimood isku xidhay si uu tusaalayntiisa u dhiso kuwaasoo ah;
  1. Ereyadii ciise
  2. Ruuxa oo hagayey
  3. Axdigii Hore
  4. Waayo aragnimadii uu u lahaa diinta rabbayga

5. Cilmigii uu u lahaa mufakiriintii Giriigta (gaar ahaan Stoics-ka)

Tani waxa ay dabeecad ahaan soo daaraysaa “sharci jacayl”—jacaylka Ilaah, jacaylka aadanaha, adeegga Ilaah, iyo u deegidda aadanaha!

- D. Aayadaha 11-14 waxa ay leeyihiin jihayn ku saabsan dhammaadka waqtiga. Farqiga u dhexeeya mugdiga iyo iftiinka waxa uu ahaa dabeecadda qoraalka dadka Yuhuudda ah, oo ay Qorniinnadii Badda Dhimashadu ku jiraan. Waxa uu sidoo kale si caam ah ugu yaal qoraallada Yooxanaa iyo Bawlos. “Horraantii” oo ka soo hor jeedda “ma aha weli” tanoo ah nolosha Masiixiga waxa ay raaxo ku heshaa u noolaanshaha si Ilaah raalli ka yahay. “Faca cusub” (Boqortooyada Ilaah) ayaa la dhex geliyey oo si dhaqso leh ayaa loo ebyi doonaa. Qoraalkan qaabani waxa uu aad ula mid yahay I Tesaloniika 5:1-11.
- E. Aaydaha 13-14 saamayn is beddel nololeed ayey ku kallifeen Augustine xagaagii A. D. 386. Waxa uu uu *Qirashooyinkiisa* 8:2 ku sheegayaa, “Waxa badan maansii aqriyeen, baahina uma qabeen; durbadiiba dhammaadka jumladan, iftiin muuqda ayaa qalbigayga sidii daad oo kale u soo galay oo mugdigii shakiga oo dhan ayaa qarsoomay.”

## BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 13:8-10

<sup>8</sup>Ninna yuusan wax idinku lahaan in midkiinba midka kale jeclaado mooyaane. Waayo, kii deriskiisa jeclaadaa sharciguu oofiyey. <sup>9</sup>Waayo, amarradan la yidhi. Waa inaanad sinaysan. Waa inaanad qudh gooyn, Waa inaanad waxba xadin. Waa inaanad wax damcin. oo haddii amar kale jirana. waxaa lagu soo koobay hadalkan. Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada. <sup>10</sup>Jacaylku xumaan kuma sameeyo deriskiisa: jacaylku haddaba waa oofinta sharciga.”

**13:8 “Ninna yuusan wax idinku lahaan”** Kani waa fal taagan oo toos ah oo lagu isticmaalay macnaha hadalka caadiga ah oo ay qayb diidmo ahi la socoto, kaasoo had iyo goor macnihiisu yahay in la joojiyo ficil horay loo samayn jiray. Weedhan awoodda leh waxa ay wadataa labo diidmo. Tan waxaa lala xidhiidhsiiin karaa arrinkii canshuuraha ee (aayadaha. 6-7). Amaahashada dhaqaaluhu waxa ay had iyo dareen ahaan awood ahaanba u baabbi’isaa ruuxa. Aad uga taxaddar in aad mid adduun noqotid. Waxa ay rumaystayaasha ka dhacdaa ama ka xoogtaa awooddoodii ay ku taageeri lahaayeen dhacdooyinka ku yimaada Masiixiga iyo bixinta sadaqada. Arrintu si kastaba ha ahaatee, aayaddan loomu isticmaali karo in ay caddayn qoraal ah u tahay “ma jirto cid dayn qaadan karta.” Waa in baybalka si iftiin leh loogu tafiisraa sida ay maalintiisaas uu leeyahay ay ahayd. Ma aha wargeyska Maraykanka ama Soomaalida ee subaxdii soo baxa! Aaydaha 8-10 waxa ay xoojinayaa mudnaanta weyn eek u jirta is jeclaanshaheenna midba midka kale (1) sidii walaalaha axdiga (Matayos 22:39-40; Yooxanaa 13:34-35); iyo (2) iyo aadanaha wedayga nala ah (cf. Matayos 5:42; Galatiya 6:10).

▣ **“in midkiinba midka kale jeclaado mooyaane”** Kani waa fakarka furaha ah ee aayadaha. 8-10 (cf. Yooxanaa 13:34; 15:12; Rooma 12:10; I Korintos 13; Filiboy 2:3-4; I Tesaloniika 4:9; Cibraaniyada 13:1; II Butros 1:7; I Yooxanaa 3:11; 4:7,11-12).

▣ **“kii deriskiisa jeclaadaa”** Kani waa fal taagan oo toos ah. Middani tilmaami mayso ficillo jacayl oo gooni loo soocay ama xilli leh, laakiin qaab nololeed jacaylkii ekaanta Masiixa wata.

Ereyga “deris” waxa uu sax ahaan noqonayaa, “mid nooc kale ah” (*hetros*), inkastoo qiyaasta u dhexaysa *hetros* iyo *allos* ee “mid kale oo isla noocii ah” waa lagu kala jejebinayey qoraalkii Giriigga ee Koine. Marka aan macne ahaa neegno tani waxa ay tilmaamaysaa qof deriskii, marka la eego ereyada guud ha noqdo rumayste ama yuusan noqon e (cf. Luukos 12:14-21; 10:25-37). Arrintu si kastaba ha ahaatee, xigashada ka timid Laawiyiintii 19:18 macne ahaan waxa ay tilmaamaysaa qof kale oo axdiga qayb ka ah (Israa’iil wedaay ama saaxiib kula ah).

Masiixiyiintu waa in ay Masiixiyiinta kale u jeclaadaa sidii walaalo oo kale dadka lumayna sidii walaalo suurto gal noqon kara. Masiixiyaddu waa qoys. Xubin kasta way ku nooshahay oo waxa ay ka shaqaysaa caafimaadka iyo korriimada qoyska oo dham (cf. I Korintos 12:7).

▣

NASB, NKJV,

**NRSV** “sharciguu oofiyey”  
**TEV** “sharciguu addeecay”  
**JB** “waxaad fuliseen waajibaadkiinnii”

Ereygan guud ee Giriigga (*pleroo*) dhowr waddo ayaa loo tarjumi karaa. Waxaa weeye fal tegay oo taagan wax caddeeye ah, kaasoo loo tarjumi karo “waa uu soo socday waxa uuna u socdaa in la kaamilo.” Robert Hanna, *A Grammatica Aid to The Greek New Testament*, oo soo xiganaya A. T. Robertson aya waxa uu ku sheegay “a gnostic perfect (oo tilmaamaysa runta canshuureed ee lagu yiqiin canshuur qaadayaasha)” (bogga 28). Waxaa lagu soo celiyey oo ay haddana ku jirtaa aayadda. 10. (cf. Galatiga 5:14; 6:2).

**13:9** Waxa aan caadi ahayn kuma aha Bawlos in uu adeegsao Sharcigii Muuse (Baxniintii 20:13-17 ama Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:17-21 iyo Laawiyiintii 19:18) si uu ugu qanciyo rumaystayaasha Axdiga Cusub. Sida ku jirta Efesos 6:2-3, Bawlos wuxuu sidoo kale isticmaalay mid tobankii amar ka mid isagoo Masiixiyiinta ku qancinaya (cf. I Timoteyos 1:9-10). Qoraalkan Axdigii Hore maahayn macne badbaado laakiin waxa ay weli ahayd doonistii Ilaah oo loo muujiyey sidii ay dadku macaamil ula yeelan lahaayeen Ilaah iyo dhexdooda midba midka kale (cf. Rooma 15:4; I Korintos 10:6,11). Sida macquulka ah ka soo xigashada Axdigii Hore waxa ay ahayd Bawlos isku xidhiidhintiisa labadaba Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee rumaysadka leh ee joogay kaniisadda Rooma. Adeegsiga ereygan “oofin” waxa ay sidoo kale la xidhiidhaa wada hadalkii Ciise ee Sharciga sida ku jirta Matayos5:17.

Waxaa macquul ah in uu u tilmaamayo sharciga si guud, sharci xeer bulsho ahaaneed, oo uusan si gaar ah uusan Sharciga Muuse u ahayn (cf. JB). Arrintu si kastaba ha ahaatee, xaqiiqada Rasuul Bawlos ka soo xigtay Axdigii Hore aayaddiisa. 9 waxa ay tilmaamaysaa tixraac Sharcigii Muuse ah. Ogsoonow in jacaylka oo qura, aanse ahayn aadanaha ilaalintooda sharciga, uu si run ah u oofin karo ama u kaamili Sharciga! Mawduuc Gaar ah ka eeg oos.

#### **MAWDUUC GAAR AH: ARAGTIYADII BAWLOS EE SHARCIGII MUUSE**

- A. Waa wax wanaagsan oo ka yimid Ilaah (cf. 7:12,16)
- B. Ma aha jidka xaqnimada iyo aqbalitaanka Ilaah (oo waxa uu xitaa noqon karaa habaar, cf. Galatiya 3)
- C. Weli waa Ilaah doonistiisa u ahaatay rumaystayaasha maxaa yeelay isagu waa Ilaah Is-muujintiisa (Bawlos waxa uu had iyo gooraale u soo xigtaa Axdigii hore in uu u muujiyo oo/ama ku dhiirri geliyo rumaystayaasha)
- D. Rumaystayaasha waxaa lagu war geliyey Axdigii Hore (cf. Rooma 4:23-24; 15:4; I Korintos 10:6,11), laakiin Axdigii Hore kuma aysaqn badbaadin (cf. Falimaha Rasuullada 15; Rooma 4; Galatiya 3; Cibraaniyada)
- E. Waxa uu ka dhex shaqeeyaa Axdiga Cusub si uu
  1. Ugu muujiyo Dembi badnaabta (cf. Galatiya 3:15-29)
  2. Ugu hago madax furashada aadanaha ee bulshada dhexdeeda ah
  3. Ugu war geliyo Masiixiga go'aanniisa asalka ah

Tani waa shucaaca fiqi ahaaneed ee ka imanaysa inkaarta iyo dhimashada eek u aaddan barakada iyo joogtaynta ee dhibaata ku sababaysa isku dayga in la fahmo Bawlos aragtidiisa ku aaddan Sharcigii Muuse. Sida ku jirta *A Man in Christ*, James Stewart waxa uu muujinayaa Bawlos fikirkiisii iyo qoraalkiisii is waafaqsanaa:

“Sida caadiga ah waxa aad fili lahayd nin isagu shaqsi ahaantiisa habaynayey in uu dhiso hab fikir iyo fiqi ah si uu si hadba dhan loo qaadan kaor ee macquulka ah ugu saleeyo ereyadii uu ku shaqeeyay. Waxa aad ka fili lahayd to in ujeedkiisu yahay saxnaanta barashada weedhaha fikirka uu hoggaaminayo. Belaakiin waxa aad weyddiin lahayd in erey, uu mar qoraagaagu u isticmaalay dareen gaar ah, uu waddada dareenkaas ku socon lahaa. Laakiin bal middan ka raadi Bawlos waa mid laga niyad jabo. Weedhihiisa badankood waa kuwo waddooyin badan qaadi kara, ma aha kuwo aan meelna u leexanayn. . . “Sharcigu waa qudduus” wuxuu qorayaa, ‘sharciga Ilaah ayaan kaga farxaa ninka gudaha ah’ (Rooma 7:12,22), laakiin sida cad waa arrin kale oo ah *nomos* waxa isaga ka dhigaya in uu sheego meel kale. “Masiix wuxuu inaga furtay inkaartii sharciga (cf. Galatiya 3:13)” (Bogga 26).



## MAWDUUC GAAR AH: OGAYSIIS KU SAABSAN BAXNIINTII 20

### BAXNIINTII 20:13, DHIIG QABIDDA

#### I. CONTEXT

- A. Waxaa in la xusuusto u baahan in xitaa amarrada u muuqda in ay yihiin wax ay dabeecadda bulshadu iska leedahay ayaa waxa ay sida runta ah yihiin diin. Ilaah weynnaantiisa ku aaddan uunka iyo madax furahshada waxaa lagu muujiyey amarradan. Amarka ah in aan wax la dilin, waa yool gaar ah, oo ah erey ku saabsan Ilaah araggiisa ku jira aadanaha iyo daryeelka iyo danaynta Ilaah ee nolosha aadanaha.
- B. Waxaa loo baahan yahay in la xusuusnaado in amarka kasta uu ka hummaag celinayo bulshada iimmaanka leh. Mamnuucidda in nolol loo qaado dhaqan aan sharci ahayn waxaa bilow ahaan iyo asal ahaan diiraddu ku saaran tahay bulshada rumaysadka leh. Tusaalooyinkeedu wax ay u badan yihiin sida aadanaha oo kale!

#### II. BARASHADA EREYADA MACNAHA GAARKA AH LEH

##### A. “Dhiig qabid”

1. Kani waa erey aad dhif u ah (*rasah*) qaadista nafta, lix iyo afartan jeer ayaa lagu isticmaalay Axdigii Hore. Waxaa jira labo erey oo kale oo aad caan u ah.
  - a. *Harag*, waxaa la adeegsaday 165 jeer
  - b. *Hemit*, waxaa la adeegsaday 201 jeer
2. Ereyga (*rasah*) waxaad mooddaa in asal ahaan uu leeyahay mace xadaysan iyo macne ballaadhan.
  - a. Asal ahaan waxa uu la xidhiidhay in si sharci badheedh ah loo qaado nafta qofka axdiga leh ee xubinta ka ah, oo badanaa la xidhiidha “ninka qaraabada la ah madax furanaya” ama “*go’el*.” Adeegsigu waa uu ku jiray badheedhku laakiin waxa uu ahaa aar gudahsho sharci ah (cf. Tirinti 35:30-34; Laawiyiintii 24:13-23). Sida runta ah Lex Talionis, “il-ba il,” (cf. Bilowgii 9:5-6) waxa ay ahayd waddo aar gudasha lagu xadaynayo. Goor dambe magaaloyinkii magangalka (Sharciga ku noqoshadiisa 4:41; Yashuuca 20:3) ayaa waxaa lagu aasaasay in kuwa sharciga ku jira haddii ay si shil ama kama’u dilay xubin kale oo bulshada ka mid ah uu ka cararo cadhada dhibbanaha qoyskiisa.
  - b. Goor dambe ayaa waxa uu ereygii noqday in uu ku tilmaamo ujrrdka ma aragtida ka dambaysa in naf la qaado. Aragtida “intentionally” “si ku talo gal ah” ayaa tan ugu sarraysa noqotay! (cf. Baxniintii 21:12-14; Tirintii 35:11,22; Sharciga Ku Noqoshadiisa 28:240).
  - c. Qiyaastu waxa ay ku cayimantay amarkan. Waxa ay macne ahaan u muuqataa in uu tilmaamayo kuwa kale ee bulshada sharciga ka midka ah. Waxa ay ahayd mid eheladu ay madax furtaan ama in dhiig la daadiyo loogu aar gudo. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waxaa ereygan lagu isticmaalay qoraallo dambe oo soo celiyey middan sida ku jirta Hoosheeca 4:2 iyo Yeremyaah 7:9, oo ku tilmaamaya kan wax dila. Ereygani la xidhiidho oo qura sharciga laakiin ujeeddada. Waxa uu ka soo baxaa deris oo u gudbaa aadane kale.
3. Ereygani dhabtii lama xidhiidho arrimaheennan casriga ah ee xaqa ah eek u saabsan ciqaabta guud ama dagaalka. Yuhuuddu marna dhibaato ku aaddan bulsho la laayo ama dagaal qudduus ah (ama arrintaa dilka daraaddeed dagaal aan qudduus ahayn!).
4. Tarjumaadda ugu fiican ee dhaqankenna casriga ah waxa uu ahaan lahaa “dil ula kac ah.”

#### III. FAHAN MACNAHA GUUD

- A. Amarrada lix, toddobo, iyo siddeed waxaa lagu sameeyay labo erey oo Cibraani ah oo qura. Aad ayey u yar yihiin meesha ayeyna tilmaamayaan.
- B. Nafta, sida nafaha oo dhan ay yihiin ba waa mid Ilaah ku cidhan. Sida aan kuwa kale ula macaamilno waxa ay ka ficil celinaysaa fikirraqda aan la qabno Ilaah.

#### IV. ISU JIMAYSNAANTA AXDIGA CUSUB

##### A. Ciise

1. Ballaadhintiisii amarkan (cf. Matayos 5:21-26) ayaa waxa ay jaho wada hadal cusub casri ah oo ku saabsan inoo siinaysaa sidii aan maalinteenna qotaalkan ugu dhaqan gelin lahayn.

2. Ciise waxa uu Tobankii amarue-gii si cad uga qaadan boqortooyadii ficillada ama falimaha, oo waxa uu dhex keenay boqortooyada muhiimadaha. Wixii aannu ku fakarno ayuunbaa nahay! “Wixii qofku qalbigiisa kaga fakaro, sudaa ayuubuu yahay.” Fakarka naftu waa ka dhaqan gelin iyo toosnaan badan yihiin waxa aannu iyada ahmiyadda u siinno.

B. Yooxanaa

1. I Yooxanaa 3:15, ujeedka isla sidan ah ee nacaybka ayaa lagu muujiyey in uu dilka la mid yahay.
2. Ereyga Giriigga ah ee lagu isticmaalay Matayos 5:21ff iyo I Yooxanaa 3:15 waa ay kala duwan yihiin laakiin muhiimad ahaan macnuhu waa isla sidii.
3. Ogsoonow kujeeddada aan diidmada ahayn eek u jirta I Yooxanaa 4:19-21.

V. DHQAN GELINTA RUNTA

- A. In kastoo xitaa dilaaga sida aan kama'da ah wax u dila uu uga fakan karo kan wax u aar gudaya xaggaa iyo magaalada magan galka (Tirintii 35; Yashuuca 20), waa in uu ganaax xabsi ah ku mutaa magaaladaa dhexdeeda illaa dhimashada wadaadka sare. Cidhibdambeedka falkiisu weli wuu sii joogayaa!
- B. In kastoo aayaddani aysan si toos ah ula xidhiidhin is miidaaminta, sida waadaydii hore aan loo fakarin dhacdadan, qoraalku waxa uu weli bixinayaa masuuliyad ruuxi ah oo qusaysa qudduusnaanta nolosha aadanaha iyo Ilaah qaaddirnimadiisa iyo ujeeddada nolosha aadanaha uu Araggiisa ka sameeyay. Qoraalkan waxa uu ka hadlayaa erey xoog leh oo ku jeeda maalmaheenna marka booskan laga hadlayo!
- C. Qoraalkan, arrintu si kastaba ha ahaate, kama hadlayo erey qiyaano ku ah su'aasha casriga ah ee (1) ciqaabta guud ahaneed ama (2) dagaal. Israa'iil ahaan, kuwani waxyaabo shar ah ma ahayn iyaga dhexdooda. Reer Baniis Israa'iil way lahaayeen labadan falimood. Weli, xeerka muhiimadda nafta laga sameeyay Aragga Ilaah ee ku hoos jirta xukunkiisa waa run muhiim ah oo meeshan ku jirta.
- D. Qoraalkani kama hadlayo erey loo baahnaa oo ku saabsan sharafta iyo qudduusnaanta nolosha aadanaha! Annagu haddii aannu nahay bulshada rumaysadka waxaannu nahay wakiillo, oo kama nihin oo qura falimaheenna, laakiin tan bulshadeenna. Hadiyadda noloshu waa mid shaqsi ahaaneed iyo urur ahaaneed labdaba.

Waxaannu masuul ka nahay cay kasta oo cilmi nafsi ahaaneed, bulsho ahaaneed iyo kor ahaaneed oo jidhkeenna soo gaadha maaddaama aan kuwa kale ee bulshadeenna ku jira u nahay cayda cilmi nafsi ahaaneed iyo tan bulsho ahaaneed iyo tan jidh ahaaneed. Tani waa run si gaar ah ugu jirta dhaqanka sida kuweenna halkaasoo la inoo oggol yahay in aan ku hadalno oo, sababtaas awgeedna, la beddelayo qaabka. Waxaannu nahay daryeelayaasha walaalaheen!

BAXNIINTII 20:14, SINADA

I. MACNAHA GUUD

- A. Waa wax iska cad in amarradu ay la xidhiidhaan qofka xushmadda uu Ilaah u hayo oo laga dhex arkayo xushmadda uu qofku u hayo hantida, xaaska, iyo nolosha deriskiisa (cf. Yeremyaah 5:8). Tan waxaa lagu xaqiijiyey amarka kala duwan ee amarradan ku jira Septuagint.
- B. Sinnaanaha ku jira Sharciga Ku Noqoshadiisa waxa ay muuinaysaa ku habboonaanta runtan waayadii oo aan u soo qaadanno dhaqankeenna.
- C. Sidii in waalidka la xushmeeyo loogu arkay, in ay fure u tahay xasilloonida bulshada, sidaas oo kale ayuu amarkanina u yahay.
- D. Amarkani waxa uu tilmaamayaa Ilaah milkidiisa uu dareennadna hammada iyo nolosha qaoyseenna ku xukumo.
- E. Amarkan waxa uu u muuqdaa in loogu saleeyay Bilowgii 2:24 sida amarka 4 aad loogu saleeyay Blowgii 2:1-3.

II. BARASHADA EREYGA

- A. Ereyga weyn ee qoraalkan ku jirta waa “sino.” Waa wax muhiim ah in qofku uu fahmo ereygan in

uu si cad u yahay mid dhaqankii hore Cibraaniyada ku jiray.

1. Ereygani waa cayimaad u yahay ereygii Axdigii Hore macnaha “fornication.” Sinadu waxa ay la xidhiidhaa ugu yaraan hal xubin oo kuwa sinada sameyey ah la qabo. Ereyga “fornication” waxa uu tilmaamayaa labdaba xubnoodba ay yihiin kuwo aan guursan (cf. Maahmaahyadii 29:3; 31:3). Cayimaaddii waxa ay ku dhex luntay Axdiga Cusub ee luuqadda Giriigga dhexdiisa.
2. Arrintan macquulka ah waxa ay sharraxaysaa sababta loogu xoojinayo waxyaabaha alaabada ah sababtoo ah waxa ay tilmaamayaan muhiimadda ku jirta xuquuqii dhaxalka ee ballankii Ilaah ku jiray ee ahaa “dhulkii” 50-kii sanoba (Jubilee) dhulka oo dhammi waa in uu u labtaa qolooyinkii iska lahaa.
3. Sinadu waxa ay ahayd mid si dhaqan ahaaneed loogu cambaareeyay Axdigii Muuse (cf. Bilowgii 12:10ff; 26:7ff; 39<sup>9</sup>).
4. Sidanada waxaa loo arkay in ay tahay wax ka soo hor jeedda:
  - a) Deriska – Baxniintii 20:14; Sharciga ku Noqoshadiisa 5:18
  - b) Guurka –Laawiyiintii 18:20
  - c) Ilaah – Bilowgii 20:1-13; 26:7-11
5. Waxa ay ahayd inj labada xubnoodba lagu fuliyo ciqaab dil ah”
  - a. Laawiyiintii 20:10
  - b. Sharciga Ku Noqoshadiisa 22:22-14
  - c. Yexesqeel 16:40 (Tilmaan)
  - d. Digniinaha tooskaahawaxaa laga helayaa Maahmaahyadii 1-9.

### III. XIDHIIDHKA AXDIGA CUSUB

- A. Ciise waxa uu adeegsaday Laawiyiintii 19:18 isagoo u adeegsanaya soo koobid ku saabsan Muujinta Hore (cf, Luukos 10:27). Tani waxa ay xaqiijinaysaa in tobanka amar ay la xidhiidhaan sidii aannu kumuwa kale u la macaamili lahayn ama ula dhaqmi lahayn.
- B. Ciise Masiix waxa uu xoojinayaa amarrada ku jira Matayos 5:28. Waxa u ku caddaynayaa ujeed halkii ficilka. Yuhuuddu waxa ay maskaxda u arkeen sidii sariirta nolosha. wixii qof ku fakaray ayaa sida runta ah qofku ahaa (Maahmaahyadii 23:7);

### IV. DHAQAN GELINNADA CASRIGA AH

- A. Guurku sida macquulka ah waa sinaanshaha casriga ah ee nolosha dheer ee rumaysadka leh lagula kulmayo magaca Ilaah. waa fursaddeena ugu wanaagsan ee aannu ku fahmi karno xaqiiqada ku jirta ujeedooyinka Adigii Hore (cf. Malaakii 2:14). In lammaanayheenna aan wax kasta ku xushmaynno, oo galmoodka aadanaha, ayaa waxa ay naga caawisaa in aan fahanno oonka loo qabo aayaddan.
- B. Guurku xasilloonidiisa iyo daacadnimada, si la mid sida xushmaynta waalidka, waxa uu tiir weyn u yahay xoogga bulsho ahaaneed iyo sii socoshadooda.
- C. Waxaa loo baahan yahay in la caddeeyo galmoodku uu yahay hadiyad xagga Ilaah ka timid. Waxa ay ahayd aragtidiisa iyo doonistiisa uu ugu talo galay aadanaha. Tilmaamahan loolama jeedo in ninka xuquuqdiisa ay ka hor istaagayso ama farxaddiisa, laakiin waxa weeye in aadanaha dhacay la siiyo. Waxaa xudduudahan loo muujiyey faa’idadeenna iyo farxaddeenna awgeed. In kastoo uu aadanuhu si cad ugu gafay galmoodka, inkastoo uu isagu haysto Ilaah hadiyadihiisa oo dhan, weli waa kaxayn awood badan leh oo ku jirta aadanaha oo ay waajib tahay in Ilaah xakamihiisa iyo hoggaamintiisa laga hoos galo.
- D. Galmoodka waa in la ilaaliyaa si karaamada aadanaha (naag iyo ninba) loo xushmeeyo maxaa yeelay waxaa iyaga laga abuuray aragga Ilaah. Dhiciddeenu waxa ay diiradda saartaa “aniga” ayaa ah waxa sidoo kale gebi ahaanba si toos ah meeshan ugu cad.

## BAXNIINTII 20:15, XADIDDA

### I. WARBIXIN GUUD

- A. Sida qaynuunnada ku jira Tobankii amar, rumaysadkeena, jacaylkeena iyo xushamaynta aan u haynno Ilaah waa in laga arkaa qudduusnaanteenna iyo aragtiyada kuwa aan diinta haysan muuqaalka nolosheenna. Waa wax fadeexad ah xagga Ilaah in la yiraahdo waan naqaannaa Isaga dabdeedna aan xsumaynno xubinteennii kale. (cf. I Yooxanaa 4:20-21; 2:7-11).
- B. Amarkani waxaa loola jeedaa inuu caawiyo wehelnimada bulshada axdiga. Tayada is weheshigan ruuxiga ah waxa uu soo jiidan doonaa kuwa jahwareersan ee Ilaaheenna doondoonya taasoo ah ujeeddada Qorniinka.
- C. Sida ay sharciyada qaar u abaaraan Ilaah lahaanshadiisa nafaha oo dha, ayaa kanina, sidoo kale uga hadlayaa! Waxaannu nahay ilaaliyayaal, ee ma nihin milkiilayaal. Dhiciddeenna inoo kaxaysa wax-lahaanshaha, aan qiimaha lahayn, ayaa mamnuuciddan keentay (cf. Sabuurrada 50:1-12).

### II. BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

- A. Kani waa haafka labaad ee Tobankii amar-ga kaasoo ka kooban labo erey oo qura ka kooban luuqadda Cibraaniyada.
- B. Ereyga fal lagu sameeyaha ah ee mamnuuciddu waa maqan yahay. Waxaa aalaaba taageera:
  - e. Macnaha labadii amar ee hore ee la xidhiidha dembiga dilka ah.
  - f. Xaadir ahaanshaha qoraallada isla siman ee lagu dabakhi karo, labadaba, si toos ah (Baxniintii 21:16) midda fog (Sharciiga Ku Noqoshadiisa 24:7). Sidoo kale ka eeg Bilowgii 37.
- C. Arrintu si kastaba ha ahaatee, habka gaabani waa mid sidoo kale wax difaaci kara
  - 1. Si waxyi ah ayaa naloogu kaydiyey ama naloogu xafiday
  - 2. Waxa uu balaadhinayaa xaka amarka
  - 3. Waxaa jira qoraal isla la siman oo ku jira macnaha guud ee tooska ah ee la xidhiidha tuugonimada—Baxniintii 22:1ff;
  - 4. Ciise waxa uu si waadax ah middan ugu soo xigtay in uu ku tilmaamo xatooyada (cf. Matayos 19:18).
- D. Sidoo kale xeerarkii sharciyadii hore xatooyadu way ku jirtay, laakiin ganaaxu aalaaba waxa uu ahaa dil, naafayn, ama in 30 jibbaar laga mag dhabo.
- E. Waxaa jira qoraallo isla siman oo si toos ah u qeexaya uma sharraxaya runtan:
  - 1. Laawiyaantii 19:1-18—“Waa inaad qoduus ahaataan, waayo, anigoo ah Rabbiga Ilaahiinna ahuba qoduus baan ahay”
    - a. Waa in nolosheenna ay ka soo iftiintaa dabeecadda qoyska aabbaheenna iyo Ilaaheenna (cf. aayadda 18).
    - b. Rumaysadkeennu waa in uu maalin kasta saamayn ku yeeshaa, labadaba ficillada fasaxan iyo kuwa aan fasaxnayn, labadaba waxaa lagu sheegayaa ujeeddo gaar ah (cf. aayadda. 17).
    - c. Naxariista kuwa la nacay ee baahan, aayadaha. 9-10, 13, waa mid u cad sida diidmada ah in aan dariskeenna goynno. Aayadda. 11.
  - 2. Caamoos 8:4-7---Ilaah si xun uladhaqanka waa neceb yahay!
  - 3. Miikaah 6:6-8---Ilaah ujeeddooyin gaar ah ayuu ka ficilladeenna dhammaantood. Sababta aynaan wax u xadayn ayaa ujeedku yahay!
  - 4. Baxniintii 22:1ff ---had iyo jeer run la wyesan yahay ee ku jirta dooddeenna casrigan ee dhacu waa magdhawga! Dembigu qiimuu had iyo goorba ku kacaa!

### III. DHAQAN GELINTA RUNTA

- A. Joy Davidman, C. S. Luwis xaaskiisa, ayaa waxa ay bug aad farxad u leh ku qortay Tobankii amar. Waxa ay tarjumaysaa amarkan “ Adigu iskuma dayi doontid inaad wax la’aan wax ku heshid.” Tani waxa ay si hubsasho leh u ballaadhinaysaa ujeeddada ka dambaysa hantida. Waxa ay sidoo kale sheegaysaa in “hantidu aysan ahayn ama xuquuq la garanyo, laakiin hor marsi ama sii amaahasho, aaminaad Ilaah ka timid .”
- B. Tuugonimo, si la mid ah sida dembiyada kale ee qalbiga dhacay, waxaa laga xaaltamayaa qalbi cusub, Efesoso 4:28. Waa wax cajiib ah sida nabeecadii hore ee “qaado” ay ugu baddalmayso dabeecadda cusub ee “wadaag!”
- C. Xushmada aan Ilaah u qabno waxaa laga arkayaa xushmada aan u haynno xubnaha ee axdiga leh!

Runtani waxa ay haraynaysaa waxa ay hadhaynaysaa Tobankii amar-ga.

D. Aadanaha casrigu waddooyin badan ayuu wax ku xadaa!

#### SU'AALO WADA TASHI

1. Sidee aadanaha casrigu xadidda u sameeyaan?
2. Sidee bay magdhabashadu ula xidhiidhaa tawbadkeenka?
3. Sidee bay aayaddani ula xidhiidhaa nidaamka hanta goosiga?

#### BAXNIINTII 20:17, RABITAAN

##### I. HORDHAC

- A. Waa wax macquul ah in la arko xidhiidhka u dhexeeya shanta amar ee ugu dambeeya sida soo socota:
1. Lambarka 6,7 iyo 8 waxa uu mamnuucayaa in aan xubinta axdiga leh ficillo dhagar ah.
  2. Lambarka 9 waxa uu mamnuucayaa in xubinta axdiga leh aan hadal lagu dhaawicin.
  3. Lambarka 10 waxa uu mamnuucayaa in xubinta axdiga leh aan lagu dhaawicin fikir.
- B. waa run in ficilka rabitaanku uu burburiyo qofka wax damcaya, ma aha shayga la doonayo, ama deriska. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waa macquul in amarkan uu filayo in fikirrada lagu hubsan doono ficillada.
- C. Kuwo badan waxa ay amarkan u arkaan arrin aad u weyn oo laga arkay xeerka sharcigii hore ee Israa'iil oo xeerkaa sharciga Bariga Dhow. Aragtidan cusubi waxa ay noqon doontaa mamnuucidda fikirka. Waarun in Israa'iil ay u aragtay in fakarka noloshu ay tahay asalkii camallada sharkaah (cf. Maahmaahyadii 23:7; Yacquub 1:4-15). Welise, aayadahani waxa ay u muuqdaan in ay la xidhiidhaan in fakarradu ay ficil ahaan u soo baxayaan. Qoraallo dhowr ah ayaa adeegsada ereyga "rabitaan" isagoo xidhiidh la leh natiijada ficilka (cf. Sharciga Ku Noqoshadiisa 7:25; Yashuua 7:21; Miikaah 2:2).
- D. Waa run in caddayntu ay ku dhex jirto kuwii lagu taxay kan ugu horreeya iyo kan ugu dambeeya, ee lagu arkayo runta muuqata ee amarka. Caabudaadda gaarka ah ee Ilaah ayaa ugu horraysa, laakiin garaadkeenna iyo ujeedooyinkeenna ku aaddan shayada adduunkan ayaa saamayn ku yeelanaya in aan Ilaah u go'doonno. Labadan caddaymood ee mataanaha ah waxaa sidoo kale lagu arki karayaa muxaadaradii Ciise ee buurta dusheeda, sida ku qoran, Matayos 6:33---"laakiin horta doondoona boqortooyadii Ilaah iyo xaqnimadiisa, oo waxaas oo dhan (cf. aayadaha. 19-32) waa laydinku dari doonaa."

##### II. BARASHADA EREYGA IYO WEEDHA

- A. Baxniintii 20:17 iyo Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:21, inkastoo ay aasaas ahaan isku si yihiin, dhawr kala duwanaasho oo muhiim ayey leeyihiin:
1. Naagta la qabo waxaa la socda ujeedka balaadhan ee "guriga" ama hantida ninka sida ku jirta Baxniintii 20 in kastoo iyada laga soo dhex saaray si gooni ah, sida ay u muuqato, qaybta ku Sharciga Ku Noqoshadiisa 5.
  2. Qoraalka ku jira Baxniintii 20 waxaa ku jira ereyga Cibraaniga ah ee "covet" oo macnihiisu yahay "rabitaan ah in la helo." Laakiin isla Sharciga Ku Noqoshadiisa 5, waxaa ku jira erey kale oo ah "desire" "dooq" oo sida "covet" oo kale ah. Marka laga hadlayo "rabitaan" waxa ay xidhiidh la leedahay in la helo shaygaas, laakiin "dooqu" waxa uu u ekaanayaa in uu diiradda saarayo aragtida.
  3. Sidoo kale Baxniintii 20, ee lagu qoray markii carruurta Israa'iil ay lama degaanka dhex wareegayeen, wax boos ah laguma sheegin marka eego taxa hantida halka Sharciga Ku Noqoshadiisa 5 uu dib u bilaabay isla amarrada bulsho la dejiyey Dhulkii ballabqaadka.
- B. Ereyga "rabitaan" waa mid aan shay tilmaamaya. Waxa uu tilmaami karaa dooq ahaan doonaysid sheeyo wanaagsan (cf. Sabuurrada 19:10; I Korintos 12:32).
- C. Rabitaanka aan caadiga ahayni waa xididka sababta u ah dhiciddii Shaydaanka, Aadan iyo Xaawo iyo anngoo dhan. Bawlos wuxuu ku celceliyey halgankiisii shaqsi ahaaneed ee ku aaddanaa rabitaanka ama damaca sida ku jirta Rooma 7:7-8. Damacu aasaas ahaan waa qanac la'aan iyo in aan daryeelka iyo shaqada Ilaah la aamminin.

D. Dhowr qoraal oo Axdiga Cusub ah ayaa waxa ay la xidhiidhaan damcidda:

1. Aadanaha dhibaataadiisa ayaa ah qanac la'aan iyo hunguri weynan (cf. Luukos 12:15; I Timoteyos 6:8-10).
2. Arrintan ku saabsan damaca waxa ay ku jirtay taxi uu Ciise ka sheegay dembiyada wasakhda ah (cf. Markos 7:17-23; I Korintos 5:10; Efesos 5:5; Kolosay 3:5).

### III. DHAQAN GELINTA RUNTA

A. Jwaabta hawada damaca iyo qanc la'aantu waa:

1. Jacayl—Rooma 13:8-10
2. Qanacsanaan---Cibraaniyada 13:5; Filiboy 4:11-13 iyo (wadaagga, Filiboy 4:14)

B. Amarku waxa uu yiraahdaa “jooji” Laakiin Masiixa oo qura ayaa na siiyey macne lagu joojiyo! Isaga awgii waxaa fikirka nolosha u yeeli karnaa xad iyo heer uu ku joogsado.

C. Ilaah waa og yahay qalbiyadeenna iyo maankeenna

1. Taariikhdiisii Koowaad 28:9
2. Maahmaahyadiisii 20:27
3. Sabuurrada 139:1,23
4. Yeremyaah 17:10
5. Rooma 8:27
6. Muuintii 2:23

D. Shayadu shar ma aha, laakiin marka ay mudnaan oo dhan yeeshaan ayey dembi noqdaan. Shayadu ma aha kuwa ugu dambeeya ama waaraya, dadka Ilaah araggiisa laga abuuray ayaa ah! Damacu waxa uu bulshada sharciga leh u keenaa waddooyin halis ah oo baabba' leh!

### SU'AALO WADA TASHI

1. Waa maxay damacu?
2. Sidee dadka casrigu wax u damcaan?
3. Fikirradeennu ma dembibaa?
4. Sababte ayey fikirradu ay aad muhiim ugu yihiin nolosha Masiixiga?
5. Sababtee ayey amarka ku jira Baxniintii 20:17 si ahaan ugu beddelan yahay kan ku jira Sharciga Ku Noqoshadiisa 5:21?

▣ **“sababtan aawadeed”** Tani waa tix raac ku saabsan toban kii amar. Habaysnaanta taxa badhala labaad ee tobankii amar waxa ay raacsan yihiin qoraallada Giriigga ee B, ee loogu yeedho Vaticanus. Waa ay ka duwan yihiin qoraalkii Cibraaniga ahaa ee Muuse ee qoraalka Baxniintii 20 iyo Sharciga Ku Noqoshadiisa 5. Badhka kale ee tobanka amar waxa ay la macaamilayaan xidhiidhka reer Israa'iil dhexdooda oo ku salaysan xidhiidhkooda ay YHWH la leeyihiin.

▣ **“oo haddii amar kale jirana”** Tani waa weedh shuruudeed heerka koowaad ah taasoo lagu qiyaasayo runta ka soo baxaysa aragtida qoraaga ama ujeedooyinkiisii uu wax u qoray. Waxaa jira amarro kale. Weedha waxaa loola jeedaa “haddii ay jiraan amarro kale oo tobanka amar dibadda ka ah.” Haddii si kale loo dhaho, tani waxa ay isku keenaysaa Sharcigii Muuse, ama “sharci” oo dhan guud ahaantii.

Waxaa jira kala duwanaansho u dhexeeya Qoraalladii Giriigga ee dhaqanka oo ah inta ay yihiin iyo sidii tax ahaan ay u kala horreeyeen. Kan Yuhuuddu waxa hal tiring ayuu leeyahay' Kaatooligga iyo Brotestanka iyaguna tiring kala duwan ayey kala haystaan. Kala duwanaanshahani ma saamayn macnaha qoraalka, oo ah runta ku jirta qoraallada badan eek u kala duwan.

▣ **“waxaa lagu soo koobay hadalkan”** Tani waa xigasho ka timid Laawiyiintii 19:18. Dhowr jeer ayaa injiilka dhexdiisa lagu soo xigtay (cf. Matayos 5:43; 19:19; 22:39; Markos 12:31 iyo Luukos 10:27). Ciise waxa uu tan ugu yeerayaa amarka xiga ee ugu weyn. Waxaa sidoo kale lagu soo xigtay Galatiya 5:14 iyo Yacquub 2:8. Haddii mid jecel yahay Ilaah, waxa uu jeclaan doonaa waxa Ilaah jecel yahay—kuwaasoo ah aadanaha uu Isagu araggiisa ka sameeyay.

▣ **“Waa inaad deriskaaga u jeclaataa sida naftaada.”** Rumaystayaashu waa in ay naf ahaantoodu isu jeclaadaan si la mid sida Ilaah u jecel yahay iyaga ka hor inta aysanb jeclaan oo aysan aqbalin kuwa kale. In qofku si gaar ah naftiisa u jeclaado ma aha wax shar ah. Ru nta aadka u weyn ee meeshan ku jirta waxaa si cal loogu sheegayaa---jeclaada kuwa kale (cf. aayadda 10). Kuwa ay taabatay Ilaah is bixintiisii jacaylka lahayd, sidoo kale ayey kuwa kale u jeclaanayaan. Tani waa midda U –ekaanta Masiixa salka u ah (xagga Ekaantii Ilaah ee la soo celiyey.) Maaddaama uu jacalyn noocan ahi inoo joogo ma jirto wax “sharci” looga baahan yahay.

**NASB (UPDATED) TEXT: 13:11-14**

**<sup>11</sup>Oo weliba waad garanaysaan wakhtiga inay haatan tahay saacaddii aad hurdada ka toosi lahaydeen, waayo, haatan ay badbaadintu inooga dhow dahay markii horoo aan rumaysannay. <sup>12</sup>Habeenkii hore buu u batay. maalintii waa soo dhowaatay, sidaas daraaddeed aan iska dhigno shuqullada gudcurka oo aan qaadanno hubka iftiinka. <sup>13</sup>Sida iyadoo maalin ah aynu si qumman u soconno, yaannaan ku socon rabsho iyo sakhraannimo, yaannaan ku socon wasmo iyo dhillannimo, yaannaan ku socon ilaaq iyo xaasidnimo. <sup>14</sup>laakiin Rabbi Ciise Masiix huwada, oo jidhka ha ka fikirina inaad damacyadiisa samaysaan.”**

**13:11**

**NASB** “sameeya middan”  
**NJKV** “oo sameeya middan”  
**NRSV** “Tan waxaa idiin wehliya”  
**TEV** “Waa in aad middan samaysaan”  
**NJB** “waxaa idiin wehliya”

Kani waa dariiqa xidhiidhinaya waxa soo socda (aayadaha 11-14) ee ka hor maraysa (aayadaha 9-10). Noqo kan ereyga sameeya ama dhahaya ereyga ee ha noqon kan dhegaysanaya! Jacaylka waa in ficil laga dhigaa.

▣ **“garanaysaan wakhtiga”** Kani waa fal tegay oo maldahan. Ereygan waqtiga (*kairos*) waxaa tense ahaan loogu isiticmaalay xiisan waqtiyeed oo gaar ah, ma aha waqti si toos ah isu soo dabo socday (*chronos*). Rumaystayaashu waa in ay ku noolaadaan nuurka Masiixa waqti kasta oo ay joogaan.

▣ **“inay haatan tahay saacaddii”** Tusaalahan “saacadda” (ee sida badan lagu dhex isticmaalay injiilka Yooxanaa) Tani waxa ay la xidhiidhaa waqti gaar ah oo ay sheegaysaa ( la mid ah *kairos*) oo tilmaamaya qorshaha Ilaah ee madax furashada (cf. 3:26; I Korintos 7:29; 10:11; Yacquub 5:8; I Butros 4:7; II Butros 3:9-13; I Yooxanaa 2:18; Muujintii 1:3; 22:10). Waxaa loo isticmaalay markii Ciise isku tallaabta lagu qodbay iyo soo noqoshadiisa labadaba.

▣ **“hurdada”** Ereygan waxaa halkan loogu adeegsadan tilmaan ahaan raaxada xagga niyadda iyo ruuxa (cf. Efesos 5:8-14; I Tesaloniika 5:6). Ereyadu waxa ay macne ku leeyihiin macnaha u habboon. Feejignaan u yeelo halak booska cayimani uu yahay. Ereyada oo dhammi waxa ay yelan karaan macnooyin dhawr. (semantical feild).

▣ **“haatan bay badbaadintu inooga dhow dahay”** Badbaadadu waa go’aanka bilowga iyo hannaanka. Ka Eeg Mawduuc Gaar ah 10:14. Badbaadadu kaamil ma aha illaa rumaystayaashu ay qaataan jidhkooda cusub (cf. I Yooxanaa 3:2; I Tesaloniika 4:13-18; ibraaniyada 9:28; I Butros 1:5). Fiqi ahaan tan waxaa loogu yeeraa “Ammaanmid” (Rooma 8:30). Waa rajaca ah Masiixiyiinta oo dhammi ay ka rajaunayaan in Rabbigu soo galo noloshooda (cf. Luukos 21:28). Bawlos maahan mid wax reebaya (cf. I Tesaloniika 4:15).

▣ **“markii horoo aan rumaysannay”** Masiixiyaddu waxa ay ku bilaabantaa go’aan (xaq ka dhigid iyo qudduus noqosho degdeg ah), laakiin waa in natiijadoodu noqotaa qaab nololeed Ilaah ku farxo (qudduus noqosho horumar leh) oo ku soo af jaranta u ekaanshaha Masiixa (ammaanmid). Qofku waa in uu aqbalaa hadiyadda Ilaah u soo mariyey Masiixa (cf. Yooxanaa 1:12; 3:16; Roo ma 10:9-13). Goankan bilowga ahu ma aha dhammaadkii, laakiin bilowgii weeyaan!

**13:12 “Habeenkii hore buu u batay”** Tani waxa ay tilmaamaysaa faca shar ah ee jooga ee durba la burburinayo ee dib booskoodii loo melaaynayo (cf. I Korintos 7:29-31; 10:11; Yacquub 5:8, 14; I Yooxanaa 4:7; II Yooxanaa 2:17-18; Muujintii 1:3; 22:10). Ka Eeg Mawduuc Gaar ah 12:2.

▣ **“maalintii waa soo dhowaatay”** Kani waa fal taagan oo tegay oo wax muujinaya. Kuwanu waa maalmaha ugu dambaystooda (cf. Filiboy 4:5; Yacquub 5:9). Waxa annu dhammaadka maalmaha ku soo jirnay illaa markii uu Ciise Masiix samada u kacay. Waxa ayna ku soo af jarmi doonaan soo noqoshadiisa amaanta leh. Rumaystayaasha oo dhan laga soo bilaabo qarnigii koowaad waxa ay la yaabban yihiin dib u dhigga dheeraanta badan ee soo laabhadhasa Masiixa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, faca cusubi waxa ay la waabbariisteen Masiixa.

▣ **“aan iska dhigno. .oo aan qaadanno”** kuwanu waa AORIST fal wax saleeye dhexe, oo tusaale ka bixinaya wax dhii kara. Tilmaantu waxaa weeye “idinka qudhiinnu dhan iska dhiga. .mar qura dhammaantiis is go’aan kama dambays ah u qaata.” Ilaah tiisu waa meel, laakiin aadanaha ayaa waxaa laga doonayaa in ay u firfircoonaadaan xaq ka dhigidda oo ah (Tawbadkeenka iyo rumaysadka) iyo qudduus noqoshada (nolol Ilaah raalli ka yahay). Tilmaantan huwashada ama qaadashadu waa mid qoraallada Bawlos si guud ahaaneed ugu jirta. Rumaystayaashu waa in ay iska qaadaan huwashada dharka hurdada oo ay qaataan dharka dagaalka (cf. Efesos 4:22-25; Kolosay 3:10,12,14). Waxaannu nahay ciidamada Masiixiyiinta ah ee isu diyaarinaya dagaalka ruuxiyeed ee maalin laha ah.

▣ **“hubka iftiinka”** Tan waxaa tilmaan ahaan laga soo xigtay Ishacyaah 59:17. Rumaystayaashu waa in ay qaataan hubka xaqnimada (II Korintos 6:7; 10:4; Efesos 4:11,13; I Tesaloniika 5:8). Rumaystayaashu waa ay heli karaan hubka Ilaah laakiin waxaa waajib ku ah (1) in ay qoonsadaan; (2) in ay aqoonsadaan adeegga Ilaah; iyo (3) in ay si ku talo gal ah oo shaqsi ahaaneed ugu hir geliyaan fikirradooda iyo nololshaada. Waxaa jira jira dagaal ruuxi ah o maalin kasta taagan!

**13:13 “aynu si qumman u soconno”** kuwanu waa AORIST fal wax saleeye tilmaan ah, tilmaantuna wax kale ma ahee waa “ku socoshada” tani waxa ay hayd sarbeeb Cibraani ah oo ku saabsan qaab nololeedka. Bawlos waxa uu midan isticmaalay in ka badan 33 goor.

Taxa dembiga ku jira aayaddan waa saddex qayb oo labo erey oo qura ku jirta. Ereyadu waxa ay leeyihiin macnayaal isku mid ah. Waxaa macquul ah in loola jeedo in ay ereyo siman xagga tilmaanta yihiin. Ka Eeg Mawduuc Gaar ah: Mid labaad oo tilmaan ah, ee 1:28-32.

Ereyadani waxa ay la xidhiidhaan xiisadda u dhexaysa rumaystayaasha Yuhuudda ah iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee kaniisadda Rooma. Rumaystayaasha cusub ee aan Yuhuudda ahayn (1) ayaa waxa ay ku sii socdeen ficilladoodii hore ee caabudaadda aan Ilaah raalliga ka ahayn (2) ama waxa ay samaynaayeen ficillo isla weyni ah soo laabashada hogaamiyeyaasha Yuhuudda ah ee markii hore tegay qabatinkii Nero awgii kaa ahaa kii ma mamnuucay Yuhuudda ka mamnuucay rooma.

▣ **“yaannaan ku socon rabsho iyo sakhraannimo”** Tani waxa ay hayd damaca jidhka ee galmoodka oo la xidhiidhay tilmaamaha diin ahaaneed ee kuwaan diinta lahayn saqraanimadooda. Taxa dembiyada jidh ahaaneed ee ku jira Galatiya 5:21, ereyadan waxaa sidoo kale loo taxay si dhanba dhanka kale ah.

▣ **“yaannaan ku socon wasmo iyo dhillannimo”** waxaad mooddaa in qaybtani ay daboolayso aybtii hore. Ereyga labaad waxaa si ballaadhan loogu isticmaalay Axdiga Cusub dhexdiisa (cf. Markos 7:22; II Korintos 12:21; Galatiya 5:19; Efesos 4:19; I Butros 4:3; II Butros 2:7). Haddii qaybta koowaad ay diiraddaa saarto mugdiga, qaybtani waxa ay diiradda saarsaa hammada galmoodka, xitaa guuritaanka aan xadka lahayn ee dhillonimada.

▣ **“yaannaan ku socon ilaaq iyo xaasidnimo”** ereygani waxa uu ka hadlayaa ilaaq dhex marta dadka (cf. 5:20). Tani wax a ay la xidhiidhaa dabecadda aan habboonayn eek u jira labada qaybood ee hore. Haddii kuwani ay lagu tilaamayo rumaystayaasha (cf. I korintos 3:3; Kolosay 3:8), waxaa kaq soo baxaya ficillada kuwa aan diinta haysan oo ay waaajib tahay in laga dhex joojiyo nololsha rumaystayaasha. Arrintu si kastaba ha ahaatee, macne ahaan waxa ay aayaddani kala qaybinaysaa Masiixiyiinta, sida dhacdadani ku jirta, waxa ay ahaan lahayd digniin.



**13:14 “Rabbi Ciise Masiix huwada”** Tilmaantani waxa ay la xidhiidhaa huwashada dharka boqortooyada Ciise Msiix ee saaran garbaha rumaystaasha (booska qudduusnaanta) culimada qaar waxa ay miidan u arkaan in ay middani tilmaan sheegaysa huwashada babsiiska ama maqurinta. Tilmaantan xirashada waxaa markii hore lagu soo carrabbaabay aayadda. 12. Waa waddo rumaystayaasha lagu tusayo booska cusub ee ay Masiixa ku leeyihiin. Waxa ay sidoo kale xoojinaysaa in rumaystayaasha laga doonayo in ay hir gelin ku hir geliyaan qaab nololeedkooda (qudduus noqosho horumar leh) booska cusub ee ay Masiixa ku leeyihiin awgii. (cf. Efesos 4:22,24; Kolosay 3:8). Sida jirta Galatiya 3:27 waxaa runtan loogu muujiyey in ay tahay wax xaqiiq ahaan dhacaya, wax caddayanaya; halkan waxaa loogu muujiyey sidii is barbar dhig ama amar.

Arrintan u dhexaysa cadayn iyo is barbardhig waa arrinta u dhexaysa booska aan Masiixa ku leenahay iyo u hardammiddasidii aan booskaas ku heli lahayn. Waxaannu nahay “kuwo subkan” (kuwo qudduus ah) isla waqtiga badbaadada, waxaa naloogu digayaa in aan noqonno “qudduus.” Tani waa arrinta ugu muhiimsan ee baybal ahaaneed ee naloogu yeedhay in aan noqonno sidii Ciise Masiix oo kale!

▣ **“ha ka fikirina”** Kani waa fal taagan oo heer dhexe ah oo qaybta diidmadu ay la socoto. Habkan doodmadu waxa uu aalaaba u macnaysmayaa in la joojiyo ficil horay loo samayn jira. Waxa uu tilmaamaya in Masiixiyiintii Rooma qaarkood ay ku noolaayeen nolol jidh ahaaneed oo aan caadi ahayn. Waxa ay u ekaan kartaa in ay ku dhaqmayeen qaab aan ku toosnayn oo ah ku dhaqanka ficillada kuwa aan diinta lahayn.

▣ waa ay adag tahay in la sharraxo wax baridyada ku saabsan dareenka kacsiga ee Masiixiyadda qoraayaashu waxa ay tilmaamayaan xaaladaha iyagoo ku sheegaya erey cad iyo erey madoow intaba. Dareenka jidhku waa erey ahaan is burrinaya. Laakiin runtu waxa ay tahay in runteenu ay tahay wax horay naloogu sameeyay laakiin aan lahayn weli. Bawlos wuxuu arrinkaaadanaha u qaybiyey saeed qaybood oo waaweyn. (I Korintos 2:14-3:1):

1. Aadanaha dabiiciga ah (aadanaha lumay), 2:14
2. Aadanaha Ruuxigaah (aadanaha la badbaadiyey), 3:1
3. Aadanaha jidhka (Masiixiyiinta jidha ama hammada), 3:1

▣ **“inaad damacyadiisa samaysaan”** Bawlos waxa uu aad u yiqiin sii socoshada qatarta dabecaddeenna aadanenimo ee dhacsay (cf. Rooma 7; Efesos 2:3), laakiin Ciise Masiix ayaa na sinaya awoodda aan dooranaynno nolosha Ilaah raalliga ka yahay (cf. Rooma 6). Waa halgan socda (cf. 8:5-7; I Yooxanaa 3:6-9).

## SU’AALO FALAQAYN AH

Kani waa hage tafsiir, oo ah in aad adigu masuul ka tahay tarjumaadda iyo sida aad u tafsiiranayso Kitaabka Qudduuska ah. Midkeena kasta waa uu ku socdaa iftiinka aannu haysanno. Adiga, Kitaabka, iyo Ruuxa Qudduuska ah ayaa ah muhiimadda ugu weyn ee tafsiirka. Waa in aadan middan u gaysan fasiraa.

Su’aalahan falaqaynta ah waxaa lagu siiyey in ay kaa caawin in aad si qoto dheer uga fakarto arrinka ku jira qaybtan kitaabka. Tan waxaa loola jeedaa in aan la isku qasin, mana aha in aadan wax qaldayn.

1. Maxay hadalladii Bawlos eek u saabsanaa dawladdu ay sidaa ugu xagjidsanaayeen Masiixiyiintii Hore?
2. Miyey tahay Masiixiyiintu in ay u hoggaansamaan nooc kasta oo dawlad ah?
3. Miyey tahay in ay Masiixiyiintu u hoggaansamaan sharci kasta oo dawladdu uga baahan tahay?
4. Miyey aayadda koowaad in baraysaa xuquuqda rabbaaniga ah ee boqorrada?
5. Bawlos ma wuxuu furayaa wax baris diimeed oo cusub mise hadalkii Ciise ayuubnuu daba socdaa ee ku qordan Matayos 22:21?
6. Addeecis la’aanta shaabiga miyaa loogu cudur daaray Masiixiyiinta (cf. Falimaha Rasuullada 5:25-32)?
7. Sidee bay aayadda 4 ula xidhiidhaa qodobka ciqaabta dilka ah?
8. Damiirka Masiixiyiintubadiyaaba ma mid qummaanbaa (cf. aayadda 5)?
9. Iyadoo la eegayo aayadda 8, Masiixiyiintu ma inaanay yeelan kaadhahka daynta?
10. Aayadda siddeedaad ma waxay ka hadashaa jacaaylka aan u qabno Masiixiyiinta mise dadka oo dhan?
11. Muxuu Bawlos Decalog si uu Masiixiyiinta ugu dhiirri geliyo Axdiga Cusub?
12. Muxuuu Bawlos u taxay dembiyada sidan u xun ee la xidhiidha rumaystayaasha?
13. Sidee bay mid ula xidhiidhaa “Ciise Masiix?”

# ROOMA 14

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Walaalkaa ha xukumin	Qaynuunka xorriyadda	Jacaylku wuxuu tix geliyaa dareenka kuwa kale	Kuwa kale ha xukumina	Isu gargaaritaanka
14:1-12	14:1-13	14:1-4 14:5-6 14:7-9 14:10-12	14:1-4 14:5-12	14:1-12
Walaalkaa ha u dhigin turaanturro	Qaynuunka jacaylka		Kuwa kale ha turaanturrayn	
14:13-23	14:14-23	14:13-23	14:13-18 14:19-23	14:13-15 14:16-21 (14:22-15:6) 14:22-23

## AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

### IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-12

- A. Cutubkani wuxuu isku dayayaa inuu isu dheelli tir ku sameeyo xorriyadda Masiixiyadda iyo masuuliyadda. Fahanka arrintanina waa mid kasii muuqanaya 15:13.

- B. Dhibaadata cutubkani uu ka hadlayo ayaa waxa suurta gala inay tahay, dhibkii dhex yaallay Yuhuudda rumaysadka leh iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee iyaganu rumaysadka leh ee kaniisaddii Rooma. Intii aanay noqonin Masiixiyiinta, dadka Yuhuudda ahi waxay ahaayeen sharci yaqaano, halka kuwan kalena ka ahaayeen kuwo lunsanaa. Laakiinse xasuunow cutubkani waxa uu ka hadlayaa kuwa raacsan Masiixa. Cutubkani laakiin kama hadlayo rumaystayaasha xagga djidhka (1 Korintos 3:1). Ujeeddada ugu muhiimsan waxa lagu tilmaamay laba kooxoodba, maxaa yeelay waxa jirtay in khilaafka labada dhinac waynaa.
- C. Rumaystayaashu waa inay iska ilaaliyaan inay samaystaan fiqi amaba waxyaalo iyaga u gooni ah oo ay kaga sarrayn karan rumaystayaasha kale (2 Korintos 10:12). Rumaystayaasha oo dhammi waa inay ku socdaan iftiinka Ilaah siiyay iyaga, laakiin waa inay fahmaan fiqigooda oo marwalba aan saxsanaan karin, maxaa yeelay iyaga ilaa hadda waxa saamayn ku leh denbiga. Waa in aan is dhiirri gelino, oo midkeenba kan kale baro erayga Ilaah iyadoo taasna jacayl ku jiro. Markasta oo qofku wax ogaado wuxuu ogaadaa inaanu waxba aqoonin ( 1 Korintos 13:12)!
- D. Fikirka qofku uu Ilaah ka haysto ayaa ah furaha runta ah ee uu ku qiimayn karo rumaystayaasha kale iyo waxyaalaha ays samaynayaan. Masiixiyiintu waxay hor istaagi doonaan Masiixa oo iyaga ku kala xukumi doonaa sidii midkoodba kan kale ula dhaqmi jiray ( aayadaha 19,12 iyo 2 Korintos 5:10).
- E. Martin Luther ayaa waxa uu yidhi, “Masiixigu waxa weeyi mid xorriyad oo dhan haysta; Masiixugu waa kan uu saaran yahay waajibka u adeegitaanka dhammaan.” Sidoo kalena xaqiiqada Baybalka ayaa ah middan.
- F. Cutubkan adaygga badan laakiinse muhiimka ahi waxa uu yahay mid xambaarsan fahanka guud ee kitaabka Rooma gebi ahaantiisa 14:1-15:13 iyo sidoo kale 1 Korintos 8-10 iyo Kolosay 2:8-23.
- G. Si kastaba ha ahaatee, waxa in la sheego loo baahan yahay badinta rumaystayaasha wanaagasan inaanay ahayn mid xun. Rumayste kastaa waxa uu leeyahay meelo uu ka xooggan yahay iyo meelo uu ka taag-daran yahay. Laakiinse mid waliba waa inuu ku socdo iftiinka uu haysto ee la siiyay, isagoo hadiyo goorba ahaanaya mid u furan Ruuxa iyo Kitaabka Quduuska ah oo uu ka helayo iftiin badan. Wakhtigan wax laga arkayo muraayadda aan caddaanka ahayn (1 Korintos 13:8-13), waa in lagu socdo jacayl (aayadda 15), iyo nabad (aayadaha 17,19) iyadoo wax badan la baranayo.
- H. Erayada “xooggan” iyo “taag-daran” ee Bawlos halkan kaga hadlayaa waxay tilmaamayaan innaga. Laakiin tani maaha midda Bawlos ugala jeeday, balse labada kooxoodba waxay ahaayeen rumaystayaal. Waxa markaas la innooga baahan yahay intaynaan Masiixiyiinta kale ka sarraysiin nafeheenna! Waa in midkeenba ka kale ku aqbalo Masiixa dartiis.
- I. Dooddan ayaa haddaba gebi ahaanba waxa kor mar loogu samayn karaa sidan:
1. Midiba midka kale ha aqbalo, maxaa yeelay innagaba Ilaah wuxuu innagu aqbalay Masiixa (14:1,3; 15:7);
  2. Midkiinna kan kale yaanu xukumin waayo Masiixa ayaa ah Sayidkeenna iyo Xaakinkeenna keliya (14:3-12);
  3. Jacaylku wuxuu aad uuga muhiimsan yahay xorriyadda shakhsi ahaaneed (14:13-23);
  4. Raac Masiixa oo xuquuqdaada uga tanaasul kuwa kale waxbarashada iyo wanaagga (15:1-13).

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 14:1-4

<sup>1</sup>Kii rumaysadka ku itaal yar soo dhoweeya, mana aha inaad ra'ayiyadiisa la murantaan. <sup>2</sup>Mid baa rumaysan inuu wax walba cuno, kii itaal yarse wuxuu cunaa khudaarta. <sup>3</sup>Kii cunaa yuusan quudhsanin kii aan cunin, kii aan cuninna yuusan xukumin kii cuna, waayo, Ilaah baa aqbalay isaga. <sup>4</sup>Yaad tahay kaaga xukuma midiidinka mid kaletow? Waayo. sayidkiisuu u taagan yahay ama u dhacaa. Waana la taagi doonaa. waayo, Rabbigu waa awoodaa inuu taago.

14:1

NASB

“soo dhoweeya”

**NKJV** “Aqbala”  
**NRSV, TEV** “soo dhoweeya”  
**NJB** “soo dhowayn siiya”

Waa amar soconaya oo ku saabsan mawduucan soo dhowaynta. Waxa haddaba lagu dabaqayaa waxa weeyi Masiixiyiinta xooggan (15:1). Waxaanay sheegaysaa labadii kooxood ee kaniisaddii Rooma. Waxa kaloo laga yaabaa inay la xidhiidho (1) dareenka dhexyaalla Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee labadooduba rumaysadka leh (15:7-21) amaba (2) kala soocitaanka shakhsiyaadka kala duwan. Haddaba, gebi ahaanba aayadahani waxay ka hadlayaan runta, daacadnimada Masiixiyiinta; waayo qaar way xooggan yihiin, qaarna way itaal-daran yihiin xagga rumaysadkooda marka la eego.



**NASB, NKJV** “Kii rumaysadka ku itaal yar”  
**NRSV, TEV** “kuwa rumaysadka ku itaal yar”  
**JB** “haddii qof rumaysadkiisu aanu ahayn mid xooggan”

Erayadani waxay tilmaamayaan kan la horraaysiinayo oo macno ahaan ka tarjumaysa “kan rumaysadka yar.” Marka la eego falka wakhti xaadirka ahna, waxa ay tahay mid lagu qiimaynayo qaab nololeedka. Dareenka walaalaha Masiixiyiinta ah ee cutubkan dhexdiisa lagu sheegay ayaa ah saddex nooc (1) xagga cuntada (14:2,6,21); (2) kala duwanaanta maalmaha (14:5-6); iyo (3) xagga cabitaanka (14:17,21). Shakhsiga noocan oo kale ah ayaa waxa lagu sheegay Rooma 15:1 iyo 1 Korintos 8:9-13; 9:22. Haddaba, ka digtoonow in naf ahaantaada aad markaba iska dhigto Masiixi xooggan amaba taag-daran. Waxa hubaala rumaystayaashu in dhinacna ay ka xooggan yihiin dhinac kalena ka taag-daran yihiin.

Aragtida Bawlos ee ku waajahan arrintani, waxay tahay mid ka gedisan Galatiya 4:9-10 iyo Kolosay 2:16-23. Aayadahani waxay ka hadlayaan aragtiyaha iyo waxbarista macallimiinta beenta ah.

#### **MAWDUUC GAAR AH: ITAAL YARAANTA**

Farqiga u dhexeeyaa wuxuu yahay. Macallimiinta beenta ahi waa kuwo faan badan oo isla wayn kuna qanacsan waxay sheegayaan, laakiin Bawlos waxa uu garanayaa qiimaynta “itaal yaraanta”(astheneo). U fiirso sida ereyadan loogu dhex adeegsaday 1 Korintos iyo 2 Korintos.

<b><u>Faan</u></b>	<b><u>Itaal darri</u></b>
1 Korintos 1:29,31	1 Korintos 1:25,27
3:21	2:23
4:7	4:10
5:6	8:7,9,10,11,12
9:15,16	9:22
2 Korintos	11:30
5:13 (labo jeer)	12:22
7:4,14 (labo jeer)	15:43
8:24	2 Korintos 10:10
9:2,3	11:21,29,30
10:8,13,15,16,17	12:5,9,10 (labo jeer)
11:12,16,17,18,30	13:3,4 (labo jeer), 9
12:1,5,6,9	

Bawlos erayga itaal yaraan wuxuu u adeegsanayaa siyaabo kala duwan:

1. Itaal-darrada Ilaah 1 Korintos 1:25
2. Itaal-yaraanta dunida, 1 Korintos 1:27
3. Itaal yaraanta Bawlos iyo cabsida, 1 Korintos 2:3; 9:22; 2 Korintos 11:29,30; 12:5
4. Bawlos iyo kooxdiiisa adeegga, 1 Korintos 4:10; 2 Korintos 11:21
5. Rumayste itaal yar (Rooma 14:1-15:13), 1 Korintos 8:7,9,10,11,12; 9:22
6. Bukaanka jidh ahaaneed, 1 Korintos 11:30
7. Qaybo ka mida jidhka aadanaha, 1 Korintos 12:22
8. Jidhka caadiga ah, 1 Korintos 15:43
9. Bawlos joogitaankiisa jidh aheen 2 Korintos 10:10

10. Itaal yaraanta Bawlos waxa la socota xooganaanta Ilaah, 2 Korintos 12:9,10; 13:4,9  
 11. Masiixu fariinta uusoo mariyay Bawlos 2 Korintos 13:3  
 12. Masiixa jidhkiisa, 2 Korintos 13:4.



**NASB** “mana aha inaad ra’ayiyadiisa la murantaan.”  
**NKJV** “mana aha inaad kula marantaan waxyaalaha muranka ah”  
**NRSV** “laakiin maaha inaad kula murantaan ra’ayiyadiisa”  
**TEV** “ha kula murmina waxyaalaha ra’yigooda shakhsi ahaaneed ah”  
**JB** “idinkoon bilaabin muran”

Rumaystayaasha waa inay si dhammays tiran u aqbalaan rumaystayaasha kale ee khilaafku dhexyaallo iyagoon isku dayaynin inay iyaga beddelaan. Waxay tani u baahan tahay xorriyadda dareenka oo ah waxyaalaha aasaaska u ah wada jirka. Rumaystayaasha dhammaantood waa inay wakhti siiyaan Ruuxa oo koraan qaan gaadhna noqdaan, laakiin xitaa haddii qaan gaadh ay noqdaan weligood wax iskuma waafaqayaan.

**14:2** amateedka halkan lagu sheegay waxa loogala jeedaa diimaha ujeedooyinkooda, laakiin maaha caafimaadka wax khuseeya. Dhibaatan cuntaduna waxay kasoo alkunmi kartaa labo waxyaalood oo suurto gal ah (1) sharciyadii cuntooyinka u yaallay ee Yuhuudda (Laawiyiintii 11) amaba (2) hilibka ay qaleen dad sanamyada caabuda (1 Korintos 8-10). Ciise waxa uu haddaba si caddaana u sheegay in qofka aanay nijaas ka dhigin cuntadadu (Matayos 15:10-20; Markos 7:14-23). Waxa xaqiiqadan tusaaleeyay aragtii Burtos ee khusaysay Korneeliyos sida aan ka arki karno Falimaha Rasuullada 10.

**14:3** “Kii cunaa yuusan quudhsanin kii aan cunin,” “inaan la quudhsanin iyadoo nacaybna la socdo” waa falka jooga ee *ezoutheñō* taasi oo macneheedu yahay jooji falka sidaasa ee horeba loo isticmaalayay. “necbasysiga ama karaahiyaysigu” waxa weeyi midaan wanaagsanayn (14:10; Luukos 18:9; 1 Korintos 6:4; 16:11; 2 Korintos 10:10; Galatiya 4:14; 1 Tesaloniika 5:20). Haddaba, rumaystayaashu waa inay iska ilaaliyaan isla saxsanaanta, oo kan rumaysadkiisu xoogga leeyahay yaanu xukumin, kan rumaysadkiisu taagta daran yahay.

▣ “**xukumin**” waa fal jooga oo shaqaynaya isla markaasna diidmo ku jirto, waxaana had iyo goor macnihiisu yahay jooji xukunkaas soconaya. Kan rumaysadkiisu taagta daran yahay, waa inuu joojiyo xukumista iyo falalka uu ku eedaynayo walaalka/walaasha isaga kasoo hor jeeda.

▣ “**Ilaah baa aqbalay isaga**” marka aan eegno aayadda 1 eraygan waxa lagu tarjumay “soo dhowayn.” Waxa haddaba asaasiga u ah aqbalitaanka rumaystayaashu, waa iyadoo Ilaah iyaga ku aqbalay Masiixa (15:7). Aayadda 3 ayaa iyana si toosa waxay uga hadlaysaa dareenka loo muujinayo rumaystaha ka itaalka daran xagga rumaysadka.

**14:4** “**Yaad tahay**” waxay u noqonaysaa awood xagga luqada Giriigta, sidoo kalena waxay u noqonaysaa walaalka/walaasha taagta daran.

▣ “**midiidinka**” waa erayga *oiketēs*, oo ka yimid *oikos*, macnihiisuna yahay “guri,” sidaasi darteedna, kani waa guri addoon amab midiiddin (Luukos 16:13; Falimaha Rasuullada 10:7; Rooma 14:4; 1 Butros 2:18). Waxa sidan oo kale loogu dhex adeegsaday Septuagint (Bilowgii 9:25; 27:37; 44:16,33; 50:18). Loogumana dhex adeegsanin addoonimo Axdiga Cusub dhexdiisa, taasi oo ah *doulos*. Sidoo kale waxa lagu tilmaami karaa eraygan shaqaalaha guriga amaba addoomaha.

Bawlos haddaba, halkan waxa uu uga socdaa in rumayste kastaa uu midiidin u yahay Masiixa. Isagu waa “Rabbigooda” isaga oo keliya ayaana ah kan ku xisaabinaya camalladooda iyo ujeedooyinkooda (2 Korintos 5:10).

▣ “**sayidkiisuu u taagan yahay ama u dhacaa**” halkan Bawlos waxa uu ku sheegayaa dareenka talax tagga ah, laakiinse ujeeddada waxay tahay oo tilmaamaysaa labadan kooxood. Rumaystayaashana, mid waliba waa inuu eego saxarka ku jira ishiisa ee aanu eegin kan isha walaalkiis ku jira (Matayos 7:1-15).

▣ **“Waana la taagi doonaa. waayo, Rabbigu waa awoodaa inuu taago.”** tani waay ahayd ballan qaad cajiib leh (5:1-2; Yuudas 24-25). Waxa kaloo ay koobsanaysaa iskaashiga Masiixi kasta (1 Korintos 15:1-2). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Taagni ee 5:2.

Waxa jira qoraallo Giriiga oo ku kala duwan halkan. NKJV, oo ay la socdaan qoraallada D, F, G, 048 iyo 0150, iyo sidoo kale Vulgate, waxay odhanayaan “Ilaah” (*Theos*), si kastaba ahaatee, MSS p<sup>46</sup>, x, A, B, C, P, waxay odhanayaan “Rabbi” (*Kurios*). UBS markaa wuxuu qiimaynayaa (A).

#### **AAAYADAHA 14:5-9**

<sup>5</sup>Nin bay la tahay in maalinu maalinta kale ka fiican tahay, mid kalena waxay la tahay in maalmaha oo dhammu isku mid yihiin. Mid kastaaba maankiisa aad ha ugu hubsado. <sup>6</sup>Kii maalinta ka fikiraa, Rabbigu uga fikiraa, kii wax cunaa, Rabbigu u cunaa, waayo. Ilaah buu ku mahad naqaa; kii aan wax cuninuna. Rabbiga ayuusan u cunin. oo Ilaah buu ku mahad naqaa. <sup>7</sup>Midkeenna naftiisa uma noola, midkeenna naftiisa uma dhinto. <sup>8</sup>Waayo. haddii aynu nool nahay, Rabbigaynu u nool nahay: oo haddii aynu dhimannona, Rabbigaynu u dhimannaa sidaas daraaddeed haddii aynu nool nahay iyo haddii aynu dhimannoba, Rabbigaa ina leh. <sup>9</sup>Waayo, sababtaasaa Masiixu u dhintay. una soo noolaaday inuu Rabbi u noqdo kuwii dhintay iyo kuwa noolba.

**14:5 “Nin bay la tahay in maalinu maalinta kale ka fiican tahay”** Ilaa hadda dadka qaar ayaa daneeya maalmaha diin ahaan (Galatiya 4:10; Kolosay 2:16-17). Haddaba maalmaha oo dhan Ilaahbaa iska leh waanay siman yihiin. Ma jiraan maalmo gaara sida “mid xun” oo ay kasoo horjeedo “mid wanaagsan.” Dhammaantoodna way wada wanaagsan yihiin.

▣ **“Mid kastaaba maankiisa aad ha ugu hubsado.”** Tani waa furaha nabadda ee halkan. Rumaystayaasha oo qof waliba hubsado naftiisu waxa ay tahay, ayaa muhiim u ah camalkooda iyo waxyaalaha ay qabanayaan (aayadda 23), laakiin maaha inay kuwo kaloo dhan isku dayaan inay hubiyaan.

**14:6 “Rabbiguu”** eraygan saddex jeer ayaa lagu dhex adeegsaday aayadda 6 iyo labo jeer aayadda 8. Dhammaanba doorashada qaab nololeedka rumaystayaasha ee wanaagsan, waxa loo baahan yahay in loo sameeyo “Rabbiga aawadiis” (Efesos 6:7 iyo Kolosay 3:23), oo maaha in loo sameeyo dano shakhsi ahaaneed oo gaar ah.

**14:7 “Midkeenna naftiisa uma noola”** Ma jiro Masiixi ah oo kelidiis meel taagani. Noloshu Masiixinimada ugu horrayn waxa ay u sugnaatay Masiixa (aayadda 8). Masiixiyiinta camalkooda ayaa saamaynaya kuwa kale. Haddaba, waxa loo baahan yahay inay xad u yeelaan xorriyaddooda shakhsi ahaaneed iyagoo ku daraya jacayl (1 Korintos 10:24,27-33). Waa inay kuwa kalena u suurto geliyaan sidii ay ugu kori lahaayeen xorriyad shakhsi ahaaneed.

**14:8 “haddii...haddii”** waxa labo jeer oo lagu soo celiyay, eray shuruudeedka macnihiisu yahay falka suurto galka ah ee la qaban doono mustaqbalka. Rumaystayaashu waxay Rabbigu ugu adeegaan si kasta oo suurto gal ah (Efesos 6:7; Kolosay 3:23).

**14:9 “Rabbi u noqdo kuwii dhintay iyo kuwa noolba.”** Waxa lagu tilmaami karaa Ciise dhimashadiisa iyo sarakistiisa. Isagoo iminkana ah kan labadaba Sayidka u ah.

Halkan waxa ka imanaysa sababta ay waajibka u tahay Masiixiyiintu inaanay nafhooda u noolaanin, laakiinse u noolaadaan Masiixiyiinta kale daraaddood. Iyagu shakhsi naftooda malaha, waayo, qiimo ayaa lagaga iibsaday. Iyagu waa addoommada Masiixa, kaasoo u dhintay denbiyadooda si aanay mardanbe denbiga addoomo ugu ahaanin, laakiinse Ilaah ugu noqdaan addoomo (Rooma 6). Masiixiyiintu waa inay raacaan noloshu Ciise ee jacaylka adeegitaanka leh aawadeed uu ugu dhintay dembigooda (2 Korintos 5:14-15; Galatiya 2:20; 1 Yooxanaa 3:16).

#### **AAAYADAHA 14:10-12**

<sup>10</sup>digu maxaad walaalkaa u xukuntaa? amase adigu maxaad walaalkaa u quudhsataa? Waayo. kulligeen waxaynu hor istaagi doonnaa kursiga xukumaadda Ilaah. <sup>11</sup>Waayo. waxaa qoran, Anigu waa noolahay. ayaa Rabbigu leeyahay. oo jilib waluba anuu ii sujuudi doonaa, Carrab walubana Ilaah buu qiri doonaa. <sup>12</sup>Sidaasaa midkeen kastaba Ilaah ula xisaabtami doonaa.

#### 14:10 “Adigu” waxa laga horraysiiyay muhiimadda

▣ Laba su’aalood ee aayadaha 10 waxay diiradda saarayaan aayadaha 1-12. Labada kooxood ee lagu sheegay aayadda 3 markale ayaa la kala saarayaa. Koox ayaa “xukunta” kooxda kale iyagoo kuwa kalena “quudhsada.” Haddaba, labadan fikir waa kuwo aan u habboonayn “addoommada”! sayidkooda Ciise Masiix ayaa ah kan keliya ee awoodda u leh inuu “dhaleeceeeyo” amaba “hoos u eego” kuwa kale. Haddaba, Masiixiyiinta inay wax xukumaani waxay ka dhigan tahay (1) inay galeen Booskii Ilaah iyo (2) inay tahay wax bilowa oon dhammays tirnayn.

▣ **“kulligeen waxaynu hor istaagi doonaa kursiga xukumaadda Ilaah”** xaqiiqadan oo kale waxa lagu sheegay 2 Korintos 5:10. Masiixiyiintu waxa ay sharraxaad ka bixin doonaan, sida midkoodba kan kale ula dhaqmi jiray. Ciisena waxa uu noqon doonaa Xaakinka (Matayos 25:31-46).

NKJV wuxuu odhanayaa “kursiga xukumaadda ee Masiixa.” Qoraallada Giriigga ee waafaqsan KJV, waxay yihiin kuwii aadka u horreeyay  $\aleph^2$ , iyo  $C^2$ . *Theos* waxay ku dhex sugan tahay MSS  $\aleph$ , B, C, D, F iyo G. culimadu waxay qoraalka Giriigga ah u beddeleen si waafaqsan 2 Korintos 5:10. Waxa kaloo jira qoraallo kale oo halkan ka dhigaya asal raac (Bart D. Ehrman kitaabkiisa *The Orthodox Corruption of Scripture*, ee ay daabacday Jaamacadda Oxford 1993), pp. 90-91.

14:11 **“waxaa qoran,”** waxa weeyi erayo loo gaar yeelay tilmaamista xigashooyinka Axdiga Hore. Waxaanay u noqonaysaa Ishacyaah 45:23, oo sidoo kale lagasoo xigtay Filiboy 2:10-11.

▣ **“Anigu waa noolahay”** waa qaab ballan ah oo ah erayo lagu tilmaamayo magaca Axdiga ee Ilaah, YHWH waana qaab faleed nolonaya xagga luqada Cibraaniyada “ahaansho” (Baxniintii 3:14). Waa Ilaah Ilaaha weligiis nool ee noolaanaya. Haddaba, Ilaah waxa uu ku dhaarinayaa jiritaankiisa.

14:12 **“Sidaasaa midkeen kastaba Ilaah ula xisaabtami doonaa.”** Masiixiyiinta waa la xukumi doonaa (2 Korintos 5:10), walaalaha wax dhaleeceeeyana kuwaas ayay ka mid noqon doonaan. Kuwo kamida qoraaladii Hore ee Giriigta ayaa waxa aanay kusoo darin “Ilaah”. Waxa haddaba laga yaabaa inay arrintaas saamaysay oo lagaga dayday aayadda 10.

#### FAHANKA MACNAHA GUUD EE ROOMA 14:13-23

- A. Mawduuca ku saabsan sida Masiixiyiintu isula dhaqmayaan, wuxuu ka bilaabmaa aayadaha 1-12. Waxaanay ku salaysan tahay xaqiiqada ah inay si buuxda u aqbalaan Masiixa aawadiis, kaasoo ah Sayidkooda xagga xukunka oo ah kan aqbalaya labada kooxoodba. Waxyaalaha ruux ahaaneed ee muhiimka u ah koox, sida inay ka hadlaan wakhtigoodii hore, shakhsiyaddoodu nooca ay tahay, waalidkood iwm, maaha kuwo Ilaah Muhiim u ah.
- B. Qaybta labaad ee ah falaqaynta xorriyadda Masiixiyiinta iyo masuuliyaddu, waxa weeyi mawduuca keenaya aragtiyo kala duwan. Aayadahan dhexdooda waxa weeyi jacaylka Masiixigu Ilaah ugu qabo Masiixa, inuu yahay kan ku jihaynaya, inuu jeclaado walaalihiiisa kale ee Masiixiyiinta ah. Sida Masiixu naftiisa uu uugu hoosaysiiyey rumaystayaasha daraaddood, iyaguna xorriyaddooda waa inay isugu hoosaysiiyaan kuwa uu Masiixu u dhintay (2 Korintos 5:13-14; 1 Yooxanaa 3:16). Tani haddaba, waa waxa aasaaska u ah jacaylka Masiixiyadda, waana sidoo kale midda ka muuqanaysa 13:8-10 marka la eego xidhiidhka rumaystayaashu ay la yeelanayaan kuwa aan rumaysadka lahayn.
- C. Xaqiiqada ah in waxkasta oo dunidan guudkeeda yaallaa yihiin nadiif amaba xalaal, ayaa noqonaysa mid Masiixiyiinta kale ay ku adag tahay inay aqbalaan. Xitaa Masiixiyiintu waxay canaanta denbiga saaraan waxyaalo kale. Bawlos wuxuu haddaba in badan kusoo celcelinayaa, in wax kastaa yihiin nadiif (14:14,20; 1 Korintos 6:12; 10:25-26; 1 Timoteyos 4:4; Tiitos 1:15). Hadalkiisuna wuxuu waafaqsan yahay, waxbaristii Ciise ee ku saabsanayd cuntada Markos 7:18-23. Cuntada xalaasha ah iyo midda aan xalaasha ahayni waxay ahayd tusaalihii Butros ee Korneliyos ku aqbalay Ilaah sida ku sugan Falimaha Rasuullada 10:15.

- D. Qaybtani waxay ka hadlaysaa “walaalka xooggan.” Bawlosna wuxuu qaadanaayaa xaqiiqada odhaahda ah “wax waliba waa xalaal,” laakiin wuxuu raacinayaa inaanay u roonayn oonay waxbarayn qoyska Ilaah (1 Korintos 6:12; 10:23). Haddaba, xorriyadda xoogga badan ee walaaluhu, waxay noqon kartaa mid waxyeello u gaysata walaalaha kale ee Masiixiyiinta ah.
- E. Waxa xiiso badan Bawlos oon sheegin inuu jiro “walaal wax itaal darreeya” inuu yahay hannaanka keenaya “walaal xooggan.” Haddaba, falaqayntan oo dhammi kama hadlayso, ku koritaanka nimcada laakiin waa mudnaanta jacaylka u dhexeeya Masiixiyiinta fahankooda. Masiixiyiintu maaha inay isu kala saaraan labo kooxood, oo qaarna lagu tiriyo kuwo wanaagsan oo waxa xun iyo waxa wanaagsan kala garanaya, sidoo kalena Masiixiyiinta shaqadoodu maaha inay dadka beddelaan, laakiin waa inay jeclaadaan oo tix geliyaan kooxda kale. Arrintani haddaba waa mid ku xidhan qalbiga ee maaha maanka. Ilaah jacaylkiisu waxbuu aqbalay oo Wiilkiisana waxa uu siiyay aadanaha oo dhan labadood kooxoodba.

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### NASB (UPDATED) TEXT: 14:13-23

<sup>13</sup>Sidaas daraaddeed mar dambe yaynaan isxukumin. Laakiinse tan ka fikira inaan ninna walaalkiis u dhigin dhagax uu ku turunturoodo ama wax kaleeto oo hor joogsada. <sup>14</sup>Waan ogahay, waanan ku hubaa Rabbi Ciise, inaan waxba nafahaantiisa iska xaaraan ahayn. Laakiinse kii ku tiriya inay xaaraan tahay, kaas waa ka xaaraan. <sup>15</sup>Waayo, haddii walaalka cuntadaada ka calool xumaado, jacaylka kuma sii socotid. Cuntadaada ha ku baabi'in kii Masiixu u dhintay. <sup>16</sup>Haddaba wanaaggiinna yaan la caayin. <sup>17</sup>Waayo, boqortooyada Ilaah ma aha cunid iyo cabbid, laakiinse waa xaqnimada iyo nabadda iyo farxadda ku jira Ruuxa Qoduuskaa. <sup>18</sup>Kii waxaas Masiixa ugu adeega, Ilaah buu ka farxiyaa. xagga dadkana waa mid loo bogay. <sup>19</sup>Sidaas daraaddeed haddaba aynu raacno waxyaalaha nabadda iyo waxyaalaha midkeenba midka kale xoog ugu yeelo. <sup>20</sup>Shuqulka Ilaah ha u dumin cunto aawadeed. Hubaal wax waluba waa nadiif, laakiin waa u xun tahay kii cuna isagoo mid kale xumaynayo. <sup>21</sup>Waa wanaagsan tahay inaad hilib cunin ama khamri cabbin ama samayn wax kaleeto oo walaalka ku turunturoodo. <sup>22</sup>Rumaysadka aad leedahay. Ilaah hortii u hayso. Waxaa faraxsan kii aan isku xukumin wixii la qumman isaga. <sup>23</sup>laakiinse kii shakiya, hadduu cuno, waa xukuman yahay, maxaa yeelay. rumaysad wax kuma cuno, oo wax kastoo aan rumaysadka ka imaninu waa dembi.

**14:13 “mar dambe yaynaan isxukumin”** waa fal soconaya oo la rabo joojintiisa, mana aha ka digitaan laakiinse waa mamnuucitaan. Waxay aad ay isugu eegyihiiin aayadda 16, sidoo kalena erayga ah “xukun” Bawlos waxa uu shan jeer ku dhex adeegsaday aayadaha 1-12, iminkana afar jeer oo kale oo dheeraad ah ayuu ku dhex adeegsanayaa aayadaha 13-23.

### MAWDUUC GAAR AH: MASIIXIYIINTU MA IS XUKUMI KARAAN?

Arrintan waa in labo siyaabood loola tacaalo. Ugu horrayn, Masiixiyiinta waxa looga digay in midkoodba kan kale xukumo (Matayos 7:1-5; Luukos 6:37,42; Rooma 2:1-11; Yacquub 4:11-12). Sidoo kalena Masiixiyiinta waxa looga digay inay qiimayn ku sameeyaan oo xukumaan hogaamiyayaasha (Matayos 7:6,15-16; 1 Korintos 14:29; 1 Tesaloniika 5:21; 1 Timoteyos 3:1-13; iyo 1 Yooxanaa 4:1-6).

#### Waxa jira qiimaynta kuwo ka mida oo habboon waxtarna leh

1. Qiimayntu ujeedadeedu waa inay noqoto ansixin (1 Yooxanaa 4:1 – “tijaabo” lagu arki karo ansixinta).
2. Qiimaynta waa in lagu sameeyo is hoosaysiin iyo wanaag (Galatiya 6:1)
3. Qiimayntu waa inaanay ahaan mid diiradda saaraysa shakhsiyad ahaan waxa la xidhiidha (Rooma 14:1-23; 1 Korintos 8:1-13; 10:23-33).
4. Qiimayntu waa inay tahay mid magacaabaysa hoggaamiyayaasha aan laga dhaleecaynayn kaniisadda amaba bulshada dhexdeeda (1 Timoteyos 3).

☐ **“inaan ninna walaalkiis u dhigin dhagax uu ku turunturoodo ama wax kaleeto oo hor joogsada.”** Waa fal soconaya oo la rabo joojintiisa, waana mid la mida sida lagu sheegay aayadaha 21 iyo 1 Korintos 8:9.



Erayga “turaanturro” waxa loo adeegsadaa dhagaxa yaalla meel dariiqa ee qofka ku sababa inuu turaanturrooda amaba dhaco. Haddaba middan waxa lagu misaalay dadka.

Masiixiyiinta ah, mana aha inay is turaanturreeyaan, laakiin waa inay noqodaan kuwo is dhora, is dhiirri geliya, saaxiibbona ahaada waayo rumaysadku waa qoys isku mida!

**14:14**

**NASB**

**“Waan ogahay, waanan ku hubaa Rabbi Ciise aawadiis”**

**NKJV**

**“Waan ogahay, waanan ku hubaa Rabbi Ciise”**

**NRSV**

**“waan ogahay waxaana igu qanciyay Rabbi Ciise”**

**TEV**

**“la jiritaankayga Rabbi Ciise ayaan ku hubaa”**

**JB**

**“si fiican baan uga war hayaa, waayo waxaan u hadlayaa Rabbi Ciise”**

Waa falka shaqaynaya ee qaabka *oida*, fahan ahaanna macneheedu waxa weeyi “waxaan sii wadaa Ogaanshaha waanan sii hubi doonaa.” Waa odhaah markale kusoo celinaysa xaqiiqada aayadda 5b iyo 22-23. Haddaba, fahanka Masiixiyiinta ee waxyaalaha ruuxiga ahi waxa uu ka imanayaa oo xidhiidh la leeyahay Ciise isaga oo soo marayana Ruuxa Quduuska ah. Waxa markaas waajib ah in Masiixiyiintu ay ku socdaan oo la noolaadaan iftiinka ay haystaan.

▣ **“inaan waxba nafahaantiisa iska xaaraan ahayn.”** waa xaqiiqada tusaale ahaanta loogu soo qaadan karo Falimaha Rasuullada 10:9-16. Waxyaaluhu maaha shar laakiinse dadka ayaa ah sharlayaal. Waxa la abuuray oo dhami shar maaha naftoodadana shar kuma aha (aayadda 20; Markos 7:18-23; 1 Korintos 10:25-26; 1 Timoteyos 4:4 iyo Tiitos 1:15)!

▣ **“Laakiinse kii ku tiriya inay xaaraan tahay, kaas waa ka xaaraan.”** Tan macneheedu waxa weeyi wax xaarantinimayntu waa shuqul diimeed. Masiixiyiintuna waa inay dareemaan oo qiimayn ku sameeyaan waxyaalaha ay falayaan (aayadaha 5,22-23). Xitii haddii si khalada wax loogu war geliyay, waxa loo baahan yahay inay ku socdaan iftiinka ay Ilaah ku hor haystaan. Sidoo kale waa inaanay xukumin Masiixiyiinta kale iyagoo ku xukumaya iftiinka ay haystaan, gaar ahaan waxyaalaha lagu wareeri karo (14:1,3,4,10,13).

**14:15 “haddii walaalkaa cuntadaada ka calool xumaado”** waa hadal shuruudeed qoraaga u adeegsanayo caddaynta ujeeddadiisa. Naftenna waa inuu jacayl ku dheehnaado oo masuuliyad lahaanno, ee maaha inaan xorriyadda aan xadka lahayn ku socono.

Haddaba waxa laga yaabaa inay arintani la xidhiidho (1) sharciyadii cuntada ee Yuhuudda (Laawiyiintii 11), ama (2) hilibka loo qalay sanamyada (1 Korintos 8-10). Aayadda 20 ayaa arrintan si fiican uga hadlaysay.

▣ **“jacaylka kuma sii socotid”** tan waxa loogu magac daray “sharciga xorriyadda” (Yacquub 1:25; 3:12), a,a “sharciga boqornimada” (Yacquub 2:8) ama “sharciga Masiixa” (Galatiya 6:2). Waxa haddaba jira masuuliyadaha iyo hanuuninta Axdiga Cusub.

**NASB, NKJV**

**“Cuntadaada ha ku baabi'in kii Masiixu u dhintay”**

**NRSV**

**“waxaad cuntaa yaanay noqon kuwo baabi'iyaa kii Masiixu u dhintay”**

**TEV**

**“cuntada aad cuntaa yaanay baabi'iin kii Masiixu u dhintay”**

**JB**

**“xor uma tihid inaad cunto waxaad jeceshahay haddii ay baabi'inayso kii Masiixu u dhintay”**

Xorriyadda kuwo ka mida Masiixiyiintu waa inaanay sababin baabi'iinta Masiixiyiinta kale. Tani haddaba maaha badbaada oo lumaysa, laakiin waxa weeyi nabadda oo lumaysa iyo adeegga oon noqonaynin wax ku ool.

Erayga “baabi'iin” ayaa luqadda Giriiga wuxuu ku yahay *lupeō*, taasoo macneheedu yahay “sababitaanka murugada, calool xumada, xanuunka”. Haddaba, badanaa Bawlos eraygan waxa uu ku dhex adeegsanayaa 2 Korintos (2:2,4,5; 6:10; 7:8,9,11). Baabi'iintuna waxa weeyi tarjumaad xooggan. Mana aha mid tilmaamaysa lumitaanka badbaada, laakiin waxa lumaysa kalsoonidii shakhsi ahaaneed ee qofku ka qabay Ruuxa Quduuska ah. haddii rumaystayaasha camalladdoodu aanay noqonin kuwo rumaysadka ku imanayana waxa weeyi denbi (aayadda 23).

**14:16**

**NASB**

**“Haddaba wanaaggiinna yaan la caayin.”**

**NKJV, NRSV,**

**“wanaaggiina yaan shar lagu tilmaamin”**

**TEV**

**“waxaad wanaagga u malaynasaani yaanu noqon magac xumaan”**

**JB**

**“waa inaan xorriyadiinu sababin caayitaan”**

Xorriyaddu waxay si fudud isugu beddeli kartaa sharciyasasho. Waxa wanaagsan ee ayaaddani sheegaysaa, waxa weeyi falka walaalka xooggan. Haddaba haddii walaalka xooggani uu u adeegsado xorriyadiisa wax dhibaato ruux ahaaneed ku keenaya kan taagta daran, wixii wanaagsanaa wuxuu jaanis siinayaa sharka.

Weedhani waa ficil jooga oo ah hadal maldahan, oo uu ereyga diidmadu la socdo, oo macnuhu yahay in lagu joojiyo ficil markaa socday oo la samayn jiray. Xorriyaddu waxay si fudud isugu beddeli kartaa sharciyasasho! Waxa wanaagsan ee ayaaddani sheegaysaa, waxa weeyi falka walaalka xooggan. Haddaba haddii walaalka xooggani uu u adeegsado xorriyadiisa wax dhibaato ruux ahaaneed ku keenaya kan taagta daran, wixii wanaagsanaa wuxuu jaanis siinayaa sharka.

Waxay u muuqataa in aayaddani halkii marka hore ay ka tilmaamaysay sida Masiixiyiintu u wada dhaqmayaan, in caqli gal tahay iyadoo dhinaca kalena uugala jeedda kuwa aan rumaysadka lahayn (aayadda 18b). Ereygan falka ahi waxa uu ka yimid ereyga “aflagaaggdo Ilaah iyo diintiisa” (oo lagu hadlay) had iyo jeerna waxaa isticmaala kuwa aan diinta lahayn.

**14:17 “boqortooyada Ilaah”** weedhani waa meesha keliya ee lagaga dhex adeegsaday Rooma. Waa mawduuca la xidhiidha Ciise Masiix halkan dunida iyo aakhirada labadaba (Matayos 6:10). La wadaagitaanka jidhka Masiixu waa inuu ka qiimo badnaado xorriyadaha shakhsi ahaaneed. Eeg Mawduucan Gaarka ah.

### **MAWDUUC GAAR AH: BOQORTOYADA ILAAH**

Axdiga Hore dhexdiisa YHWH waxa lagu magacaabi jiray Boqorka Israa’iil (1 Samuu’eel 8:7; Sabuurka 10:16; 24:7-9; 29:10; 44:4; 89:18; 95:3; Ishacyaah 43:15; 44:4,6) iyo Masiixa oo isna ahaa boqorka la sugayo (Sabuurka 2:6). Markii Masiixu ku dhashay Beytlaxam (6-4 C.H) Boqortooyada Ilaah waxay noqotay mid jebisay taariikhda aadanaha iyada oo keentay awood cusub iyo cafis (axdi cusub, Yeremyaah 31:31-34; Yexesqeel 36:27-36). Yooxanaa Baabtiisaha ayaa sii sheegay soo dhowaanshaha boqortooyada (Matayos 3:2; Markos 1:15). Ciise laftiisuna waxa uu sheegay in boqortooyada ay joogto oo ay tahay Isaga iyo waxbaristiisa (Matayos 4:17,23; 9:35; 10:7; 11:11-12; 12:28; 16:19; Markos 12:34; Luukos 10:9,11; 11:20; 12:31-32; 16:16; 17:21). Sidoo kalena boqortooyada waa mid mustaqbalka ah (Matayos 16:28; 24:14; 26:29; Markos 9:1; Luukos 21:31; 22:16,18).

Markos iyo Luukos waxaan ka arki karaa isu ekaanshaha erayada “boqortooyada Ilaah.” waxay ahaayeen erayo ka dhex muuqanaya waxbaristii Ciise, waxaana ka muuqanaysay joogitaanka xukunka boqortooyada Ilaah ee qalbiyada dadka oo maalintaa dhammaadkana dunida oo dhan xukumi doonta. Waxay sidoo kale ka muuqataa tukashada Masiixu xertiisa baray Matayos 6:10. Matayos qoraalkiisu wuxuu ugu talo galay Yuhuudda, wuxuu doorbiday inuu adeegsado erayada aan koobsanayn magaca Ilaah (Boqortooyada Janada), halka Markos iyo Luukos ay qoraalladooda uugu talo galeen kuwa aan Yuhuudda ahayn, waxaanay badanaa adeegsadeen erayada koobsanaya magaca Ilaah.

Waxaan arki karnaa erayadani inay yihiin kuwo injiilka furaha u ah, sidoo kalena Ciise wacdimihiisee hore iyo kuwii danbe, iyo masaalladiisa waxa uu kaga hadlay mawduucan. Waxa ayna tilmaamaysaa boqortooyada Ilaah ee qalbiyada dadka ka talinaysa imika. Laakiin, waxa la yaab badan Yooxanaa oo ereyadan adeegsanaya labo jeer oo keliya, oo marna kuma dhex adeegsanayo masaallada Masiixa. Injiilka uu qoray Yooxanaa waxa fure iyo tusaale u ah erayada “nolosha weligeed ah.”

Waxa kaloo arrintan sabab looga dhigay labada imaatin ee Masiixa. Axdiga Hore waxa uu diiradda saaray imaatinka Masiixa Ilaah oo ah, sidii boqor wax xukumaya, laakiin Axdiga Cusubi, waxa uu sheegayaa imaatinkiisa hore isaga oo ah adeege silcaya sida ku qoran Ishacyaah 53 iyo boqor is hoosaysiinaya, sida ka muuqata Sekaryaah 9:9. Haddaba, Ciise Masiix imika wakhtigan la joogo waxa uu u taliyaa qalbiyada rumaystayaasha, laakiin maalin maalmaha ka mida waxa uu u talin waxa Ilaah abuurtaay oo dhan. Wuxuu u iman doonaa sidii Axdiga Hore u sii sheegay oo kale, oo Masiixiyiintu waxay u noolyihiin boqortooyada Ilaah ee hore u timid, balse ilaa haddana la sugayo (Gordon D. Fee iyo Douglas Stuart kitaabkooda, *How to Read The Bible For All Its Worth*, pp. 131-134).

▣ **“laakiinse waa xaqnimada iyo nabadda iyo farxadda ku jira Ruuxa Qoduuskaa.”** Waa Ruuxa rumaystayaasha kala gedisan u keenaya tayada bulshada rumaysadka ku dhaqanta. Waana dabeecadda qoyska Ilaah ee gudaha iyo dibadda intaba.

Erayga “xaqnimadu” waxa halkan ku adeegsaday Bawlos isagoo si gaara u adeegsaday. Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 1:17. Bawlos xaggiisa badanaa wuxuu ugu adeegsanayay xaqnimada ku imanaysa Masiixa (3:21-31;

4). Aadanaha leexday laguma tirin karo xaqnimo oo keliya, laakiin waa in iyaguna ay noqdaan xaq, maxaa yeelay waxay isugu jirtaa hadiyad iyo ujeedo.

**14:18** xad u yeelista xorriyadda Masiixiyiintu haystaan Masiixa aawadiis, iyaga oo u samaynaya kuwa taagta daran, waxay ka dhigan tahay u adeegitaanka Masiixa laftiisa. Ma jirto sidan si ka wayn oon jacaylka Masiixu inoo muujiyay oo kale, aan uugu muujin karno kuwan uu daraaddood u dhintay Masiixu.

▣ **“xagga dadkana waa mid loo bogay”** waxa laga yaabaa inay tani tilmaamayso, jacaylka Masiixiyiinta oo albaabka u furi kara u markhaati furista ummadaha kale een rumaysadka lahayn (aayadda 18; 2 Korintos 8:21; 1 Butros 2:12). Sida midkeenba ka kale uugula dhaqmo, ayaa markhaati fur u noqon karta bulshada aan ku dhex noolnahay ee rumaysadka aan lahayn.

**14:19** **“aynu raacno”** erayga, *diōkō*, waxa guud ahaan uu ka muuqdaa Axdiga Hore iyo sidoo kale qoraallada Bawlos, macneheeduna waxa weeyi “si xiiso leh in wax loo raaco”. Haddaba, Bawlos eraygan wuxuu ku dhex adeegsanayaa Rooma 9:30,31; 12:13; oo halkan waxa loo adeegsaday “raacid” laakiin 12:14 waxa ay tahay kuwa raaca rumaystayaasha (1 Korintos 4:12; xitaa isaga laftiisa, 15:9; 2 Korintos 4:9; Galatiya 1:13,23; Filiboy 3:6).

Waxa ay noqon kartaa fal jooga oo soconaya oo dhib xallinaya (MSS, N, A, B, F, G, L iyo P) amaba (MSS C, D) amab loo adeegsaday tilmaamista wax muhiim ah.

Waxyaabaha Masiixiyiintu raaci karaan

1. Marti gelinta, 12:13
2. Waxyaalaha keenaya nabadda ee midiba ka kale ku dhisi karo. 14:19
3. Jacayl, 1 Korintos 14:1
4. Lamidnimada Masiixa, Filiboy 3:12,14
5. Waxa u wanaagsan ka kale iyo dhammaanba dadka, 1 Tesaloniika 6:11
6. Xaqnimo, cibaado, rumaysad, jacayl, 1 Timoteyos 6:11
7. Xaqnimo, rumaysad, jacayl iyo nabad 2 Timoteyos 2:22

▣ **“nabadda iyo waxyaalaha midkeenba midka kale xoog ugu yeelo”** middani waa inay noqoto rumaystaha ujeeddadiisa (Sabuurka 34:14; Cibraaniyada 12:14). Xorriyadda shakhsi ahaaneed ee Masiixiga waa inay hoggaasimo xasilloonida ku koritaanka jidhka Masiixa (15:2; 1 Korintos 6:12; 14:26; Efesos 4:12). Eeg Mawduuca Gaarka ah 15:2.

**14:20** **“Shuqulka Ilaah ha u dumin”** waa fal jooga oo shaqaynaya lana rabo joojintiisa. Falka xooggan ee ka kooban erayada lakabka ah ee (*kata+luo*) saddex jeer ayaa Bawlos qoraalladiisa lagu dhex adeegsaday (2 Korintos 5:1 dhimashada iyo Galatiya 2:18 baabi’iin). Adeegsiga “xoogayn” sida ku sugan aayadda 19 iyo eraygani, fahan ahaan waxa weeyi kuwo meel wada istaaga oo ah tusaale.

Haddaba, waa maxay “shuqulka Ilaah” sida aayaddan ka muuqata? Ma tilmaamayso qaan gaadhnimada, laakiin waa shaqada Ruuxa ee rumaysta taagta daran. Haddaba, aayadahan dhexdooda iyo 1 Korintos 8-10 midkoodna Bawlos kuma sheegayo in labada kooxood is caawiyaan amaba midkood beddelo kan kale.

▣ **“wax waluba waa nadiif”** eeg aayadda 14.

▣

**NASB** “laakiin waa u xun tahay kii cuna isagoo mid kale xumaynayo.”  
**NKJV** “laakiin waa wax u xun kii u cuna inuu mid kale xumaynaya”  
**NRSV** “laakiin waa kugu khalad inaad kuwa kale cutadaada kaga dhigto kuwo denbaaba”  
**TEV** “laakkiin waa khalad inaad cunto wax kasta oo kuwa kale ku sababi kara inay denbaabaan”

**JB** **“waxay noqonaysaa shar haddii cuntadaada qof kaga dhigto inuu denbaabo”**

Aayaddani waa waa runta uu xambaarsan yahay cutubkani (1 Korintos 10:25-26; Tiitos 1:15).

Waxay tilmaamaysaa hilibka loo qalay sanamyada (1 Korintos 8-10). Hilibku haddaba maaha wanaag amaba shar, laakiin haddii walaal taag yari oo moodaya wax aan habboonayn, uu arko Masiixi cunaya, waxay taasi isaga ku keenaysa dhibaato xagga ruuxiisa ah.

Badanaa tarjumaadaha luqada Ingiriisuda waxay arrintan ku xidhaan u dhowaanshaha “walaalka xooggan” in cunitaankooda ay ku saamaynaya walaalka taagta daran. Tarjumaadda Catholica ee New American Bible ayaa

dhinaca kale waxay u dhowaynasaa “walaalka taagta daran” waxaanu ku tarjumayaa “waa khalad inuu ninku cuno marka cuntadu xumaynaso dareenkiisa.” Haddaba qoraalka hore ayaa noqon kara ka xooggan waxaanu tilmaamayaa labadaba sida aayadaha 22-23.

**14:21** waa erayo u socda “walaalka xooggan” tani waa meesha keliya ee fiqi ahaa Kitaabka loogu noqon karo “xakamaynta nafta” ee khusaysa cuntooyin iyo cabitaanno gaar ah. Masiixiyiinta xooggani waa inay nafhooda xakameeyaan, iyaga oo jacayl u muujinaya walaalaha rumaysadkoodu taagta daran yahay iyo kuwa aan rumaysadka lahaynba.

Waxa ay haddaba si aan toos ahayn u sheegaysa “inaan weligeed lagu dhaqmin arrintaas.” Culimmada qaarkood waxay tan u tarjumeen inay ku shaqaynaso xaalado gaara (1 Korintos 8-1-10). Waxa cad haddaba in cunitaanka iyo cabitaanka midkoodna xaaraan ahayn.

**14:22**

**NASB** “Rumaysadka aad leedahay. Ilaah hortiiis u hayso. Waxaa faraxsan kii aan isku xukumin wixii la qumman isaga.”

**NKJV** “Miyaad leedahay rumaysad? Ilaah hortiiis u hayso. Waxa faraxsan kii aan isku xukumin wixii la qumman isaga”

**NRSV** “rumaysadka aad leedahay, Ilaah hortiiis ku hayso. Waxa barakadaysan kuwa aan isku xukumin wixii la qumman iyaga”

**TEV** “rumaysnow waxa aad arrintan ka aaminsantahay, oo ha idiin dhaxayso adiga iyo Ilaah. waxa faraxsan kuwa aan is qoomammayn, marka ay dareemaan inay si saxa wax u xukumeen”

**JB** “waxa aad rumaysantahay adiga iyo Ilaah ha idiin dhexeeyo – tixgelina kan aan wax ku xukumin wuxuu rabo isagu”

Waxa markale la adkaynayaa in rumaystuhu uu ku noolaado iftiinka uu ku hoggaaminayo Ruuxa Quduuska ahi, waana waxa kitaabku inoo sheegay (aayadda 5). Waa inuu ku socdo iftiinka uu haysto; laakiise maaha inuu ku xumeeyo rumaystayaasha kale ee raacaya rumaysadka.

Aayadda 22 waxay ku bilaabantaa farqiyo u dhexeeya qoraallada. Waxa ay noqon kartaa su’aal (NKJV) amaha hadal caadi ah (NASB, NRSV, TEV iyo JB).

**14:23** “laakiinse kii shakiya” waxay u noqonaysaa waxyaalaha ku waajahan dareenka Masiixiyiinta ee aayadda 3.

▣ “waa xukuman yahay” waa fal jooga oo luqadda Giriigtana ka timid *kata+krinō* macneheeduna waa (1) waxa laga dhigay denbiile (Harold K. Moulton, *The analytical Greek Lexicon Revised*, p. 216) amaba (2) maaha xukun oo kelya, laakiin waxa la socda ciqaab (Rooma 5:16,18; 8:1 [Moulton iyo Milliga, *The Vocabulary of the Greek Testament*, p328]). Halkan haddaba, waxa lagu sheegayaa fawdada ku imanaysa qof dareenkiisa aan ku qanacsanayn Ruuxa Quduuska.

▣ “hadduu cuno” waa weedh ku dhisan hadal shuruud ah.

▣ “wax kastoo aan rumaysadka ka imaninu waa dembi.” Denbigu waa fawdo ka imanaysa innaga dareenkeenna inoo gaarka ah, mana aha fawdaynta Sharciga. Waa inaan ku socono iftiinka aan haysanno, hadiyo goorno si aad iftiin badan u hesho u furnow Kitaabka Quduuska ah iyo Ruuxa.

Rumaystayaasha fahmaya doonista Ilaah, waa in camalkooda ay u fiirsadaan. Rumaystayaasha qaan gaadhka ah haddii ay ka suurtoowdo inay waxyaabaha kitaabku sheegayo ay fahmi waayaan, waa inay doonista Ilaah ku socdaan.

Kuwo ka mida qoraallada Giriigga ayaa waxay leeyihiin isku xidhnaanshaha 16:25-27 u dhow cutubka 14. Qaarkoodna labada dhinacba way ku haystaan. Qoraalka papyri, p<sup>46</sup> ayaa wuxuu leeyahay u dhowaanshaha cutubka 15. Waxa jira haddaba lix dhinac oo ah isku xidhnaanshaha isla markaasna laga heli karo qoraalla Giriigga ee Roomaanka. Falaqayn buuxda ayuu M. Metzger ku samaynayaa *A Textual Commentary of the Greek New Testament* oo ay daabacday United Bible Societies, pp. 533-536. Halkanna waxa lagu soo koobi karaa aragtiyaha kala gedisan: (1) Origen ayaa wuxuu yidhi Marcion, wuxuu ka saaray labada cutub ee u danbeeya Rooma. Tani waxay markaas sharraxaysaa isku xidhnaanshaha cutubka 14; (2) culimada waxay u malaynayaan in

Bawlos uu qayb ka mida Rooma la rabay in loo diro Rooma, waana cutubyada 1-14, mar danbe ayuu haddana arkay in isla waraaqdano kale loo diri karo Efesos; waana cutubyada 1-16. Haddaba, salaanta dheer (cutubka 16) waxay tilmaamaysaa Efesos, ee maaha Rooma; (3) salaanta cutubka 16 waxay u socotay rumaystayaal u socday Rooma, maxaa yeelay Aquilla iyo Priscilla waxay ku sugnaayeen Efesos lamana sheegin iyadoo ku laabanaya Rooma; iyo (4) isku xidhnaanshuhu muu ahayn asal waxaana mar danbe ku daray culimada.

M. R. Vincent, *Word Studies*, vol. 2 waxa laga heli karo qormo xiiso leh:

“Aragtiyahan waxa kasoo horjeeda xaqiiqada ku sugan MMS ee Bawlos waxaanu soo ururinayaa waxyaalaha ugu muhiimsan ee tusin kara cutubyadan i iyo sida ay u habaysan yihiin, iyadoo aanay ku jirin isku xidhnaanshuhu” (p. 750).

## SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Qeex “walaalka taagta daran”? Bawlos ma waxa uu ugala jeedaa qaan gaadh la’aanta?
2. Sidee xorriyadda Masiixiyiintu ula xidhiidhaa masuuliyadda Masiixiyiinta?
3. Wax waliba dabiici ahaan ma “xalaalbaa” mise waa sida laga dhigo (aayadaha 14,20)?
4. Maxay su’aasha cuntada muhiim ugu tahay Korintos (1 Korintos 8, 10), xusuusnow Bawlos Rooma wuxuu ka qoray Korintos?
5. Sharraxaad ka bixi xidhiidhka ka dhexeeya aqoonta, xorriyadda, iyo jacaylka cutubkan dhexdiisa?
6. Muxuu yahay waxa la inaga rabo inaan caabudaadda kaniisadda dhexdeeda ku salayno?
7. Maxaynu ku salaynaynaa doorashadeenna iyo falalkeenna gaar ahaaneed?
8. Sidee waxaan falnaa u saamayn karaa kuwa kale?
9. Sideen ku garan karnaa mabaadiida habboona ee Masiixiga?
10. Suurto gal ma ka noqon kartaa Masiixiyiinta qaan gaadhka ah inay wax isku raaci waayaan iyadoo labadabana Ilaah aqbalyo?

# ROOMA 15

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Waa inaad ka farxiso kuwa ku raaca, maaha naftaada	U dul qaadashada dhibaatooyinka kuwa kale	Ka xooggani ha u dulqaato kan taagta yar	Ka farxi kuwa kale maaha naftaada	(14:22-15:6)
15:1-6	15:1-6	15:1-6	15:1-6	
Injiilku wuu usiman yahay Yuhuud iyo kuwo kaleba	Si wada jira Ilaah u ammaana		Injiilku waxa loogu talo galay kuwa aan Yuhuudda ahayn	Ku baaqitaanka midnimada
15:7-13	15:7-13	15:7-13	15:7-12 15:13	15:7-12 15:13
Adeegitaanka Bawlos	Yerusaalem ilaa Illurikon	Farriinta shakhsi ahaaneed	Bawlos si dhiirraanaan ah ayuu wax u qoray	
15:14-21	15:14-21	15:14-21	15:14-21	15:14-16 15:17-21
Bawlos oo rabay inuu booqdo Rooma	Rabitaanka booqashada Rooma		Bawlos oo rabay inuu booqdo Rooma	Qorshihii Bawlos
15:22-29	15:22-33	15:22-29	15:22-29	15:22-29

## AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

### IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-13

- A. Waxa sii socda falaqaynta xorriyadda Masiixiyadda iyo masuuliyadda 15:1-13 ee kasoo bilaabmayay 14.

- B. Gebi ahaanba doodda 14:1-15:13 ayaa waxa guud markeedu noqon karaa:
1. Midkiinba ka kale ha aqbaloo maxaa yeelay Ilaah wuxuu innagu aqbalay Masiixa (14:1,3; 15:7).
  2. Ha is xukumina maxaa yeelay Masiixu ayaa ah xaakinkeenna (14:3-12)
  3. Jacaylku wuxuu ka muhiimsan yahay xorriyadda shakhsi ahaaneed (14:13-23).
  4. Raac tusaalaha Masiixa oo xuquuqda uuga tanaasul kuwa kale (15:1-13).
- C. 15:5-6 waxay tilmaamaysaa saddexda ujeeddo ee aayadaha 14:1-15:13
1. Heshiis kuwada noolaada
  2. Ku dayda tusaalaha Masiixa
  3. Idinkoo mida Ilaah wada ammaana
- D. Arrintan ah xorriyadda shakhsi ahaaneed iyo masuuliyadda waxa lagaga hadlay 1 Korintos 8-10

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### NASB : 15:1-6

<sup>1</sup>Kuweenna xoogga leh waxaa inagu waajib ah inaynu qaadno itaaldarrada kuwa xoogga yar, oo aynaan nafteenna ka farxin. <sup>2</sup>Midkeen kastaaba deriskiisa ha ka farxiyo inuu ku wanaagsanaado oo ku dhismo. <sup>3</sup>Waayo, Masiixiiba naftiisii kama uu farxin, laakiinse sida qoran, Caydii kuwii adiga ku caayay ayaa igu kor dhacday. <sup>4</sup>Waayo, wax alla wixii hore loo qorayba waxaa loo qoray waxbarashadeenna, inaynu dulqaadashada iyo gargaarka Qorniinka rajo ku lahaanno. <sup>5</sup>Ilaaha dulqaadashada iyo gargaariddo ha ka dhigo in midkiinba midka kale la fikir ahaado sida Ciise Masiix, <sup>6</sup>inaad isku qalbi iyo isku af ku ammaantaan Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix.

### 15:1

NASB	“Kuweenna xoogga leh waxaa inagu waajib ah inaynu qaadno itaaldarrada kuwa xoogga yar”
NKJV	“kuweenna xoogga lihi ay inu qaadno kuwa itaalka daran”
NRSV	“kuweenna xoogga leh waxa inagu waajib ah inaan u dulqaadano kuwa taagta yar”
TEV	“kuweenna xagga rumaysadka ku xooggan waxa inagu waajib ah inaan kuwa taagta daran caawinno”
JB	“kuweenna xoogga leh waxa inagu waajiba inaan qaadano kuwa taagta daran xumaantooda”

Ka hadalka kan xooggan iyo kan taagta daran ee aan ka arkayno cutubka 15 wuxuu sii wadaa falaqayntii arrintan ku saabsanayd ee kasoo bilaabantay 14:1. Waxay u muuqataa haddaba, inay tahay arrintii ka dhex taagnayd kaniisaddii Rooma, iyo dhammaanba kaniisadaha, taasoo ahaa sida Masiixiyiintu u noolaanayaan ee waafaqsan Kitaabka. Waxaan arki karnaa markale Bawlos isaga oo naftiisa ku tirinaya kooxda xooggan.

Kooxda xooggan waxa loogala jeeday kuwa ka xoroobay een hoos joohin sharciyada diimaha ee ku saabsan waxyaalaha bannaan iyo kuwa aan bannaanayn. Haddaba, xidhiidhka Ilaah kuma tiirsana in la qabto waxyaalo gaara kuwo kalena la iska ilaaliyo iyadoo la raacayo dhaqan diimeed. Kooxda kale haddaba, iyaguna waxay ahaayeen Masiixiyiin laakiin waxa maskaxdooda ku jiray dhaqamadii hore ee diimaha. Yuhuudda Masiixiyiinta ahi iyagu waxay kusii dheganaayeen Axidiga Hore waxyaalihii lagu samayn jiray, halka kuwa kalena ay ka wateen kuwo ka mida dhaqamadii hore ee diimohooda. Laakiin, u fiirso Bawlos arrintan walaalaha dhex taalla kumuu sheegin ‘denbi’ hase ahaatee waxa uu sheegay marka dareenkooda fawdo ku timaaddo inay noqonayso denbi (aayadda 23).

Erayga “taag yar” (*adunates*, oo awood la’aan ah, Rooma 8:3) waxay ka gedisan tahay erayga *astheneo* ee 14:1.21 (1 Korintos 8:7,10,11,12; 9:22), oo sidoo kale macneheedu yahay awood la’aan.

Waxay si aan toos ahayn u sheegaysaa in Masiixiyiinta ay waajib ku tahay, inay kuwada dhaqmaan jacayl iyo daryeel. Erayga “qaadis” waxa isna sidoo kale loo adeegsaday Ciise Masiix “qaadista iskutallaabta” sida ku sugan Yooxanaa 19:17 iyo Luukos 14:27. Bawlos waxa uu ogsoonaan dhaqamada iyo waxyaalaha ay kala aaminsanaayeen diinuhu, maxaa yeelay waxa uu kusoo tabobartay Gamaliel oo ahaa dugsiiga waxbarashada ee rabbiyiinta.

▣ **“oo aynaan nafteenna ka farxin”** waa fal soconaya oo joojintiisa la rabo. Damaacinimadu waxay calaamad u tahay qaan gaadhnimo la’aanta, oo raacitaanka tusaalaha Masiixuna (aayadda 3; Filiboy 2:1-11) waxay calaamad u tahay qaan gaadhnimada. Haddana, waxa la sheegay kuwa xooggan ( 14:1,14,16,21,27). Haddaba, tan ujeedadeedu maaha in kuwa xooggan ay yihiin kuwa qaadaya masuuliyadda wada jirka iyo caabudista. Kuwa taagta daran waxa lagu sheegay 14:3,20,23; 15:5-6,7.

**15:2 “Midkeen kastaaba deriskiisa ha ka farxiyo”** “jaar” waxa loo adeegsaday Masiixiyiinta. Haddaba loogalama jeedo qofka oo lagu qanciyo waxaad jeceshahay. Wada jirka iyo ku koritaanka jidhka Masiixa, oon ahayn xorriyadda shaqsi ahaaneed, waa mid muhiimad wayn leh (1 Korintos 9:19-23; 10:24-33; 10:24-33; Efesos 4:1-16).

▣

**NASB** “inuu ku wanaagsanaado oo ku dhismo.”  
**NKJV** “inuu hogaansamo oo dhimso”  
**NRSV** “inay noqoto ujeeddada wanaagsan ee dhisidda jaarka”  
**TEV** “in kor loogu dhiso xagga rumaysadka”  
**JB** “ka caawiya sidii ay ku noqon lahaayeen Masiixiyiin xooggan”

Waa ujeeddada uu in badanka hadlyo cutubka 14(14:16,19). Sidoo kale waa tijaabada hadiyadaha ruuxiga ah ee laga heli karo 1 Korintos 10:23; 12:7; 14:26; Efesos 4:29.

Aayadahan dhexdooda waxa lagu sheegayaa sidii Masiixiga xooggani uu u xadidi lahaa xorriyaddiisa iyadoo ujeeddaduna tahay in kuwa kale laga caawiyo koritaanka rumaysadkooda. Haddaba, Joseph A. Fitzmyer iyo Rymond E. Brown ayaa qormo xiiso leh ku qoraya *The Jerome Biblical Commentary*, vol 2.

“Weedhan waxa macno ahaan loogala jeedaa ‘si loo dhiso’(jaarka), waxaanay tahay horumarinta shakhsi ahaaneed Masiixiga jaarkiisa ku samayn karo. Laakiin Bawlos waxa uu tusaale ahaan ka dhiganayaa dhisidda marka loo eego waraaqihiisa. Haddaba ereyadani waxa ay samayn karaan macnoyaal badan, sida (1 Korintos 14:12; Efesos 4:12; Rooma 14:19)” (p. 328).

#### **MAWDUUC GAAR AH: DHIS**

Eraygan ah *oikodomeo* iyo qaababkeeda kala gedisan waxa adeegsaday Bawlos. Fahankeeda caadi ahaaneed waxa weeyi “in la dhiso guri” (Matayos 7:24), laakiin tusaale ahaan waxa loo adeegsan karaa:

1. Jidhka Masiixa, kaniisadda, 1 Korintos 3:9; Efesos 2:21; 4:16;
2. Dhisitaanka
  - a. Walaalka taagta yar, Rooma 15:1
  - b. Jaarka, Rooma 15:2
  - c. Midba midka kale, Efesos 4:29; 1 Tesaloniika 5:11
  - d. Adeegayaasha, Efesos 4:11
3. Waxaan wax ku dhisaynaa
  - a. Jacayl, 1 Korintos 8:1; Efesos 4:16
  - b. Xadidista xorriyadaha shakhsi ahaaneed, 1 Korintos 10:23-24
  - c. Ka fogaanshaha xanta, 1 Timoteyos 1:4
  - d. Xadidista kuwa ka hadlaya adeegyada caabudista (heesayaasha, macallimiinta, nebiyada, kuwa ku hadla carrabada kala duwan, iyo tarjumaannada), 1 Korintos 14:3-4,12.
4. Wax kasta waa inay dhisaan
  - a. Amarrada Bawlos, 2 Korintos 10:8; 12:19; 13:10
  - b. Hadallada kooban, Rooma 14:19 iyo 1 Korintos 14:26.

**15:3 “Masiixiiba naftiisii kama uu farxin”** Masiixu waa tusaaleheenna. Waxa xaqiiqadan oo kale lagu sheegay aayadda 5; Filiboy 2:1-11; 1 Butros 2:21; 1 Yooxanaa 3:16.

▣ **“sida qoran”** waxa loo adeegsadaa qoraallada Axdiga Hore. Waxaana lagasoo xigtay Sabuurka 69:9 iyo 7. Sheegitaanka tusaalaha Masiixa ee ah (naftiisa kuma uu farxin, Filiboy 2:5-8) waxa kaloo dheer xigashada Axdiga Hore, Bawlos waxa uu adeegsanayaa labada waxyaalood ee ugu muhiimsanaa amarada kaniisaddii hore (Newman iyo Nida, *A translator’s Handbook on Paul’s Letter to the Romans*, p. 271). Haddaba, Masiixa oon



naftiisana ku farxin denbiyadeennana innaga dhaqay, waxa weeyi tusaaleheenna aan ku dayanayno (1 Yooxanaa 3:16).

**15:4 “Waayo, wax alla wixii hore loo qorayba waxaa loo qoray waxbarashadeenna”** Axdiga Hore waxa sidoo kale loo qoray rumaystayaasha Axdiga Cusub (Rooma 4:23-24; 15:4; 1 Korintos 9:10; 10:6,11). Waxaana lagu dabaqi karaa rumaystayaasha axdiga cusub (2 Timoteyos 2:15; 3:16-17). Waxa jirta si qaab ay u wada socdaan iyo qaab aanay u wada soconin Axdiga Hore iyo Axdiga Cusubi.

▣ **“inaynu dulqaadashada iyo gargaarka Qorniinka”** U fiirso runta ku jirta Erayga Ilaah iyo qaab nololeedka rumaystayaashu sida ay midka u yihiin. Rumaysadka iyo ku camal falistiisu waa kuwo isku xidhan (aayadda 5). Waxay keenaan ku kalsoonida nolosha, dhimashada, rajada la ballan qaaday ee ah soo laabashada Masiixa.

▣ **“rajo ku lahaanno”** waa fal jooga oo soconaya, kaasoo ka tarjumaya in rajadeennu ay ku tiirsan tahay samaynta waxyaalaha hore loogusoo sheegay aayadda 4. Haddaba, Axdiga Cusub dhexdiisa erayga “rajo” waxa xitaa loo adeegsaday Imaatinka labaad ee Masiixa waana maka badbaadadeenna la dhammays tiri doono (Rooma 8:30; 1 Yooxanaa 3:2). Imaatinka Labaadna waa dhacdo la hubo oon laakiin la hubin wakhtiga ay noqon doonto.

Bawlos eraygan waxa uu adeegsanayaa marar kala duwan laakiin waa waxyaalo fahankoodu isla xidhiidho. Xitaa waxa soo hoos galaya dhammays tirka rumaysadka Masiixiyiinta. Waxa haddaba middan lagu sheegi karaa ammaan, nolosha weligeed ah, badbaadada aan xadka lahayn, Imaatinka Labaad ee Masiixa, iwm. Haddaba, dhammaystirku waa wax la hubo laakiin wakhtigiisa lama hubo waana mustaqbal. Waxa kaloo ay la xidhiidhi kartaa “rumaysad” iyo “jacayl” (1 Korintos 13:13; 1 Tesaloniika 1:3; 2 Tesaloniika 2:16). Kuwo ka mida meelaha Bawlos u adeegsaday eraygan ayaa waxa ay yihiin sidan:

1. Imaatinka Labaad, Galatiya 5:5; Efesos 1:18; 4:4; Tiitos 2:13
2. Masiixu waa rajadeenna, 1 Timoteyos 1:1
3. Isku hallaynta injiilka, Kolosay 1:23
4. Badbaadada aan xadka lahayn, Kolosay 1:5; 1 Tesaloniika 4:13; 5:8
5. Ammaanta Ilaah, Rooma 5:2, 2 Korintos 3:12; Kolosay 1:27
6. Damaanad qaadka badbaadada, 1 Tesaloniika 5:8
7. Nolosha weligeed ah, Tiitos 1:2; 3:7
8. Badbaadada uunka oo dhan, Rooma 8:20
9. Rumaysad, Rooma 8:23-25, 15:4
10. Magaca Ilaah, Rooma 15:13
11. Doonista Bawlos ee rumaystayaasha, 2 Korintos 1:7

**15:5 “Ilaaha ...ha ka dhigo”** waa hadal tilmaamaya duc. Ducada amaba tukashada Bawlos ee aayadaha 5-6, waxay dalbanaysaa labo waxyaalood (1) in isku maan iyo isku fikir la ahaado ( 12:16; 2 Korintos 13:11; Filiboy 2:2) iyo (2) in hal cod oo ammaana la wada lahaado (aayadaha 6,7,9).

▣ **“Ilaaha dulqaadashada iyo gargaariddu”** Waa magac loo tiiriyay Ilaah (15:13; 1 Korintos 1:3). Haddaba, dabeecaddan Ilaah waxay dadka usoo maraysaa Qoraallada Quduuska ah (aayadda 4). Eeg Mawduuca gaarka ah: 8:25.

**15:6 “Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix”** Waa magac Ilaanimada ee Axdiga Cusubi sheegayo (2 Korintos 1:3; Efesos 1:3; 1 Butros 1:3). Waa Ilaah iska leh waxyiga ee is muujiyay. U fiirso labada magac ee Ilaah kuna jira Tukashada Bawlos aayadaha 5-6 (1) Ilaaha dulqaadashada iyo gargaariddu; iyo (2) Ilaaha ah Aabbaha Rabbigeenna Ciise Masiix. Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 8:25 iyo Aabbaha 1:7.

#### **AAYADAHA 15:7-13**

<sup>7</sup>Sidaas daraaddeed isdhoweeya sida Masiixuna idiin dhoweeyey in Ilaah la ammaano. <sup>8</sup>Waayo, waxaan idinkuleeyahay, Masiixu wuxuu noqday kuwa gudan mididinkooda, runta Ilaah aawadeed, inuu u xaqiijiyo ballamadii awowayaashii hore la siiyey, <sup>9</sup>iyo in quruumuhu Ilaah u ammaanaan naxariistiisa. sida qoran, Sidaas daraaddeed waxaan kugu ammaani doonaa quruumaha dhexdooda, Oo magacaaga waan u gabyi doonaa. <sup>10</sup>Oo haddana wuxuu leeyahay. Quruumahow, la rayrreeya dadkiisa. <sup>11</sup>Oo

**haddana, Rabbiga ammaana, quruumahoo dhammow, Dadkoo dhammuna ha ammaano isaga. <sup>12</sup>Oo haddana Isayos wuxuu leeyahay, Waxaa jiri doona xididkii Yesay, Iyo kan u kacaya inuu u taliyo quruumaha. Isagayna quruumuhu wax ku rajayn doonaan. <sup>13</sup>Ilaaha rajadu ha idinka buuxiyo farxad iyo nabad oo dhan, idinkoo rumaysan, si rajadiinnu ugu badato xoogga Ruuxa Qoduuskaa.**

**15:7**

**NASB, TEV**

**“isdhoweeya”**

**NKJV**

**“midkiinba kan kale ha aqbalu”**

**NRSV**

**“isa soo dhoweeya”**

**JB**

**“is kula dhaqma saaxiibtinimo”**

Masiixiyiintu waa inay isa soo dhoweeyaan maxaa yeelay iyagaba waxa soo dhoweeyay Masiixa. Waxay la mid tahay sida aan kusoo aragnay cutubka 14:1. Si kastaba ha ahaatee, waxa halkan lagu sheegaysaa Axdiga Hore iyo wax ku saabsan aqablitaanka Ilaah ee kuwa aan gudnayn amaba Yuhuudda ahayn (aayadaha 9-12). Waxa laga yaabaa haddaba, inay ka hadlayso arrintii ka dhex taagnayd kaniisaddii

Rooma. Haddaba, dabecadda u gaarka ah Masiixiyaddu waxa weeyi, in rumaystayaasha isa soo dhoweeyaan (1:12; 12:5,10,16; 13:8; 14:13,19; 15:5,7,14; 16:16).

▣ **“sida Masiixuna idiin dhoweeyey”** waxa loola jeeda sida laga rabo in Masiixiyiinta midkoodba usoo dhaweeyo kan kale (14:3). Cutubka 14 ayaa waxa lagaga hadlayay (1) Masiixa oo ah Sayidkeenna xukunka, aayadaha 1-12, iyo (2) Masiixa oo ah tusaaleheenna xagga muujinta jacaylka, aayadaha 13-23. Haddaba, Masiixu innaga wuu ina aqbalay, sidaasi darteedna inaguna waa inaan aqbalno kuwa kale.

▣ **“in Ilaah la ammaano”** Eeg aayadda 3:23

**15:8 “Masiixu wuxuu noqday kuwa gudan midiidinkooda”** Ciise waa dhammaystirka ballan qaadyadii Ilaah ee Axdiga Hore (Matayos 15:24). Waxa haddaba laga yaabaa inay tilmaamayso dhibkii ka dhex taagnaa kaniisaddii Rooma ee u dhexeeyay Yuhuudda Masiixiyiinta ah iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn ee Masiixiyiinta ah.

▣

**NASB**

**“runta Ilaah aawadeed, inuu u xaqiijiyo ballamadii awowayaashii hore la siiyey”**

**NKJV**

**“runta Ilaah daraaddeed, inuu u xaqiijiyo ballamadii awowayaashii hore la siiyey”**

**NRSV**

**“runta Ilaah aawadeed, si uu uga dhabsheego ballamadii lasiiyay awowayaashii hore”**

**TEV**

**“Yuhuudda aawadood, inuu Ilaah u xaqiijiyo ballamadii lasiiyay awowayadii hore”**

**JB**

**“inuu Ilaah xaqiijiyo ballamadii la siiyay awowayaashii hore”**

Arrintani waxay la xidhiidhaa Axdigii Hore ballan qaadyadii Ilaah ku siiyay Israa’iiliyiinta (4:16). Si kastaba ha ahaatee, waxa sidoo kale lagu tilmaami karaa ballan qaadyada Ilaah u muujiyay aadanaha oo dhan (Bilowgii 3:15, 12:3, Baxniintii 19:5-6; Ishacyaah 2:2-4; 56:7; 66:18-24). Qarsoodiga ku jira injiilka ayaa haddaba waxa uu yahay, qorshaha Ilaah oo ahaa inuu Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahaynba ku mideeyo Masiixa (Efesos 2:11-3:13).

Axdiga Cusubi waa dhammays tirka rajooyinkii Axdiga Hore, mana aha wax cusub, maxaa yeelay adeegga wayn ee Masiixu wuxuu ahaa (1) inuu dhammays tiro ballankii la siiyay ee ahaa rajada Israa’iil; iyo (2) inuu albaabada u furo kuwa aan Yuhuudda ahayn (Rooma 3:29-30; 9:30; 10:11-12, 16-20; 11:25,32; 16:25; Efesos 2:11-3:21). Sidoo kale Israa’iiliyiintu waxay ku guul darraysteen, inay Ilaah u muujiyaan oo soo jiitaan kuwa aan Yuhuudda rumaysad, sidaasi darteedna Ciise ayaa suurto geliyay Israa’iisha ruuxoodu cusub yahay (Galatiya 6:16) iyo in lagu dhammays tiro dunida oo dhan (Matayos 28:19-20; Yooxanaa 3:16).

▣ **“xaqiiyiyo”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 4:16

**15:9-12** Waxa lagasoo xigtay Axdiga Hore waxaanay tusinaysaa in kuwa aan Yuhuudda ahayni markastaba qorshaha Ilaah ku jireen (10:16-20). Waxa markaas lagasoo qaatay Sabuurka 18:49 amaba 2 Samuu’eel 22:50; Sharciga Kunoqoshadiisa 32:43; Sabuurka 117:1; Ishacyaah 11:1,10. Sidoo kale u fiirso waxa jirta xigasho ku jirta Cibraaniyada oo koobsanaysa: Sharciga, Nebiyada iyo Qoraallada.

**15:9 “in quruumuhu Ilaah u ammaanaan naxariistiisa”** Naxariista Ilaah waa midda furaha u ah Rooma (9:15,16,18,23) waxaanay koobsanaysaa kuwa aan Yuhuudda ahayn (11:30,31,32; 15:9). Naxariista Ilaah waxay ay tahay midda badbaadisay Yuhuudda iyo kuwa kaleba, mana aha mid ay aadanuhu shaqaysteen (Rooma 9), laakiin Ilaaha iska leh naxariista aan is beddelin (Baxniintii 34:6; Nexemyaah 9:17; Sabuurka 103:8,4; Yoo’eel 2:13) iyo ballan qaadkii Masiixa (Ishacyaah 11:1,10).

**15:13 “Ilaaha rajadu”** waxay ahayd xidhitaanka arrintan gaarka ah ee kasoo bilaabantay 14:1. Waana magac Ilaah loo tiiriyo oo ah Ilaah rajada.

**15:13 “ha idinka buuxiyo farxad iyo nabad oo dhan”** waa ducada Bawlos ugu ducaynayo rumaystayaasha amaba Masiixiyiinta ku sugan Rooma. U fiirso erayga “dhan” sida uu uga muuqdo (5:1-2; 14:17).

**NASB, NKJV,**

**NRSV**

**“idinkoo rumaysan”**

**TEV**

**“rumaysadkiinna aawadiis”**

**JB**

**“idinkoo rumaysan”**

Waxay tilmaamaysaa kalsoonida dulqaadashada oo macneheedu yahay kusii sugnaanta rumaysadka Masiixa, oo taasina ku suurto galayso awoodda Ruuxa Quduuska ah oo farxadda iyo nabadda u keenaya qofka. Haddaba, rumaysadka Masiixu maaha afka oo keliya, laakiinse waa ka jawaab celin ka muuqanaysa qaab nololeedka.

▣ **“si rajadiinnu ugu badato”** waa falka jooga ee *perisseuō* taasoo macneheedu yahay “badan oo sarreeya.”

### **MAWDUUC GAAR AH: BADAN (*PERISSEVŌ*)**

Bawlos eraygan waxa u adeegsanayaa:

1. Runta Ilaah oo badatay, Rooma 3:7
2. Hadiyadda nimcada oo u badatay nin keliya, Ciise Masiix, Rooma 5:15
3. Rumaystayaasha oo rajada ku badanaya, Rooma 15:3
4. Rumaystayaasha Ilaah kuma ammaanin cunitaanka cutooyin gaara, 1 Korintos 8:8
5. Rumaystayaasha oo badinaya kaniisadda, 1 Korintos 14:12
6. Rumaystayaasha oo badaniya shuqullada Rabbiga, 1 Korintos 15:58
7. Ku badnaanta Masiixa, 2 Korintos 1:5
8. Adeegga xaqnimada oo ku kordha ammaanta, 2 Korintos 3:9
9. Mahad naqista rumaystayaasha waa badinta ammaanta Ilaah, 2 Korintos 4:15
10. Badashada farxadda rumaystayaasha, 2 Korintos 8:2
11. Rumaystayaasha oo ku badanaya (rumaysadka, aqoonta, jacaylka iwm), sidoo kale kaniisadda Yerusaaalem, 2 Korintos 8:7
12. Nimcadoo dhammi way u badataa rumaystayaasha, 2 Korintos 9:8
13. Rumaystayaasha oo badiya u mahad naqista Ilaah, 2 Korintos 9:12
14. Nimcada Ilaah oo u badata rumaystayaasha, Efesos 1:8
15. Jacaylka rumaystayaashu wuu sii badan karaa, Filiboy 1:26
16. Faanka rumaystayaasha oo bata Masiixa xagga Bawlos, Filiboy 1:26
17. Haysashada badnaanta, Filiboy 4:12,18
18. Ku adkaanta rumaysadka, Kolosay 2:7
19. Rumaystayaasha oo badiya jacaylka ay isu qabaan, 1 Tesaloniika 3:12
20. Badinta cibaadada, 1 Tesaloniika 4:1
21. Badinta jacayl ku socoshada rumaystayaasha, 1 Tesaloniika 4:10

Bawlos fahankii uu ka qabay nimcada Ilaah ee ku timid Masiixu, wuxuu ahaa mid badan, sidaas oo kale ayaa rumaystayaashana looga rabaa, inay ku socdaan badnaanshaha nimcada iyagoo nolol maalmeedkooda ku salaynaya.

▣ **“xogga Ruuxa Qoduuskaa.”** Ruuxa Quduuska ahi waxuu ka mid yahay Saddexmidnimada waanu shaqaynayaa, la’aantiisna waxba socon maayaan (15:19; 1 Korintos 2:4; 1 Tesaloniika 1:5). Eeg Mawduuca Gaarka ah 8:11.

## SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Maxay tahay xaqiiqada udub dhexaadka u ah ee uu ka hadlayo Rooma 14:1-15:13?
2. Maxay tahay sababta Bawlos uu aayadaha Axdiga Hore wax uugaga soo xiganaya aayadaha 9-13? Maxay tahay waxyaalaha ay xanbaarsanyihiin ee barayaani?

## FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 14-13

- A. Siyaabo badan ayaa xidhitaanka waraaqdani waxa uu uula mid yahay furitaankeeda, 1:8-15
1. Xagga ku ammaanista rumaysadkooda (1:8)
  2. Waxay difaacaysaa rasuulnimada Bawlos ee ah ku wacdina injiilka kuwa aan Yuhuudda ahayn (1:13,14).
  3. Waxay sheegaysaa Bawlos oo raba inuu booqdo Rooma (1:10,13)
  4. Waxay ka hadlaysaa doonista Bawlos ee ah inay ka caawiyaan sidii lagu gaadhi lahaa meelaha kale een lagaadhin weli (Spain, 1:13).
- B. Markale ayaa la sheegayaa khilaafkii u dhexeeyay rumaystayaashii kaniisaddii Rooma, waana midda sidoo kale lagaga hadlayo kitaabka Rooma, laakiin gaar ahaan cutubyada 9-11, 14:1-15:13.
- C. Waxa kaloo jirta arrin khusaysa rasuulnimadii Bawlos, waxaanu u muuqdaa sidii isaga oo is difaacaya waana sida ka muuqata aayadaha 15-19; 1:2,5.
- D. Fahan ahaan aayadahani qaybta aayadahani waxay koobsanaysaa labo mawduuca:
1. Rasuulnimada Bawlos, wacdintiisa ku waajahan kuwa aan Yuhuudda ahayn (aayadaha 14-21).
  2. Socdaalka Bawlos ee qorshihiisu yahay dhammays tirka ujeeddada uu u tegayo Rooma (aayadaha 22-33).

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAYADAHA 15:14-21

<sup>14</sup>Oo aniga qudhayduna waxaan idiin hubaa, walaalahayow, inuu wanaag idinka buuxo, oo laydinka buuxiyey aqoon oo dhan, oo aad kartaan inaad iswaanisaan. <sup>15</sup>laakiinse siyaalaha qaarkood dhiiranaan badan baan idiinku soo qoray inaan idin xusuusiyo, nimcadii xagga Ilaah layga siiyey aawadeed, <sup>16</sup>inaan dadka aan Yuhuudda ahayn u noqdo midiidinkii Ciise Masiix, anigoo shuqulka wadaadnimada u qabanaya injiilka Ilaah, in sadaqada dadka aan Yuhuudda ahayn la aqballo, iyadoo qodus lagaga dhigay Ruuxa Qoduuskaa. <sup>17</sup>Haddaba xagga Ciise Masiix waxaan leeyahay wax aan ku faano, waana wax ku saabsan Ilaah. <sup>18</sup>Waayo, kuma dhici doono inaan waxba ka hadlo wixii Masiixii iga dhex shaqeeyey mooyaane, dadka aan Yuhuudda ahayn addeeciddooda aawadeed, oo uu igaga dhex shaqeeyey hadal iyo camal, <sup>19</sup>oo uu ku sameeyey xogga calaamooyinka iyo yaababka, iyo xogga Ruuxa Qoduuskaa, oo sidaasaan injiilka Masiixa ugu wada wacdiyey Yerusaleem iyo hareerahaada iyo ilaa Illurikon. <sup>20</sup>Sidaasaan u hawaystay inaan injiilka ku wacdiyo meel aan Masiixa awil lagu magacaabin, si aanan ugu dul dhisin aasaaska nin kale dhigay. <sup>21</sup>laakiinse, sida qoran, Waxaa arki doona kuwo aan warkiisu u iman, Kuwii aan maqlinuna waa garan doonaan.

15:14

NASB

“Oo aniga qudhayduna waxaan idiin hubaa, walaalahayow”

NKJV

“imika aniga qudhaydun, walaalayaalow waxaan idiin hubaa ”

NRSV

“walaalahayow aniga qudhaydu waxaan ku kalsoonahay”

TEV

“saaxiibadayow: aniga qudhaydu waxaan idiin hubaa”

JB

“maaha inaan idin ka shakisanahay walaalayaalow, waxaanse idiin hubaa”

Erayga “anigu”(auto egō) luqadda Giriigta wuxuu tilmaamayaa adkayn. Bawlos haddaba, waxa uu ku ganacsanayahay oo ammaanayaa kaniisaddan.

Waxaanu ka sheegayaa saddex waxyaalood (1) waxay ahaayeen kuwo aad u wanaagsan; (2) Waxay lahaayeen aqoon badan; iyo (3) waxay awood u lahaayeen inay is waaniyaan. Haddaba, midda halkan laga fahmi karo ayaa waxay tahay, inaanu iyaga Bawlos u keenaynin farriin cusub balse uu rabay inuu sharraxaad ka siiyo warka wanaagsan ee horeba ay u aqbaleen (aayadda 15).

▣ **“inuu wanaag idinka buuxo”** sida “aniga” markii hore loogu adkeeyay hadalka, ayaa hadana “idinka” markale loogu adkeeyay. Haddaba, erayga “buuxa” (*mestos*) macnihiisu waa “laga buuxiyay” oo Bawlos eraygan labo jeer ayuu adeegsaday, labada jeerna waxa uu ku dhex adeegsaday Rooma (1:29; 15:14).

Erayga “buuxo” (*plēroō*) ayaa Bawlos waxa uu ku dhex adeegsaday Rooma (1:29; 8:4; 13:8; 15:13,14,19). Sidoo kale iyadoo ah magac *pleroma* ayuu ku dhex adeegsanayaa Rooma (11:12,25; 13:10; 15:29), laakiin sifo ahaan marnaba qoraalladiisa uuguma dhex adeegsanayo. Haddaba, Bawlos wuxuu rabay in injiilka oo dhammays tirani rumaystayaasha ka buuxsamo iyadoo ku daraya jacayl iyo adeegitaan. Masiixiyiintu waxay haystaan dhammaanba Masiixa waxay ku haystaan waxa ay u baahan yihiin, waana inay si dhammays tiran u aqbalaan oo qaataan damaanad qaadkan.

▣ **“inuu wanaag idinka buuxo, oo laydinka buuxiyey aqoon oo dhan”** waxa jira labo siyaabood oo ereyadan loo fahmi karo: (1) inay fahan ahaan la xidhiidhaan qaybta 14:1-15:13 –oo ah jacaylka Masiixiyiinta midkoodba kan kale u qaadi karo iyo guud ahaan xidhiidhka u dhexayn kara Masiixiyiinta ee Kitaabku sheegayo. Tani waxa ay tahay midda guud ahaan lagu tilmaami karo “wanaag” sida ka muuqata 14:16; 15:2; ama (2) arrinta la xidhiidha injiilka oo dhan ee ah rumaysadka iyo ku dhaqankiisa.

**15:15 “dhiiranaan badan baan idiinku soo qoray”** Bawlos waraaqdan uu Rooma u qorayay waxa uu kasoo qoray Korintos. Waxa haddaba lagu dhaleeceeyay sida waraaqihiisu u dhiirran yihiin, laakiinse shakhsi ahaan uu u tamarta yaryahay. Falkan ah “dhiiranaan” ayaa waxa laga heli karaa 2 Korintos 10:2,12; 11:21. Haddaba, dhiirranaanta Bawlos waxay ka timid rumaysadkiisa, yeedhitaankiisa iyo aqoonta uu u lahaa injiilka.

▣ **“nimcadii xagga Ilaah layga siiyey aawadeed,”** Bawlos waxa uu sheegayaa nimcada Ilaah (1:5; 12:3; 1 Korintos 3:10; 15:10; Galatiya 2:9; iyo Efesos 3:7-8) waana midda u yeedhay, ee badbaadisay, ee hadiyadda siisay ee sidoo kalena u dirtay inuu gaadho dadka aan Yuhuudda ahayn (11:13; 15:16). Waxay haddaba tani caddaynaysaa rasuulnimadiisa iyo amarradiisa (1:1,5).

**15:16 “midiidinkii...shuqulka wadaadnimada...u qabanaya.. la aqbaloo”** aayadaha 16-17 waxay koobsanayaan erayo wadaadnimada. “midiidin” waxa loo adeegsaday adeegga wadaadnimada sida ka muuqata aayadda 27. Waxa loo adeegsaday adeegga Masiixa sida ka muuqata Cibraaniyada 8:2. Haddaba, Bawlos waxa uu isu arkayay wadaad (Filiboy 2:17) kuwa aan Yuhuudda ahayn ugu adeegaya Ilaah, waxaanay taasi shaqada Israa’iiliyiinta (Baxniintii 19:5-6; Ishacyaah 66:20). Kaniisadda waxa la siiyay shaqadan wacdinta ah (Matayos 28:18-20; Luukos 24:47). Kaniisaddana waxa loo adeegsaday erayo wadaadnimada oo lagu adeegsan jiray Axdiga Hore, waana sida aan ka arki karno 1 Butros 2:5,9 iyo Muujintii 1:6.

▣ **“qoduus lagaga dhigay Ruuxa Qoduuskaa”** macneheedu waxa weeyi “qoduus lagaga dhigay oo lagagasii dhigi doono Ruuxa Quduuska ah.” waxa haddaba laga yaabaa inay markale ka hadlayso arrintii dhex taallay kaniisaddii Rooma ee u dhaxaysay rumaystayaashii Yuhuudda ahaa iyo rumaystayaashii aan Yuhuudda ahayn. Bawlos waxa uu haddaba si cad u qeexayaa in kuwa aan Yuhuudda ahayn, si buuxda loo aqbalay oo quduus loogaga dhigay Ruuxa Quduuska ah (1 Korintos 6:11).

**15:17-19** u firso falka midnimada ah ee ka dhexeeya Ilaaha Saddexmidnimada isku muujiyay: Ilaah (aayadda 17); Masiixa (aayadda 17) iyo awoodda Ruuxa (aayadda 19). Sidoo kale u firso sida saddexda Shakhsiyoodba uuga muuqdaan aayadda 30. Haddaba, in kasta oo erayga “Saddexnimo” aanu ahayn Kitaabi, aragtidu waxa weeyi (Matayos 3:16-17; 28:19; Falimaha Rasuullada 2:33-34; Rooma 8:9-10; 1 Korintos 12:4-6; 2 Korintos 1:21; 13:14; Efesos 1:3-14; 4:4-6; Tiitos 3:4-6; 1 Butros 1:2). Eeg Mawduuca gaarka ah ee ku saabsan Saddexmidmada 8:11.

**15:18-19** Bawlos waxa uu sheegayaa siyaabaha kala duwan ee adiigitaankiisa xagga kuwa aan Yuhuudda ahayni u ahaa mid saamayn ku leh oo ku muuqanaya (1) erayo; (2) camal falitaan; (3) calaamado; (4) mucjisooyin; iyo (5) dhammaanba awoodaha Ruuxa.

Waxa jirta iyadoo fiiro gaara loo yeelan karo kala duwanaanshaha qoraallada la xidhiidha #5, “Ruuxa”: qoraallada Giriigga ah qaarkood waxay raaciyaan “Ruuxa Quduuska ah,” qaarna waxay yidhaahdaan “Ruuxa Ilaah.” Haddaba, kala duwanaanshahani maaha mid wax saamayn ah ku keenay xaqiiqada ay aayadahani gudbinayaan.

**15:18 “dadka aan Yuhuudda ahayn addeeciddooda aawadeed”** Ilaah ujeedadiisu marwalba waxay ahayd dadka ka tarjumaya qaabkiisa iyo dabeecaddiisa. Haddaba, injiilka Masiixu waxa uu soo celinayaa muuqaalkii Ilaah ee ka dhex muuqday dadka laakiinse lumay sida aan ka akhrin karno Bilowgii 3. Cibaadada iyo ku xidhnaanshuhu wuxuu haddaba caddayn u yahay oo ka tarjumayaa dabeecadda Ilaah. ujeeddada Masiixiyadduna waxa weeyi in Ilaah xidhiidh lala yeesho, laguna noolaado nolol quduusnimo ku dheehan tahay.

▣ **“oo uu igaga dhex shaqeeyey hadal iyo camal”** waxay tani u noqonaysaa shaqadii Bawlos mana aha addeecitaankii Masiixiyiintii Roomaanka ahaa. Waxa ay haddaba si cad uula xidhiidhaa awoodda Ruuxa sida ka muuqata aayadda 19.

**15:19 “xoogga calaamooyinka iyo yaababka”** labadan eray waxay marar badan si wada jira uuga muuqanayaan Falimaha Rasuullada (14:8-10; 16:16-18, 25-26; 20:9-12; 28:8-9), waxaanay sheegayaan awoodda Ilaah ee ku shaqaynasa injiilka (2 Korintos 12:12). Run ahaantii lama garan karo mucjisooyinkan, laakiinse waxa laga yaabaa inay tilmaamayso Bawlos rasuulnimadiisii. Waayo sidii Ilaah ugu dhex shaqeeyay labo iyo tobankii xerta ahaa Yersaalem dhexdeeda, ayaa sidoo kale Bawlosna wuxuu u adeegsaday kuwa aan Yuhuudda ahayn.

▣ **“sidaasaan injiilka Masiixa ugu wada wacdiyey”** Waa shaqada wanaagsan ee *pleroo* (aayadda 14). Waxa ay markaas tilmaamaysaa in Bawlos uu rumaysnaa isaga oo dhammays tiray shaqadii wacdinta ahayd ee xagga bariga (aayadda 23).

▣ **“ilaa Illurikon”** Gobolkan Roomaanka ahaa waxa sidoo kale loo yaqaanay Dalmatia, waxaanu ku yaallay dhinaca bari ee Badda Adriatic oo ah galbeedka jasiirad u egta Macedonia. Haddaba, Falimaha Rasuullada laguma diiwaan gelin Bawlos oo halkaas ka shaqeeyay, laakiin kama fogaynayo goobahaas (Falimaha Rasuullada 20:1-2). “ilaa” waxa loogala jeedaa “xadka ilaa halkaas laga gaadho”.

**15:20 “Sidaasaan u hawaystay inaan injiilka ku wacdiyo meel aan Masiixa awil lagu magacaabin”** waxay ahayd istaraatijiyadii Bawlos ee ku waajahnayd adeeggiisa (1 Korintos 3:10; 2 Korintos 10:15-16). Waxaanu rabay inuu gaadho dadkii aan jaaniska u helin inay maqlaan injiilka. Wuu hadiyo jeer lahaa istaraatijiyad wayn oo ku aaddanayd dhulkii ay ka talin jirtay xukuumadda Roomaanku, iyadoo haddii kaniisad laga aas aaso ay gaadhi karto dadka ku dhow goobahaas.

**15:21** Waa xigasho lagasoo xigtay Septuagint (LXX) ee Ishacyaah 52:15 oo ka hadlaysay kuwa aan Yuhuudda ahayn oo maqlay wax ku saabsan Ilaah. Haddaba, Bawlos waxsii sheegistan wuxuu u doortay istaraatijiyada adeeggiisa.

#### **AAYADAHA 15: 22-29**

<sup>22</sup>Sidaas daraaddeed marar badan baa layga hor joogsaday imaatinkii aan idiin iman lahaa; <sup>23</sup>laakiinse haatan anigoo aan meelahakan meel dambe ku lahayn, oo idin boholyoobayay sannaddo badan inaan idiin imaado, <sup>24</sup>markaan Isbaanya tago waxaan rajaynayaa inaan socdaalkayga idinku arko oo idinna aad halkaas iga ambabixisaan, markaan cabbaar idinku raaxaysto dabadeed, <sup>25</sup>laakiinse haatan waxaan aadayaa Yerusaaalem inaan u adeego qoduusiinta. <sup>26</sup>Waayo, dadka Makedoniya iyo Akhaya waxay aad u jeclaysteen inay wax u ururiyaan masaakiinta ka midka ah qoduusiinta Yerusaaalem joogta. <sup>27</sup>Way jeclaysteen, waana ku waajib inay sameeyaan. Waayo, dadka aan Yuhuudda ahayn hadday noqdeen kuwo ka qayb galay waxyaalahooda ruuxa, de markaas waxaa ku waajib ah iyaga inay ugu adeegaan waxyaalaha jidhka. <sup>28</sup>Sidaas daraaddeed markaan tan dhammeeyo oo aan iyaga midhahan ku habsado, idinkaan idin soo mari doonaa, anoo Isbaanya u socda. <sup>29</sup>Oo waxaan ogahay markaan idiin imaado inaan ku iman doono buuxnaanta barakada Masiixa.

**15:22 “sidaas daraaddeed”** Sababtan waxa lagu sharaxay aayadda 20.

▣ **“marar badan baa layga hor joogsaday”** Waxa laga horjoogsaday markale iyo markale (1:13). Ciddii haddaba ka horjoogsatay lama sheegin, waxaanay noqon kartaa Ilaah, Shaydaanka, dadka sharka badan, amaba jaanisyada kale ee injiilka.

Xasuusnow Bawlos warqaddan Rooma wuxuu qoray markii uu joogay Korintos. Kuwii haddaba, kasoo horjeeday Bawlos ayaa isaga ku dhaleeceeyay, isaga oon awoodin inuu dhammays tiro qorshihisii socdaalka ahaa. Bawlos waxa saamayn ku yeeshay dhaleecayntii kaga imanaysay kaniisadda Korintos, waxaana laga yaabaa inuu sababtaas darteed u tibaaxay socdaalkiisa oo laga hor joogsaday marar badan.

**15:23 “laakiinse haatan anigoo aan meelahakan meel dambe ku lahayn”** Aayaddan waxa loosoo qaadan karaa goobihii xaddidnaa ee juquraafi ahaan ku yaallay Aasiyada Yar amaba goobihii Dhexe. Haddaba, Bawlosa dadka meelahan kuwada nool dhammaantood muu wada wacdiyin laakiin kuwo ka mida ayuunbuu wacdiyay.

▣ **“oo idin boholyoobayay sannaddo badan inaan idiin imaado”** Bawlos marar badan ayuu sheegay inuu rabo booqashada Rooma (1:10-15; Falimaha Rasuullada 19:21; 23:11).

Waxa jira haddaba qoraallo Giriig ah oo halkan ku kala duwan isla markaasna aan ku diiwaan gashanayn USB. Qoraaladii hore ee Giriigga MSS P<sup>46</sup>, x, A, D, F, G & L waxa ku qoran “badan”(polus) oo lagu dhex adeegsaday aayadda 22, laakiin MSS B, C & P waxay qorayaan “dhowr”(ikanos). Culimadii dambena waxay ku dhibtoodeen erayada aadka u badan ee Bawlos.

**15:24 “markaan Isbaanya tago”** Bawlos wuxuu rabay inuu tago dhinaca galbeed ee gobolladii ay ka talin jirtay Boqortooyada Roomaanku (2 Korintos 10:16). Waxa lagasoo daayay xabsi Roomaanku lahaa, waxaanu u tegay socdaalkiisii afraad ee ahaa adeegitaanka. Haddaba, waraaqaha 1 Timoteyos, 2 Timoteyos iyo Tiitos waxa la qoray socdaalkan dhexdiisa. Waxa macquula in middan loogu noqon karo 2 Timoteyos 4:10 halkaasoo qoraallada Giriigga N, C iyo Latin Vulgate iyo Coptic-ga tarjumaadhoodu qorayaan “Gaul.” Clement ga Rooma, oo qoray dhammaadkii qarnigii koobaad waraaqdiisii ahayd “Laterr to The Corinthians,” 5:7 ayaa sidoo kale sheegaya in Bawlos u socdaalay galbeedka.

**15:25 “u adeego qoduusiinta.”** Eraygan waxa in badan loo adeegsaday iyadoo xidhiidh la leh lacag uruurinta (aayadda 31; 1 Korintos 16:15; 2 Korintos 8:4; 9:1). Eeg Mawduuca Gaarka ah: Quduusiinta 1:7.

**15:26 “inay wax u ururiyaan masaakiinta ka midka ah qoduusiinta Yerusaaalem joogta”** Bawlos wuxuu ka helaayay waxyaabahan lasoo ururiyay (eeg Mawduuca Gaarka ah: *Koinonia* 12:13) sanado dhowra (1) Galatiya iyo Aasiyada Yar (1 Korintos 16:1-4), iyo (2) Macedonia iyo Acaia (2 Korintos 8-9). Waxaanu fikraddan ka helay kaniisaddii Antiyokh (Falimaha Rasuullada 11:30; 12:25). Waxaana loogala jeeday caawinta iyo midayna labadii garab ee kaniisaddii hore –Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn. kaniisadihii kuwa aan Yuhuudda ahayn waxa lagu tilmaamay “kuwo ku faraxsan” to do it (aayadaha 26 iyo 27). Eeg Mawduuca Gaarka ah.

## MAWDUUC GAAR AH: MASIIXIGA IYO GAAJADA

### I. Hordhac

- A. Gaajadu waa wax weligeed jooqta oo xasuus u ah aadanaha iyo abuurkaba.
- B. Gaajadu waa qayb ka mida dhibaataada iyo silica, waana wax gaar u ah aadanaha ee maaha Ilaah. inkasta oo Ilaah sheegay inuu dadka Axdigiisa ku abaal marin doono barwaaqo amaba halaag (Sharciga Kunoqoshadiisa 27-28), haddana waxa la odhan karaa dadka aan rumaystayaasha ahayn tani kuma dhaboobayn (Matayos 5:45). Gaajadu waxay tusaale dheeraada u tahay, damaacinimada iyo duni jacaylnimada aadanaha. Haddaba, dhibaataada gaajadu xaqiiqo ahaan maaha ta cuntada oo keliya, laakiinse waxa weeyi damaca iyo ujeeddooyinka ay mar walba aadanuhu baahida u qabaan.
- C. Gaajadu waxay jaanis u tahay aadanaha la cafiyay inay u muujiso jacaylka Ilaah. Masiixiyiintu ka jawaab celinta ay ka bixiyaan baahida ka jirta kaniisadda iyo dunidaba waxay tahay mid muujinaysa run ahaantii cidda ay yihiin.

### II. Waxyaalaha Baybalku ka sheegayo arrintan

#### A. Axdiga Hore

##### 1. Muuse

- a. Mid kamida saddexdii sannadoodba reer Israa'iil waxa waajib ku ahayd inay bixiyaan sadaqadda la siinayo dadka faqiirka ah (Sharciga Kunoqoshadiisa 14:28-29).
- b. Sharcigu wuxuu masaakiinta siiyay waxyaalo ay cunaan (Baxniintii 23:11; Laawiyiintii 19:10; 23:22; Sharciga Kunoqoshadiisa 24:19-22).
- c. Waxyaabaha Sharcigu wuxuu u gaar yeelay masaakiinta (Laawiyiintii 14:21)
- d. Israa'iiliyiintu waxay ahayd inay u naxariistaan masaakiinta (Sharciga Kunoqoshadiisa 15:7-11, Yoo'eel 29:16; 30:25; 31:16-23)

##### 2. Qoraalladii Xikmadda ahaa

- a. Waxa jirtay barako u gaara kuwa caawiya masaakiinta (Sabuurka 41:1)
- b. Caawinta masaakiintu waxay ka dhignayd Ilaah oo la caawiyay (Maahmaahyadii 14:31; 17:5; 19:17)

##### 3. Nebiyadii

- a. Ilaah wuxuu dalbaday in la caabudo iyo in loo naxariisto kuwa baahan (Ishacyaah 58:6-7; Miikaah 6:8)
- b. Calaamadaha farriinta Ilaah waxa lagu sheegay masaakiinta (Ishacyaah 61:1-2)
- c. Nebiyada Ilaah waxay kasoo horjeedeen dhibaataaynta bulshada (Caamoos 2:6-8; 5:10-13; Miikaah)

#### B. Axdiga Cusub

##### 1. Injiillada

- a. Waxa la waajibiyay caawinta masaakiinta (Markos 10:21; Luukos 3:11)
- b. Xukunka qiyaamuhu wuxuu ku salaysan yahay jacaylka aan isugu muujino Masiixa dartiis (Matayos 25:31-46)
- c. Markos 14:7 waxa si khaldan loogu fahmay iyadoo loo arkay Ciise inaanu danaynin masaakiinta. Haddaba, aayaddan macneheedu wuxuu tusinayaa sida isagu gaarka u yahay ee maaha inuu hoos u dhigayay masaakiinta.
- d. Ishacyaah 61:1-2 waxay ka hadlaysaa kuwa qaadanaaya farriinta Ilaah (Luukos 4:18; 7:22; 14:21)

##### 2. Bawlos

- a. Bawlos wuxuu Antiokh ka bartay arrinta khusaysa jacaylka loo fidinayo masaakiinta kaniisadda Yerusaaalem (Rooma 15:26; 1 Korintos 16:1; 2 Korintos 8:4,6,19; Galatiya 2).
- b. Bawlos wuxuu ka hadlayaa nimcada, rumaysadka iyo camalka (Efesos 2:8-10).

##### 3. Yacquub (Xikmadda Axdiga Cusub)

- a. Rumaysadka Masiixa eenu ku jirin danaynta bulshadu waa mid xanuunsanaya (Yacquub 2:14-



17)

b. Xitaa wuxuu sheegayaa in rumaysadka aan shaqada lahayni uu yahay wax dhintay!

4. Warqadda 1 Yooxanaa waxay ka hadlaysaa in damaanad qaadka Masiixinimadu uu yahay beddelitaanka nafta rumaysadka leh iyo adeegga (1 Yooxanaa 3:17-18).

### III. Gebogabada

A. Murugada aadanaha iyo baahida waxay la xidhiidhaan denbiga. Waxa jira hadaba dhinacyo badan oo gaajadu leedahay:

1. Dabecadda nacasnimada ah (Maahmaahyadii 19:15)

2. Ciqaabka Ilaah (Sharciga Kunoqoshadiisa 27-28)

3. Wax la xidhiidha adeegga ruuxiga ah (2 Korintos 11:27)

4. Dhacdooyin dhaqameedyada (damaca, fikradda guud, etc.)

B. Ilaah wuxuu dareeyeela dadka waxaanu si gaara u jecelyahay kuwa baahiyaysan!

C. Kaniisaddu waa jawaab bixinta Ilaah ee ku waajahan dadka baahiyaysan (jidh ahaan iyo ruux ahaan)

1. Jihayn, waxqabad shaqsi ahaaneed.

2. Wada shaqayn/ waxqabadka kaniisadda

3. Ururka siyaasadeed ee is beddelka

D. Waa inaan dhaqankeenna iyo shakhsiyaddeenaba ku qiimayno iftiinka Kitaabka (2 Korintos 8-9).

E. Waxaan u baahanahay in indheenna, qalbiyadeenna iyo gacmeheennuba u furnaadaan baahida aadanaha ee kaniisadda gudeheeda iyo dibaddeeda iyo dunida oo dhanba.

F. Caawimaaddu waa inay la xidhiidho sida aan ku nahay Masiixa inagoo ku socona Adeegga Wayn (Matayos 28:18-20). Caawimaduna waa inay isugu jirto mid jidh ahaaneed iyo mid ruux ahaaneed intaba.

**15:27 “haddii”** waa hadal shuruudeed qoraaga ku muujinayo ujeeddadiisa. Haddii kuwa aan Yuhuudda ahayni ka qayb qaataan barakadaynta Yuhuudda (Rooma 10-11) waa inay caawiyaan baahida jidh ahaaneed ee kaniisadda Yerusaaalem oo ah hooyada kaniisadaha.

**15:28**

**NASB**

**“markaan tan dhammeeyo oo aan iyaga midhahan ku hubsado”**

**NKJV**

**“markaan tan sameeyo oo aan iyaga ku hubsado midhahan”**

**NRSV**

**“markaan tan dhammays tiro, oo aan iyaga gaadhsiiyo waxan lasoo ururiyay”**

**TEV**

**“markaan dhammeeyo shaqadan oon iyaga ugeeyo lacagtan loosoo ururiyay ”**

**JB**

**“markaan tan dhammeeyo oo aan gaadhsiiyo waxan lasoo ururiyay”**

Waxay fahan ahaan ka tarjumaysaa sidii waxyaalahan iyagoo bad qaba loo gaadhsiiin lahaa meeshii loogu talo galay. Waxa laga yaabaa inay ahayd siyaabo uu rabay inuu lacagtan u diro isla markaasna lagu helo. Hubinta middani waxay sidoo kale ahayd masuuliyado dheeraada oo ka imanayay kaniisadihii wax soo ururiyay (Falimaha Rasuullada 20:4).

**15:29** u fiirso erayga *plēroō / plērōma* markale ayaa la adeegsaday. Eeg fiirada gaarka ah ee aayadda 14.

### **AAAYADAHA 15:30-33**

<sup>30</sup>Walaalayaalow, waxaan idinku baryayaa Rabbigeenna Ciise Masiix iyo jacaylka Ruuxa, inaad igula dadaashaan tukashooyinkiinna markaad Ilaah ii baridaan. <sup>31</sup>in layga samata bixiyo kuwa caasiyiinta ah oo Yahuudiya jooga, iyo in hawshayda aan Yerusaaalem u qabanayo ay noqoto mid ay qoduusiintu aqbalaan: <sup>32</sup>inaan farxad idiinku imaado haddii Ilaah doonayo. oo aan idinla nasto. <sup>33</sup>Ilaaha nabaddu ha idinla jiro kulligiin. Aamiin.

**15:30 “waxaan idinku baryayaa... inaad igula dadaashaan”** waxa jira erayo xooggan oo Giriig ah. ka hore waxa sidoo kale lagu adeegsaday 12:1. Ka labaadna waxa loo adeegsaday Ciise markii uu joogay Getsemane. Bawlos waxa uu haddaba dareensanaa baahida uu u qabo tukashada shakhsi ahaantiisa iyo shaqadiisa ah injiilka (2 Korintos 1:11; Efesos 6:18-20; Kolosay 4:3; 1 Tesaloniika 5:25; 2 Tesaloniika 3:1). Waayo aragnimadiisii adkayd ee Yerusaalem (aayadda 31). Wuxuu yimid Rooma, laakiin may noqonin sidii uu ka filanayay.

**15:30-33** Bawlos tukashadiisu waxay ku waajahan tahay saddex waxyaalood: (1) Inuu ka badbaado cadaawayaashiisa ku sugan Juda (Falimaha Rasuullada 2:22-23); (2) in hadiyadda ay soo dhiibaan kuwa aan Yuhuudda ahayni si fiican loogu gudoomi doona Yerusaalem (Falimaha Rasuullada 15:1; 21:17); iyo (3) inuu soo booqdo Rooma marka uu u socdo Spaaniya.

**15:30 “inaad igula dadaashaan”** ereyadan halkan oo keliya ayaa lagaga dhex adeegsaday Axdiga Cusub. Waxay ka kooban yihiin *sun* (wada jir) iyo *agōnizomai* (la dadaalis, 1 Korintos 9:25; Kolosay 1:29; 4:12; 1 Timoteyos 4:10; 6:12). Waxay haddaba arrintani kaniisadda Rooma ka dalbanaysaa inay kala tukadaan sidii kaniisadda Yerusaalem looga soo dhowayn lahaa sadaqaddii ay soo ururiyeen dadka aan Yuhuudda ahayni.

**15:31 “kuwa caasiyiinta ah”** Waxay tilmaamaysaa Yuhuuddii kasoo horjeeday, laakiin maaha guud ahaan kaniisadda (11:30,31).

**15:32** Bawlos tukashadiisu waxya ku dhammaanaysaa labo codsi oo dheeraad ah: (1) inuu iyaga uugu yimaaddo farxad iyo (2) inuu helo wakhti uu kula nasto iyaga (*sunanapauomai* , halkan oo keliya Axdiga Cusub dhexdiisa, laakiin waxa lagu dhex adeegsaday Ishacyaah 11:6. Bawlos wuxuu kusoo xigtay Ishacyaah 11:1, 10 aayadda 12). Bawlos wuxuu u baahna wakhti nasasho ah oo uu la qaaato Masiixiyiinta qaan gaadhka ah (2 Korintos 4:7-12; 6:3-10; 11:23-33)! Laakiinse muu helin waayo wuxuu galay xabsi.

**15:33 “Ilaaha nabaddu”** Waa magac cajiib leh oo Ilaah iska leeyahay (6:20; 2 Korintos 13:11; Filiboy 4:9; 1 Tesaloniika 5:23; 2 Tesaloniika 3:16; Cibraaniyada 13:20).

▣ **“Aamiin”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:25.

## SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sidee Axdiga Hore faa’iido ugu leeyahay rumaystayaasha Axdiga Cusub (aayadaha 4-5; 1 Korintos 10:6,11)?
2. Muxuu Bawlos xigashooyinka uga soo qaatay Axdiga Hore aayadaha 9-12 dhexdooda? Waa maxay xaqiiqada wayn ee ay ina barayaan?
3. Qaybtan ka midka ah Rooma halkee ayay ka muuqan kartaa arrintii u dhexaysay Yuhuudda iyo kuwa aan Yuhuudda ahayn?
4. Qaybtan halkee ayaa ay kaga muuqan kartaa arrinta khusaysa rasuulnimada Bawlos?
5. Maxay ahayd sababta Bawlos uu kaniisada aan Yuhuudda ahayn uugaga soo uruurinayay lacagta si loogu taageero kaniisadda Yerusaalem (aayadaha 15-28)?
6. Maxay ahayd istaraatiijiyada Bawlos ee ku waajahnayd adeeggiisa? Maxay ahayd sababtuu u rabay inuu aado Isbaaniya?
7. Sidee iyo sababtee ayuu Bawlos shaqadiisa uugu tilmaamayaa wadaad (aayadda 16) iyadoo la xidhiidha wadaadnimadii Israa’iiliyiinta (Baxniintii 19:5-6) amaba kaniisadda (1 Butros 2:5,9; Muujintii 1:6)?
8. Ilaah ma ka jawaab bixinayaa tukashada Bawlos ee aayadaha 30-33?

# ROOMA 16

QAYBAHA BAARAGARAAFYADA EE TARJUMAADAHHA CASRIGA AH				
UBS <sup>4</sup>	NKJV	NRSV	TEV	NJB
Salaan gaar ahaaneed	Waxa lagula taliyay walaashii Foybi	Salaan	Salaan gaar ahaaneed	Salaan iyo rajo wacan
16:1-2	16:1-2	16:1-2	16:1-2	16:1-2
	Salaanta qoduusiinta Rooma			
16:3-16	16:3-16	16:3-16	16:3-5a 16:5b-7 16:8-11 16:12-15 16:16	16:3-5a 16:5b-16
	Iska ilaalinta kuwa wax kala qaybiya		Tilmaan bixinta ugu danbaysa	Waano iyo fiir ugu horrayna
16:17-20	16:17-20	16:17-20	16:17-20a 16:20b-21	16:17-20
	Salaan ka timid Bowlos saaxiibbadiis			Salaanta ugu danbaysa iyo fiirada labaad
16:21-23	16:21-24	16:21 16:22 16:23	16:22 16:23	16:21-23
Isku xidhka	Duco		Ammaan iyo duco xidhitaan ah	Isku xidhka
16:25-27	16:25-27	16:25-27	16:25-26 16:27	16:25-27

## AKHRINTA TAXANAHA SADDEXAAD

### IYADOO LA RAACAYO UJEEEDADA ASALKA AH EE QORAAGA

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Hal mar u fadhiiso cutubkan oo akhri, kaddibna mowduucyada kala soo bax oo waxaad barbar dhigtaa shanta tarjumadood ee casriga ah. Waxaad ogsoonaataa qaybinta aayaduhu inaanay ahayn waxyi, laakiinse waxa weeyi furaha lagu raaci karo ujeeddada qoraaga, taasina ah halbowlaha fasiraadda.

1. Baaragaraafka koowaad
2. Baaragaraafka labaad
3. Baaragaraafka saddexaad
4. IWM

## FAHANKA MACNAHA GUUD EE AAYADAHA 1-27

- A. U fiirso dumarka lagu sheegay qaybtan xidhitaanka ah dhammaantood waxay ahaayeen kuwo Bawlos raacsan oo kala shaqeeya u adeegitaanka injiilka (Filiboy 4:3): Foybi aayadda 1; Bariska aayadda 3; Maryan aayadda 6; Yuniyas aayadda 7; Tarufayna iyo Tarufoosa aayadda 12; Bersis aayadda 12; “hooyadii” aayadda 13; Yulya aayadda 15; iyo “walaashiis” aayadda 15. Haddaba ka digtoonow inaad la yaabto doorka dumarku ka qaadan karaan adeegga, maxaa yeelay dhammaanba rumaystayaasha mid waliba hadiyad ayuu leeyahay ( 1 Korintos 12:7,11), adeegga dhammayska tiran (Efesos 4:12). Baybalku wuxuu sheegayaa haddaba inuu ninku yahay madaxa sare iyadoo taasi tahay doonista Ilaah. haddaba, halkan waxa aan ku arki karnaa dumar wadaado ahaa sida Foybi, waxa kaloo suurto gala rasuulnimada haweenka, Yulya (Yoo’eel 2:28; Falimaha Rasuullada 2:16-21). Haddaba way adagtahay marka xagga kitaabka la eego sida arrinta loo maamulo, sababtuna waa marka la eego isku xidhnaanshaha Bawlos sida 1 Korintos 11:4-5 marka la barbar dhigo 14:34.
- B. U fiirso suurta galnimada xidid ahaaneed ee magacyadan
1. Yuhuud Masiixiyiin ah: Aquila, Prisca, Andronicus, Junias, Mary (MSS qaarkood waxay qorayaan Mariam)
  2. Magacyo qoysas Roomaan ah: Prisca, Ampliatius, Apelles, Narcissus, Julia, Philologus;
  3. Magacyo qoysas Yuhuuda: Aristobulus, Herodion.
- C. Aayadaha 1-16 waxa weeyi salaantii shakhsi ahaaneed ee Bawlos, halka aayadaha 17-20 ay ka yihiin xidhitaanka iyo ka degitaanka macallimiinta beenta ah. aayadaha 21-23 kooxda adeegga ayaa salaan kasoo dirayaa Korintos.
- D. Falaqaynta cutubka 16 ee *Tundale New Testament Commentary* oo uu qoray F, F, Bruce waa mid ku caawin kara, haddii aad rabto hage dheeraada oo faah-faahsan, waxaanad ka heli kartaa bogagga 266-284.
- E. Waxa jira xoogaa shaki ku jira meesha ay waraaqdu ku xidhmayso. Xidhitaanku dhowr jeer ayuu ka muuqanayaa dhammaadka cutubyada 14, 15 (MS P<sup>46</sup>) iyo 16, marka la eego qoraaladii hore ee Giriigta. Si kastaba ha ahaatee xidhitaanka 16:25-27 wuxuu ka muuqanayaa MSS P<sup>61</sup>, N, B, C iyo D iyo sidoo kale qoraalka Giriigga ah ee laga adeegsaday Clement-ga Rooma (A. D. 95).  
Aayadda 24 kama muuqanayso qoraaladii hore ee Giriigta, P<sup>46</sup>, P<sup>61</sup>, x, A, B, C, amaba Latin Vulgate amaba qoraallada Giriigta ee Asalka u ahaa Alexandria. Faahfaahinta dheeraadka ah ee ku saabsan farqiga u dhexeeya arrimahan eeg kitaabka uu qoray Bruce M. Metzger, *A Textual Commentary on the Greek New Testament*, pp. 533-536.

## BARASHADA ERAYADA AAYADAHA IYO WEEDHAHA

### AAAYADAHA 16:1-2

<sup>1</sup>Waxaan idin barayaa walaasheen Foybi oo ah mid u adeegta kiniisadda ku taal Kenekhreya, <sup>2</sup>inaad iyada ku dhowaysaan Rabbiga, sida qoduusiinta u eg, oo aad ku caawintaan wax kasta oo ay idiinka baahan tahay, waayo, iyaduba kuwa badan bay caawintay iyo xataa aniga qudhayda.

**16:1** “Waxaan idin barayaa” tani waa waraaqdii kula talinta ahayd ee Foybi, waxaanay waraaqda Bawlos u qaaday Rooma. Waxa jira tusaalayaal kale oo la mida waraaqdan talo bixinta ah oo ka muuqanaya Axdigta Cusub (Falimaha Rasuullada 18:27; 1 Korintos 16:3; 2 Korintos 3:1; 8:18-24; iyo Filiboy 2:19-30).

▣ “Foybi” Magaceeda macnihiisu waxa weeyi “iftiin” ama “farxad.”

▣

**NASB, NKJV** “oo ah mid u adeegta kiniisadda”  
**NRSV** “oo kaniisadda adeegto ka ah”  
**TEV** “oo kaniisadda u adeegta”  
**JB** “oo u adeegta kaniisadda”

Eraygan ah *diakonos* luqada Giriigga waxa uu yahay macnihiisu adeege. Waxa xitaa loo adeegsaday Masiixa, sida ka muuqata 15:8 iyo Bawlos sida aan ka arki karno Efesos 3:7; Kolosay 1:23,25.

Waxa jirta haddaba caddayn laga heli karo Axdiga Cusub iyo qoraaladii kaniisaddii hore isla markaasna tilmaamaya adeegenimada. Tusaale kale oo ku saabsan haweenka iyo doorka ay ka geli karaan adeega ayaa Axdiga Cusub waxa ay tahay “doorka carmalka” ee wadaadnimada ( 1 Timoteyos 3:11; 5:3-16). Tarjumaadda RSV ayaa waxay qoraysaa “adeege” aayadda 16:1. NASB iyo NIV ayaa iyaguna waxay qorayaan qormo gaaban. NEB isna wuxuu qorayaa “xafiiis hayaha.” Haddaba, dhammaan Masiixiyiinta waa loo wada yeedhay waxayna leeyihiin hadiyadda, adeegitaanka dhammayska tiran (Efesos 4:12). Qaarkoodna waxa loogu yeedhay doorka hoggaaminta adeegga, laakiin marwalba waa inuu dhaqan inoo ahaado Kitaabka Quduuska ahi.

M. R. Vincent, ayaa kitaabkiisa *Word Studies* vol. 2, pp. 752 iyo 1196, wuxuu ku sheegayaa in sharciga rasuulnimada, ee uu u noqonaya qarnigii labaad amaba ilaa bilowgii qarnigii saddexaad uu kala soocayo waajibaadka iyo adeegyada haweenka caawinaya kaniisadda.

1. Adeeganimo
2. Carmalka (1 Timoteyos 3:11; 5:9-10)
3. Bikradaha (Falimaha Rasuullada 21:9 iyo inay suurto gal tahay 1 Korintos 7:34).

Waajibaadkani wuxuu koobsanayaa:

1. Daryeelka kuwa buka
2. Daryeelka kuwa jidh ahaan la dayriyey
3. Booqashada kuwa xabsiga uugu jira rumaysadkooda dartiis
4. Waxbarista rumaystayaasha cusub
5. Gacan ka gaysashada baabtiiska haweenka
6. Ka warhaynta haweenka xubnaha ka ah kaniisadda

## **MAWDUUC GAAR AH: HAWEENKA IYO BAYBALKA**

### **I. Axdiga Hore**

#### **A. Dhaqan ahaan, dumarka waxa lagasoo qaaday hanta.**

1. Waxa lagu daray hantida (Baxniintii 20:17)
2. Ula dhaqanka gabadh addoon ah (Baxniintii 21:7-11)
3. Dhaaraha haweenka iyo masuuliyadda ragga (Tirintii 30)
4. Dumarka oo lagu kala dhici jiray dagaallada (Sharciga Kunoqoshadiisa 20:10-14; 21:10-14)

#### **B. Waxaa jirtay naxariis**

1. Ragga iyo haweenkaba waxa laga sameeyay ekaanshaha Ilaah (Bilowgii 1:26-27)
2. Aabbe iyo hooyo daacad ah (Baxniintii 20:12 [Sharciga Kunoqoshadiisa 5:16])
3. Aabbaha iyo hooyada (Laawiyiintii 19:3; 20:9)
4. Rag iyo dumarba waxay gali karaan nidarka Nadiirka (Tirintii 6:1-2)
5. Gabdhuhu waxay xaq u leeyihiin dhaxalka ( Tirintii 27:1-11)
6. Waa ka qayb dadka axdiga (Sharciga Kunoqoshadiisa 29:10-12)
7. Aabbe iyo hooyo waxbaris leh (Maahmaahyadii 1:8; 6:20)
8. Wiilashii iyo gabdhihii Haamaan ee macbadka ka tumi jiray muusigga (1 Taariikhiihii 25:5-6)
9. Wiilka iyo gabadhuba waxay sii sheegi doonaan da'da cusub (Yoo'eel 2:28-29).

#### **C. Haweenku waxay ka tirsanaayeen hoggaanka**

1. Muuse walaashiis Maryan, waxa lagu magacaabay nebiyad (Baxniintii 15:20-21)
2. Gabadha waxa hadiyad loo siiyay ka qayb qaadashada dhimaha meesha macbadka uugu

quduusaysan (Baxniintii 35:25-26)

3. Gabadhii Deborah waxay ahayd nebiyad ( Xaakinnada 4:4), hoggaamisay qabiillada oo dhan (Xaakinnada 4:4-5; 5:7)
4. Huldaah waxay ahayd nebiyad boqorkii Josiyaah ugu yeedhay inay akhrido oo fasirto “Buuggii Sharciga ”(2 Boqorradii 22:14; 2 Taariikhii 34:22-27)
5. Ruud waxay ahayd gabadh cibaado badan,
6. Boqorad Esteer, waxay ahayd gabadh cibaado leh oo Yuhuudda ku badbaadisay Aasiya.

## II. Axdiga Cusub

A. Dhaqan ahaan haweenka Yuhuudda iyo Roomaankuba waxay ahaayeen kuwo ka xquuq yaraa ragga.

B. Haweenka iyo doorka hogaanka

1. Elizabeth iyo Maryan, waxay ahaayeen dumar cibaado leh (Luukos 1-2)
2. Anna waxay ahayd gabadh cibaado leh oo Macbadka u adeegta (Luukos 2:36)
3. Ludiya waxay ahayd Masiixiyad hoggaamin jirtay kaniisad guriyeed (Falimaha Rasuullada 16:14,40)
4. Filibos afartiisii gabdhood waxay ahaayeen nebiyo (Falimaha Rasuullada 21:8-9)
5. Foybi, waxay ahayd adeegaha kaniisaddii Kenekhreya (Rooma 16:1)
6. Prisca (Priscilla), oo la shaqayn jirtay Bawlos macallina ahayd (Falimaha Rasuullada 18:26; Rooma 16:3)
7. Mary, Tryphaena, Tryphosa, Persis, Julia, Nereus walaashii, iyo dumarkaloo badan (Rooma 16:6-16).
8. Junia (KJV), waxa suurto gala inay ahayd rasuulad (Rooma 16:7)
9. Euodia iyo Syntyche, oo la shaqayn jiray iyana Bawlos (Filiboy 4:2-3)

## III. Sidee Masiixiga wakhtigan jooga u dheelli tiri karaa tusaalayaasha Baybalka ee kala duwan?

A. Sidee farqiga kala duwan ee taariikheed amaba dhaqan ahaaneed ee ku saabsanaa qoraalka asalka ahi, u noqon karaa mid uga dhex shaqayn kara kaniisadaha oo dhan, iyo Masiixiyiinta wakhti walba?

1. Waa inaan qaadano ujeeddada asal ahaaneed ee qoraaga loo waxyooday, maxaa yeelay Baybalku waa erayga Ilaah, waana ilaha rumaysadka iyo ku dhaqmitaanka.
2. Waa inaan si cad uugu fiirsano xaaladaha taariikh ahaaneed ee ku sugan aayadaha waxyiga ah.
  - a. Nidaam diineedkii Israa'iil (Falimaha Rasuullada 15; Galatiya 3)
  - b. Yuhuuddii qarnigii hore
  - c. Hadalladii Bawlos ee la xidhiidhay taariikhda, ee 1 Korintos
    - (1) Nidaamkii sharci ahaaneed ee kuwii aan diinta lahayn (1 Korintos 6)
    - (2) Addoon sii ahaanshaha ( 1 korintos 7:20-24)
    - (3) Doobnimada ( 1 Korintos 7:1-35)
    - (4) Bikirnimada ( 1 Korintos 7:36-38)
    - (5) Hilibka la qalay sanamyada ( 1 Korintos 10:23-33)
    - (6) Waxyaalaha aan ku wanaagsanayn Cashada Rabbiga (1 Korintos 11)
3. Ilaah wuxuu shaqsi ahaan isugu muujiyay dhaqan gaara, iyo maalin gaara. Haddaba, waxa la inaga rabaa inaan waxyiga Ilaah si dhab ah u qaadanno, laakiin maaha wax waloo taariikh ahaan la xidhiidha waxyiga Ilaah inaan qaadanno.

B. Fasiraadda Kitaabka Quduuska ah waa in laga raaco ujeeddadii asalka ah ee qoraaga. Maxaa la odhan jiray maalmihiisii? Arrintani haddaba waa mid muhiim u ah fasiraadda haboon. Laakiin marka fasiraadda aan ku dabaqno wakhtigeennan aan joogno dhibaato ayaa imanaysa, tusaale ahaan imika xagga hoggaaminta ee haweenka oo kale. Waxa la odhan karaa xaggee dumarku hogaamiyaal ku ahaayeen? Adeegayaal ku ahaayeen (Rooma 16:1) iyadoo hogaamiyayaal loo arkayo? Waxa haddaba muuqata in Bawlos uu ku dhex sheegay 1 Korintos 14:34-35 iyo 1 Timoteyos 2:9-15, in dumarku aanay hoggaamin karin caabudaadda dadka badani isugu imanayaan. Laakiinse sideen arrintaas maanta uugu dabaqi karnaa? Ma raba in aniga dhaqankayga amaba dhaqanka Bawlos uu aamusiiyo erayga Ilaah iyo doonistiisa. Waxa suurto gal ah in Bawlos maalmihiisii wax waliba xadidnaayeen, laakiin maanta wax waliba aad ayay u furfuran yihiin. Raaxo kuma dareemayo inaan idhaahdo Bawlos ereyadiisa iyo waxbaristiisu waxay ahayd mid shuruudo ku xidhan yihiin qarnigii koowaad, marka la eego xaaladaha xaqiiqo ahaan ka dhex taagan bulshada. Yaan ahay anigu markaan dhaqankayga kaga gees noqonayo qoraaga loo waxyooday?!

Si kastaba ha haatee, maxaa samayn karaa marka ay jiraan waxyaabo tusaalayaal ku saabsan hoggaaminta dumarku (xitaa iyadoo ka muuqata qoraallada Bawlos, Rooma 16)? Tusaalaha ugu fiican

ee arrintani waxay tahay, Bawlos oo kaga hadlay goobaha guud ee cibaadada 1 Korintos 11-14. Sida ka muuqata 11:5 waxay u muuqataa isaga oo haweenka u ogolaanaya inay wax wacdiyaan haddii madaxoodu dedan yahay, laakiinse aayadaha 14:34-35 wuxuu ka dalbanayaa inay ay aamusnaadaan! Waxa jiray adeegayaal (Rooma 16:1) iyo nebiyado (Falimaha Rasuullada 21:9). Haddii markaas aan tilmaamo Bawlos waxyaabaha uu ka sheegay arrintan oo ku koobnayd Korintos iyo Efesos qarnigii koowaad. Haddaba, labada kaniisadoodba waxa ka taagneyd dhibaato haweenka ka haysatay inay ku dhaqmaan xorriyadda ay haystaan (eeg kitaabka uu qoray Bruce Minter, *Corinth After Paul Left*), taasoo dhibaato ku keentay kaniisaddoodu inay Masiixa ku gaadhan dadkooda. Waxayna ahayd in xorriyaddoodu xadaysnaato si injiilku u noqdo mid saamayn dheeraada yeesha.

Haddaba wakhtigaygan anigu aan joogaa wuxuu yahay mid kasoo horjeeda wakhtigii Bawlos. Wakhtigaygan injiilku wuxuu noqon karaa mid xadaysan haddii aan tumarka tabobarka qaba aan loo oggolaanin inay injiilka dadka la wadaagaan oonay wax hoggaaminin! Maxay tahay haddaba ujeeddada aan xadka lahayn ee caabudaadda guud ahaaneed? Miyaanay ahayn wacdin iyo xer kasoo dhigis? Ilaah miyuu ku farxi karaa hogaamiyayaasha haweenka ah? Guud ahaan Kitaabku wuxuu u muuqdaa isaga oo waafaqsan arrintaas!

Waxaan rabaa inaan waafaqo Bawlos; waayo fiqigaygu waa mid asal ahaan raacsan Bawlos. Ma rabo inay isaamayso oon raaco fikirka cusub! Si kastaba ha ahaatee, waxaan dareemayaa kaniisadda oo ka gaabisay inay ka jawaab bixiso xaqiiqooyinka ku sugan Kitaabka, sida addoonisga oon bannaanayn, takoorka iyo kalasoooca. Sidoo kale kaniisaddu waxay ka gaabisay, inay si haboon uga jawaab celiyaan dhibaataaynta haweenka ee wakhtigan casriga ah. Ilaah Masiixa ayuu xor kaga dhigay addoonka iyo haweenkaba.

Waxa kaloon intaa raacinayaa maadaama oon fasiraa ahay: waxaan ogsoonahay in kaniisaddii Korintos ay dhibaato badani haysatay. Abaal marino soo jiidasho leh ayaa la bixiyay oo lasoo ban dhigay, waxaana laga yaabaa in dumarka arrinta lagu qabtay. Sidoo kale waxaan rumaysanahay Efesos ay sameeyeen macallimiin been ah, kuwaasoo ka faa'iidaynayay dumarka iyagoo u adeegsanayay kaniisadihii guryaha Efesos (1 iyo 2 Timoteyos).

C. Soo jeedin ku saabsan akhrisyo dheeraad ah

1. *How to Read the Bible For All Its Worth* leeyahayna Gordon Fee iyo Doug Stuart (pp. 1-77)
2. *Gosbel and Spirit: Issues in New Testament Hermeneutics* leeyahayna Gordon Fee
3. *Hard Sayings of the Bible* oo uu leeyahay Walter C. Kaiser, Peter H. Davids, F. F. Bruce iyo Manfred T. Branch (pp. 613-616; 665-667).

▣ **“Kaniisad”** Eeg Mawduucan Gaarka ah:

#### **MAWDUUC GAAR AH: KANIISAD (EKKLESIA)**

Erayga Giriigga ah ee *ekklesia* wuxuu ka yimid labo eray, “banaan” iyo “yeedhay,” haddaba, macno ahaan waxa weeyi kuwa loo yeedhay. Kaniisaddii hore waxay eraygan kasoo qaateen adeegsi caadi ah (Falimaha Rasuullada 19:32,39,41). Maadaama oo adeegsiga Septuagint ee eraygani ahaa “uruuritaan” xagga Israa’iiliyiinta (Tirintii 16:3; 20:4). Waxay u adeegsadeen sidii iyaga oo sii wada dadkii Axdiiga Hore ee Ilaah. Waxay ahaayeen Israa’iisha cusub (Rooma 2:28-29; Galatiya 6:16; 1 Butros 2:5,9; Muujintii 1:6), ahna dhammays tirka ujeeddada Ilaah ee ku waajahan dunida (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Matayos 28:18-20; Luukos 24:47; Falimaha Rasuullada 1:8).

Eraygan siyaabo kala duwan ayaa marar badan loogu dhex adeegsaday Injiillada iyo Falimaha Rasuullada

1. Kulan caadi ah, Falimaha Rasuullada 19:32,39,41
2. Dadka Masiixiyiinta ah ee Ilaah, Matayos 16:18 iyo Efesos
3. Kulanka Masiixiyiinta, Matayos 18:17; Falimaha Rasuullada 5:11 (kaniisadda Yerusaaalem sida aayadahan ka muuqata)
4. Isu imaatinka dadkii Israa’iil, Falimaha Rasuullada 7:38, Istifaaniyoos.
5. Dadka Ilaah ee ku sugan gobol, Falimaha Rasuullada 8:3 (Yuhuudiya amaba Falastiin).

▣ **“Kenekhreyā”** Waxay ahayd mid ka mida labadii dekadood ee Korintos, waxaanay tani ahayd dhinaca bari (Falimaha Rasuullada 18:18).

**16:2 “inaad iyada ku dhowaysaan Rabbiga”** waxa weeyi macneheedu inaad iyada kusoo dhowaysaan naxariis iyadoo marti ah ( Filiboy 2:29). Bawlos wuxuu ku kalsoonaa gabadhan waxaanu rabay inay kaniisaddu soo dhoweyso iyada.

▣ **“qoduusiinta”** Waxa loogala jeedaa “kuwa qoduusiinta ah.” haddaba ma tilmaamayso oo keliya sida Masiixiyiintu quduuska ugu yihiin xagga Masiixa oo keliya, laakiinse waa sidoo kale qof cibaado leh, oo ku dhaqmaya dabeecadda iyo la midnimada Masiixa. Erayga “quduus” hadiyo goor waxa loo adeegsaday jamac ahaan marka laga reebo sida ay uugu jirto Filiboy (4:21) laakiin xitaa markaas waxa jira macno isku mida oo ka dhexeeya. Masiixi inaad noqoto macneheedu waxa weeyi, inaad ka qayb noqoto bulshada rumaysadka leh ee isku qoyska ah. haddaba, kaniisadda casrigan jooqta ee reer galbeedku waxay hoos u dhigeen iskashigan xaqiiqo ahaan Kitaabku dhigayo! Eeg Mawduuca Gaarka ah: qoduusiinta 1:7.

▣ **“ku caawintaan wax kasta oo ay idiinka baahan tahay”** waxay middani xanbaarsnaan kartaa labo macne. Kan koobaad waa *paristemi*, oo macneheedu yahay “inaad gargaar kula garab istaagtaan.” Midda labaadna waa, *chrezo*, macneheeduna waa “inaad ka caawisaan wixii ay idiinka baahato”(2 Korintos 3:1). Waxay ahayd haddaba tani ujeeddada waraaqaha la talinta ah.

▣

NASB, NKJV	“iyaduba kuwa badan bay caawintay”
NRSV	“kuwo badan bay kaalmayn jirtay”
TEV	“iyada lafteeduba dad badan ayay saaxiib wanaagsan u ahayd”
JB	“waxay daryeeshay dad badan”

Eraygan ah, *proistatis*, halkan oo keliya ayaa laga dhex heli karaa Axdiga Cusub dhexdiisa. Waxay haddaba tilmaami kartaa caawimaad jidh ahaaneed iyo mid dhaqaale ahaaneed intaba. Sidoo kale eraygan asal ahaan waxa loo adeegsadaa qof hodana oo dhaqaale ku deeqa. Haddaba maadaama oo Foybi ay u socdaalaysay Rooma (aayadda 1) iyo maadaama oo ay dad badan caawisay (aayadda 2), middani taariikh ahaan run ayaa ay u noqon kartaa iyada.

#### AAAYADAHA 16:3-16

<sup>3</sup>Igu salaama Bariska iyo Akula kuwa iila shaqeeya Ciise Masiix, <sup>4</sup>oo noloshayda aawadeed qoortooda u dhibay. Keligay uma mahad naqayo, laakiinse kiniisadaha dadka aan Yuhuudda ahayn oo dhammuna ay ku mahad naqayaan. <sup>5</sup>Iguna salaama kiniisadda gurigooda ku jirta. Igu salaama gacaliyahay Ebaynetos, kan ah midhaha ugu horreeya ee Aasiya xagga Masiixa. <sup>6</sup>Maryanna igu salaama, tan aad idiinku dadaashay. <sup>7</sup>Igu salaama Andaronikos iyo Yuniyas oo xigaalkayga ah oo layla xidhay, kuwa caanka ku ah rasuullada dhexdooda, kuwa hortayna Masiixa ku jiray. <sup>8</sup>Ambaliyas, gacaliyahayga xagga Rabbigana igu salaama. <sup>9</sup>Urbanos kan Masiixa noola shaqeeya iyo gacaliyahay Istakhusna igu salaama. <sup>10</sup>Abellees kan Masiixu u bogayna igu salaama. Kuwa reer Aristobulosna igu salaama. <sup>11</sup>Xigaalkay Herodiyosna igu salaama. Iguna salaama kuwa reer Narkisos oo Rabbiga ku jira. <sup>12</sup>Turufayna iyo Turufoosa oo Rabbiga u shaqeeyana igu salaama. Gacaliso Bersis oo Rabbiga aad ugu shaqaysayna igu salaama. <sup>13</sup>Igu salaama Rufus kan Rabbigu doortay iyo hooyadiis oo hooyaday oo kale ah. <sup>14</sup>Igu salaama Asunkaritos. iyo Filegoon, iyo Hermees, iyo Batrobas, iyo Hermaas, iyo walaalaha iyaga la jooga. <sup>15</sup>Igu salaama Filologos, iyo Yulya, iyo Neere'us. iyo walaashiis, iyo Olumbas, iyo qoduusiinta iyaga la jooga oo dhan. <sup>16</sup>Midkiinba midka kale ha ku salaamo dhunkasho qoduus ah. Kiniisadihii Masiixa oo dhammu waa idin soo salaamayaan.



**16:3 “Bariska iyo Akula”** Luukos wuxuu iyada ku magacaabayaa “Bariskill.” Waxa xitaa laga hor magacaabay ninkeeda (Falimaha Rasuullada 18:18, 26; 1 Korintos 16:19; 2 Timoteyos 4:19). Haddaba Bawlos iyo labadan isqabaa waxay ahaayeen adeegayaasl, Bawlosna wuxuu iyaga ku magacaabayaa “adeegayaal raacsan Ciise Masiix.” Waxaana laga yaabaa xoogsanaanta amaba taag yaraanta kaniisadda Roomaanka inuu ka maqlay labadan shaqsiyadood.

**16:4 “oo noloshayda aawadeed qoortooda u dhibay.”** Waxa erayan loo adeegsadaa “meesha qoorta lagaga jaro qofka dilka lagu fulinayo.” Haddaba, Baybalku ma sheegayo waxa uu Bawlos ereyadan ugalaa jeeday.

**16:5 “kaniisadaha”** Waxay tilmaamaysaa dadka ee maaha dhismayaasha kaniisadda. Waxa macneheedu markaas yahay “kuwa loo yeedhay.” Axdiga Hore ee ku qoran luqada Giriigga, Septugint-ga (LXX), waxa eraygan loogu dhex adeegsaday tarjumaadda erayga Cibraaniga ah ee *qahal*, oo loo tarjumay “uruuritaan.” Haddaba, kaniisaddii hore waxay isu arkayeen, inay yihiin dhammays tirka Axdiga Hore “isu uruuritaankii Israa’iil,” manay ahayn koox falaago ah. Eeg Mawduuca Gaarka ah 16:1.

▣ **“kaniisadda gurigooda ku jirta.”** Masiixiyiintii hore waxay ku kulmi jireen guryaha (16:23; Falimaha Rasuullada 12:12; 1 Korintos 16:19; Kolosay 4:15 iyo Filemon 2). Oo dhismayaasha kaniisaduhuna may soo if bixin ilaa laga soo gaadhay qarnigii saddexaad.

▣ **“Ebaynetos”** Magaciisa ninkan waxa macnihiisu yahay “la ammaanay.”

▣ **“kan ah midhaha ugu horreeya”** Waxa sidoo kale lagu tilmaamay kuwii joogay guriga Istefanaas 1 Korintos 16:15.

▣ **“ee Aasiya”** waxa lagu tilmaami jiray gobolkii Roomaanka ahaa oo ahaa saddex meelood marka loo qaybiyo meel ahaan waddanka Turikiga ee maanta.

**16:6 “tan aad idiinku dadaashay”** lama yaqaano qofkan, waxaana laga yaabaa inay ka mid ahayd adeegayaashii kaniisaddii Roomaanka. Haddaba, waxa jira Masiixiyiin badan oo cibaado leh isla markaasna aynaan aqoon, laakiinse Ilaah yaqaano.

**16:7 “oo layla xidhay”** Culimada casriga ahi ma hubaan qofka la tilmaamayo inuu la xidhnaa. Bawlos haddaba, in badan ayaa wuxuu la silcay rumaysadkiisa ( 2 Korintos 4:8-11; 6:4-10; 11:25-28). Wuxuu xabsi kaga jiray Filibbi, Kaysariya, Rooma, iyo meelo kale (Efesos, 1 Korintos 15:32; 2 Korintos 1:8).

▣ **“Yuniyas”** Magacani wuxuu noqon karaa dheddig amaba lab, waxaana lagu garan karaa dhawaaqa. Waxa jirana kala kala duwanaansho xagga luqada Giriigga ah “*Iouanian*,” waxa laga heli karaa MSS  $\alpha$ , A, B, C, D, F, G & P, laakiin malaha calaamad xagga dhawaaqa ah oo ay leeyihiini. Dhawaaqa dhediga ah waxa laga heli karaa MSS B<sup>2</sup>, D<sup>2</sup>, iyo 0150. Qoraaladii hore ee P<sup>46</sup> iyo kuwo ka mida Vulgate iyo Coptic tarjumaadooda iyo sidoo kale qoraallada Giriigga ee Jerome waxa dhigayaan “*Ioulian*” oo ah dheddig. Haddaba, culimada qaar ayaa u malaynaya inay arrintani tahay khaladaad xagga qoraalka ka yimid. Qaabka dheddiga ah ee magacan ayaa haddaba waxa uu ku soo dhex arooray aayadda 16:15, waxaana suurto gal ah in labada qofba lagu dhex magacaabay aayadda 7 (1) halkaasoo labo Yuhuud ahi ay la xidhnaayeen Bawlos; (2) walaal nin ah iyo walaal gabadh ah; amaba (3) nin iyo naag is qaba. Haddii uu yahay dheddig iyo haddii erayga “rasuulo” uu tilmaamayo adeegsi ka baxsan “Labo iyo tobankii xerta ahaa” markaa waxay noqonaysaa rasuulad dumar ah.

Waxa kaloo iyana xiiso leh qoraalka magaca “Junias” inaan meelnaba lagaga helaynin qoraallada Roomaanka, laakiin magaca “Junia” wuxuu ahaa mid aad caan u ah, waxuuna ahaa magaca qoys Roomaan ah. faahfaahin dheeraada oo ku saabsan adeeggitaanka haweenka, waxaad ka eegtaa *Women Leaders and the Church*, waxaana iska leh Linda L. Belleville, pp. 188 footnot 42.

▣

**NASB “kuwa caanka ku ah rasuullada dhexdooda”**

**NKJV** “kuwa laga yaqaanay rasuullada dhexdooda”  
**NRSV** “waxay caan ka dhexyihiin rasuullada dhexdooda”  
**TEV** “waxa si fiican looga dhex yaqaanaa rasuullada”  
**NJB** “kuwa rasuullada u caanka ah”

Waxay tilmaami kartaa Labo iyo tobankii rasuul, haddii sidaas ay tahayna labadoodan waxaya si fiican u yaqaanay rasuullada, amaba waxay noqon kartaa adeegyo “rasuullada” loo yaqaanay inay iyaga si fiican u yaqaaneen (Falimaha Rasuullada 14:4, 14; 18:5; 1 Korintos 4:9; Galatiya 1:19; Filiboy 2:25; 1 Tesaloniika 2:6). Sidoo kale macnuhu wuxuu noqon karaa mid si dadban loogu adeegsan karo, sida Efesos 4:11, laakiin asal ahaan waxa loogala jeedaa Labo iyo tobankii Rasuul. Eeg Mawduuca gaarka ah: diris (Apostello) 1:1.

▣ **“kuwa hortayna Masiixa ku jiray”** Waxa si cad ay u tilmaamaysaa inay iyagu ahaayeen kuwo badbaadada Masiixa ka hor helay Bawlos intii aanu isagu helin markii uu ku socday Dimishiq.

**16:8-16** Magacyada aayadahan ka dhex muuqdaa waa kuwo aanay culimadu aqoonin. Waxay ahaayeen kuwo Ilaah jecelyahay sidoo kalena Bawlos jeclaa, laakiin magacyadooda iyo adeegga ay qaban jireeni kumuu soo dhex aroorin Axdiga Cusub amaba qoraaladii Masiixiyiintii hore. Haddaba, waxa la yaab badan iyadoo ay isku dhex jiraan magacyo addoomo iyo kuwo Roomaana iyo sidoo kale kuwo Yuhuud ah. waxay isugu jireen rag iyo dumarba. Waxa kaloo jiray kuwo hodan ahaa oo xornoqday iyo wacdiyayaal socdaalay. Waxa kaloo iyana jiray kuwo kasoo jeeday dhul qalaad sida Aasiya. Haddaba, dhammaanba Masiixiyiintu waxay hoos imanayaan kaniisadda Masiixa (3:22; 10:12; Yoo’eel 2:28-32 [Falimaha Rasuullada 2:14-21]; 1 Korintos 12:11; Galatiya 3:28; Kolosay 3:11)!

**16:8 “Ambaliyas”** Magacani wuxuu la mid yahay Briska iyo Yuniyas, waxaanu ahaa qoys Roomaan oo si fiican loo yaqaanay.

▣ **“gacaliyahayga xagga Rabbiga”** Erayga “gacaliye ama jeclahay” Ilaah ayaa u adeegsan Ciise oo ah Wiilka, sida ka muuqanaysa Matayos 3:17 iyo 17:5, waxaanu noqon karaa in yar oo ka mida Midiinka uu qorayo Ishacyaah ( Matayos 12:18, kanasoo xiganaya Ishacyaah 42:1). Haddaba, Bawlos wuxuu u adeegsanayaa rumaystayaasha (1:7; 16:8,9; 1 Korintos 4:14,17; 15:58; Efesos 6:21; Filiboy 2:12; Kolosay 4:7,9,14; 1 Timoteyos 6:2; Filemon aayadda 16).

**16:9 “Urbanos”** magacan macnihiisu waxa weeyi “magaalo jooge” ama “magaalo nooced.”

▣ **“Masiixa”** Waa eray inbadan soo laabta, waxaana loogala jeedaa noola jira “Rabbiga daraaddiis,” cutubkan oo dhan. Maxaa yeelay adeegayaashaan Masiixiyiinta ah oo dhammi waxay xubin ka yihiin qoys keliya iyo badbaadiye keliya.

▣ **“Istakhusna”** Waa magac gaara oon aad loo adeegsanin macnihiisuna yahay “dheg” (ta gellayda). Baadhitaannada taariikhdana waxa lagu helay in magacani uu la xidhiidho qoyskii Kaysar.

**16:10 “kan Masiixu u bogayna”** Erayadani waxay tilmaamayaan ka raacay ee rumaysadna yeeshay kuna sugan. Eeg Mawduuca Gaarka ah ee 2:18.

▣ **“Kuwa reer”** Culimada qaarkood ayaa sheega in middani ay tilmaamayso addoomada u adeega Aristobulos, oonay ahayn xubno qoys ah sidaasoo kalena waxa ah aayadda 11, waana ku ah “reer Narkisos.”

▣ **“Aristobulos”** Culimada qaarkood ayaa sheega inuu ahaa Herodos Agribba (oo dilay sida aan ka arki karno Falimaha Rasuullada 12 dilay Yacquub). Haddii markasa ay sidaasi tahay, waxay ina tusinaysaa sida injiilku u dhex galay qoyskan boqortooyada ahaa.

**16:11 “Herodiyos”** Waxa laga yaabaa inuu ahaa midiidinka qoyskii Herodos.

▣ **“kuwa reer Narkisos”** Waxa laga yaabaa inay yihiin midiidannadii caanka ahaa ee Boqor Kalawdhiyas. Haddii sidaas ay tahayna, waxay tusinaysaa sida injiilku u dhex galay qoyska boqortooyada Roomaanka.

**16:12 “Turufayna”** magacan macnihiisu waa “naxariis badane.”

▣ **“Turufoosa”** Magacan macnihiisu waa “jilicsan.”

▣ **“u shaqeeyana”** Waxay tusinaysaa oo loo adeegsadaa qofka shaqeeya “ilaa uu ka daalayo.”

▣ **“Bersis”** Macnehiisu waa “naag Aasiyaan ah”

**16:13 “Rufus”** Magacan macnihiisu waa “cas” ama “madax-case.” waxa jiray nin Rufus la yidhaa oo caan ahaa Roomana ku noolaa (Markos 15:21). Haddii lagu tilmaami lahaa inuu kaas yahay lama hubo, laakiin wuu noqon karaa isaga.

▣

NASB	<b>“kan Rabbigu doortay”</b>
NKJV, NRSV	<b>“Rabbigu uu doortay”</b>
TEV	<b>“ku wanaagsan u adeegista Rabbiga”</b>
JB	<b>“adeegaha la doortay ee Rabbiga”</b>

Macno ahaan waa “ka la doortay.” Halkan haddaba loogalama jeedo yeedhitaanka Ilaah oo keliya, laakiinse waxa soo hoos galaya qaab nololeedkiisa iyo adeeggiisa lagu doortay. Sidoo kalena hooyadiis si wayn oo wanaagsan ayay uula dhaqantay Bawlos.

**16:14 “Hermees”** kani waa magaca ilaaha nasiib wanaagga. Waxaanu ahaan magac addoon oo guud ahaan laga qarnigii ugu horreeyay laga adeegsan jiray dhulkii Roomaanka iyo Giriiggaba.

**16:15 “iyo qoduusiinta iyaga la jooga oo dhan”** Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:7

**16:16 “dhunkasho qoduus ah”** Ma jirto caddayn tusinaysa wakhtigii hore cid is dhunkatay iyo wakhtiga iyo meesha ay ahaydba. Sinagoogyada dhexdooda salaantii la isku salaami jiray ayaa kaniisaddana la isku salaami jiray, waxaanay ahayd in raggu isku dhunkan jireen dhabannada, halka haweenkuna ay iyana iska dhunkan jireen (1 korintos 16:20; 2 Korintos 13:12; 1 Tesaloniika 5:26; 1 Butros 5:14). Haddaba, dhaqankan is dhunkashada ah ayaa dhibaato kaga timid kaniisadda, waxaana si qaldan u fahmay dadkii aan rumaysadka lahayn, sidaasi darteedna waa la joojiyay.

#### **AAAYADHA 16:17-20**

<sup>17</sup>Haddaba walaalayaalow,. waxaan idinka baryayaa inaad fiiro u lahaataan kuwa kicinaya iskala qaybinta iyo xumaatoyinka oo ka geesta ah cilmiga aad barateen, kana leexda iyaga. <sup>18</sup>Kuwa caynkaas ahu Rabbigeenna Masiix uma adeegaan. Laakiinse waxay u adeegaan calooshooda; hadalkooda macaan oo wanaagsan bay ku khiyaaneeyaan qalbiyada jaahiliinta. <sup>19</sup>Warkii addeeciddiinnu wuxuu gaadhay dadka oo dhan. Sidaas daraaddeed aad baan idiinku faraxsanahay. Laakiin waxaan jeclaan lahaa inaad garaad u lahaataan waxa wanaagsan, oo aad ka eedla'aataan waxa sharka ah. <sup>20</sup>Oo Ilaaha nabaddu Shaydaan buu haddiiba cagihinna hoostooda ku burburin doonaa. Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla jirto.

**16:17** Digitaankani waxaad mooddaa inuu si aan la filanaynin u jarayo hadalkii socday. Haddaba, waxa jiray waxyaabo ka mida waxbarista beenta ah oo ay diiwaan gelinayaan aayadaha 17-18.

1. Waxay dhiirri geliyeen ikala qaybinta
2. Waxay caqabadeeyeen rumaystayaasha
3. Waxay barayeen waxyaalo liddi ku ah waxbarista kaniisadda
4. Waxay u shaqaysanayeen danahooda
5. Waxay hadal dabacsan iyo waxyaabaha la midka ah ku khiyaanaynayeen dadka aan aqoonin iyaga.

Haddaba, waxyaalahani maaha kuwo la xidhiidha taag yarida iyo xoogganaanta rumaystayaasha 14:1-15:13

▣ **“kana leexda iyaga”** Waa fal muhiima oo larabo in si dhaqso ah loo qabto. Waa muhiimadda markale aan ka arki karno (Galatiya 1:8-9; 2 Tesaloniika 3:6,14; 2 Yooxanaa 10).

**16:18**

NASB, NRSV,

TEV

**“calooshooda”**

NKJV

**“hungurigooda”**

NJB

**“danohooda”**

Fahan ahaan waa “calooshood u shaqaystayaal” (Filiboy 3:19; Tiitos 1:12). Macallimiinta beenta ahi wax walba waxay ku saleeyeen waxa naftoodu jeceshahay.

▣ **“hadalkooda macaan oo wanaagsan bay.”** Macallimiinta beenta ahi hadiyo goorba waa kuwo dadka soo jiita oo u muuqda kuw wanaagsan (Kolosay 2:4). Sidoo kalena hadiyo goor hadalkoodu wuxuu u muuqdaa caqli gal. Haddaba, ka digtoonow! Waxaana waxyaabo lagu garan karo macallimiinta beenta ah isla markaasna Baybalku inoo sheegayo, sida aan ka arki karno Sharciga Kunoqoshadiisa 13:1-5; 18:22; Matayos 7; Filiboy 3:2-3, 18-19; 1 Yooxanaa 4:1-6.

▣ **“ku khiyaaneeyaan qalbiyada jaahiliinta”** Waa fal taagan oo tilmaamaya khiyaanada socota. Waxay hadiyo jeer sidan ku sameeyaan rumaystayaasha cusub amaba aan khibaradda lahayn (“aan khibaradda u lahayn sharka”).

**16:19 “Warkii addeeciddiinnu wuxuu gaadhay dadka oo dhan”** Waxa sidan lagu sheegay 1:8. Waana mid ka mida hadallada hadiyo goorba Bawlos adeegsan jiray.

▣ **“inaad garaad u lahaataan waxa wanaagsan, oo aad ka eedla'aataan waxa sharka ah”** Waxay tusinaysaa waxbaristii Ciise (Matayos 10:16; Luukos 10:3).

**16:20 “Ilaaha nabaddu”** Waa magac Ilaah leeyahay (15:33; 2 Korintos 13:16; Filiboy 4:9; 1 Tesaloniika 5:23 iyo Cibraaniyada 13:20).

▣ **“Shaydaan buu haddiiba caghiinna hoostooda ku burburin doonaa”** Waxay u noqonaysaa Bilowgii 3:15. Rumaystayaashu xidhiidhka ay la leeyihiin Masiixa ayaa siin doona guusha ( 1 Yooxanaa 5:18-20). Waana ballan qaad iyo masuuliyad layaab badan. Qoraalka aayaddan waxa ka dhex muuqda Shaydaanka oo sabab looga dhigay wareerka iyo iskala qaybinta ka imanaysa macallimiinta beenta ah, taasi oo luminaysa ujeeddadii kaniisadda. Haddaba, macallimiinta beenta ah waxa ka danbeeya Shaydaanka. Injiilkuna wuxuu mugdiga sharka ka fogaynayaa dhammaanba kuwa ku dhaqma ee la noolaada. Waxa jira kitaab fiican oo arrintan ku saabsan waana *Three Crucial Questions About Spiritual Warfare*, waxaana qoray Clinton E. Arnold.

#### **MAWDUUC GAAR AH: SHARKA SHAKHSI AHAANEED**

Kani waa mawduuc adag siyaabo dhowra aawadood:

1. Axdiga Hore muu muujinin cadaw kasoo horjeeda wanaagga, laakiin wuxuu muujiyay adeegaha YHWH oo aadanaha ku xidhiidhinaya kuna eedaynaya xaqnimo la'aan.
2. Fikradda ah cadawtnimada Ilaah uu leeyahay waxay ka timid saamaynta diintii Aasiyaanka (*Zoroastrianism*), waxaanay saamayn ku yeelatay Yuhuudda.
3. Axdiga Cusubi wuxuu si dhammaystiran u sii horu marinayaa aragtida Axdiga Hore, laakiinse wuxuu ku salaynayaa dabaqado kalasocan.

Si kastaba ha ahaatee, daraasaynta amaba barashada sharka qayb ka mida oon ahayn Kitaabka, ayaa waxay yihiin kuwo laga ay ka hadlaan diimaha bariga, kadibna Axdiga Cusub waxa calaamad ka dhex noqday, waxyaalaha ay aaminsanaayeen Aasiyaanka iyo Roomaanku.

Haddii markaas qof rumaysadkiisu uu yahay mid ku salaysan waxyiga ku sugan Qoraallada Quduuska ah, Axdiga Cusubi wuxuu noqonayaa dhammaystirka waxyiga. Masiixiyiinu waa inay iska ilaaliyaan waxyaalaha dhaqan ahaan Yuhuuddu aaminsan yihiin iyo waxyaalaha kale ee ay sheegayaan qoraallada reer galbeedku (

Dante, Milton) marka la qeexayo waxa Kitaabku arrinta ka qabo. Waxaa haddaba jirta in xagga waxyiga marka la eego arrintani ay tahay mid qarsoon. Ilaah muu dooranin inuu wada muujiyo dhammaanba dhinacyada khuseeya sharka asalkiisa, ujeedadiisa, laakiinse waxa uu muujiyay waxyeelladiisa.

Axdiga Hore dhexdiisa erayada la xidhiidha Shaydaanka ama eedeeyayaasha waxa loo kala saaraa saddex kala duwan:

1. Eedeeyayaasha aadanaha (1 Samuu'eel 29:4; 2 Samuu'eel 19:22; 1 Boqorradii 11:14,23,25; Sabuurka 109:6).
2. Eedeeyayaasha malaa'igaha (Tirintii 22:22-23; Sekaryaah 3:1)
3. Eedeeyayaasha jinniga (1 Taariikhihii 21:1; 1 Boqorradii 22:21; Yexesqeel 13:2)

Haddaba, kitaabka Bilowgii 3 ayaa ah meesha lagu tilmaamay Shaydaanka (Book of Wisdom 2:23-24; 2 Enoch 31:3), manay intaas kaddib jirin waxay rabbaaniyiintu ka samayn karaan arrintan ( *Sot* 9b iyo *Sanh* 29a). “wiilasha Ilaah” ee Bilowgii 6 ayaa malaa'igo ku noqday I Enoch 54:6. Haddaba, arrintan uumaan tilmaamin, inaan ka hadlo saxsanaanteeda fiqi ahaaneed, laakiin waxa weeyi si aan u muujiyo heerarkii ay soo martay. Axdiga Hore dhexdiisa waxyaalahan ka shaqaynayay ayaa haddaba Axdiga Cusubi waxa uu ku sheegay malaa'ig sharlayaal ah (Shaydaan) sida aan ka heli karno 2 Korintos 11:3; Muujintii 12:9.

Haddaba, asalka sharka la magacaabay waxa adag amaba aan caqli gal ahayn, in lagu dhex qeexo Axdiga Hore. Sabab ka mida arrintan ayaa waxay ahayd Israa'iiliyiinta ( 1 Boqorradii 22:20-22; Wacdiyaha 7:14; Ishacyaah 45:7; Caamoos 3:6). Waxwalbana waxa lala xidhiidhin jira oo lagu Ilaah oo waxwalba maamula (Ishacyaah 43:11; 44:6,8,24; 45:5-6, 14, 18, 21, 22).

Ilaaha macluumaadka suurto galka ahina waxay diiradda saarayaan (1) Ayuub 1-2 halkaasoo shaydaanku uu yahay mid ka mida “wiilasha Ilaah” (malaa'igaha) ama (2) Ishacyaah 14; Yexesqeel 28 halkaasoo meel ku dhow boqortaayada bari tusaale ahaan loogu adeegsan jiray faanka Shaydkaanka ( 1Timoteyos 3:6). Waxaan haddaba fikiro isku dhex jira ka haystaa arrintan. Yexesqeel waxa uu tusaale ahaan u adeegsanayaa Beer Ceeden mana aha boqor Turos oo Shaydaanka keli ahaan lagu tilmaamayo (Yexesqeel 28:12-16), laakiinse waxa sidoo kale loo adeegsaday boqorka Masar oo lagasoo qaaday sida Geedka Garashada Xumaanta yo Wanaagga (Yexesqeel 31). Si kastba ha ahaatee Ishacyaah 14, gaar ahaan aayadaha 12-14, waxay u muuqdaan iyaga oo tilmaamaya malag caasinnimo sameeyay isagoo isla wayn. Haddaba, haddii uu rabo inuu inoo muujiyo dabeecadda gaarka ah ee Shaydaanka, waxay tahani middani arrin aad u maldahan.

Kitaabka uu qoray Alfred Edersheim (*The Life an Times of Jesus Messiah*, vol. 2, XIII [pp. 748-763] iyo XVI [pp. 770-776]) ayaa waxay leeyihiin rabbaaniyiinta Yuhuudda ahayd waxa saamayn ku yeeshay waxyaalihii Aasiyaanku aaminsanayeen. Haddaba, rabbaaniyiintu maaha ilo xaqiiqo oo arrintan loogu noqon karo. Ciise Masiixna waxa uu wuxuu ahaa mid kasoo jeeday waxbaristii ay ku samayn jireen Sinagooga. Waxaan filayaa fikiri rabbaaniyiintu ka haysteen dhexdhexaadinta malaa'igta iyo kasoo horjeedsashada Sharciga Muuse lagu siiyay Buur Siinay dusheedu, inuu furay fikirka ah cadowga malaa'igta ah ee Ilaah iyo kan aadanaha. Labadii ilaah ee uugu sarreeyay ilaahyada Iraaniyiinta (*Zoroastraian*) labonimada, *Ahkiman* iyo *Ormaza*, khayrka iyo sharka, ayaa saamayn ku yeeshay Yuhuudda kana dhigay inay sameeyaan labonimo xaddidan oo ah Yahweh iyho Shaydaanka.

Hubaashii Axdiga Cusub ayaa wuxuu isna ka waramayaa sharka, laakiin maaha sidii ay rabbaaniyiintu ka amaansanaayeen si lamid ah. tusaalaha ugu wanaagsan ee loo soo qaadan karo farqiga u dhexeeyaana waa “dagaal samada dhexdeeda ah.” dhicista Shaydaankuna waa caqligal, laakiin sigaara looma sheegin. Xitaa waxyaalaha laga sheegay waa kuwo dedan (Muujintii 12:4,7,12-23). Inkasta oo haddaba Shaydaanka laga adkaaday oo loo soo mustaafuriyay dhulka, ilaa hadda wuxuu u hawl gala isagoo ah adeegaha Yahweh (Matayos 4:1; Luukos 22:31-32; 1 Korintos 5:5; 1 Timoteyos 1:20).

Waa inaan haddaba xad u yeelno u fiirsashadeenna ku aaddan mawduucan. Waxa jirta jarribaad shaqsi ahaaneed iyo mid sharka xaggiisa ah, laakiinse marwalba waxa jira hal Ilaah oo aadanahuna iyaga ayaa ah kuwa ka masuulka ah waxa ay dooranayaan. Waxa jira loollan xagga ruuxa ah ka hor badbaadada iyo dabadeedba, sidaasi darteedna guushu waxay ku iman kartaa kuna sugnaan kartaa marka la raaco Ilaah isku muujiyay Saddexmidnimada. Sharkana waa laga adkaaday waxanu noqon doonaa mid meesha laga saaro!

▣ **“Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla jirto.”** Waa guud ahaan mid ka mida sida Bawlos usoo xidho hadalkiisu (1 Korintos 16:23; 2 Korintos 13:14; Galatiya 6:18; Filiboy 4:23; Kolosay 4:18; 1 Tesaloniika 5:28; 2 Tesaloniika 3:18 iyo Muujintii 22:21). Waxa suurto gal ah haddaba inuu gacantiisa ku qoray, waxaanay ahayd miduu hadiyo goorba waraaqihiisa kusoo celceliyo ( 2 Tesaloniika 3:17; 1 Korintos 16:21; Kolosay 4:18).

**AAYAADDA 16:21**

<sup>21</sup>**Waxaa idin soo salaamaya Timoteyos oo ila shaqeeya, iyo Lukiyos. iyo Yasoon, iyo Soosibater, iyagoo ah xigaalkayga.**

**16:21-23** Aayadahani waa kuwo tilmaamaya mansabka amaba shaqooyinka ay kala hayaan. Haddaba, Bawlos kuwii la shaqayn jiray ayaa salaantooda kasoo diraya Korintos.

**16:21 “Lukiyos”** wuxuu noqon karaa (1) Luukos kii dhakhtarka ahaa (Kolosay 4:14), amaba waxa suurto gala inuu ahaa “qof aad u aqoon sarreeya”; (2) Lukiyoskii reer Kuranya (Falimaha Rasuullada 13:1); amaba (3) Masiixi aan lagaranaynin.

▣ **“Yasoon,”** Waa Yasoonkii Bawlos uu joogay gurigiisa markii uu joogay Tesaloniika (Falimaha Rasuullada 17:5-9).

▣ **“Soosibater”** Wuxuu noqon karaa Soosibaterkii ina Burhus sida aan ka arki karno Falimaha Rasuullada 2:4.

**AAYADDA 16:22**

<sup>22</sup>**Anigoo Tertiyoos ah oo warqaddan qoray. Rabbigaan idinku salaamayaa.**

**16:22 “Anigoo Tertiyoos ah oo warqaddan”** Bawlos waraaqihiisa qoraa (*amanuensis*) ayuu u adeegsaday ( 1 Korintos 16:21; Galatiya 6:11; Kolosay 4:18; 2 Tesaloniika 3:17). Waxaan filayaa Bawlos in aragga indhihiisu liitay oonu awoodi karaynin inuu wax ku qoro waxyaalaha yaryar ee ay ka midka ahaayeen waraaqihii wakhtigaas jiray amaba haragyadii wax lagu qorna kjiiray (Galatiya 6:18).

**AAYADAHA 16:23-24**

<sup>23</sup>**Gayos, oo aniga iyo kiniisadda oo dhammuba aannu marti u nahay, wuu idin soo salaamayaa. Erastos oo ah qasnajiga magaalada, iyo walaalkeen Kowartos way idin soo salaamayaan.** <sup>24</sup>**Nimcada Rabbigeenna Ciise Masiix ha idinla jirto kulligiin. Aamiin.**

**16:23 “Gayos”** Wuxuu noqon karaa (1) Gayos Tiitos Yuustos ka Falimaha Rasuullada 18:7; (2) Gayoskii reer Derbe (Falimaha Rasuullada 19:29; 20:4; 1 Korintos 1:14); amaba (3) Gayoska ku jira 3 Yooxanaa aayadda 1.

▣ **“o aniga iyo kiniisadda oo dhammuba aannu marti u nahay”** Rumaystayaasha qaarkood waxay haysteen ilo u saamixi kara inay socdaalsiiyaan adeegyada, qaarkoodna sida ninkan oo kale waxay haysteen guryo la isugu yimaaddo. Haddaba, kaniisad guriyeedyadu waxa la adeegsan jiray in ka badan boqol sano. Eeg Mawduuca Gaarka ah: Kaniisad (*Ekklesia*) 16:1.

▣ **“Erastos oo ah qasnajiga magaalada,”** Waxa sidoo kale lagu dhex sheegay Falimaha Rasuullada 19:22; 2 Timoteyos 4:20. Waxaanu lahaa adeeg socdaalay oo la xidhiidha Bawlos.

▣ **“Kowartos”** Magacani waa Laatiini macnihiisuna waa “afraad.” Waxa suurto gala inay walaalo ahaayeen Tertiyoos oo laatiin ahaan macnihiisu yahay “saddexaad”(aayadda 22).

**16:24** Aayaddani kuma jirto qoraaladii hore ee Giriigta, P<sup>46,61</sup>, Ⓝ, A, B, C, iyo 0150. Waxaana laga dhex helay kuwo ka mida qoraallada Giriigga kadib 16:23 iyo kuwo kaloo ka danbeeya 16:27. Waxaa muuqata asal ahaan inaanay la jirin Bawlos, waanay ka maqantahay tarujumaadaha NASB, NRSV, TEV iyo NJB. Haddaba, UBS<sup>4</sup>

wuxuu ku tiranayaa si “hubaala” (A) loo tirtiray. Waa isku day u dhow warqadda waxaanay la xidhiidhaa dhibaataada isku xidhka gebogebada cutubyada 14,15 iyo 16.

**AAYDAHA 16:25-27**

**<sup>25</sup>Haddaba ammaanu ha u ahaato kan kara inuu idinku xoogeeyo injiilkayga iyo wacdiga ku saabsan Ciise Masiix iyo muujinta qarsoodiga oo qarsoonaa tan iyo weligiis, <sup>26</sup>laakiinse haatan lagu muujiyey Qorniinka nebiyada sida amarka Ilaaha daa'imka ah oo quruumaha oo dhan loo ogeysiiyey inay addeecaan rumaysadka. <sup>27</sup>Ilaaha keligiis ah oo xigmadda leh. Ciise Masiix ammaanu ha ugu ahaato weligiis. Aamiin**

**16:25-27** Aayadahani waxay isku yihiin hal weedh oo qudha luqada Giriigga. Ducadan oo kalena waxa laga heli karaa cutubyada 14 iyo 15. Qoraalka aayadanina wuxuu markale waynaynayaa ujeedda kitaabkan oo suurto gala inuu Bawlos gacantiisa ku qoray.

Culimada qaarkood waxay rumaysan yihiin in isku xidhnaanshahani uu ahaa

1. Waraaqdii daboolka u ahayd waraaqdii kasoo laabtay Efesos
2. Kuwii kusii socday Rooma maxaa yeelay
  - a. Bawlos isagoon weli booqanin Rooma, ayuu lix iyo labaatan qof igu salaama leeyahay
  - b. Cutubka 16 waa meesha uugu horraysa ee lagu sheegayo macallimiinta beenta ah
  - c. Isku xidhkani qoraallada Giriigga meelo badan ayuu kaga muuqanayaa.

Waxa sidoo kale suurto gala ah iyana in Bawlos uu sameeyay labo nuqul oo kala ah, cutubyada 1-14 oo usocda Rooma, iyo markale oo cutubyada 1-16 loo qoray Efesos. Caadi ahaan waxyaalahanna waxa lagaga jawaabay (1) in xaqiiqdii kuwo badan oo Masiixiyiintii hore ka mid ahaa ay socdaaleen; (2) xaqiiqada ah in qoraallada hore ee Giriigga aanu midkoodna ka tegaynin cutubka 16; iyo (3) suurto galmimada macallimiinta beenta ah oon sitoos ahayn loogu sheegay 14:1-15:13.

**16:25 “ha u ahaato kan kara”** Waa magac kale oo cajiib badan isla markaasna Ilaah iska leeyahay, waxaana Axdiga Cusub lagu dhex adeegsaday saddex jeer (Efesos 3:20; Yuudas 24).

U fiirso sida Ilaah kartida u siiyo rumaystayaasha.

1. Injiilka Bawlos
2. Ku wacdinta wax ku saabsan Masiixa
3. Muujinta qorshaha Ilaah ee weligiis ah isla markaasna ku waajahan badbaadada laga dhiga qarsoodiga.

Rumaystayaasha waxa karti lagu siiyaa injiilka aqoontiisa. Iminkana injiilka waxa loo diyaaray dhammaan qof walba.

▣ **“qarsoodiga”** Ilaah wuxuu cafiska aadanaha ka leeyahay ujeeddo midaysan ka horraysay leexashada (Bilowgii 3). Soo jeedinta qorshahanna waxa lagu muujiyay Axdiga Hore dhexdiisa (Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; iyo qoraalada nebiyada). Si kastaba ha ahaatee qorshahan dhammayska tirani muu ahayn mid cad (1 Korintos 2:6-8). Laakiinse markii Masiixu yimid ee Ruuxu bilaabmay waxay noqotay mid muuqata oo caddaan ah. haddaba, eraygan “qarsoodi” Bawlos wuxuu u adeegsaday qorshaha dhammayska tiran ee cafiska ( 1 Korintos 4:1; Efesos 2:11-3:13; 6:19; Kolosay 4:3; 1 Timoteyos 1:9). Haddaba, siyaabo dhowra ayuu arrintan u adeegsanayaa:

- a. Inay Israa'iiliyiintu aqbalaan kuwa aan Yuhuudda ahayn. imaatinka kuwa aan Yuhuudda ahaynina wuxuu Yuhuudda ka dhigayaa inay Ciise u aqbalaan Masiixii nebiyadu sii sheegeen (Rooma 11:25-32).
  - b. Injiilka waxa loogu talo galay inay quruumaha oo dhammi bartaan, dhammaantoodna waxay hoos imanayaan Masiixa (Rooma 16:25-27; Kolosay 2:2).
2. Jidhka cusub ee rumaystayaasha Imtaatinka Labaad ( 1 Korintos 15:5-57; 1 Tesaloniika 4:13-18).
  3. Waxkasta oo lagu ururin doono Masiixa (Efesos 1:8-11)
  4. Kuwa aan Yuhuudda ahayn iyo Yuhuudduba waxay rabaan badbaada (Efesos 2:11-3:13).
  5. Wada jirmimada iyo xidhiidhka ka dhexeeya Masiixa iyo kaniisadda waxa loo tibaaxay sida gurka (Efesos 5:22-23).
  6. Kuwa aan Yuhuudda ahayn waxa lagusoo daray axdiga, waxaana la dhex geliyay Ruuxa Masiixa si ay umuujiyaan la midnimada Masiixa, waana midda aadanaha leexday (Bilowgii 6:5, 11-13; 8:21) dib usoo celinaysa ekaansihii Ilaah ee laga sameeyay ( Bilowgii 1:26-27; 5:1; 9:6; Kolosay 1:26-28).

7. Kasoo horjeesashada Masiixa ee dhammaadka wakhtiga ( 2 Tesaloniika 2:1-11).
8. Soo koobitaanka qarsoodiga kaniisaddii hore waxa laga helayaa 1 Timoteyos 16.

**16:26 “haatan lagu muujiyey”** Qarsoodigan amaba qorshahan Ilaah imika si cad ayaa loogu muujiyay aadanaha, waana injiilka Ciise Masiix (Efesos 2:11-3:13).

▣ **“Qorniinka”** Ilaah qarsoodigan wuxuu ku muujiyay shaqsiyadda iyo shaqada Ciise, waxaana midan sii sheegay nebiyadii Axdiga Hore. Aasaasitaanka kaniisadda Axdiga Cusub ee isugu jirta rumaystayaasha Yuhuudda ah iyo kuwaan ahaynibana wuxuu ahaa qorshaha Ilaah ( Bilowgii 3:15; 12:3; Baxniintii 19:5-6; Yeremyaah 31:31-34).

▣ **“Ilaaha daa'imka ah”** Eeg Mawduucan Gaarka ah:

**MAWDUUC GAAR AH: DAA'IM**

Robert B. Girdlestone, ayaa kitaabkiisa *Synonyms of the Old Testament*, wuxuu ku qorayaa faallo xiiso leh oo ku sasban eraygan “Daa'im”:

“Sifada *aiōnios* Axdiga Cusub waxa lagu dhex adeegsaday afartan jeer. Iyadoo la tilmaamayo *nolosha daa'imka ah*, oo laga dhigay hadiyad wakhtigan jooqta, haddana qayb ahaan waxay ka tahay ballan qaadka mustaqbalka. Waxa kaloo lagu tilmaamay jiritaanka Ilaah een dhammaadka lahayn waana sida ka muuqata Rooma 16:25, 2 Timoteyos 1,9, Tiitos 1:2.

Eraygan waxa kaloo loo adeegsaday cadaabta amaba *dabka daa'imka ah*, Matayos 18:8,25. 41, Yuudas 7; *taqsiirta daa'imka ah*, Matayos 25:46; *xukunka daa'imka ah*, Markos 3:29, Cibraaniyada 6:2; *halaag daa'im ah*, 2 Tesaloniika 1:9. Erayada aayadahani waxay tilmaamayaan ugu dambaynta, halkaasoo xukunkani marka uu yimaaddo qof waliba uu heli doono wuxuu galabsaday, taasoo noqon doonta mid weligeed ah. Waxyar ayuunbaan ka fahan sanahay mustaqbalka ku saabsan xidhiidhka ka dhexeeya nolosha aadanaha iyo jiritaankooda, iyo sidoo kale kuwa aan rumaysadka lahayni waxay heli doonaan, waana marka aan u fiirsano iftiiminta la inaga siiyay waaritaanka. Marka dhinac aan ka eegno, waxa khalad ah in erayga Ilaah wax lagu daro, dhinaca kalena maaha inaynu ka fogaanno. Haddii aan noqono kuwo ka diida caqiida ah halaagga daa'imka ah ee ku sugan Qorniinka, waxa inagu waajib ah inaan sugno inaga oo ku aamusayna Injiilka ku saabsan jacaylka Ilaah innagu siiyay Masiixa, waa haddii uu mugdi inagaga jiro oynaan awood u yeelanin inaan fahanno” (pp. 318-319).

▣ **“oo quruumaha oo dhan loo ogeysiiyey”** qoraalka Giriigga marka la eego ereyadan waxa loogu danbaysiiyay weedhaha si loo xoogeeyo. Ilaah waxa uu dunida oo dhan ugu deeqay oo ogaysiiyay injiilka waxaanay taasi ahayd qorshihiiisa uu weligiisba lahaa (Bilowgii 3:15)!

▣

<b>NASB</b>	<b>“inay addecaan rumaysadka”</b>
<b>NKJV</b>	<b>“si ay rumaysadka u addecaan”</b>
<b>NRSV</b>	<b>“si loo keeno addeecitaanka rumaysadka”</b>
<b>TEV</b>	<b>“inay addecaan rumaysadka”</b>
<b>JB</b>	<b>“si loogu keeno addeecitaanka rumaysadka”</b>

Waxa jira siyaabo badan oo loo fahmi karo ereyadan; waxa laga yaabaa inay tilmaamayso (1) caqiido ku saabsan Masiixa; (2) isku hallaynta Masiixa; amaba (3) addeecitaanka injiilka ugu horrayn iyo kusii socoshada rumaysadka labadaba. Addeecitaanku haddaba waxa uu yahay mid la socda fiqi ahaan towbad keenka (Markos 1:15; Falimaha Rasuullada 3:16,19; 20:21).

**16:27 “Ilaaha keligiis ah oo xigmadda leh.”** Waxay u noqonaysaa tawxiidnimada (Sharciga Kunoqoshadiisa 6:4-5). Masiixiyaddu waxay aaminsantahay hal Ilaah sida Yuhuudda oo kale, si kastabana ha ahaatee, Ilaahnimada Ciise ee dhammayska tiran iyo shakhsiyadda buuxda ee Ruuxu waxay innagu qasbayaan “saddex midaysan,” Saddexmidnimada.

▣ **“ammaanu ha ugu ahaato weligiis”** Eeg fiirada gaarka ah 3:23.



▣ “**Aamiin**” Eeg Mawduuca Gaarka ah 1:25.

## SU’AALO FALAQAYN AH

Tani waa hage ku tiirsan tafsiir, taasna macneheedu wuxuu ka dhigan yahay inaad adigu masuul ka tahay wixii tafsiira ee adigu shakhsi ahaantaada aad ugu samayso Kitaabka Quduuska ah. Haddaba, waa inaan dhammaanteen ku socono iftiinka aan haysano. Adiga, Baybalka iyo Ruuxa Quduuska ah ayuu idiin dhexeeyaa wixii tafsiir ahi, sidaasi darteedna ha ku koobnaan oo keliya fasiraagu waxa uu qoray.

Su’aalahan falaqaynta ahi waxay kaa caawinayaan inaad ka fikirto waxaayalaha kala gedisan een kagasoo aragnay cutubkan.

1. Sidee Bawlos ku bartay dadkan ka tirsan kaniisadda Rooma isagoon weligiis tegin Rooma?
2. Ma jira daliil kitaabi ah oo tusinaya adeegga haweenka (16:1; 1 Timoteyos 3:11; 5:3-16)?
3. Maxaa laga fahmi karaa haweenka badan ee cutubkan lagu diiwaan geliyay?
4. Sheeg waxyaalaha aasaaska u ah ee lagu garan karo macallimiinta beenta ah(aayadaha 17-18).

## LIFAAQA KOWAAD

### QEEXITAANKA KOOBAN EE NAXWAHA ERAYADA GIRIIGGA

Luqadda Giriigga ee Koine waxa xitaa lagu magacaabi jiray Hellenistic, waxaanay ahayd luqadda ay ku hadli jireen dadkii ku noolaa Medhetareeniyanka ilaa lagasoo bilaabo furashadii Aleksandarkii Waynaa (336-323 C.H) iyo ilaa laga soo gaadho sideedii boqol ee sanadood ee ka dambaysay (300 C.D-500 C.D). may ahayn oo keliya luqadda Giriigta assalka ah, laakiin siyaabo badan ayay u noqotay qaab cusub oo ah luqada Giriigta, waxaanay noqotay luqada labaa ee dadkii wakhtiyadii hore ku noolaa bariga Medhetareeniyanka.

Luqadda Giriigga ah ee Axdiga Cusubi waxay ahayd mid gooni ah siyaabo badan marka loo eego, maxaa yeelay kuwii adeegsan jiray marka laga reebo Luukos iyo qoraaga Cibraaniyada, oo iyagu adeegsaday luqadda Aramaatiga. Haddaba, qoraalkooda waxa saameeyay erayada iyo qaababka luqada Aremaatiga. Waxa kaloo ay akhriyeen waxna kasoo xigteen Septuagint tarjumaaddiisa Axdiga Hore, oo sidoo kalena ku qoraan luqada Koine ee Giriigta. Laakiin waxa iyana sidoo kale jirtay in Septuagint ay qoreen culimadii Yuhuudda ahaa oo luqadooda hooyo aanay ahayn Giriig.

Tani waxay haddaba ina xasuusinaysaa in Axdiga Cusub aynaan qaab naxwe ahaaneed isugu dhejin karin. Waa mid gaara waxaanay waxyaabo badan ka wadaagaan (1) Septuagint ga; (2) qoraallada Yuhuudda sida s kuwo Josephus; iyo (3) papyri yada laga helay Masar. Sideen haddaba u samayn karnaa qaabka naxwe ahaaneed ee Axdiga Cusub?

Qaabka naxwe ahaaneed ee luqada Giriigga ee Koine iyo koine ka Giriigga ee Axdiga Cusubi waa kuwo aad u fardo badan. Siyaabo badan waxay u ahayd wakhti uu jiray fududaynta naxwuhu, waxaana marwalba ina hagaya qoraalka. Waayo erayadu waxay macno ku sameeyaan qoraalka badan, sidaasi darteedna qaabka naxwe ahaaneed waxa lagu fahmi karaa oo keliya (1) qaabka gaar ahaaneed ee qoraagu wax u qoro; iyo (2) qoraalka gaarka ah. Ma jiro haddaba qeexitaan suurto gala isla markaasna lagu qanci karo oo ah qaab dhismeed Giriig ah.

Luqada Koine ka ee Giriigtu waxay ahayd luqad lagu hadlo, sidaasi darteedna marwalba furaha fasiraaddu waxay ku dhisantahay nooca iyo qaabka hadalka. Badanaa jumladaha gaabanna falka ayaa xagga hore imanaya isagoo tusinaya muhiimadda. Marka haddaba la furfuro falka Giriigga ah waxa jira saddex waxyaalood oo uu gudbinayo: (1) waxyaalaha xoogga ay saarayso dhacdadu, codka iyo xaaladda lagu jiro (shil amaba tusaale); (2) macnaha asal ahaaneed fal gaar ah; iyo (3) raacitaanka qoraalka.

#### I. DHACDO

A. Dhacdadu waxay koobsanaysaa xidhiidhka falka ee dhammayska tiran amaba aan dhammayska timayn.

Waxaana lagu magacaabaa “hagaagsan” iyo “midaan hagaagsanayn.”

1. Dhacdada hagaagsani waxay diiradda saartaa saxsanaanta falka. Mana jirto faahfaahin dheeraada oo la bixinayo marka laga tago sheegitaanka inay wax dhaceen oo keliya. Lamana sheego meesha ay ka bilaabanto, sii socodkeeda iyo halka uugu sarraysa.

2. Dhacdada aan hagaagsanayni waxay diiradda saartaa sii socoshada falka, waxaana lagu tilmaami karaa fal toosan, fal muddo ama wakhti ah, fal soconaya, iwm.

B. Dhacdooyinka waxa lagu kala saari karaa sida qoraagu u arko falka isaga oo soconaya

1. Siday u dhacayso = AORIST

2. Dhacitaankeeda iyo natiijada la socota oo daa’ima = PERFECT

3. Waxay ahayd markii hore mid dhacaysa natiijo daa’imana leh, laakiin hadda waa = PLUPERFECT

4. Way dhacaysaa = PRESENT

5. Way dhici doontaa = IMPERFECT

6. Way dhici doontaa = FUTURE

Tusaalaha runta ah ee caawin kara tarjumaadda dhacdadu wuxuu noqon karaa erayga “badbaadin.” Waxaana loo adeegsaday dhacdooyin badan oo kala duwan iyadoo la toosinayo siday u dhacayso iyo heerka ay marayso:

1. AORIST “badbaaday” (Rooma 8:24)

2. PERFECT “la badbaadiyay iyadoo natiijaduna socoto”(Efesos 2:5,8)

3. PRESENT “badbaadaya” (1 Korintos 1:18; 15:2)
4. FUTURE “badbaadi doona”(Rooma 5:9, 10; 10:9)

C. Marka aan eegno falalka dhacdooyinka, fasariyaashu waxay eegaan sababta asal ahaan qoraagu naftiisa uugu sheegayo dhacdo gaara. Heerka “sharraxaad la’aantu” dhacdadu wuxuu ahaa AORIST. Waxaana weeyi “aan khaas ahayn,” qaabka caadiga ah ee falka. Waxaana loo adeegsan karaa siyaabo kala duwan oo qoraalka aayaddu uu sheegi karo, oo asal ahaanna waxay ka hadlaysaa sida wax u dhacayaan. Xagga dhacdada tagtay wakhti hore waxa macneheedu yahay wax tegay oo la xallin rabo. Haddii markaas dhacdo kale la adeegsano waxa jira waxyaabo intaas ka badan oo xoogga la saarayo. Laakiin muxuu yahay?

1. PERFECT TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal la dhammays tiray oo natiijo daa’im ahna leh. Mararka qaar waxay isugu jiri kartaa AORIST iyo PRESENT TENSES. Hadiyo goor haddaba waxa ujeedadu tahay in falku dhammays tirmay natiijona ka imanayso. Tusaale ahaan Efesos 2:5 iyo 8, “waa la idin badbaadiyay oo badbaadana waxaanad ahaan doontaan kuwo lasii badbaadiyo.”
2. PLUPERFECT TENSE. Wuxuu ahaa sida wax hagaagsan marka laga reebo natiijada oo istaagtay. Tusaale ahaan “Butrus wuxuu taagnaa albaabka dibadda”(Yooxanaa 18:16).
3. PRESENT TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal aan toosnayn amaba aan dhammays tirnayn. Ujeedaduna waa hadiyo goor dhacdada oo sii socota. Tusaale ahaan “Ku alla kii isaga ku sii jiraa, ma dembaabo,” “Ku alla kii Ilaah ka dhashay dembi ma falo” (1 Yooxanaa 3:6 iyo 9).
4. IMPERFECT TENSE. Dhacdadani xidhiidhka ay la leedahay PRESENT TENSE gu waxay la mid tahay xidhiidhka ka dhexeeya PERFECT iyo PLUPERFECT. Wuxuu ka hadlayaa IMPERFECT gu dhacdo aan dhammays tirnayn oo dhacaysay laakiin la joojiyay amaba bilowga fal tegay. Tusaale ahaan: “waxaa u soo baxay dadka Yerusaleem” (Matayos 3:5).
5. FUTURE TENSE. Wuxuu ka hadlayaa fal dhici doona wakhtiga mustaqbalka ah ee iman doona. Wuxuu ka hadlaa dhacdo badanaa suurto gal noqon karta, waxaanu hadiyo jeer tilmaamaa suurto galnimada dhacdadaas. Tusaale ahaan: “Waxa barakadaysan...oo waxay” (Matayos 5:4-9).

## II. COD

- A. Codku wuxuu sheegaa xidhiidhka ka dhexeeya dhacitaanka falka iyo fal sameeyaha oo ah kan samaynaya falka.
- B. ACTIVE VOICE waa codka tooska ah ee la filayo iyadoo si xooggan aan loo sheegay in faluhu uu sameeyay falka.
- C. PASSIVE VOICE codka aan tooska ahayn macnihiisuna waa fal sameeyaha oo helaya fal isaga dibadda lagaga sameeyay. Falsameeyaha dibadda ah Giriigga Axdiiga Cusub waxa lagu sheegaa meeleeeyayaashan:
1. Adeege shakhsi ahaaneed oo ah *hupo* lana socdo xaalad abuuruhu(Matayos 1:22; Falimaha Rasuullada 22:30).
  2. Adeege shakhsi ahaaneed oo ku dhexdhexaadinaaya *dia* lana socdo xaalad abuuruhu (Matayos 1:22).
  3. Adeege aan shakhsi ahaan ahayn oo ku imanaya *en* kuna yimid qalab.
  4. Mararka qaarna wuxuu ku yimaaddaa mid shakhsi ahaaneed iyo mid aan shakhsi ahaan ahayn oo ku yimaadda qalab.
- D. MIDDLE VOICE oo ah kan falka samayanaya iyo inuu si toosa ugu lug leeyahay samaynta falka. Waxaana hadiyo goor lagu magacaabaa codka dareen ahaaneed ee ku xidhan doonista shakhsiga. Qaab dhismeedkanina waxa uu dhinac ka xoogaynayaa weedhaha fal sameeyahaha, mana aha mid laga helo luqada Ingiriisida oo keliya, waxaanay suurta galnimo wayn ku leedahay macnaha iyo tarjumaadaha luqada Giriigga. Tusaale ahaan:
1. REFLEXIVE waana falka tooska ah ee fal sameeyuhu naftiisa ku sameeyo. Tusaale ahaan: “isdeldelay.” (Matayos 27:5).
  2. INTENSIVE falsameeyaha ayaa falka laftiisa ka dhigaya inuu isu sameeyo. Tusaale ahaan: “Shaydaanka qudhiisu wuxuu isu ekaysiiyaa malaa’igta iftiinka” (2 Korintos 11:14).
  3. Reciprocal – wax is dhaafsigu labada fal sameeye. Tusaale ahaan: “waxay ka wada hadleen” (Matayos 26:4).

### III. DAREEN

- A. Waxa jira afar dareen oo ka muuqda luqada Koine ga ee Giriigga. Waxaanay tilmaamayaan xidhiidhka ka dhexeeya falku la leeyahay xaqiiqada ugu yaraan marka la eego waxa qoraaga ujeedadiisu tahay ee maankiisa ku jira. Dareennada haddaba waxa loo qaybiya labo qaybood oo waawayn: waana inuu tilmaamayo xaqiiqada (INDICATIVE) iyo inuu tilmaamayo suurto galnimada (SUBJUNCTIVE, IMPERATIVE iyo OPTATIVE).
- B. INDICATIVE MOOD wuxuu ahaa dareen caadi ah oo sheegaya falka dhacay amaba dhacayay ugu yaraan marka la eego qoraaga maankiisa. Waxaanay ahayd dareen keliya oo lagu sheegay wakhti gaara laakiin tani waxay ahayd dheeraad.
- C. SUBJUNCTIVE MOOD ku wuxuu sheegayaa suurto galnimada falk mustaqbalka dhici doona. Waa waxaan weli dhicin laakiin jaanisyadiisu waxay u eegyihin inuu dhici doono. waxaanu waxyaabo badan la wadaagaa FUTURE INDICATIVE ka, laakiinse farqiga u dhexeeyaa waxa uu yahay iyada oo SUBJUNCTIVE ku uu sheegayo heer shaki ah, waana midda luqada Ingiriisiga lagu cabiro iyadoo la odhanayo “could,” “would” “may” amaba “might” (laga yaabee, waxa dhici karta.).
- D. OPTATIVE MOOD ka waxa lagu sheegaa dareen doonis ah amaba jeclaysi iyadoo aragti ahaanna suurto gal ahayd. Waxa lagu tilmaamaa inuu xaqiiqada uuga dhowyahay SUBJUNCTIVE ka, waxaana OPTATIVE ka lagu sheegaa suurto galnimada hoos joogta xaalado la hubo, sidoo kalena OPTATIVE ku wuxuu naadir ku yahay Axdiga Cusub dhexdiisa. Waxa haddaba adeegsaday Bawlos “yaanay noqon” (KJV “Ilaahbaa xarrimay”), shan iyo toban jeer (Rooma 3:4,6,31; 6:2, 15; 7:7, 13; 9:14; 11; 1 Korintos 6:15; Galatiya 2:17; 3:21; 6:14). Tusaalayaasha kalena waxa laga helayaa Tesaloniika 1:38. 20:16, Falimaha Rasuullada 8:20, iyo 1 Tesaloniika 3:11.
- E. IMPERATIVE MOOD waxa lagu xoojiyay amar ahaa suurto gal, laakiinse xoojintu waxay ahayd ujeeddada qofka hadlayay. Waxay sheegaysaa oo keliya suurto galnimada doonista shuruuda ku xidhanina waa doorashada qofka kale. Waxa si gaara IMPERATIVE ka loo adeegsaday tukashooyinka iyo codsiga qofka saddexaad. Amarradan waxa haddaba Axdiga Cusub waxa lagaga dhex heli karaa iyagoo ah dhacdooyinka PRESENT iyo AORIST.
- F. Naxwayaasha qaarkood ayaa ayaa ayaa falka tilmaamaya sida wax loo qabto waxay ku tilmaamayaan mid ka mida dareenka. Aad bay ugu dhex badanyihiin Axdiga Cusub ee Giriigga ah, hadiyo goorna waxa lagu tilmaamaa fal lagu hadlo. Waxa loo tarjumay isagoo isku xidhaya falka muhiimka ah ee ay la xidhiidha falka. Waxa jira haddaba farqi wayn oo u dhexeeya marka la tarjumayo falalka tilmaamaya sida wax loo qabtay, waxaana fiican in lagala tashado tarjumaadaha kala duwan ee Ingiriisida. Waxaana ku caawin kara *The Bible in Twenty Six Translations* oo uu qoray Baker.
- G. AORIST ACTIVE INDICATIVE wuxuu ahaa mid si caadi ah amaba “aan lataabanin” u diiwaan geliya dhacdooyinka. Dhacda kasta oo kale ha ahaato cod amaba fasiraad kale oo gaar ahee, muhiimaddeedu waxa weeyi qoraaga asalka ahi midda uu rabay inuu xidhiidhka ku sameeyo.

### IV. Qofka aan Giriigga ahayn fikradaha waxbarashadan soo socota ayaa siin karta macluumaadka uu rabo.

- A. Friberg, Barbara iyo Timothy. *Analytical Greek New Testament*. Grand Rapids: Baker, 1988.
- B. Marshall, Alfred. *Interlinear Greek-English New Testament Greek*. Grand Rapids: Zondervan, 1976.
- C. Mounce, William D. *The Analytical Lexicon to the Greek New Testament*, Grand Rapids: Zondervan, 1993.
- D. Summers, Ray. *Essentials of New Testament Greek*. Nashville: Broadman, 1950.
- E. Luqada Koine ee Giriigga barashadeeda oo fogaan dirsi ah waxa ay diyaar ku tahay Moody Bible Institute ee Chicago, IL.

## V. MAGACYADA

- A. Magacyada waxa lagu kala saaraa xaalado. Xaaladuhu waxay ahaayeen kuwa saamaynaya magaca tusinaya magaca la xidhiidha falka iyo qaybaha kale ee weedha. Marka aan eegno luqada Koine ee Giriigga kuwo badan oo xaaladdan ahi waxay ku shaqaynayaan oo lagu tilmaamay meeleyayaal. Maadaama oo xaaladdani ahayd mid awood u leh in lagu magacaabo xidhiidho badan ayaa meeleyaha waxa laga dhigay inuu kala saaro siyaabaha caqli galka ah ee ay u shaqaynayaan.
- B. Xaaladaha Giriigga waxa loo kala saaraa sideed siyaabood:
1. NOMINATIVE CASE waxa loo adeegsaday magacaabista waxaanu hadiyo goor ahaa falaha weedha. Waxa sidoo kale loo adeegsaday PREDICATIVE NOUNS ka iyo ADJECTIVES ka amaba sifooyinka iyadoo lala xidhiidhanayo falalka “ahaanshaha” amaba “noqoshada.”
  2. GENITIVE CASE ka oo loo adeegsaday qeexitaanka iyo hadiyo goorba tayada erayga la xidhiidha. Waxay ka jawaabtay su’aasha, “Noocee?” waxa sidoo kale lagu sheegay adeegsiga meeleyaha luqada Ingiriisada ee “of.”
  3. ABLATIVE CASE waxa loo adeegsaday si la mida GENITIVE ka laakiin waxa loo adeegsaday qeexitaanka lagu sheegayo kala soocnaanta. Waxay hadiyo goornaa tilmaanta ka soocnaanta meel ee wakhti dhexdiisa, banaan, asal amaba darajo.
  4. DATIVE CASE waxa loo adeegsaday qeexitaanka danaha shakhsi ahaaneed, waxaanay tilmaami kartaa oggolaansho amaba diidmo. Waxa hadiyo goorba luqadah Ingiriisida lagu tilmaamay meeleyaha “to.”
  5. LOCATIVE CASE waxay la mid tahay sida DATIVE ka, laakiin wuxuu tilmaamayaa meel , wakhti amaba waxyaalaha caqli galka ah. waxaana hadiyo goorba lagu sheegaa meeleyaha Ingiriisida ah ee “in, on, at, amont, during, by, upon, iyo beside.”
  6. INSTRUMENTAL CASE waxay la mid tahay xaaladaha DATIVE ka iyo LOCATIVE ka. Waxaanu sheegay macnaha amaba urur. Waxaana lagu sheegaa meeleyaha Ingiriisida ah ee, “by” amaba “with.”
  7. ACCUSATIVE CASE waxa loo adeegsaday sheegitaanka gebogebada falka, waxaana lagu sheegay xaditaanka, oo adeegsigeeda ugu muhiimsanina wuxuu ahaa shay toos ah. wuxuu ka jawaabay su’aasha, “intee in leeg?”
  8. VOCATIVE CASE waxa loo adeegsaday hadal toos ah.

## VI. ISKU XIDHAYAASHA IYO XIDHIIDHIYAYAASHA

- A. Luqada Giriigga waxay aad sax u ah maxaa yeelay waxay haystaa xidhiidhiyayaal badan. Waxay isku xidhaan fikirrada (erayada gaagaaban, weedhaha, iyo baaragaraafyada). Haddaba isku xidhayaashani waxay tusinayaan jihaynta fikirka qoraaga, waxaanay muhiim u yihiin qeexitaanka waxyaalaha uu isku dayay inuu ka hadlo.
- B. Halkan waxaan kusoo qaadan karnaa kuwo ka mida xidhiidhiyayaasha iyo isku xidhayaasha iyo macnohooda (waxaana lagasoo xigtay H. E. Dana iyo Julius K. Mantey buugooda *A Manual Grammar of the Greek New Testament*).
1. Xidhiidhiyayaasha wakhtiga
    - a) epei, epeid ē, hopote, hōs, hote, hotan (fal sameeyaha) – “goorma”
    - b) heōs – “kolkii”
    - c) hotan, epan (falsameeyaha.) – “markasta”
    - d) heōs, achri, mechri (falsameeyaha.) – “ilaa”
      - a. *priv* (dhamaad lahayn.) – “kahor”
      - b. *hōs* – “ilaa,” “goorma” “sida”
  2. Xidhiidhiyayaasha caqli galka ah
    - a. Ujeeddo
      1. *hina* (fal sameeye.), *hopōs* (falsameeye.), *hōs* – “si ay,” “kaa”
      - (2) *hōste* (aan la xadidi karin) “kaa”
      - (3) *pros* (aan la xadidi karin) ama *eis* (oon la xadidi karin) – “kaa”

- b. Natiijo (waxa jirta is kaashi u dhexeeya qaababka naxwe ahaaneed ee ujeeddo iyo natiijo)
    - (1) *hoste* (dhammaad lahayn, kani waa ka uugu badan) – “si ay,” “hadaba”
    - (2) *hiva* (fal sameeye) – “inaad”
    - (3) *ara* – “sidaa darteed”
  - c. Sabab
    - (1) *gar* (sabab/samayn/ gebogebo) – “calashaan” “maxaa yeelay”
    - (2) *dioti, hotiy* – “maxaa yeelay”
    - (3) *epei, epeide, hos* – “ilaa”
    - (4) *dia* (la socoto dacwayn) iyo (la socota dhammaad la’aan) – “maxaa yeelay”
  - d. Fahmitaan
    - (1) *ara, poinun, hōste* – “dabadeed”
    - (2) *dio* (fahmitaanka ugu xooggan xidhiidhiyaha) “xaqiiqadii,” “dabadeed”
    - (3) *oun* “dabadeed,” “sidaa daraadeed” “kadib” “waxa ka danbeeya”
    - (4) *toinoun* – “marka loo eego”
  - e. Farqiga
    - (1) *alla* (farqiga xooggan) “laakiin” “laga reebo”
    - (2) *de* – “laakiin,” “si kastaba ha noqotee,” “balse,” “dhinaca kale”
    - (3) *kai* – “laakiin”
    - (4) *metoi, oun* – “si kastaba ha noqotee”
    - (5) *plēn* “si kastaba ha ahaatee,” (waxay ku badantahay Luukos)
    - (6) *oun* – “si kastaba ha noqotee”
  - f. Isbarbar dhigga
    - (1) *hos, kathōs* (bilowga weedhaha is barbar yaal)
    - (2) kata (*lakab ku ah, katho, kathoti, kathosper, kathaper*)
    - (3) *hosos* (Cibraaniyada)
    - (4) *ē* – “ka”
  - g. Xidhiidhsanaanta
    - (1) *de* – “iyo,” “imika”
    - (2) *kai* – “iyo”
    - (3) *tei* – “iyo”
    - (4) *hina, oun* – “kaa”
    - (5) *oun* – “kadib” (Yooxanaa)
3. Adeegsiga xoogaynta
- a. *alla* – “hubaashii,” “haa,” “xaqiiqadii”
  - b. *ara* – “hubaal” “runtii”
  - c. *gar* – “laakiin runtii,” “hubaashii”
  - d. *de* – “runtii”
  - e. *ean* – “xitaa”
  - f. *kai* – “xitaa,” “runtii,” “runtii”
  - g. *mentoi* – “runtii”
  - h. *oun* – “runtii,” “xaqiiq ahaantii”

## VII. WEEDHAHA SHURUUDU KU XIDHANTAHAY

- A. Weedhaha shuruuddu ku xidhantahay waxa weeyi kuwa ay la socoto in ka badan hal weedha oo gaaban isla markaasna shuruudi ku xidhan tahay. qaab dhismeedkan naxwe ahaaneedna wuxuu caawinayaa fasiraadda, isagoo bixinaya shuruudo amaba sababo ku salaysan, sababta falka muhiimka ahi uu saxda u yahay amaba u khaldan yahay, waxaana jira afar nooc oo ah weedhaha shuruuddu ku xidhan tahay.
- B. FIRST CLASS CONDITIONAL SENTENCE wuxuu yahay amaba ahaa fal u muuqda in qoraaga uu run sheegayo, isla markaasna uu rabo inuu ku sheego ujeedadiisa, sida “haddii.” Waxa kaloo jirta in qoraallo kale loo tarjumay “ilaa” (Matayos 4:3; Rooma 8:31). Si kastabana ha noqotee sheegitaanka

runta amaba beenta. Marar badan waxa loo adeegsaday tilmaamitaanka doodda amaba hadalka (Matayos 12:27).

- C. SECOND CLASS CONDITIONAL SENTENCE waxa badanaa lagu magacaabaa “soo jeedinta xaqiiqada.” Waxaanay sheegaysaa waxaan run ahayn oo raba inuu wax sameeyo. Tusaale ahaan:
1. “Ninkan hadduu nebi yahay, wuu ogaan lahaa naagtan taataabatay cid ay tahay iyo waxay tahay inay tahay dembiiley” (Luukos 7:39).
  2. “haddaad Muuse rumaysateen, anigana waad i rumaysan lahaydeen” (Yooxanaa 5:46).
  3. “Haddaan weli dadka ka sii farxinayo, ma aanan ahaadeen addoonkii Masiixa” (Galatiya 1:10).
- D. THIRD CLASS qofka saddexaad oo ka hadlayay falka mustaqbalka ah suurto galnimadiisa. Wuxuu hadiyo jeer ku saabsan yahay suurto galnimada falkas, waxaanu hadiyo goorba falkiisa muhiimka ahi ku yimaadaa weedha gaaban ee “ay.” Tusaale ahaan 1 Yooxanaa 1:6-10; 2:4,6,9,15,20,21,24,29; 3:21; 4:20; 5:14,16.
- E. FORTH CLASS waxa laga saaray suurto galnimada, waxaanu in badan ka dhex muuqdaa Axdiga Cusub. Xaqiiq ahaantii ma jiro weedhan inay labadeeda shuruudoodba noqon karaan kuwo la qeexi karo. Waxaan tusaale ahaan middan oo kale uugu soo qaadan karnaa weedha gaaban oo furitaanka u ah 1 Butros 3:14. Xagga gebogebaynta waxaan tusaale ahaan uugu soo qaadan karnaa Falimaha Rasuullada 8:31.

#### VIII. REEBISTA AMA MAMNUUCISTA

- A. PRESTN IMPERATIVE ka uu la socdo MEPATKCLE wuxuu hadiyo jeer xoojinayaa joojinta fal hore u socday ilaa haddadna shaqaynaya. Waxa ka mida tusaalayaasha: “Maal ha ku urursanina dhulka...” (Matayos 6:19); “Ha ugu welwelina naftiinna...” (Matayos 6:25); “Xubnihiinnana dembiga ha u siinina...” (Rooma 6:13); “Ha calool xumaynina Ruuxa Qoduska ah oo Ilaah...” (Efesos 4:30); iyo “Ha ku sakhraamina khamriga rabshadu ku jirto...” (5:18).
- B. AORIST SUBJUNVTIVE uula socdo MEPARTICLE wuxuu xoojinayaa “ha bilaabin falkaas.” Tusaale ahaan: “Ha u malaynina inaan...” (Matayos 5:17); “ha ku welwelina,” (Matayos 6:31); “ha ka xishoon..” (2 Timoteyos 1:8).
- C. DOUBLE NEGATIVE ka uu la socdo SUBJUNCTIVE MOOD waxa weeyi wada hadal xooggan. “weligiis waxaasi kuma dhici doonaan.” Tusaale ahaan: “weligiis dhimasho ma arki doono” (Yooxanaa 8:51); “..hilib weligay ma cuni doono” ( 1 Korintos 8:13).

#### IX. SHAQALKA

- A. Marka la eego luqada Koine ee Giriigga DEFINITE ARTICLE ka “the” wuxuu la midyahay kan Ingiriisida, waxaanu ahaa tilmaamaha dareenka siinaya magaca amaba cibaaro. Haddaba, adeegsigeedu wuu ku kala duwan yahay qoroyaasha Axdiga Cusub, waxaanu sidoo kale DEFINITE ARTICLE ku ku shaqayn karaa
1. Isaga oo wax kala saaraya sida magac u yaalka oo kale;
  2. Isaga oo ah calaamad tilmaamaysa falsameeyaha amaba qof hore loo soo tilmaamay;
  3. Isaga oo magacaabaya fal sameeyaha weedha ku dhex jira markaasna la xidhiidhaya falka. Tusaale ahaan: “Ilaah waa Ruux” Yooxanaa 4:24; “Ilaah waa iftiin,” 1 Yooxanaa 1:5; “Ilaah waa jacayl,” 4:8,16.
- B. Luqada Koine ee Giriigtu ma laha INDEFINITE ARTICLE ka Ingiriisida ah ee “a” amaba “an.” Waxaanu taas macneheedu noqon karaa:
1. Diirad saarista qaabka amaba tayada uu wax leeyahay
  2. Diirad saarista nooca uu shay leeyahay.

- C. Qorayaasha Axdiga Cusubi waxay si waynu ugu kala duwan yihiin sida loo adeegsado ARTICLE ka amaba Shaqalka.

X. SIYAABAHA ADKAYNTA AMABA XOOJINTA EE AXDIGA CUSUB EE GIRIIGGA AH.

- A. Qaabka amaba siyaabaha muujinaysa adkaynta amaba xoojintu wuxuu yahay mid ay ku kala duwan yihiin qorayaasha Axdiga Cusubi. Kuwa markaas ugu badan ee sida joogtada ah aanay adkayntoodu isu bedelaynin waxay ahaayeen Luukos iyo qoraaga Cibraaniyada.

- B. Waxaan hore usoo sheegnay in AOURIST ACTIVE INDICATIVE ku inuu ahaa heer laguna tirinin xoojinta, laakiin dhacdooyinka kale oo dhan sida codka amaba dareenka wuxuu ku leeyahay muhiimad xagga fasiraadda ah. haddaba, tani kama tarjumayso AORIST ACTIVE INDICATIVE ka oon marwalba lahayn muhiimad xagga naxwaha ah. tusaale ahaan: Rooma 6:10 (labo jeer).

C. Habaynta erayada luqada Koine ee Giriigga

1. Luqada Koine ee Giriigtu waxay ahayd luqad aan sida Ingiriisida oo kale ku tiirsanayn habaynta erayada, sidaasi darteedna, qoraagu wuxuu ka leexan karaa caadi ahaan habayntii laga rajaynayay inuu muujiyo

- a. Wixii qoraagu uu rabay inuu u sheego akhristaha
- b. Wixii qoraagu ku fikirayay wuxuu ka yaabin karaa akhristaha
- c. Wixii qoraaga si qoto dheer u dareensanaa wuxuu ku saabsanaa

2. Habaynta caadi ahaaneed ee luqada Giriigtu ilaa hadda waxay tahay midaan sugnayn. Haddaba, habaynta caadi ahaaneed laga hadlayaa waxay tahay:

- a. Falalka isku xidhistooda
  - (1) FAL
  - (2) FAL SAMEEYE
  - (3) DHAMMAYS TIR
- b. Falalka hakashada ku jira
  - (1) FAL
  - (2) FAL SAMEEYE
  - (3) MAFCUULKA
  - (4) MAFCUULKA AAN TOOSKA AHAYN
  - (5) MEELEEYAYAASHA
- c. Cibraarooyinka magacyada
  - (1) MAGAC
  - (2) DIB U HABEEYAHA
  - (3) MEELEEYAYAASHA

3. Habaynta erayadu waxay noqon kartaa mid noqon karta muhiim. Tusaale ahaan:

- a. “na siiyeen gacanta midigta oo wehelnimada” (Galatiya 2:9). Cibaarada “midigta wehelnimada” way kala qaybsan tahay iyadoo soo horraysiisay tusidda muhiimaddeeda.
- b. “la jira Masiixa” (Galatiya 2:20), ayaa lasoo horraysiiyay. Dhimashadiisana waxa la geliyay dhexda.
- c. “siyaalo badan oo kala duduwan” (Cibraaniyada 1:1), waa la horraysiiyay. Waxaanay ahayd sida Ilaah sida Ilaah naftiisa u muujiyay oo kala duwanayd, laakiinse maaha xaqiiqada waxyiga.

D. Caadi ahaan darajooyin adkaynta ah ayaa lagu muujiyay

1. Adkaynta magac u yaalka kaasoo hore uga mid ahaa falka. Tusaale ahaan: “oo bal eega had iyo goor ayaan idinla jooga..” (Matayos 28:20).
2. Maqnaanshaha xidhiidhiyaha la filayay ee erayada amaba weedhuha, waxa lagu magacaabay asyndeton (“aan boodayn”). Waxa la filayay xidhiidhiyaha, sidaasi darteedna maqnaansheheedu dareenka ayuu soo jeedinayaa. Tusaale ahaan:



- a. Fikirrada wanaagsan, ee Matayos 5:3 (adkaynta waxyaalahaas)
  - b. Yooxanaa 14:1 (mawduuc cusub )
  - c. Rooma 9:1 (qayb cusub)
  - d. 2 Korintos 12:20 (adkaynta waxyaalahaas)
  3. Adkaynta erayada amaba cibaarooyinka ku dhex jira qoraalka gaaban ee aayadaha. Tusaale ahaan: “ammaanitaanka cisadiisa”(Efesos 1:6,12 iyo 14). Waxaana ereyadan loo adeegsaday sheegitaanka shaqada uu leeyahay ruux wal oo ka mida Saddexmidnimadu.
  4. Adeegsiga erayga amaba cibaarooyinka codkoodu muuqanayo
    - a. euphemisms – beddelka erayada ku saabsan xarrimaadaha sida “seexashada” dhimashada (Yooxanaa 11:11-14) amaba “cago” sida ka muuqata (Ruud 3:7-8; 1 Samuu’eel 24:3).
    - b. circumlocutions – beddelka erayada loo adeegsado magaca Ilaah, sida “Boqortooyada janada” (Matayos 3:21) amaba “cod samada ka yimid” (Matayos 3:17).
    - c. Xaqiiqanimada hadalka
      - (1) Buunbuuninta aan suurto galka ahayn (Matayos 3:9; 5:29-30; 19:24).
      - (2) Dabacsanaanta odhaahyada (Matayos 3:5; Falimaha Rasuullada 2:36).
      - (3) Waxyaabaha la xidhiidha shakhsiyaadka ( 1 Korintos 15:55).
      - (4) Jeesjeeska (Galatiya 5:12)
      - (5) Qoraallada gabayga ah (Filiboy 2:6-11)
      - (6) Codka ka dhex muuqda erayada
        - (a) “kaniisad”
          - (i) “kaniisad” (Efesos 3:21)
          - (ii) “yeedhitaan” (Efesos 4:1,4)
          - (iii) “yeedhay” (Efesos 4:1,4)
        - (b) “xor”
          - (i) “naag xor ah” (Galatiya 4:31)
          - (ii) “xornimo” (Galatiya 5:1)
          - (iii) “xor” (Galatiya 5:1)
    - d. Erada luqada – luqada oo badanaa ah dhaqan iyo luqada gaarka ah:
      - (1) Waxay ahayd adeegsiga tusaale ahaaneed ee “cunto” (Yooxanaa 4:31-34).
      - (2) Wuxuu ahaa adeegsiga tusaale ahaaneed ee “Macbad” (Yooxanaa 2:19; Matayos 26:61).
      - (3) Wuxuu ahaa erayada Cibraaniga ah ee naxariista, “nacayb” (Bilowgii 29:31; Sharciga Kunoqoshadiisa 21:15; Tesaloniika 14:36; Yooxanaa 12:25; Rooma 9:13).
      - (4) “Dhammaan” iyo “badan.” Is barbar dhig Ishacyaah 53:6 (“dhammaan”) iyo 53:11 iyo 12 (“badan”). Erayadani waxay yihiin synonymous sida Rooma 5:18 iyo 19.
  5. Adeegsiga erayo buuxa halkii laga adeegsan lahaa mid keliya. Tusaale ahaan: “Sayid Ciise Masiix.”
  6. Adeegsiga gaarka ah ee *autos*
    - a. Marka uu la socdo shaqalka waxa loo tarjumay “la mida.”
    - b. Marka aanu la soconin shaqalku waxa loo tarjumay sida magac u yaalka INTENSIVE RFLXIVE PRONOUN ka –“laftiisa,” amaba “lafteeda.”
- E. Ardayda akhriinaysa Baybalka aan Giriigga ahayni waxay xoojinta ku ogaan karaan siyaabo kala duwan:
1. Adeegsiga qoraallada faahfaahsan ee isugu jira Giriigga/Ingriisida.
  2. Isbarbar dhigista tarjumaadaha kala duwan ee Ingriisida. Tusaale ahaan: (KJVE, NKJV, ASV, NASB, RSV, NRSV) iyo kuwa kalee la midka ah (Williams, NIV, NEB, REB, JB, NJB, TEV). Waxa kaloo caawimaad laga fiican laga heli karaa *The Bible in Twenty-Six Translations* oo uu daabacay Baker.
  3. Adeegsiga *The Emphasized Bible* oo uu leeyahay Joseph Bryant Rotherham (Kregel, 1994).
  4. Adeegsiga tarjumaadaha kale ee badan
    - a. *The American Standard Version* ee 1901
    - b. *Young’s Literal Translation of the Bible* oo uu leeyahay Robert Young (Guardian Press, 1976).

Haddaba barashada naxwuhu way adagtahay laakiinse waxay lagama maarmaan u tahay fasiraadda haboon. Qeexitaanadan kooban amaba faallooyinkan iyo tusaalayaashan waxa loogu talo galay inay caawiyaan dadka aan Giriigga ahayn ee akhriinaya naxwaha uu koobsanayo Kitaabkani, hubaashiina waa la fududeeyay qeexitaannada. Waxa loogu talo galay inaanay noqonin kuwo adag oon dabacsanayn, laakiinse inay noqdaan tallaabo wax ku

oola oo fududaynasa fahmitaanka kitaabka Axdiga Cusub. Sidoo kale waxaan rajaynaynaa in qeexitaannadani ay akhristayaasha u fududayn doonaan faallooyinka amaba fasiraadaha ay mufasiriinta kale ka bixiyiin Axdiga Cusub.

Waa inaan awood u yeelano inaan fasiraaddeena ku salayno macluumaadka uu xanbaarsanyahay qoraalka Kitaabku, laakiinse naxwuhu isna waa mid aad ugu muhiima arrintan. Waxyaalaha kale waxay iyana noqon karaan dhinaca taariikhda, macnaha qoraalku xanbaarsanyahay ee xagga suugaan ahaaneed, adeegsiga erayga iyo aayadaha isku midka ah.

## LIFAAQA LABAAD

### CANBAARAYNTA QORAAL AHAANEED

Mawduucani wuxuu khuseeyaa sidii loo sharixi lahaa qoraalka ku dhex sugan tafsiirkan, waxaana la adeegsan doonaa guudmarkan:

- I. Ilaha qoraal ahaaneed ee Baybalka Ingiriisida ah
    - A. Axdiga Hore
    - B. Axdiga Cusub
  - II. Sharrixitaanka kooban ee dhibaatooyinka iyo aragtiyaha “canbaaraynta qoraal ahaaneed.”
  - III. Meelaha loogu noqon karo akhriska dheeraadka ah
- I. Ilaha qoraal ahaaneed ee Baybalka Ingiriisida ah
- A. Axdiga Hore
    1. Masoretic Text (MT) – Qoraalka Cibraaniga ah waxa dejiyay Rabbi Aquiba markii taariikhdu ahayd 100 C.D. Dhibcaha shaqallada, lahjadda, xarakada iyo waxyaalaha la midka ah waxa lagu daray qarnigii lixaad ee C.D. waxaana la dhammeeyay qanigii sagaalaad ee C.D. waxaana sameeyay culimada Yuhuudda ee loo yaqaanay Masoretas. Haddaba, qaabka qoraal ahaaneed ee ay adeegsadeeni wuxuu la mid ahaa ka Mishnah, Talmid, Targums, Peshitta, iyo Vulgate.
    2. Septuagint (LXX) – Dhaqan ahaan waxa la yidhaahdaa Septuagint ga waxa soo saaray culimmo Yuhuuda oo tiradoodu dhammayd 70 iyagoo kuna dhammays tiray 70 cisho, waxaanay u soo saareen maktabadda Aleksandariya iyada oo uu maal gelinayo Boqor Blotemigii labaad (285-246 C.H). Waxa haddaba tarjumaadda codsaday oo soo jeediyay hogaamiye Yuhuudi ahaa oo ku noolaa Aleksandariya, waxaana odhaahdan dhaqan ahaaneed sheegaysa “Letter of Aristeas.” Haddaba, LXX ka waxa lagu saleeyay qoraal dhaqan ahaaneed oo Cibraani ah isla markaasna ka duwan qoraalka Rabbi Aquiba (MT).
    3. Dead Sea Scrolls (DSS) – waxa lagu dhex qoray Roomaanka Masiixa hortiis (200 C.H ilaa 70 C.H) waxaana qoray qolo Yuhuuda oo la odhan jiray “Essenes.” Haddaba, qoraallada Cibraaniga ah waxa laga helay agagaarka Badda Dhimatay, waxaanay mujiinayaan xoogaa inay ka duwanaayeen qoraallada MT iyo LXX ka.
    4. Waxa jira tusaalayaal muhiima oo ku saabsan is barbardhiga qoraalladani siduu mufasiriinta uuga caawiyay fahanka Axdiga Hore.
      - a. LXX ku wuxuu culimada mufasiriinta ah iyo tarjumayaasha ka caawiyay fahanka MT
        - (1) LXX ka Ishacyaah 52:14, “sidii kuwa badanu ula yaabi jireen oo kale.”
        - (2) MT ga Ishacyaah 52:14, “sida kuwo badani kuula yaabeen.”
        - (3) Ishacyaah 52:15 dhexdeeda magac uyaalka LXX ka waxa laga dhigay
          - (a) LXX, “sida quruumo badani uuga yaabi doonaan isaga”
          - (b) MT, “wuxuu yaab gelin doonaa quruumo badan.”
      - b. DSS ku wuxuu tarjumayaasha iyo culimada ka caawiyay fahanka MT
        - (1) DSS ka Ishacyaah 21:8, “wuu qayliyay oo wuxuu yidhi, waxaan jooga meeshayda waardiyaha.”
        - (2) MT ga Ishacyaah 21:8 “wuxuu u qayliyey sidii libaax oo kale oo yidhi, Sayidow, maalintii oo dhan waxaan had iyo goorba ku kor taagnahay munaaradda.”
      - c. LXX ka iyo DSS ka labadooduba waxay faahfaahiyeen Ishacyaah 53:11
        - (1) LXX iyo DSS, “markuu arko naftiisa wuxuu arki doo iftiin, waanu u riyaaqi doonaa”
        - (2) MT, “Wuxuu arki doonaa waxay naftiisu ku dhibtootay, wuuna u riyaaqi doonaa”
  - B. Axdiga Cusub
    1. In ka badan 5300 oo qoraal isla markaana ah gebi ahaanba qaybaha Axdiga Cusub ee Giriigga ayaa jira. Ku dhowaad 85 waxa lagu qoray waraaqo hore iyadoo 268 qoraal ay yihiin kuwo lagu qoray far waayayn (uncials). Intii ka dambaysay qarnigii sagaalaad C.D., waxa la sameeyay qoraallo badan, iyadoo qoraallada lagu qoray Giriigga ay ahaayeen ku dhowaad 2700. Waxa kaloo la hayaa 2,100 nuqul ahna Qorniinka isla markaasna loo adeegsaday caabudaadda.
    2. Ku dhowaad 85 kamida qoraallada Giriigga oo koobsanaya qaybo ka mida Axdiga Cusub ayaa waxa lagu hayaa matxafyada. Kuwo ka mida qoraalladaasna waxay taariikhdoodu u noqonaysaa qarnigii labaad ee Masiixa dabadiis, laakiinse badankooda waxay taariikhdoodu u noqonaysaa qarnigii afraad

ee C.D. Haddaba, MSS ku ma koobsanayo Axdiga Cusub oo dhan, maxaa yeelay nuquulladan ugu da'doodu aadka u wayntahay ee Axdiga Cusub maaha macneheedu in loogala jeedo iyaga oo kala duwan. Kuwo badan oo ka mida waxa loo koobiyeeyay adeegisaga, sidaasi darteedna maadaama oo aan daryeelka dan laga gali jirin waxay ka koobsanayaa kala duwanaansho badan.

3. Codex Sinaiticus ka, waxa loo yaqaanay xarafka Cibraaniga ah ee  $\aleph$  (*aleph*) amaba (01), Waxa laga helay St. Catherine ee Buur Siinay dusheeda, waxaana helay Tischendorf. Waxaanay taariikhdeedu u laabanaysaa qarnigii afraad ee C.D. waxaanay ka koobantahay LXX ka Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub ee Giriigga ah, waana nooca “Qoraalkii Aleksandariyiinta.”
4. Codex Alexandinus, waxa loo yaqaanaa “A” amaba (02), waana qoraaladii Giriigga ee ahaa qarnigii shanaad isla markaasna laga helay magaalada Aleksandariya ee waddanka Masar.
5. Codex Vaticanus, waxa loo yaqaanaa “B” amaba (03), waxaana laga helay maktabadda Faatikaanka ee Rooma, taariikhdeeduna wuxuu u laabanayaa badhtamihii qarnigii afraad C.D. Waxaanay koobsanaysaa LXX ka Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub ee Giriigga ah. iyana sidoo kale waxay la mid tahay “Qoraalkii Aleksandariyaanka ”
6. Codex Ephraemi, waxa loo yaqaanaa “C” amaba (04), waana qoraaladii Giriigga ee qarnigii shanaad ee badh ahaantooda la baabiiyay.
7. Codex Bezae, waxa loo yaqaanaa “D” amaba (05), waana qoraaladii Giriigga ee qarnigii shanaad. Waxaana weeyi masuulka ugu sarreeya waxa lagu magacaabo “The Western Text” oo ah qoraallada reer galbeedka. Waxay koobsanaysaa waxyaalo badan oo lagu daray, waxaanay ahayd waxa ugu muhiimsan ee markhaatiga u ah tarjumaadda King James.
8. MSS ka Axdiga Cusub waxa loo kala saari karaa saddex qaybood amaba waxa suurto gala afar qaybood, oo wadaaga waxyaalo isku mida.
  - a. Qoraallada Aleksandariya ee Masar
    - (1) P<sup>75</sup>, P<sup>66</sup>, (ku dhowaad 200 C.D), waxaana lagu diiwaan geliyay Injiillada.
    - (2) P<sup>46</sup> (ku dhowaad 225 C.D), waxaana ku diiwaan gashan waraaqihii Bawlos.
    - (3) P<sup>72</sup> (ku dhowaad 225-250 C.D), waxaana ku diiwaan gashan Butros iyo Yuudas
    - (4) Codex B, oo lagu magacaabo Vaticanus (ku dhowaad 325), waxaanu koobsanayaa Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub oo dhammays tiran.
    - (5) Xigashooyinka Origen ee nooca qoraalladan
    - (6) MSS ka kale ee tusinaya qoraallada noocan ahi waa  $\aleph$ , C, L, W, 33.
  - b. Qoraallada gablbeedka ee Waqooyiga Afrika
    - (1) Waxyaalahii lagasoo xigtay wadaadadii kaniisadda Waqooyiga Afrika sida, Tertullian, Cyprian, iyo tarjumaadihii Laatiinka ee Hore.
    - (2) Waxyaalihii lagasoo xigtay Irenaeus
    - (3) Waxyaalaha laga soo xigtay Tatian iyo tarjumaadaha Old Syriac.
    - (4) Codex D “Bezae” ee raaca qoraalka noocan ah
  - c. Qoraallada bariga Byzantine ee Constantinople
    - (1) Qoraalkani noocan ahi boqolkiiba 80 wuxuu ka muuqanayaa 5300 ee MSS ka.
    - (2) Waxa lagasoo xigtay wadaadadii kaniisadii Antiokh ee Siiriya, Cappadoceans, Chrysostom, iyo Therodoret
    - (3) Codex A, ee Injiilada oo keliya
    - (4) Codex E, (qarnigii sideedaad) ee Axdiga Cusub oo dhammays tiran.
  - d. Nooca afraad ee suurta galka ahina waa “Caesarean” ee Falastiin
    - (1) Waxa laga dhex arki karaa Markos
    - (2) Markhaatiyada qaarkood ayaa sheegaya inay yihiin P<sup>45</sup> iyo W.

## II. Dhibaatooyinka iyo aragtiyaha “canbaaraynta qoraal ahaaneed.”

### A. Sida kala duwanaanshuhu usoo arooray

#### 1. Kedis ahaan

- a. Ilduufka ku imanaya qoraalka gacanta ee laga yaabo inuu keeno khaladka erayada (homoioteleuton).
  - (1) Ilduufka amaba khaladka ku iman kara laban laabista xarafka amaba erayga (haplography).
  - (2) Kama’ a amaba ilduufka xagga maanka ah iyadoo lagusoo celiyo erayo amaba sadar amaba iyadoo si khaldan loo qoro (dittography)

- b. Ilduufka amaba khaladka ka iman kara yeedhiska (itacism). Hadiyo goorna khaladka xagga qoraalku wuxuu keeni karaa erayo codkoodu isku mid noqon karo luqada Giriigga.
  - c. Qoraalladii hore ee Giriiggu maha laha cutubyo iyo qaybinta aayadaha, sidoo kalena xarakada iyo meelaha bannaan ee u dhexeeya erayadu way yaraayeen ama mabay jirin.
2. Badheedhka
- a. Bedelitaanka waxa loo sameeyay si loo hagaajiyo qaab dhismeedka naxwe ahaaneed
  - b. Bedelitaanka waxa loo sameeyay si ay u waafaqaan aayadaha kale ee Kitaabka ka midka ah isla markaasna ay isku midka yihiin.
  - c. Bedelitaanka waxa loo sameeyay iyadoo la isku xidhayo labo ama akhrisyo kaloo ka badan
  - d. Bedelitaanka waxa loo sameeyay iyadoo la isku dayayo saxitaanka dhibaato ka muuqan karta qoraalka ( 1 Korintos 11:27 iyo 1 Yooxanaa 5:7-8)
  - e. Faahfaahin dheeraada sida hagaajinta taariikhda amaba fasirka haboon ee qoraalka ayuu sheekh kala xadeeyay, laakiin waxa dhici karta in sheekh kale uu isku dhex daray (Yooxanaa 5:4).
- B. Aragtida asaasiga u ah canbaaraynta qoraal ahaaneed (waxyaabaha caqli galka ah marka la akhrinayo qoraalka asalka ah hadii uu jiro is khilaaf)
- 1. Waxyaalaha ugu sirgaxan amaba qoraalka naxwe ahaan aan caadiga ahayni waa qoraalka asalka ah
  - 2. Qoraalka ugu gaabani waa ka asalka ah
  - 3. Qoraalka wayn waxa la siiyay culays badan sababtuna waa dhowaansheheeda taariikh ahaaneed ee asal ahaanta, wax waloo kalana isku mid bay ahaayeen
  - 4. MSS ka juquraafi ahaan kala duwani wuxuu leeyahay akhrinta asalka ah
  - 5. Caqiido ahaan qoraallada taagta yari, gaar ahaan kuwa la xidhiidha fiqiga ee is bedelaan, sida Saddexmidnimada 1 Yooxanaa 5:7-8 waana in la door bido.
  - 6. Qoraalka sida ugu fiican u sharrixi kara asalka kala duwanaanshaha
  - 7. Labo xigasho oo tusin kara isu dheellitirka dhibaatooyinkan kala duwanaanshaha
    - a. J. Harold Greenlee kitaabkiisa, *Introduction to New Testament Textual Criticism*, “Ma jirto caqiido Masiixi ah oo loo diidayo ka doodista qoraalka; ardayga Axdiga Cusubina waa inuu ka digtoonaado doonista ah inuu qoraalkiisu yahay asal kana xooggan yahay kii asal ahaan waxiyaga ahaa” (p.68).
    - b. W. W. Criswell ayaa Greg Garrison ka *Birmingham News* u sheegay in isagu aanu rumaysnayn in eray kasta oo Kitaabka ka mid ahi aanu ahayn waxyi, “ugu yaraan maaha eray kasta oo wakhtigan casriga ah ay sameeyeen tarjumaannadu.” Criswell wuxuu yidhi: “Anigu aadbaan u rumaysanahay canbaaraynta qoraal ahaaneed. Sida aan u malaynayana, qaybta ugu danbaysa cutubka 16 ee Markos waa faasiqnimo mana aha waxyi, laakiinse waa la isku dardaray...marka aad barbar dhigto qoraallada kale ma jiro mid gebo gebadiisu tahay sida Kitaabka Markos oo kale, qof ayaana ku daray...”
- Sidoo kale duqa SBC ayaa isna sheegay in sidoo kale loo fiirsan karo dhacdada ku diiwaan gashan Yooxanaa 5 ee ah Ciise iyo wartii Beytesda. Iyo sidoo kale falaqaynta labada waxyaalood ee ku saabsan Yuudas oo is dilay (Matayos 27 iyo Falimaha Rasuullada 1): “Waa aragtiyo kala duwan oo is dilitaan ah.” ayuu yidhi Criswell. “Haddii ay ku jirto Kitaabka, waxa loo hayaa sharraxaad iyadoo labada meelood ee sheegaya is dilitaanka Yuudasna ay ku sugan yihiin Baybalka.” Waxa kaloo Criswell intaas uu raaciyay, “Canbaaraynta qoraal ahaaneed iyada lafteeda ayaa isu ah cilmi layaab badan. Mana aha wax kooban, mana aha edeb darro, laakiinse waa wax jira oo udub dhexaad ah...”

### III. Dhibaatooyinka qoraallada

A. Meelaha amaba maraajicda loogu noqon karo akhris dheeraad ah:

- 1. *Biblical Criticism: Historical, Literary and Textual*, waxaana leh R. H. Harrison
- 2. *The Text of the New Testament: Its Transmission, Corruption and Restoratoin* oo uu leeyahay Bruce M. Metzger
- 3. *Introduction to New Testament Textual Criticism*, oo uu leeyahay J. H. Greenlee

## AAQA SADDEXAAD

### MACNAHA ERAYADA CUSUB

**Adoptionism.** Waa aragtiyihii hore ee Ciise marka la eego xidhiidhka uu la leeyahay ilaahnimada. Waxay markaasi sheegaysaa in Ciise uu ahaa aadane caadi ah iyadoo si gaarana uu Ilaah xidhiidh uula yeeshay markii la baabtiisay (Matayos 3:17; Markos 1:11) amaba sarakicistiisii (Rooma 1:4). Ciise noloshiisu waxay ahayd mid tusaale u ah Ilaah, marka dhinac laga eegana baabtiisamkiisii iyo sarakiciddiisii waxay ka dhigeen Wiilka Ilaah (Rooma 1:4; Filiboy 2:9). Haddaba middani waxay ahayd aragtii kaniisaddii hore iyo intii ka horraysay qarnigii siddeedaad. Halkii Ilaah ka noqon lahaa nin oo isu soo ekaysiin lahaa, ayaa waxay tilmaamaysaa in ninkii uu isagu noqoday Ilaah!

Way adagtahay sida loo sheego Ciise inuu yahay Ilaah Wiilka ah, iyo sida uu tusaale ugu ahaa noloshu Ilaah. Haddaba, hadii ugu horrayntiiba uu ahaa Ilaah, sidee marlabaad loogu abaal marin karaa amaba loogu sharrixi karaa Ilaahnimo? Haddii ugu horrayntiiba jiray oo ahaa Ilaah sidee baa loo siin karaa tix gelin dheeraad ah? inkastoo ay adagtaha inaan innagu garano, haddana Aabbuhu wuxuu Ciise siiyay tix gelin gaara oo ku salaysan sida wanaagsan ee uu u fuliyay doonista Aabbaha.

**Alexandrian School.** Qaabkan ah fasiraadda Baybalku wuxuu ahaa mid lagu samayn jiray magaalada Aleksandariya ee waddanka Masar qarnigii labaad C.D. waxaanu adeegsanayaa nidaamka fasiraadda ee Philo oo ka mid ahaa xertii Plato, waxaana lagu magacaabi jiray qaacidada amaba nidaamka maldahan. Wuxuu saamayn ku lahaa kaniisadda ilaa lagasoo gaadho wakhtigii uu samaysmay Borotastanku asal ahaanteeduna waxay u noqonayaan Origen iyo Augustine. Eeg Moises Silva kitaabkiisa, *Has The Church Misread The Bible?* (Academic, 1987).

**Alexandrinus.** Qoraalkan Giriigga ah ee u noqonaya qarnigii shanaad kana socda Aleksandariya, wuxuu koobsanayaa Axdiga Hore, Apocrypha, iyo Axdiga Cusub. Waana markhaatiga ugu wayn ee gebi ahaanba Axdiga Cusub ee Giriigga ah ( marka laga reebo qaybo ka mida Matayos, Yooxanaa, iyo 2 Korintos). Marka haddaba qoraalladan oo ah “A” iyo kuwa ah “B”(Vaticanus) ay isku waafaqaan akhrista, waxa culimada badankoodu kasoo qaadaan inay yihiin qoraallada tusaalaha u ah asalka.

**Allegory.** Waa nooc ka mida tafsiirrada Baybalka oo asal ahaanna waxa qoray Yuhuuddii Aleksandariya, waxaana caan ku ahaa Philo gii reer Aleksandariya. Asal ahaanna waxay xoojinayaan sidii Qorniinku ku noqon lahaa mid leh dhaqan iyo faylasofuyad isku mida iyadoo laga tegayo dhacdooyinka taariikh ahaaneed amaba dhacdooyinka suugaan ahaaneed. Waxa uu raadiyaa macno ruuxi ahaaneed oo ka danbeeya qoraalkasta oo ka mida Qorniinka. Waa waa in la ogsoonaado waxyaalaha Masiixu ku sheegay Matayos 13, iyo Bawlos ee Galatiya 4 waxaanay tusaale u tahay xaqiiqada.

**Analytical lexicon.** Kani waa nooc ah qalab baadhitaan oo suurto gelinaya sidii lagu garan lahaa eray kasta oo Giriigga isla markaasna ku sugan Axdiga Cusub dhexdiisa. Wuxuu koobsanayaa erayada Giriigga ah iyo qeexitaankooda, waxaanu markaas akhristyaasha xerta ah u suurto gelinayaa oo ka caawinayaa fahanka macnaha erayada Giriigga ah iyo naxwaha.

**Analogy of Scripture.** Tani waa cibaarada lagu cabiro laguna sheego in dhammaanba Kitaabku uu yahay waxyiga Ilaah, sidaasi darteedna malaha wax iska hor imaada laakiinse wuu isu dheelli tiran yahay. Aragtidani haddaba waa midda gun dhigga u ah adeegsiga aayadaha isku midka ah iyo fasiraaddooda.

**Ambiguity.** Waxay tilmaamaysaa hubitaan la'aanta ka imanaysa marka ay jiraan qoraallo leh labo macnayaal amaba ka badan oo suurto gal ah isla markaasna hal mar lawada sheegay. Waxa suurto gal ah Yooxanaa oo adeegsaday middan xanbaarsanaan karta labada waxyaalood ee suurto galka noqon kara.

**Anthropomorphic.** Macneheedu waxa weeyi “haysashada dabecada amaba qaabka la xidhiidha aadanaha,” waxaana loo adeegsaday sheegitaanka diinteenna ku saabsan Ilaah, asal ahaanna waxay ka timid erayga Giriigga ah ee tilmaamaya aadanaha, waxaana loogala jeedaa inaan Ilaah uga hadalno sidiyoo uu nin yahay.

Maxaa yeelay Ilaah waxa looga hadlaa jidh ahaan, nafsad ahaan iyo fikir ahaan intaba, waxaana loo adeegsadaa erayo la xidhiidha aadanaha (Bilowgii 3:8; 1 Boqorradii 22:19-23). Si kastaba ha ahaatee, ma jiraan erayo kale oon ahayn kuwa aadanuhu isu adeegsan karo inaan adeegsano, sidaasi darteedna cilimiga amaba aqoonta aan Ilaah u leenahay waa mid kooban.

**Antiochian School.** Qaabkan fasis ahaaneed ee Baybalka waxa lagu horu mariyay Antiyokh, Siiriya qarnigii saddexaad C.H. waxaanu ka jawaab celinayay nidaamkii maldahnaa ee lagu adeegsan jiray magaalada Aleksandariya ee Masar. Haddaba, ujeedadiisa asaasiga ahaydi waxay ahayd in diiradda la saaro macnaha ay samaynaso taariikhda ku sugan Baybalku, waxaanu Baybalka u fasisrayaa si caadi ah. sidoo kale dugsigani wuxuu ka hadlay oo fara geliyay haddiiba Ciise Masiix uu leeyahay labo dabecadood (Nestorianism) amaba hal dabecad oo kaliya (Ilaah dhammays tiran iyo aadane dhammays tiran). Wuxuu dugsigani la xidhiidhay kaniisaddii Roomaanka iyo tii Aasiya laakiinse muhiimaddiisu way yarayd. Ugu dambayntiina wuxuu waddo u noqday fasiraadaha ku salaysan kitaabka ee ay raaceen Brotastanku (Luther iyo Calvin).

**Antithetical.** Waa mid ka mida saddex eray oo loo adeegsado macnaha xidhiidhka ka dhexeeya laynanka gabayada Cibraaniga. Waxay la xidhiidhaa layman gabay ah oo macnohoodu iska soo horjeedno (Maahmaahyadii 10:1, 15:1).

**Apocalyptic literature.** Wuxuu ahaa nooc gaar u ahaa Yuhuudda, waxaanu ahaa nooc ka mida qoraalka oo la adeegsaday wakhtiyadii Yuhuudda ay duullaanka ku ahaayeen awoodihii ajnebiga ahaa ee ku hareeraysnaa. Waxa ay u muuqataa inuu ku saabsanaa Ilaah oo maamula dhacdooyinka dunida oo dhan, iyo isaga oo si gaara dan uga leh Israa'iil isla markaasna ilaalinaya marwalba. Haddaba, qoraalladani waxay ballan qaadayeen in ay iman doonto guusha Ilaah een xadka lahayni.

Waxay markaasi wataa calaamooyin badan oo xitaa lagu muujiyay midabo, tirooyin, aragtiyo, riyooyin, dhexdhexaadinta malaa'igta, erayo sir ah iyo waxyaalaha ku dhex jira khayrka iyo sharka. Tusaal ahaan waxaan usoo qaadan karnaa (1) Axdiga Hore dhexdiisa, Yexesqeel (cutubyada 36-48), Daanyeel (cutubyada 7-12), Sekaryaah; iyo (2) Axdiga Cusub dhexdiisa, Matayos 24; Markos 13; 2 Tesaloniika 2 iyo Muujintii.

**Apologist (Apologetics).** Waxay asal ahaan ka timid luqada Giriigga waxaana weeyi “is difaacitaan sharciyaysan.” Waa xishmad gaara oo fiqiga dhexdiisa ah isla markaasna raadisaa caddayn iyo doodo dhex mari kara caqiidooyinka Masiixiyadda.

**A priori.** Waxay asal ahaan la xidhiidhaa “run u eegaysiinta.” Waxay tahay sabab u yeelista waxyaalaha hore loo aqbalay qeexitaankooda amaba heerka ay ugu muuqan karaan runta, waana midda lagu aqbali karo itixaamis la'aan.

**Arianism.** Ariyas wuxuu kaniisad dhaqaaleeye ka ahaa kaniisaddii Aleksandariya qarnigii saddexaad iyo kii afraad. Wuxuu markaasi sheegay in Ciise uu hore u jiray laakiinse aanu aanu lahayn awoodda ilaahnimada, waxaana suurta gala inuu raacayay Maahmaahyadii 8:22-31. Wuxuu la dooday wadaadkii Aleksandariya, oo bilaabay (318 C.D) dood sanado badan socotay. Haddaba, Arianism ku wuxuu noqday caqiidada Kaniisadda Bariga. Guddiga Nicaena ayaa haddaba 325 C.H ayaa xukumay Arius waxaanay carrabka ku adkeeyeen tayada iyo ilaahnimada Wiilka.

**Aristotle.** Wuxuu ka mid ahaa faylasuufyadii Giriigii hore, waxaanu ahaa ardaygii Plato, sidoo kalena wuxuu ahaa macallinkii Aleksandarkii Waynaa. Haddaba, saamayntiisu xitaa maanta waxay gaadhsiisan tahay waxyaabo badan oo khuseeya daraasaadka casriga ah, maxaa yeelay wuxuu adkeeyay oo sheegay aqoonta lagu heli karo wax u fiirsashada iyo ablo ablaynta, waana aragtiyaha uu aaminsanyahay sayniska.

**Autographs.** Waa magaca loo bixiyay qoraaladii asalka ahaa ee Baybalka. Qoraaladii asalka ahaa ee gacmaha lagu qoray way lumeen, waxaana la hayaa koobiyadii oo keliya. Haddaba tani waa meelaha loogu laaban karo qoraallada kala duwan ee Giriigga iyo Cibraaniga isugu jira wakhtigooduna horreeyay.

**Bezae.** Waa qoraal ah Giriig iyo Laatiin isla markaana u noqonaya qarnigii lixaad C.D. waxaana loo soo gaabiya “D.” waxaanu koobsanayaa Injiillada iyo Falimaha Rasuulda iyo sidoo kale kuwo ka mida Waraaqaha Guud

ahaan. Waxa ay koobsanaysaa waxyaalo badan oo dheeraad ah, waxaanu samaynayaa waxyaalaha gundhigga u ah qoraallada Giriigga ee ka danbeeyay King James Version.

**Bias.** Waa eray loo adeegsaday qeexitaanka xooggan ee wax lagu tilmaamayo amaba aragtida ah. waa fikirka dhexdhexaad ahaaneed ee ka madax bannaan suurto galnimo la'aanta shay amaba aragti.

**Biblical Authority.** Waxa loo adeegsaday dareen gaar ah. waxa lagu qeexay fahanka laga qaadan karo asal ahaan qoraaga wixii maalmihiisii la odhan jiray iyo sida loogu dabaqi karo wakhtigan aan joogno. Haddaba, awoodda amaba amarka uu leeyahay Baybalku ayaa wuxuu yahay midka inna hagi kara oo keliya. Si kastaba ha ahaatee, iftiinkan dartiis waxaan xaddiday qaabka ah in Baybalka lagu fasiro naxwe ahaanta iyo taariikh ahaanta.

**Canon.** Waxa loo adeegsadaa qeexitaanka qoraallada la rumaysan yahay inay yihiin waxyi gaara, waxaana loo adeegsaday Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub labadaba.

**Christocentric.** Waxa loo adeegsaday Ciise . waxaan u adeegsaday is ku xidhista fahanka ah in Ciise uu yahay Rabbiga dhammaanba Baybalka. Axdiga Hore isaga ayuu sii sheegay, oo isaguna wuu dhammays tiray wixii lagu sii sheegay iyo ujeeddadiiba (Matayos 5:17-48).

**Commentary.** Waxa weeyi kitaab gaara oo baadhitaan ah. wuxuu tusinayaa fikradda guud ahaaneed ee kitaabka Baybalka, kaddibna wuxuu sharraxayaa qayb kasta oo ka mida kitaabka. Qaar waxay diiradda saaraan ku dabiqitaanka, halka kuwo kalena ay siyaabo kale uula tacaalaan qoraalka. Haddaba, kitaabadani waxbay caawinayaan laakiin waxa muhiima in la adeegsado marka qofku uu sameeyo baadhitaankiisa. Fasiraadda mufasiriinta waa inaan la aqbalin iyada oon ceeb loo raadinaynin. Haddaba, is barbar dhigista fasiraado badani waxay noqon kartaa mid caawimaad badan leh.

**Concordance.** Waa qalab baadhitaan oo loogu talo galay barashada Baybalka. Waxa ay diiwaan gelinaysaa saxsanaanta eray kasta oo kusoo arooray Axdiga Hore iyo Axdiga Cusub, siyaabo kala duwan ayaanay wax u caawinaysaa: (1) Qeexitaanka erayada Cibraaniga amaba Giriigga ee ka danbeeya eray kasta oo Ingiriisi ah; (2) is barbar dhigista qoraallada loo adeegsaday erayada isku midka ah ee Cibraaniga amaba Giriigga; (3) tusidda meesha laba eray oo Cibraani amaba Giriigga ahi ku kala duwanyihiin isla markaana iyagoo isku mida loogu adeegsaday Ingiriisida; (4) muujinta soo noqnoqoshada erayo lagu dhex hubo buugaag amaba qoraayaal; (5) ka caawinta sidii qof ku heli lahaa aayado ka mida Baybalka ( Walter Clark kitaabkiisa *How to Use New Testament Greek Study Aids*, pp. 54-55).

**Dead Sea Scrolls.** Waxa weeyi qoraallo taxane ah oo ku qoran luqada Cibraaniga iyo Aramaatiga isla markaasna laga helay agagaarka Badda Dhimatay 1947. Waxay ahaayeen maktabadihii diinta ee Yuhuuddii qarnigii hore. Cadaadiskii Roomaanka iyo dagaalladii 60 kii ayaa ku sababay inay ku dhex qariyaan godadka iyo waxyaalaha la midka ah. haddaba, waxay innaga caawiyeen fahanka Falastiintii qarnigii hore iyagoo ansixiyayna saxnimada Masoretic Text ka, iyo sida ay ugu noqonayaan casrigii hore ee C.H. Waxa iyaga loo soo gaabsadaa “DSS.”

**Deductive.** Nidaamka ku dhisan caqli galka amaba sabab u yeelistu wuxuu ka imanayaa waxyaalaha sida gaarka ah loogu yeeli karo macnaha iyo sababta. Waxay kasoo hor jeeddaa sabab u yeelista saynisyahaddu ku dhaqmaan ee laga helo u fiirsashada si loo gaadho aragti kama danbays ah.

**Dialectical.** Waa nidaamka sababta u yeelaya waxyaalo iska hor imanaya iyada oo la raadinayo jawaabta midaynaysa ee koobsanaysa labada dhinacba. Caqiidooyin badan oo kitaabi ah ayaa waxay leeyihiin dhinacyo ay isku khilaafsanyihiin, karti – doonis ; ammaan – adkaysi; rumaysad – camal; go'aan – edbin; xornimada Masiixiga – masuuliyadda Masiixiga.

**Diaspora.** Waxay ahayd erayga Giriigga ah ee Yuhuuddii Falastiiniyiintu u adeegsan jireen Yuhuudda kale ee ku noolaa dhul ka baxsan Dhulkii Ballanqaadka.



**Dynamic equivalent.** Waa aragti ah tarjumaadda Baybalka. Tarjumaadda Baybalku waxay noqon karaa “erayba eray” iyadoo ay tahay in eray kasta oo Ingiriisi ah in laga helo Cibraaniyada amaba Giriigga, iyo iyadoo la raaco “cibaaroyinka” oon in badan la tix gelinin in eray walba loo helo mid u dhigma. Haddaba “dynamic equivalent” gu wuxuu u dhexeeyaa labadan, waana in si runa loo qaato qoraalka asalka ah, laakiin loo tarjumo si waafaqsan qaabka naxwe ahaaneed ee casriga ah iyo fadhiisinta erayada. Haddaba, falaqayn fiican oo ku saabsan aragtiyaha tarjumaadaha waxa laga heli karaa kitaabka ay qoreen Fee iyo Stuart ee *How to Read the Bible For All Its Worth*, p. 35 iyo Robert Bratcher Hordhaca uu ka bixinayo TEV.

**Eclectic.** Waxa loo adeegsaday xidhiidhka ay la leedahay canbaaraynta qoraal ahaaneed, waxaanay sheegaysaa ku celcelinta amaba doorashada qoraallada kala gedisan ee Giriigga si loo soo dhiraan dhirriyo qoraalka ugu dhow asalka. Waxaanay diidaysaa aragtida ah in qofkasta oo qoys la ah qoraallada Giriiggu uu haysto asalka.

**Eisegesis.** Waxay kasoo horjeeddaa exegesis ka. Haddii markaas exegesis ku uu yahay “raacitaanka” ujeeddada asalka ah ee qoraaga, kanina wuxuu noqonayaa “keenista” aragti ajnebi ah.

**Etymology.** Waa qaabka barashada erayga si loo helo macnaha asalka ah ee eraygaas. Marka halkan laga bilaabo waxyaalaha asalka ah ee loo adeegsaday si fudud ayaa lagu heli karaa. Haddaba marka la eego xagga fasiraadda Etymology gu maaha mid ka muhiimsan macnaha casriga ah ee erayga.

**Exegesis.** Waa qaabka loo raaco fasiraadda aayadaha. Macneheedna waxa weeyi “in la raaco” ujeeddada iyo fahanka qoraaga iyadoo lana raacayo iftiinka taariikh ahaaneed, suugaan ahaaneed iyo sida macnaha loogu dabiqli karo wakhtiga la joogo.

**Genre.** Waa eray asalkiisu yahay Faransiis isla markaana loogala jeedo noocyo badan oo qoraallo ah. wuxuu xoogaynayaa qaybinta qoraalka oo loo kala saaro: taariikhi, gabay, maahmaah, iyo nidaama amaba sharci ahaan.

**Gnosticism.** Aqoonta ugu badan een u leenahay ayaa waxay ka imanaysaa qoraallada Gnostic ga ee qarnigii labaad. Si kastaba ha ahaatee, fikradahani sidoo kale waxay jooheen qarnigii koobaad iyo intii ka horraysay.

Waxa la sheegaa in kuwo ka mid ahaa caqiidooyinkii Valentian iyo Cerinthian Gnosticism ka qarnigii labaad ayaa waxay ahayeen: (1) waxa la taaban karo iyo ruuxu waxay ahaayeen kuwo isla xidhiidha. Waxa la taaban karaa waa shar ruuxunu wuu wanaagsan yahay, Ilaaha ruuxa ahina ma noqon karo mid si toos ah ula mida sharka; (2) waxa jira waxyaalo kasoo burqanaya Ilaah iyo sharkaba. Kan uguna bilowga iyo dhammaadka ahina waa YHWH Axdiga Hore oo ah kan sameeyay dunida (*kosmos*); (3) Ciise wuxuu ahaa mid ay wax kasoo burqadaan sida YHWH oo kale isla markaana wuxuu u ahaa mid u dhow Ilaaha runta ah. Waxa dadka qaar ay isaga gaadhsiiyaan heerka ugu sarreeya, laakiinse waxa hubaala inuu ka darajo hooseeyo Ilaah ( Yooxanaa 1:14). Maadaama oo waxa la taaban karaa sharyahay Ciise muu haysan karin jidh bani aadan isagoo Ilaahna ah. Wuxuu ahaa ahaa ruux (1 Yooxanaa 1:1-3; 4:1-6); iyo (4) badbaadada waxa lagu helaa rumaysadka Ciise oo ay la socoto aqoon gaara taasi oo ah midda lagu yaqaano dadka gaarka ah. Aqoonta waxa loogu baahan yahay si loogu dhaafu duniadan. Sidoo kalena qaynuunka Yuhuuddu wuxuu u baahna sidii lagu gaadhi lahaa Ilaah.

Macallimiintii beenta ahaa ee gnostic gu waxay ku dhawaaqayeen labo waxyaalood oo iska kasoo horjeeda; (1) kuwo ka mida qaab nololeedku waxay ahaayeen gebi ahaanba kuwo aan la xidhiidhin badbaadada. Waxay iyaga badbaadada iyo ruuxuba kuwo la isugu soo ururiyo aqoon qarsoon oo la xidhiidha caalamka malaa’igaha (*eons*); amaba (2) kuwa kalana, qaab nololeedku wuxuu u ahaa mid u muhiim ah badbaadada. Waxay ku adkaysteen in qaab nololeedka qofku uu caddayn u yahay ruuxa dhabta ah.

**Hermeneutics.** Waxa weeyi eray loo adeegsado hagista, waxaanu leeyahay waxyaabo gaara oo la raaci karo iyo hadiyad. Quduusnimada hadiyo goor waxa ay leedahay labo muhiimadood: muhiimad guud ahaaneed iyo mid gaar ahaaneed, waxaanay tani ku xidhantahay noocyada kala duwan ee ah qoraallada laga helo Baybalka. Nooc kastaa haddaba wuxuu haystaa jidkiisa u gaarka ah, laakiinse waxay sidoo kale wadaagaan waxyaalo isku mida xagga fasiraadda.

**Higher Criticism.** Waxay ka timid fasiraadaha Baybalka iyadoo muhiimadda siinaysa dhacdooyinka taariikh ahaaneed iyo qaabka suugaan ahaaneed ee kitaabada Baybalka.

**Idiom** . eraygan lagu isticmaalay weedhan waxaa laga helaa dhaqano kalad duwun kuwaas oo macnahooda takhsuska ahi uuu yahay. Inaanay sarbeebayso macnaha caadiga ah ee qofka ma erayga. Sida tusaalayaashan asliga ah qaar kood: waxa ay yihiin sida “Taasi waxa ay ahayd mid aad u xun fiican “ ama “waad idishay” Kitaabkana waxaa ku jira odhaayadaas noocaas oo kale ah.

**Elumination** magacani waa magaca la siiyo fekerka in Ilaahay bani-aadanka la hadlo. Macnaha buuxa ee fekradan waxaa badiyaa qeexaya: (1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.

**Inductive.** Tani waa hab ama sabab macquul ah oo shay khaas ah meel ka kaxaysa oo arrin kale ku darta habka waaqiciga ah ee sayniska casriga ah. tani waxa ay aas aas ahaan tahay arragtiddii Aristotle

**Interlinear.** Habkanani waxa weeyaan nadaam qalab cilmi baadhiseed oo u ogaalanaya dadka aan akhrin Kitaabaku inay lafo guraan macnihiis iyo qaabkiisa. Turjumaada afka Ingisiisiga waxa ay ka dhigan tahay iyadii oo heer ilaa eray-ka eray looga soo qaadanayo luqada asal ah Kitaabka. Qalbakani waxa uu koobsadaa “lafo guris” aalad xaqiiq raadisa “oo marka afka Ingiriisiga ah la geliyo sheegaysa habka iyo qeexitaanka aas aasiga ay ku tahay afka Cibraaniga iyo Yuhuuda ”

**Inspiration.** Tani waa fekerka ah ina Ilaahay la hadlay bani-aadanka isaga oo ku hanuuniyaaya qoraayada Kitaabka inay si sax ah oo aan madmadow ku jirin u qoraan muujintiisa. Macnaha fekerka oo buuxa waxaa qeexa saddex weedhood: (1) Muujin- magacani waa magaca la siiyo fekerka in Ilaahay bani-aadanka la hadlo. Macnaha buuxa ee fekradan waxaa badiyaa qeexaya: (1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.

**Language of description.** tan waxa ay xidhiidh la leedahay sarbeebaha ku qoran Axdiga Hore. Waxa ay ka hadashaa aduunkeena sida ay walxuhu ugu muuqadaan shanta dareeme. Maaha qeexitaan sayniseed ama loo lama jeedin caykaas inay noqoto.

**Legalism.** qaab fekar kan waxaa sal u ah aad xoog u saarista ama muhiimad siinta xeerar ama caadooyin diimeed. Waxa ay ka dhigan tahay in bani-aadanka wax qabadkiisu uu yahay sharciyo keenaya aqbalaada Ilaah. Waxa ay ka dhigan tahay xidhiidhka oo hoos loo dhigo korna loo qaado afcaasha gacmahu qabtaan, kuwaas oo labadooduba ah labada ha bee Xidhiidhka axdiga ee u dhexeeya Ilaaha quduuska ah iyo bani-aadanka

**Lateral.** Tani waa magac kale oo qoraal ahaan xooga saaraya nidaamyada taariikhiga ah ee qoraaladii hermeneutics ee Aniyokh. Waxa ay macnaheedu tahay in fasirka ay lug leeyihiin dadka caadiga ah ayna si cad macnaheedu ugu dhigan yihiin afka bani-aadanka, wallow haddana ay aqoosan tahay jiri taanka af maldahan.

**Literary-genre.** Tan waxa ay ku taxa luqdaa hababka kala duwan ee xidhiidhka bani-aadanku qaadan karo, sida gabayga, ama werinta taariikhiga ah iyo sheekooyinka. Nooc kasta oo suugaan ahi waxa uu leeyahay haan macno qarsoon u khaas ah oo lagu daray xeerka guud ee suugaanta qoran oo dhan.

**Lateral- unit.** tani waxa ay la xidhiidhaa fekradaha waaweyn ee Kitaabiga ah ee lagu laqasan yahay. Waxa ay ka koobnaan karaan aayado yar, sadaro, ama cutubyo. Waxa weeyaan qaybo isku filan oo leh oo ay bar dhexaad u tahay mawduuc.

**Lower criticism.** Eeg “Qoraaladaciladraadinta”

**Manuscript.** eray bixintani waxa ay la xidhiidhaa nuqulada kala duwan ee af ka gGiriiga ee laga helo Axdiga Cusub. Badiyaaba waxa ay u qabsan yihiin qaybo noocyo kala duwan oo (1) shayada ay ku qoran yihiin (Papyrus,saan,) ama (2) Qaabka qoraalada laftooda (Xarafaha waaweyn oo dhan ama qoraalada is dabo taxan) waxaa loo soo gaabiyey “MS” (keli) ama “MSS” (Jamac).

**Masoretic –Text .** Tani haddaba waxa ay ku saabsan tahay qoraaladii gacanta lagu qoray qarnigii sagaalaad CD ee qoraalada Cibraaniga ah ee Axdiga Hore ee ay iska soo dhaxleen facyow aqoonyahano Yuhuuda ah. kuwaas oo ka kooban qoraalo qodobaysan iyo iyo qoraalo kale oo macnaynaya. Waxa ay qaab ahaan tahay aas aaska qoraalada ku qoran Kitaabkeena Ingiriisiga ah ee Axdiga hore waxa ay waafaqsan yihiin qoraalada Cibraaniga ah MSS, khaas ahaan Ishaaciyaah ee caanka ku ah duubkii laga helay bada dhimatay. Waxaa loo soo gaabiyaa “MT”

**Metonymy.** Tani waa hadal maldahan oo magac shaylahaa loo adeegsaday inuu metelo shay kale kuwaas hore xidhiidh la leh. tusaale ahaan, “Kildhigu waa karayaa” dhaba ahaan manaheedu yahay “biyaha ku jira kidhigu waa ay karayaan”

**Moratorium- Fragments.** Tani waa liiska buugaagta ku jira laga reebay Axdiga Hore waxaa lagu qoray Rooma ka hor 200 CD. Waxaanay sheegayaan macno la mid ah todobaya iyo labaatanka buug ee Axdiga Cusub Madahabta Borosatanka. Waxa ay si cad u tusaysaa in kaniisadihii gudaha ee qaybaha kala duwan ee boqortooyadii Rooma “ay is ficil ah u dhigeen liiskii taxanaha ka hor kulankii weynaa ee golaha kaniisadu ay isagu timi qarnigii afraad”.

**Natural revelation.** Tani waa heer ka mid daahfurka Ilaah u daah furo dadka waxa ay ku lug leedahay nidaamka dabiiciga ah (Rooma1:19-20) iyo garashada niyad ahaaneed. (Rooma 2:14-15) waxaa kale oo laga hadlay (Sabuurada 19-1-6) iyo (Rooma 1:1). Wax ay cadaynaysaa muujinta khaaska ah ee habka khaaska ah ee uu Ilaahay isugu daahfuray Kitaabka. Iyo Ciisihii reer Nasareet ee awooda badnaa.

Wax baris diimeedka caynkan ah waxaa mar labaad muhiimada lagu siiyey “dunidii hore” dhaqdhaqaaq saynis ah oo ka dhex jiray masiixiyiinta dhexdooda (Tusaale, qoraaladii GUJH Ross) waxa ay carabka ku adkeeyeen qoraalka noocan ah ee sheegaaya inuu dhulku yahay abuurka Ilaah ee dhabta ah.

Dabeecadu waa albaab u furan oo ku saabsan aqoonta ama cilmiga Ilaah waxa ay ka duwan tahay muujinta kale (eek u taala Kitaabka). Waxa ay u ogolaataa saynisyahanada casriga ah fursad iyo xoriyad ay ku sameeyaan cilmi baadhis, hanaanka dabiiciga ah. aniga rajigayga waxa ay ala tahay fursad cajiiba inaan arko sayniska casriga ah ee dunida galbeedka.

**Nestorianism.** Nestorius Nastoriyas waxa uu ahaa odayada qarnigii sanaad waxa lagu soo tabo baray antiyokh dii Suuriya wuxuuna cadeeyey in Ciise lahaa laba dabeecadood mid bani-aadan kaamila iyo mid Rabbaani buux ah. arrintan waxaa duway Otdhogoska kii Axkenderiya oo ku salaysan aragti hal dabeecad keli ya ah. Masreyos waxa uu ka walaacsanaa (hooyada yare e Ilaaha ah. ee laga dhigay maryan Mistooriyas waxaa ka hor yimi Cyril kii alaskaderiya iyo qoraaladiisii dahsoonaa iyo tababarkiisii ku soo qaatay Antioch ayaa waxa ay u dub dhaxaad u ahaayeen. Naxwaha qoraalada taariikhiga ah iyo argtiyaha fekerka kitaabka, Xiligii ay alxcanderiya ahayd xarunta afarta gees (allegorical) ee iskuulka tafsiirka. Kama damabyntiina Misteriyos waa laga eray xafiiskii waana la mastaafuriyey

**Original Author.** tani waxa ay ku saabsan tahay qoraaga dhabta ah-qoraayada qoraalka.

Papyri qoraalada noocan ahi waxa ay ku qoran yihiin shayo laga keenay Masar. Waxa laga sameeyey alwaax webiga ka baxda taasi oo ay ku qoran yihiin nuqulada ugu dada weyn ee Axdiga Cusub eek u qoran afka Giriiga

Parallel passages. Waxa ay qayb ka tahay fekrada ah in Kitaabka oo dhammi yahay mid Ilaah soo dejiyey oo aan fasirkiisana ka mid noqon karaan curisyo aan la wada fahmi Karin micnahooda. Tani waxa kale oo ay tahay mid caawisa in la helo macnaha cad ee Curis leeyahay ee ku saabsan mawduuc iyo sidoo kale qoraalada kale ee ku saabsan mawduucyo kale.

**Paraphrase.** Tani waa magaca sheekooyinka tujumaada eek u yaala Kitaabka. Turjumaada Kitaabka waxaa loo arki karaa hanaan is dabataxan ka “eray ilaa eray” loo soo tabiyey, halka erayga Ingiriiska ahi ay tahay inuu soo ban dhigo xigashada eray kasta oo Cibraani anma Giriiga “Xigasho” halka fekrada oo qudha la turjumay xidhiidh sidaas lama sii laha asalka weedha ama erayda asalkoodii. Ladaas arragtiyoo d dhexdooda “waxaa jira isu dhignaansho fir fircoon ”

Kaas oo isku daya inuu si qoto dheer u qaato qoraaladii asalka ahaa laakiin u turjuma qoraalada naxwo ahaan iyo sarbeeb ahaanba. Run ahaatii falaqan aad u waagsan oo ku salaysan argtiyahaas kala duwan ee fasirka waxaa laga heli karaa buugga ama qoraalada Fee iyo Stuurta magacooduna ahaa how to read the Bible for all its Worth, p. 35

**Paragraph.** tani waxa ay tahay aas aas taas oo ah mid lagu xidhay ujeedooyinka laga leeyahay cutubada. Tani waxa ay ka mid tahay badhtamaha ee lagu horu mariyo. Hadii aan sii joogno oo aan guud ahaan ba rumaysano. Kuwan wax baadhayaa waxa ay lumiyeen waxii hore ee uu qoray qoraaga ujeedadiisa

**Parochialism.** kuwani waxa ay la xidhiidhaan ay aas aas ahaan ay iska xidheen kuwa aad ugu fekera kuwa aqoonta u leh barashada Ilaah-iyoo dhaqamada qaybahooda.

**Paradox.** Hadaba kuwani waxa ay la xidhiidhaan runta taas oo u muuqata inay is burinayaan, ilaa iyo hadda labadub waa run. in kasta oo mid walba kan kale ka taxadaraayey. Marka aan eegno qaab ka guud ahaan taas oo ay soo ban dhigayaan labad dhinacba. In ta badan Kitaabka ayaa runta soo bandhigaaya marka aan eegno qoraaldii hore (micne ahaan) qaybahoodii. Waxayaabaha Kitaabiga ah ma aha qaar laga soo dejiyey xidigaha. Laakin waxaa jira qiyaaso ay sameenayaan xidiguha.

**Plato.** Nin kaasi waxa ahaa mid ka mid ahaa dadkii mufakariinta ahaa ee Giriiga. Wuxuuna ahaa nin aad iyo aad saamayn iyo isbedelo ugu yeeshay marka aan fiirni Kaniisadii hore iyo iyo aqoonayahnadii reer Alexandria, ee Masar, ka dib Augstains. Waxa uu soo jeediyey wax kasta oo dunida korkiisa ayaal inay yihiin kuwo ku lug leh meereey kala taas oo ay isku eeg yihiin qaab ahaan xagga Ruuxa. Kuwa mufakariinta ahi waxa ay ka war bixiyeen Plato “habab –iyo fekrado ” inay yihiin waxaabaha Ruuxiga ah ee dunidan

**Presupposition.** Tani waxa ay la xidhiidhaa sidii aynu hab ahaan inagu wax u fahanay. Marar badan ayaan wax xukunaa marka aan eegno inagu ka hor inta ay naan ka war bixin waxa ay leeyihiin qoraalada qudhooda. Xitaa saadaalintu la garamaayo sida ay u ku salaysan xiliyadii hore waxa ay qiyaasayeen ama ay farmi karayaan

**Proof-texting.** Tani waxa ay tahay iyada oo la soo qaadanaayo sidi loo turjumi laha qoraalada iyada oo la soo qaadanaayo aayado iyada oo la fiiriyo qoraala loona fiirisanaayo xitaa, qabo dheedheer oo ka mid ah qoraaladaas qayb ahaan. Aayadahaasi waa qaar laga saaraayo wixii hore ee uu oqoray qoraagu kuwaas oo inta badan ku yeelanaysa saamayn sidii aan u cadayn lahayn qofku fekradaha uu qabo in kasta oo ay halkaas marka aan joogno Kitaabku awooda leeyahay ee maha qoraaga.

**Rabbinical Judaism.** Xiligani waxa uu ahaa xiligii nolosha dadka Yuhuuda ah ay bilaabantay inay u qaxaan dhulkii (586-538).

Hadabab kii ay wadaadadu kaas oo macbudka joogan in laga saaray. Markaas ayaa kuwii khaaska ahaa macbudada ay samayn ku yeelatay dadkii Yuhuuda ahaa noloshooda. Kuwaasina waxab ay ahaayeen sida dhaqanka yuhuuda mid udub dhexaad u ah. dhaqan ahaan, is weheshi ahaan, iyo caabudidi iyada oo bara shada kitaabkuna noqday is weheshiga xagga aduunka diinta iyo nolosha. Ciise Masiix, maalin taasi “diinta iyo qoraalada” taasna waxa ay ahayd tusaalaha wadaadada kaas oo ka dhacay Magaalad juurasaalem sannadii A:D hab qoraalkani waxa uu ka muuqanayaa ayaadahaas iyada oo ay Ilaalinayso hogaaminta xagga dhaqanka

iyo diinta Yuhuuda iyo noloshooda. Tani waxa ay ahayd dabeecad taas oo la sameeyo sharci ahaan iyada oo laga soo turjumaayo Tawaraada sidii aan hore ugu soo aragnay waxii ku saabsanaa dhaqanka (Talmud).

**Revelation.** Kani waxa weeye magac kaas oo oo Ilaahay si mucjiso ah ugala hadlay dadkiisa ferad dhamaystiran ayaa inta badan lagu xusay halkan saddex jeer “(1) Muujin -----Ilaahay ayaa metalay taariikhda bani-aadanka., (2) Waxyi-----Wuxuu siiyey fasirka saxda ah ee falalkiisa iyo macnahooda oo uu u dhiibay niman uu doortay si ay u ugu qoraan bani-adaanka. (3) Iftiimin wuxuu soo diray Ruuxsa si uu bani-aadanka uga caawiyo inay fahmaan daahfurka.”

**Semantic field.** Tani runtii waxa ay la xidhiidhaa asal ahaan macno kaas oo la xidhiidha erayada tani runtii waxa ay ku salaysan tahay kala duwanaanta erayada in ay kala duwan yihiin macno ahaan qoraaladaasi.

**Septuagint.** Kani waxa weeye magac lagu tutjumay luqada Giriiga iyo weliba Cibraaniiga Kitaabka Axdiga Hore.dhaqan ahaan ayaa waxa uu odhanayaa kuwaasi waxa ay ahaayeen kuwo la qoray ilaa iyo todoba cisho. Kuwaasina waxa ay ahaayeen aqoon yahanadii dhexdhexaadka ahaa ee Alaxkanderiya Masar. Maalintu dhaqan ahaan waxa ay ku dhowdahay 250 C.H. (sida runtii ah waxaa suuro gal ah inay suuro gal tahay intan lagu dhameeyey mudo ka badan boqolaal sano)kani waxa uu ahaa tujumaadii kaas lahaa calaamado sababta oo ah (1) waxa ay ina siinaysaa qoraaladii xiliyadii hore marka aan qoraaladaas bar bar dhigno kuwii Masoretiska qoraaladii cibraaniyiinta (2) tani waxa ay ina tusaysaa inaan fahano Yuhuuda iyo turjumaadahooda qarnigii saddexaad ilaa iyo kii labaad Ka hor C.H. (3)Tani waxa ay ina siinaysaa sida dadka Yuhuuda ah inay diideen Ciise guud ahaanba, ta cadaynaysaana waa “LXX”

**Sanaiticus** Kani waxa uu ahaa qoraalada Giriiga ee Qarnigii afraad C.H. tana waxaa helay nin aqoon yahayn ahaa oo Garamal ah Tishendorf, Meeshii St. Ctherine,s gurigii iyo Macbudkii Jabel Musa. Dhaqan ahaan waxa ay fadhiisan jireen Mt,Sinia. Taasina waxa ay ahayd mid laga soo qaabeeyey warqadii ugu horaysay marka la fiiriyu luqada Cibraaniyada taas oo loogu yeedho “*Xaruuf*” (N) waxa ay ka kooban tahay laba arimood oo laga helaayo Kitaabka Axdiga hore iyo Axdiga Cusub. Kuwaasina waxa ay ahaan kuwa ugu muhiimsan marka aan eegno taariikhdiisii hore MSS.

**Spiritualizing.** Tani waxa ay ahayd xiligii ay arintu goonida u ahayd qaabkii looga qaadi lahaa waxyaabaha taariikhiga a. iyo qoraaladu waxa ay leeyihiin micne ahaan inaga oo fiirinayna turjumaadaha ay ku salaysan yihiin kala duwanaanshahooda.

**Synonymous.** Waxa ay la xidhiidhaa mar xaladihii saxa ahaa mid waliba na waxa uu lahaa macne u kaas la mid ah (in kasta oo aanay sida xaqiiqada ah aanay ahan laba eray kuwaas ooh ore u dhamaystirmay iskuuna soo noqnoqonaayey). Kuwaasi waxa ay ahaan qaar aad isugu dhow kuwaas oo xidhiidh leh kuwaas oo la isku bedeli karo hadii kala weedhaha qaar ayaa waxa ay luminayaan micnahooda. Xitaa waxa kale oo loo isticmaalaa in loo qaabeeyo hal iyo saddex ha boo ka mida Cibraaniyiintooda tusaalayaashooda. Tan macnaheedu waxa weeye inay jiraan laba sadar kuwaas oo samaynaaya macno isku mid ah oo run ah. (cf, ps 197:9).

**Syntax .** Kani waxa weeye eray Giriiga kaas oo xidhiidh la leh dhismaha weedhaha. Iyda oo la xidhiidha sida ay weedhu isugu xidhan yihiin. Isla markaasina ay samaynaayaan fekrad dhamaystiran.

**Synthetical.** Kuwani waxa ay yihiin saddex arrimood oo la xidhiidha noocyada gabadyada ee Cibraaniyiinta. Kuwaasin waxa ay ka kooban yihiin gabayo kuwaas oo mid ba uu mid kale dhisaayo, iyaga oo macne samaynaaya. Mararka qaar ayaa “waxaa loogu yeedhaa” “cimilada” (cf, ps. 103:3)

**Systematic Theology.** tani waa arrimo kuwaas oo la xidhiidha kuna tiirsan turjumaadaha Kitaabka kuwaas oo lagu aqoonsanaayo xaalado macquula dabeecad ahaan. Tani waa arin suuro gal ah, halkii ay ka noqon lahayd wax iska taariikhiya. Taas oo ay soo jeediyeen kuwo faro badan oo Masiixiyiinta oo ku talax tegay barshada fekradaha kala duwan. (sida Ilaahay, Bani-aadanka, dembiga iyo badbaadada Iwm).

**Talmud** Waxa aan halkan ka arkaynaa wax oo cadaymo ah kuwaas oo ahaa asal ahaan dhaqanada yuhuuda. Ilaahay ayaa waxa uu siiyey Yuhuuda inuu kula hadlay Muuse buutii Siinaay. Tani waxa ay ahayd arrin runa oo xigamad lahayd sannado faro badan macalimiinta dadka Yuhuuda ah. waxa jira laba qoraal oo ah Talmud iyo kuwii Baabylonka mudo kooban, intii aynaan dhamaystirn Falistiiniyiintii.

**Taxtual criticism.** Kani waxa uu yahay qoraalo kuwaas oo laga baranaayo Kitaabka Quduuska. Qoraaladaasi waa mid iska caadiya in la eedeeyo sababta oo ah lama hayo qoraalo asala kuwii la helayna waa ay kala duwanaayeen. Tani waxa ay inagu qasbaysaa inaan u trjuno inaan wixii hore ku laabano. (sida ugu dhow ee suuro galka ah). asal ahaan erayadaasi waxa ay ahaayeen kuwo laga soo sawiray Axdiga Hore. Kuwaasna banaa waxaa loogu yeedhaa “eedaynta ugu hoosaysa”

**Taxtus Recept.** Qaabkani waxa uu horu marinayaa habkii Elzervir qoraalkaas oo ahaa Greek NT sannadii 1633 A.C. runtii tani waxa ay ku salaynadu inay ka yimaadeen Giriiga Kitaabka AC kaas oo mid ka dib lagu soo saaray turjun ahaan luqada Giriiga in a Latin versions of Erasmus (1546-1559) (1624-1678). *Introduction to the textual Criticism of the New Testeman*, p. 27, A.T Robertson ayaa waxa uu yidhi “qoraaladan la yiraahdo Byzantine qoraaladaasi inta badan waxa aan heli karaa qoritaankooda” haddaba qoraalada Byzantine waxa ay ahaan kuwo qiimo lahaa marka aan eegno ugu yaraan saddexdii qoys kuwaas oo berigii hore Giriiru wax ku qori jireen (western, Alxcandria, Byzantine) waxa ay kuwani ka koobnaayeen kuwo badan oo qalad ka buuxo qarniyo hore qoraaladaas jiray. Haddaba si kastaba ha ahaatee, A.T Robetson ayaa xitaa waxa uu yidhi “Marka aan eegol qoraaladii la qoray waxa jiray waxyabo cadaynaya inay ahaayeen qoraalaasi kuwo jira” (P.21) kuwani waxa ay ahaayeen qoraalo Giriirga dhaqankiisa ah gaar ( gaar ahaan Erasmus daabacaadii saddexaad sannadii n1522) habkaasina waxa uu ku salaysnaa Kitaabka King James Version of 1611 A.D

**Torah.** Tani waxa ay tahay hab “waxbarid” oo Cibraaniyiinta tan in yar oo ka mid ahi waxa ay ka soo jeedeen wax baridii Muuse (Bilowgii ilaa iyo Sharciga Kunoqoshadiisa) waxa ay ahaayeen yuhuuda kuwa inta badan awooda iska lahaa kuwaas oo ka la qaybnin jiray Cibraaniyiinta iyo Canon.

**Typological.** Kuwani waxa ay ahaayeen hab khaas ah kaas oo wax loo turjumo. Inta bana kuwan waxaa laga helayaa Kitaabka Axdiga cusub. Fariinahaasna waxaa looga jeeday calaamado suuro gal ah. ahadaba fariinta caykan ahi ee baadhitaanku waxa ay ahayd badanaa waxyaabaha ugu badan ee aas aaska u ahaa habkii Alxcandria. Sababtuna waxa ay ahayd waa ay dhaleecayn jireen fekradaha caykan oo kale ah iyo turjumaadaha. Mid haddaba ka mid ah tusaalayaashan oo aan isticmaalo lagana helaayo Kitaabka Axdiga Cusub.

**Vaticanus.** Kani waxa uu ahaa qoraaladii Giriiga ilaa iyo qaringii A.D tana waxa laga helayaa Maktabka faatikaanka. Asal ahaan waxa uu ka kooban yahay Kitaabka Axdiga Hore. Sida qoraaladii la helay ee Axdiga Cusub. Haddaba si kastaba ha ahaatee, qaar kuwaas ka mid ah ayaa lumay. (Bilowgii Sabuurrada, Cibraaniyada, iyo wadaadkii Philemon iyo Muujintii). Kuwani waxa ay ahaayeen qoraalo ina caawinaaya oo aad faa,iido u leh lana garan karo eraydii ay asal ahaan ka yimaadeen sawir ahaan.

**Vulgate.** Kani waxa uu ahaa magacii Jerimiyaah kaas oo lagu turjumay Kitaabka luqada taaliinka. Kuwaasina waxa noqdeen aas aas ama “qaar caadiya” Waxaana lagu turjumay kaniisada Catholic Roman. Xiligii la sameeyena waxa uu ahaa sannadii 380s A.D

**Wisdom literature.** Kani waxa uu ahaa noo ka mid ah qoraalada oo caadi ahaa xiligii hore una dhowaa dhinaca bari. (dunidan casriga ah). Waxa ay ahayd mid asal ahaa lagu tijaabiyey sidii ay jiinka cusubi loogu hogaamin lahaa nolol taas oo ah mid ay iyaga oo guulaystay ku noolaanayaan noloshopoda sida gabayada, maahmaaha, iyo maqaalada. Tani waxa ay ku wajahnady mid kasta iyo sidii loola xidhiidhi lahaa bulshada.Tani ma aha mid loo isticmaalayo taariikh. Laakiin waxa ay ku salaysan tahay nolosha iyo waayo aragnimadeeda iyo baadhi taanada. Kitaabka Ayuub iyo Gabaygii Sulaymaan waxa ay u ekeayd inay soo bandhigayso caabudaad taas oo la caabudayo YHWH, laakiin fekradan xagga diimaha ahi ma aha mid ay isku raacsan yihiin kuwo kasta oo ka mid ah bani-aadanka iyo waayo aragnimadooda xili kasta.

Haddaba sida nooc kastaaba ugu bilowdo runta guud ahaanta ah. haddaba si kastaba ha ahaatee, noocani ma aha mid lagu isticmaalay xaalada kasta oo aas aasiya.

Hadaba waxa ay ina weydiinayaan si qotodheer su,aal taas oo ku saabsan nolosha bani-aadanka. Inta badana waxa ay bedelaan diimaha iyo dhaqanka iyo fekradahooda. (Ayuub iyo Cesraa). Waxa ay leeyihiin hab kaas oo isku dheeli tiran iyada oo dareen ahaan si fudud looga jawaabi karo nolosha iyo qorshayaasheeda.

**World Picture and worldview.** Halkan waxaa jira qaab aan wax isku bar bar dhigi karo. kuwaasina waxa ay yihii labadan fekradood kuwaas oo la xidhiidha abuuritaanka. Marka aan eegno marxaladaha “sawirka dunida” waxa uu la xidhiidhaa “sidi” ay waxyaabo kala duwani “feradaha dunida” ay ula xidhiidhaan “Waa kee ” iminka xaaladahan waxa aan si cad ugu turjumaynaa oo aynu ka helaynaa Kitaabka Bilowgii 1-2 kuwaas oo si khaas ah ugu hadlaaya asal ahaan ka uu yahay, maha laakiin, sida abuurida.

**YHWH.** Kani waxa uu yahay Axadi magaca Ilalah marka aan eegno Kitaabka Axdiga Hore. Taas oo lagu aqoon sanaayo Baxniintii 3:14. Tani waxa ay tahay ISLA WADAAGIDII xaaladihii kuwii Cibraniyiinta “inay ahaadaan” kuwa yuhuuda ahi waxa ay ka baqayeen inay magaca ku dhawaaqaan. Ugu yaraan waa ay ka xumaadeen, sidaasi daraadeed, waxa ay isku dhiibeen Cibraaniyadii xiligii Adoinia “sayid” tani waa sida ay Axdiga kaas oo magac ahaan lagu turjumay Ingiriisi.

## LIFAAQA AFRAAD ODHAAH CAQIIDO AHAANEED

Anigu si gaar ah uma danaynayo rumaysad ama caqiido. Waxaa door bidayaa in baybalka qudhiisa. Arrintu si kastaba ha ahaatee, waan xaqiiqsanahay in hadalka ku saabsan rumaysadka ee kuwa aan aadka ii aqoon ay ka fogaadaan in ay qiimeeyaan marka ay dhinaycayga caqiido ahaaneed eegaan. Xilligeennan ay dhagarta iyo qaladaadka. Soo koobiddan fiqigaygu waxa uu sheegayaa.

1. Baybalka, Axdigii Hore iyo Axdiga Cusub labadaba waa waxyiga tooska ah, ee aan dhicidda lahayn, oo ah awood adduunka weligiis ah ee xukunka Ilaah. Waa muujinta Ilaah oo ay qoreen dad Ilaah siiyey awood xidhiidh oo Ilaah siiyey iyaga. Waa meesha aan ka helno runta cad ee ku saabsan Ilaah iyo ujeedkiisa. Sidoo kale waa runta rumaysadka iyo falimaha Kaniisaddiisa.

2. Waxaa jira Ilaaha keliya ee ah, madaxfurtaha, abuuraha, aan dhammaadka lahayn. Waa abuuraha wax walba, wax la arki karo iyo wax aan la arkin intaba. Isaga naf ahaantiisa ayaa jacaylkiisa iyo daryeelkiisi awgiis is muujiyey in kastoo isagu yahay xaq iyo caadil. Saddex shaqsiyad oo kala duwan ayuu nafsad ahaantiisu isu muujiyey” Aabbaha, Wiilka, iyo Ruuxa Qudduuska ah, kuwaasoo kala gaar ah haddana hal isku ah naf ahaan.

3. Ilaah adduunkiisa Isaga ayaa xukuma. Waxa uu uunkiisa u hayaa labadaba qorshe weligiis ah oo aan is beddel lahayn iyo mid shaqsi ah oo diiradda saaraya aadanaha doorashadooda xorta ah. ma jiraan wax dhici kara ogaanshaha iyo oggolaanshaha Ilaah la’aantood, iyadoo ay sidaas tahay ayuu haddana oggol yahay labadaba, malaa’igaha iyo aadanaha doorashooyinkooda. Ciise waa Nin Ilaah Doortay, dadka oo dhanna isaga ayey ku dhex dooran yihiin. Ogaanshaha Ilaah u sii leeyahay dhacdooyinka kama naaqusinayso aadanaha in ay xaqiiqsashada qorniinkii horay loo qoray. Dhammaanteen waxa aan masuul ka nahay fakarradeenna iyo camalladeenna.

4. Aadanaha, inkastoo laga abuuray aragga Ilaah oo ay dembi xor ka yihiin, haddaba iyaga ayaa doortay in ay Ilaah ka fallaagoobaan. In kastoo quwad iyaga ka sarraysa ay jirrabtay, Aadan iyo Xaawo iyaga ayaa masuul ka ahaa doonistood naf ahaaneed. Fallaagonimadoodii ayaa aadanaha iyo uunka saamaysay. Ilaah naxariistiisa iyo nimcadiisa ayaan uga baahan nahay labadaba xaaladeenna guud ahaaneed ee Aadan nooga timid iyo doorashada fallaagonimadeenna shaqsi ahaaneed.

5. Ilaah macne cafis iyo dib u soo celin ah ayuu siiyey aadanihii dhacay. Ciise Masiix, Ilaah Wiilkiisa aan lala midka ahayn ayaa noqday aadane, isagoo ku noolaaday nolol aan dembi lahayn, oo dhimashadii uu booskayaga ku galay, ayaa waxa uu ku bixiyey dembigii aadanaha. Waa jidka qura ee soo laabasho iyo hehelnimo lagula yeelan karo Ilaah. ma jirto waddo badbaado oo kale, oo aan ka ahayn in loo soo maro shaqadiisii dhammaystirantay.

6. Dhammaanteen waxaa si shaqsi ahaaneed waajib noogu ah in aan deeqda Ilaah ee cafiska iyo dib u soo celinta ku helno Ciise Masiix. Tan waxa ay ku kaamilantay doonista runta ah ee ballammadii Ilaah noo soo maruyey Ciise Masiix iyo doonista rajada leh ee dembiga la og yahay.

7. Dhammaanteen waxa aan si buuxda cafis iyo dib u soo noqosho ugu helaynaa aaminista Masiixa iyo ka tawbadkeenista dembiga. Arrintu si kastaba ha ahaatee, caddaynta xidhiidhkan cusub waxaa lagu dhex arkayaa nolosha is beddeshay, ama is beddelaysa. Hadafka Ilaah ee ku aaddan aadanaha ma aha oo qura in ay maalin uun galaan jannada, laakiin u ekaanta Masiixa oo hadda ah. Kuwaa sida dhabta u haysta madaxfurashada u haysta, in kastoo ay si aan ula kac ahayn u dembaabaan, waxa ay noloshooda ku soo wadaan rumaysad iyo tawbadkeen.

8. Ruuxa Qudduuska ahu waa “Masiix kale.” Waxa uu adduunka u joogaa in kuwa lumay uu Masiixa u soo hoggaamiyo oo uu kuwa badbaadayna u ekaanta masiixa ku horu mariyo. Hadiyadaha Ruuxa waxaa lagu dhex bixiyaa badbaadada. Waa noloshii iyo adeeggii Ciise oo lagu dhex qaybiyey jidhkiisa, kaniisadda. Hadiyadaha oo aasaas ahaan ah aragtiyada iyo ujeedooyinka Ciise ayaa waxa ay u baahan yihiin in ay soo saaraan midhaha Ruuxa. Ruuxu waa mid u firfircoon maalmahennan dhexdooda sidii uu waqtiyadii baybalka ahaa.

9. Aabbaha ayaa Ciise Masiixii dhimashada ka soo sare kacay ka dhigay xaakinka wax kasta. Adduunka ayuu ku soo laaban doonaa si uu u xukumo aadanaha oo dhan. Kuwa Ciise aamina ee magacooda lagu qoro buugga iftiinka ee nolosha waxa ay soo noqoshadiisa ku heli doonaan jidhkooda aammaanta ee weligii ah. Isaga ayey weligood la joogi doonaan. Ha yeeshee, kuwii diiday in ay ka jawaabaan runta Ilaah way go’naan doonaa farxadda wheel la ahaansha Ilaaha Qaaddirka ah. Waxaa iyaga lala xukumi doonaa shayddaanka iyo malaa’igihiiisa.

Tani sida hubaasha ah ma aha mid ebyan qma kaamil ah laakiin waxaan rajaynayaa in ay idin siin doonto dhadhanka fiqi ahaaneed ee qalbigayga ku jirta. Waxaan jeclahay hadalka ah”

“Aasaasyada ku jira—midnimada—dheeraad—xorroyad, wax kasta-- jacayl”